Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA RASMIGA AH
الرسمية الجريدة
OFFICIAL BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 11aad **MUQDISHO** **2024**

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN SANADLE

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD
TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADLE

2024

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA RASMIGA AH
الرسمية الجريدة
OFFICIAL BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 11aad **MUQDISHO** **2024**

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN SANADLE

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD
TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADLE

2024

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA SOCDAALKA XEER RA'IISUL WASAARE LR. 146	Taariikh: 04/01/2024 Bog: 1
XEERKA: XEER NIDAAMIYAHA SHARCIGA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO XEER RA'IISUL WASAARE LR. 147	Taariikh: 04/01/2024 Bog: 46
SHARCIGA QAXOOTIGA & MAGANGELYAO DOONKA SHARCI LR. 18	Taariikh: 13/03/2024 Bog: 93
SHARCIGA XISAAB-XIRKA MIISAANIYADDA 2022 SHARCI LR. 19	Taariikh: 13/03/2024 Bog: 113
SHARCIGA HOWLGABKA iyo LIILTIRKA SHAQAALAHA RAYIDKA ee DAWLADDA SHARCI LR. 20	Taariikh: 13/03/2024 Bog: 174
SHARCIGA KU BIIRISTA URUR GOBOLEEDKA DHAQAALAHA BARIGA AFRICA SHARCI LR. 21	Taariikh: 13/03/2024 Bog: 210
SHARCIGA ILAALINTA iyo MAAREYNTA DEEGAANKA SHARCI LR. 22	Taariikh: 13/03/2024 Bog: 229
WAX-KA BEDELKA CURUBYADA 1AAD, 2AAD, 3AAD IYO 4AAD EE DASTUURKA SHARCI LR. 24	Taariikh: 31/03/2024 Bog: 283
SHARCIGA HA'ADDA SIRDOONKA IYO NABAD-SUGUDDA QARANKA SHARCI LR. 3	Taariikh: 09/03/2023 Bog: 328
XILKA QAADIS ERGAYGII GAARKA AHAA EE XASILINTA IYO ILAALINTA ARRIMAHA RAYIDKA XEER MADAXWEYNE LR. 150	Taariikh: 18/10/2023 Bog: 329
WAREEJIN IYO DALLACSIIN SARKAAL XEER MADAXWEYNE LR. 151	Taariikh: 24/04/2023 Bog: 330
MAGACAABIS NOOTAAYO XEER MADAXWEYNE LR. 152	Taariikh: 16/11/2023 Bog: 332
SOO WAREEJIN SARKAAL XEER MADAXWEYNE LR. 153	Taariikh: 16/11/2023 Bog: 333
SOO WAREEJIN SARKAAL XEER MADAXWEYNE LR. 154	Taariikh: 16/11/2023 Bog: 335
MAGACAABISTA TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA BADDA IYO DIFAACA XEEBAHA & XIL-KA XEER MADAXWEYNE LR. 155	Taariikh: 27/11/2023 Bog: 336
MAGACAABIS NOOTAAYO XEER MADAXWEYNE LR. 156	Taariikh: 27/11/2023 Bog: 338

MAGACAABIS LA-TALIYAHA SARE EE MADAXWAYNAHA EE ARRIMAHA DASTUURKA Taariikh: 29/11/2023
XEER MADAXWEYNE LR. 157 Bog: 339

QIIMAYN IYO KU QAADASHO DARAJO CIIDAN Taariikh: 29/11/2023
XEER MADAXWEYNE LR. 158 Bog: 340

SOO WAREEJIN SARKAAL Taariikh: 29/11/2023
XEER MADAXWEYNE LR. 159 Bog: 341

MAGACAABIS LA-TALIYAHA SARE MADAXWAYNAHA EE ARRIMAHA DIB-U-HESHIINTA Taariikh: 29/11/2023
XEER MADAXWEYNE LR. 160 Bog: 343

MAGACABIS GARSOORAYAAL MAXKAMADAHA GOBALKA BANAADIR Taariikh: 10/12/2023
XEER MADAXWEYNE LR. 161 Bog: 344

MAGACAABIS WAKIILADDA XEER-ILAALIYAAHA GUUD EE QARANKA Taariikh: 10/12/2023
XEER MADAXWEYNE LR. 162 Bog: 346

KU QAAADASHO DARAJO DERAJO CIIDAN Taariikh: 24/12/2023
XEER MADAXWEYNE LR. 163 Bog: 348

DALLANSIIN SARKIIL XIGEENO Taariikh: 24/12/2023
XEER MADAXWEYNE LR. 164 Bog: 350

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 10/12/2023
XEER MADAXWEYNE LR. 165 Bog: 352

DALLACSIIN SARKAAL Taariikh: 31/12/2023
XEER MADAXWEYNE LR. 166 Bog: 353

SOO WAREEJIN IYO QIIMAYN DARAJO ee CIIDANKA BOOLISKA FEDERAALKA Taariikh: 03/01/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 167 Bog: 354

KU QAADASHO DERAJO Taariikh: 04/01/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 168 Bog: 356

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEEN Taariikh: 07/01/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 169 Bog: 358

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 10/01/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 170 Bog: 360

WAREEJIN SARKAAL Taariikh: 10/01/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 171 Bog: 362

SOO WAREEJIN IYO QIIMEYN DARAJO EE CIIDANKA BOOLISKA FEDERAALKA Taariikh: 16/01/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 172 Bog: 364

MAGACAABIS GUDDIGA QARAN EE DIFAACA MADAX-BANNAANIDA IYO MIDNIMADA Taariikh: 17/01/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 173 Bog: 366

MAGACAABISTA LABADA KU-XIGEEN EE HANTI DHOWRAHA GUUD J.F.S Taariikh: 05/02/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 174 Bog: 367

MAGACAABIS GARSOORE Taariikh: 11/02/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 176 Bog: 369

MAGACAABIS LA-TALIYAHA MADAXWAYNAHA EE ARRIMAHA SOMALILAND Taariikh: 13/02/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 177 Bog: 370

WAREEJIN MAS'UULIYADDA MASJIDKA ISBAHAYSIGA ISLAAMKA Taariikh: 19/02/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 178 Bog: 371

MAGACAABID XUBIN KAMID NOQONAYSA XUBNAHA MAAMULKA BANKIGA DHEXE (NON Taariikh: 19/02/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 179 Bog: 372

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 21/02/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 180 Bog: 373

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 21/02/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 181 Bog: 375

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 21/02/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 182 Bog: 377

APPOINTMENT OF PRESIDENT ADVISOR FOR DEVELOPMENT PROGRAMSS Taariikh: 11/03/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 183 Bog: 379

WAREEJIN SARKAAL Taariikh: 11/03/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 184 Bog: 380

MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA & AGAASIMAHA GUUD EE BANKIGA HORUMARINTA IYO Taariikh: 19/03/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 185 Bog: 381

CAFIS MADAXWAYNE Taariikh: 19/03/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 186 Bog: 383

APPOINTMENT OF SOMALIA REPRESENTATIVE TO THE ORGANIZATION OF THE ISLAMIC Taariikh: 23/03/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 187 Bog: 388

DALLACSIIN SARKAAL XIGEEN Taariikh: 27/03/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 188 Bog: 389

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 31/03/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 189 Bog: 390

MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH EE ARRIMAHA CAAFIMAADKA NAFAQADA Taariikh: 31/03/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 190 Bog: 391

XEER: QARAARKA DHAMMEYSTIRKA DHAQANGALINTA SHARCIGA SHAQADA Taariikh: 16/03/2024
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 152 Bog: 392

XEER: SIYAASADDA QARAN EE KORMEERKA IYO QIIMAYNTA Taariikh: 16/03/2024
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 153 Bog: 423

XEER: HABRAACA DIIWAANGALINTA IYO SUGIDDA MILKIYADDA GAADIIDKA DHULKA Taariikh: 21/03/2024
XEER RA'ISUL WASAARE LR. 154 Bog: 452

DALLACSIIN SARAAKIIL CXD Taariikh: 02/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 191 Bog: 492

DALLACSIIN SARKAAL Taariikh: 02/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 192 Bog: 493

MAGACAABISTA AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA NABAD-SUGIDDA QARANKA Taariikh: 08/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 193 Bog: 494

RUQSAYN SARKAAL Taariikh: 08/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 197 Bog: 496

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO CXD Taariikh: 10/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 198 Bog: 497

DALLACSIIN SARAAKIIL CXD Taariikh: 10/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 199 Bog: 499

DALLACSIIN SARAAKIIL XIGEENNO CXD Taariikh: 10/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 200 Bog: 502

SOO WAREEJIN SARKAAL Taariikh: 23/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 201 Bog: 505

QIIMEYN IYO KU QAADASHO DERAJO CIIDAN Taariikh: 23/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 202 Bog: 507

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO CXD Taariikh: 30/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 204 Bog: 508

WAREEJIN IYO DALLACSIIN SARKAAL Taariikh: 30/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 205 Bog: 514

WAREEGIN IYO DALLACSIIN SARKAAL Taariikh: 08/05/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 206 Bog: 516

MAGACAABIS LATALIYAHA MADAXWENAHA EE ARRIMAHA DIBLOMAASIYADDA Taariikh: 04/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 210 Bog: 518

DALLACSIIN SARKAAL Taariikh: 02/04/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 211 Bog: 519

U QIIMEYN & KU QAADASHO DARAJO Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 212 Bog: 520

DALLACSIIN LAYLI SARAAKIIL Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 213 Bog: 523

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 214 Bog: 528

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 215 Bog: 533

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 216 Bog: 538

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 217 Bog: 542

KU QAADASHO & U QIIMEYN DERAJO CIIDAN Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 218 Bog: 547

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 219 Bog: 549

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 220 Bog: 550

WAREEJIN & U QIIMEYN DARAJO SARAAKIIL Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 221 Bog: 551

SOO WAREEJIN SARAAKIIL Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 222 Bog: 553

SOO WAREEJIN SARAAKIIL Taariikh: 08/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 223 Bog: 554

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 08/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 224 Bog: 555

MAGACAABIS KU-XIGEENKA LA-TALIYAHA AMNIGA QARANKA Taariikh: 08/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 225 Bog: 557

ASTEYNTA MAALINTA SHUHADADA SOOMAALEYED Taariikh: 08/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 227 Bog: 559

MAGACAABIS TALIYAYAAL C.X.D.S Taariikh: 08/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 229 Bog: 560

SOO WAREEJIN SARKAAL Taariikh: 08/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 230 Bog: 561

TALIYAHA HOWLAHA GAARKA AH ISLA MARKAANA AH TALIYE KU XIGEENKA CIIDANKA BOOLISKA SOOMAALIYEED Taariikh: 08/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 231 Bog: 562

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 24/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 233 Bog: 563

ABUURIS SANDUUQA QARAN EE CIMILADA Taariikh: 25/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 235 Bog: 564

MAGACAABIS AGAASIMAHA FULINTA SANDUUQA QARAN EE CIMILADA Taariikh: 25/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 236 Bog: 566

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 27/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 237 Bog: 567

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 10/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 239 Bog: 568

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 10/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 240 Bog: 569

DALLACSIIN SARKAAL Taariikh: 10/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 241 Bog: 570

DALLACSIIN SARAAKIIL IYO SARAAKII XIGEENNO Taariikh: 13/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 242 Bog: 571

DALLACSIIN SARAAKIIL IYO SARAAKII XIGEENNO Taariikh: 13/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 243 Bog: 573

XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA MAAREYNTA MAALIYADDA GUUD EE XAYNDAABKA SIYAASADDA DEYMAHA IYO HANNAANKA AMMAAHASHADA IYO DAMMAANADAHA Taariikh: 11/07/2024
XEER RA”IISUL-WASAARE LR. 160 Bog: 574

SIYAASADDA QARAN EE IIBKA HUBKA, RASAASTA IYO QALABKA CIIDANKA Taariikh: 19/07/2024
XEER RA’IISUL-WASAARE LR. 161 Bog: 592

QARAARKA MAMNUUCIDDA KA GANACSIGA HUBKA IYO SAANADDA CIIDANKA Taariikh: 19/07/2024
XEER RA’IISUL-WASAARE LR. 162 Bog: 608

QARAARKA AQOONSIGA KHATARAHA AMNIGA QARANKA Taariikh: 02/07/2024
XEER RA’IISUL-WASAARE LR. 308 Bog: 612

GO’AAN GOLE EE ANSIXINTA “ISTIRAATIIJIYADDA QARAN EE KA HORTAGGA IYO LA-DAGAALLANKA FIKIRKA XAGJIRKA RABSHADAHA WATA” Taariikh: 04/08/2024
XEER RA’IISUL-WASAARE LR. 312 Bog: 624

XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA AQOONSIGA IYO DIIWAANGALINTA DADWEYNAHA Taariikh: 08/06/2024
XEER RA’IISUL WASAARE LR. 158 Bog: 650

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 31/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 244 Bog: 677

DALLACSIIN LAYLI SARAAKIIL Taariikh: 31/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 246 Bog: 680

DALLACSIIN LAYLI SARAAKIIL Taariikh: 31/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 247 Bog: 681

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 31/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 248 Bog: 682

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 31/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 249 Bog: 688

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 31/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 250 Bog: 691

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 31/07/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 252 Bog: 694

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 03/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 253 Bog: 695

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 08/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 254 Bog: 696

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 08/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 255 Bog: 697

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 19/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 256 Bog: 698

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 19/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 257 Bog: 699

U DALLACSIIN DARAJO DANJIRENIMO Taariikh: 20/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 258 Bog: 700

U DALLACSIIN DARAJO DANJIRENIMO Taariikh: 20/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 259 Bog: 701

DALLACSIIN SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 21/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 260 Bog: 702

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 22/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 261 Bog: 704

MAGACAABIS LATALIYAHA MADAXWEYNAHA EE ARRIMAHA CIIDANKA QALABKA SIDA Taariikh: 25/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 262 Bog: 706

MAGACAABIS LATALIYAHA MADAXWEYNAHA EE WACYI-GALINTA IYO BARAARUJINTA DADWEYNAHA Taariikh: 27/08/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 263 Bog: 707

MAGACAABIS LATALIYAHA MADAXWEYNAHA EE ARRIMAHA DOWLADAHA CARABTA Taariikh: 02/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 264 Bog: 708

MAGACAABIS XERO CIIDAN Taariikh: 02/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 265 Bog: 709

MAGACAABIS XERO CIIDAN Taariikh: 02/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 266 Bog: 710

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 09/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 267 Bog: 711

DALLACSIIN SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 09/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 268 Bog: 713

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 09/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 269 Bog: 714

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 06/06/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 270 Bog: 715

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO Taariikh: 09/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 271 Bog: 717

SOO WAREEJIN SARKAAL Taariikh: 09/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 272 Bog: 719

KU QAADASHO & U QIIMEYN DARAJO CIIDAN Taariikh: 09/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 273 Bog: 721

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 09/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 274 Bog: 722

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 14/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 275 Bog: 723

KU QAADASHO & U QIIMEYN DARAJO CIIDAN Taariikh: 14/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 276 Bog: 724

SOO WAREEJIN SARAAKIIL Taariikh: 18/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 277 Bog: 725

MAGACAABIS NOOTAAYO Taariikh: 18/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 278 Bog: 727

MAGACAABIS ERGAYGA GAARKA AH EE ARRIMAHA CAAFIMAADKA IYO NAFAQADA Taariikh: 18/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 279 Bog: 728

MAGACAABIS LA-TALIYE SARE ARRIMAHA DIMUQRAADIYENTA IYO DOWLAD WANAAGGA Taariikh: 19/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 280 Bog: 729

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 22/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 281 Bog: 730

DHISMAHA XAFIISKA AMNIGA QARANKA Taariikh: 25/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 282 Bog: 731

DIB-U-MAGACAABIS LA-TALIYAHA AMNIGA QARANKA Taariikh: 25/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 283 Bog: 742

MAGACAABIS LA-TALIYE SARE EE ARRIMAHA FEDERAALKA Taariikh: 25/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 284 Bog: 743

DALLACSIIN SARKAAL & SARAAKII XIGEENNO Taariikh: 26/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 285 Bog: 744

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKII XIGEENNO Taariikh: 26/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 286 Bog: 746

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKII XIGEENNO Taariikh: 26/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 287 Bog: 748

KU QAADASHO & U QIIMEYN DARAJO CIIDAN Taariikh: 26/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 288 Bog: 753

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKII XIGEENNO Taariikh: 26/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 289 Bog: 754

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKII XIGEENNO Taariikh: 26/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 290 Bog: 756

MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA BOLIISKA SOOMAALIYEED Taariikh: 26/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 291 Bog: 758

KU QAADASHO & U QIIMEYN DARAJO CIIDAN Taariikh: 28/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 292 Bog: 759

KU QAADASHO & U QIIMEYN DARAJO CIIDAN Taariikh: 28/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 293 Bog: 760

SOO WAREEJIN SARAAKIIL Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 294 Bog: 761

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKII XIGEENNO Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 295 Bog: 763

DALACSIIN SARAAKIIL IYO SARAAKIIL XIGEENO Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 296 Bog: 765

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKII XIGEENNO Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 297 Bog: 766

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 298 Bog: 769

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 299 Bog: 773

DALACSIIN LAYLI SARAKIIL Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 300 Bog: 774

DALACSIIN SARAAKIIL IYO SARAAKIL XIGEENO Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 301 Bog: 776

DALACSIIN SARAAKIIL IYO SARAAKIL XIGEENO Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 302 Bog: 778

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 303 Bog: 780

DALLACSIIN SARAAKIIL IYO SARAAKIIL XIGEENO Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 304 Bog: 781

DALACSIIN SARKAAL Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 305 Bog: 783

KU QAADASHO IYO U QIIMEEYN DARAJO CIIDAN Taariikh: 30/09/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 306 Bog: 784

MACAGAABIS MAAREEYE KU XIGEENKA HAY'ADDA AQOONSIGA IYO DIIWANGELINTA DADWEYNAHA Taariikh: 02/10/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 307 Bog: 785

APPOINTMENT PRESIDENTIAL ADVISOR ON NATIONAL MARITIME COORDINATION AND BLUE ECONOMY Taariikh: 02/10/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 308 Bog: 787

DALLACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 12/10/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 309 Bog: 788

DALACSIIN SARAAKIIL IYO SARAAKIIL XIGEENO Taariikh: 12/10/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 310 Bog: 790

DALACSIIN SARAAKIIL XIGEENO Taariikh: 12/10/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 311 Bog: 792

DALLACSIIN SARAAKIIL IYO SARAAKIIL XIGEENO Taariikh: 12/10/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 312 Bog: 794

DALACSIIN SARAAKIIL Taariikh: 12/10/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 313 Bog: 796

MACAGAABIS LA TALIYE SARE EE ARRIMAHA SIYAASADDA DIBADDA Taariikh: 13/10/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 314 Bog: 797

DALACSIIN SARAAKIIL IYO SARAAKIIL XIGEENO Taariikh: 24/10/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 315 Bog: 798

WARGELIN Taariikh: 14/06/2023
XEER WASIIR LR. 1 Bog: 800

SHARCIGA DHISIDDA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE DOORASHOOYINKA QARANKA IYO SOOHDIMAHA Taariikh: 21/11/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 26 Bog: 801

SHARCIGA URURADA IYO XISBIYADA SIYAASADDA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA Taariikh: 21/11/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 27 Bog: 819

SHARCIGA DOORASHOOYINKA QARANKA EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA Taariikh: 23/11/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 28 Bog: 844

SHARCIGA ILAALINTA XUQUUQDA NAAFADA SOOMAALIYEED Taariikh: 02/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 29 Bog: 911

SHARCIGA TACLIINTA SARE Taariikh: 04/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 30 Bog: 933

SHARCIGA HAY'ADDA SHARCIYEEYNTA ADEEGYADA IYO BAARITAANKA BEERAHA SOOMAALIYEED Taariikh: 24/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 32 Bog: 966

SHARCIGA XAKAMEYNTA KIIMIKOOYINKA BEERAHA SOOMAALIYRRD Taariikh: 24/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 33 Bog: 983

SHACIGA BADBAADADA DHIR-BEEREEDKA IYO TAKOORKA Taariikh: 24/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 34 Bog: 1001

SHARCIGA ABUURKA IYO NOOCYADA DHIRTA SOOMAALIYEED Taariikh: 24/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 35 Bog: 1031

SHARCIGA SHAQADA SOOMAAALIYEED Taariikh: 24/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 36 Bog: 1049

MAGACAABIS TALIYAHA CIIDAMADA GAARKA AH EE CXD Taariikh: 02/11/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 317 Bog: 1179

MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA DHULKA CXD Taariikh: 02/11/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 320 Bog: 1180

XILKAQAADIS TALIYIHII HORE EE TALIYAHA CXD SOOMAALIYEED IYO MAGACAABIS TALIYAHA CXD SOOMAALIYEED Taariikh: 18/11/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 325 Bog: 1181

MAGACAABIS XUBNAHA GUDDIGA MADAXA-BANNAAN EE Taariikh: 01/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 354 Bog: 1182

XILKAQAADIS GUDDOOMIYIHII HORE EE GOBOLKA BENAADIR AHNA DUQA MAGAALADA MUQDISHO IYO MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA CUSUB EE GOBALKA BENAADIR AHNA DUQA MAGAALADA MUQDISHO Taariikh: 10/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 357 Bog: 1184

XILKAQAADIS AGASIMIHII GUUD EE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA IYO MAGACAABIS AGASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA Taariikh: 14/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 358 Bog: 1185

XILKAQAADIS AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA IYO MAGACAABID AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA Taariikh: 17/12/2024
XEER MADAXWEYNE LR. 359 Bog: 1186

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tariikh: 04/01/2024

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.146

XRW - BIXIT
10 JAN 2024
OPM - EXIT

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA SOCDAALKA

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summadeedu taha **WC&AD/XAWSH &H /925 / 2023, ee ku Taariikheysan 11/12/2023** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.59..01.24** ee **04/01/2024,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha sharciga socdaalka**' oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta Xeer-nidaamiyaha sharciga socdaalka'

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.59.01.24 ee 04/01/2024,** kuna saabsan ansixinta - **Xeer-nidaamiyaha sharciga socdaalka**"oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Amniga Gudaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-nidaamiyaha sharciga socdaalka

Qodobka 3aad

Xeer-nidaamiyaha sharciga socdaalka' waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
IXAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/002/2024
TAARIIKH: 18/1-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA SOCDAALKA SOOMAALIYA

(Sharci Lr. 006 ee Maarso, 2023)

2023

CUTUBKA KOWAAD QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad

Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa Xeer-nidaamiyaha Sharciga Socdaalka

Soomaliya, waxaana lagu dhaqan-gelinayaa “Sharciga Socdaalka Soomaliya, Sharci Lr.06 ee Maarso, 2023.

Qodobka 2aad

Qeexid

Xeer-nidaamiyahan gudihiisa, haddii aan si kale loogu qeexin, erayada soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha ku hor qoran:

1. **Wasiir**: waxaa loola jeeda Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS;
2. **Wasaarad**: waxaa loola jeedaa Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS;
3. **Muwaadin**: waxaa loola jeedaa shakhsi kasta oo soomali ah si waafaqsan qodobbada Dastuurka JFS iyo sharciyada kale ee lagu caddeeyo muwaadinnimada iyo jinsiyadda Soomaaliya;
4. **Ajnabi**: waxaa loola jeedaa qof shisheeye ah oo aan ahayn muwaadin Soomaaliyeed;
5. **Ajnabi aan raali laga ahayn**: waxaa loola jeedaa shakhsiga lagu xusay Qodobbada 38aad iyo 39aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, sida:

b. qof kasta oo Ajnabi ah oo lagu qabtay ku xad-gudub ka dhan ah sharciga Socdaalka iyo Xeer-nidaamiyahan, isagoo ku sugan dhulka Soomaaliya, isla markaana ay Sarakiisha Socdaalku u gudbiyaan maxkamadda awoodda u leh; iyo

t. ajnabiga aan raali laga ahayn looma oggola inuu ka soo dego berriga, badda, diyaaradda, ama gaadiid kale ee ku sugan dhulka JFS ama lug ku soo gala;

6. **XJFS:** waxaa loola jeedaa Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
7. **JFS**: waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
8. **HSJS:** waxaa loola jeedaa Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed;
9. **Hay'adda**: waxaa loola jeedaa Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaliyeed ee heer Federaal;
10. **Qaxooti:** waxaa loola jeedaa qof kasta oo ay qaxootinimo u qeexayaan sharciyada dalka iyo Axdiga Caalamiga ah ee Qaramada Midoobay ee Geneva 1951 (UN Geneva Convention 1951);
11. **Agaasime Guud:** waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaliyeed;
12. **Sarkaal socdaal:** waxaa loola jeedaa hawl-wadeen kasta oo ka tirsan hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, Sharciga Hay"adda iyo Sharciga Socdaalka JFS;
13. **Baasaboor:** waxaa loola jeedaa dokumenti socdaal oo rasmi ah oo si sharci ah dal u sameeyo, dal kalana lagu geli karo loogana bixi

karo, isla markaana la aqoonsan yahay oo oggolaansho dal-ku-gal (entry clearance/visa) la saari karo; iyo

14. **U-qeybsane:** waxaa loola jeedaa sarkaal ka socda Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo ka hawl-gala Safaarad ama Qunsuliyad guud ee JFS.

Qodobka 3aad

Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

Ujeeddada Xeer-nidaamiyahani waa habsami-u-hirgelinta "Sharciga Socdaalka Soomaaliya" ee ku tilmaaman Qodobka 1aad ee sare, wuxuuna xeer-nidaaminayaa:

1. Soo-gelidda dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
2. Maritaanka (transit) dhulka, badda, iyo garoomada caalamiga ah ee dalka JFS.
3. Ka-baxidda dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS).
4. Joogista iyo degista dalka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya (JFS).
5. Jaan-goynta ciqaabaha dembiyada socdaalka ee ay galaan gaadiidka rakaabka keena ama ka qaada dalka JFS, dadka mas"uulka ka ah iyo rakaabka.
6. Tilmaamaha hagaya Saraakiisha Scdaalka, xakameynta gefafkooda iyo ciqaabta dembiyada ay ku galaan shaqada dhexdeeda iyagoo hareer maraya Sharciga Socdaalka iyo Xeernidaamiyaha habsami loogu hirgeliyo.

Qodobka 4aad Baaxadda Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa keliya oo lagu maamulayaa hawlaha khuseeya socdaalka ee ay u idman tahay HSJS.
2. Hay"addu waa mid leh awood sharci-fulineed iyo mid maamul oo ay ku maareyso arrimaha socdaalka iyo bixinta dokumentiyada safarka iyo hubintooda si waafaqsan Xeer- nidaamiyahan, Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharciga HSJS iyo shuruucda kale ee dhaqan-galka ka ah JFS.

CUTUBKA LABAAD KAALINTA HAY'ADDA

Qodobka 5aad

Higsiga Hay'adda ee Ku Aaddan Xeer-nidaamiyaha

Higsiga Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda ee la xiriira arrimaha socdaalka si waafaqsan Sharciga Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed, wuxuu ku qotomaa:

1. Gudashada waajibaadkeeda shaqo si waafaqsan Dastuurka JFS, Sharciga Hay"adda, Sharciga Socdaalka Soomaaliya iyo Shuruucda kale ee dhaqan-galka ka Dalka JFS.
2. Ilaalinta iyo dhawrista xuquuqda aadanaha marka ay Hay"addu bixinayso adeegyada ay bulshada u hayso ee la xiriira socdaalka, iyadoo la raacayo hadafka iyo ujeeddadda Xeer- nidaamiyahan, sharciyada kale ee dalka iyo xeerarka caalamiga ah.
3. Waxay Hay"addu u xilsaaran tahay dhammaan maamulka iyo maareynta arrimaha socdaalka dalka JFS oo ay ka mid yihiin:
   b) meel-marinta iyo dhaqan-gelinta Xeer-nidaamiyahan;
   t) hirgelinta Sharciga Socdaalka iyo Sharciga HSJS;

j) dhaqan-gelinta siyaasadda Socdaalka; iyo

x) xakameynta iyo maareynta xudduudaha ee la xariira dhammaan dadka soo gelaya ama ka baxaya dalka JFS.

4. Hay"addu waxay u xilsaaran tahay bixinta iyo baabi"inta dal-ku-galka, joogitaanka kumeel-gaarka ah, dal-ku-joogga rasmiga ah ee la siinayo ajaanibta soo gelaysa ama joogeysa dalka JFS, iyadoo la ilaalinayo Xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale ee la xiriirta.
5. Musaafurinta ajaanibta aan raaliga laga ahayn iyo xaqiijinta ka-bixitaankooda dalka JFS marka lagu helo ku xad-gudubka Xeer-nidaamiyahan iyo sharciyada la xariira.
6. Soo-saarista, hubinta iyo bixinta dokumentiyada safarka muwaadiniinta Soomaaliyeed meel walba oo ay joogaan.
7. Hay"addu waxay mas"uuliyad ka saaran tahay xaqiijinnada aqoonsiyada (identity verifications) oo lagu saleynayo dokumentiyada safarka, sida baasaboorka, warqadda aqoonsiga, dal-ku-galka (visa) iyo dokumentiyada kale ee khuseeya socodsiinta hawlahaas.
8. In lagu sameeyo wareysiyo toos ah ama aan toos ahayn (travelor assessement) dadka safarka ah, rakaabka, cidda mas"uulka ka ah gaadiidka si loo hubiyo in socdaalkoodu yahay mid sharci ah oo waafaqsan shuruucda u degsan socdaalka dalka JFS, iyo in la xaqiijiyo is-waafaqsanaanta sheegashada ujeeddada safarka iyo macluumaadka la helay.
9. Saraakiisha socdaalku, iyagoo waajibaadkooda shaqo gudanaya, qof kasta oo ay ogaadaan inuu safarkiisu yahay mid aan waafqsanayn sharciga socdaalka dalka, ha ahaado ajnabi ama

muwaadin soo gelaya ama ka baxaya, waxaa lala wadaagayaa isaga iyo xogtiisaba hay"adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn ee kala hawl-gala Hay"adda bar- xudduudeedyada dalka, iyadoo ahmiyadda kowaad la siinayo sugidda amniga Qaranka, si ay ugu sameeyaan baaritaan dheeri ah ee dhinaca amniga inta aan lagu fulin xad- gudubyada dhinaca socdaalka ee uu galay.

10. Hay"addu waxay hormuud ka tahay guud ahaan isku-xirka hay"adaha ka hawl-gala barxudduudeedyada dalka (Inter-agency Border Management Committee „IBMC").

Qodobka 6aad

Mas'uuliyadda Oggolaanshaha Dal-ku-galka, Dal-ku-joogga iyo Degista Dalka JFS

1. HSJS waxay mas"uul ka tahay bixinta iyo baabi"inta oggolaanshaha dal-ku-galka, dal- kujoogista iyo degista dalka JFS, iyadoo u hoggaansan tilmaamaha ku qeexan Xeernidaamiyahan, Sharciga Socdaalka iyo hab-raacyada fulineed ee uu soo saaro Agaasimaha Guud si waafaqsan Sharciga HSJS iyo sharciyada kale ee dalka ee dhaqan- galka ah.
2. Safaaradaha JFS ee dalka Dibaddiisa waxay ka qabanayaan codsiyadooda iyo dokumentiyada looga baahan yahay, si dhammeystiran, marka ajaanibtu ay ka dalbadaan oggolaansho dal-ku-gal (entry clearance/visa) ka dibna waxay u soo gudbinayaan HSJS si ay go"aan uga gaarto codsiyada u qalma in la siiyo oggolaanshaha.

3. HSJS marka ay hesho codsiyada iyo dokumentiyada ka yimid safaaradaha dibadda ee

JFS, Hay"addu waxay uga jawaabaysaa sida ugu dhaqsiyaha badan. Marka ay gaaraan codsiyada la oggolaaday, Safaaradu waxay bixinaysaa dal-ku-galka (entry clearanc/visa permit).

4. HSJS waxay soo saaraysaa hab-raac lagu faahfaahinayo Diiwaan-gelinta ajaanibta, Dal- ku-galka, Dal-ku-joogga iyo Degista dalka JFS si waafaqsan Qodobka 56aad (2) ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharci Lr. 006 ee Maarso 2023.

CUTUBKA SADDEXAAD U-SOCDAALIDDA SOOMAALIYA

Qodobka 7aad

Awoodaha iyo Wajibaabka Saraakiisha Socdaalka

1. Xeer-nidaamiyahani wuxuu siinayaa Sarkaalka HSJS awoodo iyo waajibaad la xiriira dhaqan-gelinta Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Socdaalka, sida maareynta barxudduudeedyada dalka, fududeynta socdaalka Sharciga ah, tarxiilka, baarista, oggolaanshaha ama diidmada ku-soo-gelitaanka iyo uga bixitaanka dalka JFS sifo aan sharci ahayn, iyo guud ahaan maareynta xogta socdaalka.
2. Saraakiisha HSJS waxaa waajibkoodu yahay in ay hayaan diiwaanka maalinlaha ah ee dhammaan dadka soo gelaya ama ka baxaya dalka, iyo dadka loo diiday dal-ku-galka ama laga saaray dalka iyo faahfaahinta sababaha diidmada ama dal-ka-saaridda.

3. Sarkaalka Socdaalka ee HSJS waxaa waajib ku ah ku-dhaqanka iyo fulinta axkaamta ku qeexan Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharci Lr. 006 ee Maarso, 2023 iyo Xeernidaamiyahan oo labaduba si mug leh u sharaxaya shuruudaha iyo hannaanka ay marayaan socdaaleyaasha/musaafiriinta soo gelaya ama ka baxaya dalka.
4. Sarkaalka HSJS, isagoo raacaya hab-raacyada waafqasan sharciga, wuxuu siinayaa adeeg hufan socdaaleyaasha/musaafiriinta dalka soo gelaya ama ka baxaya, ha ahaadeen muwaadiniin ama ajaanib.
5. Soo-gelitaanka dalka JFS, qofka socdaalka ah waxaa laga hubinayaa:

b. **Muwaadin**-

i) in magaca muwaadinku ku jiro liiska rakaabka (manifest list);

ii) in muwaadinku haysto dokumenti safar oo Soomaali ah ee sax ah (Baasaboor,

Warqadda dal-ku-noqoshada degdegga ah ama

Dhaafiye); iii) halka safarkiisu ka soo bilowday iyo halka uu ku dhammaanayo; iv) in uusan ku jirin liiska dad la baadi-goobayo ama dembiyo loo haysto (wanted list);

v) taariikhda socdaalada uu muwaadinku hore u sameeyey; iyo

vi) caruurta ka yar 18 sano, waxaa lagama-maarmaan ah in waalidkiisu la socdo ama qof haysta awood-siin maxkamadeed.

t. **Ajnabi-**

i) in magaca ajnabiga socdaalka ah laga helo liiska rakaabka (manifest list);

ii) in dokumtiga safarkiisu yahay mid sax ah, isla markaana ay dhicitaankiisa ka dhiman tahay ugu yaraan 6 (lix) bilood;

iii) in uusan ajnabigu ku jirin liiska dad la baadi-goobayo ama dembiyo loo haysto

(wanted list); iv) in uu haysto

dal-ku-gal ama oggolaansho sax ah;

v) in uu soo buuxiyey foomka caddeynta soo-gelidda; vi) in uu haysto dammaanad buuxda ee marti-geliye soo buuxiyey shuruudaha dammaanadda ee ku xusan Qodobka 23aad ee Xeer-nidaamiyahan iyo habraaca diiwaan-gelinta, dal-ku-galka iyo dal-ku-joogga ajaanibta;

vii) in sarkaalka socdaalku hubiyo taariikhda socdaalada uu hore u sameeyey; viii) in Baasaboorka uu ku safrayo la geliyo habka socdaalka dalka (border database);

ix) in sarkaalka socdaalku ka qaado ajnabiga faraha iyo sawirka si sax ah; iyo

x) haddii sarkaalka socdaalka ee kowaad (1aad) ay ku adkaato go"aan-ka-gaarista xaaladda ajnabiga, wuxuu u gudbinayaa Kormeeraha Barta oo isaguna la kaashanaya Madaxa Laanta, Agaasimaha Waaxda ilaa Agaasimaha Guud, hadba sida loogu baahdo.

6. Markuu ka gudbo shuruudaha sare ku xusan, isla markaana uu helo dal-ku-gal qofka ajnabiga ah, wuxuu fasax u yahay in uu dalka soo galo.

7. Ajnabiga ka gudbi-waaya shuruudaha kor ku xusan, isla markaana madaxa qeybtu ku filnaan-waayo ayna ula muuqato in uu jiro dembi culus, waxaa loo gudbinayaa Booliska si baaris dheeri ah loogu sameeyo, go"aanna looga gaaro.
8. Qofka asal ahaan Soomaali ah balse wata dhalasho/baasaboor Ajnabi ah waxaa la siinayaa dal-ku-gal 3 (saddex) bilood ah, wixii intaas ka dambeeya haddii uu dalka joogana wax khidmad ah oo ku socda ma jirto.

Qodobka 8aad

Dembiyada Ay Geystaan Saraakiisha Socdaalka

1. Sarkaal kasta oo ku kaca arrimihan soo socda, isagoo ku gudo-jira shaqadiisa, wuxuu gelayaa fal-dembiyeed ay ka dhalanayso ciqaab, si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan, Sharciga HSJ, Sharciga Socdaalka iyo sharciyada kale ee dalka:

b) fududeyn safar sharci-darro ah;

t) qof amar xayiraadeed ka yaal oo si ku-talo-gal ah loo siidaayo;

j) fal-dembiyeed dhacay oo la qariyo ama wax aan dembi ahayn oo dembi laga dhigo si loo handado dadka safarka ah;

x) qarin xogta qof baxaya ama soo galay dalka iyadoo la gees-marinayo sharciga; kh) adeeg-bixin ku saleysan anshax-xumo baahsan oo lid ku ah Sharciga;

d) maxsuul kasta ee musuq-maasuq oo ka dhasha fal sarkaalku fuliyey; iyo

r) ku kicitaan musuq-maasuq, isdaba-marin ama anshax-xumo lid ku ah Xeer- nidaamiyahan, Sharciga HSJS, Sharciga

Socdaalka, sharciyada kale ee dalka iyo dhammaan hab-raacyada iyo siyaasadaha gaarka ah ee Hay"adda.

2. Waxaa lagu qaadayaa ciqaabta ku xusan Qodobka 53aad ee Sharciga Socdaalka, iyo Qodobka 245aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (Somali Penal Code), iyo qodobbadii sharci ee kale oo munaasib ku ah, kuwaasoo ay dabaqayaan Maxkamadaha awoodda u leh.
3. Si guud, Sarkaal kasta waxaa waajib ku ah inuu aqoon u leeyahay laguna tababaro shuruucda socdaalka, kana dhawrsanaado ku xad-gudubka ama dembiyada kale ee ku cad Xeerka Ciqaabta Soomaliyeed (XCS) iyo sharciyada kale ee dalka, inta uu ku gudo-jiro gudashada waajibkiisa hay"adda ee loo idmaday,

Qodobka 9aad Awoodaha Saraakiisha Socdaalka

1. Waxay awood u leeyihiin in ajnabiga imaanaya JFS ay u oggolaadaan ama u diidaan galitaanka dalka iyagoo meel-marinaya Sharciga Socdaalka Soomaaliya iyo Xeernidaamiyahan.
2. Haddii ay dhacdo diidmo, sarkaalka socdaalku waa in uu diiwan-geliyaa sababaha diidmada, isla markaana uu keydiyaa si loo tixraaci karo mustaqbalka.
3. Waxay leeyihiin awood ay ku joojin karaan, baari karaan, kuna xiri karaan warqadda sooqabashada la"aanteed (without warrant) qofkii ay ku tuhmaan in uu ku xad-gudbay Sharciga Socdaalka, Xeer-nidaaniyahan iyo sharciyada kale ee dalka. Balse, qofkii lagu xiro amar la"aan (without warrant) waa in loo gudbiyo sharciga iyo maxkamadda awoodda u leh, muddo aan ka badnayn 48 (afartan

iyo sideed) saac, sida ku cad Qodobka 39aad ee Xeerka Habka Ciqaabta Soomaaliyeed (XHCS).

4. Musaafirinta ajaanibta aan la doonayn ama qof kasta oo ku xad-gudba Sharciga Socdaalka iyo Xeer-nidaamiyahan.
5. In ay wareysi ka qaadaan, hubiyana dokumentiyada dadka safarka ah oo doonaya in ay soo galaan ama ka baxayaan JFS.
6. Waxay awood u leeyihiin in ay galaan, baaraan, xannibaan gaadiid kasta, sida diyaarad, markab ama baabuur oo ku sugan gudaha Soomaaliya ama soo gelaya haddii loo hayo sababo muujinaya ku xad-gudubka Sharciga Socdaalka iyo Xeer-nidaamiyahan oo habsami loogu dhagan-gelinayo.
7. Inay dib ugu celin karaan gaadiidkii keena qof aan Sharci u haysan soo-gelitaanka dalka.
8. Inay ka qaadaan wareysi qofka magan-gelyo-doonka ah, kuna siiyaan rukhsad dal-ku-joog ku-meel-gaar ah inta dacwadiisa laga go"aan-gaarayo, waxayna la wadaagayaan xogtiisa Hay"adda Qaxootiga Qaranka.
9. Awood ay ku siiyaan soo-gelitaanka ku-meel-gaarka ah shaqaalaha maraakiibta/doomaha, diyaaradaha iyo baabuurta soo gala xuduudda JFS.
10. Waxay awood u leeyihiin in ay ilaaliyaan in shaqaalaha la socda diyaaradaha (crew) aysan dalka Soomaaliya soo geli karin Baasaboor iyo aqoonsi (Crew ID card) la"aan, aysana joogi karin muddo ka badan toddobo (7) maalmood, wixii intaas dhaafsiisan waxaa ku soconaya ganaax maalinle ah, sida ku cad Qodobka 54aad (4) ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya.

11. Qofka shaqaalaha diyaaradaha ah (crew) ee dalka jooga muddo dhan 1 (hal) bil si sharcidarro ah, wuxuu muteysanayaa ganaax, musaarifin iyo in uusan dalka dib ugu soo laaban karin ilaa muddo 2 (labo) sano ah.

Qodobka 10aad

Waajibnimada Hortegista Sarakiisha Socdaalka

1. Socdaale/musaafir kasta oo soo gelaya ama ka baxaya dhulka JFS waxaa waajib ku ah hortegista Saraakiisha Socdaalka.
2. Qofka safarka ah markuu hor-yimaado Saraakiisha Socdaalka waa inay hubiyaan is- waafaqsanaanta dokumentiyadiisa iyo jawaabaha uu bixiyey.
3. Qof kasta oo soo gala dalka JFS, kana soo gala goob aysan joogin Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed, waxaa waajib ku ah in uu iska xaadiriyo saldhigga booliska ee ugu dhow si ay ugu gudbiyaan xafiiska ugu dhow ee Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed muddo 24 (afar iyo labaatan) saac gudahood.
4. Haddii uusan qofka ajnabiga ahi ku hortegi-waaya xafiiska HSJS muddada loo cayimay, wuxuu mudanayaa ciqaabta ama ganaaxa ku xusan Qodobka 54aad ee Sharciga Socdaalka ka hor inta aan laga musaafurin dalka JFS.
5. Qof kasta oo hortegi-waaya xafiisyada hay"adda waxaa la qiimeynayaa ujeeddadii uu dalka u soo galay si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Socdaalka.
6. Marka lagu caddeeyo qof musaafur ah, ha ahaado muwaadin ama Ajnabi, in uu aflagaado u geystay saraakiisha socdaalka ama uu si

qayaxan ugu dhawaaqo erayo meel-ka-dhac ku ah karaamada iyo sharafta Qaranka, waxaa lagu qaadayaa Qodobka 268aad ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS), iyadoo qofka ajnabiga ah loo raacinayo fulinta Qodobka 239aad ee isla Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS).

CUTUBKA AFARAAD SHURUUDAHA SOO- GELISTA, JOOGISTA IYO DEGISTA DALKA JFS

Qodobka 11aad

Bar-xuduudeedyada iyo Shuruudaha Soo-gelista Dalka JFS

1. Asteynta bar-xduuudeedyada dalka laga soo galo ama looga baxo waxaa lagu soo saarayaa laguna faahfaahinayaa Xeer-nidaamiye iyo Hab-raac gaar ah oo ay soo saarto HSJS, lagana ansixiyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS.
2. Bar-xudduudeedyada ku tibaaxan Faqradda (1) ee Qodobkan waxay noqonayaan barxuduudeedyada rasmiga ah ee laga soo galo ama looga baxo dalka JFS.
3. In la hubiyo in dhammaan rakaabka imaanaya ama baxaya ay si sax ah oo dhammeystiran u buuxiyaan foomka bixitaanka iyo gelitaanka ayna saxiixaan.
4. Shuruucda lagu dhaqayo bar-xuduudeedyada dhulka way ka duwanaan doonaan booqashooyinka gaaban ee ay isugu gudbaan bulshooyinka xuduudaha wada degan, iyadoo Hay"addu ka soo

saari doonta Xeer-nidamiye iyo Hab-raacyo u gaar ah degaan kasta.

5. Bulshooyinka ku dhaqan bar-xuduudeedyada baahidooda isku gudubka joogtada ee maalinlaha ah, waxaa lagu diiwaan-gelinayaa Warqadda Booqashada Gaaban (Day Pass) oo ay ku xusan tahay xogta shakhsiga, ujeeddada booqashada, waqtiga uu xuduudda ka gudbay iyo waqtiga soo-noqoshada, waxaana soo saaraya Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS).
6. In Saraakiisha Socdaalku ka helaan magaca qofka doonaya in uu soo galo JFS warqadda ama bayaanka rakaabka (passenger manifest).
7. In saraakiisha Socdaalku ka baaraan qof walba oo safar ah liiska digniinta ((alert list).
8. Sida ku cad sharciga waxaa laga doonayaa Rakaabka imaanaya ee soo gelaya Soomaaliya in ay ku buuxiyaan xogtooda oo dhammeystiran Foomka Rakaabka ee yaala barxuduudeedyada ee ah ilaha ama irdaha laga soo galo dalka.
9. Ajnabiga waxaa loo oggolaanayaa in uu soo galo ama ka baxo dalka JFS, haddii uu haysto:

   b). baasaboor sax ah oo ugu yaraan waqtigiisa dhicitaanka ay ka dhiman tahay muddo aan ka yarayn 6 (lix) bilood ama dokumenti kale oo safar oo sharci ah oo muujinaya in uu leeyahay qofka sitaha ah; iyo

   t). oggolaasho dal-ku-gal sax ah oo lagu soo galo ama looga baxo dalka JFS si waafaqsan sharciga.

Qodobka 12aad

Shuruudaha Oggolaanshaha Soo-gelitaanka iyo Joogitaanka Dalka JFS

1. Si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Socdaalka Soomaaliya, waxaa soo geli kara ama joogi kara dalka JFS qof kasta oo ajnabi ah, haddii uu haysto mid ka mid ah oggolaanshaha soo socda, si waafaqsan Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharci Lr. 006 ee Maarso, 2023:

   b). oggolaansho dal-ku-gal dalxiis;

   t). oggolaansho maritaan dal;

   j). oggolansho dal-ku-gal waxbarasho ama cilmi-baaris;

   x). oggolaansho dal-ku-gal sabab gaar ah;

   kh). oggolaansho joogitaan muddeysan;

   d). oggolaansho dal-ku-gal soo-noqnoqod leh;

   r). oggolaansho deganaasho rasmi ah;

   s). oggolaansho dal-ku-gal caafimaad; sh. oggolaansho dal-ku-gal ganacsi; ama dh. oggolaansho dal-ku-gal shaqo.

2. Oggolaanshaha lagu xusay Faqradda (1) ee Qodobkan, waxaa lagu bixinayaa dalab ka yimaada codsadaha, waxaana bixinaya Sarkaalka Socdaalka ee awoodda u leh, si waafaqsan Qodobka 7aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharci Lr. 006 ee Maarso, 2023, waxaana lagu soo saarayaa shaabbad ama dhejis (sticker) ay ku caddahay nooca oggolaanshaha oo sidoo kale lagu muujinayo dokumentiga safarka ee codsadaha.

3. Ajnabiga soo gala dalka wuxuu ku joogi karaa Oggolaansho waafaqsan kii uu ku soo galay dalka, qofka ajnabiga ah ee doonaya inuu bedelo oggolaanshihiisii hore waa inuu dalka ka baxaa ka dibna ku soo galo oggolaansho waafaqsan dalabkiisa dambe.

Qodobka 13aad Oggolaansho Dal-ku-gal Dalxiis

1. Waxaa la siin karaa oggolaasho dalxiis ajnibiga doonaya in uu dhulka Soomaaliya u yimaado:
   b). ujeeddooyin dalxiis; ama
   t). sabab kasta oo leh dabeecad muddeysan taasoo ula muuqata Hay"adda mid u qalanta in lagu siiyo oggolaansho soo-gelid dalxiis.
2. Oggolaanshaha bixinta dalxiis waxaa shuruud looga dhigayaa haysashada tikit (ticket) laabasho ama mid muujinaya in qofku uu dal kale u sii gudbayo iyo dammaanad ballanqaadaysa kharashaadka inta lagu gudo-jiro muddada joogitaanka dalka JFS ee codsaduhu weydiistay.
3. Muddada joogidda kama dheeraan karto 3 (saddex) bil oo ka billaabanaysa taariikhda soogelidda, iyadoo wixii intaa ka badan qofka laga rabo codsi muddo-kordhin.
4. Waxaa oggolaanshaha cusub la kordhin karaa hal mar oo aan ka badnayn 3 (saddex) bilood, iyadoo la tixgelinayo codsiga qofka doonaya inuu dheeraysto muddada oggolaanshaha dalxiiska.

Qodobka 14aad

Oggolaansho Dal-ku-gal Maritaanka Dalka

1. Waxaa la siin karaa Oggolaansho maritaanka dalka (transit) qof ajnabi ah haddii:

   b). ujeeddada uu Soomaaliya u yimid ay tahay in uu uga sii gudbo meel kale oo uu u socdo, taasoo ka baxsan dalka JFS, iyo

   t). uu wato dokumentiga saxda ah ee looga baahan yahay si uu ku galo dalka uu uga sii gudbayo JFS.

2. Shuruudda bixinta oggolaanshaha maritaanka dalka waa haysashada Tikit (Ticket) sax ah oo muujinaya dalka uu qofku u sii gudbayo ama qaab saxan oo uu safarkaas ku sii wadan karo iyo haysashada kharash dabooli kara baahida qofka ajnabiga ah muddada uu joogayo dalka.

3. Dal-ku-galka Maritaanka ahi wuxuu qofka safarka ah xaq u siinayaa inuu soo galo dalka kuna sugnaado JFS waqti aan ka badnayn muddada ku cayiman Qodobka 14^{aad} (3) ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, muddadaasi waxay ka bilaabanaysaa taariikhda uu soo galay dalka.

Qodobka 15^{aad}

Oggolaanshaha Dal-ku-gal Waxbarasho, Cilmi-baaris ama Caafimaad

1. Oggolaanshaha Dal-ku-gal Waxbarasho iyo Cilmi-baaris waxaa la siin karaa haddii:

   b. ajnabigu doonayo inuu u yimaado dalka JFS waxbarasho ama cilmi-baaris, iyadoo ujeeddadiisu tahay in uu ku

qaato tababarro ama ku biiro hay'ado waxbarasho, haddii ay hay'adahaasi yihiin kuwo ay aqoonsan tahay Wasaaradda Waxbarashada ee Xukuumadda JFS;

t. oggolaansho waxbarasho waxay ku xirnaan kartaa bixinta aqbalaadda hay"adda waxbarashada, haysashada dammaanad ku salaysan ujeeddada uu ajnabigu u imaanayo iyo xaqiijinta in qofka shisheeyaha ahi haysto awood dhaqaale oo muujinaysa in uu isku filnaan karo inta uu ku sugan yahay dalka JFS; iyo

j. oggolaanshaha dal-ku-gal waxbarasho ama cilmi-baaris waxay u suurtogelinaysaa ajnabiga in uu soo galo dalka JFS, wuxuuna joogi karaa muddada uu waxbarashada ama cilmi-baarista wado.

2. Oggolaanshaha Dal-ku-gal Caafimaad waxaa la siin karaa haddii:

b. ajnabiga doonaya inuu u yimaado dalka JFS sabab caafimaad;

t. ajnabigu uu buuxiyo shuruudaha ku xiran oggolaanshahan;

j. ajnabigu haysto dokumenti dhaqtar uu ku caddeynayo xaaladiisa caafimaad;

x. ajnabigu haysto warqad casuumad ah oo uu qoray dhaqtar ka diiwaan-gashan

Wasaaradda Caafimaadka, Xukuumadda JFS; kh. ajnabigu haysto kharashaad ku filan muddada uu ku sugan yahay dalka JFS; iyo d. oggolaanshaha caafimaad waxaa la kordhin karaa halkii marba ugu badnaan 3 (saddex) bilood,

iyadoo inta jeer ee la kordhinayo ay ku xiran tahay muddada dhaqtarkiisu ku taliyo in ay u baahan tahay daweyntiisu.

Qodobka 16aad Oggolaansho Dal-ku-gal Sabab Gaar ah

1. Waxaa la siin karaa oggolaansho u-imaatin sabab gaar ah shakhsiyaadka ay casuumtay Dawladda Soomaaliya ee ku imaanaya booqasho rasmi ah ama mid aan rasmi ahayn ama ka-qeyb-gal shirar labo-geesood ah ama dhinacyo badan ay qeyb ka yihiin iyadoo lala tashanayo Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee Xukuumadda JFS.
2. Oggolaanshaha imaatinka sababaha gaarka ah waxaa loo marayaa hab-maamuus munaasab ku ah dadka imaanaya oo ay diyaarisay Wasaaradda Arrimaha Dibaddda ee
   Xukuumadda JFS ama hay"adda uu khuseeyo, ka dib marka lagu wargeliyo Agaasimaha Guud ee HSJS.

Qodobka 17aad

Oggolaansho Dal-ku-gal Soo-Noqnoqod leh

1. Waxaa la siin karaa ajnabi kasta oo dhulka JFS ku yimid si Sharci ah, ka dib markuu codsado in la siiyo oggolaansho soo noqnoqosho leh, iyadoo HSJS ay go"aan ka gaarayso xaq-uyeelashadiisa oggolaanshadaas.
2. Waxaa sidoo kale, la siin karaa ajnabiga soo buuxiya shuruudaha ku cad Faqradda (5) ee Qodobka 11aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya.

3. Codsadaha waxaa looga baahan yahay in uu ku muujiyo dalabkiisa dammaanad sharci ah, cinwaanka lagala xiriiri karo, qofka damiinanaya iyo meesha uu ku soo degayo.
4. Codsaduhu waa in uu caddeeyo sababta uu u qaadanayo oggolaanshaha soo-noqnoqod leh oo faahfaahsan, ka dib marka lagu qanco codsigiisa iyo sababaha uu sheegtay ayaa la siinayaa.
5. Ajnabiga ku soo gala dalka oggolaanshaha ee uu ku gaabto waqtiga waxaa loogu dari karaa ilaa muddo 1 (hal) bil ah, balse kuma soo noqon karo muddadaas loo kordhiyey haddii uu ka baxo dalka.

Qodobka 18aad

Oggolaansho Joogitaan Muddeysan

1. Waxaa la siin karaa Ajnabi kasta oggolaansho joogitaan muddeysan, marka laga reebo ajnabiga aan raaliga laga ahayn haddii uu la yimaado arrimaha soo socda:

b). markuu wato mid ka mid ah oggolaanshaha muddada leh ee ku xusan Qodobka 12aad

(1) ee Sharciga Socdaalka; ama

t). haddii uu dammaanad kala yimaado qofka daneynaya ama qof kale, isla markaana sarkaalka Hay"addu uu ku qanco dammaanadaas;

2. Agaasimaha Guud ee Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda wuxuu ka khafiifin karaa ama ka dhaafi karaa qofka Ajnabiga ah ee codsanaya oggolaansho deganaansho joogitaan muddeysan shuruudaha ku xusan faqradda 1aad (b) ee Qodobkan, haddii ay jirto sabab maangal ah, ka dib marka ay caddaato in ajnabigu haysto

qaab kale oo uu ku dabooli karo baahidiisa inta uu ku gudo-jiro joogitaanka loo oggolaaday ee dalka, sidoo kalena dabooli karo kharashka tikit-ka laabashada ama ay jiraan sababo muujinaya in uu u sii wadanayo safarkiisa dal kale.

3. Waa in ay si cad u tilmaamanaataa muddada oggolaanshaha joogitaan kasta (temporary residence) oo qof ajnabi ah uu joogayo dalka. Haddii uusan qofkaas ajnabiga ahi haysan oggolaansho waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo Xeer-nidaamiyihiisa kama qeyb-geli karo hawlo faa"iido laga helayo ee laga fuliyo dalka gudahiisa.
4. Oggolaanshaha muddada joogitaanka muddeysan (temporary permit) kama badnaan karto 1 (hal) sano.
5. Qof kasta oo haysta oggolaanshaha joogitaanka muddeysan wuxuu u hoggaansamayaa shuruudaha ku cad oggolaanshaha la siiyey.

Qodobka 19aad Oggolaansho Deganaansho Rasmi ah

1. Waxaa la siin karaa oggolaansho deganaansho rasmi ah Ajnabiga leh sumcad wanaagsan, isla markaana codsada, ka dib markuu Soomaaliya ku joogay si sharci ah, muddo aan ka yarayn 5 (shan) sano oo xiriir ah.
2. Sida ku cad faqradda 1aad ee isla qodobkan, waxaa lagu dhaqayaa ku-tiirsaneyaasha sida lamaanihiisa iyo carruurta ka yar 18 (sideed iyo toban) sano ee la nool qofka ajnabiga ah ee la siiyey oggolaanshaha deganaanshaha rasmiga ah.

3. Haddii qofka la siiyey deganaanshaha rasmiga ah uu ka maqnaado dalka Soomaaliya muddo ka badan 6 (lix) bilood oo xiriir ah, wuu ka dhacayaa oggolaanshaha la siiyey.

Qodobka 20aad Oggolaansho Ganacsi

1. Waxaa la siin karaa oggolaansho Ajnabiga doonaya in uu ganacsi ama maal-gashi ka sameeyo dalka JFS, waxaane lagu hawl-gelin karaa shuruudaha soo socda:
   b). in ajnabigu uu ganacsi ku darsado saami maaliyadeed ama raasumaal ama in uu si madax-bannaan u sameysto maal-gashi; iyo
   t). in qofka ajnabiga ah uu ballan-qaado in uu u hoggaansamayo shuruucda dalka sida Sharciga Maal-gashiga Shisheeye, Sharci Lr.13 ee 21/01/2016.
2. Qofka ajnabiga ah ee haysta oggolaanshahan wuu ka ganacsan karaa dalka JFS, waana loo shaqeyn karaa isagoo dhawraya Sharciga shaqaalaha shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo shuruucda kale ee dalka ee xiriirka la leh arrimaha ganacsiga iyo shaqaalaha.

Qodobka 21aad Oggolaansho Dal-ku-gal Shaqo

1. Waxaa la siinayaa oggolaansho ajnabiga ku imaanaya shaqo dalka JFS, markuu oggolaasho shaqo ku helo si waafaqsan Sharciga Shaqo-qorista Shaqaalaha Shisheeye, Sharci Lr.10 ee 09/12/2015.
2. Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Xukuumadda JFS waxay tixgelinaysaa oggolaanshaha shaqo ee uu soo dalbaday qof

ajnabi ah, in ay tahay shaqada uu ruux muwaadin Soomaali ah uu qaban karo iyo in kale.

3. Waxaa reebban in shaqo uu qaban karo muwaadin Soomaaliyeed loo qoro qof ajnabi ah, marka laga reebo jiritaanka heshiis labo dhinacle ama heer gobol ah oo dhaqan-gal ah oo meesha ka saarayo faquuq shaqaale isla markaasna siinaya fursado siman muwaadiniinta dhinacyada, waxaana hubinaya fulinta faqraddan Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada oo kaashanaysa Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda.
4. Iyadoo la fiirinayo danta guud ee bulshada, Agaasimaha Guud ee Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda wuxuu diidi karaa oggolaanshaha dal-ku-galka ee ajnabi kasta oo doonaya in uu ku yimaado heshiis khilaafsan faqradda (3) ee sare.
5. Wasaaradda Shaqada & Arrimaha Bulshada iyo dhammaan Hay"adaha kale ee Dawladda, shirkadaha ama ganacsiyada gaarka loo leeyahay ee ay khuseyso shaqada uu qabanayo qofka shisheeyaha ah waxaa xil ka saaran yahay la-socodka shaqada uu qabanayo qofksaas ajnabiga ah.
6. Hay"adda uu qofka ajnabiga ah u shaqeynayo, waxay caddeynaysaa; iyo

b. nooca adeegga shaqo ee uu qofka ajnabiga ahi qabanayo; iyo

t. muddada uu sharci ahaan oggolaansho u haysto.

Qodobka 22aad

Waajibaadka Saaran Qofka Ajnabigu u Shaqeynayo

1. In uu siiyo qofka ajnabiga ah shaqadii loo oggolaaday in uu qabto iyadoo la tixgelinayo nooca oggolaanshaha shaqada.
2. In uu keeno marka laga dalbado qofka ajnabiga ah, aqoonsigiisa, macluumaadka iyo nuqullada heshiiska shaqada ajnabiga shaqaalaha ah.
3. In uu ogeysiiyo Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda iyo Hay"adaha kale ee ay khuseyso marka qofka ajnabiga ah ay shaqadu ka dhammaato ama uu qabanayo shaqo ka duwan mihnadii loo dalbaday.
4. Marka shaqada uu dalka ka hayey qofka ajnabiga ah ay joogsato, sababta ay doonto ha noqotee, loo-shaqeeyaha waxaa looga baahan yahay in uu ogeysiiyo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda muddo 15 (shan iyo toban) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa taariikhda ay shaqadu ka dhammaatay ama laga saaray shaqada.
5. Hannaanka diiwaan-gelinta shirkadaha iyo ajaaniibta u shaqeysa waxaa lagu soo saarayaa

   Hab-raac ku salaysan hawlaha maalinlaha ah si waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo Xeernidaamiyan.

Qodobka 23aad

Dammaanad

1. Dammaanadda uu tilmaamayo qodobkan, waxaa bixin kara loo-shaqeeyaha doonaya in uu qofka ajnabiga ah siiyo shaqo uu ka qabanayo gudaha dalka JFS.
2. Waxaa laga doonayaa Loo-shaqeeyaha ama muwaadinka doonayo in uu keeno qof ajnabi ah, in uu la soo wadaago Hay"adda

Socdaalka iyo jinsiyadda macluumaadka qofka ajnabiga ah ka hor inta uusan keenin sida:

b). rukhsada shaqo ee shirkaddiisa ama aqoonsigiisa oo dhammeystiran;

t). Dammaanadda oo qoraal ah oo ay ku caddahay sababta uu u imaanayo, taariikhda uu imaanayo iyo muddada uu joogayo; iyo

j). nuqul documentiga safarka ajnabiga, telefoonkiisa iyo email-kiisa.

3. Xilliga kordhinta dal-ku-galka ee billowga rukhsadda shaqada, looshaqeeyaha waxaa laga dhigayaa "Rahan cadad maaliyadeed ama qoraal ku waajibinaya, waxaana lagu jaangooynayaa kharashka safarka ee ku celin kara qofka ajnabiga ah dalkiisii, haddii is- bedel ku yimaado ku-talo-galkii qorshihii shaqada". Rahanta lacageed waxay dhammeystir u tahay dammaanadii qoraalka ahayd ee uu hore u sameeyey in uu mas"uul ka yahay qofka ajnabiga ah, waxaana lagu darayaa galka (file) uga furan xafiiska diiwaan-galinta shirkadaha.
4. Muddada shaqadu socoto dhexdeeda, si aan culays ku ahayn qofka ajnabiga ah, looshaqeeyuhu wuxuu si tartiib ah uga jari karaa mushaarkiisa rahantii hore looga dhigay magaciisa, is-af-garadka labada dhinac ee fulinta hawshaan waa in lagu wargeliyo Xafiiska Diiwaan-gelitna Rahanta iyo Dammaanadaha.

Qodobka 24aad Cusbooneysiinta Dammaanadda

1. Marka joogitaan la siiyey qof ajnabi ah la cusbooneysiinayo, dammaanadda ku xiran iyo muddadii iyo cadadkii lacageed ee ay

xaddiday Hay"addu ee ku cad Qodobka 23aad ee Sharciga Socdaalka, markale ayaa dib loo cusbooneysiinayaa, waxaana cusbooneysiinaya la-dammaanad-qaadaha wakiilkiisa.

2. Haddii qofka loo-shaqeeyaha ah iyo qofka ajnabiga ah ku heshiiyaan shaqo ka bedelan middii hore iyo waqti ka dheer muddadii hore, iyadoo la tixgelinayo xaaladda is-bedelka, Hay"addu waxay dalban kartaa caddeymo iyo wax-ka-bedel dammaanadii hore, waxaana
   lagu salaynayaa nooca iyo muddada shaqada cusub ee ay isku af-garteen ajnabiga iyo wakiilkiisa.

Qodobka 25aad Baabi'inta Dammaanadda

1. Haddii qof ajnabi ah oo la siiyey joogitaan dammaanad leh dalka JFS, ka dibna la siiyo deganaansho joogto ah, dammaanaddii magaciisa lagu bixiyey way baaba"aysaa.
2. Haddii qofka ajnabiga ah oo la siiyey joogitaan ku xiran dammaanad shuruud leh oo uu si kama-dambays ah uga baxo dhulka JFS, isla markaana uu la yimaado kharashkii uu ku bixi lahaa ee ku-noqoshada dalkiisa, waxaa la baabi"inayaa dammaanaddii hore loogu sameeyey, iyo wixii curaar ah ee ku xirnaa joogitaankiisa, marka ay isku waafaqaan hay"addii ama qofkii uu dammaanadiisa dalka ku joogay.
3. Qofka ajnabiga ah oo dalka ku yimid shaqo dammaanad leh, kama qaban karo dalka shaqo kale inta ay jirto muddadii dammaanadii hore loogu keenay. Haddii uu raali ka yahay qofka dammaanaddiisa uu dalka ku joogay in loo soo gaabiyo muddadii

joogitaankiisa waa la baabi"inayaa joogitaankii iyo dammaanadii hore, dalka ayuuna ka baxayaa.

4. Haddii uu u wareego qofka ajnabiga ah shaqo kale iyadoo uu jiro heshiiskii hore, shaqadiina uu ka tago, qofka ajnabiga ah waxaa laga qaadayaa wixii kharash ah ee wakiilkiisa uga baxay joogitaankiisa iyo keenistiisa, markaas ka dib waxaa la baabi"inayaa dammaanadii, waxaana dalka looga saarayaa si dhammeystiran.
5. Qofka ajnabiga ah markuu iska gudo wixii kharashaad ah, dalkana ka baxo, wuu ku imaan karaa shaqo kale.

Qodobka 26aad

Wax-ka-bedelka iyo Kala-noqoshada Rukhsadda Joogitaanka Dalka

1. Agaasimaha Guud Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda isagoo wargelinayaa Wasiirka Amniga Gudaha, wuxuu awoodaa in uu wax-ka-bedel ama kala-noqod ku sameeyo oggolaansho kasta oo lagu soo saaray si waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo

   Xeernidaamiyahan, isagoo qaab qoraal ah ku muujinaya go"aankiisa, marka ay yimaadaan xaaladaha soo socda:

   b. haddii qofka haysta oggolaanshaha ama wakiilkiisa uu bixiyey macluumaad khaldan, markii codsiga oggolaanshaha la soo gudbiyey ama oggolaanshaha lagu helay matalaad been ah, xog si ula-kac ah looga tegay ama la qariyo xog muhim ah;

   t. haddii qofka haysta oggolaanshaha uu ku guul-darreysto in uu dhawro mid ka mid ah shuruudaha ku cad oggolaansha ama

qofka haysta oggolaansha uu ku lug yeeshay shaqo aan ahayn shaqadii lagu siiyey oggolaanshaha, isagoo aan haysan fasaxa Hay'adda ama kan Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada; ama

j. haddii uu ka tago ogaal la"aanta wakiilkiisa shaqadii uu dalka ku yimid

2. Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha wuxuu markasta baabi"in karaa oggolaansho soogelid ama midda degaan ee la siiyey qof shisheeye ah, si waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo Xeernidaamiyahan, isagoo faraya Hay'adda, caddeynayana sababta keentay in la baabi'iyo oggolaanshaha qofka ajnabiga ah si loogu daro keydinta xogta shakhsiga.
3. Haddii oggolaansho joogitaan lagala noqdo qofkii la siiyey, waxaa la soo saarayaa wargelin ku saabsan kala-noqoshadaas, si waafaqsan sharciga iyo Xeer-nidaamiyahan, wuxuuna noqonayaa sida soo socota:

b. in shakhsi ahaan lagu wargeliyo go'aanka kala-noqoshada qofkii haystay oggolaanshaha; iyo

t. sababaha kala-noqoshada keenay, taariikhda kala-noqoshadu ay dhaqan-gelayso iyo waqtiga kama-dambaysta ah ee ka-bixitaankiisa dalka.

4. Haddii qofka ajnabiga ah ay ka dhammaato muddadii oggolaanshaha, waa in uu dalka ka baxaa markuu dhiibo lacagta ay keentay muddadii uu dhacsanaa oggolaanshuhu, si waafaqsan Qodobka 25aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya.

5. Ajnabiga lagala noqday oggolaansho aan dhicin waxaa la siinayaa muddo ugu yaraan 7 (todobo) maalmood ah ugu badnaanna 3 (saddex) bilood, waxayna ku xiran tahay sababta keentay kala-noqoshada oggolaanshaha.
6. Qofka Ajnabiga ah waxaa kale oo lagala noqon karaa oggolaanshaha joogintaanka dalka JFS markuu ku dhaco xukun maxkamadeed ee ciqaab ah, isla markaana ay muuqato in dembiga lagu helay yahay mid aan ku haboonayn in uu sii joogo dalka uuna dhammeysto muddadii xukunka.

Qodobka 27aad

Khidmadda Oggolaanshaha Soo-gelista, Joogitaanka iyo Degista Dalka JFS

1. Bixinta iyo cusbooneysiinta oggolaanshaha ku cad faqradaha kala duwan ee Qodobka 12aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Sharci Lr.006 ee Maarso 2023 iyo Xeer- nidaamiyahan waxay ku xiran yihiin bixinta khidmadaha (tariff) lagu jaan-gooyo Xeer gaar ah oo ay soo wada saaraan Wasiirrada Wasaaradaha Amniga Gudaha iyo Maaliyadda.
2. Xeerka lagu jaan-gooynayo khidmadaha oggolaanshaha ee laga bixiyo Safaaradaha dibadda, Ganaaxyada dadka iyo Gaadiidka ee ku qeexan Sharciga Socdaalka iyo

   Xeernidaamiyahan waxaa soo jeedinaya Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda oo mas"uul ka ah adeegyadda Socdaal iyo dokumentiyada safar ee laga bixiyo Safaaraddaha Dibadda, iyadoo ka talo-gelinaysa Wasaaradda Maaliyadda, waana in ay ka

fariistaan iskuna raacaan Wasiiradda Wasaaradaha Amniga Gudaha iyo Maaliyadda, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirradda ee Xukuumadda JFS..

3. Bixinta iyo cusbooneysiinta oggolaanshaha ay qeexayaan Sharciga Socdaalka iyo Xeernidaamiyehani waxaa shardi u ah in qofka loo soo saarayo oggolaanshaha uu bixiyo khidmadda ku waajibtay ee ku xaddeysan nooca iyo oggolaanshaha la siinayo.

Qodobka 28aad

Ka-dhaafidda Khidmadaha Oggolaanshaha Dadka Leh Mudnaanta iyo Xasaanadaha La Xiriira Heshiisyada Caalamiga ah

Qodobbada Sharciga iyo Xeer-nidaamiyihiisa saameyn kuma yeelanayaan Heshiisiisyada Caalamiga ah oo ay qeyb ka tahay JFS, kuwaasoo la xiriira ka-dhaafiddda khidmadaha oggolaanshaha leh mudnaanta, sharafta iyo xasaanadda gaarka ah ee Dawladaha Soomaaliya aqoonsan tahay, sida:

b). ajnabiga u yimaada dalka hawl diblomaasiyadeed markuu ku soo galo sifo sharci ah, islamarkaana ay oggolaatay Wasaaradda Arrimaha Dibadda JFS;

t). ajnabiga ku yimaad dalab iyo heshiis ay la gashay mid ka mid hay"addaha Dawladda

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo u idmatay qabashada shaqo muhiim u ah dalka; iyo

j). shaqaalaha rasmiga ah ee Qaramada Midoobay (UN) ee haysta dokumentiga safar ee Qaramada Midoobay.

CUTUBKA SHANAAD HABKA LOO RAACAYO DADKA SAARAN GAADIIDKA BADDA, DIYAARADAHA IYO BAABUURTA SOO GELAYSA AMA KA BAXAYSA DALKA JFS

Qodobka 29aad

Waajibaadka Bixinta Liiska Rakaabka (Manifest List) Iyo Ganaaxyada Ka Dhasha

1. Dhammaan gaadiidka badda, diyaaradaha iyo baabuurta soo gelaya ama ka baxaya barxudeedyada JFS waxaa waajib ku ah in ay si hor-maris ula wadaagaan Sarkaalka

   Socdaalka nuqul liiska rakaabka oo uu saxiixay mas"uul awood u leh ka hor muddo 1 (hal) saac ah imaanshaha gaadiidka dalka JFS.

2. Nuqulka Liiska Rakaabka ee uu saxiixay mas"uulka awoodda u leh wuxuu caddeynayaa arrimaha soo socda: b). magacyada rakaabka;

   t). xubnaha shaqaalaha; iyo

   j). haddii ay jiraan dad kale oo saaran gaadiidka oo loo kala saaray darajooyinkooda shaqo, isla markaana uu bixiyo wixii macluumaad ah ee laga codsaday.

3. Ka-baaqsashada bixinta Liiska Rakaabka (manifest list) waqtiga ku habboon ee Gaadiidka waxaa ka dhalanaya:

   b. **diyaaradaha**- Ganaax lacageed oo dhan US$2,000 (labo kun Doolarka Maraykanka) ama lacag shillin Soomaali u dhigma;

   t. **gaadiidka badda**- Ganaax lacageed oo dhan US$1,500 (kun shan boqol Doolarka

Maraykan) ama Shillin Soomaali u dhigma; iyo

j. **gaadiidka dhulka**- Ganaac lacageed oo dhan US$1,000 (kun Dollarka Maraykanka).

4. Waxayaabaha ka dhalan kara haddii aan la helin liiska rakaabka gadiidka saaran ama lagu helo khaladaad ama dad dheeraad ah oo gaadiidka saaran: b. waxaa la hakin karaa gaadiidkaas socodkiisa;

t. marka qofka ajnabiga ah uusan oggaalansho ku imaan, isagoo uusan ka warqabin mas"uulka gaadiidka ama ka war hayo waxaa lagu ganaaxayaa gaadiidka lacag dhan US$5,000 -10,000 (shan kun ilaa toban kun Doolarka Maraykanka) ama Shillin Soomaali u dhigma, iyo in uu dib u celiyo ajnabigii uu sharci-darradda ku keenay dalka JFS; iyo

j. qofka ajnabiga ah ee ku sii nagaada dalka isagoo aan haysan oggolaansho waxaa lagu dalacayaa ganaax ku waajibay inta uu dalka ku sugnaa kaasoo ah ganaax dhan US$10 (toban Doolarka Maraykanka) maalintiiba.

5. Tacadiyada ay rakaabka u geystaan maamulka diyaaradaha iyo gabood-fallada ay shirkadaha iyo maamulka diyaaradaha sameeyaan, waxaa ka mid ah: b. in uu ka reebo safar sababo isaga u gaar ah;

t. in uu qof aan safar ku qornayn u fududeeyo in uu raaco diyaraadda ama gadiidka kale;

j. in uu ka reebo qof safar isagoo ku bedelaya qof kale;

x. in uu safarka u oggoaalado qof aan haysan dokumenti safar oo sax ah; kh. in uu rakaabka ballamiyo waqtiga loogu talo-galay

waqti ka badan, taasoo keenaysa dhibaateynta qofka ama sumcad-xumada shaqada sarkaal kasta oo ku hawlan shaqadiisa iyo guud ahaan shaqada Hay"adda;

d. in uu ku dhaqaaqo musuq-maasuq, is-daba-marin iyo anshax-xumo lid ku ah xeernidaamiyahan, sharciga socdalka iyo sharciyadda kale ee dalka iyo dhammaan habraacyada iyo siyaasadaha gaarka ah ee Hay"adda; iyo

r. in uu keeno shaqaale diyaaradeed (crew) oo aan sharciga waafaqsanayn.

6. Diyaaraddii lagu helo in ay ku kacday falalka ku xusan Faqradda (5) ee isla Qodobkan waxay mutaysanaysaa ganaax lacageed oo dhan US$2,000 – 3,000 (labo kun ilaa saddex kun Doollarka Maraykanka) ama Lacag Shillin Soomaali u dhigma.

Qodobka 30aad

Soo-gelid Ku-meel-gaar ah

Si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo Qodobka 12aad ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya, Hawl-wadeennada HSJS waxay awood u leeyihiin bixinta oggolaanshaha, waana in uu noqdaa warqad, shaabbad ama dhejis (sticker) la saaray dokumentiga safarka.

Qodobka 31aad

Ciqaabta Uu Mudanayo Milkilaha, Wakiilka Ama Qofka Mas'uulka Ka Ah Gaadiidka Badda, Diyaarad iyo Baabuur

1. Marka laga reebo muwaadiniinta Soomaaliyeed ee leh maqaam la mid ah socdaalka qofka ajaanibka ah ee hoos ku qoran, kana soo safraya meel uusan ka heli karin adeegga uu u baahan yahay (go home), aysanna joogin safaarad ama qunsuliyad Soomaaliya, dareenkooduna yahay in ay dalkooda dib ugu soo laabtaan, waa in ay shirkaduhu dadkaas ku soo wargeliyaan Waaxda Xuduudaha HSJS ka hor inta aysan u oggolaan in ay gaadiidka soo raacaan.
2. Shisheeyaha ku safraya baasaboor ajnabi oo cimrigiisu yahay wax ka yar 6 (lix) bilood, ma imaan karaan Soomaaliya, gaadiid kasta oo fulin-waaya amarkan waxaa lagu ciqaabayaa sIda uu qabo Qodobka 29aad ee Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 32aad

Maxkamadda Awoodda U Leh Xayiraadda Gaadiidka Badda, Diyaradaha iyo Baabuurta

1. Gaadiidka keena ajnabi aan raali laga ahayn ama aan rukhsad u haysan soo-gelitaanka dhulka JFS, saraakiisha socdaalku waxay ku fulinayaan ganaaxa uu jaan-goynayo sharciga Socdaalka iyo xeer-nidaamihan.
2. Hay"adda Duulista Hawadu waxay amraysaa in aysan kicin diyaaraddu inta uu milkilaha ama wakiilka gaadiidkaasi ka fulinayo amarka Saraakiisha Socdaalka ee sharcigu tilmaamayo.

3. Haddii ajnabiga aan raaliga laga aheyn uu hore u haystay oggolaansho aan dhicin waxaa dib loogu celinayaa si aan dib-u-dhac lahayn gaadiidkii keenay.
4. Ajnabiga aan raaliga laga ahayn ee soo galo gudaha dalka JFS, maxkamada awoodda u leh waxay go"aaminaysaa sii-haynta ama xayiraada gadiid kasta ee lagu keenay ajnabigaas, inta laga fulinayo hab-raacyada xeer-nidaamiyahan.
5. Haddii milkilaha ama mas"uulka gaadiidka ganaax ku dhaco maxkamada waa in ay siihaysaa ama xayirtaa gaadiidka badda, diyaaradaha iyo baabuurta ilaa inta uu ka bixnayo lacagta ganaaxa, tasoo lagu sheegay Xeer-nidaamiyahan, Qodobka 31aad (2).

CUTUBKA LIXAAD WAAJIBAABKA AJAANIBTA EE DIIWAAN-GELINTA CINWAANNADOODA

Qodobka 33aad

Waajibaadka Ajaanibta Ka Saaran Diiwaan-gelinta Cinwaannadooda

1. Waxaa waajib ku ah ajaanibta joogta dalka JFS in ay qoraal ahaan ugu wargeliyaan Saraakiisha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda halka ay degan yihiin ama wixii is-beddel ah oo ku yimaada cinwaannadooda ay degaan iyo goobta shaqo waqti kasta.
2. Waa mas"uuliyad saaran loo-shaqeeyaha in uu ku wargeliyo saraakiisha dabo-galka ajaanibta ee Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda nooc kasta oo dhaqdhaqaaq ah ee degaan ama shaqo ee uu sameynayo ajnabiga u shaqeeya.

3. Ka-baaqsashada wargelinta waxaa mas‟uuliyadeeda qaadaya loo-shaqeeyaha xataa haddii uusan bixin amarka keenay is-bedelka cinwaanka ajnabiga.

Qodobka 34aad

Goobaha Dalka ee Ka Reebban Ajaanibta

1. Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha wuxuu awood u leeyahay, isagoo la tashanaya Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga iyo ciddii kale ee ay khuseyso in uu soo saaro hab- raac koobaya liiska magacyada goobaha JFS ee ka reebban inuu booqdo qof kasta oo ajnabi ah.
2. Fulinta hab-raacan waxaa kaalin weyn ku leh shirkadaha dalxiiska iyo wasaaradda ku shaqada leh waxaana lagu bandhigayaa baraha rasmiga ah ee hagaya dalxiiseyaasha iyo guud ahaan dadka ajaanibta ah.

Qodobka 35aad

Shaqo-Ka-Joojinta Qofka Ajnabiga ah

1. Waxaa shaqada looga joojin karaa qofka ajnabiga ah haddii uu ku jiro labadan xaaladood midkood:

b. in uusan hayn shaqadii uu u qaatay oggalaanshaha; ama

t. in uu ku lug yeesho shaqo ka duwan middii ku caddeyd oggolaanshaha shaqada.

2. Haddii qof ajnabi ah si lama filaan ah u soo gebengabeeyo shaqadiisa, waa in uu la socodsiiyo Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda

Soomaaliyeed muddo 7 (todobo) maalmood gudahood ah oo ka billaabanaysa maalinta ay shaqadu ka dhammaatay qofkaas.

Qodobka 36aad

Ku-Ekaanshaha Ajaanibta Shaqada Ay Dalka U Yimaadeen

1. Qof kasta oo ajnabi ah ee dalka loo keenay in uu qabto shaqo cayiman taasoo qof muwaadin Soomaaliyeed ah uusan lahayn aqoonteeda, waxaa ka reebban in uu qabto shaqo kale oo ka duwan middii loo keenay dalka.
2. Waxaa sidoo kale qofka ajnabiga ah ka reebban in uu iskiis u abuurto shaqo si madaxbannaan, sida haddii ay dhacdo in uu ku fakero in uu sameysto shirkad ama wax la mid ah oo uu si madax-bannaan uga hawl-geliyo dalka, waxaa ku waajaib ah haddii uu rabo inuu si iskiis ah shaqo abuurto:
   b. inuu ku wargelinayo joojinta shaqadiisii hore Xafiiska Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo HSJS ugu badnaan 7 (todobo) maalmood gudahood laga billaabo taariikhda shaqadii uu hayey ka joogsaday; iyo
   t. inuu dalka ka baxo kana soo codsado oggolaansho dal-ku-gal dalka dibaddiisa, isagoo raacaya Faqradda (3) ee Qodobkan.

Qodobka 37aad Ajnabiga Aan Raali Laga Ahayn

1. Haddii ay dhacaan duruufaha soo socda, qofka ajnabiga ah waxaa loo aqoonsan karaa in uu yahay mid aan raali laga ahayn, waxaana

loo diidi karaa in uu dalka soo galo ama waxaa laga musaafurin karaa dalka si waafaqsan Xeer-nidaamiyahan iyo Sharciyada dlaka:

b. haddii loo keeno amar musaafurin ah oo ka soo baxay Dawladda JFS, laguna soo saaray sida uu qabo Sharciga iyo xeer-nidaamiyehiisa ama sharci kale oo xilligaas dhaqan-gal ah;

t. haddii uusan haysan dhaqaale ku filan noloshiisa muddada uu jooga dalka JFS;

j. haddii uu ku lug yeesho ka-shaqeynta ama daabulidda maan-dooriye ama falal kale oo shuruucda dalku mamnuuceen;

x. haddii uu ku lug yeesho ama looga shakiyo ku lug lahaanshaha tahriibinta dadka ama ka-ganacsiga sharci-darrada ah ee xubanaha bani‟aadamka;

kh. haddii uu ku lug yeesho ama looga shakiyo si mug leh inuu ku lug leeyahay keenista ama ganacsiga hub ama rasaas sharci-darro ah;

d. haddii saraakiisha caafimaadka dawladda ay xaqiijiyaan in qofka shisheeyaha ahi uu qabo cudur halis ku ah nolosha iyo fayo-qabka caafimaadka bulshada;

r. haddii uu dalka JFS ku soo galay si sharci-darro ah, isagoo aan haysan dokumentiyada safarka ee saxda ah ama oggolaansho waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo Xeernidaamiyahan;

s. haddii uu yahay codsade hore looga diiday codsigiisa in loo aqoonsado qaxootinimo, iyadoo la eegayo sharciyada dalka iyo Axdiga QM ee Geneva 1951 (UN Geneva

Convention 1951); sh. haddii joogitaanka qofka ama oggolaanshihiisu uu halis ku yahay nidaamka dadweynaha, amniga qaranka, danta-guud, akhlaaqda ummadda ama caqiidada diinta; iyo

dh. haddii uu yahay mid fidinaya mabaadi" aan dalka laga oggolayn.

2. Go"aanka ah in qof shisheeye ah uu yahay mid aan raali laga ahayn waxaa lagu go"aaminayaa sida ku cad faqradda (1) (b-dh) ee Qodobkan, marka laga reebo dadka dalka looga saaro go"aannada siyaasadeed.

Qodobka 38aad

Waajibaadka Saraakiisha Socdaalka Ee Ku Aadan Ajnabiga Aan Raaliga Laga Ahayn

Saraakiisha Socdaalka ee ka hawl-gala xarumaha kala duwan ee Hay'adda waxaa sharci ahaan ku waajib ah:

b. in ay hakiyaan una gudbiyaan Booliska qof kasta oo ajnabi ah oo aan raali laga ahayn, kaasoo lagu helay inuu ku xad-gudbay Sharciga iyo Xeer-nidaamiyahan, isagoo ku sugan dalka JFS, isla markaasna ay ku wargeliyaan Maxkamadda awoodda u leh, iyadoo la tixgelinayo hab-raacyada Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee dalka oo xiriirka la leh arrintaas;

t. in ay ka hor-istaagaan ajnabiga aan raali laga ahayn inuu ka soo dego gaadiidka badda, diyaarad, baabuur ama gaadiid kale oo

ku sugan dalka JFS ama lug ku soo galo, haddii uusan ahayn qof qaxootinimo doonaya;

j. in ay dib ugu celiyaan gaadiidkii dalka keenay ajnabiga aan raaliga laga ahayn;

x. in ay u musaafuriyaan ajnabiga aan raaliga laga ahayn dalkii uu u dhashay ama dalkii uu safarkiisa u dambeeyey ka soo billaabay;

kh. qofka ajnabiga ah waa in uu dalka uga baxaa sida ugu dhaqsaha badan oo ah muddo aan ka badnayn 7 (todobo) maalmood, laga billaabo taariikhda lagu wargeliyey, haddii aan Maxkamadi ku xukumin muddo intaas ka duwan; iyo

d. muddada diyaarinta safarkiisa waxaa lagu haynayaa xabsiga ama haddii ay jiraan goobo loo cayimay in lagu hayo dadka sifahaas leh.

Qodobka 39aad
Dadka La Musaafurinayo

1. Qofka ajnabiga ah waa laga saaraya dalka, haddii Maxkamadda awoodda u leh ay amarto saaritaankiisa, muddo sharci ah oo cayiman gudaheed.
2. Ajnabiga ay go'aan siyaasadeed Dawladdu ku soo saarto in dalka laga saaro;
3. Ajnabiga ku xad-gudba sharciyadda dalka, waxaa dalka looga saaraayaa goo'aanka Agaasimaha Guud ee Hay"adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, waxaa si qoraal ah lagu gaarsiinayaa qofka ajnabiga ah iyo dhinacayada ay khuseyso go'aanka ka soo baxay Agaasimaha Guud.

4. Go'aanka soo baxay waa in uu wehliyaa amarka saaritaanka oo waqtigiisu cad yahay iyo sidoo kale hab-raaca loo marayo.
5. Qofka ajnabiga ah ee lagu amray inuu ka baxo dalka JFS, waa la sii-haytn karaa haddii sidaas Maxkamadi oggolaado, inta laga dhammeystirayo hawlaha looga saarayo dalka, iyo sidoo kale haddii ay hay'adda ula muuqato in ajnabigaas baxsan karo ama carqalad kale geysan karo inta hawlihisa laga dhammeystirayo.

Qodobka 40aad

Dhigista Curaar Si Loo Fuliyo Amarka Musaafurinta

1. Waxaa lagu amri karaa qofka ajnabiga ah ee laga saarayo dalka JFS in uu dhigo lacag curaar ah “deposit” oo ku filan kharashka lagu musaafurinayo ama lagu sii-haytnayo.
2. Si waafaqsan faqradda sare ku xusan ee Xeer-nidaamiyahan, wixii ka soo hara lacagta curaarta ah ee lagu fulinayo ama lagu sii-haytnayo qofka ajnabiga ah, waxaa dib loogu celinayaa isla isaga markuu dhoofayo ama ka gudbayo bar-xuduudeedka dalka JFS.
3. Haddii qofka ajnabiga ah uusan haysan kharash ku filan oo lagu musaafuriyo, waxaa kharashka masaaafurintiisa ku baxaya bixinaya wakiilka qofka ajnabiga ah ee dalka soo geliyey.
4. Muddada laga mamnuncayo waddanka ajnabiga la musaafuriyey in uu dib ugu soo laabto kama yaraan karto muddo 6 (lix) bilood ah, haddii aysan Maxkamadi xaddidin waqti ka duwan.
5. Masafurinta ka dhalata demibiyada la xariira dhinaca socdaalka waxaa fulinaya HSJS iyadoo la raacayo Sharciga Socdaalka ee HSJS iyo sharuucda kale ee dhaqan-galka ah.

Qodobka 41aad

Ka-noqoshada Amarka Musaafurinta

Wasiirka Amniga Gudaha ayaa awood u leh ka dhaafo amarka musaafurinta ee ka dhanka ah qofka ajnabiga ah, haddii aysan Maxkamadi xukumin musaafurintiisa si waafaqsan shuruucda dalka, isagoo sababaynaya.

CUTUBKA TODDOBAAD KA-SOCDAALIDDA DALKA JFS

Qodobka 42aad
Dokumentiyada Safarka

Baasaboor ama dokumenti safar waxaa noqon kara sida ay qabaan Xeerka Baasaboorada, Xeernidaamiyahan iyo Sharciga Socdaalka JFS:

b. Baasaboorka caadiga ah (Ordinary passport) kaasoo ku soo baxa codsiga muwaadin Soomaali ah;

t. Basaaboorka shaqaalaha dawladda (service passport) oo ku soo baxa codsi ka yimaada shaqalaaha dawladda oo ay u soo gudbiso hay"adda uu u shaqeeyo;

j. Baasaboor diblomaasi ah (diplomatic Passport) oo loo soo saaro qof dalka JFS ka haya xil sare sida uu qabo xeer-nidaamiyahan iyo Sharciga Socdaalka Qodobkiisa 42aad (3) sida:

i. Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, xaasaskiisa iyo Caruurtiisa; ii. Madaxweyneyaashii Hore ee JFS, xaasaskooda iyo caruurtooda;

iii. Ra"iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, xaasaskiisa iyo caruurtiisa, iyo dhammaan

Ra"iisul Wasaareyaashii xilka baneeyey; iv. Xubnaha labada aqal ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya, xaasaskooda iyo caruurtooda aan qaan-gaarka ahayn iyo Dhammaan Xildhibaanadii hore;

v. Xubanaha Golaha Wasiirrada;
vi. Guddoomiyaha Maxakamadda Sare; vii. Guddoomiyaha Maxakamadda Dastuurka; viii. Garyaqaanka Guud ee Dawladda;
ix. Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka;
x. Diblomaasiyiinta Wasaaradda Arrimaha Dibadda ka hawl-gala; xi. Jananada (sareeyeyaasha) Ciidamada Qalabka Sida; xii. Madaxweyneyaasha Dawlad-goboleedyada iyo Ku-xigeenadooda; xiii. Guddoomiyeyaasha Baarlamaanada Dawlad-goboleedyada iyo Ku xigeenadooda; iyo
xix. Mas"uulkii kale ee uu u garto Madaxweynaha JFS.

x. baasaboor, loogu safrayo loogana soo laabanayo dalka;

kh. dokumentiga Safarka Qaxootiga oo loo soo saaro qaxootiga magan-gelyada ka helay

Soomaaliya, si waafaqsan Sharciyada dalka iyo Axdiga QM ee Geneva 1951;

d. Warqadda guryo-noqoshada (go home) oo loo soo saaro muwaadin aan markaas haysan baasaboor saxan laakiin xaq u leh, ayna qasab tahay in uu u soo safro Soomaaliya, iyadoo ay ugu wacan tahay aalad degdeg ah, sida jiro halis ah, tarxiil, geeri ama dibugu-laabasho dal; iyo

r. Buugga bad-maaxa oo lagu soo saarayo dalabka Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda.

Qodobka 43aad
Saxnaashaha Baasaboorada iyo Dokumentiyada Safarka

1. Baasaboorka caadiga ah, midka diblomaasiga ah iyo kan shaqadaba waxaa looga gudbi karaa dalalka caalamka dhammaan marka laga reebo dalalka lagu xusay baasaboorka gudihiisa in aan lagu tegi karin.
2. Dokumentiyada safarka degdegga ah waxaa keliya oo ay sii shaqeyn karaan muddo kooban oo lagu xuso dokumentiga safarka degdegga ah ee duruufi keentay laguna tagayo keliya dalka safarka loo yahay.
3. Dokumentiyada safarka ee qaxootiga la siiyo waxaa loogu safri karaa dal kasta marka laga reebo dalka uu ka soo jeedo qofka qaxootiga ah iyadoo la tixgelinayo ammaanka qofkaas.

Qodobka 44aad

Safarka Caruurta Ka Yar (18) Sano

Caruurta ka yar 18 (sideed iyo toban) sano, waxaa waajib ah in waalidkiisu la socdo, ama qof awoodaas ay maxkamadi siisay oo xanaano sharci leh.

Qodobka 45aad

Xaddeynta Dadka Ku Safraya Baasboorada Dawladda

1. Sarkaalka HSJS wuxuu awood u leeyahay in uu oggolaado dadka uu u oggolaaday Sharcigu Baasaboorada Dawladda in ay ku safri karaan, marka laga reebo Baasaboorka Shaqaalaha Dawladda (Sarvice Passport) oo u baahan in la helo rukhsad safar (Nolo osto).
2. Sarkaalka HSJS waa in uu gutaa waajibaadkiisa isagoo hubinaya dadka ku safraya

   Baasaboorada dawladda in ay waafaqsan yihiin sida ay qabaan Sharciga Socdaalka iyo Xeer-nidaamiyahan, sida:

   b. in qofka ku safraya uu yahay qof dawladda u idmatay shaqo dawladeed oo waafaqsan ujeeddada baasaboorka loo siiyey; iyo

   t. in uu qofka safarkiisu yahay mid fasax ama oggolaansho qoraal ah (permission letter) ka haysto hay"adiisa.
3. Dadka ku safraya baasaboorada Dawladda waxaa lagu faahfaahinayaa sharciga baasaboorka.
4. Shaqaalaha Dawladda waxay ku safri karaan Baasaboorka Shaqada (Service Passport), waxayna xaq u leeyihim marka ay soo laabtaan in ay haystaan inta ay shaqaale Dawladeed yihiin.

Qodobka 46aad

Dadka Dib-u-soo-celinta Ku Imaanaya Dalka

1. Marka la hubiyo dadka dib loo soo celinayo muwaadinnimadooda waxa ay kasoo dagan karaan dalka oo dhan.
2. Safaarada Soomaaliya ee ku taal wadanka dadka laga soo celinayo waa in ay hubisaa muwaadinimada dadka la soo celinayo:
   b. qofka aan muwaadin ahayn ee hore u haystay baasaboorka Soomaaliga ah, sababtii ay doonto ha noqoto, waa laga celinayaa; iyo
   t. u-qeybsanaha ka hawl-gala Safaaradu wuxuu ka celinayaa baasaboorka isagoo la wadaagaya xogtaas safiirka si safaaradu ugu wargeliso safaaradda dalka uu u dhashay si ay qeyb uga noqoto caawinaada uu u baahan yahay shakhsigaasi dhammeystirkeeda;
3. Dadka la soo celinayo waa in ay u soo gudbiyaan shirkadaha diyaaradaha warbixintooda HSJS oo ku saabsan tirada iyo xogtooda si loo hubiyo saxnaanshaha dadka la soo celinayo.
4. Shirkadii u hoggaansami-waysa tilmaamaha lagu sheegay qodobkan waxaa lagu fulinaya ciqaabta ku xusan Qodobka 31aad (3) ee Sharciga Socdaalka.

Qodobka 47aad

Ka-dhoofidda Dalka JFS

1. Qof kasta oo ka dhoofaya dalka JFS wuxuu xaq u leeyahay in uu ka dhoofo baraha rasmiga ah ee laga dhoofo.
2. Shirkadaha diyaaradaha ee ku xad-gudba rakaabka diyaaradda raacaya iyo nidaamkiisa waxay muteysanayaan ganaax iyo ciqaab sida ku cad Faqradda (4) ee Qododbkan.

3. Waxyaabaha xad-gubka oo shirkadda diyaaradu ku muteysan karto ciqaabta waxaa ka mid ah:

b. duullimaadka oo daaha iyadoo aysan jirin sabab la garwaaqsan karo;

t. hubin-la‟aan rakaabka diyaaradda ku qoran taasoo keentay in uu raaco rakaab aan ku jirin liiska (Manifist list) diyaaradda; ama

j. rakaabka ku qoran diyaaradda oo loo reebay sabab la‟aan ama in lagu bedelo qof kale.

4. Dhammaan khaladadkaas waxaa ka dhalanaya ciqaab isugu jirta mag-dhaw, ganaax lacageed ama shaqo-ka-joojin lagu sameeyo diyaaradda iyo hawl-wadeennada ka dib marka la hubsado xil-gudasho-xumada (tort of negligence) ka timid dhinaca shirkadda diyaaradda sida ku cad Qodobka 29aad (5) ee Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 48aad

Waxyaabaha Laga Rabo iyo Dokumentiyada Looga Baahan Yahay Qofka Dhoofaya

1. **Muwaadin** waxaa looga baahan yahay:

b. in uu soo qaato warqadda raacidda diyaaradda (boarding pass);

t. in uu wato dokumenti safar oo Soomaali ah (Baasaboor) oo sax ah laguna baxshay sifo sharci ah oo ay dhicistiisa ka dhiman tahay ugu yaraan 6 (lix) bilood;

j. in uu haysto dal-ku-galka wadanka (visa) uu u socdo oo sax ah ama waa in la xaqiijiyo in uu yahay qof u safraya wadan aan dal-ku-gal laga rabin muwaadinka Soomaaliga ah;

x. in uu haysto tikit (ticket) bixid iyo soo-noqosho

ah (round trip); kh. in laga hubiyo liisaska dadka

lagu raad-joogo ama doonayo;

d. in sarkaalku hubiyo taariikhaha socdaalada muwaadinku hore u sameeyey;

r. in la geliyo habka bixidda (Exit System);

s. in dokumentigiisa la saaro shaabbadda caddeynta bixidda si sax ah; iyo sh. haddii muwaadinku ku safrayo baasaboor dawladeed (Dublomaasi ama Shaqaale), waxaa looga baahan yahay warqadda fasaxa, marka laga reebo Madaxda sare ee JFS.

2. **Ajnabi** waxaa looga baahan yahay:

b. in uu soo qato warqadda raacidda diyaaradda (boarding pass);

t. in uu buuxiyo foomka bixidda;

j. in laga hubiyo in uu haysto dal-ku-gal ama dal-ku-joog Soomaali ah oo aan dhacsanayn;

x. in laga hubiyo liisaska dadka lagu raad-joogo ama la doonayo ama dadka ay hakin safar ka taal;

kh. in uu haysto wax caddeynaya oggolaanshaha dalka uu u socdaalayo (Dal-ku-gal,

Dalku-joog, Degenaansho, Oggolaanshiyo, ama u Dhalasho);

d. in sarkaalku hubiyo taariikhaha socdaalada shakhsigu hore u sameeyey;

r. in la geliyo habka bixidda (Exit System); iyo

s. haddii hawl-qabadka uu sarkaalku ku filnaan-waayo wuxuu u gudbinayaa Kormeeraha Barta oo u sii gudbinaya Madaxa Laanta, haddii uu Kormeeruhu ku filnaan-waayo go‟aan-ka-gaarista arrinka.

CUTUBKA SIDEEDAAD ILAALINTA, WAAJIBAADKA IYO XUQUUQDA QAXOOTIGA

Qodobka 49aad
Shuruudaha Qaxootinimada

1. Maadaama 1962 ay Soomaaliya ka mid noqotay saxiixeyaasha Heshiiska Qaramada Midoobay ee Geneva 1951 (UN Geneva Convention 1951) waxaa waajib ku ah fulinta xuquuqda qaxootiga.
2. Sharciga Qaxootiga Qaranka iyo Heshiiska Qaramada Midoobay ee Geneva 1951 waxay waajibinayaan qof waliba xaq u leeyahay in qaxootinimo loo aqoonsado, haddii uu weydiisto, si loo badbaadiyo noloshiisa iyo bed-qabkiisa, marka la hubsado arrimaha soo socda:
3. Qof kasta oo bani‟aadam ah waxa uu xaq u leeyahay in qaxootinimo loo aqoonsado haddii uu weydiisto sida uu qabo Sharciga Qaxootiga Qaranka iyo Heshiiska Geneva ee 1951, si loo badbaadiyo noloshiisa iyo bad-qabkiisa marka la hubsado arrimaha soo socda:

b. in uu ka cararay ama dibadda ka joogo dalkiisa cabsi waxyeello awgeed oo salka ku haysa midab, jinsiyad, caqiido diin, feker siyaasadeed ama ka-mid- ahaansho qeyb gaar ah ee bulshada, isla markaana uusan awoodin in uu dib ugu noqodo; ama

t. in uu jiro weerar dibadda ah, duulaan, la-wareegid shisheeye ama dhacdooyin si xooggan u saameynaya

nidaamka guud ee qeyb ama guud ahaan dalka uu qofku ka soo jeedo ama u dhashay oo dhan ama lagu qasbay in uu ka cararo meeshii uu caadi ahaan u deganaa si uu magangelyo ugu doonto dal kale oo ka baxsan kiisii asalka ahaa ama uu u dhashay.

Qodobka 50aad
Codsiga Qaxootinimada

1. Qofka dalbanaya in loo aqoonsado Qaxootinimada waa in uu:
   b. ku sugan yahay gudaha dalka JFS; iyo
   t. si dhaqso ah u wargeliyaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda oo arrintaas u xilsaaran ama Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha.
2. Hay'adda Socdaalka iyo Jnsiyaddu waxay sameynaysaa diiwaan-gelinta kowaad ee dadka qaxootiga ah iyo kuwa magan-gelyo-doonka ah, marka ay yimaadaan dalka JFS, iyadaoo siinaysa oggolaansho degaan ku-meel-gaar ah, sidoo kalena xogtooda la wadaagaysa Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha iyo hay'adaha u xilsaaran amniga dalka.
3. Guddiga Qaranka ee go'aan-ka-gaarista Qaxootiga ayaa qiimeyn ku sameynaya codsiga qaxootinimada, go'aanna ka gaaraya.
4. Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha waxay qofka qaxootinimada dalbaday siinaysaa Aqoonsi sheegaya qaxootinimada codsadaha, ka dib marka ay hesho go'aanka Guddiga Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga.

Qodobka 51aad Oggolaansha ama Diidmada Codsiga Qaxootinimada

1. Dawladda JFS waxay u madax-bannaan tahay in ay siiso ama u diido qofka dalbaday magan-gelyo ama qaxootinimo, si waafaqsan Shuruucda dalka iyo Axdiga QM ee Geneva 1951.
2. Si waafaqsan faqradda (1) ee Qodobkan, ma saameynayso dadka magan-gelyo- doonka ah ee xoriyadooda iyo naftooda ay khatar ku gelayso dalkii ay ka soo jeedeen ama ka yimaadeen.
3. Hay'adda Qaxootiga Qaranku waxay ku oggolaanaysaa ama ku diidaysaa magan- galyodoonka go'aanka uu gaaro Guddiga Qaran ee Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga si waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo shuruucda kale ee dalka- JFS dhaqan-galka ka ah.

Qodobka 52aad
Xubnaha iyo Shaqada Guddiga Go' aan-ka-gaarista Qaxootiga

1. Guddiga Go'aan-ka-gaarista Qaxootiga wuxuu ka kooban yahay Sagaal (9) xubnood, waana sida soo socota:
   b. Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha;
   t. Wakiil ka socda Wasaaradda Amniga Gudaha;
   j. Wakiil ka socda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda JFS;
   x. Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka;
   kh. Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Dibedda;
   d. Wakiil ka socda Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda;
   r. Wakiil ka socda Taliska Ciidanka Booliska ederaalka;

s. Wakiil ka socda Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha; iyo sh. Wakiil ka socdo Wasaaradda Caddaaladda.

2. Guddigani wuxuu wada-shaqeyn dhaw la yeelanayaa Hay'adda Qaramadda Midoobay u qaabilsan Qaxootiga (UNHCR) si ay u xaqiijiyaan gudashada waajibdkooda.
3. Shaqada Guddiga Qiimeynta Qaxootinimada waa qiimeynta iyo go'aan-ka-gaarista codsiyada qaxootinimada si waafaqsan Sharciga Socdaalka iyo Sharciga Qaxootiga Qaranka.
4. Guddiga waxaa shir-guddoominaya Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga Qaranka iyo Barakacayaasha sida ku cad faqradda (1) ee isla Qodobkan, waxayna shaqada Guddigu tahay:

b. oggolaanshaha iyo bixinta magan-gelyada Qaxootinimo; ama

t. diidmada magan-gelyada Qaxootinimada oo sababaysan.

CUTUBKA SAGAALAAD

CIQAABTA SAARAN SHAKHSIYAADKA KU XAD-GUDBA XEER-NIDAAMIYAHA

Qodobka 53aad

Gefaf Guud

1. Qofka kasta oo geysta xad-gudub lid ku ah Xeer-nidaamiyaha ama Sharciga Socdaalka waxaa dacwadiisa loo gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh go"aan-ka-gaaristiisa, iyadoo lagu abaal-marinayo si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS).

2. Qof kasta oo si kas ah ama ku-talo-gal ah u caawiyo qof kale in uu dalka ku soo galo ama uga baxo si xad-gudub ah ama ka hor-imanaysaa xeer-nidaamiyahan iyo sharciga socdaalka wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
3. Qof kasta oo sameeya ka-gudbin ama ka-bixid bar-xuduudeedka JFS isagoo aan ka haysan wax fasaxa ama oggolaansho ah Sarkaalka HSJS wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
4. Qof kasta oo si ku-talo-gala ah u siiyo qof kale kaalmo ama u oggalaado soo-gelidda ama ka-bixidda dalka JFS, isagoo jebinaya xeer-nidaamiyahan ama Qodobka 53aad ee Sharciga Socdaalka wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
5. Qof kasta oo diida in uu jawaab siiyo sarkaalka HSJS marka laga codsado wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
6. Qof kasta oo sheegta dokumenti ama baasaboor safar ee uusan lahayn wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
7. Qof kasta dokumentigiisa ama baasaboorkiisa u oggolaada in uu qof kale adeegsado isagoo u isticmaalaya safar sharci-darro ah, sida:

   b. si uu ugu tahriibo ama dalka uga baxo sifo sharcidarro ah;

   t. in uu ka sameeyo lacag isagoo iibsanaya baasaborkiisa ama dokumentiga si uu ugu baxo qof kale; ama

j. in uu ku baxsado qof ku jira liiska dadka aan loo oggoleyn in ay dalka ka baxaan.

8. Qofka lagu helo isagoo ku safraya baasaboor ama dokumenti safar oo aan waafaqsanayn xogtiisa shakhsiyadeed, wuxuu muctaysanayaa ciqaabta uu mudan yahay ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, sida:

   b. in aysan is-waafaqsanayn sawirka baasoorka ku dhegan iyo qofka wata;

   t. in aysan is-lahayn magaca qofka leh baasaboorka iyo qofka ku safrayo ama haysta dokumentiga; ama

   j. in aysan is-lahayn xogaha kale ee lagu xuso ama laga helo dokumentiga ama baasaboorka safarka.

9. Qof kasta oo awoodi-waaya ka-jawaabidda su"aalaha uu weydiiyo Sarkaalka HSJS ee la xariira bixinta macluumaad been-abuur ah, wuxuu mudanayaa ciqaabta ku habboon ee Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed (XCS).

Qodobka 54aad

Gefafka iyo Ganaaxyada Cayiman Ee Ka Dhasha Ku Xad-gudubka Xeer-nidaamiyahan

1. Qof kasta ama Sarkaalka oggolaada, isagoo aan fasax u qabin, ka-been-abuurid dokumenti dawladeed waxaa arrintiisa loo gudbinayaa maxkamada awoodda u leh go"aan-ka gaaristiisa, dokumentiyadaas waxay noqon kara:

   b. Baasaboor waa dokumenti dal sameystay lana aqoonsan yahay dal kalena lagu geli karo loogana soo bixi karo sifa sharci ah;

t. dal-ku-gal waa oggolaansho (entry clearance/visa) dal-ku-gal ah oo loo oggolaaday in uu qofku dalkaas ku galo sifo sharci ah;

j. dal-ku-joog waa rukhsad oggolaansho ah oo qof ajnabi ah ku joogi karo dalka JFS; iyo

x. warqadaha rasmiga ah sida dokumentiyada ee loo oggol yahay in ay ku baxaan shaqaalaha dawladda.

2. Tahariibinta dadka ama qof kasta oo fududeeya isagoo u maraya sifo sharci-darro ah waxaa loo gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh go‟aan-ka-gaaristooda.
3. Xeer-nidaamiyahan wuxuu mamnuucayaa ama gef ka dhigayaa qof kasta oo lagu helo safrinta dadka si jinsi ahaan looga ganacsado jirkooda, ama qofka in loogu shaqeysto sifo sharci-darro ah iyo ku xad-gudubka caruurta yaryar arrimihaas waxaa go‟aanka gaaraya ciqaabtooda maxkamadda awoodda u leh.
4. Qofka ajnabiga ah ee sii jooga waqtiga ka badan oggolaanshaha hore loo siiyey waxaa ku soconaya lacag dhan US$10 (toban Doolarka Maraykanka) maalintii sida uu qabo Qodobka 53aad (4) ee Sharciga Socdaalka Soomaaliya.

Qodobka 55aad Fulinta iyo Hirgelinta Xeer-nidaamiyahan

1. Fulinta xeer-nidaamiyahan iyo hirgelintaiisa waxaa u xilsaaran dhammaan ha‟yaddaha fulinta heer Federaal iyo heer Dawlad-goboleed ee ku shaqada leh hawlaha uu xeernidaamiyahan xeerinayo.
2. Dhaqan-gelinta xeer-nidaamiyahan waxaa mas‟uuliyad gaar ahi ka saaran tahay Hay‟adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed

(HSJS), iyadoo kaashanaysa dhammaan hay"adaha kale ee dawladda ee ay wada-shaqeynta la leedahay.

Qodobka 56aad
Xeer-nidaamiyeyaal iyo Hab-raaaacyo

1. Xeer-nidaamiyeyaasha iyo Hab-raacyada lagu hirgeliyo sharcigan waxaa soo diyaarinaya

   Agaasimaha Guud ee Hay"adda, ka dib Soo-jeedinta Wasiirka waxaa ansixinaya Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS.

2. Agaasimaha Guud ee HSJS waxaa kale oo uu soo saarayaa Hab-raacyo iyo Xeer- hoosaadyo lagu dardar-gelinayo hawlaha ay u xilsaaran tahay Hay"addu, hadba waqtiga ay kula habboonaato.

3. Haddii ay dhacdo in iska-hor-imaad dhex maro Xeer-nidaamiyahan iyo Xeernidaamiyeyaal hore u jiray, waxaa la raacayaa Xeer-nidaamiyahan dambe.

Qodobka 57aad

Baabi'in

Xeer-nidaamiyahani wuxuu baabi"inayaa xeer kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin xeer-nidaamiyahan oo ku saabsan arrimaha Socdaalka JFS.

Qodobka 58aad

Dhaqan-gal

Xeer-nidaamiyahani wuxuu dhaqan-gelayaa markuu ansixiyo Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ee Dawladda JFS.


HAY'ADDA SOCDAALKA IYO
JINSIYADDA
IMMIGRATION AND CITIZENSHIP AGENCY OF SOMALIA

Tariikh: 04/01/2024

Xeer Ra'iisul Wasaare Lr.147

XEERKA: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO JINSIYADDA SOOMAALIYEED

XRW - BIXIT
10 JAN 2024
OPM - EXT

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 99aad farqadaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Qodobka 100aad farqadaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.

Markuu arkay: Warqadda summadeedu tahay **WC/AD/925/2023 ee ku taariikheysan 11/12/2023** kuna saabsan codsi soojeedinta Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Amniga Gudaha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.59.01.24** ee **04/01/2024,** kuna saabsan ansixinta **Xeer-nidaamiyaha Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaliyeed'** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Markuu tixgeliyey: Muhiimadda uu leeyahay meel-marinta **Xeer-nidaamiyaha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaliyeed.**

Wuxuu Meel-mariyey:

Qodobka 1aad

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.59.01.24 ee 04/01/2024,** kuna saabsan ansixinta - Xeer-nidaamiyaha sharciga Jinsiyadda Soomaliyeed"oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad

Waxaa Wasaaradda Amniga Gudaha loo igmaday in ay hir-geliso, meel-marisana Xeer-nidaamiyaha sharciga Hay'adda socdaalka iyo jinsiyadda soomaaliyed.

Qodobka 3aad

Xeer-nidaamiyaha Sharciga Hay'adda Socdaalka Jinsiyadda Soomaliyeed waxa uu dhaqan-galayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN: 003-2024
TAARIIKH: 18-2-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse [illegible]
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

2023

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

XEER-NIDAAMIYAHA
SHARCIGA HAY'ADDA SOCDAALKA IYO
JINSIYADDA SOOMAALIYEED
(Sharci Lr. 012 ee Maarso 20, 2023)

CUTUBKA KOWAAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad:
Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa **"Xeer-nidaamiyaha Sharciga Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed".**

Qodobka 2aad:
Qeexid

1. Hay'ad: waxaa loola jeedaa Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS);
2. Wasaarad: waxaa loola jeedaa Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda JFS;
3. Wasiir: waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS);
4. Agaasimaha Guud: waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS);
5. Sarkaal: waxaa loola jeedaa hawl-wadeen ka tirsan Hay'adda Socdaalka iyo
Jinsiyadda Soomaaliyeed oo shaqadiisu tahay fulinta waajibaadka sharci ee
Hay'adda;
6. Mudnaan gaar ah: waxaa loola jeedaa hannaan shaqo-fulineed iyo mid xuquuqeed
(Special Status) oo hay'adda iyo shaqaalaheeda uga duwan tahay hay'addaha kale ee dawladda sida ku cad Xeer-nidaamiyahan;
7. Khidmo-dhaaf: waxaa loola jeedaa Dal-ku-joog lacag-la'aan ah (gratis) oo uu bixiyo Agaasimaha Guud ee HSJS;
8. Xeer-nidaamiye: waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyaha lagu hirgelinayo Sharciga

Hay’adda, waxaana soo diyaarinaya Agaasimaha Guud ee Hay’adda oo u gudbinaya Wasiirka, si looga ansixiyo Golaha Wasiirrada ee Xukuumadda JFS;

9. Xeer-hoosaad: waxaa loola jeedaa Xeer-hoosaad (Code of Practice) ay si gaar ah ugu dhaqanto HSJS, uuna soo saaro Agaasimaha Guud ee Hay’adda, kaasoo lagu dardargelinayo hawlaha ay u xilsaaran tahay Hay’addu;
10. U-qeybsane (immigration attachee): waxaa loola jeedaa mas’uulka Hay’adda wakiilka uga ah Safaarad ama Qunsuliyad Guud ee JFS;
11. Bar-xuduudeed: waxaa loola jeedaa goob ay dawladda Soomaaliya u asteysay in laga soo galo ama looga baxo xuduudda (berri, bad ama garoon diyaaradeed) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
12. Dal-ku-joog: waxaa loola jeedaa rukhsad deganaansho Sharci ah oo la siiyo qof Ajnabi ah ama Soomaali wata Baasaboor Ajnabi ah;
13. Dal-ku-gal: waxaa loola jeedaa rukhsad oggolaansho sharci ah oo ay bixisay

    Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda lana siiyo qof Ajnabi ah, si uu u soo galo dhulka JFS;
14. Oggolaansho deganaansho rasmi ah: waxaa loola jeedaa rukhsad oggolaansho rasmi ah oo la siiyo qof ajnabi ah oo si rasmi ah dalka u degan, taasoo waqtigeedu dhammaanayo haddii uu ajnabiga la siiyey uu dalka ka maqnaando muddo ka badan 6 (lix) bilood oo xiriir ah;
15. HSJS: waxaa loola jeedaa Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed; iyo 16. JFS: waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 3aad:
Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahani wuxuu nidaaminayaa qaab-dhismeedka, waajibaadka iyo hannaanka maamul ee Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS), si waafaqsan Qodobbada Sharciga Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (Sharci Lr. 012 ee Maarso 20, 2023).
2. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu fududaynayaa hirgelinta Sharciga Dhismaha Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed (HSJS) oo u xilsaaran maamulidda iyo maareynta socdaalka dalka si waafaqsan Dastuurka JFS iyo Sharciyada kale ee Dalka, iyadoo Hay'addu leedahay Sharciyad Qaanuuni ah iyo madax-bannaani ay ku gudato xilka iyo waajibaadka loo idmaday.
3. Xeer-nidaamiyahani wuxuu si qayaxan u caddeynayaa awoodaha, xilalka iyo waajibaadka Hay'adda si waafqsan Sharciga Hay’adda.
4. Hay'addu, marka ay gudanayso xilalka iyo waajibaadka loo idmaday, waxay u madaxbannaan tahay fulinta hawlaheeda, waxayna mar walba u hoggaasamaysaa
   Dastuurka, Sharciga Hay’adda, Xeer-nidaamiyahan iyo shuruucda kale ee JFS dhaqan-galka ka ah.
5. Hay’addu waxay leedahay hab-raacyo lagu fuliyo hawl-maalmeedkeeda shaqo (operational procedures) oo waafaqsan shuruucda iyo xeer-nidaamiyeyaasha
   Hay’adda, waxaana soo saaraya Agaasimaha Guud ee HSJS, si waafaqsan Qodobka 16aad ee Sharci Lr. 012 ee Maarso 20, 2023 oo lagu dhisay Hay’adda.

Qodobka 4aad:
Baaxadda iyo Hirgelinta Xeer-nidaamiyaha

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu hirgelinayaa Sharciga Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda Soomaaliyeed oo ah Hay’ad leh awood sharci-fulineed, mid maamul iyo siyaasadeed ee arrimaha socdaalka iyo qeybta hay’adda ka khuseysa hawlaha jinsiyadda, si waafaqasan Sharciyada dalka ee dhaqan-galka ah.

2. Xeer-nidaamiyahani wuxuu koobayaa dhammaan baahiyaha kala duwan ee ku xeeran hawl-maalmeedka Hay’adda, si waafaqsan Sharciga Hay’adda iyo shuruucda kale ee dalka JFS.

Qodobka 5aad:
Shakhsiyadda Qaanuuneed ee Hay’adda

3. Hay’addu waxay leedahay shakhsiyad qaanuuneed oo ay wax ku lahaan karto, wax ku dacweyn karto, laguna dacweyn karo, kuna geli karto heshiisyo dhaqan-gal ah (legallybinding agreement) oo lagu fududeynayo hawlaha lagama-maarmaanka u ah Hay’adda, si waafaqsan Sharciga Hay’adda, Xeer-nidaamiyahan iyo sharciyada kale ee dalka JFS.
4. Hay’addu waxay wada-shaqeyn la leedahay, isla markaana la hawl-gashaa hay’adaha fulinta sharciga, sida Booliska, Nabad-sugidda, Xeer-ilaalinta iyo Garsoorka, si waafaqsan Sharciga Hay’adda, Qodobka 9aad (1) ee Sharci Lr. 012, Maarso 20, 2023 iyo shuruucda kale ee dalka JFS dhaqan-galka ka ah.

Qodobka 6aad:
Astaanta Hay'adda

Astaanta Hay’addu waa gorgor duulaya oo ay ku wareegsan yihiin labo caleemood oo kor ku leh xiddig, hoosna uga dhagan gaashaan ku midabeysan calanka JFS, uuna ku qoran yahay magaca hay’adda oo dhammeystiran, sida ku cad lifaaqa 1aad ee Xeer-nidaaamiyahan lagu dhaqan-galinayo Sharciga Hay’adda, Sharci Lr. 012 ee Maarso 20, 2023.

Qodobka
7aad: Xarunta
Dhexe ee Hay’adda

1. Xarunta Dhexe ee Hay’adda waa Magaalo-madaxda JFS ee Muqdisho, waxayna laamo ku leedahay Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka (DXF) iyo xafiisyo ka hawlgala Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud ee JFS ku leedahay dalalka dibadda.

2. Iyada oo la ilaalinayo Shuruucda iyo Xeerarka Hay’adda, xafiis kasta oo ka jira
   Laamaha, Safaaradaha iyo Qunsuliyadaha Guud, waxay toos ula shaqeynayaan Waaxyaha iyo Xafiisyada Xarunta Dhexe ee u xilsaaran hawlaha ay hayaan, waxayna warbixin ka siinayaan natiijada waxqabadkooda Agaasimaha Laanta, Safiirka Safaaradda ama Qunsulka Guud.

Qodobka 8aad:

Mas’uuliyadda iyo Waajibaadka Hay’adda

1. Horumarinta iyo fududeynta dhammaan adeegyada la xiriira socdaalka iyo inta ka khuseysa adeegyada jinsiyadda.
2. Bixinta noocyada dokumentiyada kala duwan ee safarka, oggolaanshaha dal-ku- galka, dalku-joogga iyo degenaanshaha.
3. Hubinta iyo sugidda dhaqdhaqaaqa dadka socotada ah ee irdaha dalka laga soo galo, loogana baxo.
1. Sharciga waa loo siman yahay, waxaana uu qof kasta xaq u leeyahay ilaalin sinnaan ku dhisan iyo in loo sinnaado waxtarka sharciga, iyada oo aan cidna lagu takooreynin sababaha lagu xusay faqradda (2).
2. İyada oo aan wax loo dhimin macnaha guud ee faqradda (1), magangelyo-doonka iyo qaxootiga waa in aan loo geysan takoor toos ah iyo mid aan toos ahaynba sabab kasta ha looga qiil dhigtee, haddii ay tahay da', sinji, midab, jinsi, naafanimo, gobol, dalka uu u dhashay, xubinnimo koox bulsho gaar ah ama fikir siyaasadeed;

Qodobka 18aad:
Xuquuqda soo gelidda, magangelyo-doonka iyo qaxootiga

1. Qof kasta oo buuxiyay shuruudaha ku xusan qodobka 11aad ee sharcigan wuxuu xaq u leeyahay in uu soo galo dalka, loona aqoonsadao magangliyo - doon mana jirto sifo sharci ah oo loogu diidi karo qaxootinnimada haddii:
   (b) Qofkaasi ay u badan tahay in uu halis u galo dhibaateyn ama jirdil loogu geysanayo sinjigiisa, diintiisa, dalka uu u dhashay, xubinnimadiisa koox bulsho oo gaar ah ama fikir siyaasadeed daraaddood; ama
   (t) Noloshiisa, amaankiisa jireed ama xorriyaddiisa, ay u badan tahay in, halis loo geliyo sababo la xiriira weerar uu dal kale ku soo qaaday, qabsasho, xukun shisheeye ama dhacdooyin kale oo carqaladeeya kala dambeyntii guud ahaan ama qayb kamid ah dalka uu u dhashay ama uu horey caadi ahaan u degganaa;
2. Inkasta oo ay jirto faqradda (1), haddana qof qaxooti ah ama magangeliyo- doon ah ayaa loo diidi karaa in uu soo galo Jamhuuriyadda Federaaka Soomaaliya, laga eryi karaa ama laga celin karaa Soomaaliya oo la geyn karaa dal kale, ama laga qaadi karaa tallaabooyin kuwaas la mid ah haddii ay jiraan sababo macquul ah oo uu ku qanci karo Wasiirka Arrimaha Gudaha kuwaas oo muujinaya in qofka magangelyo-doonka ama qaxootiga ah;

(b) Uu halis ku yahay amniga qaranka;
(t) Ay maxkamad awood u leh ku heshey dembi culus, iyo in go'aankii ugu dambeeyay iyo dembi-ku-helistaa aan rafcacn kale looga qaadan maxkamad iyada ka sarreysa; ama
(j) Dembiga lagu helay qofka magangeliyo-doonka ama qaxootiga ah, ee looga hadlay faqradda (t), uu yahay mid halis ku ah bulshada;

3. Marka uu go'aaminayo in qof magangeliyo-doon ama qaxooti ah uu halis ku yahay amniga qaranka iyo in kale, ama halis ku yahay bulshada, Wasiirka Arrimaha Gudaha waxaa uu tixgelin doonaa;
(b) Mabaa'diida qawaaniinta caalamiga ah;
(t) Shuruucda iyo protocollada caalamiga ah iyo kuwa goboleed ee qabanaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo dalka qofka codsadaha ah lagu maxkamadeeyay laguna helay dembiga, la xiriira;
(x) Xuquuqaha iyo xorriyaadka aasaasiga ah ee shakhsiga; iyo
(kh) Kor-u-qaadidda iyo ilaalinta xuquuqaha magangelyo- doonka iyo qaxootiga;
(d) Shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo
(r) Sharciga dalka uu qofka codsadaha ah lagu maxkamadeeyay laguna helay dembiga;

4. Qofka aan ku qancin go'aanka uu Wasiirka Arrimaha Gudaha qaatay si waafaqsan qaybtan waxaa muddo kow iyo labaatan maalmood ah oo ka bilaabata marka uu soo baxo go'aanka, waxa dibu-eegis ka codsan karaa inay ku sameyso Maxkamadda Sare ee heer Federaal;

Qodobka 19aad:
Xaqqa Magangelyo-doonka

1. Qofka magangelyo-doonka ah ee si waafaqsan Qodobka 8aad u soo codsada in loo aqoonsado qaxootinimo waxaa uu xaq u leeyahay in uu sii joogo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
(b) llaa Guddigu go'aan ka gaarayo codsigiisa; ama;
(t) Haddii guuleysan waayo codsigiisa, illaa ay kaga dhammaanayaan dhammaan xalalka maamul iyo kuwa sharci ee arrintaas la xiriira;

2. Iyada oo aan wax loo dhimeyn sharci kasta oo qoran oo sheegaya taas beddelkeeda, qof kasta oo maganelyo-doon ah iyo dhammaan xubnaha qoyskiisa waxaa lagu dhaqayaa Shuruucda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
3. Qof kasta oo magangelyo-doon ah waxa xaq u leeyahay; -
(b) In la siiyo kaar aqoonsi oo ka markhaati-kacaya qaxootinimadiisa, iyo;
(t) Waxbarasho

4. Xuquuqaha magangelyo-doonka ee lagu cayimey faqadaha (1) iyo (3) waxaa sidoo kale la siinayaa qoysaska magangelyo doonka ah;

Qodobka 20aad:
Xaqa Qaxootiga

1. Iyada oo aan wax loo dhimin sharci kasta oo qoran oo tilmaamaya taas beddelkeeda, ayaa qof kasta oo qaxootinimo loogu aqoonsado Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhexdeeda, iyo xubnaha qoyskiisa, waa in ay helaan xuquuqaha iyo xorriyaadka ay dhigayaan Shuruucda caalamiga ah ee la xiriira qaxootiga ee ay tahay in ay u hoggaansanto Soomaaliya;
2. Qof kasta oo qaxooti ah iyo xubnaha qoyskiisa (haddiiba uu leeyahay) waa in ay;

(b) Helaan xuquuqda ah in ay sii joogaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya gudaheeda muddada loo aqoonsan yahay qaxootinimada oo tilmaamayo sharcigan;

(t) La siiyo kaarar aqoonsi oo ka markhaati kacaya qaxootinimadooda;

(j) La siiyo dokumenti Safar oo ay ugu safri karaan Soomaaliya dibaddeeda si waafaqsan mucaahaddooyinka iyo Heshiisyada ay tahay in ay u hoggaansanto Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya; iyo

(x) Waa in ay helaan xuquuqo kale, kana soo baxaan waajibaadyada kale ee ku xusan;

(i) Qodobbada Heshiiska Qaramada Midoobay ee La Xiriira Qaxootinimada 1951,

(ii) Borotokoolka La Xiriira Qaxootinimada, 1967, iyo;

(iii) Heshiiska Ururka Midowga Afrika ee Lagu Maamulayo Arrimaha Gaarka u ah Dhibaatooyinka Qaxootiga Afrika jooga, 1969.

Qodobka 21aad:
Xuquuqaha Xubnaha Qoyska

1. Si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo qoran, xubnaha qoyska ee qofka qaxootiga ah waxa ay xaq u leeyihiin in ay sii joogaan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya muddada qofka qaxootiga ah uu joogo Soomaaliya, waxaana ay yeelanayaan dhammaan Xuquuqaha iyo waxtarka kale ee uu helayo qofka qaxootiga ah;
2. Haddii xubin ka tirsan qoyska qofka qaxootiga ah uu Soomaaliya u sii joogo sababta ku xusan faqradda (1), oo uu qoyska uu ka tirsan yahay kaga baxo sabab Guur gaaridda da'da qaangaarka, ama ay meesha ka baxdo ku- tiirsanaantiisii qofka qaxootiga ah, waxaa uu isna xaq u leeyahay in uu Sii joogo Soomaaliya;
3. Haddii qof qaxooti ah ay kala tagaan xaaskiisa/ninkeeda, qof kasta oo waxyar ka hor geerida ama furriinka ku joogay Soomaaliya sababta ay tilmaameyso faqraddan isaga oo ah xubin ka tirsan qoyska qofka qaxootiga ah, qofkaas waxaa uu xaq u leeyahay in uu Sii joogo Soomaaliya;

Qodobka 22aad:
Ilaalinta Gaarka ah ee ay Helayaan Dadka Nugul

1. Hay'addu waa in ay qaaddaa tallaabooyinka ay u aragto in ay lagama maarmaan u yihiin in la ilaaliyo xuquuqaha magangelyo-doonka iyo qaxootiga si waafaqsan Sharcigan iyo Shuruucda kale ee Dalka iyo qawaaniinta Cadamiga ah ee xuquuqaha aadanaha ee ay tahay in ay u hoggaansanto Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
2. Iyada oo gudanayso waajibaadyada uu saarayo Sharciga, Dowladda Federaalku waa in ay dadaal gaar ah ku bixisaa ilaalinta danaha Dadka nugul, oo ay ka mid yihiin haweenka, carruurta aan la wehelin iyo kuwo oy kala maqan yihiin qoyskoodu, waayeelka, shakhsiyaadka naafada ah iyo Dadka kale ee nugul ee leh baahiyo gaar ah oo u baahan in la ilaaliyo.

Qodobka 23aad:
Dib-u-celin Khiyaari ah

Qof kasta oo magangelyo-doon ama qaxooti ah waxaa uu xaq u leeyahay in uu si iskiisa ah u doonto dib-u-celin si khiyaari ah looga celinayo Soomaaliya laguna celinayo dalkii uu dhalashadiisa haysto ama uu horey caadi ahaan u degganaa si ammaan ah oo sharaf ku dheehan tahay.

Qodobka 24aad:
Waajibaadyada Magangelyo-doonka iyo Qaxootiga

Qofka magangelyo-doonka ama qaxootiga ah waxaa waajib ku ah in uu ixtiraamo uuna u hoggaansamo shuruucda Dalka iyo xeer-nidaamiyeyaasha waqtigaa dhaqangalka ka ah Soomaaliya, iyo in u hoggaansmao Shuruucda caalamiga ah ee qabanaya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 25aad:
Dal-ka-cayrinta Qaxootiga Marka ay Jiraan Xaaladaha Qaar.

1. Iyada oo aan wax loo dhimin sida guud ee u hadlayo Qodobka 18aad, qof qaxooti ah oo si sharci ah ku deggan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in aan laga cayrin dalka marka laga reebo sabab la xiriirta amniga Qaranka iyo nidaamka dalka;
2. Go'aanka dalka looga cayrinayo qof qaxooti ah iyada oo la dabajoogo faqradda (1) waxaa gaaraya Wasiirka Arrimaha Gudaha, Arrimaha Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta, iyada oo lala tashanayo Madaxa Hay'adda waana in uu gaaraa si waafaqsan qawaaniinta dalka, kuwa caalamiga ah iyo mabaa'diida guud ee tallaabo-qaad maamul oo xaq ku dhisan;
3. Marka ay joogto faqradda (2), iyo ka hor inta uusan gaarin Wasiirka Arrimaha

Gudaha go'aanka la xiriira Qodobkan, waa in qofka magangleyo doonka ah ama qaxootiga ah ee uu go'aanku la xiriiro siiyaa fursad ku soo bandhigo kiiskiisa, uuna kaga jawaabo eedeymaha isaga ka dhanka ah ee loo soo jeediyay;

4. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Wasiirka Arrimaha Gudaha gaaray si waafaqsan Qodobkan waxaa uu rafcaan u qaadan karaa Maxkamadda Sare, marka la codsado in dib-u-eegis lagu sameeyo go'aanka, waa in la hakiyaa fulinta go'aankii wasiirka illaa Maxkamadda ay ka gaarto go'aan kama- dambeys ah iyada oo Maxkamaddu ay soo saareyso laba middood;
   (b) In ay adkeyso go'aanka lagu ceyrinayo qofka qaxootiga ah; ama
   (t) In ay buriso go'aanka lagu ceyrinayo qofka qaxootiga ah, oo ayna amar ku bixiso in la aqoonsado qaxootinimadiisa;
5. Maxkamaddu waxa ay, iyada oo ka duuleysa codsiga uu soo gudbiyey qofka laga soo saarey amar lagu ceyrinayo, waxa ay joojin kartaa fulinta amarka muddo ay Maxkamaddu u aragto in ay caqli-gal tahay si qofka qaxootiga ah loo siiyo waqti uu ku raadsado dal kale oo uu tegi karo oo aan ahayn dalka la doonayo in lagu celiyo.

Qodobka 26aad:
Xabsi-ku-hayn Ku-meelgaar ah Muddada La Sugayo Cayrinta

1. Qofka ceyrintiisa laga soo saaray amar waafaqsan Qodobka 25aad waa la soo qaban karaa waana la xiri karaa marka uu amar ka soo saaro Madaxa Hay'adda ka hor inta aan la cayrin haddii Madaxa Hay'addu uu fikirkiisu yahay;
   (b) In la soo qabto Lana xiro qofka qaxootiga ah haddii ay lagama maarmaan u tahay fulinta cayrinta; ama
   (t) Haddii aan la soo qaban Lana xirin, in qofka qaxootiga ah halis ku noqonayo amniga qaranka ama kala-dambeynta.

CUTUBKA 5AAD: GUDDIGA GO'AAMINTA QAXOOTINIMADA

Qodobka 27:
Dhisidda iyo Xubnaha Guddiga

1. Waxaa la dhisayaa Guddi loo yaqaanno Guddiga Go'aaminta Qaxootnimada oo ka koooban Sagaal (9) xubnood oo ay seddex (3) dumar tahay waxayna noqonayaan sidan soo socta:
   (b) Guddoomiyaha Hay'adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka, oo noqonayana guddooomiyaha Guddiga.
   (t) Wakiil ka socda Hay' adda Qaxootiga iyo Barakacayaasha Qaranka oo noqonaya Xoghaynta Guddiga.
   (j) Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta

(x) Wakiil ka socda Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda JFS.
(kh) Wakiil ka socda Wasaaradda Amniga Gudaha.
(d) Wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Dibadda
(r) Wakiil ka socda Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda
(s) Wakiil ka socda Wasaaradda Caddaaladda; iyo
(sh) Wakiil ka socda Taliska Ciidanka Booliska Federaalka.

2. Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Federaalka wuxuu soo Magacaabayaa Guddiga marka uu helo soo jeedinta Guddomiyaha Hay'adda.
3. Wakiil ka socda Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga ayaa lagu martiqaadi karaa in uu noqdo xubin Goobjoog ka ah kulamada guddiga.

Qodobka 28aad:
Hawlaha Guddiga

Hawlaha guddiga waxaa ka mid ah:

1. Kormeeridda iyo go'aaminta aqoonsashada qaxootinimo ee shakhsiyaadka Soomaaliya ku ah magangelyo-doon iyo qaxootiga si waafaqsan Sharcigan,
2. Go'aaminta dhammaan codsiyada u-aqoonsashada qaxootanimada, isaga oo awood u leh in uu;
3. In uu kuwa soo codsada u aqoonsado qaxootinimo; ama uu diido codsiga;
4. Go'aanno ka qaato arrimaha la xiriira;
   (b) Kala noqoshado u-aqoonsiga qaxootinimada iyo cayrinta qaxootiga;
   (t) Tixgelinta iyo go'aan-ka-qaadashada codsiyada dib-u-midoobidda qoyska ee ay soo codsadaan shakhsiyaadka qaxootinimo loogu aqoonsaday Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 20aad;
5. Uu Madaxa Hay'adda kala taliyo arrimaha la xiriira qaxootiga, oo uuna muddo kadibba warbixinno u soo gudbiyo Madaxa hay'adda ugu yaraan sanadkiiba mar;
6. Qabto hawlaha kale ee uu Madaxa Hay'adda ugu xilsaaro si waafaqsan Sharcigan ama sharci kasta oo kale ee dhaqan-galay;
7. Marka ay qabanayaan hawlaha, shirarka, shaqooyinka iyo arrimihiisa kale waa in Guddigu u qabtaa si waafaqsan Xeer-nidaamiyeyaasha;

Qodobka 29aad:
Go'aamada iyo Hadal-qoraallada Guddiga;

1. Marka uu gudanayo hawlihiisa, Guddigu waa in uu u hoggaansamaa habraaca uu dhigayo Sharciga, iyo Xeer-nidaamiyeyaasha;
2. Iyada oo aan wax loo dhimin macnaha guud ee faqradda (1), Guddigu waa in uu hubiyaa in dhammaan habraacyada loogu talo galay si buuxda ay u ilaaliyaan saraakiisha ay hawshoodu tahay, in;
   (b) Codsade kasta la siiyo fursad macquul ah oo ku soo gudbiyo kiiskiisa/keeda;
   (t) Turjumaan aqoon u leh, luuqad uu fahmayo codsadaha, joogo mid kasta oo

ka mid ah dhammaan marxaladaha dhegeysiga;

(j) Go'aamada la xiriira qaxootinimada in loo qaato si waafaqsan qodobbada Sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo dhaqan-gal ah;

(x) Kiis kasta oo loo soo gudbiyo Guddiga waa in go'aan looga gaaro iyada oo aan lala daahin, haddii ay si kasta wax u dhacaan, waa in go'aan looga gaaro sagaashan maalmood oo ka bilaabata maalintii codsiga loo soo gudbiyey Hay'adda;

(kh) codsadaha waxaa qoraal lagu ogeysiinayaa;

i. Natiijada codsigiisa ama codsigeeda;
ii. Haddii codsiga la diidana, sababaha go'aankaa looga qaatey;
iii. Habraaca rafcaan looga qaadan karo go'aanka; iyo,
iv. Muddada ay tahay in rafcaan looga qaato;

(d) Galalka kiisaska go'aan ka-qaadashada qaxootinimada waxaa ay ahaanayaan sir oo cidna lalama wadaagi karo iyada oo aan oggolaansho qoraal ah laga helin qofka qaxootiga ah; iyo

(r) Hay'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga ayaa lagu martiqaadayaa si ay korjoogto uga noqoto kulammada Guddiga Go'aaminta qaxootinimadda;

3. Diiwaannada iyo hadal-qoraallada kulamada Guddiga waa in ay ahaadaan sir laguna hayaa meel amaan ah, waana in la qaadaa dhammaan tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee lagu hubinayo in aan halis la gelin amniga magangelyo-doonka;

CUTUBKA 6AAD: GOLAHA RAFCAANKA QAXOOTIGA

Qodobka 30aad:

Dhisidda iyo Xubnaha uu ka Kooban Yahay Golaha Rafcaanka

1. Waxaa la dhisayaa Gole Rafcaan oo loo yaqaanno Golaha Rafcaanka Qaxootiga oo hawshiisu ay tahay in uu dhageysto oo uu go'aan ka qaato rafcaannada loo qaato si waafaqsan Sharcigan;
2. Racfaanka waa in uu ka koobnaadaa guddoomiye iyo ugu yaraan afar xubnood oo uu soo magacaabayo Wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Dib- uheshiisiinta kadib marka uu helo soo jeedinta Madaxa Hay'adda, Waxaana ansixinaya Golaha Wasiirada;
3. Xubnaha Golaha Rafcaanka loo magacaabay si waafaqsan faqradda (2) waa in ay ka koobnaadaan shakhsiyaad aqoon iyo waayo-aragnimo u leh sharciga qaxootiga, socdaalka, arrimaha dibadda, amniga qaranka, maamulka degaanka, xuquuqaha aadamaha iyo arrimaha qaxootiga, laakiin waa in aan xubin ka tirsan Guddiga aan loo magacaabin in ay ka mid noqoto Golaha Rafcaanka;
4. Golaha Rafcaanka waa in, marka ay gudanayaan hawlahooda ku xusan Sharcigan, ay ahaadaan kuwo dhexdhexaad ah oo madax-bannaan, waa in aaney shakhsi ama maamul kale ka amar qaadan;

Qodobka 31aad:
Hawlaha iyo Awoodaha Golaha Rafcaanka

1. Hawlaha Golaha Rafcaanka waa inuu dhegeysto oo uuna go'aamiyo rafcaannada laga soo qaato go'aamada Guddiga.
2. Markago'aan ka qaadanayo rafcaan loo keenay Golaha; Rafcaanka, Golaha Rafcaanka waxaa uu;
   (b) Ku raaci karaa go'aankii Guddiga;
   (t) Laali karaa go'aanka Guddiga, hadba sida ay xaaladdu tahay waxaana uu arrinta dib ugu celin karaa in mar kale la tixgeliyo; ama
   (j) Fari karaa in arrinta mar kale la dhageysto oo go'aan laga qaato;
3. Golaha Markuu soo gaaro racfaan lasoo qaatay waa inuu dedejiyaa Go'aan ka gaarista racfaankaas muddo aan ka badneyn sagaashan cisho;
4. Awoodda golaha racfaanka wuxuu ku egyahay go'aan ka gaarista racfaanka loo soo qaatay si waafaqsan sharcigan;
5. Golaha racfaanka waa inay qoraal ku gaarsiiyaan racfaanlaha sababaha ay ugu raaceen go'aankii guddiga ama ay ugu khilaafeen si waafaqsan sharcigan;
6. Haddii aan lagu sheegin Sharcigan ama Xeer-nidaamiyeyaal, waa in Golaha Rafcaanku uu nidaamsadaa habraaciisa;
7. Golaha racfaanka haddii ay uga baahdaan hay'adda Qaxootiga ee qaramadda midoobay talo, waxay kasoo qayb gelin karaan fadhiyadooda;

Qodobka 32aad:
Dib-u-eegis Garsoor

1. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka Golaha Rafcaanka waxaa uu muddo soddon maalmood gudahood ah go'aanka arrimaha sharciga la xiriira oo kaliya uu rafcaan ugu qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Heer Federaal, go'aanka Maxkamadda ayaana ah kama-dambeys,
2. Maxkamaddu waxaa ay awood u leedahay in ay dhageysato ayna go'aamiso arrimaha lagu xusay Qodobbada 31, 32 iyo 33 ee Heshiiska La Xiriira Qaxootinimada, 1951.

CUTUBKA 7aad:
QODOBBO QUBANE AH
Qodobka 33aad:
Shuruucda Aan Loo Adeegsan Karin

Sharci, xeer-nidaamiye, amar iyo tilmaan kasta oo aan la jaanqaadi Karin Sharcigan looma adeegsan karo arrimaha uu xeer ka dejiyay Sharcigan.

Qodobka 34aad:
Xeer-nidaamiye Maamul.

1. Wasiirka Arrimaha Gudaha ayaa soo **saaraya** Xeer-nidaamiye Maamul oo waafaqsan sharcigan kadib marka uu helo soo jeedinta Madaxa Hay'adda, si loogu dhaqan-geliyo qodobada sharcigan.
2. Iyada oo aan wax loo dhimin sida guud ee ay u hadlayso faqradda (1), Xeernidaamiyeyaasha laga soo saaro Sharcigan waxaa ay xeerin doonaan, arrimo ay ka mid yihiin —
   (b) Habraaca loo marayo rafcaanka iyada oo laga faa'iideysanayo Xuquuda rafcaanka ee uu ka hadlayo Sharcigan;
   (t) Habraacyada Guddiga Go'aan-ka Gaarista kiisaska Qaxootinimada;
   (j) Habraacyada Golaha Rafcaanka iyo habraacyada rafcaanka;
   (x) Qaabka iyo habraaca loo soo codsanayo iyo habraaca loo tixgelinayo codsiyada qaxootinimada;
   (kh) Dhisidda guddiyada, iyo u-xilsaaridda guddiyadaas ee hawlaha la xiriira qaabilaadda, daryeelka iyo waxtaridda qaxootiga;
   (d) Qaabka iyo sida aqoonsi iyo dokumentiyada safarka loogu sameynayo qaxootiga iyo xubnaha qoysaskooda;
   (r) Qaabka uu noqonayo amar ama ogeysiis kasta oo loo baahan yahay in qaxootiga loo siiyo si waafaqsan Sharcigan;
   (s) Habraaca ilaalinta Iyo dhexgelinta qaxootiga ee bulshooyinka martigelinaya si loo gaaro xalal waara, isku-tiirsanaan iyo isku-filnaansho ay gaaraan qaxootiga; iyo
   (sh) llaalinta haweenka, carruurta aan la wehelin, dadka naafada ah iyo kooxaha kale ee liita ama nugul.
   (dh) In ay ku qeexnaataa xadigga qaxooti ee uu qaadan karo dalku iyo muddada qofka qaxootiga ah uu dalka joogi karo, sidoo kale dalalka qaxootigooda la aqbali karo iyo dalalka qaxootigooda aan la aqbali Karin.

Qodobka 35aad:
Baabi'in

Sharcigan waxaa lagu baab'inayaa dhammaan Shuruucda iyo xeerarka ka horimaanaya ee dhaqan galka ka ahaa Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 36aad:
Dhaqan-galka Sharcigan

Sharcigan waxa uu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliyeed, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

SHARCI LR. 19 **TAARIIKH: 13 FEBRAAYO 2024**
SHARCIGA XISAAB-XIRKA MIISAANIYADDA 2022

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/0484/B11/24**, ku taariikheysan **24/01/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Xisaab Xir Miisaaniyadeedka 2022.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in xisaab-xir lagu sameeyo Miisaaniyaddii 2022.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxaa la ansixiyay Xisaab Xirka Miisaaniyadda 2022-da.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-35-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J. F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

GUDDIGA MIISAANIYADDA, MAALIYADDA, QORSHEYNTA IYO ISKAASHIGA CAALAMIGA IYO LA-XISAABTANKA HAY'ADAHA DOWLADDA EE GOLAHA SHACABKA

iyo

GUDDIGA DHAQAALAHA, MAALIYADDA, GANACSIGA WARSHADAHA, ISGAARSIINTA IYO DALXIISKA EE AQALKA SARE

WARBIXINTA XISAAB XIRKA SANNAD MIISAANIYADEEDKA 2022

Janaayo 21, 2024

1) GOGOLDHIG

Guddiga Maaliyadda ee Laba Aqal BJFS waxa uu halkan idin kula wadaagayaa warbixinta Akhrinta 3aad ee ***Xisaab Xirka Sannad Miisaaniyadeedka 2022***, iyadoo saldhig looga dhigayo doodii iyo talo-soojeedinta ee xubnaha Labada Aqal ee BJFS ka diibteen Akhrinta 2aad.

2) DIB-U-AKHRINTA XISAAB XIRKA 2022

Wadarta Guud ee Miisaaniyaddii 2022 la qoondeeyay waxa ay ahayd **$944,859,564**, waxaa sooxarooday dhakhli dhan **$769,237,849** isla markaana waxaan soo xaroon lacag dhan **($175,621,715)** taasi oo u dhiganta hoos u dhac gaaraya **(19%)** ku-talagalka miisaaniyada guud eedalka.

Dhanka Kharashaadka saadaashi miisaaniyadda 2022 oo ahayd **$929,924,527,** waxaa kabaxay wadar dhan **$731,434,866**, taas oo ka dhigan in uu jiro hoos u dhac gaaraya **($198,489,661)** oo u dhigma **(21%).**

Faahfaahin	Ku-talagalka 2022	Dhabta 2022	Farqiga	Boqoleyda(%)
Dakhliga Guud	$944,859,564	$769,237,849	($175,621,715)	(19%)
Kharashaadka Guud	$929,924,527	$731,434,866	($198,489,661)	(21%)

2.1) DAKHLIGA 2022

Faahfaahin	Ku-talagalka 2022	Dhabta 2022	Farqiga	Boqoleyda(%)
Wadarta Guud ee Dakhliga	**$944,859,564**	**$769,237,849**	**($175,621,715)**	**(19%)**
Dakhliga Canshuuraha	$173,699,181	$181,691,842	$7,992,661	5%
Dakhliga aan Canshuuraha ahayn	$76,399,293	$80,977,903	$4,578,610	6%
Wadarta Dakhliga Gudaha	**$250,098,474**	**$262,669,745**	**$12,571,271**	5%
Dakhli Kale				
Dakhli Kale (Assets Recovery)	-	$3,285,354	$3,285,354	100%
Dakhli Dayn ah (SRD)	-	$44,040,950	$44,040,950	100%
Wadarta Dakhliga Kale	-	**$47,326,304**	**$47,326,304**	100%
Deeqaha				
Deeqaha labada Dhinac	$39,600,000	$37,100,000	($2,500,000)	(6%)
Taageero Kab-Miisaaniyadeed (Deeqaha Dhinacyada Badan)	$169,697,685	$134,310,645	($35,387,040)	(21%)

Wadarta Deeqaha Taageerada Miisaaniyadda	**$209,297,685**	**$171,410,645**	**($37,887,040)**	(18%)
Deeqaha Mashaariicda				
World Bank	$454,901,075	$280,522,607	($174,378,468)	(38%)
African Development Bank	$14,193,738	$4,937,177	($9,256,561)	(65%)
European Union	$345,508	$155,949	($189,559)	(55%)
UN	$16,023,084	$2,215,422	($13,807,662)	(86%)
Wadarta Deegaha Mashaariicda	**$485,463,405**	**$287,831,155**	**($197,632,250)**	(41%)

Sida ku cad jaantuska kore:

1) **Dakhliga Canshuurta** waxaa la filaayey inay kasoo xarooto lacag dhan $173,699,181 balse dhabta soo xarootay ayaa noqatay $181,691,842, waxaana jira koror dhan $7,992,661 oo u dhigma 5%. Sidoo kale, qiyaasta dakhliga aan canshurta ahayn waxa uu ahaa $76,399,293 hase ahaate dakhliga dhabta ah ee soo xarooday ayaa noqday $80,977,903 waxaana jira koror gaaraya $4,578,610 oo u dhigma 6%.
2) **Deeqaha dibadda ee laba dhinac** ayaa waxaa la filaayey inay noqoto $39.6M balse dhabta soo xarootay waxay noqotay $37.1M, waxaana jira hoos u dhac gaaraya ($2.5M) oo u dhigma (6%).
3) Sidoo kale **deeqaha dhinacyada badan (Multilateral Grants) ee kabka miisaaniyadda** oo la saadaalinayey in la helo dakhli dhan $169,697,685 ayaa waxaa kasoo xarooday $134,310,645 oo kaliya taas oo ka dhigan in uu jiro hoos u dhac gaaraya ($35,387,040) oo u dhigma (21%).
4) Dhanka **Deeqaha mashaariicda** waxaa la filaayay in ay ka soo xarooto lacag dhan $485,463,405 hase ahaate dhabta kasoo xarootay ayaa noqotay $287,831,155 taas oo muujinaysa in uu jiro hoos u dhac gaaraya ($197,632,250) oo u dhigma (41%).

2.2) KHARASHAADKA 2022

Faahfaahin	Ku-talagalka 2022	Dhabta 2022	Farqiga	Boqoleyda(%)
Adeega Shaqaalaha	$266,016,979	$259,578,811	($6,438,168)	(2%)
Iibka Agab iyo Adeega	$232,247,363	$140,670,112	($91,577,251)	(39%)
Kaalmo (Dhaqaale + Bulsho)	$252,860,953	$194,051,420	($58,809,533)	(23%)
Dheef-korka & Dhulsaarka Kale	$12,935,782	$12,690,618	($245,164)	(2%)
Deeqaha Dowladda Dhexe	$132,355,417	$111,242,917	($21,112,500)	(16%)
Kharashaadka kale	$4,796	-	($4,796)	(100%)
Kharashaadka Rasumalka	$33,503,237	$13,200,988	($20,302,249)	(61%)
Wadarta Guud	**$929,924,527**	**$731,434,866**	**($198,489,661)**	(21%)

Sida ku cad jaantuska kore:

1) **Adeegga Shaqaalaha (Mushaarka)**: Mushaarka shaqaalaha ayaa ahaa Kharashka ugu badan ee baxay Sanad Maaliyadeedka 2022, kaas oo ku talagalkkiisu ahaa $266,016,979, hayeeshee waxaa dhab ahaan la bixiyay wadar dhan $259,578,811, halka farqiga uu noqday ($6,438,168), una dhiganta (2%) hoos u dhac ah.
2) **Agabka iyo Adeega:** Ku talagalka wadarta kharash Agabka & Adeegga Sanad Maaliyadeedka 2022 wuxuu ahaa $232,247,363, waxaana dhab ahaan la isticmaalay $140,670,112, taas oo farqiga ka dhigeysa ($91,577,251) una dhiganta (39%) hoos dhac ah. Guud ahaan kharashka sanadka 2022, waxaa muuqata in hoos u dhaca ugu wayn u uku yimid isticmaalka Agabka iyo Adeega oo ah kharashka loogu talagalay hab-sami u socodka howlaha maalinlaha ah ee dowladda.
3) **Kaalmo (Dhaqaale + Bulsho)**: Deeqaha laga helo Deeqbixiyaasha oo loogu talagalay mashaariicda waxaa ku talagalkeedu ahaa $252,860,953, waxaana la isticmaalay kharash dhan $194,051,420, halka farqigu uu gaarayo ($58,809,533), kaas oo noqonayo hoos u dhac (23%). Hoos u dhacan wuxuu muujinayaa in aan si weyn looga faa'iidaysan lacagaha mashaariicda taas oo hoos u dhigtay adeegga dowladda ee dadweynaha.
4) **Dheef-korka & Dhulsaarka Kale**: Kharash bixinta Deymaha sanadka 2022 waxaa la odorosay $12,935,782 waxaana dhab ahaan la bixiyay $12,690,618. Farqiga u dhaxeeya wuxuu noqday ($245,164) oo u dhiganta (2%).
5) **Deeqaha Dowladda Dhexe**: Wadarta kutalagalka Deeqaha Dowladda Dhexe ay siiso Dowlad Goboleedyadu wuxuu ahaa $132,355,417, hayeeshee waxaa dhab ahaan la bixiyay $111,242,917, halka farqiga aan la bixin uu noqday ($21,112,500) oo u dhiganta (16%).
6) **Ra'sulmaalka** waxaa loo qoondeeyay lacag dhan $33,503,237, waxaana la isticmaaley kharash dhan $13,200,988, waxaan la isticmaalin ($20,302,249), una dhiganta (61%). Tani waxay ka dhigantahay in la isticmaalay seddex meelood hal meel kaliya laga isticmaalay qoondadi Sanadka.

3) Talo-soojeedinta Guddiga

1) Wasaaradda waxaa la farayaa in Xisaab xirka ay usoo gudbiso Goloyaasha ugu dambeyn 30ka Juun.

2) Wasaaradda waxaa la farayaa in Golayaasha usoo gudbiso lifaaqyada Xisaab Xiradda deeqaha ay siiso Dowlad Goboleeyada iyo Gobolka Benaadir ay ka baxa khasnada Dhexe ee dalka.

3) Wasaaradda waxaa la farayaa in Golayaasha usoo gudbiso lifaaqyada Xisaab Xiradda mashaariicda marta Khasnada Dhexe ee dalka taasoo aada Dowlad Goboleeyada iyo Gobolka Benaadir.

4) Wasaaradda waxaa loo soojeedinayaa in Golayaasha ay la wadaagto warbixin faahfaahsan oo ku saabsan mashaariicda dalka.

5) Wasaaradda waxaa la farayaa in Madaxa Kabidda (Contingency) ay u bixiso sida uu qabo Xeerka Qoondada Miisaaniyadda ee Golayaasha ansixiyeen.

6) Wasaaradda waxaa la farayaa in ay ku saleeyso Miisaaniyadda deeqaha laba dhinac ah (bilateral) ama dhinacyada badan leh (multi-lateral) kuwa laga hayo ballanqaad rasmi oo qoraal ah keliya.

7) In dhammaan dukumintiyadda miisaaniyadda iyo xisaab-xirka lagu soo gudbiyaa afka rasmiga ah ee dalka (Af-soomaali) ka hor inta aan la keenin golayaasha.

Ugu dambayn, Guddiga Maaliyadda Labada Aqal ee BJFS wuxuu si xushmad iyo qadarin ku dheehan tahay ugu codsanayaa xubnaha Labada Aqal ee BJFS in ay ansixiyaan Warbixinta Akhrinta 3aad ee Xisaab Xirka Sannad Miisaaniyadeedka 2022.

Lifaaq: Is-barbardhiga Miisaaniyadda iyo isticmaalka Hay'addaha Dowlada ee sanad maaliyadeedka 2022.

Code	Description	Budget / Estimate	Actual / Expenditure	Available Balance	Percentage
1	**Waaxda arrimaha maamulka**	**358,072,026**	**306,256,886**	**51,815,140**	**86%**
10100	Xafiiska Madaxtooyada	13,849,606	12,385,534	1,464,072	89%
10201	Xafiiska Baarlamaanka - Golaha Shacabka	22,792,921	22,434,642	358,279	98%
10202	Xafiiska Aqalka Sare	4,619,380	4,393,513	225,867	95%
10300	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha	18,475,139	16,857,137	1,618,002	91%
10400	Wasaaradda Arrimaha Dibadda	4,157,853	4,148,992	8,861	99.79%
10401	Safaaradaha	6,217,550	5,491,318	726,232	88%
10500	Wasaaradda Maaliyadda	90,668,920	65,841,383	24,827,537	73%
10501	Xisaabiyaha Guud	2,535,526	2,509,279	26,247	99%
10502	Adeegga Guud ee Dawladda	108,414,279	106,051,221	2,363,058	98%
10503	Agaasinka Xarunta Warbixinta Maaliyadeed	1,107,000	1,039,950	67,050	94%
10504	Hay'adda Qandaraasyada Dawladda	500,000	0	500,000	0%
10600	Wasaaradda Qorshaynta	17,976,456	17,641,323	335,133	98%
10601	Hay'adda Tirakoobka Qaranka	11,365,092	9,124,737	2,240,355	80%
10700	Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka	14,106,788	3,945,945	10,160,843	28%
10701	Guddiga Qaxootiga iyo Barakacayaasha Soomaaliyeed	1,557,200	703,962	853,238	45%
10702	Hay'adda Diiwaangalinta Dadweynaha	735,523	293,523	442,000	40%
10800	Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta	2,208,306	2,131,261	77,045	97%
10900	Wasaaradda Cadaaladda	2,095,634	1,069,511	1,026,123	51%
10901	Ciidanka asluubta	10,079,440	9,917,416	162,024	98%
11001	Maxkamadda Sare	2,305,297	2,258,730	46,567	98%
11002	Maxkamadda Gobollka Banaadir	1,773,356	1,738,669	34,687	98%
11003	Maxkamadda Rafcaanka	907,428	857,821	49,607	95%
11005	Guddiga Adeegga Garsoorka	257,312	223,410	33,902	87%
11100	Xeer Ilaaliyaha Guud	1,514,163	1,504,644	9,519	99%
11200	Garyaqaanka Guud	668,784	628,985	39,799	94%
11300	Hantidhawraha Guud	3,333,344	3,161,134	172,210	95%
11400	Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka	4,050,384	3,189,203	861,181	79%
11500	Wasaaradda Dastuurka	2,211,799	962,317	1,249,482	44%
12100	Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka	682,560	600,144	82,416	88%
12200	Guddiga Dib -u -heshiisiinta Qaranka	501,132	462,053	39,079	92%
12300	Guddiga Madaxa -bannaan ee Doorashooyinka Qaranka	3,260,780	2,253,475	1,007,305	69%
12400	Guddiga Xuquuqul Insaanka	100,000	0	100,000	0%
12500	Dib -u -eegista Dastuurka M.Banan iyo Imp. Komishanka	699,596	562,471	137,125	80%
12600	Guddiga Shaqaalaha Rayidka Qaranka	1,495,479	1,455,490	39,989	97%
12700	Guddiga M. Banaan ee La Dagaalanka Musuqmaasuqa	848,000	417,693	430,307	49%

2	**Waaxda arrimaha amniga iyo difaaca**	**171,722,223**	**169,968,797**	**1,753,426**	**99%**
20100	Wasaaradda Gaashaandhigga	2,211,643	2,159,373	52,270	98%
20101	Ciidanka Xoogga Dalka	96,403,834	96,096,057	307,777	99.68%
20102	Maxkamadda Ciidamada	1,462,000	1,461,981	19	100.00%
20103	Hay'adda Naafada iyo Agoonta ciidanka	115,000	60,000	55,000	52%
20200	Wasaaradda Amniga Gudaha	1,557,227	1,246,893	310,334	80%
20201	Ciidanka Booliska	45,993,240	44,965,382	1,027,858	98%
20202	Hay'adda sirdoonka qaranka	18,883,639	18,883,570	69	100%
20203	Hay'adda Socdaalka iyo jinsiyadaha	5,095,640	5,095,541	99	100%
3	**Waaxda arrimaha dhaqaalaha**	**83,396,579**	**56,987,808**	**26,408,771**	**68%**
30100	Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta	6,703,452	3,565,966	3,137,486	53%
30200	Wasaaradda Macdanta	1,568,912	1,525,926	42,986	97%
30201	Hay'adda Patroolka Soomalia	836,520	478,501	358,019	57%
30300	Wasaaradda Beeraha	2,098,176	1,726,101	372,075	82%
30400	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta	3,550,558	1,079,638	2,470,920	30%
30500	Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda	2,120,824	1,528,289	592,535	72%
30501	Cilmi -baarista Badda Soomaaliya	605,008	561,832	43,176	93%
30502	Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumaysiga	110,776	101,864	8,912	92%
30600	Wasaaradda Warfaafinta	6,234,794	5,968,131	266,663	96%
30700	Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda	1,848,060	1,839,034	9,026	100%
30701	Hay'adda Isgaarsiinta Dalka	1,166,604	913,050	253,554	78%
30800	Wasaaradda Hawlaha Guud & Dib -u -dhiska	31,427,444	18,599,057	12,828,387	59%
30900	Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada	2,452,676	2,348,690	103,986	96%
30901	Hay'adda saadaasha iyo duulista hawadda	15,344,242	11,222,834	4,121,408	73%
31000	Wasaaradda Dekadaha iyo gaadiidka badda	1,668,084	1,221,259	446,825	73%
31001	Maamulka dekadda Xamar	1,021,300	959,883	61,417	94%
31100	Wasaaradda Warshadaha & Ganacsiga	2,776,850	2,483,636	293,214	89%
31101	Hay'adda tayadhawrka Soomaaliyeed	1,862,300	864,117	998,183	46%
4	**Waaxda arrimaha bulshada**	**316,733,699**	**198,221,376**	**118,512,323**	**63%**
40100	Wasaaradda Caafimaadka	58,583,344	11,375,284	47,208,060	19%
40200	Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare	20,532,770	11,041,209	9,491,561	54%
40201	Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed	7,757,003	7,622,028	134,975	98%
40202	Akadeemiyada Cilmiga iyo Fanka Soomaaliyeed	1,239,461	1,126,058	113,403	91%
40203	Akadeemiyc -Goboleedka Af-Soomaaliga	1,363,256	387,472	975,784	28%
40300	Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada	223,955,351	164,871,758	59,083,593	74%
40400	Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha	969,360	648,999	320,361	67%
40500	Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha	2,009,474	828,429	1,181,045	41%
40501	Hay'adda Naafadda Soomaaliyeed;	323,680	320,139	3,541	99%

**********Dhammaad**********

DOWLADA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Warbixinta iyo Xisaab xirka Sanad Maaliyadeedka ku dhamaaday 31-ka December 2022



WAXAA SOO DIYAARIYEY XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD EE DOWLADDA

Tusmada Buugga

I. KALIMADA WASIIRKA WASAARADDA MAALIYADDA 3

CADAYNTA WAAJIBAADKA 5

II. FAALO GUUD..... 6

III. MUUQAALKA DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA 17

IV. MUUQAALKA ISBARBARDHIGA SAADAASHA MIISAANIYADA IYO NATIIJADA DHABTA AH 18

V. MUUQAALKA KHARASHAADKA HAWLAHA DOWLADDA 20

VI. MUUQAALKA QULQULKA LACAGTA CADAANKA AH 21

1. MACLUUMAAD GUUD IYO XEERAR XISAABEEDKA DOWLADA 22

II. FAAHFAAHIN IYO SHARAXAAD KHUSEEYSA XISAAB XIRKA 30

LIFAAQA A– MUUQAALKA HANTIDA IYO DAYMAHA MAALIYADEED (KU MEEL GAAR)..... 42

LIFAAQA A.1- FAAHFAAHINO LA XIRIIRA MUUQAALKA MOWQIFKA MAALIYADEED 43

LIFAAQA B- WARBIXINTA LACAGAHA AAN KU JIRIN QOONDADA DOWLADDA..... 45

LIFAAQA C – MUUQAALKA DAYMAHA KHARASHAADKA 31 DECEMBER 2022 53

LIFAAQA D – MUUQAALKA DAYMAHA DIBEDA SANADKA MAALIYADEEDKA KU EG 31.12. 2022..... 54

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

MOF/OM/040/2023 **April 30, 2023**

Kalimada Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

Sanadihii ugu danbeeyey Soomaaliya waxa ay ku talaabsatay horumaro dhinacyo badan ah oo ay ka mid yihiin xasilinta dhaqaalaha guud, yaraynta daymaha la ina ku leeyahay ee aadka u culsaa iyada oo loo marayo hanaanka dayn cafinta ee wadamada daymaha culus lagu leeyahay ee (HIPC), Diyaarinta shuruucyo kala duwan oo aad muhim u ah oo iyana la qoray sidoo kale waxaa la diyaariyey Istiraatiijiyada yaraynta Heerka Faqiirtinimada. Dhammaan horumaradaa waxa ay ku jireen Qorshaha horumarinta Qaran ee Sagaalaad (NDP9).

Tan iyo sanadkii 2018-kii, Dowladdu waxa ay shaacinaysay oo ay bulshada Soomaliyeed la wadaagaysay Warbixin Maaliyadeed iyo Xisaab xir lagu jaangooyey xeerarka caalamiga ah ee ku xisaabtanka Lacagah cadaanka ah ee cash-basis IPSAS 2017. Sidoo kale waxaa horumar laga sameeyey dhanka mideynta Shax xisaabeedyada Dowladda "CoA" iyada oo la waafajiyey Habraaca Tirokoobka Maaliyadeed ee IMF-ta ee loo yaqaano "GFSM2014". Laga soo bilaabo sanadkii 2021, Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay si joogto ah u shaacisay warbixino maaliyadeed guud oo ay ku mideysanyihiin dhammaan warbixinada maaliyadeed ee Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah DFS.

Si kor loogu qaado kalsoonida bulshada Soomaaliyeed iyo saaxiibada horumarineed ee shisheeye ay ku qabaan hanaanka maaraynta maaliyadda dalka, Dowladda Federaalku waxay dhaqan galisay Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud sanadkii 2019 waxaana la diyaariyey Xeerhoosaadkii Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud sanadkan 2022.

Dadaalo fara badan oo lagu bixiyey dib u habaynta hanaanka dakhliga waxaa intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2022 lagu guulaystay in kor loo qaado dakhliga u soo xerooday Dowladda waxa uuna gaaray **USD$769.2 milyan** oo u dhiganta **63%** halka uu ka ahaa sanad maaliyadeedkii hore ee 2012 **USD$472.9 milyan**. sababaha ugu wayn ee kororka lixaadka leh ee dhanka dakhliga ah ayaa ah kororka baaxada dhaqdhaqaaqa hawlaha ganacsi iyo deeqaha laga helay deeq bixiyeyaasha oo korortay kadib markii lagu guulaystay qabsoomidii doorashada madaxtinimada dalka taas oo si isku mid ah kalsooni u galisay bulshada Soomaaliyeed iyo saaxiibada horumarineed ee dalka.

Dhanka Kharashaadka Dowladda ayaa isna kordhay 48% waxa uuna gaaray **USD$769.2 milyan** halka uu sanad maaliyadeedkii hore ee 2021 ka ahaa **USD$472.9 milyan.** kororka dhanka kharashaadka waxaa sabab wayn u ahaa fulinta mashaariic dhowr ah oo laga fuliyey heerarka kala duwan ee dowladda eel eh heer Dowlad Federaal iyo Heer Dowladaha Xubnaaha ka ah DFS.

Dhanka kale mudadii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2022 waxaa casriyeen lagu sameeyey qaabka aruurinta dakhliga furdooyinka iyada oo la diyaariyey shaxda taariifooyinka canshuuraha ee loo yaqaan Ad-valorem-ka, waxaa sidoo kale lagu guulaystay in la diyaariyo shuruucda furdooyinka ee qiimeeynta badeecadaha. Gudiga Isgaarsiinta Qaranka ee NCA iyo Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay ku heshiiyeen Shaxda Kharashaadka laga qaadayo shirkadaha bixiya adeegaa Isgaarsinta dalka. Dakhliga sanadlaha ah ee laga filan karo in uu ka soo xeroodo shirkadaha adeegga isgaarsiinta bixiya waxaa lagu qiyaasayaa **USD$6 milyan** sanadkiiba. Si loo balaariyo baaxada meelaha canshuuraha laga aruuriyo, Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay qaadi doontaa canshuurta macaashul macaashka "Turnover tax" iyada oo lagu bilaabayo 2000 oo ka mid ah shirkadaha la diiwaan galin doono sanadka soo socda ee 2023.

Ministry of Finance
Corso Somalia Street, Shangaani District Mogadishu, Somalia
P.O. Box 106
Email: mof@mof.gov.so
wwww.mof.gov.so

Dhanka kharashaadka hadii aan eegno, waxaynu soo kordhinay dhowr arrimood oo lagu xakamaynayo kharashaadka. Si shakiga looga saaro hanaanka canshuur dhaafka, Wasaaraddu waxa ay fulisay dhammaan qodobada ku xusan Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee khuseeya arrimaha canshuur dhaafka.

Waxaa meel fiican inoo maraya hawlaha diiwaan galinta shaqaalaha aan ku jirin Diiwaanka Maaliyadda Dowladda ee SFMIS-ka. In dhammaan mushaaraadka shaqaalaha joogtada ah iyo kuwa aan joogtada ahayn lagu diiwaan galiyo Diiwaanka Guud ee Maliyadda Dowladda waxa sahlaysaa la socoshada iyo xakamaynta tirada guud ee shaqaalaha, heerka mushaarkooda iyo dalacsiintoodaba. Golaha Wasiirada waxa ay u ansixiyeen Wasaaradda Maaliyadda Siyaasada Jaangoynta Mushaaraadka iyo Garaadaha Shaqaalaha iyo wadiiqadii loo mari lahaa dhaqangalinta hanaanka xakamaynta mushaarka shaqaalaha dowladda.

Waxaa la soo saari doonaaa wareegto ay ku cadahay shuruucda iyo hagayaasha hanaanka wax soo iibsiga degdega ah horraanta sanad maaliyadeedka soo socda ee 2023-ka si loo qeexo wax loo aqoon san karo inay yihiin wax soo iibsi degdeg ah "emergency procurement", hababka la ogolyahay ee loo soo iibsan karo waxyaabaha degdega ah waxaa la waajibin doonaa in la isticmaalo hishiisyo iyo qeexitaano baahiyaha oo mideysan taa oo sahli doonta habka wax soo iibisiga isla markaana ka hor tagaysa in ay wax aan loo baahneyn la soo iibiyo. Waxaa socda diyaarinta Sharciga PPP-ga si loo helo hanaan lagu dhiira galin karo maalgashtayaasha shirkadaha gaarka loo leeyahay iyada oo hoos loo dhigaayo khataraha maaliyadeed ee imaan kara lana dhimayo kharashaadka ku baxaya hawlaha maalgashiga.

Dadaalo lagu xoojinayo maamulka iyo maaraynta hantida guud ayaa Iyana socda.Waaxda Hantida Qaranka ee Wasaaradda Maaliyadda ayaa hogaaminaysa dadaalada lagu tiro koobayo laguna diiwaan galinayo hantida guud ee qaranka iyada oo kaashanaysa Xafiiska Xisaabiyaha Guud dhanka qiimeeynta hantida ma guurtada ah ee qaranka. Kuna shubaya Diiwaanka Maaliyadda Dowladda ee SFMIS-ka.

Ugu danbayntii, waxaan mahad balaaran u gudbinayaa Xisaabiyaha Guud ee Dowladda iyo howlwadeenadeeda ee sida hagar la'aanta ah iskugu hawlay inay soo diyaariyaan Warbixintan Maaliyadeed si waafaqsan xeerarka iyo nidaamyada caalamiga ah ee la isla wada garanayo, una gudbiyey Xafiiska Hantidhowraha Guud ee Dowladda mudadii dastuuriga ahayd ee loogu tala galay.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE MINISTER
XAFIISKA WASIIRKA
MINISTRY OF FINANCE & TREASURY
WASAARADDA MAALIYADDA & LACAGTA

Dr. Cilmi Maxamuud Nuur
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

Ministry of Finance
Corso Somalia Street, Shangaani District Mogadishu, Somalia
P.O. Box 106
Email: mof@mof.gov.so
wwww.mof.gov.so

CADAYNTA WAAJIBAADKA



Warbixinta maaliyadeed ee ku qoran ka bilaabata bogga 23aad kuna eg bogga 41aad waxaa loo soo diyaariyey hab waafaqsan Sharciga iyo xeer nidaamiyaha Maamulka Maaliyadda Dowladda ee 2019 (PFM Act-2019) iyo sidoo kale si waafaqsan Xeerarka Caalamiga ah ee ku xisaabtanka Lacagta Cadaanka ah ee "Cash Basis IPSAS ee sanadkii (2017).

Qodobka 45^{aad} faqradiisa 3^{aad} ee Sharciga Maamulka Maaliyaddu waxa uu farayaa Xafiisk Hantidhowraha Guud ee Dowladdu in uu xaqiijin ku sameeyo Xisaab xirka iyo warbixinta Maaliyadeed ee sanadlaha ah ee Xafiiska Xisaabiyaha Guud u so gudbiyo kadibna ku soo lifaaqo Warbixinta Xaqiijinta Hantidhowraha una gudbiyo Golaha Baarlamaanka muddo ku siman laba bilood oo ka bilaabata markii Xafiiska Xisaabiayah Guud uu soo gudbiyey Xisaab xirka. Waxa sidoo kale uu qodobka 43aad faqradiisa 1^{aad} farayaa Xisaabiyaha Guud ee Dowladdu in uu wargaliyo dhamaan hay'adaha dowladda, dowladaha hoose iyo shirkadaha dowladu leedahay nidaamka xisaabeed ee laga doonayo in ay dhaqan galiyaan. Si waafaqsan qodobkaas kor ku xusan, Xisaabiyaha Guud ee Dowladdu waxa uu qaatay nidaam xisaabeedyada caalamiga ah ee la isla aqoonsanyahay gaar ahaan Nidaamka ku xisaabtanka Lacagta Caddanka ah ee Cahs Basis IPSAS marka uu diyaarinaayo Xisaab xirka Dowladda.

Sidaas daraadeed, anigoo tixraacaya qodobka 45aad faqradiisa 1aad ee Sharciga Maamulka Maaliyadda ee 2019, Waxaan ku faraxsanahay inaan soo gudbiyo Xisaab xirka Dowladda Federaalka Soomaaliya ee Sanad Maaliyadeedka dhamaaday 31 December 2022

Xafiiska Xisaabiyaha Guud waxa uu markasta soo diyaariyaa xisaab xirka Dowladda anagoo ku soo bandhiga dhamaan macluumaadka iyo faahfaahinada daruuriga u ah fahanka bayaanaatka maaliyadeed ee koobaya dhaqdhaqaaqa maaliyadeed ee dowladda.Hadaba waxaan halkaan ka cadeenayaa in dhamaan xisaabaadka ku qoran warbixinada maaliyadeed ay waafaqsanyihiin xisaabaadka ku qoran buugaagta iyo diiwaanka maaliyadeed ee dowladda.

Waxaan sidoo kale qirayaa in Xisaab xirka Dowladda Federaalka Soomaaliya ee sanad maaliyadeedka ku dhamaaday 31 December 2022 loo soo diyaariyey si waafaqsan Sharciga Maamulka Maaliyadda Dowladda ee 2019 iyo Xeer nidaamiyaha Sharciga Maamulka Maaliyadda ee 2020 iyo sidoo kale Nidaamka Caalamiga ah ee Ku xisaabtanka Lacagta Caddaanka ah ee loo yaqaano Cash Basis IPSAS ee soo baxay 2017.

.....

Faatuma Cismaan Faarax,

Xisaabiyaha Guud ee Dowlada

II. FAALO GUUD

1. Dulmar Guud ee Xisaab xirka.

Xisaab xirka iyo Warbixin Maaliyadeedka la socda waxaa had iyo jeer lagu soo gudbiyaa hawlqabadka Dowladda ee dhinac maaliyadda ee sanadlaha ah. Sidaas darted Xisaab xirkaani waxa uu khuseeyaa hawlaqabadka Dowladda ee sanad maaliyadeedka ku eg 31-ka December 2022 sida ku cad muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka. Sidaas si la mid ah, warbixin maaliyadeedkani waxa uu akhristaha u siinayaa fursad in uu si kooban u helo sida ay u dheceen dhamaan mucaamalaatka maaliyadeed ee ay dowladdu fulisay iyo mowqifka maaliyadeed ee dowladda ee dhamaadka sanad maaliyadeedka 2020. Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda ayaa isku keenay warbixin maaliyadeedka guud ahaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowlada kadibna soo saaray warbixintaan.

Xisaab xirka sanad maaliyadeedka 2022 waxaa lagu soo gudbiyey oo lagu soo koobay kaliya ka wabrbixinta hawlaha dowladda ee ku jira qorshaha miisaaniyadda guud ee dowladda ee sanadka 2022 ee uu horay u ansixiyey Golaha Baarlamaanka Soomaaliyeed. **Sidaas darteed iyada oo la eegayo qodobka 1.4.8 ee Nidaamka ku xisaabtanka lacagaha cadaanka ah ee IPSAS, xisaab xirkani waxaa uu quseeyaa kaliya ka warbixinta Dakhliga iyo Kharashaadka ku jiray qorshaha Miisaaniyadda Dowladda ee sanad maaliyadeedka 2022, sidoo kale waxaanan ku jirin oo aan warbixintaan lagu soo darin Dakhliga iyo kharashaadka aan ku jirin Miisaaniyadda ee ay isticmaaleen Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda intii lagu guda jiray isla sanad maaliyadeedka kor ku xusan**. Guud ahaan, saadaasha miisaaniyadda iyo ka warbixinta dhaqaalaha dhabta u soo galay dowladda iyo sidoo kale kharashaadka sida dhabta ah ugu baxay hawlaha dowladda waxaa loo soo bandhigaa sidii ay ugu suurto galin lahayd Dowladda Federaalka Soomaaliya in ay qaadato go'aanada muhiimka u ah horumarinta danaha dhaqaale iyo guud ahaan istiraatiijiyadaha fog ee qaranka. danaha iyo istiraatiijiyadaha qaranka ee muhiimka u ah hormarka dhaqaale ee dalka. Warbixintaan sanadlaha ah waxaa ku dhan guud ahaan waxyaabihii u suurta galay wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda ee u qorsheeysanaa in la fuliyo sanad maaliyadeedkaan.
Hay'adaha Dowladda ee ku jiray qoondada Dowladda ee laga diyaariyey warbixintaan ka eeg faahfaahin tirsi 1.2 (c) ee warbixintaan.

Waxaa lifaaqa danbe si gooni ah loogu soo bandhigay warbixin gaar ah oo la xiriirta qayb ka mid ah dakhliga ay Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladu ka heleen ilo ka baxsan miisaaniyadda Dowlada, gaar ahaan qaybtii ay usoo gudbiyeen Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda.

2. Qaabka iyo Muuqaalada uu ka Koobanyahay Xisaab Xirka.

Warbixinta iyo Xisaab xirkani waxaa loo soo diyaariyey iyada oo la raacayo Nidaamka ku Xisaabtanka lacagta Cadaanka ah ee cash basis-IPSAS 2017. Guud ahaan xisaabaadka dowladda waxaa lagu maamulay laguna saleeyey hab-xisaabeedka lacagta cadaanka ah ee faraya in la aqoonsado mucaamalaatka maaliyadeed kaliya markii si dhab ah lacagta loo helo ama loo bixiyo. Hadaba xisaabrikan waxaa loo so gudbiyey sida uu ay qabto qaybta 1aad ee isla Nidaamka ku Xisaabtanka Lacagta cadaanka ah ee IPSAS taasoo waajibinaysa in macluumaadka soo socda la shaaciyo:

1. Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka

Sida uu qabo Nidaamka ku Xisaabtanka lacagaha Cadaanka gaar ahaan faqradaha kala ah 1.3.12 iyo 2.3.13, muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka waa in lagu soo gudbiyaa Wadarta Dakhliga soo galay Dowladda iyo Kharashaadkii ka baxay Dowladda. Sidoo kale waxaa lagu bandhigaa farqiga u dhexeeya dakhliga iyo kharashaadka sanadka si loo soo muujiyo haraaga soo haray (Dheeri/(Dhiman) khasnada dowladda.Waxaa kale oo lagu soo bandhigaa ilaha dakhliga ka soo galo dowladda iyo meelaha lagu kharash gareeyo dakhligaas

halkaan waxaa la isku barbardhigaa kutalagalka dhaqaale ee dowladda iyo dakhliga dhab ahaan usoo gala dowladda. Warbixintani waxa ay tooshka ku ifinaysaa inta uu la egyahay dakhliga soo galay dowladda iyo sida loo kharash gareeyey si waafaqsan qorshihii uu ogolaaday Golaha Baarlamaanku in loo isticmaalo dakhliga dowladda.

2. *Muuqaalka Kharashaadka ee Hawlaha Dowladda*

Warbixintaan oo ah mid ikhtiyaari ah in la soo bandhigo markii loo eegu shuruudaha Nidaamka Caalamiga ah eek u xisaabtanka lacagaha caddaanka ah ee Cash Basis IPSAS 2017, hadna waxaa lagu soo daray warbixinta iyo xisaab xirka sanad maaliyadeedka 2022 si faahfaahin dheeri ah looga sii bixiyo dakhliga guud ee dowladda iyo sida loo isticmaalay iyadoo loo barbardhigay ku tala galkii hore siduu ahaa iyo dhab ahaan sida wax u dhaceen. Warbixintaan waxa ay soo bandhigaysaa Hawlaha Guud ee Dowladda iyo sida iyo ujeedooyinkaa loo isticmaalay dakhligii la soo xereeyey**.**

3. *Xeerarka Xisaabeed*

Waa xeerarka, axdiyada, mabaadi'da, shuruucda u gaarka ah Dowladda Federaalka Soomaaliya lana dabaqay intii lagu guda jiray diyaarinta iyo soo gudbinta Xisaab xirka Dowladda.

4. *Faahfaahinada iyo Sharaxaada Xisaab xirka*

Faahfaahinada la socda Xisaab xirka waxa ay ka caawinayaan akhristaha in qoto dheer loo fahmo macluumaadka ku xusan Xisaab xirka. Sidoo kale waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin Xisaab xirka.

3. Faahfaahino Dheeri ah

Faahfaahinada la socda warbixintan waxa ay ka caawinaayaan akhristaha in uu si qoto dheer u fahmo lacagaha sida kooban ugu xusan muuqaalada maaliyadeed. Qaybtaan waxaa lagu soo bandhigaa qayb ka mid ah xeerarka xisaabeed iyo faahfaahino kale oo sharaxaad dheeri ah bixinaya. Waxaa kale oo laga heli karaa cadaynta in la dhaqan galiyey shuruudaha ku xusan nidaamka ku xisaabtanka lacagta cadaanka ah ee cash basis-IPSAS.

Halkaan hoose waxaa ku xusan warbixinada laga heli karo macluumaad dheeri ah oo loo baahanyahay in la shaaciyo si kor loogu qaado heerka isla xisaabtanka iyo caad saar la,aanta maamulka maaliyadda dowladda.

1. *Muuqaalka Qulqulka lacagta Cadaanka ah*

Muuqaalka qulqulka lacagaha cadaanka ah waxa ay faahfaahinaysa qulqulka lacagaha cadaanka ah ee ama ku baxa ama ka soo xarooda arrimaha hawlfulinta shaqada dowlada, hawlaha maalgashiga, iyo hawlaha maalgalinta. Waxa ay si qoto dheer u faahfaahinaysa sida loo isticmaalay lacagaha cadaanka ah iyo meelaha laga helay sida soo daynsasho ama dib u bixin daymo lagu lahaa dowladda, soo iibsasho hanti ma guurto ah ama iska iibin hanti ma guurto ah.

2. *Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda (Balance Sheet***)**

Muuqaalka mowqifka maaliyadeed ee Dowlada "horay loogu yaqaanan Muuqaalka Hantida iyo Daymaha Dowladda" waxaa lagu soo gudbiyey faahfaahin ku saabsan Hantida iyo Daymaha Dowladda oo muujinaaya saafiga hantieed ee Dowladda oo ah (Farqiga u dhexeeya Hantida iyo Daymaha Dowladda).

3. *Muuqaalka Kharashaadka Daymaha (Mushaar***)**

Muuqaalkaan waxaa lagu soo bandhigaa macluumaad ku saabsan daymaha lagu leeyahay dowladda ee ka dhashay dhanka kharashaadka sida soo daynsasho agab iyo adeeg ama mushaar aan la bixin dhowrkii

4. Muuqaalka Daymaha Dowladda

Sidoo kale halkaan waxaa lagu faahfaahinayaa daymaha dowladaha shisheeye ku leeyihiin dowladda. Daymaha nuucaan ah waxaa loo kala bixinayaa laba qaybood oo kala ah daymo hal dhinac le ah, daymo laba dhinacle ah iyo daymo dhinacyo badan ah. Daymaha laba dhinaclaha ah waxaa loo sii kala qaadayaa laba qaybood oo kala ah daymaha ay leeyihiin dowladaha ku midoobay Paris Club iyo kuwa aan ku jirin PARIS Club.

5. Muuqaalka Dakhliga aan ku jirin Miisaaniyadda

Muuqaalka Dakhliga aan ku jirin Miisaaniyadda Dowladda waxa lagu muujinayaa guud ahaan dakhliga soo gala Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dowladda ee an ku jirin miisaaniyadda ee ay ka heleen dhinacyo kale oo ka taageera hawlaha hay'adaa. Halkaan waxaa lagu soo gudbinayaa Wasaaradaha iyo Hay'adaha inta ay usoo gudbiyeen Xisaabiyaha Guud kaliya.

4. Dulmar Guud iyo Falanqayn Kooban ee Xisaab xirka sanadka 2022

Shaxda 1aad Warbixinta Maaliyadeed oo Kooban

Waxqabadka Maaliyadeed	**2022**	**2021**	**2020**
	USD$	**USD$**	**USD$**
Dakhli	769,237,846	472,901,997	496,826,962
Kharashaad	731,434,866	495,842,745	485,287,246
Dheeri/(dhiman)	**37,802,980**	**(22,940,748)**	**11,539,716**
% Isbadal	5%	-5%*	2%
Kutalagalkii Hore	929,924,528	666,484,657	476,150,905
Ku noqoshada Miisaaniyadda	**929,924,528**	**666,484,657**	**685,270,734**
Kharashaadka Dhabta ah	731,434,866	495,842,745	485,287,246
Kharashadka aan la isticmaalin	**(198,489,632)**	**(170,641,912)**	**(199,983,488)**
Is bedelka	21%	26%	29%
Ku noqoshada Missaniyadda	**944,859,528**	**666,484,657**	**685,270,734**
Dakhliga dhabtaa	769,237,846	472,901,997	496,826,962
Miisaaniyada an la isticmaalin	**(175,621,682)**	**(193,582,660)**	**(188,443,772)**
% Isbadalka	**-19%**	**-29%**	**-27%**

*SM 2021 waxuu muuujinayaa hoos udhac 5% ah ee dhanka dakhliga ah marka lala barbardhiga kharashka dhabta ee la galay,hoos udhacaas waxaa lagu daboolay haraaga lacagta cadaanka ah ee sanadki 2020

5. Falanqaynta Dakhliga


Dakhliga soo galay Dowladda Federaalka Soomaaliya intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu hoos uga dhacay ku talagalkii lacag gaaraysa $175.6million oo ka 18.5%. sidoo kale waxuu kor kacay 19% markii loo eego dakhliga guud.Dakhligii sanadkii ka horeeyey ee 2021 waxa uu gaaray $472.9 milyan halka uu sanadkaan 2022 uu noqday USD$769.2 milyan. Isha ugu weyn ee uu dakhligu ka soo galay Dowladda waxa uu ahaa dakhliga Deeqaha Dibada waxaa xiga dakhliga laga aruuriyo gudaha wadanka oo ah dakhliga canshuuraha iyo dakhliga khidmadaha.

Shaxda 1aad Dakhliga oo Kooban

Dakhliga	2022	2021	2020
Canshuuraha	181,691,842	162,766,994	139,529,217
Dakhliga aan Canshuurta ahayn	80,977,903	66,794,410	71,704,628
Deeqaha Dibedda	459,241.797	146,975,019	285,593,117
Dakhli Kale (Assest Recovery)	3,285,354	-96,365,574	-
Dakhli Kale (SDR)	44,040,950	**472,901,997**	
Wadarta Dakhliga	**769,237,846**		**496,826,962**

Jaantuska hoose waxa laga dheehan karaa isbarbardhiga ilaha kala duwan ee dakhliga dowladdu ka soo xeroodo oo u qaybsan Dakhliga Canshuuraha, Dakhliga aan Canshuuraha ahayn(ama Khidmadaha) iyo Dakhliga Deeqaha laga helo dibedda oo sanadkaan gaaray 60% ka mid ah dakhliga guud. Dakhliyada ilaha kale laga helay waxa ay ka noqdeen dakhliga guud 34%. Dakhliga kale 6%


Jaantuska 1aad: Isbarbardhiga Ilaha Dakhliga Dowladda ee SM2022



Dakhliga aan Canshuuraha ahayn.

sida ka muuqata shaxda 2aad. Dakhliga aan canshuuraha ahayn waxa uu gaaray $80.9milyan sanad maaliyadeedka 2022, halka uu ka ahaa $66.7 milyan sanad maaliyadeedkii hore ee 2021 sare u kacaas ayaa gaaray 14.2 milyan. Sababaha ugu weyn ee sare u kaca dakhliga aan canshuuraha ahayn waxaa ka mid ah doorashadii ka dhacday dalka sanadkaan oo ay dalka soo galeen muwaadiniin fara badan oo kor u qaaday lacagaha ka soo xerooday duulimaadyada diyaaradaha. Sidoo kale waxaa sanadkaan kordhay dakhliga soo saarista baasaboorada maadaama muwaadiniin badan isku diyaarinayeen ka qeybgalka doorashooyinkii dalka ka dhacay.

Jaantuska 1aad Isbarbardhiga Dakhliha ee SM2022



Dakhliga Canshuuraha

Dakhliga canshuuraha ee soo xerooday Sanad Maaliyadeedka 2022 waxa uu gaaray USD$181.7 milyan halka uu ka ahaa USD$ 162.8milyan Sanad Maaliyadeedki ka horeeyey ee 2021. Korarka Dakhliga oo gaaray USD$18.9milyan ayaa loo sababeenayaa horumarka laga sameeyey hawlaha dakhli aruurinta iyo fidinta baaxada canshuuraha iyada oo sanadkaan canshuuraha dakhliga shaqaalaha shirkadaha gaarka loo leeyahay oo la kordhiyey. Sidoo kale waxaa kordhay dakhliga laga helay badeecadaha ka soo daga furdada Xamar madaam uu dalka ka soo kabanayeey saameynta caabuqa 19 sanadahii danbe sameyna ku yeeshay habsami u socodka howlaha furdada Xamar .

Deeqaha Dibedda

Maaliyadeedka 2022 waxa uu gaaray USD$459.2milyan oo ka ah (60%) dakhliga guud halka uu Sanad Maaliyadeedkii hore ee 2021 uu ka ahaa USD$147milyan. Sare u kaca gaaray USD$312.2 milyan oo u dhiganta 212% ayaa yimid kadib markii Bangiga Aduunku soo kordhay mashaariic cusub, sidoo kale lacagaha ay isticmaaleen mashaariicdii hore la kordhiyey kadib markii doorashadii madaxtinimada dalka lasoo gabagabeeyey. Waxaa midowga yuruba Budget support ah .


Daymaha

Mudadii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2022. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa soo galay lacago laga helay Hay'adda Lacagta Addunka ee "IMF" oo gaaraysay 44milyan, lacagahaas oo lagaran ogyahay Special drawing Rights "SDR". Lacagtaas ayay dowladdu u aqoonsatay amah muddo fog ah. Daynta SDR-ku waxa ay dkahliga guud ka tahay 6%.

1. Falanqaynta Kharashaadka

Guud ahaan kharashaadka dowlada waxa ay u qaybsamaan afar qaybood oo kala ah, Kharashaadka joogtada ah, Kharashaadka Ra'sulmaalka, Kharashaadka Deeqaha ee ay dowladu siiso Maamul Goboleedyada iyo Dowladaha Hoose iyo kharashaadka dib-u-bixinta daymaha. Jaantuska 3aad waxa uu soo koobayaa qaybaha ugu waaweyn ee kharashaadka Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Jaantuska 2aad Qaybaha Kharashaadka




Kharashaadka Joogtada ah waa kharashaad intooda badan ku baxa arimaha mushaaraadka shaqaalaha iyo soo iibsiga agab ama adeega hawl maalmeedka dowlada muhiimka u ah. Kharashaadka joogtada ah waxaa kale oo ka mid ah bixinta dulsaarka iyo khidmado kale. Jaantuska hoose waxa uu soo koobaya meelaha uu ku baxo dakhliga soo gala dowladda. Wadarta kharashaadka baxay sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa USD$731.4milyan markii loo barbardhigo sanadkii ka horeeyey ee 2021 kaas oo kharashaadku

kordhay lacag dhan $235.6milyan oo u dhiganta (48%). Kharashaadka ugu badan waxa ay ku baxeen Mushaarka shaqaalaha 259.6 milyan (35%). Halka kale ee kharashaadka ugu badan ku baxeen waxa ay ahayd lacagaha lagu caawiyey bulshada danyarta ah “Social benefit”.

Shaxda 3aad ee hoos ka muuqata waxaa ku faahfaahsan qaybaha ugu waaweeyn ee kharashaadka dowladda sanad maaliyadedka 2022 oo loo barbardhigay sanadihii ka horeeyey ee 2022, 2021 .

Shaxda 2aad Kharashaadka oo kooban

	2022	2021	2020
Kharashaadka			
Mushaarka Shaqaalaha	259,578,811	250,099,404	227,014,247
Isticmaalka agabka iyo adeegga	140,670,12	106,059,789	80,696,010
Deeqaha la bixiyey	111,242,917	45,850,523	80,283,381
Kharashaadka Ra’sulmaalka	13,200,988	16,099,178	18,551,695
Bixinta Dulsaaro	693,045	1,440,881	14,444,846
Kaalmo dhaqaale	5,115,305	1,271,695	2,161,914
Kaalmo arrimo Bulsho	188,936,115	33,715,682	62,135,152
Dib u bixin deyna	11,997,573	35,156,428	0
Wadarta	**731,434,866**	**495,842,746**	**485,287,246**



2. Kharashaadka Ra’sulmaalka

Sanad maaliyadeedka 2022 kharashka ku baxay ra’sulmaalka waxa uu gaaray USD$13.2 milyan halka uu sanadkii hore ee 2021 ka ahaa 16.1 milyan, waxa uu hoose uga sanadkii hore lacag dhan dhacay 2.9milyan oo u dhiganta (18%).
Kharashaadka ra’sulmaalka ee ugu badan waxa ay ku baxeen

Shaxda 3aad Kharashaadka Ra'sulmaalka

Kharashaadka Ra’sulmaalka	2022 USD$	2021 USD$
Dhismooyinka deegaanka ah	835,695	1,968,456
Dhismeyaal kale	95,296	-
Dhismooyinka ee aan deegaanka ahayn	-	151,633
Qalab xamuul	195,650	41,390
Makinado iyo Qalab kale	1,861,453	4,052,767
Qalab xafiiseed	474,634	208,635
Qalab ICT	1,777,201	2,610,755
Softweero and application	618,114	122,443.00
Hanti kale oo ma guurto ah	7,342,944	6,087,760
Hanti aan muuqan	-	855,340
Wadarta Kharashaadka Ra’sulmaalka	**13,200,988**	**16,099,179**

3. Ku talagalkii hore ee miisaaniyadda dowladda iyo hharashaadka dhab ahaan u Baxay.

Miisaaniyada Guud ee Dowlada oo ah halka asalka ah ee lagu soo saaro qorshaha maaliyadeed ee sanadlaha ah ee ay dowladu leedahay ayaa lagu jaan gooyaa dakhliga iyo kharashaadka dowlada ee sanadka soo socda. Dhinaca kharashaadka waxaa lagu go’aamiyaa kharashaadka loo baahnaan doono iyo ilaha laga heli doono dakhligii lagu maalgelin lahaaba. Hadaba qorshihii ku talagalka kharashaadka waxa uu ahaa USD$929.9milyan.Ma jirin wax ku noqosho saadaasha miisaaniyadda ah intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka2022.

Shaxda hoose waxa ay tusinaysaa ku talagalka miisaaniyada iyo kharashaadka sida dhabta ah u baxay

Shaxda 5aad Isbarbardhigga Kutalagalka iyo Natiijada Dhabta ah ee Kharashaadka

Nuuca Kharashka	2022		
	Kutalagalka USD$	Natiijada Dhabta USD$	Farqiga (Inta aan la isticmaalin) USD$
Mushaarka shaqaalaha	266,016,979	259,578,811	-2%
Isticmaalka agabka iyo adeega	232,247,363	140,670112	-39%
Deeqaha la bixiyey	132,355,417	111,242,917	-16%
Kharashaadka Ra'sulmaalka	33,503,237	13,200,988	-61%
Dulsaarka iyo deyn celin	12,935,782	12,690,618	-2%
Kaalmo dhaqaale	5,546,710	5,115,305	-8%
Kaalmo arimo bulsho	247,314,243	188,936,115	-24%
Kharshaad kale (Contingency Fund)	4,796	-	-100%
Wadarta Kharashaadka.	**929,924,527**	**731,434,866**	**-21%**

9. Hawlaha Dowladda

Kharashaadka ku baxa hawlaha Dowladda ee loo yaqaano (COFOG) waxa uu muujinayaa sida loo isticmaalay dakhligii dawladda soo galay. Dhaman kharashaadka ku baxay howlaha Dowladda ayaa shaxda hoose lagu soo koobay.

Shaxda 6aad Kharashaadka Hawlaha Dowladda

	2022	2021
Qaybaha Hawlaha Dowladda (COFOG)	**USD$**	**USD$**
Hawlaha Adeegga Guud	279,181,923	168,556,230
Difaaca	99,777,410	92,210,200
Amniga iyo Kala danbayta	100,399,256	95,985,216
Dhaqaalaha	215,891,465	75,316,864
Caafimaadka	11,375,284	21,163,991
Waxbarashada	20,176,767	17,300,745
Arrimaha Bulshada	1,852,530	1,430,732
Arrimaha Diinta, Dhaqanka iyo hiddaha	2,780,260	1,886,576
Wadarta Kharashaadka Hawlaha Dowladda	**731,434,866**	**473,850,554**

10. Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed (Muuqaalka Hantida iyo Daymaha Maaliyadeed).

Maadaama Dowladda Federaalka ah ee Soomaaliya ay ku dhaqanto Nidaamka ku Xisaabtanka Lacagaha Caddaanka ah (Cash basis IPSAS) Sidaas daraadeed Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ma soo wada bandhigayo dhamaan handitda iyo daymaha maaliyadeed ee dowladda balse waxa si hordhac ah loo soo bandhigo macluumaadka la hayo si halkaas looga sii daro wixii soo kordha mustaqblka.
Shaxda hoose waxa ay muujinaysaa Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda

Shaxda 7aad Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda

Description	USD$	USD$	% Isbadalka
Kaashka iyo kaash u dhigmaha	81,001,443	43,198,462	88%
Daymo maqan			
Wadarta Hantida	**81,001,443**	**43,198,462**	-
Daymaha taagan			
Daymaha Kharashaadka	52,795,274	52,795,274	-
Wadarta Daymaha	**52,795,274**	**52,795,274**	
Saafiga Hantida Maaliyadeed	**28,206,168**	**9,596,812**	**88%**

(a) Saafiga hantida maaliyadeed waxay la mid tahay wadarta dakhliga iyo wadarta daymaha oo aysan ku jirin daymaha dibeda markii lakala jaro.

(b) Daymaha kharashaadka waa daymaha ilaa iyo hada la xaqiijiyey in lagu leeyahay dowlada oo ah daymo dhanka mushaarka shaqaalaha iyo isticmaalka agabka iyo adeega. Daymaha kale waa daymamaha diiwaanka gashan sanad maaliyadeedka 2022 oo an la bixin dhamaadka sanadka.

11. Daymaha Dowlada lagu leeyahay (Public Debt)

Daymaha Dowladda lagu leeyahay waxa ay iskugu jiraan daymo Dhinacya Badan ah, Daymaha hay'adaha ku Jira Dallada ree Paris Club-ka, iyo Daymaha Wadama kale ku leeyihiin Dowladda Federaalka soomaaliya. Daymaha Dhinacya badanta ahi waxa ay isugu jiraan daymo ay leeyihiin hay'adaha maaliyadeed ee caalamiga ah sida Hay'adda Lacagta Addunka ee IMF, Bangiga Addunka. Daymaha hay'adaha ku bahoobay Paris Club-ku waxa ay isugu jiraan wadamo daymo ku leh dalka oo doonaya in la helo wadiiqo saxan oo xal loogu heli karo daymaha aadka u culus ay ay wadamada daymaha qaatay.


Wadarta daymaha dowladda ee dhamaadka sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu yahay $4.4 39bilyan. Daymaha Dhinacya badanta ahi waxa ay ka yihiin wadartaas 23% (1,039.52 billion). Daynlayda ugu waawayn waxa ku jira IMF-ta, AFESD iyo IDA. Daymaha laba dhinaclaha ah waxa weeye $3.39.74bilyan. Hay'adaha ku jira dalada Paris Club waxa ay leeyihiin 77% daymaha laba dhinaclaha ah. Daynlayda laba dhinaclaha ah waxaa ka mid ah Ruushka, Mareekanka, Talyaaniga iyo Faransiiska.Hay'adaha an ku jirin dallada Paris Club iyaguna waxa ay leeyihiin Waxa iyagana ugu waaweyn Sanduuqa Abu Dhabi, wadmada Ciraaq, Boqortooyada Sacuudiga iyo sanduuqA Kuweyd. Santtqa Iraq iyokuwait Bankiga deymaha Serbian to USD 2.53 million.

Shaxda iyo Jaantuskan hoose waxaa laga dheehan karaa qaybaha ay ka koobantahay daymaha dibeda looga leeyahay Dowlada Federaalka Soomaaliya

Dhamaan lacagta ku qoran halkaan waa Billion US$4.440

Shaxda 8aad Daymaha Dowladda

Daymaha	12/31/22 USD$	12/31/21 USD$	% Isbadalka
Daymaha Dhinacya badanta ah	1,040	1,081	-0.04
Daymaha Paris Club	2,662	2,678	-0.01
Daymaha an ahaynParis Club	735	725	0.01
Daymaha Ganacsiga-Serbiya	3	2	-
Wadarta Daymaha	**4,440**	**4,486**	**-0.03**



.....

Faatuma Cismaan Faarax,

Xisaabiyaha Guud ee Dowlada

III. MUUQAALKA DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA
Dowladda Federaalka Soomaaliya

III. MUUQAALKA DAKHLIGA IYO KHARASHAADKA

Dowladda Federaalka Soomaaliya

Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka

Ee Sanadka Ku Dhamaaday 31 December 2022

[Habka loo kala soocay Dakhliga iyo Kharashaadka Waa Habka kala sooca Dhaqaalaha]

	Note	2022 USD$	2021 USD$
DAKHLIGA			
Dakhli canshuuro	1	181,691,842	162,766,994
Dakhli aan Canshuur ahayn	2	80,977,903	66,794,410
Deeqaha Dibedda	3	459,241,979	146,975,019
Dakhli Kale (Assest Recovery)	5	3,285,354	-
Dakhli Dayn ah (SRD)	4	44,40,950	96,365,574
Wadarta Dakhliga		**769,237,846**	**472,901,997**
Kharashaadka			
Mushaarka Shaqaalaha	6	259,578,811	250,099,404
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	7	140,670,112	106,059,789
Kharashaadka Ra'sulmaaka	8	13,200,988	16,099,178
Deeqo la bixiyey	9	111,242,917	45,850,523
Dulsaar daymo iyo Khidmado kale	11	693,045	1,440,881
Kaalmo Dhaqaale	12	5,115,305	1,271,695
Kaalmo Bulsho	10	188,936,115	39,864,848
Daymo la bixiyey	13	11,997,573	35,156,428
Wadarta Kharashaadka		**731,434,866**	**495,842,745**
Dheeri/(Dhiman) Dhamaadka Sanadka		37,802,980	(22,940,748)
Haraaga Kaashka Bilowga sanakda	14	**43,198,463**	66,139,211
Dheeri/(Dhiman) Dhamaadka Sanadka		37,802,950	(22,940,748)
Haraaga Kaashka Dhamaadka Sanadka	14	**81,001,443**	**43,198,463**

Sida ku cad faahfaahinta tirsi 13aad lacag gaaraysa US$81,001,413 (SM2022 (SM2021: US$43,198,463) oo ku jirta muuqaalka haraayada bangiga ku haray dhamaadka sanadkaan waxa ay gaar u tahay mashaariicda dibedda laga maalgaliyo.

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaab xirka ee ku qoran laga bilaabo boga 22aad kuna eg bogga 41aad waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaab xirka.

.....

Faatuma Cismaan Faarax,
Xisaabiyaha Guud ee Dowlada

IV. MUUQAALKA ISBARBARDHIGA SAADAASHA MIISAANIYADA IYO NATIIJADA DHABTA AH

Dowladda Federaalka Soomaaliya

Muuqaalka Isbarbardhiga Saadaasha Miisaaniyadda iyo Natiijada Dhabta ah

Ee Sanadka Ku Dhamaaday 31 december 2022

Miisaaniyad ku dhisan Nidaamka Ku Xisaabtanka Lacagaha Caddaanka ah

[Habka loo kala soocay Dakhliga iyo Kharashaadka Waa Habka kala sooca Dhaqaalaha]

	Fahfahin	2022 Kutalagalki Hore USD$	Waxka badalka Kutalagalka USD$	Kutalaglkii Ugu Danbeeyey USD$	Natiijada Dhabtah USD$	Farqiga u dhexeeya Kutalagalkii iyo Natiijada Dhabta ah USD$	% Farqiga
Dakhli							
Canshuuro	1	173,699,181	-	173,699,181	181,691,842	7,992,661	5%
Dakhli aan canshur ahayn	2	76,399,293	-	76,399,293	80,977,903	-4,578,610	6%
Deeq laba dhinacle ah-Deeq	3	39,600,000	-	39,600,000	37,100,000	(2,500,000)	-6%
Deeq dhinacya badan ah-Deeq	3	655,161,090	-	655,161,090	422,141,797	(233,019,293)	-36%
Dakhli dayn ah	4	-	-	-	44,040,950	44,040,950	100%
Dakhli kale	5				3,285,354	3,285,354	100%
Wadarta Dakhliga		**944,859,564**	-	**944,859,564**	**769,237,846**	**(222,948,022)**	**-24%**
Kharashaadka							
Mushaarka	6	263,238,638	2,778,638	266,016,979	259,578,811	6,438,168	2%
Shaqalaha	7	216,833,090	15,414,273	232,247,363	140,670,112	91.577,222	39%
Isticmaalka agabka iyo adeegga	12	7,546,700	(1,999,990)	5,546,710	5,115,305	431,405	8%
Kaalmo dhaqaale	9	119,504,205	12,850,213	132,355,417	111,242,917	21,112,500	16%
Deeqo la bixiyey	13	2,500,000	10,435,782	12,935,782	12,690,618	245,164	2%
Daymo iyo Dulsaaro la bixiyey	10	274,965,000	(27,650,757	247,314,243	188,936,115	58,378,128	24%
Kaalmo arimo bulsho		2,500,000	(2,495,204)	4,796		4,796	100%
Kharashaad kale-Lama filaanka							
Wadarta Kharashaadka		**887,087,336**	**9,333,955**	**896,421,291**	**718,233,879**	**178,187,412**	191%
Kharashaadka Ra'sulmaalka	8	42,837,192	(9,333,955)	33,503,237	13,200,988	20,302,249	61%

Wadarta Kharashaadka	**42,837,192**	(9,333,955)	**33,503,237**	13,200,988	20,302,249	61%
ra'sulmaalka Wadarta Kharashaadka	**929,924,528**	-	**929,924,528**	**731,434,867**	**198,489,661**	21%
Saafiga qulqulka Kaashka	**14,935,036**	-	**14,935,036**	**37,802,980**	**(421,437,683)**	-45%

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaab xirka ee ku qoran laga bilaabo boga 22aad kuna eg bogga 41aad waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaab xirka.

.....

Faatuma Cismaan Faarax,
Xisaabiyaha Guud ee Dowlada

Iyada oo la raacayo shuruudaha Xeerarka ku xisaabtanka lacagta caddaanka ah ee IPSAS, 2017 farqiga miisaaniyadda waxaa si faahfaahsan loogu sharraxay warbixinnada waxqabadka miisaaniyadda ee lagu daabacay online-ka:*https://mof.gov.so/publications/end-year-budget-fiscal-performance-report-fiscal-year-2022*

V. MUUQAALKA KHARASHAADKA HAWLAHA DOWLADDA

Dowladda Federaalka Soomaaliya

Muuqaalka Isbarbardhiga Saadaasha Miisaaniyadda iyo Natiijada Dhabta ah

Ee Sanadka Ku Dhamaaday 31 december 2022

[Habka loo kala soocay Dakhliga iyo Kharashaadka Waa Habka kala sooca Dhaqaalaha]

Hawlaha Dowladda Ee Habka Kala sooca GFS 14-ka	**Kutalagalka Miisaaniyadda 2022 US $**	***Natiijada Dhabta ah* 2022 US $**	***Natiijada Dhabta ah* 2021 US $**
Kharashaadka Joogtada ah			
Adeegga Guud ee Dowladda	295,659,800	271,661,500	160,261,061
Adeegga Difaaca	100,192,477	99,777,410	92,210,200
Aminiga iyo kala danbaynta	115,683,314	100,269,024	94,475,575
Arimaha Dhaqaalaha	291,834,086	211,586,229	74,204,443
Adeeg Caafimaad	56,851,844	10,685,854	16,773,930
Adeeg waxbarasho	29,126,954	19,621,069	16,508,859
Adeega Arimaha Bulshada	3,890,354	1,852,530	1,430,732
Arimaha Diinta, Dhaqanka iyo Dalxiiska	3,177,666	2,780,260	1,886,576
Wadarta Kharashaadka Joogtada ah	**896,416,494**	**718,233,879**	**457,751,376**
Kharashaadka Rasulmaalka			
Adeegga Guud ee Dowladda	18,7662,11.08	7520393	8,295,169
Adeegga Difaaca	-	-	-
Aminiga iyo kala danbaynta	1,956,940	130,232	1,509,641
Arimaha Dhaqaalaha	9,283,050	4,305,235	1,112,421
Adeeg Caafimaad	1,731,501	689,430	4,390,061
Adeeg waxbarasho	1,765,536	555,698	791,886
Adeega Arimaha Bulshada			-
Arimaha Diinta, Dhaqanka		-	-
Wadarta Kharashaadka Rasulmaalka	**33,503,237**	**13,200,988**	**16,099,178**
Wadarta Kharashaadka	**929,919,732**	**731,434,866**	**473,850,554**

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaab xirka eek u qoran laga bilaabo boga 22aad kuna eg bogga 41aad waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaab xirka.

.....

Faatuma Cismaan Faarax,
Xisaabiyaha Guud ee Dowlada

VI. MUUQAALKA QULQULKA LACAGTA CADAANKA AH

Dowladda Federaalka Soomaaliya
Muuqaalka Qulqulka Lacagta Caddaanka ah
Ee Sanadka Ku Dhamaaday 31 december 2022
[Habka loo kala soocay Dakhliga iyo Kharashaadka Waa Habka kala sooca Dhaqaalaha]

	Fahfahin	2022	2021
Qulqulka Kaashka ee Hawlfulinta			
Dakhliga			
Canshuuraha	1	181,691,842	162,766,994
Dakhliga aan canshuuraha ahayn	2	80,977,903	66,794,410
Deeqaha Dibedda	3	459,241,979	146,975,019
		721,911,542	**376,536,423**
Kharashka ku baxa Halwfulinta			
Mushaarka Shaqaalaha	6	259,578,811	250,099,404
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	7	140,670,112	106,059,789
Deeqaha la bixiyey	9	111,242,917	45,850,523
Kaalmo Dhaqaale	12	5,115,305	1,271,695
Kaalmo Bulsho	10	188,936,115	39,864,848
Dulsaarka Daymaha	11	693,045	1,440,881
		706,236,305	**444,587,139**
Wadarta Kharashaadka Hawlfulinta		**15,675,237**	**(68,050,715)**
Saafiga Qulqulka Kaashka ee Hawlfulinta			
Qulqulka kaashka ee Maalgashiga			
Soo ibsasho qalab ra'sulmaal	8	13,200,988	16,099,178
Saafiga Qulqulka kaashka ee Maalgashiga		(13,200,988)	**(16,099,178)**
Qulqulka Kaashka ee Maalgalinta			
Daymo / Hormaris (SDR)	4	44,040,950	96,365,574
Dakhle kale (asste recovery)	5	3,285,354	-
Dib-u-bixin Daymo	13	(11,997,573)	(35,156,428)
Saafiga Qulqulka Kaashaka ee Maalgalinta		**35,328,731**	**61,209,146**
Saafiga kororka/(hoos u dhaca) Kaashka iyo Kaash U dhigmaha		37,802,980	(22,940,748)
Kaashka iyo Kaash u dhigmaha Sanadka bilowgiisa 1, January	14	43,198,463	66,139,210
Kaashka iyo Kaash u dhigmaha ee Dhamaadka Sanakda 31, Dec.	**14**	**81,001,443**	**43,198,463**

Sida ku cad faahfaahinta tirsi 13aad lacag gaaraysa US$81,001,443(SM2022 (SM2021: US$41,137,461) oo ku jirta muuqaalka haraayada bangiga ku haray dhamaadka sanadkaan waxa ay gaar u tahay mashaariicda dibedda laga maalgaliyo.

Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinta la socota xisaab xirka eek u qoran laga bilaabo boga 22aad kuna eg bogga 41aad waxa ay qayb muhiim ah ka yihiin warbixinta iyo xisaab xirka.

.....

Faatuma Cismaan Faarax,
XisaabiyahaGuudecDowladda

1. MACLUUMAAD GUUD IYO XEERAR XISAABEEDKA DOWLADA

I. Xeerarka xisaabeed

1.1. Warbixin Guud

Xarunta ugu wayn ee ay ku shaqayso xiligaan Dowlada Federaalka Soomaaliya waa magaalada Muqdisho oo isla markaasna ah magaala madaxda dalka. Hay'ada soo gudbisay Xisaab xirkaan waxaa laga heli karaa ciwaankaan hoose oo ah:

Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowlada
Dhismaha Wasaarada Maaliyada
Degmada Shingaani
Muqdisho
Soomaaliya

Hawlaha loo igmaday Dowlada Federaalka Soomaaliya iyo hay'adaha hoos yimaada waxaa ka mid ah in muwaadinka soomaliyeed ka haqabtirto adeegyada dowladeed ee uu ubaahanyahay si joogto ah.

Sharciyada maaliyadeed ee lagu maamulay hawlaha la xiriira maaliyada Dowlada waxaa ka mid ah; :-

6. Sharciga Qoondada Miisaaniyada ee 2022; Iyo
7. Sharciga Maamulka Maaliyadda (2019) iyo;
8. Sharciga wax iibsiga Dowladda ee (Procurement Act)

Desember 2019 Baarlamaanka Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa uu ansixiyey Sharciga Maamulka Maaliyadda Dalka, Sidoo kale Xeer nidaamiyaha Sharciga Maamulka Maaliyadda Dalka ayaa isna la ansixiyey December 2020. Sharciga cusub ee Maamulka Maaliyaddu waxa uu badali doonaa Sharcigii hore ee Habraaca Maaliyadda iyo Xisaabaadka Dowladda ee 1961 ee markii danbe 1971 wax looga badalay. Sharcigaan cusub waxba u sii adkeenayaa Baahidii loo qabay in la soo saaro warbixin maaliyadeed ee uu farayay sharcigii hore ee la badalay. Sidaas daraadeed waxa uu farayaa in Xisaab xirka loo soo diyaariyo hab waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee xisaabaadka dowladda.qodobka sida ku cad 94aad faqradiisa 2aad, halka qodobka 103aad ee Sharciga cusubi kusii kordhinaayo faahfaahinada dheeriga ah ee loo baahanyahay in la raaciyo xisaab xirka.

1.2. Xeerar xisaabeedka dowlada

Xeerarka halkaan ku xusan waxaa loola jeedaa mabaadi'da gaarka ah, waxyaabaha lagu saleeyo aqoonsiga mucaamalada, hishiisyada xisaabeed qawaaniinta maaliyadeed ee ay ku dhaqanto Dowladda Federaalka Soomaaliya marka la diyaarinayo lana soo bandhigayo warbixinada maaliyadeed ee sanadlaha ah. bogaga soo socda waxaa ku qoran xeerarka xisaabeed ee loo cuskaday diyaarinta xisaab xirka iyo warbixinada maaliyadeed ee la socda. Xeer kasta oo halkaan lagu xuso waa habka saxda ah ee si joogto ah loogu isticmaalo mucaamalaadka malaiyadeed ee dalka. Qaar ka mid ah xeerarkaas hoos ka sii akhri

A) Xeerarka lagu saleeyey Diyaarinta Xisaab xirka

Xisaab xirka waxaa uu waafaqsanyahay shuruucda soo socota;

- Sharciga Maamulka Maaliyada Dalka ee 2019
- Xeerarka Xisaabeed ee Caalamiga ah ee (IPSAS) gaar ahaan Nidaamka Ku Xisaabtanka Lacagaha Caddaanka ah ee 2017.

Si waafaqsan tuduca 1aad iyo qodobla 43aad faqradiisa 2aad ee Sharciga PFM-ka, Xisaab xirkani waxa loo soo diyaariyey hab w aafaqsan dhamaan Xeerarka Xisaabeed ee Caalamiga ah ee la isla garanaayo ee loo

yaqaano International Public Sector Accounting Standards ama (IPSAS), gaar ahaan Nidaamka ku xisaabtanka Lacagta Caddaanka ah ee 2017 ee uu soo saaray Dallada Caalamiga ah ee Dajinta Xeerarka xisaabeed ee Dowladaha ee (IPSASB) ee hoos yimaada Hay'adda Caalamiga ah ee Xisaabaadka ee (IFA) sida ku cad qodobka faahinta xeerarka xisaabeed ee hoos ku xusan.

Marka la dhaqan galiyo shuuucda nidaamka ku xisaabtanka lacagaha caddaanka ah kaliya ee IPSAS warbixinada ugu muhiimsan waxaa ka mid ah kuwan soo socda;

Muuqaalka Dakhliga iyo Kharashaadka
Muuqaalka isbarbardhiga Kutalagalka miisaaniyadda iyo Natiijada dhabta ah;
Xeerarka xisaabeed iyo faahfaahinada la socda;
Warbixinada asaasiga ah ee kor ku xusan waxaa lala soo gudbiyay faahfaahino iyo macluumaad kale oo muhiim tahay in la shaaciyo sida uu qabo Xeernidaamiyaha Sharciga Maamulka Maaliyadda ee 2020 qodobkiisa 103aad faqrada 2aad waxaana ka mid ah macluumaadkaas;

- Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda (Balance sheet)
- Warbixinta Dakhliga iyo Krashaadka aan ku jirin Miisaaniyadda Dowladda;
- Warbixinta Daymaha kharashaadka;
- Warbixinta Daymaha Dibedda looga leeyahay Dowladda.
- Warbixinta Qalabka iyo Hantida Maguurtada ah

b) Mabda'a sii joogtaynta hawlaha Dowladda (Going concern)

Xisaab xirka dowladda waxaa loo diyaariyey hab waafaqsan mabda'a sii joogtaynta hawlaha dowladda. dhamaan xeerar xisaabeedka dowladda waxaa loo dhaqan galiyey si joogto ah intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka.

c) Hay'ada warbixinta soo gudbisay

Sida uu qabo Sharciga Maamulka Maaliyadda ee 2019 qodobkiisa 45aad faqradiisa 1aad ee awooda u siinaya Xisaabiyaha Guud ee Dowladdu in uu soo diyaariyo xisaab xirka. Hadaba Xisaabxirkan waxaa soo diyaariyey Xafiiska Xisaabiyaha guud ee Dowladda, Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda waa in uu soo gudbiyo xisaab xirka Dowladda Federaalka Soomaaliya. Sidaas darteed Xisaab xirkan waxaa soo diyaariyey soona gudbiyey Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda.

Si waafaqsan qodobka 1.4.8 ee Nidaamka ku xisaabtanka lacagaha Caddaanka ah ee cash basis IPSAS,Xisaab xirkani waxaa lagu soo gudbiyay dhamaan mucaamalaatkii maaliyadeed ee dhamaan hay'adaha Dowlada Federaalka Soomaaliya eek u jira miisaaniyadda Dowladda 2022. Liiska hoose waxaa ku xusan dhamaan hay'adaha dowladda ee ku jiray qoondada miisaaniyadda ee xisaab xirkaani khuseeyo.

Hay,adda Miisaaniyadda ku jiro Sanad Maaliyadeedka 2022

	Arrimaha maamulka
1	Xafiiska Madaxtooyada
2	Xafiiska Baarlamaanka - Golaha Shacabka
3	Xafiiska Aqalka Sare
4	Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha
5	Wasaaradda Arrimaha Dibadda
6	Safaaradaha
7	Wasaaradda Maaliyadda
8	Xisaabiyaha Guud

9	Adeegga Guud ee Dawladda
10	Agaasinka Xarunta Warbixinta Maaliyadeed
11	Wasaaradda Qorshaynta
12	Hay'adda Tirakoobka Qaranka
13	Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Federaalka
14	Guddiga Qaxootiga iyo Barakacayaasha Soomaaliyeed
15	Hay'adda Diiwaangalinta Dadweynaha
16	Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta
17	Wasaaradda Cadaaladda
18	Ciidanka asluubta
19	Maxkamadda Sare
20	Maxkamadda Gobollka Banaadir
21	Maxkamadda Rafcaanka
22	Guddiga Adeegga Garsoorka
23	Xeer Ilaaliyaha Guud
24	Garyaqaanka Guud
25	Hantidhawraha Guud
26	Wasaaradda Arrimaha Gargaarka iyo Maareynta Masiibooyinka
27	Wasaaradda Dastuurka
28	Guddiga Xuduudaha iyo Federaalka
29	Guddiga Dib -u -heshiisiinta Qaranka
30	Guddiga Madaxa -bannaan ee Doorashooyinka Qaranka
31	Dib -u -eegista Dastuurka M.Banan iyo Imp. Komishanka
32	Guddiga Shaqaalaha Rayidka Qaranka
33	Guddiga M. Banaan ee La Dagaalanka Musuqmaasuqa
Arrimaha Amniga iyo Difaaca	
34	Wasaaradda Gaashaandhigga
35	Ciidanka Xoogga Dalka
36	Maxkamadda Ciidamada
37	Hay’adda Naafada iyo Agoonta ciidanka
38	Wasaaradda Amniga Gudaha
39	Ciidanka Booliska
40	Hay’adda sirdoonka qaranka
41	Hay’adda Socdaalka iyo jinsiyadaha
Arrimaha dhaqaalaha	
42	Wasaaradda Biyaha iyo Tamarta
43	Wasaaradda Macdanta
44	Hay'adda Patroolka Soomalia
45	Wasaaradda Beeraha
46	Wasaaradda Xanaanada Xoolaha iyo Dhirta
47	Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Kheyraadka Badda
48	Cilmi -baarista Badda Soomaaliya
49	Mashruuca Horumarinta Xeebaha iyo Kalluumaysiga
50	Wasaaradda Warfaafinta

51	Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolajiyadda
52	Hay’adda Isgaarsiinta Dalka
53	Wasaaradda Hawlaha Guud & Dib -u -dhiska
54	Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista Hawada
55	Hay’adda saadaasha iyo duulista hawadda
56	Wasaaradda Dekadaha iyo gaadiidka badda
57	Maamulka dekadda Xamar
58	Wasaaradda Warshadaha & Ganacsiga
59	Hay’adda tayadhawrka Soomaaliyeed
Arrimaha bulshada	
60	Wasaaradda Caafimaadka
61	Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare
62	Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed
63	Akadeemiyada Cilmiga iyo Fanka Soomaaliyeed
64	Akadeemiye -Goboleedka AfSoomaaliga
65	Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada
66	Wasaaradda Dhalinyarada iyo Ciyaaraha
67	Wasaaradda Haweenka iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha
68	Hay'adda Naafadda Soomaaliyeed;

d) Lacagta lagu saleeyey xisaab xirka

Lacagta sida toos ka ah loogu xisaabiyo mucaamalaadka dowladda waa lacagta doolarka maraykanka "USD". Waxaa loo isticmaalaa soo aruurinta dakhliga dowladda sidoo kale waxaa lagu bixiyaa kharashaadka dowladda. Lacagaha lagu qabtay Shilin Soomaaliga waxaa loo bedalay (sarifay) Doolarka Mareekanka, maadaama miisaaniyaddu ay ku saleysantahay Dollarka Mareykanka.

e) S*anad maaliyadeedka*

Sanad Maaliyadeedka Dowladda Federaalka soomaaliya waxa uu ka bilowdaa 1da Janaayo waxa uuna ku egyahay 31-ka Diseember. Hadba Sanad Maaliyadeedka ay khuseeyso xisaab xirkani waa Sanad Maaliyadeedka ku eg 31-kaDiseembar 2022 oo ay barbar taalo xisaab xirkii Sanad Maaliyadeedkii 2021 si la iskugu barbardhigo

f) Aqoonsiga Dakhliga

Dakhliga waxa uu ka koobanyahay dhamaan lacagaha soo gala Dowladda Federaalka Soomaaliya intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka waxa ayna usii kala baxaan, Dakhliga Canshuuraha, Dakhliga aan Canshuurta ahayn iyo Deeqaha Dibedda ka yimaada. Dakhliyadaas waxa loo aqoonsadaa dakhli ahan markii lacagahaas dhab ahaan usoo galaan khasnada dowladda.

II. <u>Dakhliga Canshuuraha</u>

Dakhliga Dowladdu waxa uu ka koobanyahay: Dakhliga Canshuuraha, Dakhliga Khidmadaha iyo Deeqaha dibedda. Dakhliga waxaa la aqoonsanayaa marka lagu soo xareeyo Khasnadda Dowladda (TSA)

1. <u>Dakhliga aan Canshuuraha ahayn</u>

waa dakhliyada laga helo khidmadaha Dowladdu u fuliso dad waynaha ee aan canshuurta ahayn, waxaana dakhli ahaan loo aqoonsadaa markii dhab ahaan usoo xerooto.

2. <u>Deeqaha Dibedda</u>

Dakhligaan waa hishiis ay ku qeexantahay ujeedka loo isticmaali doono dakhligaan ama deeq maaliyadeed ee dowladdu ka hesho hay'ado iyo wadamo shisheeye oo ah mid dhinacya badan ah ama mid laba dhinac le ah. Dakhligaan waxaa la aqoonsadaa kaliya marki uu soo galo khasnada dowladda

3. Daymaha oo lagu soo gudbiyo si waafaqsan Nidaamka ku Xisaabtanka Lacagaha cadaanka ah. Daymaha sanadkaan lagu soo bandhigay xisaab xirkan waa daymaha laga helay Bangiga Dhexe ee Dowladda iyo Daymaha IMF-ta ee loo yaqaano (SDR) waxaana la aqoonsadaa kaliya markii ay kaash ahaan u soo galaan khasnada Dowladda.

g) Aqoonsiga Kharashaadka

Kharashaadku waa lacagta ay bixiso dowladdu ama jiho kale ka bixiso dowladda. Sidaas darteed kharashka waxaa la aqoonsan karaa laguna soo gudbin karaa xisaab xirka doowladda markii si dhab ah lacagtu uga baxdo khasnada dowladda ee (TSA)

III. <u>Mushaarka Shaqaalaha</u>

Waa lacagaha la siiyo shaqaalaha oo iskugu jira Mushaar, Gunno iyo waxyaabo kale oo la xiriira kharashaadka shaqaalaha. Kharashkaas waxaa la aqoonsadaa kaliya markii dhab ahaan loo bixiyo.

IV. *Isticmaalka Agabka iyo Adeegga*

Waxaa loo aqoonsadaa kharash ahaan markii adeega ama agabka dhab ahaan loo bixiyo ama loo helo. Hadii aan lagu bixin intii lagu guda jiray mudadii agabka la isticmaalay ama adeega la fuliyay, waxaa dayn ahaan loogu xifdiyaa Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda wadarta daymahaas iyo cadayntoodaba.

V. *Hanti, Qalab iyo Hanti kale oo Ma guurto ah*

Waxa ay iskugu jiraan hantidaani, dhul,warshado, gawaari, qalab iyo wax kasta oo hanti ma guurto ah ee ay dowladdu leedahay. Nidaamka ku xisaabtanka lacagaha cadaanka ah marka lagu dhaqmayo, markii la soo iibsado qalabkaas kor ku xusan waxaa loo aqoonsadaa kharashaad baxay intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka. Sidaas ay tahay hadana waxa ay dowladdu leedahay diiwaan lagu diiwaan galiyo dhamaan wixii hanti ma guurto ah.

h) *Kaalmo arrimo Bulsho.*

Sida uu qabo hishiiska IDA ee uu maalgaliyo Bangiga Aduunka, lacag kaalmo arrimo bulsho ah ayaa la bixiyey intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka iyadoo ujeedadu ahayd;

In la siiyo qoysaska dhaqaale ahaan jilicsan lacago cadaan ah sidoo kale in la dhisho hab qaran oo looga gaashaaman karo loogana soo kaban karo aafooyinki ay sababeen musiibooyinka dalka ka jira

In laga hortago dhibaatada uu sababay ayaxa ku habsaday meelo badan korna loo qaado heerka diyaargarowga;

In gacan laga gaysto sidii looga soo kaban lahaa dhibaatooyinka hada jia loona gaari lahaa u adkaysiga dhibaatooyinka dabiiciga ah iyo dhibaatooyinka aadanuhu sababteeda leeyahay ee mudada fog.

i) *Kaalmo dhaqaale (subsidy).*

Mashruuca SCALED-UP ayaa laga bixiyey lacag kaalmo dhaqaale ahaa oo lagu helay hishiiska IDA ee uu maalgaliyo Bangiga Aduunka si kor loogu qaado helitaanka dadweynaha adeegyada ay bixiso dowladdu iyada oo si gooni ah loo abaarayo ganacsatada yaryarka ah, shaqaalaysiinta dhalinyarada gaar ahaan dumarka.

Dhamaan lacagaha kaalmada dhaqaalaha ah waxaa la aqoonsadaa marka lacagaha dhab ahaan loo bixiyo.

j) *Lacagaha cadaanka ah iyo waxyaabaha la midka ah lacag cadaan ah*

Lacagta kaashka ah “ama caddaanka ah” iyo waxyaabaha kaashka u dhigma waxaa lagu soo bandhigayaa muuqaalka caddaynta mowqifka maaliyadeed ee dowladda ee loo yaqaano “Balance Sheet”. Sidoo kale waxaa lagu soo bandhigaa Muuqalka Qulqulka Kaashka “cahsflow statement” waxa ayna ka koobnayihiin kaashka cadaanka ah “Cash on Hand” iyo dibaajiyada si fudud loogu badali karo kaash markii loo baahdo iyo sidoo kale daynta bangiga “Overdraft” si loogu maareeyo baahiyaha lacageed ee dowladda.

Waxaa sidoo kale ku jira dhamaan haraayada kaashka ah iyo haraayada xisaab bangiyeedyada Dowlada iyo kuwa mashaariicda ee hoos yimaada Khasnada Mideysan ee Dowladda ee ka furan Bangiga Dhexe ee Soomaalia.

k) *Sanduuqa Buffer fund-ka ee qaybta ka ah Sanduuqa Midaysan ee Dowladda*

Waxa ay Dowladda Federaalka Soomaaliya ka furtay Sanduuqa Mideysan ee Dowladaa (TSA) Xisaab bangiyeed loo yaqaano Buffer fund, taasoo ka dhalatay talo soo jeedin ka timid Hay’adda Lacagta Addunka ee IMF si loo fuliyo hishiiska dayn cafinta ee SMP si loogu isticmaalo lacagtaas kharashaadka dowladda hadii dakhliga gudaha ee dowladu uu hoos u dhac ku yimaado. Bilaha ama xiliyada uu hoos u dhaco si loo sii joogteeyo hawlaha dowladda ee muhiimka ah waxaa laga soo wareejiyaa xisaab bangiyeedka buffer fund-ka hadba intii baahidu ay tahay.

l) *Lacagaha Xaniban*

Lacagaha xaniban waxaa loola jeedaa lacagaha aan loom isticmaali Karin in la iskaga bixiyo daymo ama aan loo isticmaali Karin wax kale ugu yaraan muddo 12 bilood ah. Lacaga ku jira Sanduuqa Buffer Fund-ka kaliya waxaa loo isticmaali karaaa in lagu bixiyo xaaladaha lacag yaridu timaado kaliya. Lacagaha laga isticmaalo lama dhaafin karo xadka ku jira miisaanyada uu ansixiyey Baarlamaanku. Lacagaha laga bixiyo Sanduuqa Buffer fund-ka kaliya waxaa loo wareejin karaa miisaaniyada dowlada kaliya**.**

m) Isbarbardhiga ku talagalkii hore ee miisaaniyada iyo Natiijada Dhabta ah

Si la mid ah xisaab xirka dowladda, miisaaniyad sanadeedka dowladda waxay ku salaysantahay nidaamka xeer xisaabeedka (cash basis), miisaaniyaddu waxay raacdaa habka kala sooca mucaamalaadka "classification" ee uu farayo (GFS, 2014 economic classification), waxa ayna sidoo kale khuseeysaa sanad maaliyadeedka ka bilowda ka bilowda 1da Janaayo 2022 kuna eg 31 December 2022.

31-kii December 2022 waxa uu Baarlamaanka Soomaaliya anisixiyey ku talagalkii hore ee miisaaniyada waxa uuna ahaa USD$929,924,527milyan Waxaana lagu mariyey Sharci tirsi 00018/2021. Sanadkaan ma jirin ku noqosho lagu sameeyey miisaaniyadii la ansixiyey.

n) Mucaamalaatka lacagaha qalaad

Dhamaan lacagaha qalaad ee soo gala khasnada dowladda waa in loo badalaa doolarka mareekanka iyada oo la isticmaalayo sicirka sarifka ee maalintaas uu marayo. Sidoo kale lacagaha qalaad ee haraaga ku ah khasnada dowladda waa in loo badalaa lacagta doolarka iyada oo la isticmaalayo sicirka sarifka ee dhamaadka sanadka. Isbadalka ku dhaca sicirka sarifka kororsiimo ama hoos u dhac waa in lagu buuxiyaa farqiga u dhexeeya haraaga bilowga sanadka iyo haraaga dhamaadka sanadka. Sidaas oo ay tahay hadana xiliyadan lagu jiro ma dhacdo lacago qalaad oo soo gala xisaabta dowladda oo ahayn mida doolarka.

o) Sicirka Sarifka Lacagaha Qalaad

Maa daama lacagta loo isticmaalo mucaamalaatka maaliyadeed ee dowladda uu yahay lacagta doolarka mareekanka, dhamaan xogta maaliyadeed ee ku xusan xisaab xirkaan waa in lagu soo bandhigaa doolar mareekanka USD.Sidaas darteed dhamaan xogta maaliyadeed ku ku xusan xisaab xirka sanadka 2018 waxaa lagu saleeyey Doolarka Mareekanka USD.

	2022	**2021**
	USD$	**USD$**
Euros (Euro €)	0.885	0.885
Shillin Soomaali (SOS $)	22,500	22,500

p) Hawlaha shaqo ee Dowlada

Si loogu soo bandhigo buuga xisaab xirka macluumaad la xariira dhanka howlaha ay qabato dowladdu (By Function) waxaa loo soo bandhigayaa qaab waafaqsan sida uu xeerinayo nidaamka Tirokoobka Maaliyadda Dowladda ee "Government Finance Statistics [the GFS-2014]" ee ay diyaariso hay'adda Iskaashiga Dhaqaalaha iyo Horumarka (Organization for Economic Cooperation and Development [the OECD]" kuna soo baxa faafinta rasmiga ah ee Hay'adda Lacagta Addunkuna ee "IMF."

q) Kharash aan la hubin

Daymaha aan la hubin in lagu yeelan doono Dowlada, ama dacwad maxkamadeed ay ku socoto, si gooni ah ayaa loo diiwaan galiyaa sidoo kale xisaab xirka sanad maaliyadeedka ayaa lagu shaacinayaa hadii saadaashu u

egtahay in kharash bixin ay suurto gal tahay. Hantida sidaas oo kale aan la hubin, lama shaaciyo lamana aqoonsado.

r) Balan-qaad kharash bixin (Commitments)

Sida ku cad Sharciga Maamulka Maaliyadda ee soobaxay 2019-kii, waxa waajib ah in la bixiyo kharash hadii jiho kale (ganacsade) loo balan qaado in la siinayo wixii kharash ah oo laga qabo hadii uu adeeg ama agab ka iibiyo hay'ad Dowladeed. Dhamaadka sanad maaliyadeedka 2021 dhamaan balanqaadyadii kharash bixinta waa la oofiyey.

s) Dakhliga aan ku jirin Miisaaniyada Dowlada

Dhamaan dakhliyada soo galay Wasaaradaha iyo hay'adaha Dowlada ee aan ku jirin qorshaha miisaaniyada dowlada waxaa si gooni ah loogu shaaciyey xisaab xirkan.sidoo kale Wasaaradaha iyo hay'adaha dakhligaasi soo galay magacyadooda waxaa lagu soo gudibiyey si gooni ah waxaana laga heli karaa **lifaaqa B.**

t) Daymaha kharashaadka

Daymaha Kharashaadka waa qayb ka mid ah daymaha dowladda ee aan wali la bixin. Daymaha kharashaadka ee la soo hubiyey sax ahaanshiyahooda waxa lagu soo bandhigay Muuqaalka Mowqifka Maaliyadeed ee Dowladda.

u) Lacagaha y bixiyeen Hay'ado Kale

Dowladda Fedraalka Soomaliya waxa ay mararka qaar heshaa agab iyo adeeg ay kharashkooda bixiyaan hay'ado kale ee aan Dowladda ahayn. Marka lacagahaas la bixinayo codsiga lacag bixinta waxaa la soo mariyaa diiwaanka maaliyadeed ee dowladda isla codsigaas ayay deeq bixiyeyaashu toos u siyaan lacagtaas cidii loo amary in la siiyo tusaale ganacsade adeeg bixiye ah ama qof la taliye ah mushaarkiisa i.w.m.

Sidoo kale, deeq bixiyeyaashu waxa ay lacgaha toos u siin karaan hay'ad ama qof aan ku jirin diiwaanka dowladda isla markaana hawl u fuiliyey dowladda oo ay ka mid tahay caawinaad raashin ah, hishiis dhisme, gawaari, qalab ama caawin farsamo.

Lacagaha sida tooska ah loo siiyo hay'adahaas ama adeeg bixiyeyaasha aan ku jirin diiwaanka dowladda looma aqoonsado dakhli soo galay dowladda balse waxaa lagu shaaciyaa xisaab xirka kaliya markii si dhab ah loo xaqiiqsan karo tirade lacageed ama adeega u dhigma ee dowladda la siiyey. Ma jirin wax lacag toos loo bixiyey intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2022**.**

h) Xiliga la ogolaaday shaacinta Xisaab xirka

Wabixinta iyo Xisaab xirkaba waxaa la shaaciyey **30-ka April 2023.** Waxaana ansixiyey **Dr Cilmi Maxamud Nuur,** Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda iyo **Marwo Faadumo Cismaan Faarax**, Xisaabiyaha Guud ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

II. FAAHFAAHIN IYO SHARAXAAD KHUSEEYSA XISAAB XIRKA

1. Dakhliga Canshuuraha

Dakhliga canshuuraha waxaa loo qaadaa qaab toos ah iyo si dadban. Dhamaan dakhliga canshuuraha ee dowlada soo galay waxa uu ahaa;

	2022 US $	2021 US $
Canshuurta Mushaarka Shaqaalaha	16,124,660	14,290,913
Canshuurta Shirakada	1,906,302	919,548
Canshuuro kale	631,279	579,865
Canshuurta Agabka iyo Adeegga	25,778,726	23,429,410
Canshuurta Furdooyinka iyo Waxyaabaha soo daga	102,437,864	97,365,062
Canshuur kale ee Khatka	13,731,284	11,609,929
Canshuurta Adeegsiga badeecadaha	6,999,940	0
Canshuurta Ganacsiga	14,081,788	14,573,148
Wadarta Dakhliga Canshuurta	**181,691,842**	**162,766,911**

Dakhliga guud ee canshuuraha ee la saadaaliyey in la helo sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa US$173.6milyan halka dalkiga dhab ahaan loo helay canshuuraha uu noqday US$181.86 milyan taasoo ka dhigan in dakhligu canshuuruhu sareu kacay US$7.9 milyan oo u dhiganta (5%) . Dakhliga canshuurhu waxa uu ka yahay dakhliga guud 25% ee sanad maaliyadeedka 2022

2. Dakhliga aan Canshuuraha ahayn-Khidmad

Dakhliga aan canshuuraha ahayn waa dakhliga ay dowladu ka hesho khidmadaha ay fuliso dowladu oo aan ahayn canshuur:

	2022 US $	2021 US $
Kirad Dhulka iyo Guryaha	169,600	-
Khidmada Maamulka	4,544,490	5,551,269
Kharashka fiisaha	7,523,279	3,857,105
Khidmada baasaboorka	8,075,195	7,307,126
Ruqsadda Ganacsiga & warshadaha	1,344,581	1,254,388
Oggolaanshaha shaqada - Ajaanibta	434,520	679,740
Khidmadda Dekadda - Albayrak	29,332,006	25,589,133
Khidmadda Garoonka Diyaaradaha -Favori	3,110,280	2,790,898
Khidmada Ruqsadda Kallumaysiga	8,100	2,611,146
Khidmada Hagaha Isgaarsiinta	4.095,242	1,151,338
Khidamada duulimaadka Hawada	15,112,995	11,262,186
Khidmada Dekedda	4,892,516	4,740,083
Khidamda Diwaangelinta	2,335,100	-
Wadarta Dakhliga aan Canshuurta ahayn	**80,977,903**	**66,794,412**

Wadarta dakhliga aan cashuuraha ahayn ee la saadaaliyey in la helayo sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa US$76.3 milyan balse dakhliga dhab ahaan loo helay sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu noqday US$80.9 milyan taas oo ah sare uga kac gaaraya US$4.5milyan oo u dhiganta (5%). Dakhliga dhab ahaan loo aruuriyay waxa uu ka noqday 11% guud ahaan dakhliga guud.

3. Deeqaha Dibeda

Hishiisyada maaliyadeed ee laba dhinaclaha ah iyo kuwa dhinacyo badanta ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ay la gasho dowladaha saaxiibka la ah ayaa lagu caddeeyaa ujeedooyinka loo isticmaali doono deeqaha ama daymaha laga helo jihooyinkaas. Deeqaha la helo maahan kuwo dib loo celin doono balse, daymaha waxaa waajib ah in dib loogu celiyo ciddii lahayd xiliga lagu hishiiyey. Dakhliga deeqaha ama daymaha ah eek u xusan xisaab xirka waxaa la diiwaan galiyay markii kaash ahaan loo helay oo lagu shubay khasnada dhexe ee dowladda. Guud ahaan deeqaha la helay intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedka 2021-ka waxay ku koobanyihiin shaxda hoose;

	2022	**2021**
	US $	**US $**
Deeqaha la helay intii lgu guda jiray Sanadka		
Deeqo Laba Dhinacle ah		
Dowlada Turkiga	27,500.00	**2,500,000**
Dowlada Imaaraadka	9,600.00	-
Total	**37,100,000**	**2,500,000**
Deeqo Dhinacya Badan ah		
Bangiga Addunka	**401,115,730**	**138,208,301**
Bangiga Hormarinta Afrika	4,937,177	4,283,285
Midowga Yurub (EU) Kabka miisaaniyada	13,873,469	-
Iskaashiga Aduunka ee Waxbarashada	2,215,421.71	1,983,433
Wadarta Deeqaha dhinacya badanta ah	**422,141,798**	**144,475,019**
Wadarta Deeqaha Dibedda	**459,241,798**	**146,975,019**

Dakhliga guud ee laga helay dhanka deeqaha dibadda sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa US$459.2milyan taas oo ka dhigan 34% ka yar saadaashii miisaaniyadda. Deeqaha sanadkaan waxaa laga helay laba jiho oo kali ah oo kala ah Bangiga Aduunka oo laga helay USD$401.1milyan iyo Dowladda Turkiga oo laga helay USD$27.5milyan oo u dhiganta 8% intii laga sugayey.Imaarad Arabta oo laga helay 9.6milyan

***Jabin ama fulin waa qodobo hishiis**:*

Intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedkaan, ma jirin wax hishiis deeq dibadeed ah oo dowladu ay jabisay qodobo ka mid ahaa hishiiska, ama shuruud ku xirnayd oo la fulin kari waayey, taas oo sababtay in la hakiyo ama la joojiyo deeq la siin lahaa dowlada, ama khasabtay in dib loo celiyo deeq horay loo siiyey dowlada.

4. Dakhliga Daymaha

Lacagaha dakliga daymaha waxa ay ka koobanyihiin sidan hoose;

	2022 USD$	2021 USD
Deynta Bank Dhexe (CBS)	-	21,992,191
Dayn IMF-ta (Special Drawing Rights)	44,040,950	74,373,383
Wadarta guud ee deymaha	**44,040,950**	**96,365,574**

Akoonka SDR

SDR Account	2022 USD$	2021 USD$
Haraaga Bilowga Sanadka	**8,082,410.10**	**-**
Dakhli		
SDR Dakhli	44,040,949.95	74,373,382.61
Wadarta Dakhliga SDR	**44,040,949.95**	**74,373,382.61**
Lacag Wareejin		
Wareejin (Withdrawals)	43,000,000.00	65,683,366.65
Khidmadda Bangiga	660,614.25	607,605.86
Wareejin	8,179,095.52	-
Wadarta Lacag Wareejinta	**51,839,709.77**	**66,290,972.51**
Haraaga Saafiga SDR Account	**(7,798,759.82)**	**8,082,410.10**
Haraaga Dhamaadka Sanadka	**$283,650.28**	**$ 8,082,410.10**

Dayactirka & Hagaajinta	5,419,303	2,601,534
Agabka iyo alaabaha	6,789,250	3,856,839
Kharashaad Safar & shiraarka	10,888,143	5,601,262
Kharashaad waxbarshadda	4,339,806	1,148,835
kharashaad tababarka		2,768,335
Ageega Latalinta iyo khidmadda Kale	43,568,487	26,518,983
Kharajka maareynta	8,095,412	5,237,793
xayeeysinta iyo diwaangelinta	172,073	
shidaalka iyo Saliida	7,987,866	5,843,470
Adheega Hanti dhowraha	-	782,446
Caafimaad Fayadhowrka	-	4,917,993
Adeega caymiska	34,601	2,428
Adeega albta iyo qalab milateria	540,000	274,518
Qalabka agabka iyo adeegyadda booliska	120,000	300,000
Qalabka agabka iyo adeegyadda nabadsugida	3,593,752	
Alaabha iyo adeega kale ee gaar ah	-	1,938,395
Adeega Hawl-gallada gaarka ah	-	7,459,348
Kharashaad Kale	40,389,100	30,619,238
Wadarta Agabka iyo Adeegga	**140,670,112**	**106,059,789**

Wadarta guud ee kharashaadka loogu tala galay in ay ku baxdo isticmaalka agabka iyo adeegga dowladda waxa lagu qiyaasay inuu noqon doono sanad maaliyadeedka 2022 US$232.2milyan balse waxaa dhab ahaan loo bixiyey US$140milyan taas oo ka dhigan in kharashaadka agabka iyo adeega la bixiyey ay ka yarayd saadaasha US$91.5milyan oo u dhiganta 40%.

8. Kharashaad Ra’sulmaal – Isticmaalka Hanti Ma Guurto ah

Sida qodobka (i) ee xeerka xisaabaadka eek or lagu soo sheegay, dhamaan kharashka ku baxa soo iibsasho hanti ama qalab ma guurto ah waxaa lagu daraa kharashaadka sanadka la bixiyey lacagta. Qiimaha ku baxay soo iibsasho qalab amah anti ma guurto ah sanadkaan waxa ay ahayd;

	2022 **US $**	**2021** **US $**
	835,695	1,968,456
Dhismayasha la deegaanyahay	95,296	
Dhismayasha kale	-	151,633
Dhisma yaasha aan la deganeyna	195,650	41,390
Qalabka Gadiidka	1,861,453	4,052,767
Makiinado iyo qalab kale	474,634	208,635
alaabta iyo Qalabka guryahay	1,777,201	2,610,755
Qalabka (ICT)	618,114	122,443
Wadarta Kharashaadka Ra'sulmaalka	**13,200,988**	**16,099,178**

Saadaasha kharashaadka ra’sulmaalka ee sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa US$33.5milyan, balse waxaa dhab ahaan loo bixiyey US$13.2 milyan taas oo ka yar saadaashii US$20.3milyan oo u dhiganta (60.5%).

9. Deeq Dowladu Bixisay

Dowlada Federaalka Soomaaliya deeqaha ay bixisay intii lagu guda jiray sanad maaliyadeedkan waxa ay ahayd:

	2022 US $	2021 US $
Deeq la siiyey Dowladu Shisheeye	-	-
Kharash ka mid noqosho Hay'ado Caalami ah	1,342,666	1,197,901
Deeqo loo diray Maamul Goboleedyada iyo Dowladda Hoose iyo Hay'ado kale		
Deeqaha Kale (DXDF)	1,300,000	-
Soomaalilaand	13,816,190	18,000
Maamul Goboleedka Buntlaan	20,588,798	7,822,910
Maamul Goboleedka Jubalaan	13,859,217	6,014,444
Maamul Goboleedka Koofur Galbeed	18,027,674	6,325,581
Maamul Goboleedka Galmudug	13,656,929	4,329,093
Maamul Goboleedka Hirshabeelle	10,383,632	3,232,734
Maamulka Gobolka Banaadir	18,218,593	15,852,993
Rugta Ganacsiga	555,816	528,434
Bangiga Horumarinta Soomaaliya	555,816	528,434
Wadarta Deeqaha	**111,242,920**	**45,850,523**

Deeqaha la siiyey Maamul Goboleedyada waxaa loogu tala galay in lagu kabo miisaaniyadooda waxaana u ansixiyey Baarlamanaaka Soomaliya. Wadarta deeqaha la saadaaliyey in la bixiyo sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa US$132.3 milyan balse waxa dhab ahaan loo bixiyey US$111.2 milyan taas oo ka yar saadaashii US$21.1milyan oo u dhiganta (16%)

10. Kharashaadka Arrimaha Bulshada

	2022 US $	2021 US $
Kaalmo Bulsho cadaanka ah (Social security benefits in cash)	96,941,343	6,149,166
Kaalmo bulsha	24,241,281	-
Caawinaad Bulsho (Social Assistance benefits)	61,753,491	33,715,682
	6,000,000	-
Wadarta Kaalmada Bulsho	**188,936,115**	**39,864,848**

Wadarta kharashaadka arrimaha bulshada ee la saadaaliyey sanad maaliyadeedka 2022 in la bixiyo waxa ay ahayd US$247.3milyan balse dhab ahaan waxaa loo bixiyey US$188.9 milyan oo ka yar saadaashii US$58.3 milyan oo u dhiganta (33%).

11. Kharashaadka Bixinta Dulsaar Daymo

	2022 US $	2021 US $
Dulsaar Daymo-Laba-dhinacle ah	693,045	1,440,881
Wadarta Adeegga Dulsaarka	**693,045**	**1,440,881**

Wadarta kharashaadka bixinta dulsaar iyo khidmado kale ee la bixiyey sanad maaliyadeedka 2022 waxa uu ahaa USD$693,045.

12. Kharashaadka Kabka Dhaqaalaha

	2022 US $	2021 US $
Kaalmo shirkadaha Gaarka loo leeyahay (To non-financial private enterprises)	5,115,305	,271,695
Wadarta	**5,115,305**	**1,271,695**

Wadarta kharashaadka kabka dhaqaalaha ee la saadaaliyey sanad maaliyadeedka 2022 in la bixiyo waxa ay ahayd US$5.5milyan balse dhab ahaan waxaa loo bixiyey US$5.1milyan oo ka yar saadaashii US$431.4 kun oo u dhiganta 2% ka yar ku talagalkii.

13. Dib-u-bixin Deymo

	2022 USD$	2021 USD$
Dib u bixin Deynta Banki Addunka(IDA)	11,997,573	13,164,237
Dib-u-bixin hormaris dayn ah (BDS)	0.00	21,992,191
Wadarta Daymaha la bixiyey	**11,997,573**	**35,156,428**

1. Wasaaraddu waa in ay iskaashi dhaw la yeelataa ganacsatada;
2. Ganacsatada waxaa lala gali karaa heshiisyo ama is afgarad ku saabsan heerarka deegaanka iyo wakhtiga loo baahan yahay in la gaaro heerarkaas;

Qodobka 93aad

Baaritaanka ku saabsan Wasakheynta Deegaanka

1. Wasaaraddu waa in ay sameeysaa baaritaano lagu ogaanayo wasakheynta deegaanka isla markaana hubiyaan tallaabooyinka la qaaday ee wax lagaga qabanayo;
2. Baaritaanada ay sameeyaan Wasaaradaha deegaanka ee Maamul Goboleedyadu waa in ay u soo gudbiyaan Wasaaradda Deegaanka iyo isbeddellada cimilada.

Qodobka 94aad

Baaritaano Joogta ah

Wasaaraddu waxa ay soo jeedin kartaa in la sameeyo baaritaano joogto ah oo ku aadan warshadaha, sida kuwa shidaalka, goobaha qashinka lagu burburiyo iyo mashiinada dhismaha.

Qodobka 95aad

Macluumaadka iyo Sirta Xogta

1. Masuuliyiinta, khubarada iyo saraakiisha kale ee dhaqan gelinaysa Sharcigan, waxaa waajib ku ah in ay xafidaan sirta ama xogta ay hayaan;
2. Macluumaadka sirta ah ee masuuliyiintu helaan si waafaqsan Sharcigan, la lama wadaagi karo waddamada shisheeye. Waxa lala wadaagi karaa oo kaliya haddii uu jiro heshiis caalami ah ama Xeer heer Federaal ah oo ogol.
3. Wasaaradda ayaa masuul ka ah maamulka iyo hab-raaca ku saabsan faqradda 2aad ee qodobkan.

Qodobka 96aad

Qaadista Khidmadaha

1. Bixinta ruqsaddaha iyo adeegyada gaarka ah waxa laga qaadayaa lacag (fii);
2. Xadiga lacagta iyo foomka waxaa qeexi doona xeer-nidaamiye.

Qodobka 97aad

Tababarka iyo Daraasaadka

1. Wasaaraddu waxay horumarinaysaa aqoonta iyo xirfaddaha shaqaalaha u xilsaaran in ay dhaqan geliyaan Sharcigan;
2. Waxay taageeri karaan cilmi baaris ama daraasado;
3. Si loo yareeyo wasakheynta deegaanka, waxa ay dhiiri gelinayaan horumarinta makiinadaha iyo warshadaha casriga ah;
4. Wasaaradda ayaa sameynaysa qiimeyn guud oo ku saabsan waxtarka tababarada iyo daraasadaha la sameeyay hal mar sanadkii.

Qodobka 98aad

Iskaashiga Caalamiga ah ee Ilaalinta Deegaanka

1. Wasaaradda ayaa:

b. ka qayb galeysa ururada caalamiga ah iyo barnaamijyadda caalamiga ah iyo kuwa Gobolka ee ilaalinta deegaanka;

t. dhaqangelinaysa heshiisyadda caalamiga ah ee ku saabsan ilaalinta deegaanka;

j. Si loo kobciyo awoodda Dalka ee ku aadan deegaanka, Wasaaraddu waxay wada shaqayn dhaw la yeelanaysaa machadyada caalamiga ah ee aqoonta u leh arrimaha deegaanka;

x. dejinaysa nidaamka looga qayb galayo heshiisyada iyo kulamada caalamiga ah. Waa in ay Soomaaliya matalaan dad aqoon u leh arrimaha deegaanka;

kh. hogaaminaysa la shaqeynta ururada Gobolka isla markaana hubinaya in Soomaaliya ay qayb ka noqoto kulamada kana war hayso wixii ka soo baxa;

d. hageysa raadinta isla markaana diyaarinaya nidaamka loo marayo sidii loo heli lahaa kaalmo ku aadan dhaqan gelinta heshiisyada caalamiga ah iyo barnaamijyadooda;

Qodobka 99aad

Heshiisyada Caalamiga ah

1. Soomaaliya waxay qayb ka tahay heshiisyada caalamiga ah ee ku xusan Lifaaqa 2aad ee ku lifaaqan Sharcigan;
2. Shuruucda deegaanka ee Dalka waa in ay waafaqaan heshiisyada caalamiga ah ee ay Soomaaliya qaybta ka tahay.

Qodobka 100aad

Xeer-nidaamiye

Wasaaraddu, iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha ay khuseyso ee heer Federaal iyo heer Maamul Gobolleed, waxay diyaarineysaa xeer-nidaamiye ku saabsan arrimaha xeerkani ogolyahay in xeer-nidaamiye loo sameeyo si loo dhaqan geliyo qodobbada xeerkan.

Qodobka 101aad

Xeerarka Hore ee Deegaanka

Sharcigan wixii laga waayo waxaa loola noqonayaa Xeerka Ugaarsiga iyo Ilaalinta Keymaha ee Xeer Lr. 15 soona baxay 25 Jannaayo 1969.

Qodobka 102aad

Dhaqangalka Sharciga

Sharcigani wuxuu dhaqangelayaa, kadib marka ay ansixiyaan labada gole ee sharci-dejinta, madaxwaynuhuna saxiixo, laguna soo saaro faafinta Rasmiga ah.

Liifaaqa 1aad

Nooca Mashaariicda loo baahan yahay in la sameeyo Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada

Mashruuc kasta oo saameyn ku yeelan kara nawaaxigiisa, dhulka iyo guud ahaan deegaanka waa in la sameeyaa Qiimeynta Saameynta Deegaanka iyo Bulshada sida uu dhigayo Sharcigani ama xeer ka sii farcamay. Mashaariicdaas waxaa ka mid ah (laakiin kuma koobna oo kaliya):

1. Soo saaridda shidaalka
2. Warshadaha nukliyaarka
3. Horumarinta Magaalooyinka
4. Dhismaha wadooyinka iyo marinada kale ee gaadiidka
5. Biyo xireen
6. Macdan qodista
7. Warshadaha wax soo saara
8. Kaabayaasha layrka (nalka)
9. Goobaha qashin qubka (qashinka lagu burburiyo)
10. Mashruuc kasta oo xeer kale ama xeer-nidaamiye uu qeexayo

Lifaaqa 2aad

Liiska Heshiisyada Caalamiga ah

Muddadii ka horreysay 1991, Soomaaliya waxay qeyb ka ahayd dhowr heshiis oo caalami ah oo ku saabsan ilaalinta deegaanka. Waxaa intaa dheer, sannadihii u danbeeyay Soomaaliya waxay saxeexday heshiisyo badan oo la xiriira deegaanka. Iyadoo la aqoonsan yahay in mushkiladaha deegaanku ay xuduudaha iskaga gudbaan, dalku wuxuu saxeexay ama ansaxiyay heshiisyo muhiim ah oo dhinacyo badan taabanaya oo ku saabsan arrimaha deegaanka. Liistada soo socota waa heshiisyada ay Soomaaliya saxiixday ama ay ansixisay:

1. Heshiiska Caalamiga ah ee Mamnuucaya ka Ganacsiga Noocyada Noolaha Dhirta iyo Duurjoogta Dabargoa ku dhaw ama halista ku sugan (CITES);
2. Heeshiiska Ilaalinta Xayawaanka (duurjoogta) Xuduudaha iskaga Goosha;
3. Heshiis Goboleedka Ilaalinta Badda Cas iyo Deegaanka Gacanka Cadmeed;
4. Heshiis Goboleedka iyo Iskaashiga lagula Tacaalayo ama looga Hortagayo Wasakhaynta Shidaalka (batroolka) iyo Walxaha halista ah;
5. Heshiiska Qaramada Midoobay Sharciga Badda;
6. Heshiiska Qaramada Midoobay ee la Dagaalka Nabaad-guurka (Xaalufka) (UNCCD);
7. Heshiiska Qaramada Midoobay ee Isbedelka Cimilada (UNFCCC);
8. Heshiiska Kyota;
9. Heshiiska Noolaha Kala Duwan;
10. Heshiiska Sugnaanta (ilaalinta) Noolaha (Protocol on Bio-Security) (Protocol-ka Cartagena);
11. Heshiisyada Basel, Stockholm iyo Rotterdam;
12. Heshiiska Bariga Afrika Seerayaasha, Ilaalinta Dhirta (flora) iyo Xayawaanka (fauna);
13. Heshiiska Bariga Afrika ee ka hortagga wasakhda badda ee xaaladaha degdegga ah;
14. Heshiiska Ilaalinta, Maareynta iyo Horumarinta Deegaanka Badda iyo Xeebaha Bariga Afrika (Heshiiska Nairobi).
15. Heshiiska Xakamaynta Waxyaabaha Daciifiya lakabka Ozone ka (Montreal Protocol)
16. Heshiiska Ilaalinta Lakabka Ozone ka (Heshiiska Vienna);

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
07 APR 2024
BY: SAACAD SAXHX

SHARCI LR. 24 **TAARIIKH: 31 MAARSO 2024**

WAX-KA BEDDELKA CUTUBYADA 1AAD, 2AAD,3AAD IYO 4AAD EE DASTUURKA

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobada 133aad, 134aad iyo 136aad (1) ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad (F) ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddonka Labada Aqal ee Baarlamaanka J.F.S ee summaddeedu tahay **BFS/B11/10/03/24**, ku taariikheysan **30/03/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Nuqulka Rasmiga ah ee Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad,2aad,3aad iyo 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Qaraarka lambarkiisu yahay **GSH/31/16** ee ku taariikheysan **Agoosto 17, 2016** oo Baarlamaankii 9aad dib ugu dhigay dhameeystirka Dastuurka Baarlamaanka 10aad.

MARKUU ARKAY: Xeer Madaxweyne ee ku taariikheysan 24/12/2020, kaasoo dib loogu dhigay dhameeystirka Dastuurka Baarlamaankii 11aad.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu meelmariyey Nuqulka Rasmiga ah ee Wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN/050/2024
TAARIIKH SAXIIX: 8/4/2024
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee XFS

Madaxweynaha J. F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

QARAAR KU SAABSAN

ANSIXINTA NUQUL KAMA DAMBAYSTA EE WAX-KABEDDELKA CUTUBYADA 1AAD, 2AAD, 3AAD IYO 4AAD EE DASTUURKA

Muqdisho: Maarso 30, 2024

Tix: *BFS/B11/03/24*
Kalfadhiga: *4aad*
Kulankiisa: *31aad ee Wadajirka Labada Aqal*

Taariikh: Maarso 30, 2024

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Markuu Arkay: Qodobbada 63(a) iyo 71(1)(a) ee Dastuurka KMG;

Markuu Arkay: Qodobbada 133aad, 134aad iyo 136(1) ee Dastuurka Ku-meel-gaar ah;

Markuu Tixraacay: Warqadda ku taariikhsan 15/7/2024, ujeedkeeduna ahaa "Soo gudbin heshiisyada siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka" oo ay si wadajir ah ugu saxiixan yihiin Gudoomiyaha Golaha Shacabka iyo Guddoomiyaha Aqalka Sare;

Markuu Arkay: Warqadda summadeedu tahay XWR/0277/06/2023 ee 18/6/2024, ujeedkeedunaha ahaa "Soo gudbin heshiisyada Golaha Wadatashiga Qaranka" oo ka soo baxday xafiiska R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya;

Markuu Tixraacay: Warqadda summadeedu tahay GMDHD/GG/131/24 ee 8/2/2024, ujeedkeeduna ahaa "Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada laad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta al socota" oo ka soo baxday xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka;

Markuu Arkay: Warqadda tirsigeedu yahay GLD/BFS/02/2024 ee 10/2/2024 ujeedkeeduna yahay "Soo Gudbin Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka" oo ka soo baxday xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka;

Markuu Xaqiijiyey: In ay soo idlaatay doodda mudanayaasha labada aqal ay fiirooyinkooda iyo talooyinkooda kaga dhibteen dhammaan cutubyada 1aad ilaa 4aad;

Markuu Hubiyay: In soojeedimaha loo soo gudbiyay laba aqal ee Baarlamaaka Federaalka Soomaaliya lagu soo dhafay soojeedimaha iyo talooyinka xafiisyada iyo hay'adaha ku xusan Qodobka 3(3) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG;

Markuu Arkay: Warqadda summadeedu tahay GMDHD/GG/132/24 ee 26/3/2024, ujeedkeeduna ahaa "Soo Gudbin Nuqul Kama Dambaysta ah e Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3ad iyo 4aad e Dastuurka." oo ka soo baxday xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka;

Markuu Arkay: Warqadda tirsigeedu yahay GLD/BFS/96/03/2024 ee 27/3/2024 ujeedkeeduna yahay "Soo Gudbin Nuqul Kama Dambaysta ah ee Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3ad iyo 4aad ee Dastuurka" oo ka soo baxday xafiiska Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka Dastuurka ee Baarlamaanka;

Markuu Arkay: Qodobka 5(7) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG;

Markuu Arkay: Qodobbada 108aad iyo 109aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka iyo Qodobka 60(6) ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare ee BFS;

WUXUU XEERIYEY QODOBBADAN:

Qodobka 1aad:

1) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ku kulansan Kalfadhiga 4aad kulankiisa 31aad oo ay goobgooj yihiin laba boqol konton iyo afar (254) xildhibaannada labada Aqal ee BFS oo codeenaya, wuxuu ansixiyey Nuqul Kama Dambaysta ah ee Wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka marka laga reebo qodobbada hoos ku xusan kuwaas oo sii ahaan doona sidii ay ugu qornaayeen Asalka Dastuurka KMG ah:

    1) Qodobka 13(1) ee soojeedinta guddiyada oo xeerinaya "Xaqa Nolosha";
    2) Qodobka 16aad ee soojeedinta guddiyada oo xeerinaya "Xorriyadda Diinta iyo Caqiidada" oo asalka dastuurka ahayd Qodobka 17aad; iyo
    3) Qodobka 28(2) ee soojeedinta guddiyada oo xeerinaya "Da'da Carruurta", oo asalka dastuurka ahayd qodobka 29(8).

2) Si waafaqsan Qodobka 5(5) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG xildhibaannada labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa cod aqlabiyad (50%+1) tirada xildhibaannada goobjoog ah ku ansixiyey cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee dastuurka, codeyntuna waxay u dhacday sida soo socota:

Coddeynta Golaha Shacabka iyo Aqalka Sare			
Cutubka	Oggol	Diiday	Ka aamustay
1aad	254	0	0
2aad	254	0	0
3aad	254	0	0
4aad	254	0	0

3) Si waafaqsan Qodobka 5(6) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG ah xildhibaannada labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa cod aqlabiyad saddex meelood laba (2/3) tirada guud ee xildhibaannada labada aqal ee Baarlamaanka ku ansixiyey cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee dastuurka, codeyntuna waxay u dhacday sida soo socota:

Coddeynta Aqalka Sare			
Cutubyada	Oggol	Diiday	Ka aamustay
1aad – 4aad	42	0	0

Coddeynta Golaha Shacabka			
Cutubyada	Oggol	Diiday	Ka aamustay
1aad – 4aad	212	0	0

Qodobka 2aad:

Si waafaqsan Qodobka 6(1) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG ah nuqulka kama dambaysta ee wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee dastuurka, waxaa loo gudbinayaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si uu ugu meelmariyo xeer Madaxweyne.

Qodobka 3aad:

Qaraarkani wuxuu dhaqangalayaa marka uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, uuna saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 90(f) ee Dastuurka KMG ah iyo Qodobka 6aad ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG ah, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya si waafaqsan Qodobbada 84aad iyo 85aad ee Dastuurka KMG.

Xil. Sh. Adan Mohamed Nur "Madobe"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

Sen. Cali Shacbaan Ibrahim
K/simaha Guddoomiyaha ahna
Guddoomiye Ku-xigeenka
ee Aqalka Sare

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka
Hirgelinta Dastuurka

جمهورية الصومال الفدرالية
لجنة المراجعة ومراقبة
تنفيذ الدستور

Federal Republic of Somalia
The Constitution Review and Implementation Oversight
Committee (OC)

Tix: GLD/BFS/96/03/2024 **Taariikh: 27/03/2024**

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS
Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare BFS
Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka XFS
Og: Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

Ujeeddo: Soo Gudbin Nuqulka Kama Dambaysta ah ee Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubka 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka ee BFS wuxuu si waafaqsan qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka, Qodobka 108aad iyo 109aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, Qodobka 81aad ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare iyo Qodobka 5(7) ee Qaraarka Ansixinta Habraaca Wax-kabeddelka Dastuurka halkan idinku soo gudbinayaa nuqulka kama dambeysta ah ee soojeedimaha wax-kabeddelka cutubka 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka ee usoo diyaariye Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka, uuna aqbalay Guddiga La-socodka ee dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ee BFS.

Mudane Guddoomiye, Guddiga wuxuu xaqiijiyey in Guddiga Madaxbannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka ay soojeedimahan kama dambaysta ah ee cutubyada 1aad ilaa 4aad ku soo dhafeen natiijada latashiyadii kala duwanaa iyo talooyinka xildhibaannada labada aqal ee BFS intii lagu gudajiray ka doodistą cutubyadan oo ka koobnaa 16 kulan oo si wadajir ah ay u yeesheen xidhibaannada labada aqal ee BFS.

Haddaba, Guddigu wuxuu si xushmad iyo qaddarin leh u codsanayaa in nuqulka kama dambaysta ah ee soojeedimaha loo gudbiyo xildhibaannada labada aqal ee BFS si ay waajibaadkooda uga gutaan si waafaqsan qodobka 136(1) ee Dastuurka iyo qodobka 5(7) ee Qaraarka ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf "Xuseen Iido"
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka
Dib-u-eegista Dastuurka.

Address: Km-0 | Degmada Shibis – Banaadir | Muqdisho, Soomaaliya.
Email: info@dastuurka-bfs.s, oc@parliament.gov.so | website: www.dastuurka-bfs.so

Summad: GMDHD/GG/132/3/24 ***Taariikh:*** Maarso 26, 2024

Ku: Guddoomiyaha Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka.

Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee BFS.

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS.

Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka ee XFS

Ujeeddo: Soo Gudbin Nuqul Kama Dambaysta ah ee Soojeedinta Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka.

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Madaxabannan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka "GMDHD":

Markuu Arkay: Qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka KMG.

Markuu Arkay: Qodobka 5(1): ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka KMG.

Markuu Tixgaliyey: Soojeedimihii iyo talooyinka xildhibaannada labada aqal ay ka dhiibteen intii ay socotay ka doodista wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee dastuurka.

Markuu Lafaguray: Maxdarqoraalka kulamada 12aad, 13aad, 14aad, 15aad, 17aad, 18aad, 19aad, 20aad, 22aad, 23aad, 24aad, 25aad, 26aad, 27aad, 28aad iyo 29aad.

Markuu Tixgaliyey: Natiijooyinka latashiyadii qaybaha kala duwan ee bulshada soomaaliyeed ee loo qabtay habab kala duwan.

Markuu Tixgeliyey: Soojeedimaha iyo talooyinka guddoonka, xildhibaannadii dawlad goboleedyada, maamulka SSC-Khaatumo iyo maamulka Gobolka Banaadir ee ka soo qaybgalay Shirkii Latashiga Dastuurka ee qabsoomay 27kii –29kii Febraayo 2024.

Markuu Helay: Natiijooyinka ka soo baxay aragti dhiibashada barnaamijka danabaysan ee latashiga dadweynaha dib-u-eegista dastuurka oo socday 17 kii – 21kii Maarso, 2024.

Markuu Arkay: Jawaab celinta iyo talooyinka hay'adaha ku xusan Qodobka 3(3) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Wuxuu, halkan kuugu soo gudbinayaa nuqulka kama dambaysta ah ee soojeedinta wax-kabeddelka cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka oo Guddigu diyaariyey kadib markii uu kusoo daray natiijada latashiyadii la sameeyey iyo soojeedimihii iyo talooyinkii xildhibaannada labada aqal ee marxaladdii labaad, si loo dhamaystiro tallaabooyinka muhiimka u ah marxaladda seddexaad.

Wa Billaahi Tawfiiq.

26/2024

Avv. Burhaan Aadan Cumar
Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee
Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka.

KM-0, Degmada Shibis, Muqdisho – Soomaaliya
Email: chairperson@icric.gov.so **Website:** www.icric.gov.so

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Guddiga Dib u Eegista iyo La-socodka
Hirgelinta Dastuurka

جمهورية الصومال الفدرالية
لجنة المراجعة ومراقبة
تنفيذ الدستور

Federal Republic of Somalia
The Constitution Review and Implementation
Oversight Committee (OC)

Ref: GLD/BFS/...../02/2024

TAR: 10, Febraayo 2024

Ku: Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS
Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare BFS
Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaalaadda iyo Arr. Dastuurka, XFS
Og: Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

Ujeeddo: **Soo Gudbin Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka.**

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka ee BJFS wuxuu si waafaqsan Qodobka 133(10) ee Dastuurka KMG, Qodobka 108aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka, Qodobka 81aad ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare iyo Qodobka 1(3) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka halkan idinku soo gudbinayaa Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG iyo Warbixinta la socota.

Soojeedimaha cutubyadan waxaa soo diyaariyey Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista Dastuurka waxaana ansixiyey Guddiga Lasocodka Dib-u-eegista Dastuurka si waafaqsan Qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka, iyo Qodobka 3(1)(2) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Mudane Guddoomiye, Guddigu inta uu ku guda jiray diyaarinta soojeedimahan, waxay hay'adaha u xilsaaran dib-ueegista dastuurka latashi la sameeyeen culumada soomaaliyeed, si guddiga uu u dhageysto talooyinkooda iyo fiirooyiinka ku aaddan wax-kabeddelka cutubyadan.

Ugu dambayn, Mudane Guddomiye, guddiga wuxuu diyaar u yahay inuu dhagaysto tallooyiinka iyo fikradaha xildhibaannada labada Aqal ee BFS ee ku aaddan wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah, si waafaqsan Qodobka [illegible] ee Qaraarka Habraaca Ansixinta Wax-kabeddelka Dastuurka.

Iga guddoon salaan iyo qadarin

Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf 'Xuseen Iidow'
Guddoomiyaha Guddiga Lasocodka
Dib-u-eegista Dastuurka BFS

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA
GUDIGA DIB U EEGIDDA IYO LA SOCODKA HIRGALINTA DASTUURKA

Lifaaqyo:
1. Soojeedimaha Wax-Kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka KMG ah
2. Warbixin Faahfaahineysa Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah.

GUDDIGA MADAXABANNAAN
EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA
اللجنة المستقلة لمراجعة وتنفيذ الدستور
Independent Constitutional Review and Implementation Commission

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Summad: GMDHD/GG/131/24 **Taariikh:** Febraayo 8, 2024

Ku: Guddoomiyaha Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka BFS

Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee BFS

Og: Guddoomiyaha Aqalka Sare ee BFS

Og: Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arr. Dastuurka

Ujeeddo: Soojeedimaha Wax-kabeddelka Cutubyada 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta la socota

Mudane Guddoomiye,

Guddiga Madaxabannan ee Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka "GMDHD", waxaa sharaf u ah in si waafaqsan Qodobbada 133aad iyo 134aad ee Dastuurka KMG ah iyo Qodobka 3(1) ee Qaraarka Habraaca Ansixinta wax-kabeddelka Dastuurka, uu halkaan kuugu soo gudbiyo soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka iyo warbixinta la socota.

GMDHD oo tixraacaya warqadaha ku kala taariikhsan 26/7/2023 iyo 25/12/2024 oo dhammaantood aad ku soojeediseen taallooyin iyo in la sameeyo cilmibaarisyo dheeraad ah iyo latashi culimmada soomaaliyeed, iyo kulamadii dhowrka ahaa ay wada yeesheen labada guddi, wuxuu cutubyada 1aad ilaa 4aad ku soo dhafay fiirooyinka Guddiga Lasocodka iyo talooyinka culimmada Soomaaliyeed, sidoo kale wuxuu soo diyaariyey daraasad iyo cilmibaarisyo ku abbaaran cutubyadan sida aad ka arki doontaan warbixinta guud ee la socota soojeedimaha.

Ugu dambeyn, GMDHD waxaa u sharaf ah in soojedimaha wax-kabeddelka dastuurka cutubyadiisa 1aad ilaa 4aad iyo warbixinta la socota loo gudbiyo labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si ay uga gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah.

Avv. Burhaan Aadan Cumar
Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee
Dib-u-eegista iyo Hirgelinta Dastuurka

GUDDIGA MADAXABANNAAN EE DIB-U-EEGISTA IYO HIRGALINTA DASTUURKA
INDEPENDENT CONSTITUTIONAL REVIEW AND IMPLEMENTATION COMMISSION

Lifaaqyo:

(1) Soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah; iyo
(2) Warbixin faahfaahineysa soojeedimaha wax-kabeddelka cutubyada 1aad ilaa 4aad ee Dastuurka KMG ah

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Guddiga Dib u Eegista iyo La-socodka
Hirgelinta Dastuurka

جمهورية الصومال الفدرالية
لجنة المراجعة ومراقبة
تنفيذ الدستور
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Constitution Review and Implementation Oversight Committee (OC)

TR:26/LUULYO2023

Ku: Guddiga Madaxa-banaan ee Dib-U-Eegista iyo Hirgelinta Dastuurka
Og: Guddoomiyaha Golaha Shacabka (BFS)
Og: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare (BFS)

Ujeeddo: Tilmaansiinta Diyaarinta Cutubka 1, 2, 3 iyo 4aad si waafaqsan Cutubka 15aad Qod. 133aad Far.5aad iyo 6aad ee Dastuurka KMG Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Guddiga Dib U Eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka;

Markuu arkay Cutubka 15aad Qodobadiisa 133aad faqridiisa 5aad iyo 6aad, Qod. 134aad faqridiisa 7aad;

Markuu arkay warqadda Guddoonka labada Aqal ee BFS, kuna taariikheysaneyd 15ka Luulyo 2023 ee ay kusoo gudbiyeen heshiisyadii siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka; una kuur galay nuxurka heshiisyada lasoo gudbiyay;

Markuu Guddigu ka dooday hanaanka hishiisyada siyaasadeed loogu bedeli lahaa siiqo Dastuur, qaarna loo cadeyn lahaa in lagu qeexo shuruuc gaar ah;

Markuu garwaaqsaday in Guddiga Dib u Eegista iyo la-socodka Hirgelinta Dastuurka BFS uu awood u leeyahay inuu jaheeyo soo diyaarinta wax ka bedelka Dastuurka iyadoo la raacayo tilmaamaha ku xusan Cutubka 15aad;

Wuxuu idiin soo gudbinayaa:

1. In aad dib u eegis kusoo sameysaan Cutubyada 1aad, 2aad,3aad iyo 4aad iyadoo lagu saleynayo heshiisyadii siyaasadeed ee Golaha wadatashiga Qaran soo gudbiyeen.
2. Kuna saleysaan dib u eegistiinna soo jeedimihii Barlamaanka 9aad iyo 10aad iyo warbixinnadii la socday.

Address: Km-0 | Degmada Shibis – Banaadir | Muqdisho, Soomaaliya.
Email: info@dastuurka.bfs.so | website: www.dastuurka.bfs.so

Guddiga Dib u Eegista iyo la-socodka Hirgelinta Dastuurka wuxuu si kooban u tilmaamayaa arimaha soo socda:

1. In guud ahaan **Cutubka 1aad** in lagu sameeyo dib u eegis farsamo oo ay ku jirto eray bixin, toosin iyo habeyn.
2. In **Qodobka 8aad** laga sameeyo daraasad, lagana soo diyaariyo mabaa'di guud si looga soo saaro sharci gaar ah.
3. In **Qodobka 9aad** laga soo diyaariyo xulashooyin (options) la horgeyn karo BFS
4. In **Cutubka 2aad** lagu sameeyo dib u eegis farsamo iyo mid nuxur iyadoo fiiro gaar ah la siinayo **Qodobada 13aad, 15aad iyo 29aad**.
5. In **Cutubka 3aad** laga soo diyaariyo mabaa'di guud oo ku saabsan lahaanshaha, maamulka iyo wadaaga dakhliga khayraadka dabiiciga ah si waafaqsan Heshiiska Madasha Wadatashiga Qaran ku gaareen Magaalada Baydhabo 27dii April 2018, waxaa sidoo kale muhiim ah in daraasad iyo mabaa'di guud laga soo diyaariyo ilaalinta dhulka iyo deegaanka maadaama ay yihiin aas aaska nolosha iyo xuquuqda aadanaha.

6. In **Cutubka 4aad** loo soo diyaariyo si waafaqsan heshiiska doorashooyinka ee Madasha Wadatashiga Qaran kaasoo tilmaamaya muddo xileedka Dowladdaha heer Federaal iyo heer Goboleed, doorasho qof iyo cod ah oo ku saleysan laba xisbi siysaasadeed, hal deegaan doorasho iyo matalaad isku dheeli-tiran (single constituency, proportion representation, with closed list), maamulkeedana uu leeyahay Guddiga Madaxa banaan ee Doorashooyinka iyo Xudduudaha.

   Inta lagu jiro wax ka bedelka Cutubka 4aad, waxaa lagama maarmaan ah in fiiro gaar ah loo yeesho **Cutubka 10aad** Qodobadiisa kala ah **111E iyo 111G,** sidoo kalana lala akhrinayo sharciga lagu dhisay Guddiyada Madaxbanaan ee Doorashooyinka iyo Guddiga Xudduudaha Iyo Federaalka, Sharciga Doorashooyinka iyo Sharciga Axsaabta

Ugu danbeyn, waxaa si xushmad leh looga codsanayaa Guddiga Madaxa banaan ee Dib u Eegista iyo Hirgelinta Dstuurka in ay soo diyaariyaan wax ka bedelka cutubyada kor ku xusan sida ugu dhakhsiyaha badan iyadoo la tixgalinayo dib u dhaca ku yimid Dib u eegista Dastuurka iyo caqabadaha jira guud ahaan.

Mahadsanidiin

Xil. Xuseen Qaasim Yuusuf
Gudoomiyaha Guddiga Dib u Eegista la-socodka iyo Hirgalinta Dastuurka

Address: Km-0 | Degmada Shibis – Banaadir | Muqdisho, Soomaaliya.
Email: info@dastuurka-bfs.so | website: www.dastuurka-bfs.so

BAARLAMAANKA JUMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

Taariikh: Luulyo 15, 2023

Ku: Guddiga Dib-u-eegista iyo La-socodka Hirgelinta Dastuurka

Og: Guddiga Madaxabannaan ee Dib-u-eegista iyo Hirgalinta Dastuurka

Og: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya

Og: Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

UJEEDDO: SOO GUDBIN HESHIISYADA SIYAASADEED EE GOLAHA WADATASHIGA QARANKA

GUDDOONKA LABADA AQAL EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

MARKAY ARKEEN: Cutubka 15aad Qodobbadiisa 132aad, 133aad, 134aad, 136aad iyo 137aad ee Dastuurka KMG.

MARKAY ARKEEN: Qodobbada 55, 61(1), 69 iyo 71 ee Dastuurka KMG

MARKAY ARKEEN: Qodobbada 108aad iyo 109aad ee Xeer Hoosaadka Golaha Shacabka iyo Qodobbada 45aad iyo 46aad ee Xeer Hoosaadka Aqalka Sare.

MARKAY DHAGEYSTEEN: Talo-soojeedinta La-taliyeyaasha Guddoonka Labada Aqal ee dhanka Sharciga iyo arrimaha Dastuurka.

MARKAY KA BAARAANDEGEEN: Heshiisyada Siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka, isla markaana uu Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha u soo gudbiyey Guddoonka Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

MARKAY KA DOODEEN: Hannaanka heshiis siyaasadeedyadaasi loogu beddeli lahaa qodobbo Dastuuri ah, sidoo kale habraaca loo marayo iyo cidda awoodda u leh arrimahaas, ilaa uu ka noqonayo qeyb ka mid ah Dastuurka.

WAXAY GAROWSADEEN: In dhammaan Heshiisyadaasi loogu gudbiyo **Guddiga La-scodka Dib-u-eegista iyo Dhaqangelinta Dastuurka** ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya si ay uga gutaan waajibaadka uga abbaaran heshiisyada ay gaareen Golaha Wadatashiga Qaranka.

Haddaba, Guddoomiye, waxaan halkan kugu soo lifaaqnay dhamaan Heshiis Siyaasadeedyada ay gaareen Golaha Wadatashiga Qaranka, si aad uga baarandegtaan, uguna badashaan luuqad qanuun oo dastuuri ah, isla markaana aad u soo gudbisaan fadhiyada Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; si ay iyaguna waajibaadkooda Dastuuriga ah uga gutaan.

Naga guddooma salaan iyo xushmad.

Xil. Sh. Aadan Maxamed Nuur "Madoobe"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi
Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare
Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب رئيس الوزراء

The Federal Republic of Somalia
Office of the Prime Minister

Tixraac:XRW/02332/06/2023 **Tariikh: 18/06/2023**

Ku: Gudoonka Golaha Shacabka
Og: Wasaaradda Cadaaladda iyo Dastuurka XJFS
Og: Guddiga dib u eegista Dastuurka Qaranka (ICRIC)
Og: Gudoonka Golaha Aqalka Sare
Og: Madaxwaynaha JFS

XRW - BIXIT
18 JUN 2023
OPM - EXIT

Ujeeddo: <u>Soo gudbinta heshiisyada Golaha Wada tashiga Qaranka</u>

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

Markuu arkay:	Qodobka 99aad xarfaha (a), (b) iyo (e) ee Dastuurka KMG.
Markuu arkay:	Qodobka 100aad xarfaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG.
Markuu arkay:	War murtiyeedyada iyo Heshiisyada siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka ay gaareen lixdii kalfadhi ee qabsoontay Octoobar 2022 – Maajo 2023
Markuu arkay:	Baahida waye ee loo qabo dardargalinta dhamaystirka Dastuurka Ku meel gaarka ah ee JFS.
Markuu arkay:	Mas'uuliyadda Dowladda ka saaran hir-gelinta heshiisyada Golaha Wada tashiga Qaranka ee ah in heshiiska loo gudbiyo Laanta sharci dajinta Dalka

Wuxuu go'aamiyay qodbadan soo socda;

Qodobka 1aad

In aan guddoonka Golaha Shacabka JFS, aan si rasmi ah ugu soo wareejinno nuqullada saxda ah ee heshiisyadii ay gaareen Golaha Wada tashiga Qaranka (GWQ), Heshiisyadaas oo lagu gorfeeyay lix kal fadhi oo ku qabsoontay muddo hal sano ku dhaw ayaa lagu lafa guray, loogana heshiiyay qodobadan soo socda;

1. Hannaanka Doorashooyinka Dalka
2. Hannaanka Federaalaynta Awoodaha laamaha Dowladda
3. Hannaanka Garsoorka iyo cadaaladda Dalka
4. Qaab dhismeedka Hay'adaha Amniga
5. Iyo Hannaanka Federaalaynta Maaliyadda Dalka

Waxaa Guddoonka xasuusinayaa in ay Dowladda Soomaaliya horay heshiis uga gaartay Arrimaha Wadaaga Khayraadka Dalka, hadaba maadaama ay qodobadani ahaayeen kuwa ugu waawayn ee Dastuurku u xannibnaa, waxaan rajaynaynaa in Guddoonka iyo Golayaasha Baarlamaanku ay ka gudan doonaan waajibaadkooda dastuuriga ah.

Wabillahi towfiiq

Mudane Xamsa Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA

NUQULKA RASMIGA AH
EE WAX-KABEDDELKA CUTUBYADA 1AAD ILAA 4AAD EE DASTUURKA

MAARSO 31, 2024

Cutubka Koowaad:
Baaqa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Qodobka 1aad:
Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

1) Soomaaliya waa Jamhuuriyad federaal ah, muslim sunni shaafici ah, lehna gobannimo ku saleysan caddaalad bulsho iyo sarraynta sharciga.

2) Soomaaliya waa Jamhuuriyad dimoqraadi ah, oo ku dhisan matalaadda dadweynaha loo dhan yahay, kuna salaysan nidaam siyaasadeedka xisbiyada badan ee tixgelinaya kala duwanaanta afkaarta si waafaqsan Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

3) Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) ka sokow, awoodda gobonnimada dalka waxaa iska leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, asagoo awooddaas u isticmaalaya si toos ah ama si dadban, u adeegsanaya hay'adihiisa uu u xilsaartay, si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

4) Waxaa reebban in qof ama qayb ka mid ah shacabka Jamhuuriyadda ay sheegato ama la wareegto xaqa lahaanshaha gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ama isticmaalkeeda si u gaar ah.

5) Gobannimada, madaxbannaanida, midnimada qaranka, xuduudaha badeed iyo dhuleed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa laguma xadgudbaan.

Qodobka 2aad:
Diinta

1) Islaamku waa diinta dalka, dadka iyo dawladda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

3) Waxaa reebban caayidda diinta Islaamka, nacaybkeeda iyo wax kasta oo wax u dhimaya xushmada arrimaha diinta Islaamka. Qofkasta oo ku xadgudba diinta Islaamka waxaa lala tiigsanayaa xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

4) Lama soo saari karo xeer aan waafaqsanayn Shareecada Islaamka iyo maqaasiiddeeda.

Qodobka 3aad:
Mabaadii'da Aasaasiga ah

1) Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa saldhig u ah Qur'aanka Kariimka iyo Sunnada Nebi Muxammad (NNKH), wuxuuna ilaaliyaa Shareecada Islaamka iyo maqaasiddeeda.

2) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa dal Muslim ah oo ka mid ah ummadaha adduunka gaar ahaan Carabta iyo Afrikaanka.

3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay ku dhisan tahay mabaadi'da asaasiga ah ee awood qaybsiga nidaamka federaalka.

4) Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya wuxuu ilaalinayaa xuquuqda aadanaha, talinta sharciga, xurmaynta xeerarka caalamiga ah oo aan ka horimaaneyn shareecada islaamka iyo Dastuurka, xoojinaya dawlad loo dhanyahay, kala soocidda awoodaha xeer dejinta, fulinta iyo garsoor madaxbannaan, iyagoo leh hannaan ku dhisan isla-xisaabtan, daahfurnaan, hufnaan, kana jawaabaya danaha dadweynaha.

5) Haweenku waa in ay ka mid noqdaan dhammaan saddexda laamood ee hay'adaha dawladda iyo guddiyada madaxabannaan ee heer federaal, heer dawlad goboleed iyo dawladaha hoose si wax-ku-ool ah, lana sugo jagooyinka la isu doorto iyo kuwa la isu magacaabo.

6) Awood dawladeedka heer kasta waxaa loo adeegsan karaa oo keliya si waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

7) Dhulka, badda, hawada, webiyada, jasiiradaha iyo kheyraadka dabiiciga ah waa hanti qaran oo ay shacabka soomaaliyeed wada leeyihiin, waxaana mas'uul ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 4aad:
Sarreynta Dastuurka

1) Shareecada Islaamka ka sokow, Dastuurka Jamhuuriyaddu waa xeerka ugu sarreeya ee dalka, isaga ayayna u hoggaansameysaa xukuumadda heer kasta oo dawladeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, wuxuuna hagayaa curinta iyo go'aannada siyaasadeed ee qaybaha dawladda oo dhan.

2) Cid kastaba, dhammaan hay'adaha dawladda, ururrada, xisbiyada siyaasadeed iyo bulsho waxaa waajib ku ah in ay u hoggaansamaan ku dhaqanka iyo ilaalinta Dastuurka.

3) Xeer, go'aan, ama tallaabo maamuleed kasta oo ka soo baxa heerarka hay'adaha dawladda, kana soo horjeeda Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, wuxuu noqonayaa waxba kama jiraan, waxaana burin kara maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 5aad:
Afafka Rasmiga ah

1) Afka rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa Af-soomaali (Maay iyo Maxaatiri), af Carabiguna waa afka labaad.

2) Dawladda Federaalka Soomaaliya waa in ay daryeeshaa, ilaalisaa islamarkaana horumarisaa Af Soomaaliga iyo suugaantiisa.

Qodobka 6aad:
Calanka iyo Astaanta Qaranka

1) Calanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta (A) ee Jadwalka koowaad, waa laydi buluug furan ah oo ay dhexda kaga taal xiddig cad oo shan gees ah, madaxyo simanna leh.

2) Astaanta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sida lagu muujiyey qaybta (B) ee jadwalka koowaad, waxay ka kooban tahay gaashaan buluug ah, oo leh xiddaayad dahabi ah, dhexdana ku leh xiddig shan gees ah oo dheeh qalin ah leh, gaashaanka dushiisa waxaa ku yaal rukumo Carbeed oo xardhan, lehna shan madax oo dahabi ah oo labada geesaha ku yaalla ay kala qaaran yihiin, hareerahana waxaa ka haya laba shabeel oo isu tusmaysan, kuna kala taagan labo waran oo isku weydaarsan caaradda hoose ee gashaanka, ayna weheliyaan laba caleen-cawbaar, mayrax cadna ay ku qoofalan tahay.

3) Heesta Qaranka Soomaaliya waa "Qolobaa Calankeedu waa cayn", sida lagu muujiyey qaybta (C) ee jadwalka koowaad, ayada ayayna Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedyadaba u isticmaalayaan munaasabadaha rasmiga ah.

4) Billad sharafta calanka iyo heesta qaranka ee Jamhuuriyadda iyo maammuuska ay mudanyihiin dadka mutaysta waxaa xeer gaar ah ku soo saaraya Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

5) Dawlad goboleedyadu waxay yeelan karaan calan iyo astaan u gaar ah, balse ma yeelan karaan hees astaameed iyaga u gaar ah.

Qodobka 7aad:
Geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

1) Gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay koobeysaa geyiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo idil, oo ay ku jiraan berriga, badaha, webiyada, jasiiradaha iyo uurkooda hoose, hawadooda sare iyo geyi qaaradeedka iyo dhul iyo biyo goboleed kasta oo ku soo biira Jamhuuriyadda Soomaaliya, oo uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyo.

2) Dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed lama kala goyn karo, lagumana xadgudbi karo.

3) Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa xuduudihii ku astaansanaa Dastuurka 1960 ee Soomaaliya.

4) Xuduudaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya:
   a) Waqooyi: Gacanka Cadmeed;
   b) Waqooyi Galbeed: Jabuuti;
   c) Galbeed: Itoobiyia;
   d) Koonfur Galbeed: Kenya;
   e) Bari: Badweynta Hindiya.

Qodobka 8aad:
Shacabka iyo Jinsiyadda

1) Shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waa mid, lamana kala qaybin karo, wuxuuna ka kooban yahay dhammaan muwaaddiniinta.

2) Jinsiyadda Soomaaliyeed waa mid qur ah, xeer gaar ah oo uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo kaliya ayaa xaddidaya sida lagu helayo, lagu laalayo ama lagu waayayo.

3) Qof leh jinsiyadda Soomaaliyeed wuxuu qaadan karaa jinsiyad dal kale, lagamana qaadi karo jinsiyadda soomaaliyeed, lagumana qasbi karo in uu ka tago jinsiyadiisa kale.

4) Diidmada, laalista iyo ka-qaadista jinsiyadda laguma xiri karo asbaabo siyaasadeed.

Qodobka 9aad:
Magaalamadaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

1) Magaalomadaxda Jamhuuriyadda Federaaalka Soomaaliya waa Muqdisho.

2) Maqaamka Magaalomadaxdu leedahay iyo matalaaddeeda waxaa lagu xeerinayaa cutubka 5aad ee Dastuurka.

Cutubka Labaad:
Xuquuqda Asaasiga ah iyo Waajibaadka Muwaaddinka

Madaxa Koowaad:
Mabaadii'da Guud ee Xuquuqda Aadanaha

Qodobka 10aad:
Karaamada Aadanaha

1) Karaamada aadanuhu waa deeq Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa ku mannaystay qof kasta oo bani'aadan ah, xuquuqda aadanuhuna deeqdaas ayay ka dhalataa.

2) Karaamada Aadanaha waa laguma-xadgudbaan, dhawristeeduna waa waajib saaran dadka oo dhan.

3) Awoodda Dawladda waa in aan marnaba loo isticmaalin ku xadgudbidda karaamada Aadanaha.

4) Qofna lama addoonsan karo, xoogna looguma shaqeysan karo, lagamana ganacsan karo, shaqana laguma qasbi karo ujeeddo kasta ha laga lahaadee.

Qodobka 11aad:
Sinnaanta

1) Qof kasta iyadoo aan loo eegin lab ama dheddig, diin, midab, xaalad bulsho ama dhaqaale, afkaar siyaasadeed, qabiil, naafannimo, xirfad, dhalasho, isir, da' iyo afguri toona, xuquuqda iyo waajibaadkaba way u siman yihiin xeerka hortiisa, si waafaqsan Shareecada Islaamka.

2) Waxaa reebban in qofna lagu sameeyo, si toos ah ama dadban, takoor ku salaysan da', midab, qabiil, isir, dhaqan, afguri, lab iyo dheddig, dhalasho, naafannimo, diin, afkaar siyaasadeed, xirfad, hanti ama sababo kale.

3) Waa in aan loo arkin fal takoorid ah barnaamijyada dawladda sida xeerarka, hab siyaasadeed iyo hab maamuleed ee loo qorsheeyey in sinnaan buuxda lagu gaarsiiyo dad ama kooxo horay loogu geystey takoorid ama ku sugan xaalad dib-udhacsan.

4) Qofna maqaam iyo maamuus uu leeyahay awgeed ugama baxsan karo la xisaabtan iyo ciqaab faldembiyeedka uu galay, haddii aanu Dastuurku si kale u dhigin.

Qodobka 12aad:
Dhaqangelinta Xuquuqda Asaasiga ah

1) Hay'adaha Dawladda heer Federaal iyo heer Dawlad gobleedba, xisbiyada siyaasadeed, urur kasta oo gaar loo leeyahay iyo qof kastaba waa in ay u wada hoggaansamaan markasta xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyaadka lagu aqoonsaday cutubkan.

2) Dawladdu waa in ay mar walba ilaalisaa, damaanad qaaddaana hirgelinta iyo ku dhaqanka xuquuqda aasaasiga ah iyo xurriyaadkaba.

Madaxa Labaad:
Xuquuqda, Xorriyaadka Aasaasiga Ah Ee Qofka Iyo Xaddidaadooda

Qodobka 13aad:
Xaqa Nolosha

1) Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay nolol.

2) Noloshu waa deeq Ilaahey Subxaanahu Watacaalaa siiyey banii'aadamka oo idil, sidaas daraadeed waa xaq dabiici ah oo qofna laga qaadi karin, haddii aysan jirin asbaabo xeerku tilmaamayo in xaqaasi lagu waayi karo, taas oo ku imaan karta xukun maxkamadeed oo kama dambays ah.

3) Soo rididda ilmuhu waa arrin ka soo horjeedda Shareecada Islaamka, waana reebban tahay, haddii ayna keenin xaalad caafimaad, oo aan looga maarmin badbaadinta nolosha hooyada oo uu sugay dhakhtar hufan oo awood u leh.

Qodobka 14aad:
Xorriyadda iyo Nabadgelinta Qofnimada

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay xorriyaddiisa shakhsiga ah iyo nabadgelyada qofnimadiisa.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay amniga qof ahaantiisa iyo hantidiisa; qofna looma geysan karo qaab kasta oo jirdil ah ama fal bini'aadannimada ka baxsan; waxaana reebban xarig aan sharciga waafaqsaneyn iyo wax kasta oo cunfi ah, oo ay ka mid tahay kan lagula kaco haweenka iyo carruurta.

3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay badqabka jirkiisa, waana laguma xad gudbaan. Qofna laguma samayn karo tijaabo dhakhtareed ama mid cilmibaariseed oggolaasho la'aantiisa, haddii qofku sharciyan awood u lahayn inuu wax oggolaado waa in la helaa oggolaashaha xigtadiisa ugu dhow, oo ku salaysan talo uu bixiyey xeeldheere caafimaad.

4) Gudniinka gabdhaha waa caado naxariisdarro ah iyo xaqiraad u dhiganta jirdil, waana uu reebban yahay.

Qodobka 15aad:
Xorriyadda Ka-mid-noqoshada

Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ku biiro urur ama koox kale, xaqaas waxaa ka mid ah inuu sameeyo ama ka mid noqdo ururro ay ka mid yihiin ururro shaqaale ama xisbiyo siyaasadeed, wuxuu kaloo xor u yahay in uusan cidna ku biirin, lagumana qasbi karo inuu cid kale ku biiro.

Qodobka 16aad:
Xorriyadda Diinta iyo Caqiiddada

1) Qof kastaa wuxuu xor u yahay in uu ku dhaqmo diintiisa.

2) Diin aan ahayn Islaamka laguma faafin karo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 17aad:
Xorriyadda Ra'yiga iyo Afkaarta

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu yeesho ra'yigiisa, kuna soo bandhigo hadal, qoraal, saxaafad, farshaxan ama sidii kale oo uu doono, haddii aysan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u soo bandhigo aqoontiisa ama hal-abuurkiisa.

Qodobka 18aad:
Xurmada Hoyga

Qofna hoygiisa, qalabkiisa, goobaha iyo waxyaabaha kale ee isaga u gaarka ah lama baari karo, lama dhegeysan karo lamana basaasi karo amar garsoore oo sababaysan la'aantiis.

Qodobka 19aad:
Xorriyadda Kulanka, Bannaanbaxa, Cabashada iyo Codsi-wadareedka

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu abaabulo, kana qayb galo kulamo ama bannaanbax, cabasho, taageero oo lagu muujinayo si xasillooni ah, iyadoo aan oggolaansho loo baahnayn.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu cabasho qoraal ah u gudbin karo hay'adaha dawladda.

Qodobka 20aad:
Xorriyadda Isusocodka iyo Degitaanka

1) Qof kasta oo dalka sifo sharci ku jooga wuxuu xaq u leeyahay in uu dego meesha uu rabo, kuna dhex socon karo dalka gudihiisa, si xor ahna uga bixi karo dalka goortii uu doono.

2) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay soo-gelidda, ka bixidda iyo joogitaanka waddanka.

3) Muwaaddin kasta wuxuu kale uu xaq u leeyahay inuu helo baasaboor Soomaali ah, dukumentiga aqoonsiga qaranka, dukumeenti diiwaangelineed iyo aqoonsi kasta oo ay dawladdu u soo saarto muwaaddiniinta.

Qodobka 21aad:
Xaqa Ka Qaybgalka Siyaasadda

1) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu ka qeybqaato arrimaha siyaasadeed ee dalka, uuna sameysan karo, kana mid noqon karo xisbi siyaasadeed, loona dooran karo xil kasta, oo xisbiga gudihiisa ah, si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2) Muwaaddin kasta oo buuxiya shuruudaha xeerku tilmaamayo wuxuu xaq u leeyahay inuu wax doorto, lana doorto.

Qodobka 22aad:
Xorriyadda Xirfadda, Shaqada iyo Mihnadda

Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu si xor ah u doorto xirfadda, shaqada ama mihnadda uu rabo.

Qodobka 23aad:
Xiriirka Shaqada

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xiriir shaqo oo ku dhisan caddaalad.

2) Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu sameeyo, kuna biiro urrur shaqaale, kana qaybgalo hawlaha urrurkaas.

3) Shaqaaluhu xaq ayay u leeyihiin shaqo joojin.

4) Urur shaqaale kasta ama loo shaqeeye kasta waxay xaq u leeyihiin in ay wada geli karaan gorgortan wadareed oo ku saabsan arrimaha shaqada.

5) Qof kasta oo shaqaale ah, gaar ahaan haweenka waxay xaq gaar ah u leeyihiin in laga ilaaliyo xadgudub, faquuqid iyo takoorid goobaha shaqada. Xeer kasta oo shaqaaleed iyo hab dhaqan kasta waa in uu xeeriyaa sinnaanta xuquuqda shaqaalaha ee lab iyo dheddigba.

6) Dadka naafada ahi waxay xaq u leeyihiin in ay goobaha shaqada ku helaan sinnaan buuxda, waana in loo fududeeyaa qaab kasta oo u suurtaggelinaya shaqadooda.

Qodobka 24aad:
Deegaan Nadiif ah

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo Deegaan aan waxyeello u lahayn caafimaadkiisa iyo baraarihiisa nololeed oo laga ilaaliyey wasakhda iyo waxyaalaha halista ah.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu wax ka helo kheyraadka dabiiciga ah ee dalka, iyadoo laga ilaalinaayo ka faa'ideysi xad dhaaf ah, oo degaanka iyo kheyraadka dabiiciga ahba waxyeello u geysan kara.

Qodobka 25aad:
Hantida Gaarka Loo Leeyahay

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu hanti gaar ah yeesho, ku dhaqmo, ka faa'ideysto, kuna naalloodo, iskana gado ama hibeeyo markuu doono.

2) Dawladdu waxay hanti gaar loo leeyahay la wareegi kartaa marka ay jirto dan guud. Qof kasta oo hantidiisa dan guud awgeed loola wareegay wuxuu dawladda xaq ugu leeyahay magdhaw caaddaalad ah, lagalana heshiiyey ama maxkamadi go'aamisay.

Qodobka 26aad:
Xuquuqda Bulshada

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo biyo nadiif ah uu cabo.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo daryeel caafimaad, iyadoo qofna laga reebi karin helitaanka adeegyada caafimaadka deg-deg ah sabab kasta ha jirtee.

3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay daryeel bulsho oo dhammaystiran.

4) Hay'adaha dawladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa in si dhab ah ugu sugaan dadweynaha dhammaantood taabbaggelinta xuquuqdaas, iyagoo si gaar ah mudnaan u siinaya haweenka, carruurta, waayeelka, dadka naafada ah iyo beelaha laga tiro badan yahay ama la takooro.

Qodobka 27aad:
Daryeelka Qoyska

1) Guurku waa aasaaska qoyska oo ah saldhigga bulshada, ilaalintiisuna waa waajib sharci ah oo saaran dawladda.

2) Qof kasta oo qaangaar ah wuxuu xaq u leeyahay in uu guursado uuna yeesho qoys ku yimid rabitaankiisa iyo rabitaankeeda, si waafaqsan shareecada Islaamka iyo xeerarka Jamhuuriyadda.

3) Daryeelka hooyada iyo dhallaanka waa waajib qaran oo saaran dawladda.

4) Ubadku wuxuu waalidkiis xaq ugu leeyahay xannaano ay ka mid tahay waxbarasho iyo barbaarin toosan. Haddiise xannaanadaas uu ka waayo qoyskiisa ama xigtadiisa, ama uu yahay ubad dayacan, Dawladda ayaa kafaala qaadaysa xuquuqdaas.

5) Waalidka aan iskiis isugu filnayn wuxuu ubadkiisa qaangaarka ah xaq ugu leeyahay in uu ka helo daryeel, waalidiinta aan daryeel ka helin ubadkooda qaangaarka ama xigtadooda, waxaa daryeelkoodu kafaala qaadaya dawladda.

6) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya arrimaha qoyska.

Qodobka 28aad:
Xuquuqda Carruurta

1) Ubadku markuu dhasho wuxuu xaq u leeyahay in loo bixiyo magac suubban iyo in si rasmi ah loo diiwaangeliyo.

2) Ubad kasta wuxuu xaq u leeyahay in laga ilaaliyo dhaqan-xumo, dayacaad, xadgudub ama liiditaan.

3) Carruurta looma diri karo inay qabtaan hawl, ama adeegyo aan ku habboonayn da'dooda, ama halis gelin kara caafimaadkooda ama koritaankooda.

4) Carruurta waxaa la xiri karaa oo keliya muddo gaaban markii la waayo xal kale, lagumana xiri karo dadka waaweyn dhexdooda, marka laga reebo xigtada ugu dhow, waana in lagu hayaa xaalado ku habboon. Xigtada ugu dhow carruurta waa in sida ugu dhaqsaha badan oo suurtogal ah loo wargeliyaa xiritaankooda.

5) Carruurtu waxay xaq u leeyihiin inay helaan kaalmo qareennimo oo ay dawladdu bixineyso kharashkeeda.

6) Carruurtu waxay xaq u leeyihiin in laga ilaaliyo askarayn loona adeegsan dagaallada hubaysan.

7) Danta carruurta ayaa mar walba mudnaan leh, markay joogto arrin kasta oo maslaxaddooda khusaysa.

8) Ereyga "carruur/ubad" ee qodobkan ku xusan waxaa looga jeedaa qof da'diisu ka yar tahay 18-jir.

Qodobka 29aad:
Waxbarashada

1) Waxbarashadu waa xaq aasaasi ah oo ay leeyihiin dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2) Muwaaddin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo waxbarasho lacag la'aan ah oo gaarsiisan ilaa heer dugsi sare.

3) Waxbarashada aasaasiga ah ee qur'aanka kariimka ah iyo dugsiyada hoose-dhexe waa khasab.

4) Heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda ee u xilsaaran waxbarashada, waxaa waajib ku ah horumarinta, fidinta iyo baahinta waxbarashada guud ee dadweynaha.

5) Heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda ee u xilsaaran waxbarashada waa in ay horumariyaan tacliinta sare, machadyada farsamo, tiknoolijiyada, cilmi barista, hal-abuurka, cayaaraha, hiddaha iyo dhaqanka.

6) Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa u xilsaaran dejinta manhaj waxbarasho mideysan ee Qaranka. Hay'adaha Dawladda ee heer kasta ayaa u xilsaaran in ay ka hirgeliyaan manhajkaas dhammaan dugsiyada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

7) Barashada tacliinta diinta Islaamka waa ku khasab ardeyda dhigata dugsiyada dawladda iyo dugsiyada gaarka ah ay leeyihiin dadka muslim ka ah.

8) Dawladdu waa in ay qaaddaa tallaabooyin muhiim u ah dhalinyarada si ay u helaan waxbrasho tayo leh, xirfad iyo horumar wax-ku-ool ah, iyada oo la carbinayo laguna beerayo jeceylka dadka, dalka iyo diintaba, islamarkaasna waa in dawladdu dhalinyarada ka ilaalisaa dhaqannada xun xun ee lidka ku ah mustaqbalka dalka.

9) Dawladdu waxay xaqiijinaysaa bixinta iyo helitaanka hay'adaha iyo agabka lagama maarmaanka ah si loo horumariyo awoodda dhalinyarada iyo hal-abuurkooda, sidoo kale, dawladdu waxay qaadaysaa tallaabooyinka lagu horumarinayo qaybaha kala duwan ee ciyaaraha.

Qodobka 30aad:
Dhaqanka iyo Afka

1) Hay'adaha dawladda ee heerarka kala duwan waa in ay horumariyaan afka, hiddaha iyo dhaqanka suubban ee shacabka Soomaaliyeed, iyagoo ku dadaalaya in ay bulshada dhexdeeda ka ciribtiraan caadooyinka xun ee haraaga ah iyo kuwa dhawaan soobaxa ah ee saamayn xun ku yeelan kara diinta, midnimada iyo caafimaadka bulshada.

2) Hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh waa in ay uruuriyaan, ilaaliyaan, kaydiyaan dhaxalkii sooyaalka ahaa ee ummadda sida goobaha taariikhiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyaga oo islamarkaasna horumarinaya aqoonta, kartida, teknoloojiyada iyo farsamada hay'adahaas u suurtagalin karta gudashada waajibaadkan.

3) Hay'adaha dawladda ee ku shaqada leh waa in ay horumariyaan, dhawraanna dhaqan hoosaadyada iyo afguriyada dhammaan dadka Soomaaliyeed.

4) Xukuumadda Federaalku waa inay abuurto hay'ad si gaar ah u hormarisa, una kobcisa: hiddaha, dhaqanka, afka iyo sooyaalka Soomaaliyeed.

Qodobka 31aad:
Xaqa Helidda Xogta

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xogta ay hayaan hay'adaha Dawladda heer kasta, marka laga reebo xogta taabanaysa amniga qaranka iyo xogta lagu ilaalinayo xuquuqda dad kale, ama xeerku reebayo.

2) Qof iyo hay'ad midna laguma khasbi karo inuu bixiyo xog haddii aysan maxkamad amrin ama xeererka Jamhuuriyadda.

3) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa lagu hirgelinayaa xaqa helidda xogta.

Qodobka 32aad:
Xaqa Ilaalinta Xogta Shaqsiga

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in la ilaaliyo xogtiisa qof ahaaneed, taas oo loo isticmaali karo oo keliya ujeeddadii loo uruuriyey.

2) Xogta ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan waxaa lagu bixin karaa oo keliya oggolaashaha shakhsiga xogta leh ama sabab kale oo xeer tilmaamayo.

3) Qofka wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xogtiisa gaarka ah ee la uruuriyey iyo sidoo kale in la saxo xogtiisa.

4) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya uruurinta, isticmaalka iyo gudbinta xogta shakhsiga ah.

Qodobka 33aad:
Go'aanno Maamul oo Caddaalad ah

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay in go'aamada maamuleed ee ka soo baxa maamullada heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda ay ahaadaan kuwo ku dhisan sharci, maangal ah oo sababaysan, go'aan-kagaaristoodana loo maray hannaan caddaalad ku dhisan.

2) Qofka kasta oo ku qanci waaya go'aannada maamuleed ee ka soo baxa hay'adaha dawladda ee heerarka kala duwan, wuxuuna xaq u leeyahay inuu horgeyo maxakamadda awoodda u leh.

Qodobka 34aad:
Xaqa Dacwadda Iyo Isdifaaca

1) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu dacwad sharciga waafaqsan ka furto maxkamadaha awoodda u leh.

2) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo garsoor madaxbannaan, caddaalad ku dhisan, aan eex lahayn; laguna qaado maxkamad dadweynaha u furan, laguna galo muddada xeerku jideeyey.

3) Qof kasta wuxuu xaq u leeyahey inuu iska difaaco dacwad kasta oo lagu soo oogo heer iyo darajo kasta oo ay taagan tahay.

4) Dawladdu waxay siinaysaa difaac sharci oo lacag la'aan ah dadka aan awoodin bixinta qarashka dacwadda maxkamadda iyo dadka raadinaya, oo u doodaya arrin la xiriirta danta guud.

Qodobka 35aad:
Xuquuqda Eedaysanaha

1) Eedaysanuhu wuxuu la mid yahay qof aan dembi gelin ilaa maxkamad awood u leh ay si kama-dambays ah ugu xukunto dembiga loo haysto.

2) Qof kasta oo la soo qabto ama lagu soo xiro tuhun faldembiyeed wuxuu xaq u leeyahay in lagu wargeliyo dembiga lagu tuhunsan yahay, looguna sheegaa af uu garanayo, wuxuuna isla markaasba xaq u leeyahay in uu ka aamuso hadal lagu eedeyn karo.

3) Qof kasta oo xorriyaddiisa shakhsiga ah laga qaado waa in xaaladdiisa la gaarsiiyo qoyskiisa ama eheladiisa iyo qareenkiisa.

4) Qofna laguma qasbi karo dembi-qirasho, xukunkiisana saldhig loogama dhigi karo qiraal lagu qasbay.

5) Eedaysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu iska difaaco maxkamad awood u leh horteeda, lana yimaado caddeymaha eed-iska-rogidda ah uu isku difaacayo.

6) Qof kasta oo la xiraa wuxuu xaq u leeyahay in 48 saac gudahooda lagu horgeeyo maxkamad awood u leh.

7) Eedeysanuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu goobjoog ka ahaado marka dacwaddiisa la qaadayo.

8) Qof kasta oo la soo xiro wuxuu xaq u leeyahay in uu qabsado qareen difaaca, haddii uusan awood u lahaynna ay dawladdu u qabato.

9) Eedeysanuhu waxuu xaq u leeyahay tarjumaan haddii uusan fahmayn afka maxkamaddu adeegsanayso.

10) Eedeysanuhu oo maxkamad lagu soo taagey tuhun faldembi ciqaabeed wuxuu xaq u leeyahay garsoor caaddil ah.

11) Qofna laguma soo oogi karo mar labaad dembi si kama dambeys ah horey loogu soo xukumay ama looga sii daayay si sharciga waafaqsan.

12) Mas'uuliyadda ciqaabtu waa shakhsi, sidaa darteed, qofna looma ciqaabi karo faldembiyeed uu galay qof kale.

13) Qofna looma ciqaabi karo fal markii uu qofku ku kacaayay uusan sharcigu dembi u aqoonsaneyn, haddii uusan ahayn dembi lid ku ah bani'aadannimada.

14) Eedeysanuhu waxuu xaq u leeyahay in uu racfaan u qaato maxkamad ka sarreysa tan xukunka gaartay hadduusan ku qancin xukunka Maxkamadda.

15) Eedeysanaha laguma hayn karo goob aan sharcigu bannayn, waana in loo oggolaado waqti ku filan booqashada eheladiisa, dhakhtarkiisa iyo qareenkiisa.

Qodobka 36aad:
Isucelinta Eedaysanayaasha iyo Dembiilayaasha

1) Isucelinta eedeysanayaasha iyo dembiilayaasha waxaa lagu oggolaan karaa oo keliya si waafaqsan xeerka, iyo in uu jiro heshiis isucelin ah, oo ay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya dhinac ka tahay ama heshiis caalami ah oo ku waajibinaya Dawladda Federaalka Soomaaliya celinta eedaysanaha ama dembiilaha.

2) Muwaaddinka Soomaaliya looma gacangelin karo dal shisheeye.

3) Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxay hormarinaysaa iskaashiga garsoor ee caalamiga ah.

4) Baarlamaanka Federaalka ah ayaa soo saaraya xeer ku saabsan isu-celinta eedaysanayaasha iyo dambiilayaasha iyo iskaalmaysiga sharciyeed ee arrimaha dembiyada.

Qodobka 37aad:
Qaxootiga iyo Magangelyada

1) Qof kasta oo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ku soo gala magangalyo-doon ama loo aqoonsado qaxooti wuxuu xaq u leeyahay in aan dib loo celin ama aan loo qaadin dal kale, haddii ay jirto cabsi muuqata oo ah in uu la kulmaayo ciqaab ama khatar lid ku ah.

2) Baarlamaanka Federaalka waa in uu soo saaraa xeer waafaqsan qaanuunka caalamiga ah; kaas oo nidaaminaya qaxootiga ama magangelyo-doonka.

Qodobka 38aad:
Xaddidaadda Xuquuqda

1) Xuquuqdan waxaa xaddidi karaa xeer, ama xaddidaad si gaar ah Dastuurka dhexdiisa ugu xusan, waase haddii xaddidaaddaasi ay tahay mid si cad u maangal ah ama kuwo la aqbali karo waafaqsanna qiyamka lagu qeexay Dastuurka, islamarkaasna xaddidaaddaasi aysan si gaar ah u bartilmaameedsanayn shakhsiyaad ama kooxo gaar ah.

2) Xadiddaadu waxay imaan kartaa oo keliya marka ay jirto baahi culus oo lagu xaqiijinayo: dhawritaanka xuquuqda cid kale, amniga guud, difaaca dalka, caafimaadka guud iyo anshaxa wanaagsan, iyadoo la tixgelinayo isu dheellitirnaanta xaddidaada iyo asbaabta keentay.

3) Hay'adaha garsoorka ayaa dammaanad qaadaya in aan lagu xadgudbin xuquuqda iyo xorriyaadka, lana dhawro qiyamka saldhiga u ah Dastuurka.

Qodobka 39aad:
Dib-uxaqsooridda La Xiriirta Xadgudubyada Xuquuqda Aadanaha

1) Qof kasta waxuu xaq u leeyahay magdhow haddii lagu xadgudbo xuquuqdiisa aasaasiga ah, waxaana go'aan ka gaaraya dacwaddiisa maxkamad awood u leh.

2) Qof ama urrur wuu u dacwoon karaan maxkamad awood u leh, si ay u difaacaan xuquuqda asaasiga ah ee dadka kale leeyihiin oo aan awoodin in ay iskood isu difaacaan.

3) Ma laha waqti xaddidan furidda oogiddda gal dacwadeedka la xiriira gabood-falada xuquuqda aadanaha, dembiyada dagaalka iyo dembiyadda lidka ku ah binii'aadannimada oo ay xeeriyeen xeerarka Jamhuuriyadda ama heshiisyada caalamiga ah, oo ay Soomaaliya qayb ka tahay.

4) Dacwadaha ku xusan faqradda 3aad ee qodobkan waxaa qaadi kara maxkamad awood u leh, gabood-faladaasna lama siin karo gabbaad nooc kasta oo uu yahay, lamana cafin karo haddii uusan Dastuurku si kale u dhigin.

5) Dawladdu waxay qaadaysa tallaabooyin caddaaladeed, garsooreed, maamuleed, tacliimeed iyo tallabo kastoo kale, oo ay uga hortageyso, ku ciqaabmarineyso ama ugu dib-garnaqayso si ay u saxdo cid kasta oo dhibaato geesatay maqaam kastoo ay leeyihiiin.

6) Xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa nidaaminaya dib-uxaqsooridda xadgudubyada xuquuqda aasaasiga ah.

Qodobka 40aad:
Fasiraadda Xuquuqda Asaasiga ah

1) Marka la fasirayo xuquuqda ku xusan cutubkan waa in maxkamad awood u leh ay raadiso qeexidda ujeeddooyinka laga leeyahay xuquuqda asaasiga ah iyo qiyamka saldhigga u ah Dastuurkan.

2) Marka ay fasirayso xuquuqahani waxay maxkamaddu tixgelineysaa Shareecada Islaamka, qaanuunka dawliga ah, dhaqanka suuban ee Soomaaliyeed iyo mabaadi'da iyo halbeegga fasiraadda xeerarka ee caalamiga ah, ilaa iyo inta fasiraaddaas aysan ka horimaaneyn Dastuurka iyo qiyamka saldhigga u ah.

3) Aqoonsiga xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan Cutubkan kama hor-imaaan karaan xuquuqda kale ee Shareecada Islaamku aqoonsatay.

Qodobka 41aad:
Guddiga Xuquuqda Aadanaha

1) Waxaa la dhisayaa Guddiga Madaxabannaan ee Xuquuqda Aadanaha oo uu waajibkiisu yahay:
   a) Xoojinta, sare-uqaadidda, difaacidda, xushmeynta iyo xaqiijinta qiyamka xuquuqda aadanaha iyo xoriyadaha guud si waafaqsan: Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda;
   b) U kuurgelidda, baarista iyo diyaarinta warbixinno la xiriiro xaaladda Xuquuqda Aadanaha ee Dalka;
   c) Ka hortagga tacaddiyada iyo ku xad-gudubyada xuquuqda aadanaha iyo ku wargelintooda hay'adaha qaranka ee ay khusayso;
   d) Hubinta damaanadqaadka xuquuqda aasaasiga iyo dhowrista habdhaqanka xuquuqda aadanaha ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   e) Ka talobixinta habka ugu habboon ee lagu dhowri karo xuquuq aadanaha iyo xaqsoorka gaboodfalada, iyo kala talinta dawladda ee ka mid noqoshada iyo gelidda heshiisyada caalamiga ah ee Xuquuqda Aadanaha ee aan ka hor imaanayn Shareecada Islaamka iyo Dastuurka Dalka;
   f) Baarista iyo diiwaangelinta xadgudubyada xuquuqda aadanaha, kormeeridda xabsiyada iyo goobaha kale ee dadka lagu xiro iyo wacyi-gelinta bulshada ee xuquuqda aadanaha;
   g) Qabashada howl-kasta oo kale ee uu sharcigu u xilsaaro.

2) Guddigu wuxuu ka kooban yahay 9 xubnood oo uu soojeediyo Golaha Wasiirada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu ku meelmariyo Xeer Madaxweyne.

3) Baarlamaanka Fedeeraalka Soomaaliya wuxuu soo saarayaa xeer qeexaya shuruudaha xubnaha iyo dhammaan arrimaha u muhiimka ah guddiga.

Madaxa Saddexaad:
Waajibaadka Muwaaddinka

Qodobka 42aad:
Waajibaadka Muwaaddinka

1) Sida Diinta Islaamku qabto, caddaaladda waxay ku jirtaa isu-dheellitirnaanta xuquuqda iyo waajibaadka.

2) Muwaaddin kasta ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah inuu u hoggaansamo arrimaha soo socda:
   a) Noqdo waddani daacad u ah horumarinta iyo wanaagga dalkiisa;
   b) Difaaco ilaaliyana diinta, dalka, dadka iyo karaamada aadanaha.
   c) Adkeeyaa midnimada qaranka, isaga oo kaashanaya muwaaddiniinta kale;
   d) Horumariyo mas'uuliyadda waalidnimo;
   e) Barto aasaasiyaadka diinta islaamka;
   f) Si buuxda u barto, u xurmeeyo, ku dhaqmo, una hoggaansamo, difaacaana Dastuurka iyo xeerarka kale ee dalka;
   g) Horumariyo mabda'a islaxisaabtanka iyo sarraynta sharciga;
   h) Bixiyo canshuurta si waafaqsan xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
   i) Ka qayb-qaato hawlaha waxtarka u leh muwaaddinka, qoyska, wanaagga guud iyo in uu kaqayb-qaato horumarinta qaranka iyo bulshada uu la nool yahay;
   j) Ka ilaaliyo degaanka wasakhda iyo waxyeellada aan loo baahnayn;
   k) Dhowro xuquuqda xayawanaadka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
   l) Inuu codeeyo doorashooyinka.

3) Marka la fasirayo waajibaadka ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan laguma xaddidi karo xuquuqda asaasiga ah ee ku xusan cutubkan.

Cutubka Saddexaad:
Dhulka, Hantida iyo Deegaanka

Qodobka 43aad:
Dhulka

1) Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) ka sokow, dhulka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa wadajir u leh shacbiga Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2) Dhulku waa kheyraadka koowaad ee Soomaaliya iyo saldhigga nolosha dadka.

3) Dhulka waxaa lagu haysan karaa, laguna sheegan karaa si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

4) Dhulka waxaa lagu haysan karaa, loo adeegsanayaa, loona maamulayaa si caddaalad ah oo u agaasiman wax soosaarid uu dhulku xammili karo, waxna u dhimayn, kana soo horjeedin xeerarka dhaqangalka ka ah dalka iyo danta guud.

5) Xukuumadda Federaalku, iyadoo la tashaneysa dawalad goboleedyada iyo ciddii kale oo ay khuseyso, waxay dejineysaa siyaasadda dhulka qaran oo lagu hormarinayo maamulka dhulka si joogto ahna dib-u-eegis loogu sameeyo, si loo xaqiijiyo:
   a) Dhawrista deegaaneed ee u nugul waxyeellada saameeya isu dheellitirnaanta xiriirka deegaaneed iyo meelaha kale ay ku jirto dan guud;
   b) Ilaalinta goobaha taariikhiga ah, ayadoo loo aqoonsanayo in ay yihiin dhaxal taariikhi ah ;
   c) In loo siman yahay fursadaha helitaanka dhulka iyo ka faa'ideysiga kheyraadkiisa;
   d) In si sugan loo damaanadqaado milkiyadda dhulka iyo diiwaangelinta;
   e) In si sugan loo xaqiijiyo in dhulka loo dheefsaday si waafaqsan mabaadi'da xeeriya isticmaalka dhulka iyadoo aan wax dhibaato loo geysan;
   f) In xal deg deg ah oo maangal ah laga gaaro khilaafaadka ku saabsan dhulka iyo milkiyadda;
   g) In la xaddido inta uu la ekaan karo dhulka qof ama shirkad ay milkiyad ahaan u yeelan karto;
   h) In la nidaamiyo dhaqdhaqaaqa suuqa ka-ganacsiga ee dhulka, si loo ilaaliyo xuquuqda milkiilayaasha dhulalka yar leh.

6) Dawlad Goboleedyada waxay dejinayaan siyaasad dhuleed oo heerkooda ah, oo aan ka hor imaanayn siyaasadda qaran ee Dhulka iyo xeerarka Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.
7) Baaxadda dhulka, muddada isticmaalka iyo shuruudaha lagu bixinaayo fasaxa isticmaalka dhulka waxa lagu soo saarayaa xeer, haseyeeshe, ma jiri karto qayb ka mid ah dhulka, badda ama hawada dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo loo bixin karo fasax istacmaal joogto ah.

8) Dawladda Federaalka oo keliya ayaa u fasaxi karta qof ama hay'ad shisheeye isticmaalka ama heshiis kiro ah ee dhul, bad ama meel ka mid ah geyiga Jamhuuriyadda, muddo aan ka

badnayn midda xeer ku cayiman, waana haddii heshiiskaas ay dan guud ku jirto, islamarkaasna aan dhib ku aheyn madaxbannaanida Jamhuuriyadda, uuna ansixiyo Baarlaamaanka Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 44aad:
Kheyraadka Dabiiciga Ah

1) Kheyraadka Dabiiciga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa hanti qaran waxaana looga faa'ideysanayaa qaab waara, oo badda iyo dhulkuba xammili karaan, oo aan wax u dhimayn shacabkana waxtar u leh.

2) Waxaa xeer lagu dhisayaa hay'ado u xilsaaran maaraynta milkiyadda iyo in khayraadka dabiiciga ah looga faa'ideysto si aan badda iyo berriga dhulka wax u dhimayn oo waxyeellana ka ilaalinaysa hantida dabiiciga ah, hay'adahaas oo ay ka mid yihiin balse aan ku koobnayn:
   a) Hay'adda Macdanta;
   b) Hay'adda Biyaha; iyo
   c) Hay'adda Betroolka;
   d) Hay'adda Ugaarta iyo Duurjoogta.

3) Guddiga u xilsaaran qoondaynta iyo dardargelinta uruurinta dakhliga waa in uu sugaa in dakhliga ka yimaada hantida dabiiciga ay si caddaalad ah u wadaagaan dawladda Federaalka, dawlad goboleedyada iyo dawladaha hoose ee Jamhuuriyadda.

Qodobka 45aad:
Deegaanka

1) Dhammaan heerarka kala duwan ee hay'adaha dawladda waxaa waajib ku ah ilaalinta, keydinta iyo dhowrista deegaanka, iyadoo laga hortagayo xaalufinta, wasakheynta, iyo waxyeello kasta oo kale.

2) Dhammaan dadka ku nool Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa waajib ku ah ilaalinta, kobcinta deegaanka iyo ka-qaybgalka horumarinta, fulinta, maareynta, xannaanaynta iyo dhawrista kheyraadka dabiiciga ah iyo deegaankaba.

3) Dawladda Federaalka iyo Dawlad goboleedyadu waa in ay:
   a) Ilaaliyaan nidaamka ka faa'ideysiga dhulka, isticmaalka, maareynta, dhowrista deegaanka iyo hantida khayraadka dabiiciga ah, si aan wax u dhimayn;
   b) U hawlgalaan sidii dalka loo gaarsiin lahaa in uu noqdo degaan dhulkiisu doogeysan yahay oo dhirtuna ku hagoogan tahay;
   c) Shacabka ku wacyigeliyaan, kuna dhiirrigeliyaan ka qaybqaadashada maaraynta, ilaalinta iyo dhawraarinta deegaanka;
   d) Ilaaliyaan ugaarta, isir-hayeenka iyo noocyada nafleyda kala duwan;
   e) Dejiyaan nidaamyo qiimeeya ilaa heerka ay gaarsiisantahay saameeynta waxyeellada degaanka iyo u kuurgalka xaaladaha degaanka;

f) Ciribtiraan waxyaabaha degaanka halis ku ah;
g) Qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah dib-unoolaynta, dib-udhiraynta, kor-u-qaadidda, ilaalinta degaanka, ka hortagga wixii waxyeellayn kara khayraadka dabiiciga ah iyo deegaanka Jamhuuriyadda.
h) Ka taxadaraan, kana hortagaan waxyeellada saamayn kara ama sababi kara isbeddelka cimilada.
i) Maamnuucaan xaalufinta dhirta iyo ka ganacsiga dhuxusha.

4) Dawladda Federaalka iyo Dawlad Goboleedka hadba ay saameeynta waxyeelada deegaanku gaartey waa in ay:
   a) Qaadaan tallaabooyin deg deg ah oo lagu dhaqangalinayo ka hortagga iyo nadiifinta wasakhda iyo haraaga sunta halista ah ee lagu shubay ama lagu duugay dhulka, badda, wabiyada. iyo harooyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   b) Soojeediyaan xeer oo ay xeeriyaan tallaabooyin deg deg ah oo lagama maarmaanka u ah ka hortagga wasakh ku daadinta iyo ku xabaalidda dalka, taasoo ah xeer jebin xeerka Dalka iyo ku xadgudub gobannimada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo
   c) Qaadaan tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah in laga qaado magdhaw kuwa mas'uulka ka ah ku-daadinta iyo ku xabaalidda wasakhdaas; ha joogeen Jamhuuriydda Federaalka Soomaaliya gudaheeda ama meel kale.

5) Baarlamaanka Federaalka Somaaliya ayaa soo saaraya xeer qeexaya mabaadi'da guud ee lagu daryeelo degaanka ee ku salaysan halbeegyo caalamiga ah ee lagu ilaalinayo, laguna dhowrayo deegaanka.

Cutubka Afaraad:
Matalaadda Shacabka

Madaxa Koowaad:
Mabaadii'da Guud ee Matalaadda Shacabka

Qodobka 46aad:
Awoodda Shacabka

1) Allaahu Subxaanahu wa Tacaalaa (SWT) ka sokow, awoodda is-xukunka waxay ka billaabataa kuna dhammaataa shacabka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kaasoo leh awoodda la xisaabtanka hay'adaha dawladda ee heer kasta iyo wakiillada shacabka ee u xilsaaran maamulka dalka iyo adeegyada dadweynaha.

2) Matalaadda Shacabka ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee heer kastoo dawladdeed waa in ay ahaataa mid furan oo loo dhan yahay, muwaaddin kastana fursad u siinaya in uu si madaxbannaan, oo aan takoor lahayn uga qaybqaato xukunka si toos ah ama si dadban, si fududna u fahmi karo xeerarkiisa iyo habraacyadiisa.

3) Nidaamka matalaaddu waa inuu ahaado mid ka hortegi kara qalalaase ka dhalan kara tartammada siyaasadeed iyo natiijooyinka doorashada.
4) Dawladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka mas'uul ka ah xaqiijinta in Dawlad Goboleed kasta ay dhaqangeliso nidaam dimuquraadi ah oo waafaqsan Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya.

Madaxa Labaad:
Doorashooyinka

Qodobka 47aad:
Mabaadi'da Guud ee Doorashooyinka

Mabaadi'da guud ee nidaamka doorashooyinku waa in ay ahaadaan kuwo:
1) Xor ah, caddaalad ah, codkuna qarsoodi yahay, oo ka maran: takoor, eex, musuqmaasuq, cabsi gelin, hanjabaad, marin-habaabin iyo faragelin nooc kasta oo ay tahay;

2) Dammaanad qaada xuquuqda siyaasadeed ee muwaaddinka sida ku xusan qodobka 21aad ee Dastuurka;

3) Sugaya geeddisocodka doorashada, oo si sahlan loo fahmi karo xeerarkiisa, qaababkiisa iyo habraacyadiisaba, uuna fulinayo Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha;

4) Dammaanad qaadaya in dhammaan muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo ay leeyihiin xaqa dhiibashada codkooda si siman;

5) Sharci ku salaysan, geeddisocodkiisuna loo maareeyey, loona korjoogteeyey si madaxbannaan oo sugaya hab daahfuran oo isla xisaabtan leh;

6) Hubinaya in aan lagu xadgudubin midnimada Jumhuuriyada iyo bulshada Soomaaliya;
7) Xaqiijinaya ka qaybgalka haweenka ee goleyaasha xeerdejinta iyo xisbiyada siyaasadeed, iyadoo qoondada haweenka lagu nidaaminayo xeerarka uu soo saarayo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;

8) Dammaanad qaada in dhammaan qaybaha kala duwan ee bulshada ay helaan matalaad caddaalad ah siiba dadka naafada ah;

9) Sugaya in bulshada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ay helaan matalaad caddaalad ah, siiba beelaha laga tirada badan yahay; si loo gaaro caddaalad bulsho;

10) Dhiirigelinaya nidaamka siyaasadeed ee xisbiyada badan, islamarkaana tixgalinaya xaaladda amni iyo tan dhaqan dhaqaale ee Jamhuuriyadda; iyo

11) Ka hortagga hurinta colaadaha.

Qodobka 48aad:
Nidaamka Doorashooyinka

Hannaanka doorashoyinka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa mid ku salaysan qof iyo cod, waxaana qeexaya xeer uu soo saaro Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 49aad:
Hay'adaha Sida Tooska ah loo Dooranayo

1) Hay'adaha Dastuuriga ah ee muwaaddiniinta ay sida tooska ah u dooranayaan waa:
   a) Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo ka kooban Golaha Shacabka iyo Golaha Aqalka Sare;
   b) Madaxweynaha Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo magcaabaya xilkana ka qaadaya Ra'iisul Wasaaraha.
   c) Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleedka.
   d) Golaha Wakiillada Dawlad Goboleedka; iyo
   e) Golaha Deegaanka, duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa ee Dawladaha hoose.

2) Xubnaha u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa ku dooranaaya, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, muwaaddiniinta buuxiyey shuruudaha codbixiye;

3) Xubnaha ku tartamaya kuraasta Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, waxaa cod qarsoodi ah, oo madaxbannaan ku dooranaya keliya muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye;

4) Madaxweynaha Jamuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa, si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee buuxiyey shuruudaha codbixiye, meel kasta oo ay joogaan;

5) Hoggaamiyaha iyo Hoggaamiye Ku-xigeenka Dawlad Goboleedka; waxaa si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye;

6) Xubnaha ku tartamaya kuraasta Golaha Wakiillada ee Dawlad Goboleed kasta waxaa, si toos ah cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya dhammaan muwaaddiniinta deggan dawlad goboleed kaas ee buuxiyey shuruudaha codbixiye;

7) Golayaasha deegaanka, duqa magaalada iyo ku-xigeenka duqa magaalada waxaa si toos ah, cod qarsoodi ah oo madaxbannaan, ku dooranaaya muwaaddininta deggan degmooyinka ee buuxiyey shuruudaha codbixiye.

Qodobka 50aad:
Muddada Xilhaynta

1) Muddada xilhaynta hay'adaha dastuuriga ah oo sida tooska loo doooranayo ee ku xusan Qodobka 49aad, faqraddiisa 1aad waa shan sano.

2) Doorashooyinka hay'adaha dastuuriga ah ee sida tooska ah loo soo doortay waxaa la qabanayaa hal xilli doorasho oo midaysan, marka laga reebo doorashada golayaasha deegaanka oo laga soo hormarinayo doorashooyinka hay'adaha kale ee dastuuriga ah, sida ku qeexan xeerka doorashooyinka.

Qodobka 51aad:
Codbixiyaha

1) Muwaaddin kasta oo buuxiyey shuruudaha xeerku tilmaamayo, gaarayna da'da 18 sano waqtiga diiwaangelinta, wuxuu xaq u leeyahay in uu isdiwaangeliyo, si uu u codeeyo.

2) Codbixiyeyaasha diiwaangashan waxay, si siman, xaq ugu wada leeyihiin dhiibashada codkooda, waana in la ilaaliyo rabitaankooda iyo kalsoonidooda.

3) Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu masu'uul ka yahay diiwaangalinta isagoo diyaarinaya diiwaanka codbixiyeyaasha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
4) Dadka aan xaqa u lahayn diiwaangelintu waa:
   a) Dadka aan dhimirkoodu dhammayn;
   b) Qof ay maxkamad awood u leh ay ku ridday xukun kama danbays ah oo la xiriira dembi doorasho shantii sano ee la soo dhaafay ama maxkamaaddaasi ay ka mamnuucdo xaqa codaynta, ama dembi uu galay awgeed xabsi uu ku jiro.

Madaxa Saddexaad:
Xisbiyada Siyaasadeed

Qodobka 52aad:
Dowrka Xisbiyada Siyaasadeed

1) Xisbiyada siyaasadeed waxay, si nabadgelyo iyo dimuqaraaddi ah, ugu tartamayaan hoggaanka siyaasadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2) Xisbiyada siyaasadeed, ha ahaadaan kuwa xukunka haya ama kuwa mucaaradka ah, waxay ka mid yihiin tiirarka nolosha siyaasadda iyo dimuqraadiyadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 53aad:
Shuruudaha Xisbiyada Siyaasadeed

1) Xisbi Siyaasadeed kasta waa in uu buuxiyaa shuruudaha soo socda:
   a) In uu ilaaliyaa, ku dhaqmaa, adkeyaa, horumariyaana midnimada Jamhuuriyadda;
   b) In uu u hoggaansamaa Dastuurka iyo xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo talinta sharciga;
   c) In uu u taagan yahay xurmaynta, qaddarinta, horumarinta iyo difaaca xuquuqda aadanaha;
   d) In uu u hoggaansamaa mabaadii'da dimuqoraadiyadda iyo maamul wanaagga;
   e) In uu xaqiijiyaa matalaadda dadweynaha oo loo dhan yahay siiyaanna mudnaan gaar ah beelaha laga tirada badan yahay iyo dadka naafada ah ay ku leeyihiin xubinnimada iyo hoggaamintaba;
   f) In uu siiyo mudnaan gaar ah haweenka;
   g) In uu maraa habraaca diiwaangelinta xisbiyada iyo xurmaynta xeer dhaqanka xisbiyada siyaasadeed.

2) Waxaa reebban xisbi kasta oo:
   a) Qarsoodi ah, qaab ciidan ama ciidan u yaalle ah ama u abaabulan colaad si ujeeddooyinkiisu ku gaaro, ama u hubeysan in xukun ku qabsado, ama leh magac ama astaan qabiil;
   b) U ololeeya kala goynta dalka; iyo isku dirka bulshada.
   c) Adeegsada maaliyad ka timid ilo aan sharci ahayn, iyo
   d) Adeegsada hanti dawladeed ama la yimaada fal laaluush iyo musuqmaasuq, si uu u gaaro dano gaar ah.

Qodobka 54aad:
Tartanka Xisbiyada Siyaasadeed

1) Doorashooyinka golayaasha deegaanka waxaa ku tartamaya dhammaan ururrada siyaasadeed ee ka diiwaangashan Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha;

2) Saddex urur siyaasadeed ee buuxiyey shuruudaha ku xusan xeerka xisbiyada ee ku guulaysta doorashada golayaasha deegaanka ayaa noqonaya xisbiyada qaran ee u tartamaya kuraasta Golaha Shacabka, Aqalka Sare, xilka Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, kuraasta golaha wakiillada, xilka hoggaamiyaha iyo hoggaamiye ku xigeenka ee dawlad goboleed kasta.

Madaxa Afaraad:
Maamulka Doorashooyinka

Qodobka 55aad:
Dhisidda Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

Waxaa la dhisayaa Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha oo u xilsaaran maamulka doorashooyinka dalka oo dhan iyo maarayntoodaba heer kasta, si loo helo doorashooyin hufan, daahfuran oo xor iyo xalaal ah.

Qodobka 56aad:
Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waxaa xilkiisa iyo waajibaadkiisa ka mid ah:

a) in uu maamulo, la socdo, xaqiijiyo habsami u socodka, xalaalnimada iyo hufnaanta, doorashooyinka heerarka kala duwan ee dawladda iyo in uu ku dhawaaqo natiijada doorashooyinka.
b) in uu si joogta ah u diiwaangeliyo codbixiyeyaasha doorashooyinka oo dhan.
c) in uu diyaariyo, abaabulo, fududeeyo, qabto heerarka kala duwan doorashooyinka guud.
d) in uu si joogta ah u diiwaangeliyo xisbiyada siyaasadeed iyo murashaxiinta doorashooyinka guud ee heerarka kala duwan.
e) in uu soohdimeeyo degaan doorashooyinka, si xilliyeysanna u asteeyo xarumaha codbixinta;
f) in uu dejiyo hab dhaqanka doorashooyinka ee murrashaxiinta iyo xisbiyada siyaasadda;
g) in uu cayimo tirada iyo goobaha codbixinta ee dalka;
h) in uu diyaariyo, maamulana agabka doorashada iyo goobaha codbixinta;
i) in uu sameeyaa daraasad iyo khariidado la xiriira astaynta soohdimaha deegannada, asagoo kaashanaya khuburro.
j) in uu u soo jeediyo tallooyin Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya sidii loo soohdimeeyo xuduudaha deegannada, asagoo tixgelinaya xogta: dadka, dhulka, xaaladda siyaasadeed iyo kan dhaqan, si uu baarlamaanku go'aan uga gaaro arrimaha xuduudaha;
k) in uu fuliyo hawl kasta ee kale, oo la xiriirta arrimaha doorashooyinka iyo soohdimaha, oo ku xusan Dastuurka ama xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 57aad:
Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

1) Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha wuxuu ka kooban yahay 18 xubnood, oo uu soo jeediyo Golaha Wasiirrada Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, oo la soo tashaday hay'adaha ay khuseyso, Baarlamaanka Federaalkuna uu ansixiyo, Madaxweynaha Jamhuuriyadda uu ku meelmariyo Xeer Madaxweyne.

2) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga waxaa iska dhexdooranaya xubnaha guddiga.

Qodobka 58aad:
Shuruudaha Xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha

1) Xubnaha Guddiga Doorashooyinka iyo Soohdimaha waxaa ka mid noqon kara qof kasta oo buuxiya shuruudahan soo socda:
   a) in uu yahay muwaaddin; da'diisuna ka yareyn 35 sano;
   b) in uu leeyahay anshax iyo sumcad wanaagsan;
   c) in uu haysto shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay; iyo
   d) in uu leeyahay ugu yaraan 10 sano waaya-aragnimo maamul ama sharci.

2) Xubinnimada Guddiga looma magacaabi karo dadka soo socda:
   a) Qof ka tirsan xisbi siyaasadeed;
   b) Qof ay maxkamad ku ridday xukun kama danbays ah oo ay ciqaabtiisu gaarsiisan tahay 5 sano;
   c) Qof kasta oo ka haya xil dawladeed hay'adaha dawladda ee heer federal iyo heer dawlad gobaleed xilliga magacaabista ama lixdii bilood ee ka horreysay; iyo
   d) Qof kasta oo uu ka mamnuuco xeerarka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 59aad:
Xil-waayidda Xubnaha Guddiga

Xubnaha Guddigu waxay xilkooda ku waayi karaan oo keliya arrimaha soo socda midkood:
1) Geeri;
2) Istiqaalad qoraal ah oo uu u gudbiyey Guddiga lagana aqbalo;
3) Xil gudasho la'aan joogta ah sababo la xiriira mid jireed ama maskaxeed oo uu caddeeyey dhakhtar takhasus u leh oo la aqoonsayahay;
4) Xukun maxkamadeed oo kama danbays ah;
5) Aqbalaada xil kale oo dowladeed;
6) Muddada xil haynta oo dhammaataa; iyo
7) Arrin kasta oo kale lagu xuso dastuurka dhexdiisa ama xeerarka kale ee Jamhuuriyadda.

Qodobka 60aad:
Muddada Xilhaynta Xubnaha Guddiga

Muddada xilhaynta xubnaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha waa lix sano oo hal mar ah oo aan dib u cusboonaysiin lahayn.



SAXID DHANKA QORAALKA AH

SHARCIGA HAY’ADDA SIRDOONKA IYO NABAD-SUGIDDA
QARANKA WAXA LAGA SAXAY KHALAD DHANKA
QORAALKA AH

SHARCI LR.003 **TAARIIKH: 08-DA Maarso 2023**

ShARCIGA HAY'ADDA SIRDOONKA IYO NABAD-SUGIDDA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka **XGGSH/802/B11/23**, ku taariikheysan **28/02/2023**, kuna saabsan **Soo Gudbin Hindise Sharciyeedka Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad-sugidda Qaranka**.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Hay'adda Sirdoonka iyo Nabad-sugidda Qaranka.

Qodobka 2aad

Waxaa uu dhaqangalayaa sharcigan isla markuu saxiixo Madaxweynaha J.F.S., waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-30-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J. F.S

Mudane Dr Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SEAL

BY:
SAACAD _____ SAXIIX _____

XEER MADAXWEYNE LR. 150 **TAARIIKH: 18 OKTOOBAR 2023**

XILKA QAADIS ERGAYGII GAARKA AHAA EE XASILINTA IYO ILAALINTA ARRIMAHA RAYIDKA & MAGACAABISTA ERGAYGA GAARKA AH EE XASILINTA IYO ILAALINTA ARRIMAHA RAYIDKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir arrimaha Xasilinta Iyo Ilaalinta Arrimaha Rayidka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu **Mudane Maxamed Cabdi Waare** ka qaaday xilkii Ergayga Gaarka Ah Ee Xasilinta Iyo Ilaalinta Arrimaha Rayidka.

Qodobka 2aad

waxa uu **Mudane Cumar Ibraahim Xaashi** u magacaabay in uu noqdo Ergayga Gaarka Ah Ee Xasilinta Iyo Ilaalinta Arrimaha Rayidka.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-04-2624
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowrka Guud Ee JFS

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY: SAACAD SAXNX

XEER MADAXWEYNE LR.151 **TAARIIKH: 24 Oktoobar 2023**

WAREEJIN IYO DALLACSIIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960, kuna saabsan dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Codsiga Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay XTC/XDS/0097/23, kuna taariikhaysan 08/08/2023, kuna saabsan wareejin iyo dallacsiin Sarkaal.

MARKUU ARKAY: Ogolaanshaha Taliyaha Boliiska Soomaaliyeed warqadda summadeedu tahay XTCB/1/7/2023, kuna taariikheysan 06/08/2023, kuna saabsan Ogolaansho wareejin sarkaal.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta uu sarkaalkan mudan yahay in lasoo wareejiyo lana dallacsiiyo sarkaalkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan yahay loo soo wareejiyay Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, loona dallacsiiyay darajada ku hor qoran isagoo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Lr.	Darajo	Magaca	Darajada uu u dallacay
1	G/le	Xuseen Maxamuud Xuseen	G/Dhexe

Qodobka 2aad

Sarkaalkan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRAKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-05-2024
TAARIIKH: 21-04-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee J.F.S

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 : MAR 2024
BY:
SAACID SAXIIX

XEER MADAXWEYNE LR. 152 **Taariikh: 16 Nofeembar 2023**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/814/10/2023, ku taariikheysan 29/10/2023 , kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Ciise Maxamed Yuusuf.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Ciise Maxamed Yuusuf** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa uu **Dr. Ciise Maxamed Yuusuf** ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-06-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guuleed
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 MAY 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

XEER MADAXWEYNE LR.153 **TAARIIKH: 16 NOFEEMBER 2023**

SOO WAREEJIN SARAAKIIL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Taliyaha Booliska Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay XTCB/21/41/2023, kuna taariikhaysan 14/11/2023, ujeedaduna tahay U soo Wareejin Ciidanka Boliiska Federaalka ah.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta ay mudan yihiin saraakiishan in loosoo wareejiyo Ciidanka Boliiska Federaalka.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa saraakiisha magacyadoodu hoos ku xusan yihiin oo ka tirsanaa Ciidanka Boliiska Maamul Goboleedka Jubbaland loo soo wareejiyay Ciidanka Boliiska Federaalka.

Lr.	Darajo	Magaca
1.	G/Sare	Xuseen Cali Xaashi
2.	G/Dhexe	C/risaaq Maxamed Cumar
3.	G/le	Maxamed Cali Rashiid

Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxa aynxaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-07-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Cotaleh
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 · MAY 2023
BY:
SAACAD SAXNX

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

XEER MADAXWEYNE LR.154 **TAARIIKH: 16 Nofeembar 2023**

SOO WAREEJIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.003 ee soo baxay 08/03/2023, kuna saabsan dhismaha Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Taliyaha Booliska Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay XTCB/21/40/2023, kuna taariikhaysan 14/11/2023,ujeedaduna tahay Soo wareejin Sarkaal.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu sarkaalkan mudan yahay in loo soo wareejiyo Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalkan magaciisu hoos ku xusan yahay oo ka tirsanaa Hey'adda Sirdoonka iyo Nabad Sugidda Qaranka loo soo wareejiyay Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Lr.	Darajo	Magaca
1.	G/Sare	Mukhtaar Cali Maxamed

Qodobka 2aad

Sarkaalkan kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-08-2024
TAARIIKH: 08/08/2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Guhad
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JF
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY: SAACAD SAXIIX

XEER MADAXWEYNAHA LR.155 **TAARIIKH:** 27 NOFEEMBAR, 2023

MAGACAABISTA TALIYAHA CUSUB EE CIIDANKA BADDA IYO DIFAACA XEEBAHA &XIL-KA-QAADIS KU-SIMIHII TALIYAHA CIIDANKA BADDA IYO DIFAACA XEEBAHA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad. Xarfaha 'a', b' iyo c Iyo faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad , Xarfaha ' b ' iyo ' c ' ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 15 ee soo baxay 06/04/1960 ee lagu dhisay Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay XTC/XDS/0395/23, ee ku taariikheysan 18/11/2023 ee soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeeed, kuna saabsan soo jeedinta Magacaabidda Taliyaha Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha X.D.S.

MARKUU GARWAAQSADAY: In ay muhiim tahay in la magacaabo Taliye cusub oo Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha, xilkana laga qaado ku simihii hore ee Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa G/le Cabdiwaaxid Cali Afrax laga qaaday Ku-Simihii Taliyaha Ciidanka Badda iyo Difaaca Xeebaha.

Qodobka 2aad

Waxaa S/Guuto X/10964 Cabdi Warsame Cismaan Macallin loo magacaabay in uu noqdo Taliyaha Ciidanka Badda Iyo Difaaca Xeebaha.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkan dhaqan galayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo, waxaana lagu soo daabacayaa Faafinta Rasmiga ah e J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAM-09-2024
TAARIIKH : 21-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud F.

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 . Mar 2024
BY:
SAACAD _____ SAXIIX _____

~~XEER MADAXWEYNE LR. 156~~ **Taariikh: 27 Nofeembar 2023**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay WC&AD/XW/520/07/2023, ku taariikheysan 20/07/2023 , kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee ay leedahay **Dr. Khadiija Osoble Ali.**

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Khadiija Osoble Ali** loo magacaabay inay noqoto Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa ay **Dr. Khadiija Osoble** Ali ka howl galaysaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-10-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Ali
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
[illegible] 2024
BY:
SAACAD _____ SAXIIX _____

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 157

TAARIIKH: 29 Nofeembar 2023

MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA EE ARRIMAHA DASTUURKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacabayo xilkan.

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo magacaabista qabiir La-Taliye Sare Madaxweynaha ee Arrimaha Dastuurka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkaan, waxaa **Xuseen Sheekh Maxamuud** loo magacaabay in uu noqdo La-Taliye sare Madaxweynaha ee Arrimaha Dastuurka.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu burinayaa wixii xeer ah ee ka horreeyay, kana hor imaanaya.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-11-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed [illegible]
Hantidhowrka Guud Ee JFS

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAY 2024
BY: SAACAD SAXUX

XEER MADAXWEYNE LR.158 **TAARIIKH: 29 NOFEEMBER 2023**

QIIMEYN IYO KU QAADASHO DARAJO CIIDAN

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xooga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **XTC/XDS/0447/23,** ee ku taariikhysan **29/11/2023** ee soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed, kuna saabsan codsi Qaadasho Saraakiil Injineero ah.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta ay leedahay in la qiimeeyo injineeradan, lana Siiyo derajo ciidan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxaa injineeradan hoos ku xusan la siiyey mid waliba darajada ku hor qoran.

Lr.	Magaca	Darajada
1	**Cabdicasiis Mukhtaar Sheekh Ciise**	**Dhamme**
2	**Cabdiqafaar Ibraahim Sheekh**	**Dhamme**
3	**Cabdiraxmaan Cabdullahi Xaaji Cali**	**Dhamme**

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-12-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Omar
Hantidhowrka Guud Ee JFS

Madaxwaynaha
J.F.S.
Mudane Dr Xasan Sheikh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 MAY 2024
BY:
SAACAD SAXNIX

XEER MADAXWEYNE LR.159 **TAARIIKH: 29 NOFEEMBER 2023**

SOO WAREEJIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 15 ee 06/04/1960 kuna saabsan Dhismaha Xooga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Taliyaha Booliska Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay XTCB/21/76/2023, kuna taariikhaysan 26/10/2023, ujeedaduna tahay Soo wareejin sarkaal.

MARKUU TIXGALIYEY: Mudnaanta uu mudan yahay sarkaalkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalka magaciisu hoos ku xusan yahay oo ka tirsanaa Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed loo soo wareejiyay Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

Lr.	Darajo	Magaca
1.	G/Dhexe	Axmed Xuseen Maxamed

Qodobka 2aad

Sarkaalka kor ku tilmaaman waxa uu xaq u yeelanayaa wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-13-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee J.F.S

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
27 MAR 2024
BY: SAXIIX

XEER MADAXWEYNE LR. 160

TAARIIKH: 29 Nofeembar 2023

MAGACAABIS LA-TALIYE SARE MADAXWEYNAHA EE ARRIMAHA DIB-U-HESHIISIINTA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacabayo xilkan.

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo magacaabista qabiir La-Taliye Sare Madaxweynaha ee Arrimaha dib-u-heshiisiinta.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxiixo xeerkaan, waxaa **Dr. C/Raxmaan C/laahi Baadiyoow** loo magacaabay in uu noqdo La-Taliye sare Madaxweynaha ee Arrimaha Dib-u-Heshiisiinta.

Qodobka 2aad

Xeerkan wuxuu burinayaa wixii xeer ah ee ka horreeyay, kana hor imaanaya.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-14-2024
TAARIIKH : 01-04-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guuleed
Hantidhowrka Guud Ee J.F.S

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
2 : MAY 2024
BY:
SAACAD SAXIIX

XEER MADAXWEYNE LR. 161 **TAARIIKH: 10-KA DISEEMBAR 2024**

MAGACAABIS GARSOOREYAAL MAXKAMADAHA GOBOLKA BANAADIR

MADAXWEYNAHA J. F. S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad Xarafkiisa (J) ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Qodobbada 87aad, 108aad iyo 139aad ee Dastuurka KMG.

MARKUU ARKAY: Sharciga Nidaamka Garsoorka lambar 3, soona baxay 12 Juun 1962.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Guddoomiyaha Maxkamadda Sare warqadda sumadeedu tahay **MS/XG/94/2023,** kuna taariikheysan 10/12/2023, kuna saabsan Soo jeedin Magacaabis Garsooreyaal Maxkamadda Sare.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay muhiim tahay in dib-u habeyn buuxda lagu sameeyo Garsoorka iyo guud ahaan hannaanka cadaaladda Dalka.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa xubnaha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin loo magacaabay garsooreyaal Maxkamadaha Gobolka Banaadir:

Tirsi	Magaca	Xilka
1.	Yaxye Maxamuud Axmed Nuur	Garsoore
2.	Maxamuud Xuseen Axmed	Garsoore
3.	Cabdullaahi Maxamuud Xuseen	Garsoore
4.	Abuubakar Sh. Maxamuud Rooble	Garsoore
5.	C/Casiis Maxamuud Sh. Mustafa	Garsoore
6.	C/risaaq Cali Cismaan	Garsoore
7.	Axmed Aadan Maxamed Cusmaan	Garsoore

8.	Daahir Xasan Maxamed	Garsoore
9.	C/raxmaan Daahir Sulub Dhowre	Garsoore
10.	Maxamed Muuse Daahir	Garsoore
11.	Xuseen C/laahi Cabdi Guuleed	Garsoore
12.	Maxamed C/laahi Maxamed Tooxow	Garsoore
13.	Maxamed Cumar Cabdi Nuur	Garsoore
14.	C/Nuur C/laahi Maxamuud Maxamed	Garsoore
Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Axmed Cartan Cali** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa uu **Dr. Axmed Cartan Cali** ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN - 094 - 2024
TAARIIKH : 28 - 07 - 2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gabale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

بمسورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
16 JUL 2024
BY: SAACAD SAXIIX

XEER MADAXWEYNE LR. 239 **TAARIIKH: 10-KA LUULIYO 2024**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1399/06/2024**, ku taariikheysan **25/06/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Talo bixinta La-Taliyaha Arrimaha Sharciga ee Madaxweynaha warqadda summadeedu tahay **JFS/XM/02/LSH/JUL/10/24**, ee soo baxday **10/07/2024**.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Axmed Xasan Abuukar**.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Axmed Xasan Abuukar** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa uu **Dr. Axmed Xasan Abuukar** ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-093-2024
TAARIIKH : 28-07-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Qutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
16 JUL 2024
BY: SAXIIX

XEER MADAXWEYNE LR. 240 **TAARIIKH: 10-KA LUULIYO 2024**

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah.

MARKUU ARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962, kuna saabsan howlaha Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986 oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaabo Nootaayaha.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Caddaaladda & Arrimaha Dastuurka, warqadda sumaddeedu tahay **WC&AD/XW/1352/05/2024**, ku taariikheysan **25/05/2024**, kuna saabsan soo jeedin Ogolaansho Nootaayo.

MARKUU TIXGELIYEY: Talo bixinta La-Taliyaha Arrimaha Sharciga ee Madaxweynaha warqadda summadeedu tahay **JFS/XM/02/LSH/JUL/08/24**, ee soo baxday **08/07/2024**.

MARKUU TIXGELIYEY: Taariikh nololeedka, khibradda dheer iyo waayo aragnimada sharci yaqaannimo ee uu leeyahay **Dr. Bilaal Hamsa Maxamed**.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkan, waxaa **Dr. Bilaal Hamsa Maxamed** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodabka 2aad

Waxa uu **Dr. Bilaal Hamsa Maxamed** ka howl galayaa Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa marka uu Madaxweynuhu J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-092-2024
TAARIIKH : 28-07-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Jese Guleid
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J. F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
RIYID / SENT
16 III 2024
BY: SAACAD SANE

XEER MADAXWEYNE LR.241 **TAARIIKH: 10-KA LUULIYO 2024**

DALLACSIIN SARKAAL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay **XTC/XDS/1013/24**, kuna taariikhaysan **10/07/2024**, kuna saabsan Soo jeedin Dallacsiin Sarkaal.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta uu mudan yahay in la dallacsiiyo Sarkaalkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalka magaciisu hoos ku xusan yahay loo dallacsiiyay derajada ku hor qoran isagoo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Lambarka Ciidanka	Magaca	Derajada	U Dallacay
X/25566	Cabdullaahi Cumar Maxamed	Dhamme	G/le Dhexe

Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-091-2024
TAARIIKH : 27-07-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
18 JUL 2024
BY:

XEER MADAXWEYNE LR.242 **TAARIIKH: 13-KA LUULIYO 2024**

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed warqadda summadeedu tahay **XTCB/21/123/2024**, ku taariikheysan **10/07/2024**.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la dallacsiiyo saraakiishan iyo saraakiil xigeennadan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa saraakiishan iyo saraakiil xigeennadan magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo dallacsiiyay darajada ku hor qoran iyagoo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

Lr.	Magaca	Darajo Hore	Loo dallacsiiyay
1.	C/Rashiid Ibraahim Maxamed	L/X/Le	Dhamme
2.	Maxamed Daahir Maxamuud	L/X/Le	Dhamme
3.	Yaxye C/Wali Cumar	L/X/Le	Dhamme
4.	Hodan Cilmi Maxamed	L/X/Le	Dhamme
5.	Xasan Maxamed Xasan	X/Le	L/X/Le
6.	Sh. Nuur Maxamed Siyaad	X/Le	L/X/Le
7.	C/salaam Xasan Cumar	X/Le	L/X/Le
8.	Daahir Cumar C/laahi	X/Le	L/X/Le
9.	C/fitaax Cabdi Bashiir	X/Le	L/X/Le
10.	Bukhaari Xuseen Wacad	K/S	X/Le
11.	Rabile Buulle Dhamow	K/S	X/Le
12.	C/Laahi Cumar Axmed	K/S	X/Le
13.	Aqbal Maxamed Cali	K/S	X/Le
14.	Cali Aadan Xuseen	K/S	X/Le

Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-089-2024
TAARIIKH : 28-07-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Dutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia
Tell: +252 1 861000 / 261000 | Email: contact@presidency.gov.so | Web: www.villasomalia.gov.so

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
16 JUL 2024
BY: SAACAD SAXIIX

XEER MADAXWEYNE LR.243 **TAARIIKH: 13-KA LUULIYO 2024**

DALLACSIIN SARKAAL & SARKAAL XIGEEN

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr.2 ee 23/12/1973, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Boliiska Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed warqadda summadeedu tahay **XTCB/21/122/2024**, ku taariikheysan **25/06/2024**.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la dallacsiiyo sarkaalkan iyo sarkaal xigeenkan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa sarkaalkan iyo sarkaal xigeenkan magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo dallacsiiyay darajada ku hor qoran iyagoo ka tirsan Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

Lr.	Magaca	Darajo Hore	Loo dallacsiiyay
1.	Maxamed Yuusuf C/Raxmaan	L/X/Le	Dhamme
2.	Nuur C/Salaan Ibraahim	K/S	X/Le

Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-090-2024
TAARIIKH : 28-07-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
11 JUL 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 160 Taariikh: 11/07/2024

XEER: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA MAAREYNTA MAALIYADDA GUUD EE XAYNDAABKA SIYAASADDA DEYMAHA IYO HANNAANKA AMMAAHASHADA IYO DAMMAANADAHA

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (g); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG ah ee JFS;

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **WM/XWD-1050/2024** ee ku taariikheysan **25/06/2024** ee Wasaaradda Maaliyadda, kuna saabsan codsiga soojeedinta Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hannaanka Ammaahashada iyo Dammaanadaha

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.22.79.07.24** ee **11/07/2024**, kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hannaanka Ammaahashada iyo Dammaanadaha** ee uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Muhiimadda uu Dalka u leeyahay Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hannaanka Ammaahashada iyo Dammaanadaha.

Waxa uu Meelmariyay:

Qodobka 1aad :

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.22.79.07.24** ee **11/07/2024**, kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hannaanka Ammaahashada iyo Dammaanadaha** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad :

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Maaliyadda loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hannaanka Ammaahashada iyo Dammanaadaha

Qodobka 3aad :

Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahaan waxa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-465- 2024
TAARIIKH : 29-08-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Guta...
Hantidhowraha Guud Ee JF...

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiiru Dowlaha

جمهو رية الصوما ل الفيد را لية
وزارة المالية
مكتب وزير الدولة

The Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the State Minister

WM /XWD- 1050/24 25 June, 2024

Ku: Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Og: Agaasimaha Golaha Wasiirada
Og: Wasiir Ku-Xigeenka Wasaaradda Maaliyadda
Og: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

Ujeedo: Soo gudbin Xeer-nidaamiye

Mudane Ra'iisul Wasaare,

Waxaan halkaan si xushmadleh kugu soo gudbinayaa "Xeernidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hannaanka Ammaahashada iyo Dammanadaha."

Xeer-nidaamiyaan ujeedkiisu waa in la dejiyo hagayaal dhammaystiran oo keenaya in deynta Dowladda loo maareeyo si waafaqsan shuruucda dalka, iyada oo la qeexayo xayndaabka siyaasadeed, is la markaana la tilmaamayo habraacyada loo maraayo ammaahashada iyo dammaanadaha.

Mudane Ra'iisul Wasaare, Wasaaradda Maaliyadda iyadoo ka faa'idaysanaysa fursadaan ayay uga mahadcelinaysaa Xafiiskaga iyo dhamaan xubnaha Golaha Wasiiradda hoggaankooda ku aadan meel-marinta shuruucda iyo xeerarka daruuriga u ah maaraynta Maaliyadda Guud.

Mahadnaq iyo Qadarin,

H.E Raho Mohamud Janaqow
Wasiiru Dowlaha Wasaaradda Maaliyadda
Ahna K/s Wasiirka Maaliyadda

Ministry of Finance- Shangani District, Mogadishu, Somalia
Website: www.mof.gof.so
E-mail: |rjanaqow55@gmail.com

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA EE SOOMAALIYA
XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DAWLADDA

جمهـــــورية الصـــومـــال الفيـــدراليـــة
مكـــتب محامى العام للـدولة

THE FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF STATE ATTORNEY GENERAL

SUMMAD: XGG/187/2024 **25/06/2024**

Ku: Wasaaradda Maaliyadda **Muqdisho**
Ku: Agaasimaha Golaha Wasiirradda **Muqdisho**
Og: Xafiiska Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda JFS **Muqdisho**

Ujeeddo: Gudbin Xeer-nidaamiye

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda oo tixraacaya Warqadda **Ref: WOF/OM/0496/2024,** ee ku taariikheysan **June 20, 2024**, Ujeeddadeeduna ahayd: **Soo Gudbinta Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo soo saarista Dammaanadaha,** kana soo baxday Xafiiska Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda XFS.

Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda, asaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan Xeer Lr. 18 ee 29 Jannaayo 1976, ayaa waxa uu halkaan idinkugu soo gudbinayaa **"Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha, Hannaanka Ammaahashda iyo soo saarista Dammaanadaha"** oo ay Wasaaraddu horay ugu soo gudbisay Xafiiska Garyaqaanka Guud, si uu uga guto waajibaadkiisa Shaqo, uguna bixiyo Talo Sharci.

Sidaa darteed, Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda markuu darsay Xeer-nidaamiyahan oo ah mid mudnaan gaar ah u leh Xayndaabka Siyaasadda Deymaha, Hannaanka Ammaahashada iyo soo saarista Dammaanadaha, waxa uu ku talinayaa in loo gudbiyo Golaha Wasiirrada si ay u meel-mariyaan, maadaama uu waafaqsan yahay Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud oo islamaarkaana awood u siinaya Wasaaardda samaynyta Xeer-Nidaamiye sida ku xusan Qodobka 62 ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Sharci Lr. 17 ee soo baxay 25/12/2019.

Ugu dambeen, Xafiiska Garyaqaanka Guud waxa uu ku wargelinayaa Agaasimaha Golaha Wasiirrada iyo Wasaaradda Maaliyadda in Nuqulka ku lifaaqan warqaddan uu yahay nuqulka loo gudbinayo Golaha Wasiirada si ay u meel-mariyaan, maadaama Xafiiska Garyaqaanka Guud uu ku samayey saxitaan iyo toosin nuqulkii Wasaaraddu u soo gudbisay.

FG: Halkaan waxaa ku lifaaqan Xeer-nidaamiyaha Sare ku xusan.

Salaan qadarin leh **Qareen: Jibriil Cumar Cilmi**
Ku-xigeenka Garyaqaanka Guud ee Dawladda

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA
Address: State House, Villa Somalia
Tel, +252 (0)613242015 | E-Mail: sag@sag.gov.so, archive@sag.gov.so

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

Ref: MOF/OM/0495/2024 **June 20, 2024**

Ku: Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda
Og: Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyadda
Og: Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Maaliyadda

Ujeeddo: Soo gudbinta Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud, ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo soo saarista Dammaanaddaha

Waxaan halkan ku soo gudbinaynaa Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud, ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha iyo Hanaanka Amaahashada iyo soo saarista Dammaanaddaha. Xeer-nidaamiyaha ayaa loogu talagalay si loo sii adkeeyo nidaamka deymaha iyo hanaanka amaahashada iyo soo saarista dammaanaddaha ee dalka u yaala.

Wasaaradda Maaliyadda oo fursadan ka faa'iidaysanaysa ayaa uga mahadcelinaysa Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda wada shaqaynta dhow ee ay la leedahay.

Wada Shaqan Wacan,

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE MINISTER
XAFIISKA WASIIRKA
MINISTRY OF FINANCE
WASAARADA MAALIYADDA

Xil. Biixi Iimaan Cige
Wasiirka Wasaraadda Maaliyadda

Dr. Jibril
22/06/2024

XAFIISKA GARYAQAANKA
GUUD EE DOWLADDA
GALID
Taariikh: 22/06/2024

JAMHUURIYADDA FEDERAALAALKA SOOMAALIYA

Xeernidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka Siyaasadda Deymaha, Hannaanka Amaahashada iyo soo saarista Dammaanadaha.

Qodobka 1aad
Cinwaanka iyo Ujeeddooyinka

1. Xeerkanidaamiyahan waxa loo aqoonsan doonaa: "Xeernidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee Xayndaabka siyaasadda deymaha iyo hannaanka ammaahashada iyo dammanadaha."

2. Xeerkan ujeedkiisu waa in la dejiyo hagayaal dhammaystiran oo keenaya in deynta dadweynaha loo maareeyo si waafaqsan shuruucda dalka, iyada oo la qeexayo xayndaabka siyaasadeed, is la markaana la tilmaamayo habraacyada loo maraayo ammaahashada iyo dammaanadaha.

Qodabka 2aad
Xayndaabka Seeraha Siyaasadda Deymaha

1. Ujeedooyinka Jamhuuriadda Federaalka Soomaaliya ee Siyaasadda Deyntu waa:
    a) In si wakhtiyaysan loo hubiyo daboolista baahida maaliyadeed ee dawladda, haddii ay noqoto wakhtiga dhow iyo kan dheerba.

    b) In la yareeyo kharashka ku baxa ammaah qaadashada, goor kastana laga durko halisaha aan xikmadda ku fadhiyin.

c) Marka duruufta guud ee dhaqaale ay saamaxdo, in la xoojiyo horumarinta suuqyada dhaqaale ee gudaha.

2. Qeybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, waa in ay diyaarisaa oo si joogto ahna u cusboonaysiisaa Istiraatiijiyadda Maareynta Deymaha ee Muddada Dhexe (Medium-Term Debt Management Strategy) iyada oo sanadkiiba hal mar dib u qaabayn lagu samaynaayo; Golaha Wasiiraduna waa in ay darsaan oo ansixiyaan istiraatijiyaddaas iyo dib-u-eegisteeda sanadlaha ah.

3. Qeybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, iyada oo si dhow ula tashanaysa Waaxda Qorsheynta & Siyaasadda Dhaqaalaha ee Wasaaradda, waa in ay si sanadle ah, (iyo goor kasta oo loo baahdoba) u samaysaa Falanqaynta Joogteynta Deymaha (DSA), si loo qiimeeyo awoodda ay Soomaaliya u leedahay ka soo bixista waajibaadkeeda dhinaca deymaha.

Qodobka 3aad:
Habraaca Ammaah-qaadashada

1. Erey-bixinta: "Heerka/xadka u sarreeya ee ammaah-qaadashada Sanadkii Gudaha iyo Dibeddaba", sida ku qeexan Qodobka 35(1) ee Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud, 2019, waxaa lagu qeexay Xeernidaamiyahan, iyada oo macnaheedu yahay baahida ammaahashada sannadlaha ah ee Qaranka, ammaahdaas oo u taagan is dhinka maaliyadeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sidaas darted, hadda wixii ka dambeeya, qorshayaasha lagu daboolaayo is-dhinka ku yimaada miisaaniyadda dawladda waxa lagu tilmaami doonaa Qorshaha Ammaahda Sannadlaha ah ee Qaranka.

2. Wasiirka Maaliyaddu, 30-ka Oktoobar ee sannad kasta, waxa uu labada Aqal ee Baarlammaanka Federaalka Soomaaliya hor geyn doonaa Miisaaniyadda Qaranka ee ay ansixiyeen Golaha Wasiiradu, iyada oo ay miisaaniyadda la socoto soo jeedinta Qorshaha ammaahashada sannadlaha ah ee Qaranka, iyo sidoo kale shuruudaha iyo waajibaadka guud ee hagaya amaahaha noocaas ah. Ilaha Qorshaha amaahashada Sannadlaha ah ee la soo jeediyay waa in ay noqdaan kuwo ku saleysan Istiraatiijiyada la ansixiyay ee Maareynta Deynta ee Muddada-Dhexe.

3. Soo jeedinta Qorshaha amaahashada sannadlaha ah ee Qaranka iyo sidoo kale shuruudaha iyo waajibaadka guud ee maamulaya amaahdaas ee uu soo bandhigay Wasiirka Maaliyaddu, waxa ay dhaqan-gelayaan uun marka uu Baarlammaanka Federaalku ansixiyo, kuna soo saaro 'Xeerka Miisaaniyadda'.

4. Iyadoo la raacayo faqradaha kor ku xusan ee Xeernidaamiyahan, Wasiirka Maaliyaddu, isaga oo ah amaahdaha keliya ee qaran, waxaa awood u gaar ah loo siiyay in uu ku dhaqaaqi karo hawlo uu 'ammaah' ku soo qaadayo, waddanka gudahiisa iyo dibeddiisa kii ay noqotoba, isaga oo ka wakiil ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sidaas oo ay tahay, Wasiirka Maaliyaddu waa inuu ku shaqeeyaa Qorshaha amaahashada sannadlaha ah ee uu dejiyay Baarlammaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, sidoo kale waa inuu si adag u raacaa shuruudaha iyo waajibaadka guud ee lagu maamulayo amaahdaas ee lagu ansixiyay Xeerka Qoondada Miisaaniyadda.

5. Dhammaan heshiisyada cusub ee ammaahda gudaha iyo dibedda kii ay tahayba ee uu soo galay Wasiirka Maaliyaddu, haddii ay yihiin kuwo waafaqsan Qorshaha Amaahashada Sannadlaha ah ee la ansaxiyey; iyo shuruudaha iyo wajibaadka guud ee ammaahda ee uu baarlammaanka Federaalku ku dejiyay Xeerka Miisaniyadda, waxa ay noqonayaan kuwo ay tahay sharci ahaan in loo hoggaansamo. Heshiisyada noocaan ahi waxa ay dhaqan-gal ku noqonayaan si waafaqsan shuruudahooda iyada oo aan loo baahan tallaabooyin kale oo sharci ama maamul oo lagu ansixinaayo.

6. Wasiirka Maaliyadda waxa uu u gudbinayaa heshiisyada ammaahda cusub ee gudaha iyo dibedda ee uu galay Garyaqaanka Guud ee Dawladda si uu u qiimeeyo, waxaanu ka eegayaa in heshiisyadaasi ay waafaqsanyihiin Qorshaha ammaahashada sannadlaha ee Qaran, guud ahaan shuruudaha iyo waajibaadka uu Baarlammaanka Federaalku ku dejiyay Xeerka Qoondada Miisaaniyadda. Marka ay soo dhammaato qiimayntaasi, Garyaqaanka Guud ee Dawladdu waxa uu soo saarayaa talo sharci oo muujinaysa in dawladdu raacday Qorshaha amaahashada sannadlaha ee la ansixiyey iyo guud ahaan shuruudaha iyo wajibaadka uu Baarlammaanka Federaalku ku meel mariyay Xeerka Miisaaniyadda.

7. Wakhti munasib ah ka hor inta aan ammaah cusub la qaadan, Qeybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu waxa ay samaynaysaa qiimayn dhammeystiran oo ay ku eegayso 'ammaahdaasi'

saammaynta ay ku yeelan karto xasiloonida dhaqaalaha guud ee wadanka gudahiisa iyo xammilka culayska daynta sida suurtagalnimada joogteynta bixinta deynta. Marka la sameenayo qiimaynta noocaan oo kale ah waa in xisaabta lagu darsado ballan-qaadyada maaliyadeed ee muddada-dheer oo ay soo saartay ama ay oggolaatay Wasaaradda Maaliyadda.

8. Mar kasta oo la galo heshiis ammaah ah oo lagu soo qaado magaca Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, iyadoo lagu shaqeeynayo Qorshaha amamahashada ee la dejiyay, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu si deg-deg ah xogta amaahdaas ula wadaago Baarlammaanka Fadaraalka ah; muddo laba todobaad ah gudahood, oo ka billaabanta goorta la dhammeystiray heshiiska ammaahda, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu nuqullada heshiis kasta oo ammaaheed oo la galay u gudbiyaa Baarlammaanka Federaalka.

9. Hantidhowraha Guud waa inuu diiwaan-geliyaa dhammaan heshiisyada deymaha ee la galay, iyada oo uu u eegaayo qodobada xeerkan ee khuseeya. Muddo laba toddobaad ah gudahood marka la galo heshiiska ammaahda, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu nuqul ka mid ah heshiisyada ammaahda u gudbiyaa Xafiiska Hantidhowraha Guud ee Qaranka si uu u diiwaangeliyo.

10. Iyadoo aan waxba loo dhimayn qodobada kor ku xusan ee Xeernidaamiyahan, Qorshaha sannadlaha ah ee Ammaahda Qaranka ee la ansixiyay oo ay weheliso shuruudaha iyo waajibaadka guud ee lagu maamulayo deymaha uu Baarlammaanka Federaalku ku dejiyey Xeerka Miisaaniyadda ayaa noqonaya Qorshaha ammaahashada sannadlaha ah ee Qaranka ee Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya.

11. Lama qaadan karo wax ammah ah gudaha iyo dibedda kii ay noqotoba, ilaa hannaanka ammaahdu ka waafaqayo qodobada Xeernidaamiyahan.

Qodobka 4aad
Ballan-qaadyada kale ee Maaliyadeed ee muddada-dheer

1. Wasiirka Maaliyaddu waxa uu leeyahay awoodda aqoonsiga iyo caddaynta noocyada ballanqaad maaliyadeed kale ee muddadoodu dheertahay iyo weliba jaangoynta shuruudaha iyo waajibaadka guud ee "ballanqaadyadaas" lagu maamulaayo. Dhammaanba noocyada ballanqaadyada maaliyadeed ee muddada dheer ee la caddeeyay iyo shuruudaha guud ee lagu maamulaayo waa in loo gudbiyo Baarlamaanka Federaalka oo ay ansixiyaan, kuna soo saaraan Xeerka Miisaaniyadda ee sanadlaha ah.

2. Ka dib ansixinta Baarlamaanka Federaalka ah, Wasiirka Maaliyadda, isaga oo matalaaya Dawladda Fadaraalka ah, waxaa la siiyay awood gaar u ah oo uu ku soo saaro, kuna oggolaado ballanqaadyada maaliyadeed ee muddada dheer, ballanqaadyadaas oo ka mid ah kuwii shuruudahooda guud la ansixiyay. Sidaas oo ay tahay, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu ku shaqeeyo shuruudaha iyo waajibaadka guud ee loo dejiyay maamulista noocyada ballanqaad maaliyadeed ah ee muddada dheer ee uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyay kuna soo saaray Xeerka Miisaaniyadda.

3. Dhammaanba ballanqaadyada maaliyadeed ee muddada dheer ee uu Wasiirka Maaliyaddu ku soo saaro ama ku oggolaado magaca Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya, haddii ay u hoggaansamaan shuruudaha iyo waajibaadka guud ee lagu maamulo ballanqadyada noocaas ah ee uu Baarlamaanka Fadaraalku ku soo saaray Xeerka Miisaaniyadda, waxa ay noqonayaan kuwo sharci ahaan meel-mar ah. Heshiisyada xambaarsan ballanqaadyada maaliyadeed ee muddadoodu dheertahay, waa in ay u dhaqan-galaan si waafaqsan shuruudahooda, mana loo baahna qaaditaanka wax tallaabooyin dheeraad ah oo sharci ama maamul oo heshiisyadaas lagu ansixinaayo.

4. Ka hor inta aan la fulin ballanqaadyada maaliyadeed ee muddadoodu dheertahay ee cusub, Qaybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, muddo macquul ah gudaheed waa in ay ballanqaad kasta ku mariyaan qiimeeyn dhammaystiran oo lagu ogaanaayo qiimaha ay ku kacayso iyo khatarta la socota, si loo falanqeeyo loona garto saameynta uu "balanqaadkaasi" ku yeelan karo xammilka dalka ee waajibaadka deymaha iyo xasiloonida dhaqaalaha guud ee Dalka.

5. Heshiis kasta oo xambaarsan ballanqaad maaliyadeed oo wakhtigiisu fogyahay oo lagu galo magaca Jamhuuriyadda Federaalka ah ee Soomaaliya, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu Baarlamaanka Federaalka ah ogaysiiyo jiritaankiisa. Ka dib marka uu heshiiskaasi dhaqangal noqdo, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu muddo laba todobaad ah gudahood qoraalada heshiisyada noocaas ah Baarlamaanka Federaalka ah ugu geeyo.

6. Muddo laba todobaad ah gudahood, oo ka bilaabanta wakhtiga dhaqangalka heshiis kasta oo xambaarsan ballanqaad maaliyadeed oo mudadiisu dheertahay, Hanti-dhowrka guud waa in uu diiwaan-geliyaa dhammaan nuqullada heshiisyadaas ee lagu soo galay magaca Jamhuuriyadda Federaalka ah Laba toddobaad gudahood marka la fuliyo heshiisyadan, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu Hantidhawrka Guud u gudbiyo nuqul ka mid ah heshiisyadas si loo diiwaan-geliyo.

Qodobka 5aad
Habraaca loo maraayo Isticmaalka Xuquuqda soo Qaadashada Gaarka ah (Special Drawing Rights - SDR).

1. Xuquuqda soo qaadashada gaarka ah (XSQG) waa hab gaar ah ee khuseeya keydka hanti lacageed oo caalami ah oo uu sameeyay Sanduuqa Lacagta Aduunka (IMF), si ay kab ugu sameeyaan keyda rasmiga ah ay leeyihiin waddamada xubnaha ka ah Sanduuqa Lacagta Aduunka. Qoondada xuquuqda soo qaadashada (SDR) ma aha deyn uu bixiyo Sanduuqa Lacagta Aduunka (IMF). Sidaas oo ay tahay, wadamada xubnaha ka ah Sanduuqa Lacagta Aduunku, waxaa laga doonayaa in ay bixiyaan lacag dulsaar ah hadii ay dhacdo in waddan uu ka hoos maro qoondadii uu lahaa, isaga oo waddankaasi dulsaar ahaan u bixinaayo hadba farqiga u dhexeeya qoondada asalka ah iyo dhigaalka uu markaas haysto. Heerka dulsaarkuna waxa uu ku jaan-go’anyahay hadba sicirka dulsaarka ee markaas taagan SDRs-ka.

2. Sidoo kale, Sanduuqa Lacagta Aduunku waxa ay leeyihiin barnaamij ay deyn ku siiyaan wadamada xubnaha ka ah, si ay u daboolaan baahiyo markaas taagan iyo duruufo u gaar ah wadankaas, amaahintaas waxaa la socota dulsaaro kala duwan. Dhammaan deymaha uu Sanduuqa Lacagta Dunidu bixiyo qiimo ahaan waxa ay ku salaysanyihiin ama ku jaan-

go’anyihiin hannaankaas Xuquuqda Soo Qaadashada Gaarka ah - Special Drawing Rights (SDR)/XSQG.

3. Iyadoo la eegayo dabeecadda gaarka ah ee Sanduuqa Lacagta Aduunku uu ku bixiyo deymaha iyo qoondada Xuquuqda soo Qaadashada Gaarka ah (XSQG) looma raacaayo habraacyada amaahashada ee ku qeexan Sharciga Maamulka Maaliyadda Guud, 2019, amaba Qodobka 3aad ee Xeernidaamiyahan; mana saameynayso wixii macaamilo ah ee ku saabsan Xuquuqda soo Qaadashada Gaarka ah (XSQG) ee ka dhaxaysa Sanduuqa Lacagta Aduunka iyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomalaiya gaar ahaan iyadoo loo marayo “Bangiga Dhexe ee Soomaaliya” oo ah hay’adda u qaybsan Arimaha Malaiyadda (Fiscal Agent). Taa beddelkeeda, qaadashada deymaha Sanduuqa Lacagta Aduunka, helitaantanka iyo ka faa'iidaysiga Qoondada “SDR” waxaa lagu maamuli doonaa heshiiska u dhexeeya Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo Sanduuqa Lacagta Aduunka (IMF), Kaasoo ay ku jiraan u hoggaansanaanta ujeeddooyinka isticmaalka la cayimay, shuruudaha warbixinta, ujeeddooyinka isticmaalka ee cayiman, u hogganaansanaanta tilmaamaha iyo hababka caalamiga ah ee lacagta, iydoo la eegayo nooca Xuquuqda soo qaadashada Gaarka ah (SDR).

Qodobka 6aad:
Habraaca lagu maamulayo Bixinta Dammaanadaha Ammaahda.

1. "Dammaanadda Deynta”, waxaa loo la jeedaa ballanqaadka uu sameeyo dammaanad-qaadaha deyntu. Caadi ahaan halkan oo kale, waa dammaanadda ay bixiso Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo uu matalaayo Wasiirka Maaliyaddu, si loo fuliyo waajibaadka dib-u-bixinta deynta ee ammaahdaha, iyada oo loo eegaayo shuruudaha amaahda haddii ay dhacdo in amaahduhu uu bixin waayo deynta. Sidoo kale, waxa tixgelin la siinayaa hadiiba uu jiray heshiis dammaanad-qaad labaad oo ka sii dambeeya ama taageeraaya dammaanadda dawladdu bixisay markii deyntaas la qaadaayay (Counter-guarantee), taas oo ay tahay in la oofiyo wixii waajibaad ah ee ka dhashay qodobada dammaanaddaas labaad.

2. 30ka bisha Oktoobar ee sannad kasta, Wasiirka Maaliyaddu marka uu miisaaniyadda qaran ee Golaha Wasiiradu ay ansixiyaan, waxa uu u

geynayaa labada Aqal ee Baarlammaanka Federaalka Soomaaliya, sidoo kale waa in uu keenaa soo jeedin muujinaysa xadka dammaanadaha ee deymaha sanadkii lagu bixin karo magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya iyo sidoo kale shuruudaha iyo waajibaadka guud ee xukumaya dammaanad qaadyada ammaahda.

3. Soo jeedinta sanadlaha ah ee ku saabsan xadka dammaanadda deymaha ee lagu bixin karo magaca Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, iyo sidoo kale shuruudaha iyo waajibaadka guud ee lagu maamulayo dammaanada deymaha, ee uu soo ban-dhigaayo Wasiirka Maaliyaddu, waxa ay dhaqangal noqonayaan oo keliya marka uu Baarlammaanka Federaalka aqbalo uuna ku soo saaro Xeerka Qoondada Miisaaniyadda.

4. Iyadoo la raacayo qodobada ku xusan faqradaha sare ee Xeernidaamiyahan, Wasiirka Maaliyaddu, isaga oo ah 'Dammaanad-bixiyaha Qaranka', waxa si u gaar ah awood loogu siiyay in uu dammaanad qaad amaaheed ku bixiyo magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sidaas oo ay tahay, Wasiirka Maaliyadu waa in uu ku shaqeeyo xadka dammaanadeed ee sannadlaha ah, ee uu dejiyo Baarlammaanka Federaalka, iyo sidoo kale in uu si adag ugu hoggaansamo shuruudaha iyo wajibaadka guud ee lagu maamulayo dammaanadda deymaha, ee ku soo baxay Xeerka Qoonadada Miisaaniyadda ee baarlammaanku dejiyay.

5. Dhammaan dammaanad qaadka deymaha ee uu Wasiirka Maaliyadu ku sameeyo magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa in sharci ahaan loo fuliyo, haddii ay dammaanadahaasi u hoggaansanyihiin xaddidaada sannadlaha ah ee heerka dammaanadda deymaha; iyo shuruudaha iyo waajibaadka guud ee dammaanad-qaadka ammaahda ee uu dejiyay Baarlammaanka Federaalku, kuna soo baxay Xeerka Qoonadada Miisaaniyadda. Heshiisyada noocaan ahi waxa ay dhaqan-gal ku noqonayaan si waafaqsan shuruudahooda, iyada oo aan loo baahan tallaabooyin kale oo sharci ama maamul oo lagu ansixinaayo.

6. Qeybta Maaraynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, waa in ay qiimeeyaan oo soo saaraan kharash ahaan khatarta daynta ee Jamhuuriyadda Fedraalka Soomaaliya ee la xiriirta bixinta dammaanad kasta oo ammaah ah. Qiimaynta QMD ay sammaynayso, waa in ay ku jirto mid dhammaystiran oo ku saabsan khataraha la socda dammaanadda deynta inta aan wax dammaanad-qaad ah la sammaynin, waana in tirada lagu daro diyaarinta qorshe keyd ah oo dayn bixineed oo

suurtagal ah in loo baahdo haddii la dammiintuhu deynta bixin waayo, waana in la xaddido kharashka ku bixi kara qaadashada culayska halkaas ka imaan kara.

7. Wasiirka Maaliyaddu waxa uu u gudbinayaa heshiisyada Dammaanadaha uu ku bixiyay magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Garyaqaanka Guud ee Dawladda isaga oo ka eegaya in dammaanad-qaadyadaasi ay waafaqsanyihiin heerkii loo xadeeyay dammaanadaha sanadkii ay dawladdu bixin karto iyo in ay dammanadahaasi waafaqsanyihiin shuruudaha iyo waajibaadka guud ee dammaanadda deymaha ee uu Baarlammaanka Federaalku ku dejiyay Xeerka Qoondada Miisaaniyadda. Marka ay soo dhammaato qiimayntaasi, Garyaqaanka Guud ee Dowladdu waxa uu soo saarayaa talo-bixin sharci oo xaqiijinaysa sida hadba dammanadaha dawladdu bixisay ay u waafaqsanyihiin xadka dammaanadaha ee hore loo ansixiyay iyo shuruudaha kaleba.

8. Dammaanad-qaad kasta oo lagu sameeyo magaca Jamhuuriyadda Fadaraalka Soomaaliya, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu si dhakhso ah ugu war-geliyo Baarlammaanka Fadaraalka ah. Muddo ku siman laba todobaad, oo ka bilaabanta marka uu dhaqan-galo heshiiska dammaanaddu, Wasiirku waa in uu nuqul ka mid ah heshiiska u gudbiyo Baarlammaanka Federaalka ah.

9. Hanti-dhowrka Guud waa in uu diiwaan-geliyo dhammaan heshiisyada dammaanad qaadka ammaahda ee lagu bixiyay magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Laba toddobaad gudahood oo ka billaabanaysa marka la fuliyo heshiis dammanaadeed oo noocaas ah, Wasiirka Maaliyaddu waa inuu nuqul ka mid ah heshiisyada u gudbiyaa Hanti-Dhowrka Guud ee Qaranka si uu u diiwaan-geliyo.

Qodobka 7aad
Habraaca lagu maamulayo Bixinta Dammaanad-qaadyada aan Deynta ku saabsanayn.

1. Iyada oo la tixraacaayo Qodobka 37 (6) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, erey-bixinta ah "Masuuliyad-qaadista culaysyada kale ee lama filaanka ah – “Other contingent liability”, ama Mas’uuliyad kale ee dhaqaale “or other financial liability”, halkan waxa lagu qeexay in loola jeedo dammanad-qaadyada aan deynta ku saabsanayn. Si loo dardar-geliyo meelmarinta Xeernidaamiyaha Maaraynta Maaliyadda Guud

gaar ahaan Qodobka 37(6), Wasiirka Maaliyaddu waxa uu awood u leeyahay aqoonsashada iyo kala saaritaanka noocyada kala duwan ee dammaanad-qaadyada aan deyn toos ah ku saabsanayn iyo qeexitaanka shuruudaha iyo waajibaadka guud ee lagu maamulayo dammaanad qaadka noocaas oo kale ah. Hadaba, noocyada loo asteeyo in ay yihiin 'Dammaanad-qaad' aan deyn ku saabsanayn, iyo sidoo kale shuruudahiisa iyo waajidkiisa guud waa in uu Baarlamaanka Federaalka ahi ku ansixiyaa Xeerka Qoonadada Miisaaniyadda ee sanadlaha ah.

2. Ka dib ansixinta Baarlammaanka Federaalka ah, Wasiirka Maaliyadda, isaga oo ah 'Dammaanad-bixiye Qaran', waxa awood u gaar ah loo siiyay bixinta ama aqoonsashada dammaanad-qaad aan deyn ku saabsanayn oo khaas ah, kuwaas oo hoos imaanaya 'Dammaanad-qaadyada aan deynta ku saabsanayn' ee hore loo ansixiyay, waxaanu gudashada hawshaas wakiil kaga yahay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Sidaas oo ay tahay, Wasiirka Maaliyaddu marka uu gudanaayo waajibaadkaas, waa in aanu ka bixin xeendaabka shuruudaha iyo waajibaadka guud ee hagaya nooca dammaanad-qaadka aan deynta ahayn ee uu Baarlammaanka Federalka ahi ku ansixiyey Xeerka Qoonadada Miisaaniyadda.

3. Qeybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, iyada oo la tashanaysa xafiisyada awoodda u leh hawlahaas ee wasaaradda iyo hay'adaha kale ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waa in ay qiimayso halista ka imaan karta dammaanad kasta oo aan deyn ku saabsanayn oo la bixinayo; waxayna sidoo kale go'aamin doontaa, qaddarka lacageed ee khidmad ahaan hawlahaas ugu bixi kara, si loo daboolo kharashyada loo baahan karo, loona yareeyo halisaha jiri kara. Qiimayntaas dhamayska tiran oo ay ku jirto ku xisaabtanka khidmadaha suurtagalka ah, waa in la sameeyo ka hor inta aan la bixinin ama la oggolaanin dammaanad-qaadka aan deynta ahayn.

4. Dhammaan dammaanad-qaadyada aan daynta ahayn, ee ku jira xeendaabka noocyada la ansixiyay ee uu Wasiirka Maaliyaddu bixiyo ama soo saaro isaga oo wakiil ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo la raacayo shuruudaha iyo waajibaadka guud ee uu baarlamaanka federaalku ku ansixiyay Xeerka Qoondada Maaliyadda, waxa ay noqonayaan kuwo sharci ah. Heshiisyada sharciga ah ee dammaanad-qaadyada aan deynta ahayni waa in ay sidooda u dhaqan-galaan, si waafaqsan shuruudahooda iyada oo aan loo baahnayn tallaabooyin kale oo sharci ama maamul oo ansixin ah.

5. Ka dib marka uu codsado Wasiirka Maaliyaddu, is la markaana ay u muuqato in ay munaasib tahay, Garyaqaanka Guud ee Dawladdu waxa uu sammayn karaa qiimayn uu ku eegaayo u hoggaansanaanta heshiis kasta oo dammaanad aan dayn ahayn, oo uu soo saaray Wasiirka Maaliyaddu, isaga oo Garyaqaanka Guud ka eegaya in ay waafaqsanyiin shuruudaha guud ee loo dejiyey nooca dammaanadda aan deynta ahayn ee uu Barlaamanka Federalkka ahi ku ansixiyey Xeerka Qoonadada Maaliyadda. Markaas ka dib, Garyaqaanka Guud waxa uu soo saarayaa talo sharci oo arrintaas ku aaddan.

6. Wasiirka Maaliyaddu waa in uu si deg-deg ah u ogeysiiyaa Baarlamaanka Federaalka waajibaad kasta oo dammaanad-qaad aan deyn ahayn oo lagu fuliyay ama lagu oggolaaday Magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Muddo laba todobaad gudahood ah oo ka billaabanta marka uu fulo heshiiskaasi, Wasiirku waa in uu u gudbiyo nuqul ka mid ah heshiiska Baarlammaanka Federaalka.

7. Hanti-dhowrka Guud waa inuu diiwaan-geliyaa dhammaan heshiisyada ka kooban dammaanad-qaadyada aan daynta ahayn ee la gu soo saaray Magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya laba toddobaad gudahood marka la fuliyo heshiisyada noocaas ah, Wasiirka Maaliyaddu waa in uu nuqul ka mid ah heshiisyada u gudbiyaa Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka si uu u diiwaan-geliyo.

8. Qodobada ku qoran faqradaha kor ku xusan, wax samayn ah ma ku yeelanayaan caymiska khatarta siyaasadeed ee ay bixiso Hay'adda Dammaanad-qaadka Maalgashiga Dhinacyada Badan (HDQDB) ee loo yaqaano MIGA ee loo sameeyo maalgashadayaasha imaanaya Soomaaliya, sida uu dhigayo heshiiska dammaanadda ee u dhaxeeya Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo HDQDB.

Qodobka 8aad
Qaab-dhismeedka Maareynta Dammaanadda.

1. Dammaanad qaadku, haddii uu yahay mid ammaah ku saabsan iyo hadii aanu amaah ku saabsanaynba, waa in lagu bixiyaa oo kaliya si ay u taageeraan ujeeddooyinka Qorshaha Horumarinta Qaranka.

2. Diiwaanka dhammaan dammaanadaha deymaha iyo kuwa aan deymaha ahayn ee lagu bixiyay Magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,

sida ku cad Xeernidaamiyahan, waa in uu hayo Xisaabiyaha Guud sannad kastana lagu soo saaro warbixin sanadeedka xisaab-xirka Miisaaniyadda ee laga sameeyo dhaqdhaqaaqa Khasnadda Mideysan ee dawladda (Treasury Single Account).

3. Iyadoo aan waxba loo dhimayn mas'uuliyadda Xisaabiyaha Guud ee ku cad Xeernidaamiyahan qodobkiisa 3aad, Wasaaradda Maaliyaddu, iyada oo adeegsanaysa Qeybta Maareynta Deynta (QMD) waa in ay samayso oo joogtayso diiwaan-gelinta xogaha warbixinno daahfurnaan ku salaysan iyo dabagalka dhammaan dammaanadaha ammaahda iyo kuwa aan ammaahda ahayn iyada oo la raacaayo Xeernidaamiyahan lagu sameeyay ama lagu oggolaaday Magaca Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Tan waxa looga jeedaa in si wax-ku-ool ah loola socdo sida ay u shaqaynayaan dammaanad-qaadyada la bixyay ee deyn ku salaysan iyo kuwa aan deyn ku salaysnaynba, taas oo ka caawinaysa Qeybta Maareynta Deymuhu in ay samayso qiimayn dhammeystiran oo ku saabsan khataraha ku lammaan dammaanad-qaadyada cusub ee noocaas oo kale ah ama u baahan Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya in ay xilkeeda uga gudato sida kuwaas hore oo kale, sida uu Xeernidaamiyahan ku waajibiyay.

Qodobka 9aad
Dabagalka, Diiwaan-gelinta iyo ka Warbixinta Deynta

1. Dhammaan amaah soo shubista (All loan disbursements) iyo isbeddel kasta oo lagu sameeyo shuruudaha iyo waajibaadka uu dhigaayo heshiiska deyntaas, waa in ay maareyso Qeybta Maareynta Deymaha (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu.

2. Dhammaan ammaahaha iyo qaamaha maaliyadeed (financial liabilities), oo ay ku jiraan dammaanadaha deynta iyo kuwa aan deynta ahaynba waa in loo diiwaan-geliyo si sax ah, si joogto ahna ay u la socoto Qeybta Maareynta Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu, si loo hubiyo isla xisaabtanka maaliyadeed, loona qiimeeyo badqabka maaliyadeed ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomalaiya, deymaha in loo maareeyo si waafaqsan shuruucda dalka, iyo ka gaashaamashada qataraha maaliyadeed ee imaan kara.

3. Qeybta Maamulka Deynta (QMD) ee Wasaaradda Maaliyaddu waa inay daabacdaa xogta deynta qaranka oo Saddex-biloodle ah, waana in ay

warbixinta ku soo saarto muddo afar todobaad ah gudahood oo ka billaabanaysa dhammaadka saddexda bilood ee warbixintu ku saabsan tahay.

Qodobka 10aad
U sii igmasho Masuuliyadeed

1. Haddii ay jirto xaalad aanu Wasiirku qaban karin shaqadiisa, sida xanuun, safar ama xaalad kale oo la soo deristay oo aan sinaba looga fursan karayn darteed, xilalkiisa midkood ama dhamaantood ee ku saabsan ammaahaha ama heshiisyada damaanad-bixinta, Wasiirka Maaliyaddu waxa uu u idman karaa dadka ay shaqo-wadaagta yihiin, sida Wasiir ku-xigeenka, Wasiiru-dowlaha ama sarkaal kale oo ka tirsan Wasaaradda Maaliyadda. Sidaas oo ay tahay, xaaladda caynkaas ahi Wasiirka ma ka dul qaadayso awoodihii iyo masuuliyaddii guud ee uu Xeernidaamiyahan ku waajibiyay. Iyadoo taas maanka lagu hayo, Wasiirku marka uu masuuliyad cayiman cid u igmanaayo, waxa uu soo saarayaa Wareegto Wasiir oo faahfaahsan, taas oo xaddideysa awoodiisa uu cid kale ku wareejinayo iyo waajibaadka taas khuseeya ee Xeernidaamiyahani tilmaamaayo.

Qodobka 11aad
Fullinta iyo Dhaqan-gelinta Xeer-nidaamiyahan

1. Xeerkani waxa uu dhaqan-gal noqonayaa kadib marka ay meel-mariyaan Golaha Wasiiradda Xukuumadda JFS, waxaana lagu faafinayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyo Mareegta Rasmiga ah ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda.

2. Qodobada Xeernidaamiyahan waxa ay isbeddel ku samaynayaan, amaba gebi ahaanba meesha ka saarayaan wixii qodobo ah ee ay xeernimaadiyahan iska horimaanayaan ee ku jira Xeernidaamiyaha Maamulka Maaliyadda Guud ee 2022.

Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 161 **Taariikh: 19/07/2024**

XEER: SIYAASADDA QARAN EE IIBKA HUBKA, RASAASTA, IYO QALABKA CIIDANKA

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
05 AUG 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (g); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG;

Markuu arkay: Soojeedinta Wasaaradda Gaashaandhigga ee JFS;

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.24.81.07.24** ee **19/07/2024**, kuna saabsan **Siyaasadda Qaran ee Iibka Hubka, Rasaasta, iyo Qalabka Ciidanka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Muhiimadda ay u leedahay Dalka xakameynta hubka sharci-darrada, si loo sugo, loona ilaalsho kala-dambaynta, nabadgalyada guud, iyo Amniga Qaranka;

Waxa uu Meelmariyay:

Qodobka 1aad:

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.24.81.07.24** ee **19/07/2024**, kuna saabsan **Siyaasadda Qaran ee Iibka Hubka, Rasaasta, iyo Qalabka Ciidanka** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad
Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Gaashaandhigga loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana Siyaasadda Qaran ee Iibka Hubka, Rasaasta, iyo Qalabka Ciidanka.

Qodobka 3aad
Dhaqangal

Siyaasaddan Qaran waxa ay dhaqangalaysaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda.

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Hamza Cabdi Barre
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-460-2024
TAARIIKH: 29-08-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Guuleed
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Villa Somalia, Telephone +252-615233036 E-mail: chiefcabinet@opm.gov.so or Primeminister@opm.gov.so Mogadishu,Somalia

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Gaashaandhigga
Xafiiska Wasiirka

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة الـدفاع
مكتب الوزير

Federal Republic of Somalia
Ministry of Defense
Office of the Minister

REF: WG/XW/00256/ 07/24 **Tr: 18/07/2024**

Ku: Ra'iisul Wasaaraha XJFS

Og: Golaha Wasiirada Xukuumadda JFS

Ujeeddo: Soo Gudbin Siyaasadda Iibka Hubka, Rasaasta iyo Qalabka Ciidanka

Mudane Ra'iisul Wasaare,

Salaan qadarin leh kadib, Wasaaradda Gaashaandhigga Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS), waxay si xushmad leh halkan ku soo gudbineysaa Siyaasadda Iibka Hubka, Rasaasta iyo Qalabka Ciidanka.


Diyaarinta siyaasaddan waxaa diyaariyey sharci yaqaannada iyo khubarada Wasaaradda Gaashaandhigga JFS si qoto dheerna u lafa guray.

Haddaba, Mudane Ra'iisul Wasaare, Siyaasadda oo la mariyey dhammaan habraacyadii looga baahnaa, Wasaaradda Gaashaandhigga Xukuumadda JFS waxay ka codsaneysaa Xafiiskaaga in siyaasaddan loo gudbiyo Xubnaha Golaha Wasiirada sharafta leh si loo ansixiyo.

Mahadsanid.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
جمهورية الصومال الفيدرالية
OFFICE OF MINISTER
XAFIISKA WASIIRKA
وزارة الدفاع
MINISTRY OF DEFENCE
WASAARADDA GAASHAANDHIGA

Mudane C/qaadir Maxamed Nuur
Wasiirka Gaashaandhigga XJFS



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA GAASHAANDHIGGA

Siyaasadda Iibka Hubka, Rasaasta iyo Qalabka Ciidanka

Waxaa diyaarisay:

Wasaaradda Gaanshaandhigga ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

Luulyo, 2024

Tusmo

Qeexitaanno *2*

Cutubka 1aad: Hordhac *2*

Gogoldhig 2

Sababta ka Dambaysa Samaynta Siyaasaddan 3

Hannaanka Dejinta Siyaasadda 3

Gorfeynta Xaaladaha 4

Cutubka 2aad: Ujeedada, Mabaadi'da, Seeraha iyo Qaabdhismeedka Sharci *5*

Ujeedada Siyaasadda ***5***

Mabaadii'da Hagaysa ***5***

Seeraha Siyaasadda ***6***

Qaabdhismeedka Sharci ee Siyaasadda ***6***

Cutubka 3aad: Maamulka iyo Maareeynta Hannaanka Iibka *7*

Hawlaha La Qabanayo Iibka Ka Hor 7

Hawlaha La Qabanayo Xiliga Iibka 8

Hawlaha La Qabanayo Iibka Ka Dib 9

Cutubka 4aad: Agaasinka Hay'adeed ee Fulinta Siyaasadda *10*

Xogaha Hubka, Rasaasta iyo Qalabka 11

Warshadeynta iyo Dhoofinta Hubka, Rasaasta iyo Qalabka Ciidan 11

Dib-u-eegista Siyaasadda Iibka Hubka iyo Rasaasta 11

Qeexitaanno

JFS: Waxaa laga soo gaabiyay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

XFS: Waxaa laga soo gaabiyay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

Dawlad Goboleedyada: Waxaa loola jeedaa dawlad goboleedyada xubinta ka ah dawladda federaalka Soomaaliye.

Rasaas: Rasaas waxaa loola jeedaa agabka loo isticmaalo in laga rido hubka yar-yar iyo kan waaweyn sida qoryaha iyo madaafiicda.

Shahaadada Adeegsadaha (End Use Certificate {EUC}): Waxaa loo la jeedaa dukumeenti cadeynaya in hubka, rasaasta iyo qalabka la soo iibiyay loo adeegsan doono keliya ujeedooyinka la cayimay ayna adeegsan doonaan hay'adaha loo idmaday ee ka shaqeeya amniga qaranka. Tani waxay dawladda ka caawinaysaa ka hortagga leexsiga iyo si xun u adeegsiga hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka.

CQS: Waxaa laga soo gaabiyay Ciidanka Qalabka Sida waxaana loola jeedaa Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Qalab: Qalabka ciidanka waxaa loola jeedaa waxa aan ka ahayn dirayska ciidanka, raashinka, adeegyada guud, qalabka xafiisyada iyo gaadiidka aan loo adeegsan ujeedooyinka ciidanka sida ku xusan qodobka 5aad ee Sharciga Iibka ee Qaranka (2016).

Hay'adaha Amniga: Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Gaashaandhigga oo ay hoos yimaadaan Ciidanka Qalabka Sida (SNAF), Wasaaradda Amniga Gudaha oo ay hoos yimaadaan Ciidanka Booliska Soomaaliyeed (SPF) iyo Hay'adda Nabad Sugidda iyo Sirdoonka Qaranka (NISA) iyo Wasaaradda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka oo ay hoos yimaadaan Ciidanka Asluubta.

Hub: Waxaa loola jeedaa wax kasta oo dhimasho ama dhaawac geysan kara ayna sida caadiga ah isticmaalaan Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed.

Cutubka 1aad: Hordhac

Gogoldhig

Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay garawsan tahay, tan iyo markii la billaabay dib-u-dhiska dawladeed, in dalku uu mar kasta horay u sii socday in kasta oo ay jiraan caqabado badan oo ku gedaaman hannaanka dib-u- soo-nooleynta qarannimada iyo gobonimada Soomaaliyeed.

Iyada oo laga duulaayo mabda'a horay u socodka qaranka, Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay ku hawlan tahay yareynta ama baabi'inta caqabadaha ugu waaweyn ee heysta dhammeystirka dib-u-dhiska Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed.

Wasaaradda Gaashaandhigga waxay halkaan ku soo bandhigeysaa Siyaasadda Iibka Hubka iyo Rasaasta oo ay meel-mariyeen Golaha Wasiirada JFS. Siyaasadani marka ay dhaqangasho waxay awood u siinaysaa Dawladda in ay la socoto, xakamaysana hubka iyo rasaasta sharcidarada dalka ku soo gala, maaraysana hannaanka iibka hubka iyo rasaasta hay'adaha amniga dalka iyada oo yareenaysa halista in hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka ay ku dhacaan gacmo qaldan iyo in la hubiyo in hubka, rasaasta iyo qalabka loo adeegsado ujeedooyinka sharcigu qeexay.

Siyaasadda iibka hubka iyo rasaasta waxay qeexaysaa hannaanka ay hay'adaha amniga dalka ku soo iibsanayaan hubka, rasaasta iyo qalabka ay u baahanyihiin.

Siyaasaddan waxaa looga gol-leeyahay inay midayso oo qeexdo hannaanka iibka, hagtana hawl-wadeenada hay'adaha amniga iyo qandaraasleyda marka ay ku hawlan-yihiin iibka hubka, rasaasta iyo qalabka ciidanka.

Siyaaddani waxay xaqiijinaysaa in hannaanka iibka hubka, rasaasta iyo qalabka ciidank loo fuliyo si waafaqsan Sharciga Iibka Qaranka iyo shuruucda kale ee dalka u yaal.

Sababta ka Dambaysa Samaynta Siyaasaddan

Xarunta Qaran ee Tubsan waxay sidoo kale u mahadcelinaysaa khabiirada dib-u-eegista ku sameeyay Istaraatiijiyada Qaran iyo Qorshayaasheeda Waxqabad.

Dib-u-eegista istaraatiijiyaddan waxaa lagu maalgeliyay taageero deeqsinimo leh oo ka timid Midowga Yurub oo ay hirgelisay EIP iyo sidoo kale UNDP.

FARIINTA MADAXWEYNAHA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

FARIINTA RA'IISUL WASAARAHA

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

FARIINTA AGAASIMAHA XARUNTA QARAN EE TUBSAN

KHARIIRADA SOOMAALIYA





Aasaaska Bilowga Cusub, Shanta Tiir ee Istaraatiijiyadda Qaranka ee Ka Hortaga iyo La Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata

TABLE OF CONTENTS

..... 1

[125 :النحل] 2

MAHADNAQ 3

Khariirada Soomaaliya 7

Erey Bixin 12

Hordhac 13

Dulmarka Istaraatiijiyada 14

Xarunta Qaran ee Tubsan 16

Hiigsi 16

Himilo 16

Kaalinta Xarunta Qaran ee Tubsan 16

Mabaadi'da Hagaysa Istiraatiijiyadda 17

Xaaladda Dalka 18

Welwelka Deegaanka ee Xilligan 18

Cidda Ka Dambaysa Fikirka Xagjirka Rabshadaha Wata 20

Caqabadaha P/CVE ee Hadda Jira 21

Kartida iyo Waxa an Awoodno 22

Guud Marka Istiraatijiadda Qaran ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata. 23

Isbedelka Aragti 25

Hagidda Hannaanka Qaranka ee lagula Tacaalayo Fikirka Xagjirka ah ee Rabshadaha Wata (Shuruucda, Siyaasadaha, Istiraatijiyadaha iyo Qorsheyaasha) 26

Shanta Tiir ee Istririitiijayada Qaran 28

Tiirka 1aad: Isku-dubbaridka iyo Iskaashiga 28

Tiirka 2aad: Ka Qeybgalka Bulshada 28

Tiirka 3aad: Istiraatiijiyada Qaranka ee Isku-xirka Xiriirka Warbaahinta ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata 29

Tiirka 4aad: Ka Laabashada, Ka-tanaasulidda, Dhaqancelinta iyo Dhexgalka 29

Tiirka 5aad: Cilmi baarista iyo Qiimeynta Khataraha 30

TIIRKA 1-AAD: ISKU-DUBBARIDKA IYO ISKAASHIGA 30

Ujeedada 1aad: Isku-xirka Hay'adaha Dowladda iyo Iskaashi Siyaasadeed 30

Ujeedada 2aad: La Falgalka Daneeyayaasha Shaqo Wadaagga ah 31

Ujeedada 3aad: Isku-duwidda Deeqbixiyeyaasha 31

Tiirka 2aad: Ka Qeybgalka Bulshada 33

Ujeedada 1aad: Hoggaamiyeyaasha Diinta 33

Ujeedada 2aad: La-falgalka iyo Kor u Qaadida Adkaysiga Dhallinyarada 33

Ujeedada 3aad: Wada-hadal, Ka-hortagga Khilaafaadka iyo Wada-jirka Bulshada 33

Ujeeddada 4aad: Adeegsiga Waxbarashada si Looga Hortago Xag-Jirnimada Rabshadaha Wata 34

Ujeedada 5aad: La-falgalka Hay'addaha Gaarka Loo Leeyahay 34

Ujeeddada 6aad: Awood-Siinta Haweenka ee Ka Hortagga Xag-Jirnimada Rabshadaha Wata.....34
Ujeedada 7aad: Kaalinta Odayaasha Dhaqanka.....35
Ujeedada 8aad: La-falgalka Shabakadaha Bulshada Rayidka Ah.....35
Ujeedada 9aad: Horumarinta Dhaqaalaha.....35
Ujeedada 10aad: Hawgelinta Madal-bulsheedka ka Hortagga Iyo La Dagaalanka Fikirka Xagjirka Ee Rabashadaha Wata.....36
Ujeedada 11aad: La-falgalka Qurba-Joogta Soomaaliyeed.....36
Ujeedada 12aad: Xasilinta Deegannada la Xoreeyay.....36
Ujeeddada 13aad: Hawl-gelinta Iskaashiga Ka Dhaxeeya Hay'adaha Amniga Iyo Bulshada.....37
Ujeedada 14aad: Ka Hortagga iyo Ilaalinta Dadka u Nugul Xagjirnimada Rabshadaha Wadata.....37
Ujeedada 15aad: Amni-darada Isbedelka Cimilada iyo Ka-hortagga Xag-jirnimada Rabshadaha Wadata.....37

Tiirka 3aad: Istiraatiijiyada Qaranka ee Isku-xirka Xiriirka Warbaahinta ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata..... 38
Ujeedada 1aad: Guddiga Isku-xirka Xiriirka Warbaahinta ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata.....38
Ujeedada 2aad: Ka Hortagga Dacaayadaha, War-xumada, iyo Tabinada Xagjirka.....38
Ujeedada 3aad: Kor u Qaadida Adeegyada Bulshada iyo Helitaanka.....39
Ujeedada 4aad: Sameynta Ole-oleyaal Lagu Toosiyo Bulshada.....39
Ujeedada 5aad: Dabagal Dhamaystiran iyo La Socodka Dhaqdhaqaaqyada Xagjirnimada.....40
Ujeedada 6aad: Ka Qaybgelinta Dhalinyarada iyadoo Loo Marayo Hindisaha Fanka, Dhaqanka iyo Ciyaaraha.....40
Ujeedada 7aad: Istiraatiijiyada Isku-xirka Wax ku oolka ah ee Xasaradaha ee La-dagaalanka Xagjirnimada iyo Argagaxisada.....40
Ujeeddada 8aad: Kor u Qaadista Codka Dhibanayaasha & Kuwa ka Badbaaday Argagaxisada.....41

Tiirka 4aad: Ka Laabashada, Ka-tanaasulidda, Dhaqancelinta iyo Dhexgalka..... 42
Ujeedada 1aad: La Socodka Isbeddellada Xogta Ku Saabsan kasoo laabtayaasha iyo Ka-tanaasulayaasha Fikirka Xagjirnimada.....42
Ujeedada 2aad: Xaqiijinta Baaritaano ku Saleysan Dhowrista Xuquuqda Aadanaha, Dacwad-oogidda, Dhaqancelinta iyo Kasoo Laabashada.....42
Ujeedada 3aad: Kor u Qaadida Ka Fogaanshaha Xagjirnimada Rabshadaha Wadata.....42
Ujeedada 4aad: Qaabeynta Dhaqancelinta Iyo Ka Faa'iideysiga Cafiska.....43
Ujeedada 5aad: Dib-u-heshiisiin ku Saleysan Bulshada.....43
Ujeeddada 6aad: Ilaalinta iyo Horumarinta Xuquuqda Aadanaha.....43
Ujeedada 7aad: Xoojinta Sarreynta Sharciga iyo Hay'adaha Garsoorka ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata.....43
Ujeedada 8aad: Wax ka Qabashada Xagjirnimada Rabshadaha Wadata ee Xabsiyada iyo Xarumaha Dhaqancelinta.....44

Tiirka 5aad: Cilmi Baaris iyo Qiimeynta Khataraha..... 45
Ujeedada 1aad: Cilmi-baaris Casri.....45
Ujeedada 2: In la Aqoonsado Khatarta, Baahida, Nidaamka Digniinta Hore iyo Qiimaynta Khatarta 45
Ujeedada 3aad: Hal Abuurka iyo Teknolojiyada P /CVE.....46
Ujeedada 4aad: Kordhinta Qaab-dhismeedka Sharciga iyo Siyaasadda.....46
Ujeedada 5aad: Kormeerka Hawlgalka, Qiimeynta iyo Warbixinta.....46
Ujeedada 6aad: Kor u Qaadista Maamulka, Isla xisaabtanka iyo Dhisidda Heshiis Bulsho.....46
Ujeedada 7aad: Tababarka & Dhismaha Awoodda ee P/CVE.....47

Hirgelinta Istaraatijiyadda Qaran ee Ka Hortagga iyo la Dagaalanka Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata..... 48

Qaabdhismeedka Hirgelinta..... 49
Dowladda Soomaaliya (hay'adaha federaalka, kuwa dowlad goboleedka iyo dowladaha hoose) 49
Bulshada Rayidka ah, Iskaashatooyinka aan Dowliga Ahayn iyo Kuwa Caalamiga ah.....50

Dowrka Xarunta Qaran ee Tubsan.....51
Dowrka Wasaaradaha, Wakaaladaha, Agaasinnada, Waxaaha iyo Xafiisyada 52
Dowrka Hay'adaha Amniga 52
Dowrka Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Benaadir 52
Dowrka Maamulka Degaanka.....53
Dowrka Bulshada 53
Dowrka Warbaahinta 54
Dowrka Hay'adaha aan Dowliga Ahayn 54
Dowrka saaxiibada Caalamiga ah 55
Kormeerka, Qiimeynta & Warbixinta 55
Cabbir Sugan 56
Madal Hawleedka Isku-xirka Dadaalada P/CVE 56
Tubsan oo ah Xarunta ka Hortagta Xagjirnimada Rabshadaha Wadata 57

EREY BIXIN

Qeexitaannada soo socda waxay naga caawin doonaan faham guud iyo caddayn sugan oo aynu ku qeexeyno ujeedada ka dambaysa Istaraatiijiyadda ka hortagga iyo la dagaallanka Fikirka Xagjirka ee Rabshadaha Wata iyo meel-marinta geeddi-socodkeeda.

Fikirka Xagjirka ee Rabshadaha Wata: Waxay dhawaan Qaramada Midoobay shaaca ka qaadday in "**Fikirka Xagjirka ee Rabshadaha Wata** waa dhacdooyin baahsan, oo aan lahayn qeexitaan sugan," laakiin waxaan ku muujinaynaa fahamka ku wejehan Fikirka Xagjirka ee Rabshadaha Wata inay dhab ahaantii ku salaysan yihiin rumayn iyo ficillo ay dadka taageeraan ama fikirkaas dhiirrigelinaya ay u adeegsadaan qaabab ay ka mid yihiin Bulsho, Dhaqaale, ama ujeedooyin Siyaasadeed.

Ka Hortagga iyo La-dagaallanka Fikirka xagjirka ee rabshadaha wata, sidaas awgeed, waxanu ku qeexnay sida hadafkeennu yahay: siyaasad iyo dhaqdhaqaaqyo hadafkoodu yahay in dadweynaha laga horjoogsado inay hawlahaas sameeyaan ama dhaqaale lagu taageero, si ay fikirkaas u dhiirrigeliyaan iyagoo adeegsanaya rabshado ka dhan ah dadweynaha, iyagoo cudur-daar ka dhiganaya inay fikir difaacayaan. Waxaa kaloo ka mid ah ficillo ka hor imaanaya farriimo lagula dagaallamayo iyo ficillo caqabado ku ah bulshada, sida adeegsiga Dacaayado iyo weerarro xagjirnnimo. Haddaba, waxaa tusaalooyinka Istaraatiijiyadda iyo qorsheheeda KA HORTAGGA IYO LA DAGAALANKA FIKIRKA XAGJIRKA EE RABASHADAHA WATA ku jira dadaallo lagu dhisayo wacyiga oo ay wadajir uga wada shaqeynayaan Dowladda iyo Hay'adaha aan Dowliga ahayn.

Xagjirka: Waxaa lagu qeexay ficil dambiyeedyo, ay ka mid yihiin. kuwa bulshada ka dhan ah, kuwa loo sameeyo in lagu gumaado dadka, ama dhaawacyo halis ah loogu geysto ama lagu af-duubto dad, taasoo looga gol-leeyahay in kicin xiisado argagax leh oo dadweynaha lagu abuuro, koox dad ah ama dadka gaar ah, lagu waxyeelaynayo dadweynaha, ama lagu khasbayo in dowladda ama hay'adaha caalamiga ah ay tallaabo qaadaan.

Xag-jirnimo horseedda fikirka rabshadaha wata: waa geeddi-socod uu qofku ku hawlan yahay kordhinta inuu aqbalo adeegsiga fal-dambiyeedyada, taasoo macneheedu ka mid yahay. xagjirnimada, isagoo isku dayaya inuu ku gaaro hadaf siyaasadeed/Fikir isaga u gaar ah.

HORDHAC

Hadafka Istaraatiijiyadani, waa in si cad loo qeexo aragtida lagula dagaallamayo (marka uu ficilku dhacayo) iyo ka hortagga (ka hor inta uusan dhicin) falka argagixisannimo, Tani waxay ku salaysan tahay fahamka ugu wacan ee ka dhanka ah habka ugu yeerista/Qorista iyo kooxaha ka dambeeya falalka argagixisada, iyadoo sidoo kale la horumarinayo xirfadaha ugu habboon ee lagu taageerayo awoodaynta bulshada, si ay ugu noolaadaan nabadgelyo iyo dhaqdhaqaaq dhaqaale oo ay Soomaalidu jawi xasilooni leh ku gaaraan. Wuxuuna Dukumentigan inoo sahlayaa tusaalooyin wax-ku-ool ah oo aan ku xaqiijin karno aragtida la hiigsanayo, natiijooyinka iyo saamaynta ka dhalan karta, kuwaasoo ku xidhnaan doona dadaallo wadajir ah oo aan ku meel-marinayno ujeedooyinka Istaaratiiyadani ay leedahay.

Qoddobadda ugu muhiimsan ee ujeedooyinka istiraatiijiyadda waxa ka mid ah:

- Inay wax ka qabtaan kana hortaggaan sababaha asaasiga ee dhaliya xagjirnimada rabshadaha wata.
- In la abaabulo dhammaan dowladda iyo la-hawlgalayaasha kale.
- Xoojinta Cilmi-baarista.
- Awoodaynta Xirfadaha- Dhammaan gobolada, bulshada rayidka ah iyo Maamul goboleedyada.
- Is-gaarsiin wax-ku-ool ah.
- In la qiimeeyo horumarka laga sameeyay ka hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ee rabshadaha wata.
- In si joogto ah loola socdo hawlaha xoojinaayo meel-marinta Istaatiijiyada iyo qorhse hawleedkeeda.
- Ujeedada ka-hortagga iyo la dagaalanka xagjirnimada rabshadaha wadata waa in laga gaaro xal waara oo loo maraayo in khilaafaadka lagu xalliyo wada hadal. Xalalkaan waxaa ka mid ah in la dhaqan geliyo Istaraatijiyadda Qaran iyo Qorshahaheeda si loo fududeeyo ciribtirka xagjirnimada iyadoo la abaabulayo dowlad goboleedyada, hay'adaha federaalka, iyo bulshada rayidka ah, qeybaha Ganacsiga gaarka, qurba-joogta iyo Saaxibada Soomaaliya.

Waxay istaraatiijiyadan ku salaysan tahay **qodobo** muhiim ah **iyo qawaaniin aasaasi ah,** kuwaas oo naga soocaya kuwa adeegsada falalka gurracan ee annaga iyo inta kale lidka ku ah. Islaamku wuxuu sare u qaadaa xasiloonida iyo nabad ku wada noolaanshaha, wuxuuna xoojiyaa jiritaanka sida ay na farayso Diinteena.

Waxaan si adag u cambaaraynaynaa nooc kasta oo argagixiso oo lid ku ah diinteenna ama bulshada ku abuuri kara nacayb iyo falal ammaan darro. Waxaan kaloo si adag uga soo horjeednaa isla markaana dadaal adag ku bixinaynaa dhawrista qawaaniinta caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, xorriyadda dadweynaha, sharciga iyo kala dambaynta, annagoo qaadayna talaabo kasta oo aan kula dagaalamayno, ugana hortaggayno falalka argagixisada.

Istaraatiijiyadani waxa ay xuddun u tahay Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka. Dadaalada xoogga leh ay Dowladda Federaalka Soomaaliya kaga hor tegayso kugulana dagaal la mayso xagjirnimada rabshadaha wadato iyadoo diiradda saaraysa sidii loo horumarin lahaa Istratijiyadda ka hortagga Xagjirnimda.

Yoolasha Amniga iyo nabadgalyada oo ay sida dhabta ah u meel-marisay dowladda Soomaaliya, ayaa sidoo kale hoosta ka xariiqday muhiimadda dadaalada ka Hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ee rabshadaha wato. Yoolasha Nabadda iyo Amniga, gaar ahaan yoolka 3-aad ayay dowladdu diiradda saaraysaa geeddi-socodkiisa, kaasoo wiiqeya argagixisada iyo tabahooda, marka la waafajiyo xeerarka caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka oo mudnaan siinayo gacan siinta dowladda si loo yareeyo saamaynta xagjirku ay ku leeyihiin bulshada Soomaaliyeed."[1]

DULMARKA ISTARAATIIJIYADA

Bulsho walba oo meel ku dhaqan, waxay u baahan yihiin hab-dhaqan sharci oo kala dambayn ku dhisan, si loo wajaho fikirka xagjirka. sida baaritaannada, dacwad oogista, garsoorka iyo nidaamka maxaabiista. Hase yeeshee, Waxaa si cad loo dareemi karaa koror ka xad-dhaafka ah ee jira awgeed in aan lagu xakamayn Karin noocyadaan oo keliya, marka la eego dabeecadda fikirka xagjirka ee rabshadaha wata. Sidaas darteed, waxaan dowlad ahaan ku tiirsannahay hab-raacyada dhaqanka iyo xeer-hoosaadyada ku dhisan ee go'doominta dhacdooyinkaas, waxayna u arkaan wax-ku-ool, kuwaasoo ay ku dhaqmaan bulshooyinka la xaqiro oo inta badan dareensan in xuquuqdooda lagu tunto. Sida ku cad qaabka hawlgalka ee **modus operandi** (MO) ee Fikirka xagjirka ee Rabshadaha Wata ee ay u adeegsadaan xasilooni-darrida iyo kicinta welwelka fikirka rabshadaha wata ee xagjirka, si ay xiisado u abuuraan, iyagoo uga dan leh inay sare u qaadaan taageerada ay bulshada ka helayaan.

[1]Dagaalka Soomaalia 2013, Dawladda FederaalkaSomalia, Page 7. Booqo:, http://eeas.europa.eu/delegations/somalia/documents/press_corner/20130916_the_somali_compact.pdf.

Waxaan si adag u cambaaraynaynaa nooc kasta oo argagixiso oo lid ku ah diinteenna ama bulshada ku abuuri kara nacayb iyo falal ammaan darro. Waxaan kaloo si adag uga soo horjeednaa isla markaana dadaal adag ku bixinaynaa dhawrista qawaaniinta caalamiga ah ee xuquuqul insaanka, xorriyadda dadweynaha, sharciga iyo kala dambaynta, annagoo qaadayna talaabo kasta oo aan kula dagaalamayno, ugana hortaggayno falalka argagixisada.

Istaraatiijiyadani waxa ay xuddun u tahay Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka. Dadaalada xoogga leh ay Dowladda Federaalka Soomaaliya kaga hor tegayso kugulana dagaal la mayso xagjirnimada rabshadaha wadato iyadoo diiradda saaraysa sidii loo horumarin lahaa Istratijiyadda ka hortagga Xagjirnimda.

Yoolasha Amniga iyo nabadgalyada oo ay sida dhabta ah u meel-marisay dowladda Soomaaliya, ayaa sidoo kale hoosta ka xariiqday muhiimadda dadaalada ka Hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ee rabshadaha wato. Yoolasha Nabadda iyo Amniga, gaar ahaan yoolka 3-aad ayay dowladdu diiradda saaraysaa geeddi-socodkiisa, kaasoo wiiqeya argagixisada iyo tabahooda, marka la waafajiyo xeerarka caalamiga ah ee Xuquuqul Insaanka oo mudnaan siinayo gacan siinta dowladda si loo yareeyo saamaynta xagjirku ay ku leeyihiin bulshada Soomaaliyeed."[1]

DULMARKA ISTARAATIIJIYADA

Bulsho walba oo meel ku dhaqan, waxay u baahan yihiin hab-dhaqan sharci oo kala dambayn ku dhisan, si loo wajaho fikirka xagjirka. sida baaritaannada, dacwad oogista, garsoorka iyo nidaamka maxaabiista. Hase yeeshee, Waxaa si cad loo dareemi karaa koror ka xad-dhaafka ah ee jira awgeed in aan lagu xakamayn Karin noocyadaan oo keliya, marka la eego dabeecadda fikirka xagjirka ee rabshadaha wata. Sidaas darteed, waxaan dowlad ahaan ku tiirsannahay hab-raacyada dhaqanka iyo xeer-hoosaadyada ku dhisan ee go'doominta dhacdooyinkaas, waxayna u arkaan wax-ku-ool, kuwaasoo ay ku dhaqmaan bulshooyinka la xaqiro oo inta badan dareensan in xuquuqdooda lagu tunto. Sida ku cad qaabka hawlgalka ee **modus operandi** (MO) ee Fikirka xagjirka ee Rabshadaha Wata ee ay u adeegsadaan xasilooni-darrida iyo kicinta welwelka fikirka rabshadaha wata ee xagjirka, si ay xiisado u abuuraan, iyagoo uga dan leh inay sare u qaadaan taageerada ay bulshada ka helayaan.

[1]Dagaalka Soomaalia 2013, Dawladda FederaalkaSomalia, Page 7. Booqo:, http://eeas.europa.eu/delegations/somalia/documents/press_corner/20130916_the_somali_compact.pdf.

Haddaba, waxaa fikirkan laga dheehan karaa in ka hortagga iyo la dagaallanka fikirka xagjirka ee rabshadaha wata uu u baahan yahay talaabooyin Istaraatiijiyadeed oo si dhab ah ay dowladdu awood ugu heli lahayd dagaalka ka dhanka ah xagjirka, caqabadaha Qaab-dhismeedka, xallinta carada iyo tabashooyinka (ay ka mid yihiin. saboolnimada, gacan ku haynta deegaannada/xudduudaha, aqoon la'aanta iyo Shaqo la'aanta), sidoo kale, fikradaha abuura xag-jirnimada rabshadaha wata iyo abaabulka shaqsiyaadka ama kooxaha si ay u fuliyaan rabshado. Tani waxay u baahan tahay faham dheeraad ah ee ku aadan Fikirka xagjirka ee Rabshadaha Wata iyo qaabka aay ku soo xera galiyaan shakhsiyaadka, qoyska iyo xidhiidhka daahsoon ee beelaha dhexdooda ka jira sidoo kale, qiyaasta siyaasadeed ee is-bahaysiga beelaha kala duwan sida. qabaai'lka.

Istaraatiijiyadani, waxay tilmaameeysaa qaabkii loo taageeri lahaa bulshooyinka loo bartilmaameeystay in laga dhaadhiciyo fikir xagjir ah: iyadoo loo qeybinayo qalab ama agab la siinayo qoyska, saaxiibada, iyo hoggaamiyaasha bulshada ee lagu kalsoonyahay, si aay ula falgalaan heer shakhsi. in hawlo lala wadaago ururada bulshada rayidka ah, si sare loogu qaado awoodaynta bulshada, iyadoo laga qeybgalinayo waxqabadka heer deegaan, horumarinta xirfadaha, dhexdhexaadinta iyo xallinta khilaafyada. la shaqeynta ururrada bulshada rayidka ah ee heer deegaan, si loogu fududeeyo qaab sahlaya wada-xaajood dowladda iyo beelaha, si loo xalliyo tabashooyinka iyo carada jirta.

Waxaan ku soo gebegebeynaynaa, inuu dukumentigan oo uu wehliyo Qorshe-hawleedka uu ku wejehan yahay ficil ahaan isku-xirnaan wacan oo lagu meel-marinayo hawlgallo baaxad leh iyo mudnaan-siinta qeexan oo inoo horseedi doonta inaynu si dhab ah ugu guulaysan doono dadaallada wadajira ee ka hortagga iyo la-dagaallanka fikirka xagjirnimada Soomaaliya.

XARUNTA QARAN EE TUBSAN

Xarunta Qaran ee ka Hortagga iyo la Dagaalanka fikirka xagjirka ah ee rabshadaha wata ee Tubsan waa xarun ka kooban Hay'ado dowladeed oo isugu jira heer Federaal iyo heer Dowlad gobaleed. Xarunta waxaa lagu dhisay xeer Golle Wasiiro ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya sida ku cad xeer number 131 ee uu saxiixay Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada Federaalka Soomaaliya Bishii Juun 2023.

Xarunta Qaran ee Tubsan waxaa ay hoos tagtaa Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya. Xaruntu waxa ay xiriirisaa isla markaana la shaqeysaa hay'ado dowli ah iyo kuwa aan dowli ahayn si loo hubiyo in si isu dheelitiran loo dhaqan geliyo Istiraatiijiyadda Qaran ee ka Hortagga iyo La Dagaallanka Fikirka Xagjirka ah ee Rabshadaha Wata.

HIIGSI

Dhisidda awood wadareed xoggan oo dhammaan heerarka bulshada ah si ay u diidaan ugana hortaggaan aragtiyaha xagjirka ah ee rabshadaha wata ee sababa argagixisada, si loo hubiyo loona gaaro Soomaaliya oo nabad ah, barwaaqo ah, oo aysan ka jirin kooxo leh afkaarta xagjirka ah ee rabshadaha wadata.

HIMILO

In la isu keeno dhammaan dhinacyada dowliga ah iyo kuwa aan dowliga ahayn si ay u xoojiyaan wada shaqeynta iyo xiriirka iskaashi si loo gaaro dadaalka qaran ee ilaalinta shacabka ayadoo la fulinaya habka "Dowlad mida" iyo "Bulsho mid ah", iyo dhismaha u adkeysiga xagjirnimada rabshadaha wadata si loo gaaro yoolka Istiraatiijiyadda qaran ee ka hortagga xagjirnimada rabshada wadata.

KAALINTA XARUNTA QARAN EE TUBSAN


Xaruntu waxa ay u xil saaran tahay in ay hoggaamiso isla markaana isku xirto hay'addaha kala duwan ee dadaalada kala duwan ugu jira ka hortagga iyo wiiqidda xagjirnimada rabshadaha wadata ee horseedda fikirka argagxisada leh heerarka kala duwan ee hay'adaha dowladda iyo la shaqeynta hay'adaha aan dowliga ahayn si loo hubiyo in Istiraatiijiyadda Qaran loo fuliyo hannaan isu dheeli tiran, loo dhan yahay oo dhammaystiran.

Xaruntu waxa ay mas'uul ka tahay dhisidda iyo horumarinta iskaashiga laba geesoodka ah iyo midka dhinacyada badan iyadoo horumainaysa xiriirka dowladda dhexe, dowlad goboleedyada iyo kuwa caalamiga ah ee ka shaqeeya wiiqidda xagjirnimada rabshadaha wadata ee horseedda argagixisada.

Himilooyinka istiraatijiyadda waxaa lagu sii hawlgelin doonaa shan tiir oo muhiim ah.

MABAADI'DA HAGAYSA ISTIRAATIIJIYADDA

Istaraatiijiyadda Qaran ee Ka Hortagga iyo La Dagaalanka Xag-jirnimada Rabshadaha Wadata ayaa dejinaysa mabaadii'da hagaysa dadaallada qaran ee looga hortaggayo laguna wiiqayo Fikirka Xagjirka ee Rabashadaha Wata:



XAALADDA DALKA

Soomaaliya Waxay ku taallaa qeybta bari ee Afrika, waa mid ka mid ah dalalka adduunka ugu istiraatijiyadeedsan juquraafi ahaan, isku xirta Badweynta Hindiya, Badda Cas, iyo Gacanka Cadmeed.

Soomaaliya waxay ku jirtay colaad in mudda ah . Soddonkii sano ee la soo dhaafay, dalka waxaa halakeeyay colaado hubeysan oo daba dheeraaday oo ku bilowday dagaal sokeeye, wajiyo kala duwanna yeeshay, ku waasoo uu ugu dambeeyay halganka lagula jiro argagixisada mayalka adage e magaca diimeed huwan.

Dalku waxa uu weli wajahayaa khatar joogta ah oo kaga imanaysa Al-Shabaab iyo ISIS-Dacish, oo labaduba ku jira liiska argagixisada ee Golaha Ammaanka Qaramada Midoobay. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay qaaday talaabooyin ay ku fulinayso waajibaadkeeda sida ku cad go'aannada Golaha Ammaanka iyo Golaha Guud iyadoo qaadatay dowrkeeda Ka-hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ee rabashadaha wata. Bishii Nofembar 2016 oo ahayd markii istritaajiiyaddan la sameeyay.

In kastoo Dowladda Soomaaliya iyo bulshadeedu iyagoo kaashanaya saaxibada caalamiga ah ay duullaan ballaaran oo guulaystay ku qaadeen Al-Shabaab si looga saaro degaanada ay ka taliyaan ayaa hadana aan wali lagu guuleysan in dhammaan degaannada ay muddo 15 sanadood ka arriminayeen gacanta dowladda soo wada galaan, magaalooyin kaasoo ay maamulaan kana qaadaan bulshooyinkaas canshuuro.

WELWELKA DEEGAANKA EE XILLIGAN[2]

Waxay Soomaaliya dhibaato weyn kala kulantay xal u helidda dadaallada ka dhanka ah fikirka xagjirka ee rabshadaha wata, iyada oo ay naga go'antahay inaan sii wadno dadaaladeena ka dhanka ah kooxaha ku leh fikirka rabshadaha wata geystana falalka argagaxsinimo. Waxaan ku faraxsannahay horumarka aan gaarnay sanooyinkan dambe ee ka dhanka ah Al-Shabaab, waxaana naga go'an inaan sii wadno dadaallada aan ku wiiqeyno iyaga iyo cidkasta oo kale ee ku hawlan fikirka xagjirka ee rabshadaha wata oo ay xagjirka sameeyaan. Waxaa muhiim ah in aragtida Istaraatijiyaddeennu ay tahay mid marxalad fog socon doonta, taasoo nagu dhiirrigelinaysa inaan u diyaar-garowno nolol Soomaaliya ka hirgasho, iyadoon Al-Shabaab jirin. Si kastaba ha ahaatee, waxaan kaloo la soconnaa in kooxda aysan awood lahayn oo ay taag-daran yihiin. Waxayna weli fikirka rabshadaha xagjirka ka fuliyaan dhulka miyiga iyo bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya, gaar ahaan Jubaland, Puntland iyo waqooyiga Kenya. Waxay bartil-maameedsadaan dadka aan waxba galabsan, weerrarada Hoteellada, goobaha dadweynuhu ku kulmaan, iyo bartil-maameedyada kale ee u nugul qaraxyada.

---

[2]Daraasaadkeenna Welwelka Heer Qaran ayaa tilmaamaysa Dib-u-eegis baaxad leh iyo dasaaraso dheeraad ah iimnika socda oo ku wejahnan hawlgalla da arrimaha Amniga Soomaaliya.

Halka aan doonayno inaan xasillooni ka dhalinno, nabadgaliyo iyo barwaaqo ku soo dabbaalno, oo dadaallada aan ku tirtirayno kuna burburinno Al-Shabaab ma ahan oo keliya dalkeenna, laakiin waa dhammaan gobolka Geeska Afrika. Weerraradii lagu qaaday goobtii ciyaaraha lagu daawanayey ee Uganda, dadkii ku cashaynayey Hotelkii Djibouti, dadkii ka dukaamaysanayey suuqyada iyo Ardaydii Jaamacadda ku taalay ee Kenya, Tusaale ahaan waxay muujinayeen Al-Shabaab inay awood u leeyihiin dilalka dadweynaha ee ay weerrarada argagixisada ku qaadeen oo la mid ah fikirka xagjirka ee rabshadaha wata ay u geystaan ururrada kale ee ay is-bahaystaan sida Al-Qacidah.

Waxaa kaloo jira dareen ah in Daacish (ISIS) laga yaabo inay ku faafaan gobolka kaddib markii ay muujiyeen olole bartamihii sannadkii 2015 inay Al-Shabaab qorshaynayaan inay qaarkood iskaashi la yeeshaan dhaqdhaqaaqa caalamiga ah ee Al-Qaacida. Isku daygaasi waa fashilmay (ilaa hadda) laakiin waa inaan u diyaar-garownaa sidii aan uga hortagi lahayn qaabkasta oo fikirka xagjirka ee rabshadaha wata iyo weerarro aanu uga badbaadinnayno dadweynaheenna.

Ciidammada qalabka sida, kuwa caalamiga ah iyo bulshada ee dagaalka kula jira Al-Shabaab waxay ku tallaabsadeen guulo laxaad leh, laakiin wax badan baa weli u baahan in la qabto, si aan u adkayno xawliga hawlgallada cirka ee ka dhanka ah dhaqdhaqaaqa Al-Shabaab hoggaankooda iyo goobo badan oo laga qabsaday oo ay si weyn ugu jabeen.

Waxaa barbar socday, horumar xoog leh oo dhinaca Istaraatiijiyadda Warbaahinta ama Is-gaar-siinta laga sameeyey iyadoo dadaaladaasna ay ka mid ahaayeen baaqyada la dagaallanka iyo ka hortagga fikirka xagjirka ee rabshadaha wata ee lagu dhisayey bulshada qeybeheeda oo taageero gaar ah loo sameeyey iyo dadaallo kale oo looga horjoogsanayey bulshadu inaysan ku biirin tababarrada xag-jirnimada iyo weerrarada hubaysan, taasoo ah tiirka ugu dambeeya Istaraatiijiyadda heer Qaran.

Iyana waxaa dagaalka ciidan ee lagu cirib tirayo argagixisada garab socday, dagaalka xagga fikirka diiniga ah ay horseed ka yihiin culimada Soomaaliyeed iyo sidoo kala cunaqabatay maaliyeed oo lagusoo rogay argagixisada iyo taageerayaashooda ama maalgeliyeyaasha.

CIDDA KA DAMBAYSA FIKIRKA XAGJIRKA RABSHADAHA WATA

Cilmi-baaris sii kordheysa oo ku saabsan xagjirnimada rabshadaha leh ayaa keentay in la aqoonsado laba qeybood oo ah darawallada/Sababaha gacan ka geysan kara taageerada shaqsi ahaaneed ee ajandayaasha xagjirka ee rabshadaha wata. Qeybta hore waxaa badanaa loo yaqaan "cunsurka riix." Kuwani waa xaalado dhismeed - sida horumar-la'aan, waxbarasho la'aan ama shaqo la'aan, iyo takoorid bulsho - taas oo laftooda, ama ay u badan tahay marka lagu daro arrimo kale, waxay sii hurin karaan cabashooyinka ka dhigaya shakhsiyaadka u heellan xagjirnimada rabshadaha leh. Cabashooyinkan waxaa laga yaabaa in loo dareemayo magaca bulshooyinka ay shakhsiyaadka wadaagaan dhaqan, fikradeed, diin ama qoomiyad, xataa haddii ay ku jiraan masaafo jireed.

Qeybta labaad ee qodobbada waxa loo yaqaan "cunsurka jiid." Arrimahan waxa loo kala saaray dhiirigelin degdeg ah oo ka dhigaysa fikradaha xagjirka ah ee rabshadaha leh ama kooxaha soo jiidashada - oo ay ku jiraan soo jiidashada shakhsiyaadka, isgaadhsiinta istaraatiijiga ah ee xoogga leh iyo fariimaha qasabka ah, faa'iidooyinka maaliyadeed ama agab kale, ama heerka bulsheed ee xubnaha kooxda qaarkood ay dareemaan inay ku guulaysteen inay noqdaan qeyb ka mid ah argagixisada ama kooxda xagjirka ah.

Waxaa jira khibrad badan iyo aragti maxalli ah oo ku saabsan ifafaalahan, laakiin waxaa loo baahan yahay in tan si rasmi ah loo sameeyo oo arrimaha riixitaanka iyo soo jiidashada si nidaamsan loo kala saaro loona lafo-guro. Waxa kale oo jirta baahi weyn oo loo qabo cilmi-baadhis casri ah, daraasado goobeed, iyo falanqeyn si loo ogaado wadayaasha xagjirnimada rabshadaha leh iyo go'aan qaadashada barnaamijka. Jadwalkani wuxuu si kooban u soo koobayaa arrimaha jiidashada iyo riixida guud.

Qodobada Sababa	Qodobada Saacida
- Katagida qeyb kamida bulshada/Qeybsanaanta bulshada - Cadaadis dowladeed/Xadgudub - Liidid/yasid - Hanjabka Dhalinyaradda - Saboolnimada, heerka nolasha liita - Shaqo la'aanta dhalinyarada - Cadaalad darro waqtibadan so jirtay - Wahsi/ caajis - Lasocodka wararka, Warbaahinta - Go'aamada ay garaan qoys ama qabiil	- Deegaan ay ka jirto xagjirnimo diimeed - Mayal-adayga beensheegida fasirka iyo fahamka diinta - Fasiraada gurucan ee la xiriira jihaadka - La'aanta hogaan Masaajido waxtar leh - Urrurada Bulshada - Baahida cullumo xikamad wacyi diiniya ah leh - Fursado waxbarsho iyo shaqo - Isku-kalsoonan / Awoodsiin qofka - Heerka bulshada iyo qadirinta ay siiyaan dadka ay isku-faca yihiin - Rabitanka qofku dagayo, guursanaya ama qoys yagleelo

Waxaa muhiim ah in lasameeyo daraasad diirada lagu saarayo xagjirka rabshadaha wata iyo caqabadaha uu ku leeyahay wadankeena iyo gobolkeena.Waxa jira xogo hordhac oo aad u muuhiim u ah, tusaale, wareysiyo lala yeeshay dagaalyahanadii hore ee Alshabaab kasoo goostay laguna dhagan celiyey xarunta magaalada Baydhabo sanadkii 2016 iyo sidoo kale 88 dagaalyahan oo horey uga tirsanaa Al-Shabaab oo lagu dhaqan celiyey xarunta dhaqan celinta ee Muqdisho bishii Sebtember 2014 waxa ay caddeeyeen in sababaha ugu badan ee dadka ugu biiraan Al-Shabaab ay tahay dano dhaqaale. Wareysigii 2014-kii ayaa lagu sheegay in wiilal dhalinyaro ah lagu qanciyey in ay ku biiraan kooxdaasi ka dib markii la siiyay telefoonnada gacanta iyo in ay helayaan ballanqaad lacageed oo gaareya 50 US bishii. Waxaa kaloo la og yahay in shaqaalaysiinta tooska ah aysan ahayn wadada kaliya ee al-Shabaab ay uga faa'iideysato in ay dhaqaale kusoo jiitaan. Kooxdu waxa ay ka faa'iideysatay "marka loo eego kala qeybsanaanta kuwa ku nool magaalooyinka iyo tuulooyinka, kooxdu waxay mushaar u qoreen odayaasha dhaqanka ee ku nool dhulka Miyiga ah. Waxay sidoo kale awood u siiyaan ama hubeeyaan raga dhalinyarada ah, gaar ahaan kuwa kasoo jeeda beelaha laga tirada badan yahay, ama aan awoodda lahayn, si ay u difaacaan bulshadooda iyo qoysaskooda." Tani waa qaab caam oo ay isticmaalaan ururrada xagjirnimada rabshadaha ku dhisan ee caalamka ka jira, kooxahani waxa ay ku dadaalan inay ka faa'idaystaan xiisadaha u dhexeeya qowmiyadaha, qabaa'iladda iyo khilaafaadka Diimaha si ay ugu helaan taageero ujeedooyinkooda.

CAQABADAHA P/CVE EE HADDA JIRA

Kadib sanado badan oo xasilooni darro ay ka jirtay Soomaaliya, weli dalka waxaa uu wajahayaa khatarta kooxaha xagjirka ah ee Al-Shabaab iyo ISIS, kuwaas oo maamula deegaano balaadhan oo ay deganyihiin bulsho badan, in kasto qeybo kamid ah Soomaaliya laga sameeyey horumar ay horseed u yihiin ciidamada qalabka sida, bulshada deegaanka, Hawlgalka, kumeel gaarka ah ee Midowga Afrika ee Soomaaliya (ATMIS) iyo Saaxiibada caalamiga ah ee kale.

Ilaa iyo maanta, xaaladaha saamaxaya ee ku dhisan fikirka gurucan ee xagjirka ayaa ah arrimo dhabta ah ee ka jira Soomaaliya taasi oo caqabad ku ah ciribtirka argagixisada. aqabadaha waxaa ka mid ah: -

- Bulshooyinka ay colaaduhu saameeyeen oo u nugul xaaladaha ka dhasha xagjirnimida.
- Firaaq ka jira amniga deegannada.
- Lama hayo Cilmi baaris ku filan iyo waxa aan jirin madal lagu wadaago cilmiga ku saabsan fikirka xagjirnimada.
- Majiraan Hanaanka isku-duwida iyo xiriirinta barnaamijyo ka hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka.
- Waxaa liita ama aan jirin hananka shuruucda, siyaasadaha iyo barnaamijyada wax looga qabanayo fikradaha xagjirka ee rabshadaha wata.
- Xirfad darada iyo la'aanta xarumo looga hortago xagjirnimada loogana hadlo khilaafaadka abuuray fogaanshaha taasi oo usuuro gelisay kooxaha xagjirka ah in ay shaqaale ahaan u qortaan dadka jilicsan ama nugul.
- Samaynta iyo hirgelinta barnaamijyada horumarinta ee ka hortagga xagjireynta oo aan si wanaagsan u socon.
- La'aanta hab dhameystiran oo lagu sameynayo dhaqancelin iyo dib-ula midoobid dagaalyahanada xagjiriinta kasoo goostay.
- Waxa aanan jirin fursadaha dhaqan-dhaqaale ee bulshada.
- Maamul xumo, ku xadgudubka ka dhanka ah xuquuqda Aadanaha iyo sarrayn sharciga.

Istaraatijiyaddan wax ay ka qeyb qaadan doontaa xal u helidda caqabadaha halista ah ee kor ku xusan waxayna gacan ka geysan doontaa in la meel mariyo xal waara oo loogu talagalay ka hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ah.

KARTIDA IYO WAXA AN AWOODNO

Dowlada Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka, hay'adahooda, Ciidanka Xoogga Dalka, Booliska, Hay'adda Sirdoonka iyo Nabadsugidda Qaranka (NISA), iyo hawlwadeenada Xarunta Qara nee Tubsan ee Ka Hortagga iyo La Dagaalanka Fikirka Xagjirka iyo saaxiibada beesha caalamka waxa dowrweyn ka qaateen la dagaalanka iyo ka fal-celinta fikirka iyo ficilada xagjiriinta.

Xarunta Qaran ee Tubsan waxa ay isku dubarid iyo korjoogtayn ku samaynaysaa dadaallada looga hortaggayo fikaradaha xagjirnimada rabshadaha wata iyadoo la hawgalayso hay'ada badan iyo saamiley kala duwan si loo fulinayo Istaratijiyada Qaran iyo Qorshe Hawleedka KA HORTAGGA IYO LA DAGAALANKA FIKIRKA XAGJIRKA EE RABASHADAHA WATA. Hawlaha xudunta waxaa kamida kuwan soo socda:

- Isku-dubaridka dadaalada hay'adaha amniga ee hawlaha P/CVE.
- Isku-dubaridka hawlaha iyo kartida dhammaan daneeyayaasha arrimaha P/CVE
- Isku-dubbaridka barnaamijyada iyo hawlaha P/CVE iyada oo la hubinayo in dadaallada qaran ay noqdaan kuwo isku dhafan oo waxtar leh.
- Dejinta istiraatiijiyad iyo Qorsheyaal hortabinta / mudnaanta leh ee heer Federaal iyo heer dowlad goboleed.
- Qiimeynta iyo dib-u-eegista istiraatijiyadda iyo qorshaheeda fulinta.
- Shuruucda, siyaasadaha, iyo qorsheyaasha lagu maamulayo barnaamijyada ka hortagga iyo la dagaalanka fikirka xagjirka ee rabshadha wata.
- In wax lagu kordhiyo dadaalada caalamiga ah ee looga soo horjeeda arrimaha
- Xagjirnimada.

GUUD MARKA ISTIRAATIJIADDA QARAN EE KA HORTAGGA IYO LA DAGAALANKA FIKIRKA XAGJIRKA EE RABASHADAHA WATA.

Istaraatijiyadan waxa ay kusaleysantahay mabaadii'da iyo qiyamka wanaagsan ee kala soocaya kuwa adeegsada rabshadaha ka dhanka ah dadka kale iyo kuwa ay saameynta ka soo gaarto. Islaamku wuxuu dhiirigeliyaa kuwada noolaanshaha nabadda oo ku salaysan caqiidadeena suuban. Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ay si xooggan u canbaareyneysaa qaab kasta oo xadgudub ku ah diinta islaamka oo loo suuro xumeeyo tafsiirkeeda si loogu adeegsado faafinta nacaybka rabshadaha wata. Sidoo kale, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ka go'an in la fuliyo la

```
ERROR: rangecheck
OFFENDING COMMAND: curveto

STACK:

0.000976562
0.380859
-0.000488281
0.383789
-0.00146484
0.387939
-savelevel-
```

Xeer Ra'iisal Wasaare Lr. 158 **Taariikh: 08/06/2024**

XEER: XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA AQOONSIGA IYO DIIWAANGALINTA DADWEYNAHA

XAFIISKA RA'IISUL WASAARAHA
BIXID
10 JUN 2024
EXIT
OFFICE OF THE PRIME MINISTER

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS;

Markuu arkay: Qodobka 97aad faqradda 1aad iyo 2aad; iyo Qodobka 99aad faqradaha (a), (b), (e), (f) iyo (g); iyo Qodobka 100aad faqradaha (a) iyo (d) ee Dastuurka KMG ah ee JFS;

Markuu arkay: Warqadda summaddeedu tahay **WAGF&D/XW/2079/2024** ee ku taariikheysan **05/06/2024** ee Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha Federaalka iyo Dib u Heshiisiinta, kuna saabsan codsiga soojeedinta Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangalinta Dadweynaha.

Markuu arkay: Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.19.76.06.24** ee **06/06/2024**, kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangalinta Dadweynaha** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay;

Markuu tixgaliyay: Muhiimadda uu Dalka u leeyahay Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangalinta Dadweynaha.

Waxa uu Meelmariyay:

Qodobka 1aad :

Go'aan Gole

Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada ee summaddiisu tahay **SHGW.19.76.06.24** ee **06/06/2024**, kuna saabsan ansixinta **Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangalinta Dadweynaha** oo uu Goluhu cod buuxa ku ansixiyay.

Qodobka 2aad:

Hirgalin

Waxaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta loo igmaday in ay hirgaliso, meelmarisana **Xeer-Nidaamiyaha Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaangalinta Dadweynaha.**

Qodobka 3aad:

Dhaqangal

Xeer-nidaamiyahaan waxa uu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-059-24
TAARIIKH : 09/07/2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Gutale
Hantidhowraha Guud Ee JFS

XUKUUMADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
OFFICE OF THE PRIME MINISTER
FEDERAL GOVERNMENT OF SOMALIA

Mudane, Saalax Axmed Jaamac
Ku-simaha Ra'iisul Wasaaraha, Ahna Ra'iisul Wasaare Ku-xigeenka XJFS

2024



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA, FEDERAALKA IYO DIB-U-HESHIISIINTA

XEER-NIDAAMIYAHA SHARCIGA AQOONSIGA IYO DIIWAAN-GELINTA DADWEYNAHA

(Sharci Lr. 009 ee Maarso 20, 2023)

TUSMO

CUTUBKA KOWAAD: QODOBBO GUUD----------4

QODOBKA 1aad: MAGACA XEER-NIDAAMIYAHA----------4

QODOBKA 2aad: QEEXID----------4

QODOBKA 3aad: BAAXADDA----------6

QODOBKA 4aad: UJEEDDADA XEER-NIDAAMIYAHA----------6

QODOBKA 5aad: MABAADI'DA----------7

CUTUBKA LABAAD: NIDAAMKA AQOONSIGA QARAN EE CASRIGA AH IYO XOG-SIDAHA----------7

QODOBKA 6aad: NIDAAMKA AQOONSIGA QARAN EE CASRIGA AH----------7

QODOBKA 7aad: XOG-SIDAHA----------8

CUTUBKA SADDEXAAD: DIIWAAN-GELINTA IYO AQOONSASHADA DADWEYNAHA----------8

QODOBKA 8aad: WAAJIBKA IS-DIIWAAN-GELINTA----------8

QODOBKA 9aad MUWAADINKA HEYSTA JINSIYAD KALE----------9

CUTUBKA AFARAAD: HAB-RAACA DIIWAAN-GELINTA----------9

QODOBKA 10aad: DIIWAAN-HAYAHA GUUD----------9

QODOBKA 11aad: XARUMAHA DIIWAAN-GELINTA----------9

QODOBKA 12aad:DIIWAAN-GELINTA BAAXADDA LEH----------10

QODOBKA 13aad: KAALMEYNTA DADKA NUGUL----------10

QODOBKA 14aad: QABASHADA XOG-HORAADDA----------11

QODOBKA 15aad: QABASHADA XOG-DHALYADA----------12

QODOBKA 16aad: HUBINTA DIIWAAN-GELINTA QOFKA----------12

QODOBKA 17aad: HAB-RAACA SUGIDDA QOFKA----------12

QODOBKA 18aad: HABKA XAQIIJINTA MARKHAATIGA EE XOG-HORAADDA MUWAADINKA----------13

QODOBKA 19aad: XOG-WAREYSIGA HUBINTA XOG-HORRAADDA MUWAADINKA----------14

QODOBKA 20aad: SIXIDDA IYO BEDDELAADDA DAMBE EE XOG-HORAADDA----------14

QODOBKA 21aad: RAADKA SHARCI EE AQOONSIGA SHISHEEYE----------15

CUTUBKA SHANAAD: TIRSIGA AQOONSIGA GAARKA AH----------16

QODOBKA 22aad: ASTEYNTA TIRSIGA AQOONSIGA----------16

QODOBKA 23aad: QAABKA TIRSIGA AQOONSIGA----------16

QODOBKA 24aad: HAKINTA TIRSIGA AQOO----------16

CUTUBKA LIXAAD: NOOCYADA AQOONSIGA QARAN----------17
QODOBKA 25aad: BIXINTA AQOONSIGA QARAN----------17
QODOBKA 26aad: DAABICIDDA IYO BIXINTA KAARKA AQOONSIGA----------17
QODOBKA 27aad: XOGAHA KA SOO MUUQANAYA KAARKA AQOONSIGA----------18
QODOBKA 28aad: XOGAHA KA SOO MUUQANAYA SHAHAADADA AQOONSIGA----------18
QODOBKA 29aad: XAALADAHA LUMIDDA IYO WAXYEELLADA AQOONSIGA----------19
QODOBKA 30aad: DIB-U-DAABICIDDA KAARKA AQOONSIGA----------19
QODOBKA 31aad: DHICIDDA IYO CUSBOONEYSIINTA KAARKA AQOONSIGA----------20
QODOBKA 32aad: KALA-NOQOSHADA KAARKA AQOONSIGA----------20
CUTUBKA TODOBAAD: HAWL-GELINTA ADEEGGA SUGIDDA----------21
QODOBKA 33aad: HIRGELINTA HANNAANKA HUBINTA KAARKA AQOONSIGA----------21
QODOBKA 34aad: SHAHAADO-SIINTA DHINACYADA KU TIIRSAN----------21
QODOBKA 35aad: ISTICMAALKA ADEEGGA SUGIDDA EE DHINACA KU TIIRSAN----------22
QODOBKA 36aad: XOGTA QOFKA EE LALA WADAAGI KARO DHINACYADA KU TIIRSAN----------22
QODOBKA 37aad: BAAHIDA DHINACYADA KU TIIRSAN XOGAHA QOFKA----------23
QODOBKA 38aad: WAAJIBAADKA WARBIXIN EE DHINACA KU TIIRSAN (ADEEG-QAATAHA)----------23
QODOBKA 39aad: TALLAABOOYINKA DHEERIGA AH EE ILAALINTA ADEEGGA SUGIDDA----------23
CUTUBKA SIDEEDAAD: QODOBBO QUBANE AH----------24
QODOBKA 40aad: WAX-KA-BADDEL----------24
QODOBKA 41aad: BURIN----------24
QODOBKA 42aad: CIQAAB----------24
QODOBKA 43aad: DHAQAN-GAL----------25

CUTUBKA KOWAAD
QODOBBO GUUD

Qodobka 1aad:
Magaca Xeer-nidaamiyaha

Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu magacaabaa Xeer-nidaamiyaha Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaan-gelinta Dadweynaha, waxaana lagu dhaqan-gelinayaa "Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaan-gelinta Dadweynaha, Sharci Lr. 009 ee Maarso, 2023".

Qodobka 2aad:
Qeexid

Xeer-nidaamiyahan gudihiisa, haddii aan si kale loogu qeexin, ereyada soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa macnaha ku hor qoran:

1. **Aqoonsi:** waxaa loola jeedaa kaarka Aqoonsiga Qaran, kaarka aqoonsiga shisheeye, Shahaadada Aqoonsiga Qaran, Shahaadada Aqoonsiga shisheeye iyo nooc kasta oo aqoonsi casri ah (digital) oo ay Hay'addu soo saarto ama sameyso, si waafaqsan Cutubka 6aad ee Xeer-nidaamiyahaan;

2. **Tirsi Aqoonsi:** waxaa loola jeedaa lambar aan taxane ahayn oo hal mar la isticmaalayo una gooni ah hal qof, kaasoo qofka leh tilmaan-soocaysa inta uu nool yahay iyo markuu dhinto ka dib;

3. **JFS:** waxaa loola jeedaa Jahmuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

4. **Xog:** waxaa loola jeedaa macluumaad kala duwan oo laga diiwaan-gelinayo qofka, laguna gaarayo go'anka aqoonsiga oo ay ku jiraan xog-horaadda iyo xog-dhalyada;

5. **Xogside:** waxaa loola jeedaa macnaha ku xusan Qodobka 7aad ee xeer-nidaamiyahan;

6. **Xog-horaadda:** waxaa loola jeedaa sida ku cad Qodobka 14aad ee xeer-nidaamiyahan marka laga reebo xog-dhalyada;

7. **Xog-dhalyada:** waxaa loola jeedaa tilmaamaha la xiriira waxyaabaha u goonnida ah qofka ee ka turjumaya qeybo ka mid ah jirkiisa sida faraha, midabka, muuqaalka wejiga iyo qaar kale;
8. **Dad-dhigid:** waxaa loola jeedaa diiwaan-gelin waareysa oo waajib ah si joogto ahna loo diiwaan-gelinayo dhammaan xaaladaha dhalashada, guurka, furiinka, dhimashada iyo ilmo-korsoshada ee khuseeya dadweynaha si waafaqsan shuruucda dha[redacted]ka;

9. **Dan-dhawre:** waxaa loola jeedaa qofka ay maxkamad awood u leh u magacowdo maareynta nolosha, hantida iyo danaha qof kale si waafaqsan shuruucda dhaqan-galka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

10. **Deganaansho sharci:** waxaa loola jeedaa ku noolaanshaha JFS si waafaqsan shuruucda dalka;

11. **Diiwaan-gelin:** waxaa loola jeeda hannaanka qofka looga diiwaan-gelinayo xogta si waafaqsan Sharciga iyo Xeer-nidaamiyahan;

12. **Maamullada Gobollada:** waxaa loola jeedaa maamul-goboleedyada JFS;

13. **Dhinaca ku tiirsan (Dhinaca Adeeg-qaataha):** waxaa loola jeedaa dhinaca shahaado rasmi ah ka haysta Hay'adda si wafaaqsan Qodobka 34aad ee xeer-nidaamiyahan;

14. **Sharciga:** waxaa loola jeedaa Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaan-gelinta Dadweynaha;

15. **Sugid:** waxaa loola jeedaa habka lagu xaqiijinayo in qofku yahay ruuxa uu sheeganayo;

16. **Qof:** waxaa loola jeedaa muwaadinka JFS iyo qof walba oo sifo sharci ah ku degan JFS ee la diiwaan-gelinayo;

17. **Maareeyaha Guud:** waxaa loola jeedaa Maareeyaha Guud ee Hay'adda;

18. **Markhaati:** waxaa loola jeedaa qof ka marag-furi kara muwaadinnimada iyo runnimada xogta qofnimo ee laga diiwaan-gelinayo qofka;

19. **Muwaadin:** waxaa loola jeeda qof kasta oo ah Muwaadin JFS si waafaqsan Qodobbada Dastuurka JFS iyo Shuruucda Dalka ee dhaqan-galka ah;

20. **Nidaamka Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah (Digital National Identification System "DNIS"):** waxaa loola jeedaa nidaamka lagu aasaasay Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaan-gelinta Dadweynaha;

21. **Wasiirka:** waxaa loola jeedaa Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta ee Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya; iyo

22. **Hay'adda:** waxaa loola jeedaa Hay'adda Aqoonsiga iyo Diiwaan-gelinta Qaranka.

Qodobka 3aad:
Baaxadda

1. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu maamulayaa nidaamka Aqoonsiga iyo Diiwaan-gelinta casriga ah ee dhulka JFS.

2. Xeer-nidaamiyahan waxaa lagu dabaqayaa:

    a. diiwaan-gelinta, sugidda iyo aqoonsiga muwaadiniinta;
    b. diiwaan-gelinta shisheeyaha xaq u leh in la diiwaan-geliyo;
    c. bixinta iyo cusbooneysiinta kaarka aqoonsiga Qaranka;
    d. bixinta iyo cusbooneysiinta shahaadada aqoonsiga; iyo
    e. dhinacyada ku tiirsan loo-adeegeyaasha.

Qodobka 4aad:
Ujeeddada Xeer-nidaamiyaha

Ujeeddada xeer-nidaamiyahani waa habsami-u-hirgelinta Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaan-gelinta Dadweynaha, wuxuuna xeerinayaa:

1. In la dhiso lana horumariyo nidaamka diiwaan-gelinta iyo Aqoonsiga Qaran ee casriga ah, kaasoo awood u siinaya hay'adaha dawladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay in:
    a. si gaar ah loo aqoonsado qof kasta oo adeegsanaya aqoonsiga; iyo
    b. lagu sugo qof kasta hab elektaroonig ah si loo fududeeyo helidda adeegyada dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn oo ay ku jiraan safarada dalka gudihiisa.
2. In la dhiso nidaam maamul oo awood u leh xaqiijinta xogaha qof kasta oo xaq u leh diiwaan-gelinta;
3. In nidaamka diiwaan-gelinta iyo Aqoonsiga Qaran ee casriga ah loo fududeeyo qof kasta oo xaq u leh;
4. In la dhaqan-geliyo xaqa helidda Aqoonsi Qaran si waafaqsan Qodobka 4aad ee Sharciga;
5. In la dejiyo hab lagu asteynayo Tirsiga Aqoonsiga gaarka ah iyo bixinta Aqoonsiga qof kasta ee la diiwaan-geliyey;
6. In la dejiyo shuruudaha xaq-u-lahaanshaha iyo habka lagu maamulayo nidaamka diiwaan-gelinta iyo Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah;
7. In la sameeyo hab-raacyo lagu hubinayo xogta la bixiyey xilliga diiwaan-gelinta; iyo
8. In la fududeeyo hirgelin Nidaamka Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah.

Qodobka 5aad:
Mabaadi'da

1. In Qof walba uu xaq u leeyahay in la diiwaan-geliyo sida ku cad Qodobka 4aad ee Sharciga Aqoonsiga iyo Diiwaan-gelinta Dadweynaha.
2. In habka diiwaan-gelinta Nidaamka Aqoonsi Qaran ee Casriga ah loo fuliyo si fudud oo caddaalad iyo sinnaan leh.
3. In Qof kasta oo xaq u leh helo fursadda diiwaan-gelinta gaar ahaan kuwa baahiyaha gaarka ah qaba, kuwa aan waxba aqrin waxna qorin, iyo dadka da'da ah si ay u helaan adeegyada asaasiga ah ee ay u baahan yihiin ee Aqoonsiga ku xiran.
4. In Nidaamka Diiwaan-gelinta Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah loo qaabeeyo, hirgeliyo loona maareeyo si waafaqsan habka ugu wanaagsan oo ay dunidu adeegsato isla markaasna waafaqsan Sharciga.

CUTUBKA LABAAD
NIDAAMKA AQOONSIGA QARAN EE CASRIGA AH IYO XOG-SIDAHA

Qodobka 6aad:
Nidaamka Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah

1. Nidaamka Diiwaan-gelinta Dadweynaha iyo Aqoonsiga Qaranka ee casriga ah waa inuu ka koobnaadaa:
    a) xog-side;
    b) habka Aqoonsiga iyo sugidda oo ka kooban: Tirsiga Aqoonsiga Gaarka ah; Aqoonsi laysku hallayn karo, habka sugidda iyo diiwaannada; iyo
    c) isku-xirka ka dhexeeya arrimaha ku xusan xarfaha (a iyo b) ee faqradda 1aad ee qodobkan.
2. Hay'addu waa inay ka baaraandegtaa goobta ugu maan-galsan uguna fudud dhaqaale iyo farsamo ahaanba ee ay ku shaqo-gelin karto Nidaamka Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah sida:
    a. in uusan Nidaamka Aqoonsiga Casriga ah noqon mid ku tiirsan hal tiknoolajiyad, hal qof ama shirkad iyadoo la tixgelinayo cusbooneysiinta ama horumarinta imaan karta mustaqbalka iyo la-fal-gelidda nidaamyada kale; iyo
    b. in uu noqdo mid ku dhisan tiknoolajiyad adeegsigeedu furan yahay (Open-Source code) [illegible] maamusho, gacantana ku hayso lana fal-geli karta nida[illegible]an.

Qodobka 7aad:
Xog-sidaha

1. Hay'addu waa inay abuurtaa, dhawrtaana 1 (hal) ama ka badan oo diiwaan-gelin danabaysan oo casri ah ama xog-sideyaal kuwaasoo keydinaya arrimaha soo socda:
    a. tirsiga Aqoonsiga Gaarka ah ee qof la diiwaan-geliyey;
    b. xog-horaadda qof oo la diiwaan-geliyey;
    c. xog-dhalyada laga qabtay qof oo la diiwaan-geliyey; iyo
    d. diiwaannada xogaha ay adeegsadeen dhinacyada ku tiirsan (Adeeg-qaataha) ee Nidaamka Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah.
2. Ujeeddada Xog-siduhu waa in ay suurta-gelisaa aqoonsiga iyo sugidda qof la diiwaan-geliyey si waafaqsan Sharciga, xeer-nidaamiyahan iyo xeer-nidaamiye kasta oo la soo saaro si waafaqsan Sharciga.
3. Xog-siduhu waa in uusan ku jirin xog-horaad si toos ah u tilmaamaysa midab, takoor, af, dakhli, ama xaalad caafimaad.
4. Xogta qofka waa in lagu keydiyaa Xog-sidaha hab dahsoon oo aan la aqrin karin lana furi karin haddii aysan Hay'addu oggolaan.
5. Hay'addu waxay Xog-horaadda iyo Xog-dhalyada ku kala keydin kartaa Xog-sideyaal kala gaar ah haddii ay suurta-gal tahay.
6. Hay'addu waxay Xog-sidaha iyo agabkiisa ku haynaysaa, maamulaysaa, xannaanaysaa gudaha JFS.

CUTUBKA SADDEXAAD
DIIWAAN-GELINTA IYO AQOONSASHADA DADWEYNAHA

Qodobka 8aad:
Waajibka Is-diiwaan-gelinta

1. Diiwaan-gelinta iyo Aqoonsiga dadweynaha waa waajib.
2. Hay'addu waa in ay diiwaan-gelisaa shakhsiyaadka soo socda:
    a. muwaadinka JFS;
    b. qofka shisheeyaha ah ee haysta deganaansho sharci ah; iyo
    c. qofka loo aqoonsado qaxooti, magan-gelyo-doon, ama jinsiyad-laawe si waafaqsan sharciyada khuseeya.

Qodobka 9aad:
Muwaadinka Heysta Jinsiyad Kale

Lagama hor-istaagi karo Muwaadinka JFS ee haysta jinsiyad dal kale, qaxooti ama magan-galyodoone ku ah dal kale xaqa nidaamka diiwaan-gelinta dadweynaha iyo Aqoonsiga Qaran ee casriga ah iyadoo lagu saleynayo haysashadiisa jinsiyad dal kale ama ku sugnaanshiyaha xaalad qaxootinimo ama magan-gelyo-doonimo.

CUTUBKA AFARAAD
HAB-RAACA DIIWAAN-GELINTA

Qodobka 10aad:
Diiwaan-hayaha Guud

1. Hay'addu waxay leedahay Diiwaan-haye Guud ee Aqoonsiga Qaranka oo ah Maareeyaha Guud ee Hay'adda.
2. Maareeyaha guud ayaa soo saaraya siyaasado, hab-raacyo, iyo hageyaal lagu faahfaahinayo laguna dhaqan-gelinayo qodobbada xeer-nidaamiyahan.
3. Diiwaan-hayaha Guud, ka sokow waajibaadka iyo awoodaha kale ee Sharciga ama xeer-nidaamiye kale lagu siiyey, wuxuu u xilsaaran yahay hawlaha soo socda:
    a) la-socodka iyo kormeerka dhammaan habka diiwaan-gelinta;
    b) yagleelidda iyo hawl-gelinta xarumaha diiwaan-gelinta ee gudaha JFS si loo diiwaan-geliyo qof kasta oo xaq u leh Aqoonsiga Qaran iyadoo ay ku xiran tahay xaddidnaanta miisaaniyadda; iyo
    c) hawl-gelinta iyo iskudubbaridka xarumaha diiwaan-gelinta ee dalka dibadiisa iyadoo lala kaashanayo Wasaaradda Arrimaha Dibadda ee JFS.
4. Ka dib la-tashiga Wasaaradda Arrimaha Dibadda, hawl-gelinta iyo iskudubbaridka xarumaha diiwaan-gelinta ee dalka dibadiisa si waafaqsan Qodobka 12aad ee Sharciga.
5. Diiwaan-hayaha Guud wuxuu fulinta hawlaha ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan u wakiilan karaa ama la kaashan karaa shaqaalaha Hay'adda si waafaqsan Sharciga iyo xeer-nidaamiyeyaasha Hay'adda.

Qodobka 11aad:
Xarumaha Diiwaan-gelinta

1. Xarumaha diiwaan-gelintu waxay noqon karaan:
    a) xarumaha diiwaan-gelinta ee neggan;
    b) xarumaha diiwaan-geli obile registration center); ama

c) qaabka diiwaan-gelinta danabaysan (online-ah) iyadoo la raacayo hab-raacyada khuseeyo.

2. Muwaadinka degan dalka dibadiisa wuxuu iska diiwaan-gelin karaa Nidaamka Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah isagoo tegaya safaaradda ama qunsuliyadda Soomaaliya ee dalka uu deggan yahay, ama raacaya hab-raacyada lagu xusan xarfka (c) ee farqadda 1aad.
3. Haddii aanay Safaarad ama Qunsuliyad ku lahayn Soomaaliya waddanka uu Muwaadinku deggan yahay, wuxuu iska diiwaan-gelinayaa safaaradda ama qunsuliyadda ugu dhaw dalka uu joogo oo ay hay'addu u asteysay iyadoo la tashanaysa Wasiirka iyo Wasaaradda Arrimaha Dibadda.
4. Nidaamka diiwaan-gelinta iyo Aqoonsiga ee safaaradda ama qunsuliyadda waa in uu la mid yahay nidaamka diiwaan-gelinta iyo Aqoonsiga ee lagu fuliyo gudaha JFS.

Qodobka 12aad:
Diiwaan-gelinta Baaxadda leh

1. Hay'adda ayaa diyaarinaysa qorsheyaal lagu fulinayo diiwaan-gelinta baaxadda leh ee dadweynaha deggan gudaha JFS.
2. diiwaan-gelinta Baaxadda leh waxaa qeyb ka ah isticmaalka xarumaha diiwaan-gelinta guur-guura si loo fududeeyo diiwaan-gelinta miyiga iyo degaannada ka fog magaalooyinka.
3. Hay'addu waa in ay ku wargelisaa dhammaan dadweynaha JFS habka iyo muddada la fulinayo diiwaan-gelinta baaxadda leh iyadoo ku faafinaysaa Faafinta Rasmiga ah ee JFS iyo hababka kale ee warbaahineed.
4. Hay'addu, marka ay fulinayso diiwaan-gelinta baaxadda leh, waxay qaadaysaa tallaabooyinka lagama-maarmaanka ah ee lagu diiwaan-gelinayo qof kasta oo xaq u leh diiwaan-gelinta si waafaqsan faqradda 3aad ee qodobkan.

Qodobka 13aad:
Kaalmeynta Dadka Nugul

1. Shakhsiyaadka soo socda waxaa diiwaan-gelintooda ka kaalmeynaya waalidkooda ama dan-dhawrahooda haddii uu yahay:
   a) qof gaaray da'da qaadashada Kaarka Aqoonsiga balse u baahan kaalmo xaalad caafimaad-darro darteed oo saameysay dhimmirkiisa ama jirkiisa;
   b) qof qaba baahiyaha gaarka ah si waafaqsan Qodobka 1aad faqradda 4aad ee Sharciga Hay'adda Naafada Soomaaaliyeed.
2. Hay'addu waa in ay fududeysaa diiwaan-gelinta gaar ah ee dadka aan waxba qorin waxna aqrin, dadka da'da ah iyo shakhsiyaadka ku xusan faqradda 1aad.

Qodobka 14aad:
Qabashada Xog-horaadda

1. Qofka la diiwaan-gelinayo waa in laga qabtaa Xog-horaaddiisa iyadoo la adeegsanayo foomka diiwaan-gelinta danabaysan:
    a) magaciisa oo afaran haddii uu yahay Muwaadin JFS;
    b) magaciisa oo saddexan haddii uu yahay qof shesheeye ah haystana degganaansho sharci ah;
    c) magaca hooyada oo saddexan;
    d) taariikhda dhalashada;
    e) goobta dhalashada (degmada, gobolka, wadanka);
    f) degaanka uu deggan yahay;
    g) jinsi (lab ama dheddig);
    h) lambarka teleefanka gacanta iyo/ama ciwaanka Email-ka;
    i) xaaladda Sharci ee shisheeye (sharci ku deggan, qaxooti, dal-laawe, magan-gelyo-doon); iyo
    j) lambarka baasaboorka iyo dokumentiyada kale ee socdaalka khuseeya haddii uu qofku shisheeye yahay.
2. Iyadoo aan waxba loo dhimayn xogaha kale ee lagu daabaci karo Aqoonsiga, goobta dhalashada iyo degaanka qofka waxay ka soo muuqanayaan shahaadada Aqoonsiga, hase yeeshee Kaarka Aqoonsiga waxaa ka soo muuqanaya oo keliya degaanka qofka.
3. Foomka diiwaan-gelinta ee qofka waa in lagu caddeeyo macluumaadka soo socda xilliga la diiwaan-gelinayo qofka:
    a. tirsiga tixraaceed ee diiwaan-gelinta;
    b. goobta diiwaan-gelinta (ama qoraal ku saabsan diiwaan-gelin kasta oo toos ah (online); iyo
    c. taariikhda la soo gudbiyey foomka diiwaan-gelinta.
4. Foomka diiwaan-gelinta ee yaalla xarumaha diiwaan-gelinta ama midka online-ka ah waa inuu noqdaa mid la fahmi karo, kuna qoran Soomaali, Carabi, iyo Ingiriis.
5. Si waafaqsan Qodobka 13aad ee xeer nidaamiyahan, waa in laga caawiyo dadka aan waxba aqrin waxna qorin sidii looga buuxin lahaa foomamka diiwaan-gelinta ee yaal xarumaha diiwaan-gelinta iyo xarumaha diiwaan-gelinta guur-guura ee Hay'adda.
6. Qof kasta oo la diiwaan-gelinayo waa inuu saxiixaa foomka diiwaan-gelinta ee yaalla xarunta ama midka danabaysan ka dib marka la hubiyo sugnaanshaha xogta laga diiwaan-geliyey.

Qodobka 15aad:
Qabashada Xog-dhalyada

1. Qofka la diiwaan-gelinayo oo ay u buuxsantay da'da 15 (shan iyo toban) sano jir ama ka weyn waxaa laga qaadayaa raadka faraha 10 (toban) farood, sawirka wejiga ama indhaha inta lagu jiro diiwaan-gelinta.
2. Qofka la diiwaan-gelinayo oo ay u buuxsantay da'da 15 (shan iyo toban) ama ka weyn kaasi oo isku diiwaan-geliyey qaabka danabaysan waxaa laga qaadayaa raadka faraha 10 (toban) farood, sawirka wejiga ama indhaha ka dib markuu yimaado xarunta diiwaan-gelinta Hay'adda ee u dhow.
3. Qofka la diiwaan-gelinayo kama hor-istaagayso haddii aanu awood u lahayn inuu bixiyo qeyb ama dhammaan xog-dhalyada looga baahan yahay. Hay'addu, ka dib marka ay xaqiijiso in uusan qof awoodin bixinta xog-dhalyada, waa inay ka qabataa macluumaadka kale ee uu awoodo sharciguna oggol yahay.

Qodobka 16aad:
Hubinta Diiwaan-gelinta Qofka

1. Hay'addu waa inay ku diiwaan-geliso qofka hannaanka diiwaan-gelinta dadweynaha iyo Aqoonsiga Qaranka ee casriga ah keliya markii:
    a. la hubiyo xog-horaadda si waafaqsan hab-raacyada ku xusan Cutubkan;
    b. la hubiyo xaq-u-lahaanshaha diiwaan-gelinta; iyo
    c. la xaqiijiyo in qofka horay aan loo diiwaan-gelin.
2. Sarkaalka diiwaan-gelinta waa inuu ogeysiiyo sarkaalka kor-joogtaynta haddii uu ku qanci waayo in qofka la diiwaan-gelinayo uusan ka gudbin hubinta ku xusan shuruudaha faqradda (1) ee qodbkan, si loo qaado tallaabooyin dheeraad ah oo lagu hubinayo shuruudahaas.
3. Qofna lama diiwaan-gelinayo haddii uusan buuxin shuruudaha diiwaan-gelinta ee lagu jideeyey Sharciga iyo xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 17aad:
Hab-raaca Sugidda Qofka

1. Qofka la diiwaan-gelinayo waxaa lagu sugi karaa dokumenti caddeynaya xog-horaaddiisa ama markhaati sida ku faahfaahsan qodobkan iyo Qodobka 18aad ee xeer-nidaamiyahan.
2. Muwaadinka JFS waxaa lagu sugayaa dokumenti dawladeed ama dokumenti dawladu aqoonsan tahay oo caddeynaya qofnimadiisa ayna soo saarto DJFS ama Maamul-goboleedyada. Dokumentiyada loo adeegsan karo caddayn lagu sugayo qofka Muwaadinka ah waxaa ka mid ah:
    a. caddeyn Jinsiyadda J
    b. baasboorka Soomaal ayn;

c. caddeymaha dad-dhigidda haddii ay ku caddahay ahaanshihiisa muwaadin JFS;
d. rukhsad wade (Driver license) aan dhacsanayn haddii ay ku caddahay ahaanshihiisa muwaadin JFS; iyo
e. aqoonsi aan dhacsanayn oo muujinaya qabashada xil-dawladeed iyo shaqaale rayid ah oo uu keliya qaban karo muwaadin JFS si waafaqsan sharuucda Dalka.

3. Dokumentiyada caddeynaya qofnimada oo ay bixiyaan hay'adaha gaarka loo leeyahay ee ka diiwaan-gashan DJFS iyo Maamul-goboleedyada waxaa ka mid ah:
    a) shahaado waxbarasho oo ay bixiso xarun waxbarasho oo ka diiwaan-gashan haystana aqoonsiga DJFS ama Maamul-goboleedyada; iyo
    b) dokumentiyada kale ee ay u asteyso Hay'addu.
4. Qofka si sharci ah u deggan dalka waxaa lagu sugayaa dokumenti caddeynaya qofnimadiisa oo ka kooban:
    a) degganaasho Sharci ah oo aan dhacsanayn;
    b) baasaboor ama dokumenti safar; iyo
    c) oggolaanshaha deganaansho waa in uusan ka yareyn 1 (hal) sano.
5. Qaxootiga, magan-gelyo-doonka, iyo dal-laawaha waxaa lagu sugayaa dokumentiy.ada soo socda:
    a) kaarka Qaxootiga (Refugee ID) Soomaaliya;
    b) magan-gelyo-doonka iyo Dal-laawaha waxaa lagu sugayaa dokumenti caddeynaya qofnimadiisa oo ka soo baxay Hay'addaha u xilsaaran arrimahooda.

Qodobka 18aad:
Habka Xaqiijinta Markhaatiga ee Xog-Horaadda Muwaadinka

1. Muwaadinka aan heli karin dokumentiyada looga baahan yahay ee lagu xusay Qodobka 17aad ee xeer-nidaamiyahan, waxaa lagu sugayaa markhaati caddeynaya xog-horaaddiisa.
2. Markhaati waxaa noqon kara oo keliya:
    a) muwaadin haysta Kaarka Aqoonsiga Qaran;
    b) aqoonsi muujinaya qabashada xil-dawladeed ee DJFS ama Maamul-goboleed, ama qabashada xil shaqaale rayidnimo ah oo uu keliya qaban karo muwaadin JFS si waafaqsan sharuucda Dalka; ama
    c) madax-dhaqameedka ka diiwaan-gashan haystana aqoonsiga Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta DJFS iyo Wasaaradaha Maamul-goboleedyada ee u xilsaaran arrimaha diiwaan-gelinta madax-dhaqameedka.

Qodobka 19aad:
Xog-wareysiga Hubinta Xog-horraadda Muwaadinka

1. Marka qofka lagu sugo dokumenti si waafqsan Qodobka 17aad ee xeer-nidaamiyahan, haddii Hay`addu ku qanci weyso dokumentiga uu wato qofka la diiwaan-gelinayo waxaa lala yeelanayaa xog-wareysi lagu xaqiijinayo sax-ahaanshaha xogta uu sheeganayo.
2. Marka muwaaddinka lagu sugayo markhaati si waafaqsan Qodobka 18aad ee xeer-nidaamiyahan; Hay'addu waxay markhaatiga la yeelanaysaa xog-wareysi si loo hubiyo sax-ahaanshaha marag-furkiisa.
3. Weydiimaha xog-wareysiga waa inay ku koobnaadaan arrimaha lagama-maarmaanka u ah diiwaan-gelinta sida xaq-u-lahaanshaha diiwaan-gelinta, xaqiijinta xog-horaadda, iyo xaqiijinta xiriirka ka dhexeeya qofka la diiwaan-gelinayo iyo markhaatiga.
4. Xog-wareysiga waa in lagu qaadaa luqad uu fahmi karo qofka la wareysanayo.

Qodobka 20aad:
Sixidda iyo Beddelaadda Dambe ee Xog-horaadda

1. Iyadoo la raacayo shuruudaha faqradaha (3) iyo (4) ee qodobkan, Hay'addu waa inay abuurtaa hab si fudud loogu sixi karo xog-horaadda Qof kasta oo la diiwaan-geliyey, ama markuu yahay dadka ku xusan Qodobka 13aad ee xeer-nidaamiyahan, waalidkiisa, dan-dhawrihiisa uu awoodo inuu dib-u-eegi karo xog-horaaddiisa ku jirta xog-sidaha.
2. Haddii Qofku uu helo xog ku saabsan xog-horaaddiisa oo si qaldan loo diiwaan-geliyey wuxuu xaq u leeyahay in dib loogu saxo iyadoo loo cusbooneysiinayo xog-horaadda waxaana loo marayaa siyaabaha soo socda:
    a) in uu yimaado xarumaha diiwaan-gelinta ama xarumaha diiwaan-gelinta guur-guura (Mobile registration center); ama
    b) qaab elektaroonik tooska ah (online) iyadoo la raacayo hab-raacyada ay Hay'addu u dejiso.
3. Gefafka qoraal ama xog-horaad ee uu si qaldan u diiwaan-geliyey sarkaal diiwaan-gelin waa in loo saxaa si dhaqsi ah oo u dhib yar Qofka la diiwaan-gelinayo haddii uusan isagu lahayn sababta keentay gef-qoraaleedka ama in si qaldan loo diiwan-geliyo xog-horaaddiisa.
4. Qof kasta oo la diiwaan-geliyey waa inuu ogeysiiyaa Hay'adda isbeddel kasta ee ku yimaada xog-horaaddii hore ay Hay'addu haysay si ay u ahaato mid saxan mar walba.
5. Xog-horaadda wax laga beddelay ee uu soo gudbiyey qofka waa in Hay'addu ay xaqiijisaa si waafaqsan hab-raacyada lagu sheegay Cutubkan ee khuseeya xog-horraadda.
6. Qofku wuxuu codsan karaa isa gaarka ah.

7. Qofka doonaya inuu beddelo xog-horaaddiisa wuxuu codsigiisa/arjigiisa u gudbinayaa maxkamadda degmada uu deggan yahay.
8. Arjiga/codsiga waa in ay ku caddahay xogta la beddelayo, midda cusub ee uu doonayo qofku iyo sababta uu u beddelayo.
9. Maxkamaddu, ka dib markay sugto aqoonsiga qofnimo ee codsadaha kuna qanacdo caddeymaha iyo sababaha codsigiisa ku salaysan yahay, waxay soo saaraysaa go'aan beddelidda magaca codsadaha si waafaqsan sharciyadda iyo xeer-nidaamiyeyaasha khuseeya magac-beddelka.
10. Maxkamaddu waxay u diraysaa nuqul go'aankeeda ah hay'adda u xilsaaran dad-dhigista si ay ugu diiwaan-geliso magaca cusub ay maxkamaddu go'aankeeda ku soo saartay una helo shahaado dhalasho oo ay ku caddahay magaca cusub ee uu qaatay. Maxkamaddu waa inay siiso codsadaha nuqul go'aankeeda ah.
11. Qofku wuxuu codsi xog-beddelid ah oo ay la socdaan nuqullada go'aanka maxkamadda iyo shahaadada dhalashada ah ee cusub u gudbinayaa Hay'adda. Hay'addu markay hesho codsigaas waxay muddo 30 (sodon) maalin shaqo gudahood ah u diiwaan-gelinaysaa xog-horaadda cusub una soo saaraysaa Aqoonsi cusub oo ay ku caddahay xogta la beddelay haddii loo baahdo.
12. Beddelaad kasta oo khuseysa degaanka qofka waxaa lagu caddeynayaa shahaadada degganaanshaha degmada oo ay bixiso dawladda hoose uu qofku deggan yahay.
13. Beddelaadda xog-horaadda qofka si sharci ah u deggan JFS waxaa lagu salayn karaa oo keliya baasaboor, aqoonsiga qaxooti, jinsiyad-laawe ama magan-gelyo-doon.
14. Qofka la diiwaan-geliyey haddii ay u suurta-geli weydo inuu cusbooneysiiyo xog-horaadda lama xanibi karo tirsiga u gaarka ah ama lagalamana noqon karo Aqoonsiga.
15. Qofkii aan la sugi karin xog-horaaddiisa ku dhigan faqradda (1) (a), (b), (c), iyo (d) ee Qodobka 14aad ee xeer-nidaamiyahan waxaa loo raacayaa habka ku cad faqradaha 8aad iyo 12aad ee qodobkan.

Qodobka 21^{aad}:
Raadka Sharci ee Aqoonsiga Shisheeye

Diiwaan-gelinta iyo haysashada kaarka aqoonsiga ee qof shisheeye ah kama dhalanayso wax xuquuq ah ama wax filasho xuquuq kasta oo la xiriira, deganaanshaha qofka, xaq-u-lahaanshaha codeynta ama qabasho xil-siyaasadeed ama mid amni ama xaalad muwaadinnimo.

CUTUBKA SHANAAD
TIRSIGA AQOONSIGA GAARKA AH

Qodobka 22aad:
Asteynta Tirsiga Aqoonsiga

1. Hay'addu waa inay qof kasta oo la diiwaan-geliyey ay siiso tirsi aqoonsi oo u gaar ah ka dib markuu soo dhammeystiro Shuruudaha diiwaan-gelinta aqoonsiga Qaran.
2. Hay'addu waa inay si degdeg ah ugu wargeliso qof kasta oo la diiwaan-geliyey, waalidkiisa, ama Dan-dhawrihiisa email ahaan, fariin-qoraal ah ama warqad loo dirayo qofka la diiwaan-geliyey.

Qodobka 23aad:
Qaabka Tirsiga Aqoonsiga

1. Tirsiga aqonsiga oo ay Hay'addu si mideysan uga bixiso dalka oo dhan waa inuu ka koobnaado tiro 11 (kow iyo toban) aan taxane ahayn oo hal mar la bixinayo.
2. Tirsiga aqoosiga ee loo asteeyey qof la diiwaan-geliyey laguma saleyn karo xogtiisa qofnimo.
3. Hay'addu waxay beddeli kartaa qaabka tirsiga gaarka ah si ay ugu darto hal ama in ka badan oo tirooyin ah oo ku dhisan xisaabta, hubin laga soo xisaabiyey tirooyinka kale si aan kala-sooc lahayn loo soo saaray si waafaqsan qaabka ay go'aamiso Hay'addu.
4. Isbeddel kasta oo ku yimaada qaabka tirsiga gaarka ah wax saameyn ah kuma yeelanayo tirsiyada horay loo siiyey qof kasta oo la diiwaan-geliyey.
5. Qof kasta ee la diiwaan-geliyey waa inuu lahaado tirsi aqoonsi inta uu nool yahay.
6. Tirsi aqoonsi ee la bixiyey ama la siiyey qofka la diiwaan-geliyey lama siin karo qof kale, xitaa ka dib marka qofka la diiwaan-geliyey uu dhinto ama tirsiga aqoonsiga la hakiyo.

Qodobka 24aad:
Hakinta Tirsiga Aqoonsiga

1. Hay'addu waa inay hakisaa tirsiga aqoonsiga gaarka ah ee la siiyey dadka la diiwaan-geliyey ee soo socda:
    a) qof la diiwaan-geliyey ee geeriyooday ka dib 60 (lexdan) maalmood markii dhimashada qofkaas lagu diiwaan-geliyey si waafaqsan Shuruucda Dalka; ama
    b) haddii ay hay'addu u aragtay in hufnaanta nidaamka aqoonsiga Qaran ee casriga ah la wiiqay ee [illegible] arka ah taasoo ay sabab u tahay qaabka ay u soo saart [illegible] ka amniga xogta iyo bed-qabka

kale ee aan ku filnayn in ay ka hortagto waxyeellada la taaban karo ee qofka diiwaan-gashan ee la xiriira tirsiga gaarka ah ama shakhsiyaadka kale.

2. Hay'addu waa inay tirsi aqoonsi gaar ah siisaa qofka nool ee la diiwaan-geliyey qofkaas oo laga hakiyey tirsigiisi hore.
3. Marka ay Hay'addu qof nool oo la diiwaan-geliyey u badesho tirsiga aqoonsiga gaarka ah waa inay hubisaa isla jaan-qaadka tirsiga cusub iyo xogta horay looga qabtay qofkaas ee ku jirta xog-sidaha.

CUTUBKA LIXAAD
NOOCYADA AQOONSIGA QARAN

Qodobka 25aad:
Bixinta Aqoonsiga Qaran

1. Si waafaqsan hab-raaca lagu jideeyey cutubkan, Hay'addu waxay siinaysaa qofka la diiwaan-geliyey Kaararka Aqoonsiyada soo socda:
   a) muwaadinka JFS oo ay u buuxsanto da'da 15 (shan iyo toban) sano ama ka weyn wuxuu helayaa Kaarka Aqoonsiga Qaran; iyo
   b) Qofka shisheeyaha ah ee ay u buuxsanto da'da 15 (shan iyo toban) sano ama ka weyn oo haysta degganaansho sharci ah ee JFS wuxuu helayaa Kaarka Aqoonsiga Qaran ee shisheeye.
2. Hay'addu waxay soo saari kartaa 1 (hal) ama ka badan oo noocyo casri ah ee Kaarar Aqoonsi ee lagu qeexay Cutubka Kowaad, marka wax lagu daro ama laga beddelo muuqaalka Kaarka aqoonsiga.

Qodobka 26aad:
Daabicidda iyo Bixinta Kaarka Aqoonsiga

1. Qof kasta oo la diiwaan-geliyey wuxuu codsan karaa Aqoonsiga xilliga diiwaan-gelinta iyo cusbooneysiinta Kaarka Aqoonsiga marka muddadiisu dhammaato.
2. Qofka la diiwaan-geliyey wuxuu codsan karaa Aqoonsiga ku habboon marka:
   a) qofku yimaado xarumaha diiwaan-gelinta ama xarumaha diiwaan-gelinta ee guur-guura; ama
   b) qaab elektaroonik ah iyadoo loo maraayo online-ka (online) si waafaqsan hab-raacyada Hay'adda.
3. Qeybta Maareynta Aqoonsiga Qaran ee Hay'adda ayaa u xilsaaran hubinta tayada Aqoonsiga la daabacay ka hor inta aan lagu wareejin qofka la diiwaan-geliyey;
4. Marka la hubiyo lana xaqiijiyo aqoonsiga la daabacay, Hay'adda waxay fariin qoraal ama Iimayl (E-mail) ama hab kale ah oo ay Hay'addu dajiso ku wargelinaysaa qofka la diiwaa[illegible]o goobta qaadashada Aqoonsiga:

a) waqtiga iyo goobta qofka diiwaan-gashan uu ka qaadanayo noocyada kaarka aqoonsi; iyo

b) habka lagu hawl-gelinayo kaarka aqoonsiga casriga ah ee la soo saaray.

5. Kaarka Aqoonsiga waa in lagu daabaco laf adag iyo khad raagaysa muddada uu dhaqan-galka yahay Kaarka Aqoonsigu.

Qodobka 27aad:
Xogaha Ka Soo Muuqanaya Kaarka Aqoonsiga

1. Kaarka aqoonsiga qaran ama kaarka aqoonsiga shisheeye waa inay ka soo muuqdaan oo keliya macluumaadka shakhsi ahaaneed ee qofka la diiwaan-geliyey, waxayna iskugu jiraan:
    a. magaca qofka oo afaran haddii uu yahay Muwaadin JFS ama saddexan haddii uu shisheeye yahay;
    b. tirsiga Aqoonsiga gaarka ah;
    c. sawirka wejiga;
    d. taariikhda dhalashada;
    e. jinsiga;
    f. jinsiyadda;
    g. qofka kaarka iska leh saxixiisa;
    h. degaanka uu deggan yahay;
    i. taariikhda la daabacay;
    j. taariikhda dhicidda; iyo
    k. saxiixa Maareeyaha Guud/Mas'uulka kale ee ay Hay'addu magacowday.
2. Kaarka aqoonsiga qaran ama kaarka aqoonsiga shisheeye waxaa kale oo ka soo muuqanaya calaamadda aaladdu akhriso (QR code) iyo/ama laf (chip) keydisa oo keliya xogta qofka ee lagu qeexay faqradda (1) ee qodobkan.
3. Kaarka aqoonsiga qaran iyo kaarka aqoonsiga shisheeye waa in lagu kala soocaa magaca kaarka iyo qaar ka mid ah xogaha ku qoran taasoo ka dhigaysa mid si fudud loo kala saari karo.

Qodobka 28aad:
Xogaha Ka Soo Muuqanaya Shahaadada Aqoonsiga

1. Shahaadada aqoonsiga qaranka ama Shahaadada aqoonsiga shisheeye, waa inay ka soo muuqdaan oo keliya macluumaadka xogta qofka la diiwaan-geliyey, waxayna iskugu jiraan:
    a. lambarka raad-raaca;
    b. magaca qofka oo afaran haddii uu yahay Muwaadin JFS ama saddexan haddii uu shisheeye
    c. tirsiga Aqoonsiga;

d. goobta dhalashada;
e. degaanka uu deggan yahay;
f. jinsiga;
g. taariikhda dhalashada;
h. magaca waalidka/Dan-dhawraha;
i. xaaladda Sharci/jinsiyad ; iyo
j. QR code-ka oo noqonaya mid laga heli karo oo keliya xogta shakhsiga si waafaqsan axkaamta cutubkan.

2. Shahaadada Aqoonsiga qaranka waa in lagu kala soocaa shahaadada aqoonsiga shisheeye magaca shahaadada iyo qaar ka mid ah xogaha ku qoran taasoo ka dhigaysa mid si fudud loo kala saari karo.

Qodobka 29aad:
Xaaladaha Lumidda iyo Waxyeellada Aqoonsiga

1. Qofka diwaan-gashan ee la siiyey Aqoonsiga waa inuu qaadaa tallaabooyin maan-gal ah si uu u sugo amaanka aqoonsiga una ilaaliyo qaab wanaagsan.
2. Shakhsiga diiwaan-gashan ee aqoonsiga casriga ah qaatay waa inuu qaadaa tallaabooyin maan-gal ah si uu u sugo qalab kasta oo lagu keydiyo aqoonsiga casriga ah kana ilaaliyo dadka aan loo fasaxin inay galaan oo isticmaalaan qalabkaas ama kaarka aqoonsiga ee casriga ah.
3. Qofka uu Aqoonsiga Qaranka ka lumo ama laga xado waa inuu si degdeg ah u wargeliyaa Saldhigga Booliska ee ugu dhow iyo xarumaha diiwaan-gelinta ama xarumaha diiwaan-gelinta guur-guura ee Hay'adda ama uu ogeysiiyo Hay'adda iyadoo la maraayo hab-raaca elektarooniga ah (online).
4. Saldhigga Booliska ee la wargeliyey waa inuu baafiyaa Aqoonsiga Qaran ee lumay muddo 30 (soddon) maalin oo shaqo ah gudahood. Marka ay dhammaato muddada 30 (soddonka) maalin ah, saldhiggu wuxuu siinayaa Qofka Aqoonsigiisu lumaya ama laga xaday qoraal caddeynaya in Aqoonsiga qofkaasi lumay ama laga xaday laguna baafiyey muddada ku xusan faqradda (4) ee qodobkan.
5. Haddii Aqoonsiga ay waxyeello muuqata soo gaarto sida jabitaan ama tirtiranka xogta, qofku wuxuu imaanayaa xarumaha Hay'adda, isagoo la imaanaya Aqoonsiga ay waxyeeladu soo gaartay si loogu beddelo.

Qodobka 30aad:
Dib-u-daabicidda Kaarka Aqoonsiga

1. Dib-u-daabicidda Kaarka Aqoonsiga waxaa xaq u leh shakhsiyaadka soo socda:
   a) qofka diiwaan-gashan oo cusbooneysiiyey xog-horaadda ee lagu muujiyey aqoonsiga iyadoo loo marayo hab-raacyada ku cad Qodobka 20aad ee Xeer-nidaamiyahan;

b) qofka diiwaan-gashan ee uu ka lumay ama laga xaday Kaarka Aqoonsiga casriga ah ama la isticmaalay iyadoo aan laga helin oggolaansho shakhsi ama si kale loo fara-geliyey oo uu wargeliyey booliska ama maamulka; iyo
c) qofka diiwaan-gashan oo soo celiyey kaarka aqoonsiga ee ay waxyeelladu gaartay oo codsada dib-u-daabicis.

2. Dib-u-bixinta kaarka aqoonsiga ma beddelayso tirsiga aqoonsiga ee gaarka u ah qofka diiwaan-gashan.

Qodobka 31aad: Dhicidda iyo Cusbooneysiinta Kaarka Aqoonsiga

1. Kaarka aqoonsiga qaran ee muwaadinku wuxuu ku dhacayaa muddo ku siman 10 (toban) sano laga bilaabo taariikhda la bixiyey.
2. Muwaadinka JFS ee si iskiisa uga tanaasulay Jinsiyadda JFS wuxuu Kaarka Aqoonsiga ka dhacayaa taariikhda uu tanaasulkiisu noqdo mid dhaqan-gal ah.
3. Kaarka Aqoonsiga shisheeye wuxuu dhacayaa:
    a. marka ay dhammaato xaaladda degganaashaha sharci ee shisheeye taasoo saameynaysa waqtiga bixinta kaarka aqoonsiga shisheeye; iyo
    b. isbeddel ku yimaado xaaladda sharci ama degganaansho qofka diiwaan-gashan si waafaqsan shuruucda dalka.
4. Qofka diiwaan-gashan wuxuu codsan karaa cusbooneysiinta kaarka aqoonsiga ka hor inta uusan dhicin 90 (sagaashan) maalmood gudahooda iyo waqti kasta oo ka dambeeya, si waafaqsan shuruudaha Qodobka 26aad ee Xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 32aad: Kala-noqoshada Kaarka Aqoonsiga

Hay'addu waxay qof kala noqon kartaa Kaarka aqoonsiga marka:

a. la bixiyo tirsi Aqoonsi aan waafaqsanayn Xeer-nidaamiyahan;
b. tirsi Aqoonsi horay qof ugu diiwaan-gashanaa la siiyo qof kale. Kala-noqoshada waxay keliya saameynaysaa qofka dambe ee la siiyey tirsi Aqoonsi oo horay qof u haystay; ama
c. hay'addu ku qanacdo ama rumaysato in kaarka aqoonsigu uu lumay, la xaday, waxyeello gaartay ama uu burburay, ama haysashada iyo isticmaalidda oggolaansho la'aan.

Qodobka 33aad:
Hirgelinta Hannaanka Hubinta Kaarka Aqoonsiga

1. Hay`addu waa inay dhistaa oo hawl-gelisaa hannaanka hubinta Kaarka Aqoonsiga iyadoo la waafajinayo Nidaamka diiwaan-gelinta Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah si loogu fududeeyo dhinacyada Ku tiirsan inay si sahlan oo qaab elekteroonik ah u sugaan qof kasta oo diiwaan-gashan ee haysta Kaarka Aqoonsiga Qaran ama Kaarka Aqoonsiga Shisheeye.
2. Marka ay Hay'adda u suura-gasho farsamo ahaan waxay horumarin kartaa adeegga sugitaanka taasoo u fududeynaysa dhinacyada ku tiirsan inay si elektaroonik ah u sugaan qof kasta oo diiwaan-gashan ee soo bandhigaya xog-dhalyadooda
3. Hay`addu waa inay dejisaa hab-raacyo iyo hal-beegyo lagula soconayo adeegga sugidda ee laga hirgelinayo lana waafajinayo Nidaamka diiwaan-gelinta Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah oo ay adeegsanayaan dhinacyada ku tiirsan.

Qodobka 34aad:
Shahaado-siinta Dhinacyada Ku tiirsan

1. Hay`addu waa inay siisaa shahaado dhinacyada ku tiirsan (loo-adeegayaasha) marka:
    a. sida uu waajibiyey sharciga ama xeerka ay tahay inay aqoonsadaan qof kasta ujeeddada bixinta adeegyada ama gelitaanka macaamil ganacsi ee dhinacyada ku tiirsan; ama
    b. ganacsiga caadiga ah wuxuu u baahan yahay in la aqoonsado oo la sugo qof kasta oo ay la macaamilayaan ama cidda loo fulinayo adeegga ee la xiriira xogta qofka.
2. Ka hor shahaado-siinta, dhinaca ku tiirsan waxaa waajib ku ah:
    a. in ay Hay'adda u muujiso inay u qalanto ka-mid-ahaanshaha dhinaca ku tiirsan sida ku cad faqradda (1) ee qodobkan;
    b. waxaa jiraya heshiis is-afgarad ee u dhexeeya Hay'adda iyo dhinacyada buuxiyey shuruudaha faqradaha (1) iyo (2) ee xeer-nidaamiyahan, heshiiskaas oo qeexaya waajibaadka, mas'uuliyadda iyo baaxadda helitaanka xogta qofka ee xog-sidaha Hay'adda taal; iyo
    c. In ay u muujinta Hay`adda ku qanacsanaanta iyo inay fulinayaan siyaasadaha lagama-maarmaanka u ah hab-raacyada, iyo u-diyaar-garowga maamul iyo farsamo ahaan inay la wareegto mas'uuliyadda laguna dabaqayo sharciga iyo shuruudaha kale ee Hay`adda iyo heshiisyada is-afgarad ee ay la galeen
3. Hay'adaha dawladda iyo ku ee ay dawladda Soomaaliya u

oggolaato, waxaa xogta lagula wadaagi karaa ka dib ballan-qaadka u hogganaansanaanta sharciga, xeer-nidaamiyahan iyo sharciyada kale ee dalka, Hay'adda ay la galaan heshiisyada waa inay ku caddahay waajibaadka, mas'uuliyadaha iyo baaxadda xogta.

4. Hay`addu waxay ogeysiin iyo ogaysiin la`aan joojin kartaa shahaado-siinta Hay`ad kasta oo ah dhinaca ku tiirsan haddii:
    a. hay`addu marka ay ku qanacdo in dhinaca ku tiirsan uusan hadda buuxin karin shuruudaha qodobkan;
    b. haddii dhinaca ku tiirsan uusan u hoggaansamin qodobbo ka mid ah sharciga ama xeer kasta oo lagu soo saaray Sharciga, sharciga dhawrista xogta, xeer kasta oo lagu soo saaray sharcigaas, heshiis kasta oo is-faham oo Hay`addu la gashay, ama Amar/Ogeysiin/jiheyn ay sameysay Hay`addu.
5. Hay'addu waa inay dhawrto cusbooneysiinta liiska iyo mareegaha dhammaan dhinacyada ku tiirsan (loo-adeegaha) ee qaatay shahaadada iyo kuwa shahaadada laga joojiyey.

Qodobka 35aad:
Isticmaalka Adeegga Sugidda ee Dhinaca Ku tiirsan

1. Haddii aan sharcigu si kale u sheegin, dhinacyada ku tiirsan adeegga sugidda ee Nidaamka diiwaan-gelinta Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah ma heli karaan, mana keydsan karaan xogta qof kasta oo diiwan-gashan iyadoo aan la helin oggolaanshaha qofka xogta leh.
2. Dhinaca ku tiirsan (Loo-adeegaha) waa inay u oggolaadaan qaab kale oo qofka aan diiwaan-gashanayn ee aan awoodin inuu la yimaado Kaarka Aqoonsiga Qaran ama Kaarka AqoonsigaShisheeyea ama aan la awoodin in lagu sugo Nidaamka diiwaan-gelinta Qaran ee Casriga ah inuu caddeeyo qofka uu yahay.
3. Inta laga gaarayo goorta Nidaamka diiwaan-gelinta Aqoonsiga Qaran ee casriga ah lagu baahinayo dalka, ayna suurta-gal noqonayso in la sugi karo dadka iyadoo la adeegsanayo nidaamkaas, dhinacyada ku tiirsan (loo-adeegaha) waxay sii adeegsanayaan habab kale oo maan-galka ah ee lagu sugi karo aqoonsiga qofka, umana diidi karaan adeegga ama isdhaafsiga ganacsi iyagoo ku xiraya sugitaanka nidaamka aqoonsiga qaran.

Qodobka 36aad:
Xogta Qofka ee Lala Wadaagi Karo Dhinacyada Ku Tiirsan

1. Hay`adda ayaa go'aaminaysa xogta qofka diiwaan-gashan taasoo dhinaca ku tiirsan ay tahay in uu ka qaato ama helo ama uu u soo gudbiyo Nidaamka diiwaan-gelinta Aqoonsiga Qaran ee casriga ah ama haddii kale uu adeegsado xogta sugitaanka awgiis si waafaqsan xeer-dimaayahan iyo sharciyada la xiriira.
2. Xogaha la ururiyey, lala w gudbiyey dhinacyada ku tiirsan si waafaqsan faqradda (1) e ay ku koobnadaan xadiga loogu

talo-galay xogta qofka ee ay u baahan yihiin dhinacyada ku tiirsan hawsha sugidda ee sharciga ama xeer-nidaamiyuhu oggol yahay.

Qodobka 37aad:
Baahida Dhinacyada Ku tiirsan Xogaha Qofka

Ka hor inta aysan bilaabin codsashada adeegga sugidda dhinacyada ku tiirsan waa inay shaaciyaan xogta ay uga baahan yihiin dadka diiwaan-gashan:

a. nooca xogta qofka ee lala wadaagayo dhinaca ku tiirsan iyadoo ujeeddadu tahay sugid;
b. ujeeddooyinka dhinaca ku tiirsan iyo qaabka ay u habayn doonaan xogta qofka; iyo
c. hab kale oo maan-gal ah oo lagu sugi karo qofka diiwaan-gashan.

Qodobka 38aad:
Waajibaadka Warbixin ee Dhinaca Ku Tiirsan (Adeeg-qaataha)

Dhinaca ku tiirsan waa inuu si joogta ah Hay`adda u soo siiyaan warbixin habka ay u dejisay Hay'addu isagoo ka jawaabaya xogaha ay codsato ee la xiriira u-hogansanaanta waajibaadka sharciga ama xeer-nidaamiye kasta oo lagu soo saaray sharciga, sharciga dhawrista xogta ama xeer-nidaamiye kasta oo lagu soo saaray sharcigaas, ama Amar/Ogeysiin/jihayn ay sameysay Hay`addu.

Qodobka 39aad:
Tallaabooyinka Dheeriga ah ee Ilaalinta Adeegga Sugidda

1. Hay`addu waa inay dejisaa hab-raacyo dheeri ah oo maan-gal ah oo lagu maareynayo haddii uu qalad ka yimaado shaqada sugidda ee Nidaamka diiwaan-gelinta Aqoonsiga Qaran ee Casriga ah.
2. Ujeeddada hab-raacyada dheeriga ah ee ku xusan faqradda (1) ee qodobkan, waa in Hay'addu hubisaa in qof kasta ee diiwaan-gashan iyo dhinacyada ku tiirsan marka ay gelayaan macaamil ama sameynayaan adeeg-bixin, aysan khalkhal gelin haddii aysan awoodin inay isticmaalaan adeegga sugidda iyagoo aan gelin qalad.

Qodobka 40aad:
Wax-ka-baddel

Haddii loo baahdo in wax ka beddel lagu sameeyo Xeer-nidaamiyahan waxaa Golaha Wasiirrada u soo jeedinaya Wasiirka, iyadoo la marayo hab-raaca sharuucda dalka.

Qodobka 41aad:
Burin

Waxaa la buriyey xeer-nidaamiye ama hab-raac kasta ee ka hor-imaanaya xeer-nidaamiyahan.

Qodobka 42aad:
Ciqaab

1. Qof kasta oo jebiya mid ama ka badan ee qodobbada Xeer-nidaamiyahan waxaa ka dhalanaya ganaaxyada soo socda:
   a. Haddii aan si ka duwan loogu sheegin sharci khuseeya ama falku uusan ahayn dembi lagu muteysto ciqaab ku jirta Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed, qofkii ku xad-gudba qodobbada xeer-nidaamiyahan ama u hoggaansami waaya wuxuu muteysan karaa:
      i) In dokumentiga aqoonsiga lagala noqdo haddii uu ku helay si aan waafaqsanayn Sharciga iyo xeer-nidaamiyihiisa;
      ii) In lagala noqdo shahaadada ama oggolaanshaha sugidda aqoonsiga haddii uu ku helay si aan waafaqsanayn Sharciga iyo xeer-nidaamiyiihiisa; ama
      iii) In laga qaado ganaax lacageed oo uu Guddiga Maamulka Hay'addu jaan-gooyo.
   b. Ganaaxyada ku xusan xarafka (a) ee faqraddan waa lagu soo rogi karaa iyadoo aan waxba loo dhimeyn tallaabooyinka ku xusan xarafka (a) (i, ii, iii) haddii xad-gudubka ama u-hoggaansami-la'aantu tahay mid loo galay si aan niyad-sami lahayn.
   c. Haddii dembiga kale ee sharciga lagu sheegay ay qofka ku caddaato ku xad-gudubka qodobbada xeer-nidaamiyahan,oo aysan keenayn in lagu soo rogo tallaabooyinka ku xusan xarafka (a) ee faqraddan, tallaabooyinkaasi waxay sii ahaanayaan dhaqan-gal haddii aysan ka hor-imaanayn sharci ama amar maxkamadeed aan lagu baabi'in.
2. Ganaaxyada qodobkan looma fasiri karo in ay dhinacna ka hor-istaagayaan xaq uu sharci kale siiyey ama ka q[illegible]harci kale lagu faray.
3. Ganaaxyada xeer-nidaamiyah[illegible]kara Maareeyaha Guud.

Qodobka 43aad:
Dhaqan-gal

Xeer-nidaamiyahani wuxuu dhaqan-gelayaa markuu ansixiyo Golaha Wasiirrada, isla markaana uu saxiixo Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, laguna soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

XEER MADAXWEYNE LR.244 **TAARIIKH: 31-DA LUULYO 2024**

DALLACSIIN SARAAKIIL & SARAAKIIL XIGEENNO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharci Lr. 49 ee soo baxay 1970, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

MARKUU ARKAY: Codsiga Taliyaha Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed

warqadda Summadeedu tahay **XT/CAS/X/T/G/352/2024**, kuna taariikhaysan **25/07/2024**, kuna saabsan Codsi Dallacaad

Saraakiil iyo Saraakiil Xigeenno.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la dallacsiiyo

Saraakiishan iyo saraakiil xigeennadan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa saraakiishan iyo saraakiil xigeennadan magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo dallacsiiyay mid kasta darajada ku hor qoran iyagoo ka tirsan Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed.

Lr.	Lr. Ciidan	Magaca	Darajo Hore	Darajada uu u dallacay
1.	A/5023	Cali Maxamed Cumar	G/Dhexe	G/Sare
2.	A/84	Muxumad Maxamed Cumar	Dhamme	G/Le
3.	A/297	Maxamed Saciid Cabdullahi	Dhamme	G/Le
4.	S/230	Muuse Maxamed Afrax	Dhamme	G/Le
5.	S/164	Cumar Ibraahim Cali	Dhamme	G/Le
6.	A/5143	Faarax Bashiir Xuseen	Dhamme	G/Le
7.	A/283	Maxamuud Yuusuf Kheyre	Dhamme	G/Le
8.	A/232	Mahdi Maxamed Axmed	Dhamme	G/Le
9.	S/3001	Maajid Cabdalla Nuuradiin	Dhamme	G/Le
10.	A/65	Ismaaciil Salaad Maxamed	Dhamme	G/Le
11.	S/196	CabdiJibaar Cali Ibraahim	L/X/Le	Dhamme
12.	A/3001	Anwar Cab	L/X/Le	Dhamme

Lr.	Lr. Ciidan	Magaca	Darajo Hore	Darajada uu u dallacay
13.	S/143	Maxamuud Cabdi Xasan	L/X/Le	Dhamme
14.	A/294	Cali Maxamed Cali	L/X/Le	Dhamme
15.	S/1714	Raage Cali Maxamuud	L/X/Le	Dhamme
16.	A/185	Xaafid Cabdi Xasan	X/Le	L/X/Le
17.	A/163	Cabdi Yalaxow Maxamed	X/Le	L/X/Le
18.	A0/149	Maxamed Nuur Macallin	X/Le	L/X/Le
19.	A/1765	Ilyaas Maxamed Shiikh	X/Le	L/X/Le
20.	A/339	Suldaan Cabdi Maxamuud	X/Le	L/X/Le
21.	A/320	Axmed Jimcaale Maxamed	X/Le	L/X/Le
22.	A/782	Saciid Yuusuf Cabdi	X/Le	L/X/Le
23.	A/165	Salaad Faarax Cabdulle	X/Le	L/X/Le
24.	A/8013	Cusmaan Ibraahim Maxamed	X/Le	L/X/Le
25.	A/99	Qorane Cabdullahi Muuse	X/Le	L/X/Le
26.	A/8022	Madkeer Xasan Maxamuud	X/Le	L/X/Le
27.	A/8015	Xerow Axmed Maxamed	X/Le	L/X/Le
28.	A/8014	Adan Yuusuf Maxamed	X/Le	L/X/Le
29.	A/2413	Cabdi Xayle Foodey	X/Le	L/X/Le
30.	A/123	Amina Axmed Guure	X/Le	L/X/Le
31.	A/122	Xabiibo Cali Xasan	X/Le	L/X/Le
32.	S/97	Sacdiyo Xasan Cali	X/Le	L/X/Le
33.	A/1251	Maxamed Cabdullahi Xasan	X/Le	L/X/Le
34.	1890	Abuukar Maxamed Cali	K/S	X/Le
35.	4699	Liibaan Axmed Ibraahim	K/S	X/Le
36.	2341	Maxamed Xasan Careys	K/S	X/Le
37.	4562	Cabdifataax Muxudiin Cali	K/S	X/Le
38.	1025	Cusmaan Yacquub Cali	K/S	X/Le
39.	722	Xasan Macallin Cali	K/S	X/Le
40.	584	Cabdicasiis Shariif Adan	K/S	X/Le
41.	2241	Maxamuud Axmed Iidow	K/S	X/Le
42.	1568	Adan Cali Xirsi	K/S	X/Le
43.	933	Cabdisalaan Maxamed Ibraahim	K/S	X/Le
44.	8024	Maxamed Xuseen Cali	K/S	X/Le
45.	1626	Cabdikaafi Maxamed Maxamuud	K/S	X/Le
46.	5110	Cabdiraxmaan Cabdiqaadir Cabdi	K/S	X/Le
47.	586	Axmed Xasan Yalaxow	K/S	X/Le
48.	2008	Cali Cabdu[illegible]	K/S	X/Le
49.	1734	Cabdikarii[illegible]	K/S	X/Le

Lr.	Lr. Ciidan	Magaca	Darajo Hore	Darajada uu u dallacay
50.	8185	Ibraahim Ismaaciil Isaaq	K/S	X/Le
51.	2406	Daa,uud Maxamuud Jimcaale	K/S	X/Le
52.	A/583	Liibaan Maxamed Cali	K/S	X/Le
53.	2054	Muxudiin Cali Geesey	K/S	X/Le
54.	1675	Sacad Xuseen Baraki	K/S	X/Le
55.	2456	Adan Cusmaan Malkad	K/S	X/Le
56.	1121	C/qani Galad Cabdi	K/S	X/Le
57.	1660	Fardowso Yuusuf Xasan	K/S	X/Le
58.	8529	Xasan Maxamed Cali	K/S	X/Le
59.	8020	Bashiir Cali Xuseen	K/S	X/Le
60.	4523	Samaan Maxamuud Maxamed	K/S	X/Le
61.	4514	Cali Ibraahim Adan	K/S	X/Le
62.	8652	Nuurto Abuukar Macalin	K/S	X/Le
63.	8129	Cumar Garaad Mursal	K/S	X/Le
64.	1718	Cabdi Ibraahim Nuur	K/S	X/Le
65.	987	Saciid Cali Salaad	K/S	X/Le

Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-1000-24
TAARIIKH 31-10-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Issa Guure
Hantidhowraha Guud ee JFS

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
28 OCT 2024
BY: Lukman Hassan
SAACAD SAXIIX

Madaxweynaha J.F.S

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.246 **TAARIIKH: 31-DA LUULYO 2024**

DALLACSIIN LAYLI SARAAKIIL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay **XTC/XDS/0899/24**, kuna taariikhaysan **25/05/2024**, kuna saabsan Soo jeedin Dallaacaad Layli Saraakiil.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la dallacsiiyo Layli Saraakiishan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa saraakiishan magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo dallacsiiyay mid kasta darajada ku hor qoran iyagoo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Lr.	Lr. Ciidan	Magaca	Darajo Hore	Darajada uu u dallacay
1.	X/36853	Abdikhaliq Mohamed Mohamud	L/Sarkaal	Dhamme
2.	X/36854	Abdinasir Mohamed Ali	L/Sarkaal	Dhamme
3.	X/36866	Ismail Hassan Sodaal	L/Sarkaal	Dhamme

Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya saxeexo, wasaaraha lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
28 OCT 202
BY: SAXIIX

XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAM-105-24
TAARIIKH : 31-10-2024
SAXIIX :
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud ee JFS

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.247 **TAARIIKH: 31-DA LUULYO 2024**

DALLACSIIN LAYLI SARAAKIIL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay **XTC/XDS/0944/24**, kuna taariikhaysan **10/06/2024**, kuna saabsan Soo jeedin Dallaacaad Layli Saraakiil.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la dallacsiiyo Layli Saraakiishan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa saraakiishan magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo dallacsiiyay mid kasta darajada ku hor qoran iyagoo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Lr.	Lr. Ciidan	Magaca	Darajo Hore	Darajada uu u dallacay
1.	X/30759	Saciid Cali Cabdlle Daaha	L/Sarkaal	L/X/Le
2.	X/30763	Saalax Cali Ibraahim Mursal	L/Sarkaal	L/X/Le
3.	X/30765	Cabdullaahi Xuseen Xasan	L/Sarkaal	L/X/Le

Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
28 OCT 2024
BY: Uban Hassan
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAM-706-24
TAARIIKH: 31-10-2024
SAXIIX:
AVV Ahmed Isse Gutale
Hantidhowraha Guud E.F.J.S

Madaxweynaha J.F.S

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.248 **TAARIIKH: 31-DA LUULYO 2024**

DALLACSIIN SARAAKIIL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay **XTC/XDS/0130/24**, kuna taariikhaysan 13**/07/2024**, kuna saabsan Soo jeedin Dallaacaad Saraakiil.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la dallacsiiyo Saraakiishan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa saraakiishan magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo dallacsiiyay mid kasta darajada ku hor qoran iyagoo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Lr.	Lr. Ciidan	Magaca	Darajo Hore	Darajada uu u dallacay
Hoggaanada T.Guud XDS				
1.	X/9335	Maxamed Yariis Aadan	G/Dhexe	G/Le Sare
2.	X/0549	Yaasiin Maxamed Dhuxulow	G/le	G/Dhexe
3.	X/5008	Edban Xuseen Ducaale Nuur	L/X/Le	Dhamme
4.	X/31347	Fahad Cabdilahi Cali Yabarow	L/X/Le	Dhamme
5.	X/35785	Cali Cabdulhi Maxamed	X/Le	L/X/Le
6.	X/11210	C/Raxmaan Maxamed Raage	X/Le	L/X/Le
Hoggaanka Sahanka XDS				
1.	X/13901	Axmed Cabdullaahi Nuure Geesey	G/Dhexe	G/Le Sare
2.	X/16562	Aways Axmed Xasan Barrow	L/X/Le	Dhamme
3.	X/31845	Idil Irad Maxamed Cali	X/Le	L/X/Le
4.	X/34704	Maxamed Cabdulahi Maxamed	X/Le	L/X/Le

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia

T/t	L/Ciidan	Magaca	Darajo	Loo Dallacsinayo
Hoggaanka Hawlgelinta XDS				
1	X/6876	Cali Aadan Shuriye Jimcaale	G/Dhexe	G/Le Sare
2	X/40067	Maxamed Macow Cusmaan	L/X/Le	Dhamme
3	X/34731	Abdiraxan Ahamed Jimale	L/X/Le	Dhamme
4	X/35850	Maxamed Max'ud Sh Mursal	X/Le	L/X/Le
C2				
1.	X/3758	Muxudiin Axmed Maxamud	G/Le	G/Le Dhexe
2.	X/28969	Maxamuud Cabdi Mire Cartan	Dhamme	G/Le
3.	X/28994	Abshir Cismaan Diini Adam	L/X/Le	Dhamme
4.	X/9311	Yusuf Cabdiraxin Aadan	L/X/Le	Dhamme
5.	X/34693	Adil Mohamed Ali	X/Le	L/X/Le
6.	X/35845	Aadan Cali Abyen Nuur	X/Le	L/X/Le
7.	X/34744	Abdifatax Qasim Hashi	X/Le	L/X/Le
8.	X/40667	Maxamed Cumar Macalin	X/Le	L/X/Le
9.	X/35822	Cabdiqani Cali Xuseen	X/Le	L/X/Le
10.	X/35779	Cabdimajiid Xuseen Aadan	X/Le	L/X/Le
11.	X/35878	Cabdicasiis Aadan Axmed	X/Le	L/X/Le
12.	X/8405	Zakariye Maxamed Calasow	X/Le	L/X/Le
13.	X/34695	Abdikariim Maxamud Nuur	X/Le	L/X/Le
Hoggaanka Siyaasada Wacyigelinta XDS				
1	X/10538	Maxamed Xuseen Maxamud	G/Le	G/Le Dhexe
2	X/8808	Baarliin Cali Guuleed Cali	Dhamme	G/Le
3	X/12526	Saalax Abuukar Gabow	X/Le	L/X/Le
Hoggaanka Caafimaadka XDS				
1.	X/24246	Mahad Cabdulaahi Nuur Guuleed	G/Le Dhexe	G/Le Sare
2.	X/17936	Fu'aad Cabdi Cumar	L/X/Le	Dhamme
3.	X/31802	Dr.Mustafe Xuseen Cabdulle	L/X/Le	Dhamme
4.	X31837	Sadiiq Maxamed Faarax	X/Le	L/X/Le
5.	X/31825	Yuusuf Cabdulahi Aadan	X/Le	L/X/Le

T/t	L/Ciidan	Magaca	Darajo	Loo Dallacsinayo
Dhaqaatiirka isbitaalka Xogga				
1	X/31777	Dr.Shukri Xasan Axmed	L/X/Le	Dhamme
2	X/31789	Dr.Cali C/Laahi Warsame	L/X/Le	Dhamme
3	X/31774	Dr.Xasan Cabdillaahi Aadan	L/X/Le	Dhamme
4	X/31854	Dr.C/Fitaax Sacdi Maxamed	L/X/Le	Dhamme
5	X/31782	Dr.Maxamed Cusmaan	L/X/Le	Dhamme
6	X/31792	Dr.Saalax Axmed Saalax Nuur	L/X/Le	Dhamme
7	X/31838	Dr. Cabdillaahi Xasan Maxamed	L/X/Le	Dhamme
8	X/31798	Dr.Faadumo Cabdisamad Maxamed	L/X/Le	Dhamme
9	X/31821	Dr. Cabdulahi Cabdirashid Jaamac	X/Le	L/X/Le
10	X/31832	Dr.Axmed Ibrahim Xasan	X/Le	L/X/Le
Farmashiyaasha Isbitaalka Xogga				
1	X/17934	Mahad Cabdulaahi Nuur Maxamed	L/X/Le	Dhamme
Kalkaaliyaasha Isbitaalka Xogga				
1	X/31840	Cabdirisaaq Maxamud Xayle Axmed	X/Le	L/X/Le
2	X/31815	Nuur Maxamud Maxamed	X/Le	L/X/Le
3	X/31813	C/Casiis Maxamuud Maxamed	X/Le	L/X/Le
4	X/31818	C/Raxmaan Xasan Jimcaale	X/Le	L/X/Le
5	X/31817	Xasan Cali Maxamed Jimcaale	X/Le	L/X/Le
6	X/31812	Maxamed Cali Maxamed Axmed	X/Le	L/X/Le
Shaybaaristayaal				
1	X/31804	Axmed Cali Aadan Ibrahim	X/Le	L/X/Le
2	X/31850	Muxubo Maxamed Xasan	X/Le	L/X/Le
Ururka 62'aad Caafimaadka XDS				
1	X/17956	Axmed Cabdulahi Mayoow Mahad	Dhamme	G/Le
2	X/24248	Amiin Cumar Muuse	X/Le	L/X/Le
3	X/0420	Cali Xasan Maxamuud Kooshin	X/Le	L/X/Le
4	X/35825	Maxamed Cali Cabdi	X/Le	L/X/Le
Hoggaanka Sancada XDS				
1	X/0021	Saciid Cabdi Geele Cabdulle	G/Le	G/Le Dhexe
2	X/27712	Maxmed Axmed Cumar	L/X/Le	Dhamme
3	X/37427	C/Raxmaan Aamiin Maxamed Saciid	X/Le	L/X/Le
4	X/39942	Maxamed Cabdirisaaq Nuur Cilmi	X/Le	L/X/Le
5	X/34714	Maxamed Taliyoow Xussen	X/Le	L/X/Le
Hoggaanka Tababarka XDS				
1	X/11008	Cabdirisaaq Cabdulaahi Axmed	Dhamme	G/Le
2	X/40671	Maxamuud Isxaaq Cabdiraxmaan	L/X/Le	Dhamme
3	X/9336	Cabdicasiis Bare Diirive Dhoore	L/X/Le	Dhamme

T/t	L/Ciidan	Magaca	Darajo	Loo Dallacsinayo
Hoggaanka Dhismaha XDS				
1	X/17951	Cabdiraxmaan Sayid Cali Xuseen	Dhamme	G/Le
2	X/31785	Mahad Axmed Sabriye Jimcaale	L/X/Le	Dhamme
3	X/39964	Cabdulaahi Maxamed Cali	X/Le	L/X/Le
Hanti Dhawrka Ciidanka XDS				
1	X/0058	Cabdiraxmaan Xasan Xaaji Maxamed	G/Le	G/Le Dhexe
2	X/0078	Cismaan Axmed Cumar Cabdi	Dhamme	G/Le
3	X/10374	Cabdifataax Sheekh Cali Isaaq	Dhamme	G/Le
Hoggaanka Xiriirka Dibada XDS				
1	X/21702	Leylo Cali Xasan Maxamuud	X/Le	L/X/Le
2	X/11892	Cabdixakiin Jamaac Xersi Bulaale	X/Le	L/X/Le
3	X/35767	Cabdiwahab Xasan Siciid Mataan	X/Le	L/X/Le
Taliye Ku Xigeenka Ciidanka XDS				
1	X/31799	Mohamed Ali Abdullahi	L/X/Le	Dhamme
Hoggaanka Saadka XDS				
1	X/7045	Cabdi Xuseen Xasan Afrax	Dhamme	G/Le
2	X/17953	Maxamed Cabdiraxman Maxamed	Dhamme	G/Le
3	X/0535	Xuseen Maxamed Caruush Xalane	L/X/Le	Dhamme
4	X/9121	Xasan Maxamed Sheekh Axmed	L/X/Le	Dhamme
Hoggaanka Maamulka Lacagta XDS				
1	X/0067	Fartuun Xasan Jimcaale Maxamuud	L/X/Le	Dhamme
2	X/35762	Cabdulaahi Cabdi Saciid Diiriye	X/Le	L/X/Le
3	X/13853	Maxamed Cabdi Gurey	X/Le	L/X/Le
Hoggaanka Gadiidka & G.G. XDS				
1	X/26256	Abshir Maxamed Maxamud Cali	G/Le	G/Le Dhexe
2	X/4966	Daahir Ali Maxamuud Maxamed	L/X/Le	Dhamme
3	X/13565	Xasan Cali Raage Indhoole	X/Le	L/X/Le
Hoggaanka Isku xirka Shacabka & XDS				
1	X/11724	Iimaan Maxamud Cali Axmed	G/Dhexe	G/Le Sare
2	X/9447	Ibraahim Cabdi Maxamed Xasan	G/Le	G/Le Dhexe
3	X/0201	Muxidiin Cali Fiqi Cusmaan	Dhamme	G/Le
Hoggaanka War-Isgaarsiinta XDS				
1	X/7852	Muxidin Nur Maxamed Hilowle	G/Le	G/Le Dhexe
2	X/11000	Waris Cilmi Cali Maxamed	L/X/Le	Dhamme
3	X/5766	Da'ud Mohamud Roble Qasim	X/Le	L/X/Le

T/t	L/Ciidan	Magaca	Darajo	Loo Dallacsinayo
Hoggaanka Qorsheynta & Abbaabulka XDS				
1	X/37981	Yacquub Axmed Ibraahim	Dhamme	G/Le
2	X/16586	Sakariye Maxamed Cumar	L/X/Le	Dhamme
3	X/36846	Jamaal Xasan Cali	L/X/Le	Dhamme
4	X/40066	Cabdiwaaxid Ibraahim Saxane	L/X/Le	Dhamme
Hoggaanka Hubka iyo Rasaasta XDS				
1	X/0164	Xaawo Bare Axmed	L/X/Le	Dhamme
2	X/28992	Farxaan Ibraahim Axmed	X/Le	Dhamme
3	X/14697	Saalax Gadri Axmed	X/Le	L/X/Le
4	X/14896	Abdirisaaq Axmed Yuusuf	X/Le	L/X/Le
5	X/39944	Abuukar Axmed Xasan	X/Le	L/X/Le
Ururka Sahanka & Wardoonka XDS				
1.	X/26735	Isaaq Aadan Axmed Maxamed	G/Le	G/Le Dhexe
2.	X/29011	Axmed Cali Ibraahim Cabdi	X/Le	L/X/Le
Ururka 32'aad Sancada XDS				
1	X/27778	Maxamed Ibraahim Axmed	L/X/Le	Dhamme
2	X/6521	Cismaan Xasan Cabdulle Cabdi	X/Le	L/X/Le
Horinta War-Isgaarsiinta XDS				
1	X/0092	Ibraahin Xuseen Shacbaan	X/Le	L/X/Le
2	X/8479	Maxamed Wehliye Maxamed Afrax	X/Le	L/X/Le
3	X/31512	Cabdiraxmaan Saalax maxamed	X/Le	L/X/Le
Hab Maamuuska				
1	X/12653	Saahid Jaamac Faarax	G/Le	G/Le Dhexe
2	X/10804	Aadan Faarax Absuge Ducaale	Dhamme	G/Le
3	X/13131	Mustaf Khaliif Faarax Maxamed	X/Le	L/X/Le
4	X/10760	Maxamed Cabdulaahi Maxamed	X/Le	L/X/Le
5	X/35778	Cabdale Cisman Maxamed	X/Le	L/X/Le
Ururka 37'aad B/Dableyda				
1	X/9395	Bare Maxamed Mocow Axmed	G/Dhexe	G/Le Sare
2	X/9403	Cabdiraxmaan Maxamuud Cismaan	G/Le	G/Le Dhexe
3	X/6691	Cabdulaahi Maxamed Cosoble	G/Le	G/Le Dhexe
4	X/31514	Bashiir Cabdullaahi Cabdille Axmed	Dhamme	G/Le
5	X/5449	Cusmaan Giiroow Axmed Geelle	Dhamme	G/Le
6	X/0997	Cabdiraxmaan Cadaan Axmed Nur	L/X/Le	Dhamme
7	X/2020	Cabdi Calasow Absuge Aybakar	L/X/Le	Dhamme
8	X/30735	Yaxye Maxa	X/Le	L/X/Le

Address: Office of the President, Villa Somalia, Mogadishu, Somalia

T/t	L/Ciidan	Magaca	Darajo	Loo Dallacsinayo
10	X/8079	Cabdulqaadir Xasan Faarax	X/Le	L/X/Le
11	X/6671	Muxudiin Xasan Taakow	X/Le	L/X/Le
12	X/9840	Abuukar Maxamed Maxamud Iman	X/Le	L/X/Le
13	X/17972	Aadan Xasan Sheikh	X/Le	L/X/Le
14	X/9906	Cabdifitaax Cabdulaahi Max'ed	X/Le	L/X/Le
Gudiga La Shaqeynta Turkida				
1.	X/9908	Maxamed Axmed Xasan Cumar	G/Le	G/Le Dhexe
2.	X/27714	Maxfuud Abdimajid Xaaji Axmed	Dhamme	G/Le
3.	X/31860	C/Kariim Axmed Maxamed	Dhamme	G/Le
4.	X/37429	Cabdifitaax Maxamed Cabdi	Dhamme	G/Le
5.	X/31861	Abdifitah Abdishukur Ibrahim	Dhamme	G/Le
6.	X/31859	Mubarak Ali Jamac Gaashaan	Dhamme	G/Le
7.	X/36845	Maxamed Cumar Badal	L/X/Le	Dhamme
8.	X/36857	Cadnaan Axmed Maxamed	L/X/Le	Dhamme
9.	X/36864	Zakariye Cabdi Casiis Faarax	L/X/Le	Dhamme

Qodobka 2aad

Saraakiishan kor ku tilmaaman waxay xaq u yeelanayaan wixii xuquuq ah ee uu sharcigu oggolyahay.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
28 OCT 2024
BY: Luban Hassan
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-197-24
TAARIIKH: 21-10-2024
SAXIIX
AVV Ahmed Isse Qutan
Hantidhowraha Guud Ee JFS

Madaxweynaha J.F.S.

Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XEER MADAXWEYNE LR.249 **TAARIIKH: 31-DA LUULYO 2024**

DALLACSIIN SARAAKIIL

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Xeer Lr.15 ee soo baxay 06/04/1960, kuna saabsan Dhismaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed warqadda Summadeedu tahay **XTC/XDS/0984/24**, kuna taariikhaysan **13/07/2024**, kuna saabsan Soo jeedin Dallaacaad Saraakiil.

MARKUU GARWAAQSADAY: Mudnaanta ay mudan yihiin in la dallacsiiyo Saraakiishan.

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkan, waxaa saraakiishan magacyadoodu hoos ku xusan yihiin loo dallacsiiyay mid kasta darajada ku hor qoran iyagoo ka tirsan Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

Lr.	Lr. Ciidan	Magaca	Darajo Hore	Darajada uu u dallacay
Kulliyadda Turksom XDS, Horinta ilaalada TurkSom				
1.	X/10728	Cabdinaasir Bile Ibraahim	Dhamme	G/Le
2.	X/6333	C/Qadar Ibrahim C/Qadir Xasan	Dhamme	G/Le
3.	X/16552	Cabdulqadir Xasan Cusmaan	Dhamme	G/Le
4.	X/27716	Abdifatah Suleyman Nur	L/X/Le	Dhamme
5.	X/27715	Mohamed Osman Mohamed	L/X/Le	Dhamme
6.	X/27717	Ali Aweys Yusuf	L/X/Le	Dhamme
7.	X/27719	Abdinasir Ahmed Ibrahim	L/X/Le	Dhamme
8.	X/31856	Ibrahim Faysal Mohamed	L/X/Le	Dhamme
9.	X/31509	Abdiwahid Mohamed Nur	L/X/Le	Dhamme
10.	X/31855	Mohamed Yusuf Ahmed	L/X/Le	Dhamme
11.	X/31506	Sharif Abdirahman Jama	L/X/Le	Dhamme
12.	X/40663	Ahmed Hassan Ali	L/X/Le	Dhamme

Lr.	Lr. Ciidan	Magaca	Darajo Hore	Darajada uu u dallacay
13.	X/4493	Xuseen Cabdi Aadan	X/Le	L/X/Le
14.	X/9110	Mohamed Ali Kasim	X/Le	L/X/Le
15.	X/24253	Adan Jeylani Bana	X/Le	L/X/Le
16.	X/14709	Ilyas Ahmed Mohamed	X/Le	L/X/Le
17.	X/28974	Mohamed Abukar Muse	X/Le	L/X/Le
18.	X/34727	Abdi Shakur Omar Abdulle	X/Le	L/X/Le
19.	X/35786	Awale Mohamed Hussein	X/Le	L/X/Le
20.	X/35833	Mohamed C/Rahman Mohamed	X/Le	L/X/Le
21.	X/41019	Ahmed Mohamed Nur	X/Le	L/X/Le
22.	X/41020	Ahmed Yasin Siyad	X/Le	L/X/Le
23.	X/41021	Abdirazak Hassan Mohamed	X/Le	L/X/Le
24.	X/30771	Abdinasir Omar Yusuf	X/Le	L/X/Le
25.	X/40670	Abdimajid Yusuf Mo,Alim	X/Le	L/X/Le
26.	X/21197	Kediye Hassan Kediye	X/Le	L/X/Le
27.	X/37440	Maxamuud Cabdisamad Cumar	X/Le	L/X/Le
Horinta Ilaalada Turksom XDS				
28.	X/25568	Maxamed Ciise Tifow	L/X/Le	Dhamme
29.	X/4990	Maxamed Maxamuud Cismaan	L/X/Le	Dhamme
30.	X/11234	Cabdulahi Muxumed Maxamud	X/Le	L/X/Le
Ur. 1'aad Gaarka ah Gor Gor XDS				
1.	X/1140	Aadan Maxamed Farax Nuur	Dhamme	G/Le
2.	X/11270	Ibraahim Maxamed Axmed	L/X/Le	Dhamme
46. "Xilliga Tijaabada" waxaa loola jeedaa xilli shaqaalaha iyo loo-shaqeeyahaba uu midba midka kale iska tijaabinayo.

47. "Hannaanka Dhaqaajinta Matoorka" waxaa loola jeedaa adeegsiga wax kasta oo dhaqaaqa, wax dhaqaajiya ama sahla dhaqaajinta bir ama matoor.

48. "Digniin Gaar ah" waxaa loola jeedaa ogaysiis la soo saaray ee ku aaddan qof kasta oo ku hawlan ama gacanta ku haya hawl kasta oo:

b) Ka hor imaaneysa qodobbada xeerkan ama habraac kasta oo hoos yimaada;
t) Ku lug leh ama ku lug yeelan kara mustaqbalka, khatar dhaawac halis ah ee shaqaale, taas oo keeni karta in hawlihii la qaban waayo ilaa:
i) Xaaladaha ku qoran digniinta lagu qanco;
ii) Xadgudubyada jira la saxo.

49. "Goob Munaasab ah" waxaa loola jeedaa goob shaqo ah oo laga heli karo waxa qof ku u baahan karo ee buuxinaya shuruudo iyo degganaan ku filan oo munaasab ah, oo ay ku jiraan isbeddello lagama maarmaan ah oo ku habboon, sidoo kale aan ku keeneynin culays aan loo baahnayn, lana ilaaliyo dadka lixaad la'aanta ah si ay u helaan qanaaco iyo jimicsi la siman dadka kale, iyadoo la tixgelinayo dhammaan xuquuqda aadanaha iyo xorriyadda asaasiga ah.

50. "Shaqaale Dhimis"waxaa loola jeedaa hoos u dhaca shaqada, mihnadda ama xirfadaha, iyada oo aan qofka shaqaalaha ahi eed ku laheyn, taas oo ay keentay shaqo ka saaris uu loo-shaqeeyuhu ku dhaqaaqey, taas oo inta badan keenta in hawshii xafiiska ay baaba'do shaqo siintuna yaraato.

51. "Diiwaangeliye" waxaa loola jeedaa diiwaangeliyaha ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyeyaasha ee lagu tilmaamay xeerkan.

52. "Xuquuq" waxaa loola jeedaa dhammaan lacagaha la siiyo shaqaale gutay ama ka soo dhalaalay shaqadiisa, oo ay ku jiraan wax kasta oo lagu dhiirigelinaayo shaqaale.

53. "Khatar" waxaa loola jeedaa suurtagalnimada dhacdo saameyn xun ku yeelata nolosha sida naafonimo oo ka timaadda walxo dadka am dhibaato u keeni karta, cawaaqib aad na uu ka dhasho.

54. "Nadaafad Munaasab ah" waxaa loola jeedaa hagaajinta meelaha kaadida, falaashka musqusha, biyo-fariisiga, tubbada qashinka qaadda,qashinka, musqusha, godadka musqusha iyo wax kasta oo la mid ah oo munaasab u ah dadka naafada ah iyo qaab kasta oo fududey naya adeegga fayadhawrka goobta shaqada.

55. "Iskii u Shaqeyste" waxaa loola jeedaa qof iskii u shaqaysta si uu faa'iido ama kasab u helo isaga oo aan heshiis shaqaalenimo cidna la gelin ama kula jirin

56. "Uumi-kuleyliye" waxaa loola jeedaa weel kasta oo xiran, oo uumiga ku soo saaraa cadaadis ka badan ka jawiga dhulka dushiisa ah, oo ay ku jiraan qalabka loo isticmaalo karkarinta biyaha lagu shubo weel kasta oo noocaas ah, iyo weel heer kulkiisu sareeyo oo loo isticmaalo kuleylka si loo helo tamar/uumi.

57. "Shaqo Joojin" waxaa loola jeedaa shaqo joojin ay si wada jir ah u sameeyaan shaqaale, ama diidmo midaysan ama diidmo ay si guud iskula fahamsan yihiin shaqaaluhuna in ay joojiyaan shaqada oo aanay sii wadin, iyada oo ujeeddadu tahay in ay ka helaan dalabkooda loo-shaqeeyaha ama ururro loo-shaqeeye ee loo-shaqeeyehoodu xubin ka yahay si ay u helaan dalabkooda ku aaddan khilaafka shaqada si waafaqsan xeerkan.

58. "Qandaraas-Hoosaad Qaate" waxaa loola jeedaa qof ama shirkad qandaraas-hoosaad ka qaata qandaraasle isaga ooqoranayashaqaaleloo baahan yahay, wuxuu na heshiis qoraal ah la galayaa qandaraaslihii si loo fuliyo shaqo cayiman ama ay uqabtaan adeegyada lagu heshiiyey oo leh qiima go'an.

59. "Walxo" waxaa loola jeedaa wax kasta oo dabiici ah ama gacan ku sameysi ah ama maaddo ah, ha ahaadeen adke, dareere, gaas ama uumi.

60. "Qeybiye" waxaa loola jeedaa qof ama shirkad iibiye ah maadooyin ama walax ku bixinaya hab iib ah, kireyn, shaqo siin ama iibsasho, haddii uu yahay maamule ama wakiil.

61. "Hawl" waxaa loola jeedaa xaddiga shaqada ee qofka shaqaalaha ahi uuqaban karo caadi ahaan maalintii, marka la tixgeliyo sida uu arkomadaxdiisa tooska ah ee shaqada.

62. "Urur Shaqaale" waxaa loola jeedaa urur kasta oo shaqaale oo ujeeddadiisa kowaad tahay ilaalinta iyo difaacidda danaha shaqaalaha.

63. "Dhaqaajiyaha Mashiinka"waxaa loola jeedaa wax kasta oo mashiin wareejiya, taayar, tanbuurad, garaangar, nidaam adkeeya ama dabciya garaangarta, buleejada, shiingiyahaama qalab kale oo muhiim ah kaas oo dhaqaaqa hore u gudbiya ama ka hela mashiin kasta ama qalab kasta.

64. "Meel Shaqo" waxaa loola jeedaa meel kasta ama dhismooyin oo ay shaqaale ku shaqeeyaan.

65. "Isticmaale" marka laga hadlayo warshad ama mashiin, waxaa loola jeedaaqof isticmaale ah oo danihiisa uga faa'iideysta warshad ama mashiin, kaas oo xaq u leh ilaalintooda, hase yeeshee, waxaan ku jirin kireystaha iyo qofka loo shaqaaleeyey inuu ku shaqeeyo mashiin iyo warshad wax soosaar.

66. "Gariir" waxaa loola jeedaa tamarta makaanikada iyo korontada ah oo u gudubta jirka qofka iyada oo gilgisha ama gariirisa dhibaato ama ıa ku ah caafimaadka qofka.

67. "Haweeney" waxaa loola jeedaa qof dumar ah oo 18 sano jirta ama ka weyn.

68. "Shaqaale" waxaa loola jeedaa qof kasta oo fulinaya hawl ama shaqo oo loo qabanayo loo-shaqeeye lala galay heshiis gaar ah ama mid guud oo afka ama qoraal ah, ama farsamo barad ah ama tijaabo ah, taas oo uu xuquuq ku kasbanayo.

69. "Goob Shaqo" waxaa loola jeedaa dhul kasta, dhisme, meel, markab ama doon, diyaarad ama shay shaqaalaha u dhow, agtiisa, gudahiisa, ama korkiisa ah inta uu ku jiro muddada shaqada.

70. "Qol Shaqo" waxaa loola jeedaa qol kasta ama qeyb gooni ah, kaas oo qofka shaqaalaha ahi uu ku shaqeeyo.

71. "Qaabka Ugu Xun ee Shaqo Siinta Carruurta" marka loo eego shaqo siinta da'yarta, ama u isticmaalidda fal kasta oo ay ka mid tahay:

b) Dhammaan habdhaqanka la midka ah addoonsiga sida iibinta, kala gudbinta, rahan u haysasho iyo ka ganacsiga carruurta suuqa madow ee addoonsi ahaan loo qabsado, khasab ugu shaqaysiga carruurta ama u adeegsiga iyo hubeyntooda carruurta xilliga colaadaha;

t) Isticmaalidda, qorista, u soo bandhigidda ama ku qalqaalinta ka ganacsiga jirka carruurta si loo soo saaro sawirro ama filimo anshax xumi ah;

j) Isticmaalidda, qorista, u soo bandhigidda ama ku qalqaalinta carruurta falal sharci darro ah, sida soo saaridda iyo kala gudbinta daroogada suuqa madow, sida ku qeexan xeerarka, heshiisyada iyo cahdiyada caalamiga ah ee khuseeya carruurta;

x) Shaqooyin kaas iyo kuwa la nooc ah ama duruufaha iyo xaaladaha ku xeeran ee lagu fuliyo, oo dhaawici kara caafimaadka, bedqabka iyo niyadda carruurta.

72. "Baare Shaqo" waxaa loola jeedaa Baaraha Shaqada Degmada ama Baaraha Shaqada Gobolka.

73. "Maxkamadda awoodda u leh" waxaa loola jeedaa Maxkamadda Gobolka, Maxkamadda Sare.

Qodobka 3aad
Ku Dhaqmid

1. Qodobbada xeerkan ama xeer-hoosaadkiisa waxaa ay khuseeyaan ama lagu dhaqayaa dhammaan loo-shaqeeyayaasha iyo shaqaalaha, oo ay ku jiraan kuwa ka shaqeeya adeegga dadweynaha iyo hay'adaha dawladda haddii aanu jirin shuruudo iyo xaalado adeeg shaqo oo lagu maamulo sharci kale.

2. Qodobbada Xeerkan ama xeer nidaamiyayaasha hoos yimaada laguma dabaqayo ciidamada qalabka sida (Xoogga Dalka, Booliska, Asluubta iyo Nabad Sugidda) marka laga reebo kuwa lagu shaqaaleeyey nidaam rayid ah.

CUTUBKA 2AAD
MABAADDI'DA GUUD

Qodobka 4aad
Xaqa Xoriyadda Mihnadda

Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu doorto mihnadda shaqo ee uu rabo.

Qodobka 5aad
Mas'uuliyadda Ilaalinta Xeerka Shaqada iyo Aqoonsiga Kaalinta Shaqaalaaha Waxaa Iska Leh Dowladda

1. In ay ilaaliso shaqada noocyadeeda kala duwan iyo hirgelinteeda haddii ay ahaan lahayd shaqo hay'adeed ama mid fulineed, mid aqooneed, mid farsamo ama mid xoogsi.

2. In ay dhiirrigeliso xaaladaha saamaxaya in qofka si buuxda u adeegsado xuquuqihiisa, isaga oo gudanaya waajibaadka ku xusan qodobka 4^{aad} ee xeerkan.

3. In ay aqoonsato ahmiyadda kaalinta weyn ee shaqaaluhu ku leeyahiin horumarinta dhaqaalaha dalka, iyada oo la dhiirrigelinayo, lana xaqiijinayo ka qeybgalkooda xagga qorsheynta iyo maareynta wax-soo-saarka.

Qodobka 6aad
Sinnaanta iyo Takoor La'aanta

1. Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu dadka kale ula sinnaado fursadaha shaqa siinta iyo mihnadaha iyada oo aan lagu takooreyn wax ku shuqul leh: sinjigiisa, midabkiisa, ceyntiisa jinsi (lab iyo dheddig), luqaddiisa, diintiisa, ra'yigiisa siyaasadeed iyo wax kale oo uu aaminsan yahay, jinsiyaddiisa (dhalashadiisa), qoladiisa ama bulshada uu ka soo jeedo, naafonnimo, uur, xaaladdiisa maskaxeed, da'diisa ama in uu qabo fayruska dila difaaca jirka aadanaha (HIV Aids), waxaana sidoo kale qofka shaqaalaha ah waajib ku ah in uu dad kale u oggolaaddo xuquuqaha kor lagu xusay ee sinnaanta iyo takoor la'aanta.

2. Takoorku waa fal-dambiyeed lagu muteysanayo ciqaab si waafaqsan Xeerarka Dalka.

3. Waxaa waajib ku ah wasiirka iyo dhammaan saraakiisha wasaaradda, dhammaan hay'adaha dawladda, iyo loo-shaqeeyeyaasha in ay dhiirrigeliyaan oo ay dammaanad qaadaan u sinnaanta fursadaha, si loo cirib tiro takoorka dhanka shaqasiinta.

4. Xaqa u sinaanta fursadaha shaqo iyo daryeelka shaqaalaha ee la xiriira shaqa-siinta iyo nooca mihnadda iyo waajibaadka dhiirrigelinta iyo xaqiijinta xaqa u sinnaanta fursadaha shaqada ee ay leeyihiin shaqaalaha waddanka, waxaa si lamid ah xaqaas yeelanaya shaqaalaha doolka ah iyo qoysas kooda ee heysta sharciga deganaanshaha dalka.

5. Iyada oo aan waxyeello ku keeneynin guud ahaanba faqradda 3^{aad} ee qodobkan ee la xiriirta shaqaalaha doolka, si looga hortago, loona cirib tiro wixii xadgudub ah ee loo geysan karo shaqaalaha doolka ah iyo qoysaskooda, ayaa waxaa wasiirka looga baahan yahay, isaga oo la tashanaya hay'adaha kale ee dawladda ee ay khuseyso iyo wakiillada ururrada loo-shaqeeyayaasha iyo wakiillada xoogsatada:

b) Si loo hubiyo dabaqid aan takoor laheyn ee la xiriirta dhalashada, isirka, diinta ama jinsiga (lab iyo dheddig) ee doolka si sharci ah u daggan gudahaJamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, loona siiyo daryeel la mid ah muwaadiniinta dalka sida: xurmeynta arrimaha shaqo iyo habraacyada fursadaha shaqo siinta, xaaladaha iyo shuruudaha shaqo siinta, tababarka,xorriyadda ka qeybgalka iyo wada xaajoodka gorgortanka guud,badbaadada bulshada, habraacyada sharciyeed, khidmadda shaqo siinta, fiiga caymiska ee shaqaalaha, dammaanad qaadka amniga shaqo siinta, helidda beddel shaqo siin, ka nasinta shqada iyo dib u tababaridda shaqaalaha;

t) In la qaado dhammaan wixii tallaabooyin lagama maarmaan ah, kuna haboon:

i. In la xakameeyo dhaqdhaqaaqa qarsoodiga ah ee shaqo siinta doolka iyo shaqo siinta aan sharciga waafaqsaneyn ee doolka;

ii. Si wax-ku-ool ah loo ogaado shaqo siinta sharci darrada ah ee shaqaalaha doolka ah, isla markaana loo qeexo laguna qaado ciqaabta ku aaddan abaabulka dhaqdhaqaaqa shaqo siinta sharciddarada doolka ah, si looga macaasho ama si kale looga faa'iideysto;

iii. Loogu hortago qaban qaabiyayaasha dhaqdhaqaaqyada sharci darrada ah ee qarsoodiga ah, kuna wajahan muhaajiriinta tagaya, sii gudbaya, soo galaya xuduudaha Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya, iyo ka hortagidda kuwa shaqo siiya shaqaalaha doolka ah ee sifo sharci darra ah dalka ku soo gala;

iv. Ka hortigidda fududeynta dhoofinta, safrinta iyo soo dhoweynta doolka ah si loo shaqo siiyo.

6. Loo-shaqeeye waxaa:

b) Waajib ku ah inuu ka saaro siyaasadda shaqo siinta iyo habraacyada shaqada wixii xadgudub iyo takoorid ah ee ku jira;

t) In aanu si toos ah ama si dadban midna u oggolaan in la faquuqo ama la dhibaateeyo qof shaqaale ah ama mustaqbalka shaqaale noqon raba, iyada oo:

i. Lagu saleynayo sinji, midab, ceyn, jinsi (lab iyo dheddig), luqad, diin, aragti siyaasadeed ama ra'yi kale, Jinsiyad, haybta ama asalka bulsho, naafannimo, uur, xaalad maskaxeed, da' ama fayruska dila difaaca jirka aadanaha (HIV Aids);

ii. Lagu saleynaayo arrimo kale oo kala soocid, gooni u saarid iyo kala mudnaysiin ah, taas oo baabi'in karta ama wax u dhimi karta usinnaantii fursadaha shaqo siinta iyo mihnadda. wasiirka ayaa caddeyn kara jiritaanka arrintaas ka dib markii uu la tashado wakiillada loo-shaqeeyeyaasha iyo ururrada shaqaalaha ee jooga meelaha laga soo sheegay faquuqa, iyo hay'adaha kale ee ay khuseyso;

iii. La eegayo dhinacyada shaqo-qoridda, tababarka, dallacaadda, heshiiska iyo shuruudaha shaqa siinta, shaqo ka joojinta iyo arrin kasta oo la xiriirta shaqasiinta;

iv. Lagu saleynaayo xubinamada urur shaqaale ama hawlaha sharciyadda leh ee ururrada shaqaalaha.

7. Waa sharci daro takooridda qofka shaqa[illegible] of kasta oo raadiniya shaqo siin iyo xaquuqdiisa lagu aqoonsaday xeerkan.

8. Waxyaabaha soo socda ma'ahan takoorid ku saleysan xeerkan:

b) Fal kasta oo ku aaddan sixidda arrimaha la xiriira kor u qaadiddasinnaanta iyo baabi'inta faquuqa ka jira goobta shaqada;
t) In aad u kala saartid, u kala reebtid ama u kala dooratid qof kasta dhanka shaqada sababo shuruudaha shaqadaas u baahan tahay darteed.

9. Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah inuu shaqaalihiisa siiyo xuquuq siman oo leh qiimo isu dhigma ama isla eg kuwooda isku shaqada ah.

10. Marka eedeyn takoor ah la soo jeediyo, loo-shaqeeyaha waa culays dul saaran in uu caddeeyo in takoorka uusan ka dhicin goobta shaqada sida lagu soo eedeeyay, falka takooriddaas ama iska bariyeelidda ma ahan mid ku saleysan sababaha lagu caddeeyay qodobada xeerkan.

Qodobka 7aad
Shaqo khasab ah

1. Waxaa reeban shaqo qoris khasab ama jajuub ah nooc kasta oo ay tahay

2. Qofna looma oggola in uu qof kale ka caawiyo qorista, tahriibinta iyo isticmaal khasab ah ama shaqo jajuub ah.

3. Erayga ah "Shaqo khasab ama jajuub ah" laguma dabbaqayo hawlaha soo socda:

b) Shaqo ama adeeg kasta oo si sharci ah loogu baahday, marka loo eego shaqo adeeg ciidan ah ama shaqo dhammaanteed leh dabeecad ciidan sida difaaca qaranka, ama marka loo baahdo gurmadka iyo wax ka qabashada masiibooyinka qaran, laakiin aaney ku jirin shaqo qoris khasab ama jajuub ah iyo askarayn carruureed ee loo adeegsado colaadaha hubeysan;
t) Shaqo ama adeeg kasta oo laga rabo maxbuus uu ku dhacay xukun ay meel marisay maxkamad awood u leh, taas oo aanu ku jirin qof loo qoray ama lagu meeleeyay shakhsi yaad gaar ah, shirkado ama ururro, hawshaas ama adeeggaas lafulinayo iyada oo ay kormeereyso dushana ka maamuleyso hay'ad dawladeed;
j) Shaqo ama adeeg kasta oo fudud oo ay qabsanayaan xubnaha bulshadu, iyaga oo u arkay danahooda gaarka ah, loona gartay in ay ka mid tahay waajibaadka caadiga ah ee bulshada ka saaran dalkooda, iyada oo la tixgelinaayo xubnaha bulshada ama wakiilladoodu xaq ay u leeyihiin in lalatashado;
x) Shaqo ama adeeg kasta oo lagu fuliyey xaalad degdeg ah oo jirta awgeed, ama guud ahaan ama duruuf kasta oo halis gelin karta jiritaanka ama ladnaanta dadka qeyb ka mid ah ama idil ahaantood.

4. Qofkii lagu helana jabinta qodobkan, waxaa la horgeynayaa maxakamadda awoodda u leh, waxaana lagu dhaqayaa habraacayada ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 8aad
Xadgudub Damac Galmo iyo Faduullin (Faduullin, ama Qash-qashaad Dhaqan Xumo ah)

1. Xadgudub, faduulin, qafal-xumo iyo qash-qashaad (Sexual Harassment) shaqaale waxay ka dhacdaa goobaha shaqada marka loo-shaqeeyaha, wakiilka loo-shaqeeyaha ama shaqaalaha kale:

b) Uu si toos ah ama si dadban uga codsado qof shaqaalaha ka mid ah galmo, taataabasho jirka ah ama dhaq-dhaqaaqyo kale oo galmo la xiriira oo ay ka mid yihiin:

i. Ballanqaad mudnaan siin leh ee xagga shaqada;
ii. Hanjabaad in dhibaato shaqada ah ka soo gaari doonto;
iii. Hanjabaad ku saabsan xaaladda shaqo siinta hadda ama mustaqbalka ee qofka shaqaalaha ah, haddii ballanqaadkaas ama hanjabaadaas ay caddahay ama maldahan tahay.

t) Inuu adeegsado erayo damac galmood xambaarsan oo qoraal ah ama af ah;

j) Inuu adeegsado waxyaabo muuqaal ah oo dareen galmo kicin leh;

x) Inuu muujiyo dhaq-dhaqaaq jireed oo damac galmo leh taas:

i. Oo uu dhibsanayo ama aanu dhibsaneyn qofka shaqaalaha ahi ee lagula kacayo;
ii. Oo sida ay tahay, raad xun ku reebeysa shaqadiisa qofka shaqaalaha ah, waxqabadkiisa shaqo ama ku qanacsanaantiisa shaqada;
iii. Oo ujeedadeedu tahay abuuris handadaad, cabsi gelin, qash-qashaad, iyo jawi nacayb leh ee bay'ada lagu shaqeeyo.

2. Loo-shaqeeye kasta waa in uu la tashadaa shaqaalaha ama wakiilladooda, oo uu soo saaro, kuna soo jeediyo dareenka shaqaalaha bayaan la xiriira siyaasad ku saabsan xadgudubka damaca galmo iyo faduullin, taas oo ay lagama maarmaan tahay in ay ku jiraan:

b) Qeexidda xadgudub damac galmo iyo faduullin oo waafaqsan sida ku xusan qeybtan;

t) Qoraal:

i. Mamnuucaya xadgudub damac galmo, qash-qashaad, tilmaamo maldahan iyo fuduullin;
ii. Muujinaya dammaanad qaad ah in loo-shaqeeyuhu uu ku dhaqaaqi doono tallaabooyin lagu xaqiijinayo in shaqaalaha aan loo geysan doonin xadgudub damac galmo iyo faduullin;
iii. In tallaabo anshax-marineed oo ku habboon laga qaado qof kasta oo xadgudub damac galmo, qash-qashaad, tilmaamo maldahan iyo faduullin kula kaca qof shaqaalaha ka mid ah;
iv. In loo-shaqeeyuhu sameeyo habraacayo shaqaaluhu ku soo gudbiyaan cabashadooda la xiriirta xadgudub damac galmo, qash-qashaad, tilmaamo maldahan iyo faduullin loo geysto;
v. In loo-shaqeeyahu qarivo magaca cabtaha ama nooca xaaladaha cabashadiisa, marka la[illegible] ortii ay shaacintu lama huraan noqoto si loo qaado tallaabooy[illegible] saxayo.

3. Loo-shaqeeyaha waa in uu si deg deg ah oo madax banaani ku jirto uu u baaro wixii cabasho ah ee ku aaddan xadgudub damac galmo iyo faduullin leh, isla markii caddaato cabashadaas, waa in uu u gudbiyaa hay'adaha sharciga si loogu qaado dacwo waafaqsan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 9aad
Xoriyadda ku Biiridda

1. Shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay;

b) In uu ka qayb galo sameynta urur shaqaale ama xirriiro ururro shaqaale;
t) In uu ku biiri karo urur shaqaale;
j) In uu ka tegi karo urur shaqaale.

2. Qof kasta oo shaqaale ah ama shaqo raadinaya waa in aan lagu takoorin in uu isticmaalay xuquuqda xeerkan siinayo darteed.

3. Loo-shaqeeye kasta wuxuu xaq u leeyahay:

b) In uu ka qayb qaato sameynta urur loo-shaqeeye ama xiriir ururro loo shaqeeye;
t) In uu ku biiro urur loo-shaqeeye ama xiriir ururro loo-shaqeeye, si waafaqsan dastuurka ururradaas;
j) In uu ka baxo urur loo-shaqeeye ama xiriir ururro loo-shaqeeye.

4. Loo-shaqeeye waa in aan lagu takoorin in uu isticmaalay xuquuqda xeerkan siinayo darteed.

5. Shaqaale ama loo-shaqeeye kasta waxa uu xaq u leeyahay in aanu ku biirin urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye ama xiriir urur ama ururro shaqaale ama loo-shaqeeye, isaga oo aanan luminayn xuquuqdii sii sharciga aheyd.

Qodobka 10aad
Xuquuqda Shaqaaluhu Waa Lama Taabtaan

1. Sida xeerkan qabo, xuquuqda la siiyay qofka shaqaalaha ahi, ma'aha mid laga gaari karo heshiis lagu diidayo, lagu dhimayo ama lagu xaddidayo, heshiis kasta oo noocaas ah na waxaa laga soo qaadayaa wax kama jiraan.
2. Xuquuq ama daryeel kasta oo horey loo-shaqeeyuhu u siiyey shaqaale, isaga ikhtiyaarkiisa ama heshiis lagula galay, kaas oo shaqaalaha faa'iido dheeraad u ah ayaa mudnaanta leh marka loo eego kuwa ku xusan xeerkan.

Qodobka 11aad
Qodobada Lagu Xallinayo Khilaafaadka Shaqada

1. Khilaafaadka aan xalkooda laga heleynin qodobbada xeerkan iyo heshiiskii shaqo ee qofka lala saxiixday, waa in lagu gaaraa go'aan waafa[illegible]cada Islaamka, mabaadii'da sinnaanta, mabaadii'da guud ee shuruucda shaqada ama[illegible] talooyinka ururka shaqaalaha adduun

ay saxiixday Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, mabaadii'da xeerka caadiga ah ee aan ka hor imaaneyn kuwa xeerka shaqada iyo curfiga.

2. Haddii la isku khilaafo fasiraadda ama dhaqan gelinta shuruucda ku saabsan arrimaha shaqada, waxaa la qaadanayaa fasiraadda iyo dhaqan gelinta u roon shaqaalaha.

QEYBTA II:
MAAMULKA, KORMEERKA IYO BAARISTA SHAQADA

CUTUBKA 3AAD:
MAAMULKA HEER WASIIR

Qodobka 12aad
Wasiirka

1. Wasiirka mas'uulka ka ah arrimaha shaqada, waxaa lagu magacaabayaa si waafaqsan Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

2. Wasiirka, waa madaxa ugu sarreeya maamulka wasaaradda u qaabilsan arrimaha shaqada.

3. Awoodaha iyo waajibaadka shaqo ee wasaaradda waxaa ka mid ah:

b) In ay xaqiijiso u hoggaansanaanta qodobada xeerkan ama xeer nidaamayaasha halkan ku dhigan ama sharci kasta oo nidaaminaya arrimaha shaqada, shaqo siinta, ilaalinta iyo daryeelka shaqaalaha;

t) In ay dejiso siyaasado, xeerar, tilmaamo iyo barnaamijyo la xiriira shaqada iyo shaqo siinta;

j) In ay ka caawiso, markii laga codsado, ururrada shaqaalaha diiwan gashan iyo ururrada loo-shaqeeyayaasha ee diiwangashan ama loo-shaqeeyeyaal ama xiriiradooda iyo qoridda heshiisyada guud ee shaqada;

x) In ay qaaddo talaabooyinka ku habboon si loo xalliyo khilaafaadka shaqada ee ka dhex dhasha hay'adaha heer qaran ama khilaafaadka culeyska gaarka ah leh;

kh) In ay jiheyso waxbarashada iyo tababarrada xirfadeed ee shaqaalaha iyo meeleynta kuwa shaqodoon ka ah;

d) In ay mas'uul ka noqoto dhammaan arrimaha ku saabsan xiriirrada shaqada, duruufaha shaqada, shaqo siinta shaqaalaha, badqabkamihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada, xoogsatada ama dhaqdhaqaaqa muruqmaalka iyo tirakoobka shaqada;

r) In ay magacawdo saraakiil lagama maarmaanka u ah in ay adeegsadaan awoodaha xeerkan lagu siiyay iyo socodsiinta hawlaha Wasaaradda islamarkaa na ay bixiso tilmaamaha ku habboon adeegsiga awoodaha iyo waxqabadka.

4. Si waafaqsan xeerkan iyo shuruucda kale ee hagta adeegga bulshada, wasiirka waxa uu magacaabayaa saraakiisha soo socota:

b) Gudoomiyaha Guddiga Sare Shaqada Federaalka;

t) Agaasimaha Shaqada

j) Agaasimaha Badqabk a iyo Caafimaadka Goobta Shaqada;

x) Diiwaanhayaha Ururrada Shaqaalaha iyo Urrurrada Loo-shaqeeyayaasha;

kh) Saraakiil kale oo lagama maarmaan u ah ujeeddooyinka maamulka shuruucda la xiriira shaqada iyo shaqo siinta.

5. Wasiirka inta aanu magacaabin saraakiisha sare ku xusan wuxuu hubinayaa in lagu soo xulay tartan iyo daah furnaan.

6. Wasiirka waa in uu xaqiijiyaa saraakiisha magacaaban gudasha awooda hooda iyo waxqabadka hawl-gudasha dooda si habsami leh isugu duwan si loo gaaro halbeegyada hawlaha wasaaradda.

7. Wasiirka, isaga oo adeegsanaya awooddiisa, gudanayana hawlihiisa shaqo, waa in uu si joogta ah u ilaaliyaa mabaadii'da iyo nuxurka seddex geesoodka, kalana tashadaa wakiillada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyeyaasha arrimaha la xiriira siyaasadaha, xeerarka iyo ku dhaqanka khuseeya ama saameeya danaha shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha.

Qodobka 13aad
Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka

1. Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka ayaa mas'uul ka ah nidaaminta iyo kormeerka shaqada iyo xiriirrada shaqo siinta, dabagalka, xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruuc kasta oo kale ee shaqada, si loogu nidaamiyo shaqada iyo xiriirrada shaqo siinta.

2. Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka wuxuu si qoraal ah u wakiilan karaa sarkaal kasta oo shaqo qeyb ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa, isaga oo:

b) Ku xiraya duruufaha awood u wakiilashada, isaga oo wax ka beddelaya ama kala noqonaya wakiilnimada waqti kasta;

t) Wax-ka-beddeli karaa ama ka kaaftoomayaa go'aannada uu gaaro qofka awooddaas loo wakiishay.

Qodobka 14aad
Agaasimaha Shaqada

1. Agaasimaha shaqada ayaa mas'uul ka ah nidaaminta iyo kormeerka maamulka shaqada, dabagalka, baarista ama xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruucda kale ee shaqada si ay u nidaamiyaan maamulka shaqada.

2. Agaasimaha shaqada wuxuu si qoraal ah ugu wakiilan karaa sarkaalka shaqada qeyb kasta oo ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa, isaga oo:

b) Ku xiraya duruufaha awood u wakiilashada, isaga oo wax ka beddelaya ama kala noqonaya wakiilnimada waqti kasta;

t) Wax ka beddeli karaa ama ka kaaftoomayaa go'aannada uu gaaro qofka awooddaas loo wakiishay;

Qodobka 15aad
Agaasimaha Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobta Shaqada:

1. Agaasimaha badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada ayaa mas'uul ka ah diiwaangelinta, nidaaminta iyo kormeerka dhammaan goobaha shaqada iyo dabagalka ama xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruuc kasta oo kale ee shaqada si loo nidaamiyo badqabka, caafimaadka iyo daryeelka goobta shaqada.

2. Agaasimaha badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada wuxuu si qoraal ah ugu wakiilan karaa sarkaal kasta ee badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada qeyb kasta oo ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa, isaga oo:

b) Ku xiraya duruufaha awood u wakiilashada, isaga oo wax-ka- beddelaya ama kala noqonaya wakiilnimada waqti kasta;

t) Wax-ka-beddeli karaa ama ka kaaftoomayaa go'aannada uu gaaro qofka awooddaas loo wakiishay.

Qodobka 16aad
Saraakiisha kale: Magacaabidda, Awoodaha iyo Hawlaha

1. Saraakiisha wasiirku u magacaabay si waafaqsan qodobka 12 Farqadda (4) Xarafk (*kh*) waxaa loo magacaabi karaa:

b) Saraakiil shaqo;
t) Saraakiil shaqo siin;
j) Saraakiisha badqabka iyo caafimaadka Goobta shaqada.

2. Sarkaalka shaqadu, iyada oo looga jeedo dabagalka ama xoojinta ku dhaqanka xeerkan iyo shuruuc kasta oo kale ee shaqada, kuna saabsan xiriirrada shaqada iyo shaqo siinta, waxa uu:

b) U baahan karaa in loo soo daabaco galalka ama faylasha shaqada ee ku jira keydka xasuus reebka (Arkiifiyo) loo-shaqeeyaha si uu:

i. U baaro oo hubiyo keydka galalkaas;
ii. Nuqul ka reebto gal walba oo loo soo daabaco.

t) Uga baahan karaa qof kasta oo shaqeynaya ama shaqaale kasta in uu u soo gudbiyo wixii xog ah ee uu awood u leeyahay, iyada oo laga eegayo:

i. Magacyada iyo cinwaannada dadka shaqada la siiyey ama cidda shaqada laga helay;
ii. Lacagta loogu tala galay shaqada.

j) baarayaa:

i. Qof kasta oo sarkaalka shaqadu u arko in ay jirto sabab maangal ah uu ku rumeysto inuu yahay ama ahaan jiray shaqaale;ama
ii. In loo-shaqeeyuhu qofkaas, ama adeegihiisu ama wakiilkiisu ka shaqaaleeyay goobta shaqada ee loo-shaqeeyaha, waxaana looga baahan yahay in qofkaas uu saxiixo caddeyn uu ku xaqiijinayo in uu ka run sheegay warbixintii laga qoray iyo dhammaan waxyaabihii laga wareystay.

x) Sarkaalku wuxuu si xor ah u baarayaa saacad kasta habeen ama maalin. wuxuuna geli karaa, kormee) uu baarayaa dhulka, guryaha iyo

dhismooyinka kale ogeysiis la'aan, taas oo uu sarkaalku u heysto sabab maangal ah oo uu ku rumeysan karo in qof shaqaale ahi deggan yahay ama uu ku shaqeeyo si loo hubiyo dhaqan galka xeerkan;

kh) Sarkaalka shaqada wuxuu si xor ah oo ogeysiis la'aan ah saacad kasta, habeen ama maalin dalban karaa:

i. In loo-shaqeeyuhu uu u soo daabaco dukumintiyada tilmaamaya shaqaalaha sida loo shaqaaleeyey;

ii. In shaqaale kasta uu u soo daabaco dukumintiyada tilmaamaya shaqo siintiisa.

d) Baarayaa oo nuqul ka reebanayaa diiwaanka, buugga keydinta iyo dukumintiyada kale ee la xiriira ama u muuqda in ay la xiriiraan shaqo siinta, waxaa kale oo uu la wareegayaa dukumintiyada koobaya diiwaanka, buugga ama keydka xasuus reebka kale haddii ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in caddeyn muujineysa xadgudub lagu sameeyay xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada;

r) Gelayaa, baarayaa oo hubinayaa dhammaan musqulaha (lab iyo dheddig), goobaha kale ee nadaafadeed iyo socodka biyaha;

s) Uu baarayaa oo hubinayaa dhammaan cunnooyinka la siiyay ama u muuqda in la siinayo shaqaalaha, wuxuuna ka qaadanayaa labo muunad (Sample) oo la tijaabinayo, isla markaasna uu goobjoog ka yahay loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa, iyada oo labadii muunadood si xafidan loo xirayo, mid ka mid ahna loo reebayo loo-shaqeeyaha;

sh) Uu amrayaa in dhammaan dhismayaasha iyo goobaha ay shaqaalaha deggan yihiin ama ay ku shaqeeyaan in xaaladdooda nadaafadeed laga dhigo mid hagaagsan oo aad nadiif u ah;

dh) Iyadaoo aanay waxba u dhimmeyn awoodaha kale ee hay'adaha xeerilaalinta ee heer federaal ama qof kale toona, wuxuu billaabayaa dacwo oogis madani ah ama mid fal-dambiyeed ah oo ku saabsan qodobbo xeerkan oo la jebiyay ama xadgudub loo-shaqeeyuhu ku sameeyay ama sharci kasta oo shaqaale;

c) La wareegayaa shaqaale kasta oo tuhun ka galo in uu carruur yahay, laguna shaqaaleeyay sifo ka soo horjeedda xeerkan iyo shuruucda kale ee shaqada, wuxuuna u celinayaa waalidkiisa, xannaaneeyihiisa ama ciddii kale ee ku habboon;

g) Bixinayaa amarro laga rabo loo-shaqeeyaha inuu u hoggaansamo qodobbada xeerkan;

f) Fulinayaa hawlaha iyo tilmaamaha, wuxuu na adeegsanayaa awoodaha kale ee uu siiyay Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka.

3. Haddii sarkaalka shaqada uu qaato, diiwaan, gal, keyd-buug ama dukumintiya kale si uu uga guto waajibkiisa, Sarkaalku waa inuu u reebaa loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa warqad caddeyn rasmi ah in uu ka hayo dukumintigaas.

4. Sarkaalka shaqada wuxuu gali karaa dhexdhexaadin laba dhinac oo khilaaf ka dhexeeya, si uu u xalliyo khilaafaadka ku xusan xeerkan iyo sharci kasta oo ku saabsan xiriirka shaqada iyo shaqo siinta.

5. Iyada oo ujeeddadu tahay uruurinta xogta siinga shaqada, sarkaalka shaqadu waxa uu adeegsanayaa awooodahiisa, isaga oo keligii xlaha soo socda ama la kaashanaya saraakiisha kale ee shaqada:

b) Wuxuu dalbanayaa in loo soo daabaco galalka shaqo siinta ee uu u hayo loo-shaqeeyuhu si uu:

i. U baaro, fatisho, uuna hubiyo xogta ku jirta galalkaas;
ii. Nuqul uga reebto shay walba u baahan yahay.

t) Wuxuu ka dalbanayaa qof kasta oo shaqada ku jira ama dhammaystay ama shaqaale ka baxaya in ay usoo gudbiyaan wixii xog ah ee ay hayaan ee ay awood u leeyihiin bixinteeda oo ku saabsan:

i. Magacyada iyo cinwaannada dadka shaqada loo diray ama kuwa shaqada soo qabtay; iyo
ii. Xaddiga lacageed ee lagu bixiyay shaqada.

j) Sarkaalka shaqada wuxuu si xor ah oo ogeysiis la'aan ah saacad kasta, habeen ama maalin, dalban karaa:

i. In loo-shaqeyuhu uu u soo daabaco dukumintiyada tilmaamaya shaqo siinta shaqaale kasta;
ii. In shaqaaluhu soo daabaco dukuminti kasta oo la xiriira hannaanka shaqo siintiisa;

x) Baarayaa:

i. Qof kasta oo sarkaalka shaqadu uu u arko in ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in uu yahay shaqaale ama ahaan jiray shaqaale;
ii. In loo-shaqeeyuhu qofkaas, ama adeegihiisu ama wakiilkiisu ka shaqaaleeyay goobta shaqada ee loo-shaqeeyaha, waxaana looga baahanyahay in qofkaas uu saxiixo caddeyn uu ku xaqiijinayo in uu ka run sheegay warbixintii laga qoray iyo dhammaan waxyaabihii laga wareystay.

kh) Baarayaa oo nuqul ka reebanayaa diiwaanka, buugga keydinta iyo dukumintiyada kale ee la xiriira ama u muuqda in ay la xiriiraan shaqo siinta.waxaa kale oo uu la wareegayaa dukumintiyada koobaya diiwaanka, buugga ama keydka xasuus reebka kale haddii ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in caddeyn muujineysa xadgudub lagu sameeyay xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada;

d) Fatashayaa, oo nuqul ka mid ah ka sameynayaa dhammaan keydka liiska shaqaale ee loo-shaqeeye ee ka hawlgala meel ka baxsan goobta shaqada;

r) Wuxuu amrayaa in loo-shaqeeye kasta uu u hoggaansamo qodobbada xeerkan;

s) In uu fududeeyo meeleynta shaqaalaha; iyo

sh) Waa in uu fuliyaa hawl iyo awaamiir kasta uu bixiyey agaasimaha shaqada, isagoo adeegasanaya awoodihiisa shaqo ee xeerkan tilmaamay;

6. Marka uu la wareegayo sarkaalka shaqada diiwaan, keyd xasuus-reeb ama dukumintiya kale si uu uga guto waajibkiisa, sarkaalku waa in uu sii yaa loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa warqad caddeyn rasmi ah in uu ka hayo dukumintigaas;

7. Iyadoo ujeedadu tahay dhaqangelinta xeerkan sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka oo adeegsanaya awoodahan so[illegible] fulinya waajibaadkiisa si madax bannaan ama isagoo kaashanaya saraalka sh[illegible]:

b) Si xor ah u baarayaa digniin la'aan saacad kasta habeen ama maalin, wuxuu na geli karaa, kormeeri karaa oo uu fatashayaa dhulka, guryaha iyo dhismooyin ka kale, taas oo uu sarkaalku u heysto sabab maangal ah oo uu ku rumeysan karo in qof shaqaale ahi deggan yahay ama uu ku shaqeeyo si loo hubiyo dhaqan galka xeerkan;

t) Sarkaalka shaqada wuxuu si xor ah ogeysiis la'aan saacad kasta, habeen ama maalin u dalban karaa:

i. In loo-shaqeeyuhu uu u soo daabaco dukmintiyada tilmaamaya shaqosiinta shaqaalaha;

ii. In shaqaaluhu soo daabaco dukuminti kasta oo la xiriira hannaanka shaqo siintiisa.

j) Baarayaa:

i. Qof kasta oo sarkaalka shaqadu uu u arko in ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in uu yahay shaqaale ama ahaan jiray shaqaale;

ii. In loo-shaqeeyuhu qofkaas, ama adeegihiisu ama wakiilkiisu ka shaqaaleeyay goobta shaqada ee loo-shaqeeyaha, waxaana looga baahan yahay in qofkaas uu saxiixo caddeyn uu ku xaqiijinayo in uu ka run sheegay warbixintii laga qoray iyo dhammaan waxyaabihii laga wareystay;

iii. Baarayaa oo nuqul ka reebanayaa diiwaanka, buugga keydinta iyo dukumintiyada kale ee la xiriira ama u muuqda in ay la xiriiraan shaqo siinta. Waxaa kale oo uu la wareegayaa dukumintiyada koobaya diiwaanka, buuggaama keydka xasuus reebka kale haddii ay jirto sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in caddeyn muujineysa xadgudub lagu sameeyay xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada;

iv. Gelayaa, baarayaa oo hubinayaa dhammaan musqulaha (lab iyo dheddig), goobaha kale ee nadaafadeed iyo socodka biyaha;

v. Uu baarayaa oo hubinayaa dhammaan cunnooyinka la siiyay ama u muuqda in la siinayo shaqaalaha, wuxuuna ka qaadanayaa labo muunad (Sample) oo la tijaabinayo, isla markaasna uu goobjoog ka yahay looshaqeeyaha ama wakiilkiisa, iyada oo labadii muunadood si xafidan loo xirayo, mid ka mid ahna loo reebayo loo-shaqeeyaha;

vi. Uu amrayaa in dhammaan dhismayaasha iyo goobaha ay shaqaalaha deggan yihiin ama ay ku shaqeeyaan in xaaladdooda nadaafadeed laga dhigo mid hagaagsan oo aad nadiif u ah;

vii. Iyada oo aanay waxba u dhimmeyn awoodaha kale ee hay'adaha xeerilaalinta ee heer federaal ama qof kale toona, wuxuu billaabayaa dacwo oogis madani ah ama mid faldambiyeed ah oo ku saabsan qodobbo xeerkan oo la jebiyay ama xadgudub loo-shaqeeyuhu ku sameeyay ama sharci kasta oo shaqaale;

viii. Amrayaa in isbitaal loo diro qofkii shaqaale ah ee buka, kaas oo xaaladda ka jirta goobta shaqadu aanay caawineynin, loo-shaqeeyaha ayeyna waajib ku tahay in uu bixiyo kharashka isbitaalka;

ix. Joojinayaa cunto walba oo loogu talagalay shaqaalaha, taas oo aan ku habbooneyn in la quuto. cuntadaas oo kale, waxaa lagu gubayaa sarkaalka badqabka iyo caafi bta shaqada hortiisa;

x. Dalbayaa, iyada oo ixinayo loo-shaqeeyuhu, cuntooyink

duwan ee lagama maarmaanka u ah qofka shaqaalaha ah, taas oo aan kharash keedu ka badneyn qoondadii caadiga aheyd ee loo-shaqeeyuhu siin jiray shaqaalaha;

xi. Hubinayaa dhismooyinka iyo goobaha kale ee shaqaaluhu ay deggan yihiin ama ay ku shaqeeyaan, kuwaas oo sarkaalku u arko in aanay munaasab ku aheyn marka la eego qaab dhismeedkooda, xaaladda ama ku habboonaanta ujeeddooyin kii loo dhisay;

xii. Ku amrayaa loo-shaqeeyaaha inuu siiyo shaqaalaha uu la saxiixday heshiiska shaqo dhar, kabo shaqo, bustooyin iyo qalabka ka hortaga shilalka iyo halista dhaawacyada, kuwaas oo loo-shaqeeyuhu bixinayo qiimahooda;

xiii. Hubinayaa dhammaan daawooyinka la siinayo ee loogu talogalay in ay isticmaalaan shaqaalaha;

xiv. Lagu amraa loo-shaqeeyaha in uu u hoggaansamo qodobada xeerkan; iyo

xv. Fulinayaa wixii kale oo hawl iyo tilmaamo ah, wuxuuna isticmaalayaa awoodaha kale ee uu siiyo agaasimaha badqabka iyo caafimaadka goobta shaqada.

Qodobka 17aad
Warqadda Awoodsiinta Iyo Kaarka Aqoonsiga

1. Wasiirka wuxuu siinayaa warqadda awood siinta iyo kaarka aqoonsiga sarkaal kasta oo idman, Guddiga Sare ee Shaqada Fedaraalka, Agaasimaha Shaqada iyo Agaasimaha Badqabka iyo Caafimaadka Goobta Shaqada.

2. Guddiga Sare Shaqada Fedaraalka wuxuu warqadda awood siinta iyo kaarka Aqoonsiga siinaya Saraakiisha lashaqaysa. Sarkaalka shaqada waxaa warqadda awood siinta iyo kaarka Aqoonsiga siinaya Agaasimaha Shaqada. Sarkaalka ka tirsan Agaasinka Badqabka iyo Caafimaadka Goobta Shaqada waxaa warqadda awood siinta iyo kaarka Aqoonsiga siinaya Agaasimaha Badqabka iyo caafimaadka Goobta Shaqada.

3. Sarkaalka Idman marka uu wajibaadkiisa shaqo u gudanayo si waafaqsan xeerkan, waa in uu mar kasta tusaa warqadda Awoodsiinta iyo kaarkiisa aqoonsiga qofkii ay khuseyso oo si sax ahna uga dalbadaa.

Qodobka 18aad
Awoodda Gelidda Goobaha Shaqada

1. Sarkaalka idman, waxaa loo oggol yahay in uu galo dhisme ama meel kasta oo ay shaqaale ku shaqeynayaan ama ay suurto gal tahay in ay ka hawlgalaan shaqaale, isagaoo wajibaadkiisa shaqo u gudanaya si waafaqsan xeerkan ama sharciyada kale ee shaqada.

2. Sarkaalka idmani waa in uu ogeysiiyaa loo ama wakiilkiisa sababta joogitaankiisa

goobta shaqada marka ugu horreysa ee uu fursad u helo, haddii aanu ogeysiintaasi aheyn mid wax u dhimaysa ujeeddadii iyo waajibaad gudashadiisa uu meesha u yimid.

3. Sarkaalka idman waa in aan laga hor-istaagin, lagana carqaladeyn gudashada waajibaadkiisa shaqo si wafaqsan xeerkan, qof kasta oo:

b) Si ula kac ah sarkaalka u hor istaaga ama ku dhiba shaqadiisa; ama

t) Iska dhagatira ama ku guuldarreysta in uu u hoggaansamo dalab kasta ama amar kasta oo uga yimaada sarkaalka shaqada, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 19aad
Iskaashiga Hay'adaha Dawladda

Saraakiisha idmani, waxay ka dalban karaan markii loo baahdo hay'adaha Dawladda iskaashi la xiriirta sidii loo dhanqan gelin lahaa qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyaashiisa.

Qodobka 20aad
Mamnuucid

1. Sarkaalka idmani waa in uusan:

b) Dan toos ah ama dadban toona ka yeelan hawl kasta oo uu qabanaayo;

t) Sheegin, xataa haddii uu ka tago shaqada, sirta wax-soo-saarka iyo tan ganacsiga ama qaabka ay hay'adda u shaqeyso, kuwaas oo uu ogaaday muddadii uu shaqada ku jiray;

j) Shaacin halka ay kasoo gaartay cabashada lagu soo wargeliyay ee ku saabsan dhibaatada jirta, jebinta qodobo sharci ama aanu ku handadin loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa in booqashada baaritaankiisu ay ka dhasheen cabashooyinkaas.

Qodobka 21aad
Awood La mid ah Tan Saraakiisha Booliska

Saraakiisha idmani, waxa ay leeyihiin awood iyo maqaam la mid ah tan saraakiisha booliska, hase yeeshee, ku xaddidan oo keliya awoodda iyo waajibaadka uu siinayo xeerkan, xeer-nidaamiyaashiisa iyo sharciyada kale ee shaqada.

Qodobka 22aad
Soo Gudbinta Warbixinnada iyo Ilaalinta Siraha

1. Guddiga Sare Shaqada Federaalka, Agaasimaha Shaqada iyo Agaasimaha Badqabka Mihnadaha iyo Caafimaadka Goobaha Shaqada waxaa looga baahan yahay in ay diyaariyaan oo ay daabacaan warbixinnada sanadlaha ah ee hawlahooda kala duwan, kuwaas oo la doonayo in ay ku jiraan xogaha iyo macluumaadka soo socda:

b) Guddiga Sare Shaqada Federaalka ama Wakiilkiisa waxaay kasoo warbixinayaan:

i. Horumarka sharciyada la xiriira shaqada iyo xeer- nidaamiyaashooda;

ii. Shaqaalaha;

iii. Tirakoobka goobaha o shaqaalaha oo ay ku jiraan (dadk

baahiyaha gaarka ah qaba iyo kaalmadii loo fidiyay), dacwooyinka la xiriira khilaafaadka shaqada iyo sidii loo maareeyay; iyo hakin shaqo ka dhacday qaar ka mid ah qeybaha;

iv. Natiijooyinkii baaritaannada.

t) Agaasimaha Shaqada wuxuu ka warbixinayaa;

i. Horumarka siyaasadaha la xiriir shaqo siinta;

ii. Shaqaalaha;

iii. Heerka wax-soo-saarka;

iv. Macluumaadka suuqa shaqada iyo heerka shaqo siinta.

j) Agaasimaha Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobha Shaqadu waxa uu ka warbixinayaa:

i. Horumarka shuruucda la xiriirta shaqadiisa, xeer- nidaamiyaashooda iyo anshaxa shaqada;

ii. Shaqaalaha;

iii. Xaaladda goobaha shaqada, tirakoobka goobaha shaqada iyo shaqaalaha oo ay ku jiraan (dadka baahiyaha gaarka ah qaba iyo wixii kaalmo ah ee la siiyay), shillalka Warshadaha iyo cudurada shaqada;

iv. Natiijooyinka baaritaannada;

v. Tirakoobka xadguduyada la ogaaday iyo ganaaxyada lagu soo rogay.

2. Waa reeban tahay in sarkaalka idman ama qofkale oo uu soo bandhigo macluumaad maamul si waafaqsan xeerkan, marka laga reebo:

i. Mid waafaqsan sharci kasta oo qoran; ama

ii. Ujeedada dacwad kasta oo looga maarmi waayey si sharci ah ama maareyn sax ah oo ku aaddan xeerkan;

Qodobka 23aad
Diiwaangelinta Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada Loo-Shaqeeyayaasha

1. Diiwaangeliyaha ururrada shaqaalaha iyo loo-shaqeeyayaashu waxa uu mas'uul ka yahay diiwaangelinta iyo xeerarka ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyaha iyo xiriir kasta oo ay ku midoobaan labo (2) urur.

2. Wasiirka ayaa magacaabi kara diiwaangelyaha, ku xigeenka diiwaangeliyaha, kaaliyeyaasha iyo saraakiisha kale ee loogu baahdo ujeeddoyinka xeerkan.

3. Diiwaangeliyuhu isaga oo qoraal isticmaalaya waxa uu ku xigeenkiisa ku wareejin karaa qeyb ka mid ah awooddiisa, hawlihiisa iyo waajibaadkiisa shaqo.

4. Diiwaangeliyuhu waxa uu:

b) Shuruudo ku xiri karaa, wax-ka-beddeli karaa ama baabi'in karaa wakiilashadiisa xilligii uu doono;

t) Beddeli karaa ama iska dhaafi karaa go'aan kasta oo uu sameeyo qofka uu wakiishay;

Qodobka 24aad
Daadejinta Awoodaha iyo Hawlaha Saraakiisha

1. Wasiirka, waxa uu markii loo baahdo abuuri karaa xafiiisyada Guddiga Sare Shaqada Fedaraalka, Agaasimaha Shaqada iyo Agaasimaha Badqabka mihnadda iyo Caafimaadka goobaha Shaqada, isaga oo u daadejinaya heer ka hooseeya midka heerka Federaal, haddii loo arko in ay muhiim tahay,iyada oo awoodaha, waajibaadka iyo hawlaha ee heer kasta sida ugu haboon loo adeegsanayo.

2. Wasiirku, waxaa uu abuuri karaa, uuna hirgelinayaa xafiisyada shaqada iyo Badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada heer ka hooseeya midka heer federaal haddii loo arko in ay muhiim tahay, iyada oo awoodaha waajibaadka iyo hawlaha ee heer kasta sida ugu haboon loo adeegsanayo.

CUTUBKA 4AAD:
GUDDIGA SHAQADA FEDERAALKA

Qodobka 25aad
Sameynta Guddiga

Waxaa halkan lagu aasaasayaa Guddiga Sare Shaqada Federaalka ayadoo loo marayo si waafaqsan qodobka 12aad faqraddiisa 4aad.

Qodobka 26aad
Ka Koobnaanta iyo Magacaabista

1. Xubnaha Guddiga Sare Shaqada Federaalka wuxuu ka kooban yahay:

b) Guddoomiyaha Guddiga Sare Shaqada Federaalka;

t) Agaasimaha shaqada;

j) Agaasimaha Badqabka mihnadda iyo Caafimaadka Goobaha Shaqada;

x) Diiwaanhayaha Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada loo-shaqeeyeyaasha;

kh) Wakiil ka socda guddiga sare Xallinta khilaafaadka heer federal;

d) Xubno uu magacaabayo wasiirka shaqada:

i. Xubin khibrad iyo aqoon xeeldheer u leh arrimaha la xiriira shaqada;
ii. Xoghayaha guud ee xiriirka ugu matalaadda badan ururrada shaqaalaha;
iii. Guddomiyaha guud ee xiriirka ugu matalaadda badan ururrada loo-shaqeeyeyaasha;
iv. hal (1) xubin oo laga soo magacaabayo xiriirka ugu matalaadda badan ururrada loo-shaqeeyeyaasha ee ka shaqeeya arrimaha shaqada;
v. hal (1) xubin oo laga soo magacaabayo xiriirka ugu matalaadda badan ee ururrada shaqaalaha;
vi. hal (1) xubin oo [illegible]aan, aqoon iyo khibrad durugsan u leh arrimaha xiriirka [illegible]odobada xeerkan iyo xeerarka kal[illegible]

khuseeya shaqada;

2. Xubin ka socota xafiiska Guddiga Sare Shaqada Federaalka, ayaa noqonaya xogheynta guddiga.

Qodobka 27aad
Awoodaha iyo Hawlaha Guddiga

1. Hawsha ugu weyn ee Guddiga Sare Shaqada Federaalka waa in uu talo ka siiyo wasiirka guud ahaan arrimaha la xiriira shaqada, xiriirka shaqada, shaqo siinta iyo goobaha shaqada oo ay ku jiraan xaaladaha adeeggooda iyo daryeelka shaqaalaha.

2. Iyada oo aan la xaddideyn awoodahooda guud iyo hawlaha Guddiga Sare Shaqada Federaalka, waxa ay kala talinayaan wasiirka:

b) Xeerarka la xiriira shaqada iyo shaqo siinta, maamulka shuruucda shaqada, xeerarka iyo hab dhaqanka wanaagsan ee shaqada;

t) Sameynta iyo horumarinta siyaasadaha shaqada;

j) Adeegyada guud ee shaqo siinta;

x) Xiriirrada shaqada, ururraynta shaqaalaha, xeer-nidaamiyaha iyo korjoogteynta wadarta xiriirrada shaqada;

kh) Jiheynta xirfadaha, tababbarrada xirfadaha iyo shaqo siinta dadka naafada ah;

d) Horumarinta kheyraadka aadamiga;

r) Hannaanka iyo habraacayada baarista shaqada;

s) Cabirka wax-soo-saarka iyo horumarintiisa;

sh) Magacaabidda golaha xuquuqda shaqada;

dh) Dejinta daryeelka iyo dheefta magdhowga, iyada oo la raacayo si waafaqsan qodobbada xeerkan iyo shuruucda kale ee la xiriirta shillalka mihnadaha iyo cudurrada shaqada;

c) Diiwaangelinta, hakinta iyo dib u diiwaangelinta ururrada shaqaalaha, kuwa loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirradooda guud; iyo

g) Wax kasta oo kale oo la xiriira hawlaha guddiga ee wasiirku talo uga baahdo.

3. Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka wuxuu:

b) Sameynayaa baaris kasta oo uu u arko in ay lagama maarmaan tahay iyo cilmi baaris la xiriirta shaqada, dhaqaalaha, iyo siyaasadda bulshada;

t) Go'aaminayaa habraacyada la xiriira wax-qabadka hawlihiisa.

Qodobka 28aad
Sameynta Guddiyada

Guddiga Sare ee Shaqadu, wuxuu sameyn karaa Guddi-hoosaadyo haddii loo arko in ay lagama maarmaan u tahay gudashada hufnaanta, wax-ku-oolnimada awooddooda iyo waxqabadka hawlaha guddiga.

Qodobka 29aad
Xuquuqda Guddiga

Guddoomiyaha iyo xubnaha kale Guddiga, waxaa la siinayaa xuquuq, khidmad ama gunnooyin loogu talagalay in ay u adeegsadaan kharashaadkooda kala duwan, taas oo uu go'aan ka gaarayo wasiirka isaga oo la tashanaaya wasiirka maaliyadda.

Qodobka 30aad
Habraacyada Xeer-Hoosaadka

Guddiga Sare ee Shaqada Federaalka, wuxuu sameynsanayaa habraacyo iyo xeer-hoosaad u gaar ah oo ku aaddan adeegsiga awoodihiisa iyo wax qabadka hawlihiisa shaqo.

QEYBTA III:
SAMEYNTA XEER-NIDAAMIYAASHA GOOBAHA SHAQADA

CUTUBKA 5AAD:
MAAMULKA IYO DHAQANGELINTA

Qodobka 31aad
Agaasimaha

1. Agaasimaha Badqabka Mihnadda Goobta Shaqada iyo Caafimaadka ayaa mas'uul ka ah maareynta iyo hirgelinta qodobbada qeybtan.

2. Wasiirku, wuxuu magacaabi karaa xubno kale, sida ku xigeennada iyo kaaliyeyaasha agaasimaha, hadba intii aan looga maarmin caawinta agaasimaha.

Qodobka 32aad
Awoodaha iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud

1. Awoodaha iyo waajibaadka Agaasimaha waxaa ka mid ah:

b) Diiwaangelinta goobaha shaqada;

t) Horumarinta, hirgelinta iyo dhaqangelinta, heerarka badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha Shaqada, iyadoo la raacayo habdhaqanka iyo xeer nidaamyaasha shaqada, xasuus reebka, si looga sameeyo warbixinno la xiriira heerka dayacnaanta shaqaalaha ee maaddooyinka iyo walxaha halis gelin kara caafimaadka iyo badqabka shaqaalaha;

j) Dhiirrigelinta, badqabka mihnadaha iyo caafimaadka dhammaan goobaha shaqada iyo guud ahaan bulshada dhexdeeda si loo dhiirigeliyo dhaqan caafimaad iyo mid badbaado oo ka hirgala goobaha shaqada;

x) Fududeynta sameynta barnaam[illegible]ra shaqooyinka la islaqaatay sida loo qabanayo ama qeybo loo gooyo[illegible]ah dadka naafada ah si ay ugu suurc

gasho in ay uga soo guuraan shaqooyinka xaddidan (Sheltered Employment), uguna soo gudbaan suuqa shaqada ee furan;

kh) Sameynta barnaamijyo caafimaad iyo tijaabooyin hadba goorta loo baahdo si loo ogaado shilalka cudurrada mihnadda iyo u nuglaanta shaqaalaha cudurrada ka dhasha shaqada;

d) Sameynta Baaritaanno iyo tijaabooyin la xiriira warshadaha iyo qalabka la adeegsado ee goobaha shaqada;

r) Abaabulidda baaritaan caafimaad oo lagu sameynayo xaaladda shaqaalaha, laguna ogaanayo caafimaadka dadka la shaqo siinaya iyo kormeerro loogu kuur galayo caafimaadka iyo badqabka goobaha shaqada,si loo ilaaliyo caafimaadka dadka shaqeeya, iyo fayadhowrka caafimaadka goobaha shaqada;

s) Qabanqaabinta waxbarasho iyo tababar ku saabsan caafimaadka iyo badqabka mihnadda goobaha shaqada oo loo qabanayo shirkadaha gaarka ah, kooxaha ama shaqsiyaadka iskood u shaqeysta iyo saraakiisha ku hawlan badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;

sh) Ururinta iyo baahinta xogaha iyo macluumaadka ku saabsan badqabka mihnahada iyo caafimaadka goobaha shaqada;

dh) Sameynta cilmibaaris, tijaabooyin iyo bandhigyo la xiriira badqabka mihnadda iyo caafimaadka, oo ay ku jiraan daraasadaha la xiriira waxyeellada xaga maskaxda ama dhimirka ee ku aaddan hababka, farsamooyinka iyo nidaamyada cusub ee lagula tacaalayo dhibaatooyinka badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada iyo dhibaatooyinka ka abuurma tiknoolojiyada casriga ah;

c) Horumarinta halbeegyo wax looga qabanayo maaddooyinka sunta ah, qalabka iyo curiyayaasha waxyeelleeya jirka aadamiga, halbeegyadaas oo tilmaamaya heerka dayacnaanta, kuwaas oo suurtagalinaya in si badqab mihnadeed loogu shaqeeyo xilliyada kala duwan ee shaqada;

g) Horumarinta iyo joogteynta barnaamijyo wax-ku-ool ah oo ku saabsan soo ururinta, isku duwidda iyo falanqaynta tirakoobka badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada oo koobaya cudarrada, shilalka iyo dhaawacyada shaqada;

f) Rukhsadsiinta iyo Oggolaanshaha hay'adaha bixiya tababarka la xiriira badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada;

q) Awoodaha iyo hawlaha kale ee lagama maarmaanka u ah in uu si habsami leh oo wax-ku-ool ah loogu guto awooddaha iyo waajibaadka uu xeerkani dhigayo.

2. Agaasimaha wuxuu wasiirka kala talin karaa:

b) Dejinta iyo horumarinta siyaasad qaran oo ku saabsan badqabka mihnaddaiyo caafimaadka goobaha shaqada;

t) Soo jeedinta sharciyo ku saabsan badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada oo ay ku jiraan qaabab lagu dhaqan gelinaayo talooyinka iyo heshiisyada ururrada shaqaalaha aaduunka iyo kuwa heer gobol, sidoo kale heshiisyada iyo nidaamyada kale ee la xiriira badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada, magdhawga iyo adeegyada kale ee dhaqancelinta shaqaalaha;

j) Diyaarinta nidaamyo istaraatijiyadeed oo lagu dhiirrigelinayo qaababka ugu habboon ee badqabka mihnad[illegible]naadka goobaha shaqada;

x) Sameynta, joogteynta iyo h[illegible]lhaqan shaqo oo looga hortagayo

dhibaatooyinka ka dhasha badqab la'aanta mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;

kh) Dib u eegista qodobbada xeerkan, xeerar kale iyo xeer-nidaamyo, halbeegyo, hab dhaqanka guud ee hay'adaha gaarka loo leeyahay;

d) Falanqeynta tirakoobka geerida iyo dhaawacyada la xiriira shaqada;

r) Arrimaha kale ee saameeya badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada ee agaasimuhu u arko in ay muhiim u yihiin sare u qaadidda tayada goobaha lagu shaqeeyo oo munaasab ah;

3. Agaasimuhu wuxuu dhisi karaa guddi farsamo oo tala-bixineed, ama kooxo lataliyayaal ah oo ka caawiya inuu si fiican u guto hawlihiisa, una adeegsado awoodihiisa sharci.

4. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman ee ka hoos shaqeynaya, wuxuu gudbin karaa dacwad, qaban qaabin karaa ama ka difaaci karaa maxkamadda awoodda u leh horteeda wixii eed ah, macluumaad, cabasho ama dacwado kale oo ka dhashay xeerkan ama gudashada hawlihiisa shaqo.

5. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo ka hoos shaqeynaya, wuxuu waqti kasta, isaga oo ku wargeliya qofka ka shaqeeya goobta ama wakiilkiisa goobta shaqada, ka qaadan karaa muunad (Sample) la xiriirta alaabta loo isticmaalo ama loogu talagalay in loo adeegsado goobta shaqada, si loo soo baaro, alaabtaas oo uu u arko in ay jebineyso qodob ka mid ah xeerkan, ama uu aamin sanyahay in baaristeeda lagu ogaan karo in ay dhaawacyo jireed u geysan karaan shaqaalaha.

6. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo ka hoos shaqeynaya, wuxuu la wareegi karaa oo uu ka dhigi karaa mid aan waxyeello geysan karin agab ama walxa kasta oo uu ka helo dhismaha, kuwaas oo uu u hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in uu agabkaas ama walxahaas ay keeni karaan khatar muuqata ama uu dhaawac halis ah gaarsiin karo shaqaalaha.

7. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo hoos yimaada, wuxuu digniin hagaajin ah siin karaa cid kasta oo uu u arko in:

b) Ay jebiyeen mid ka mid ah qodobbada xeerkan ama xeerar kale ee jira;

t) Ay jebiyeen mid ama dhowr ka mid ah xaaladaha ku xusan qodobbada xeerkan, taasoo ay dhici karto in ay soo noq-noqdaan.

8. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman oo ka hoos shaqeynaya, wuxuu diginin shaqo ka joojin ah siin karaa qofkii uu u arko in shaqada uu qabanayo ama uu rabo inuu qabto ay dhaawacyo halis ah ku keeni karto shaqaalaha.

9. Agaasimaha ama sarkaal kasta oo idman ee hoos yimaada waa in uu bixiyaa amarro mamnuucid awood fulineed degdeg ah, haddii uu u arko in ay mamnuucis taas tahay mid la xiriirta hawlaha la haayo ama ku dhow in ay sii socdaan, kuwaas oo hoos tagaya xakameynta iyo awoodda qofka ku lug leh in ay gaarto khatar muuqata xagga badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada.

10. Qof kasta oo la siiyo digniin shaqo ka joojin ah si waafaqsan qodobkan, haddii uu sii wato hawshii laga joojiyay ama qaado tallaabo kale oo xadgudub ku ah digniintii la siiyay, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliveed iyo xeerarka kale ee Dalka.

11. Haddii ay sii wataan hawlaha ogeysii ɔsan ama qaab kasta oo looga soo

horjeesanayo ogeysiis kaas, waxaa laba jibaarmaya ganaaxa iyo ciqaabta lagu xusay faqradda 10^{aad} ee sare.

12. Qof kasta oo dood ka qaba digniinta toosinta ah ama digniinta shaqo ka joojinta ah ee la siiyay wuxuu afar iyo toban (14) maalmood gudahood, laga billaabo maalinta digniinta la siiyay, cabasho u gudbisan karaa agaasimaha guud (haddii digniinta uu siiyay sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada) ama wuxuu cabasha diisa u gudbisan karaa wasiirka (haddii digniinta uu siiyay agaasimuhu).

13. Agaasimaha guud ama wasiirka hadba kii cabasho loo geeyo, markii uu cabashada ka baaraan dego kadib, wuxuu hab qoraal ah ku joojin karaa ama ku waafaqi karaa digniintii qofka la siiyay.

14. Qof kasta oo aan ku qancin go'aanka wasiirka, wuxuu cabasho u qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh.

CUTUBKA 6AAD:
SAMEYNTA IYO DIIWAANGELINTA

Qodobka 33aad
Diiwaanka Goobaha Shaqada

1. Agaasimaha waxaa waajib ku ah in uu hayo diiwaan ka goobaha shaqada oo uu booqanayo iyadoo goob kasta shaqo uu ka diiwaan gelinayo xogaha gaarka u ah goobahaas iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah diiwaangelinta si waafaqsan xeerkan.

2. Faahfaahinta laga diiwaan gelinayo goobaha shaqada waxaa ka mid ah:

b) Magaca oo seddexan iyo cinwaanka oo faahfaahsan iyo haddii shaqaaluhu aanu milkiile aheyn;

t) Meesha ay ku taallo goobta shaqada;

j) Cinwaanka rasmiga ah ee lagala xiriiri karo goobta shaqada;

x) Dabeecadda ganacsiga ama shaqada lagu qabanayo ama lagu qaban doono goobta shaqada;

kh) Tirada iyo jagooyin ka shaqo ee shaqaalaha ka hawlgala goobta shaqada;

d) Dabeecadda ganacisga haddii ay tahay warshad, mashiin,qalab, agab kale waxaa muhiim ah in laga diiwaan geliyo goobta shaqada ee lagu rakibay ama lagu rakibi doono iyo khataraha ugu waaweyn ee laga filan karo;

r) Liiska walxaha kiimikeed ee loo isticmaalay ama loogu talagalay in lagu isticmaalo goobta shaqada;

s) Awood makaanikeed haddii la isticmaalay ama lafilayo in la isticmaalo;

sh) Taariikhda iyo lambarka taxanaha shahaadada lagu diiwaangeliyey ama cusbooneysiin tooda lagu diiwaangeliyey.

Qodobka 34aad
Diiwaangelinta Goobaha Shaqada

1. Qof kasta oo doonaya in uu sameysto goob ganacsi, shaqo ama u isticmaalo dhisme uu ka dhigto goob shaqo waa in uu codsadaa diiwaangelin, isaga oo agaasimaha u diraya qoraal ogeysiis ah oo ay ku jiraan xogtan soo socta:

b) Magaca iyo cinwaanka milkiilaha goobta shaqada ama dhismaha;

t)Ciwaan wixii xiriir ah loogu dirayo goobta shaqada sida dhammaan qoraallada ama xiriirrada Iwm;

j) Dabeecadda nooca shaqada lagu qabanayo ama la soo jeediyey in lagu qabto goobta shaqada;

x) Xogta maareeyaha goobta shaqada si waafaqsan xeerkan;

Kh) Liiska iyo noocayada walxaha kiimikeed ee loo isticmaalayo ama loogu talagalay in lagu isticmaalo goobta shaqada;

d) Haddii ay isticmaasho awood makaanikeed ama wax kale oo lafilayo in la isticmaalo iyo dabeecaddooda;

r) Haddii la isticmaalo mashiin awood cadaadis ku shaqeya ama la filayo in la isticmaalo, haddii ay sidaas tahay, waa in la sheegaa nooca mashiinka, faahfaahintiisa, lambarka u gaarka ah, dalka iyo sannadka la sameeyay;

s)Haddii la isticmaalay wiish dadka iyo alaabta lagu qaado ama lagu talo jiro in la isticmaalo; haddii ay sidaas tahay, waa in la sheego noociisa, faahfaahintiisa, lambarka u gaarka ah, dalka iyo sannadka la sameeyey; iyo taariikhdii ugu dambeysay ee la mariyay tijaabo lagu hubinayo shaqadiisa, qofkii ugu dambeeyay ee tijaabiyay iyo tanka ugu badan ee uu qaadi karo;

sh) Haddii la isticmaalay mashiinnada biyaha karkariya ama lagu talo jiro in la isticmaalo, haddii ay sidaas tahay, waa in la sheego noociisa, faahfaahintiisa, lambarka gaarka u ah, dalka iyo sannadka la sameeyay, iyo taariikhdii ugu dambeysey ee la tijaabiyey shaqadiisa iyo qofka tijaabiyay; iyo cadaadiska ugu badan ee mashiinka ku dul qoran ($1lb/inch^2$);

dh) Tirada guud ee shaqaalaha ka shaqeeya, ama lagu talo jiro in ay kashaqeyn doonaan goobta shaqada;

2. Markii uu helo codsiga diiwaangelinta, Agaasimuhu waa in uu qaadaa tallaabooyinka lagama maarmaanka u ah hubinta in goobta shaqada ama goobta ganacsi ay tahay mid ku habboon hawsha lagu sheegay codsiga diiwaangelinta.

3. Marka uu ku qanco codsiga ka dib, Agaasimuhu wuxuu diiwaangelinayaa goobta shaqada ama goobta ganacsi, wuxuuna siinayaa codsadaha shahaaddada diiwaangelinta.

4. Qof kasta oo ganacsi ama goob shaqo ku shaqeysanaya, isaga oo aan haysan rukhsad diiwaangelin, haddii lagu helo waxaa loo maraayaa habraaaca sharciga Maareynta Maaliyada Guud.

5. Haddii uu sii socdo xadgudubku xukunka ka dib, qofkaas wuxuu galay dambi dheeraad ah, waxaana la laba jibaarayaa ciqaabta iyadoo loo maraayo habraaaca sharciga Maareynta Maaliyada Guud.

6. Haddii uu Agaasimuhu diido inuu soo saaro shahaadada diiwaangelinta, waa in uu qoraal ku sheegaa sababaha diidmadaas.

7. Qofka ka shaqeeya ama milkiilaha ka ah goob shaqo oo diiwaangashan waa in uu Agaasimaha ugu gudbiyaa qoraal uu ku ogeysiinayo isbeddellada la soo jeediyay in lagu sameeyo xogtii u diiwaangashanayd inta aan isbeddalka la sameyn ka hor.

8. Qofka ka shaqeeya goob shaqo ama milkiile ka ah oo magaciisa ku diiwaangashan oo aan Agaasimaha soo ogeysiin isbeddeladii soo kordha, wuxuu gelayaa dambi la mid ah ciqaabaha farqadaha (4) iyo (5) ee isla qodobkan.

9. Qofkii cabasho ama dacwad ka qaba go'aanka Agaasimaha ee ku saabsan diiwaangelinta, wuxuu cabasho u qaadan karaa Wasiirka afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood, laga billaabo taariikhda go'aanka.

10. Wasiirka wuxuu magacaabayaa Guddi ka kooban wakiilo ka kala socda ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyeyaasha, kuwaas oo uu hoggaaminayo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, soona baara sababaha cabashada keentay, ka dibna ka soo gudbiyaan warbixin, si go'aan ku habboon looga gaaro.

11. Waxaa reeban in goob ganacsi ama shaqo laga dhaafo rukhsadda diiwaangelinta sabab kastaba ha ahaatee.

12. Lacagta Diiwaangelinta goob Ganacsi waa inay noqotaa Shan Dollar ilaa Shan iyo Labaatan Dollar ($5 ilaa $25), iyadoo loo eegayo hadba inta uu ganacsigu la egyahay.

CUTUBKA 7AAD:
XAALADAHA GOOBAHA SHAQADA

Qodobka 35aad
Waajibaadka Guud ee Qofka Mas'uulka ka ah Goobta Shaqada

1. Waxyaabaha soo socda waa waajibaadka guud ee qofka mas'uulka ah:

b) Inuu si guud u hubiyo badqabka mihnadda, caafimaadka iyo daryeelka shaqada dhammaan dadka ka shaqeeya goobta shaqada, taas oo ay ka midtahay:

i. Inuu taxadar muhiim ah u yeesho hay'adiisa, si loo ilaaliyo nolosha, caafimaadka iyo niyadda shaqaalaha;

ii. Inuu hubiyo in shaqaalaha ay helaan tilmaamaha lagama maarmaanka u ah ka hortagga shillalka warshadaha, cudurrada mihnadda ka dhasha iyo khataraha kale ee la xiriira xirfaddiisa shaqo;

iii. Dayactirka makiinadaha, qalabka korontada iyo mashiinnada warshadaha, iyada oo qalabka iyo agabyada kale xaaladdooda la wanaajinayo, si loo xaqiijiyo badqabka guud;

iv. In la helo qalabka muhiimka u ah ee loo istcmaalo badqabka, laguna dhejiyo mashiinnada iyo warshadda meelo ka mid ah;

v. Dayactirka qalabka dabdamiska iyo in shaqaalaha loo tababaro isticmaalka qalabkaas;

vi. In la helo goob dayactir, hab, iyo habraacyo shaqo oo ammaan ah oo aan wax khatar u keenayn caafi [illegible] qaalaha;

vii. In la helo nidaamy [illegible] qiijanayo ammaanka iyo khatar la

caafimaadka goobta, kaas oo la xiriira isticmaalka, ka shaqeynta, kaydinta, iyo raridda alaabta iyo walxaha kale;

viii. In la helo meelo si fudud looga bixi karo, oo amman ah oo aan lahayn wax khatar caafimaad ah;

ix. In lagu wargeliyo dhammaan Shaqaalaha; halista ka imaan karta teknooloojiyada cusub iyo khataraha muuqda, lana hubiyo in qof kasta oo shaqeeya uu ka qayb qaato dhaqan gelinta iyo dib u eegista hababka badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobaha shaqada;

x. bixinta qalabka, qalab sahlahawlaha, fududeeyaiyo wixii kale oo taageero ah ee ay u baahan yahiin isticmaalkooda dadka naafada ah;

t) In la qaado tallaabooyin qiimeyn ah oo la xiriirta khataraha ku aaddan shaqaalahaku hawlan badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, iyada oo laga duulayo natiijooyinkii ka soo baxay qiimeyntaas, si loo qaado tallaabooyin ka hortag iyo ilaalin intaba;

j) In sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka ee qeybtan loo diro nuqul ka midah warbixintii qiimeynta khatarta ee la sameeyay si waafaqsan xeerkan;

x) In la qaado tallaabooyin degdeg ah oo lagu joojinaayo hawl kasta oo loo arko in ay halis ku tahay badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada isla markaana laga daad gureeyo si habboon dhammaan shaqaalaha ku sugan goobta;

kh) In la diyaariyo dib u sixid qoraal lagu sameeyo mar kasta oo ay ku habboon tahay qodobada siyaasadda guud badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, lana dejiyo nidaam lagu dhaqan gelinaayo siyaasaddaas qoran, isla markaas sixiddaas lagu wargeliyo dhammaan shaqaalaha ka hawl gala goobaha shaqada;

d) Lama eryi karo qof kasta oo shaqaale ah, waxba looma dhimi karo, lama faquuqi karo, loo mana diidi karo fursadaha shaqo ee jira, hoosna looma dhigi karo darajadiisa, iyada oo lagu ciqaabayo qofka shaqaalaha ahi, sabablana ay tahay:

(i) In qofka shaqaalaha ah uu ka cawday arrin uu u arkay in aanay ammaan aheyn ama ay khatar ku tahay caafimaadkiisa;

(i) In qof kasta oo shaqaale ah ee xubin ka noqday guddiga badqabka mihnadda iyo Caafimaadka goobta shaqada kaasoo loo dhisay dabagalka, meelmarinta xeerkan, ama isaga oo gutay hawlihiisa shaqo ee ku aaddan xubinnimada Guddigaas.

r) Waa in goobta kasta ee shaqo laga dhisaa gudddiga badqabka mihnadda iyo Caafimaadka, si waafaqsan xeer-nidaamiye wasiirka soo saaray, xubin ka mid ahna waa in ay noqotaa dadka naafada ah ee ku sugan goobtaas, haddii:

i. ay ka shaqeeyaan shaqaale ka badan labaatan (20) qof; ama

ii. Agaasimuhu uu amro sameynta guddiga badqabka mihnaddaiyo caafimaadka.

s) Si aan waafaqsaneyn xeerkan, lama jari karo, la mana dhimi karo xuquuq shaqaale oo la xiriira badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada;

sh) In la qabanqaabiyo baaris qoto dheer oo lagu sameeyo badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada ugu yaraan sanadkiiba mar, baaristaas waxaa sameynaya howlwadeen ama sarkaal badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, kaasoo qoraya warbixinta baarista, una diraya agaasimaha warbixintaas.

2. Qofkasta oo ku guuldarreysta ama ku ana soo bixi waaya waajibaadka uu

qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

3. Qof kasta oo shaqaale ah oo aaminsan in dayac uu loo-shaqeeyuhu ka dhacay awgiis, naftiisuna ay ammaan ahayn, halisna ku jirto, khatar muuqato oo caafimaad nafeed ahna uu wajahayo, wuxuu xaq u leeyahy shaqaaluhu in uu u gudbiyo loo-shaqeeyaha wargelin qoraal ah oo si faahfaahsan u tilmaameysa khatarta jirta. Sidaa daraadeed, shaqaaluhu kuma muteysan karo ganaax ama shaqo ka joojin ama fal kale oo waxyeello ku keeni kara adeegsiga xuquuqdiisa awgeed.

Qodobka 36aad
Daryeel

1. Mas'uul kasta waxaa waajib ku ah:

b) In uu u diyaariyo qalab uu ku fariisto, kuna habboon qofkasta oo ka shaqeeya howl taagni lagu qabanayo, lana helo fursad shaqaalaha ay ku nastaan waqti cayiman, kuna soo laabtaan shaqada;

t) In uu keeno biyo la cabbo oo nadiif ah, kuwaas oo ku filan shaqaalaha oo dhan, si fududna loo heli karo xilliga lagu guda jiro saacadaha shaqada;

j) In uu ku rakibo (dhejiyo) goobta shaqada qalabka gargaarka degdega ah, uuna qaado tallaabooyin suurto gelinaya in gurmad lagama maarmaan ah oo degdeg ah la siiyo qofkasta oo ku dhaawacma ama ku xanuunsada shaqada;

x) In laga helo goobta shaqada qol dhar beddelasha iyo goob cibaado oo u kala baxsan raga iyo dumarka oo ay shaqaalaha isticmaalaan;

kh) In uu u sameeyo shaqaalaha naafada ah daryeel dhammeystiran oo baahidooda ku filan xilliga shaqada;

2. Mas'uul kasta oo u hoggaan sami waaya waajibaadka ku xusan qodobkan farqadihiisa sare, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 37aad
Caafimaadka Goobaha Shaqada

Mas'uul kasta waxaa waajib ku ah;

1. In uu hubiyaa in caafimaadka goobtu tahay mid hagaagsan oo ku habboon, iyadaoo goobta loo sameynaya hawo nadiif ah, lana gaarsiinaya hawadaas qol walba.

2. Mas'uulku waa inuu hubiyaa:

b) In goobta shaqadu aanay aheyn xilliga shaqada meel ciriiri ah oo shaqaaluhu isdul dhooban yihiin, taas oo qofka ka shaqeynaya, kuna keeni karta halis, dhaawac iyo khatar caafimaad;

t) In goobta shaqadu ay tahay meel waasac ah oo si fudud loogu shaqeyn karo, waana in ay leedahay meelo bannaan oo lagu kala nafiso, lana tixgelinayo nooca shaqada, lagana heli karo hawo ku haboon shaqaale kasta.

3. Mas'uul kasta waa inuu hubiyaa in qeyb walba oo ka mid ah goobta shaqada ee shaqaalaha ku shaqeynayaan ama ay marayaan in ay leedah ilan kuna habboon, ha ahaado iftiin d

ah ama mid la sameeyay.

4. Mas'uul kasta waa in uu hubiyo in goobta shaqada ay tahay mid nadiif ah, oo aaney jirin wax ur ah oo kasoo baxaya bullaacadaha, musqulaha, isla markaana aaney jirin sawaxan ama dhawaaq oo shaqaaluhu dhibsadaan, kasoo ka baxsan dabeecada shaqada.

5. Mas'uul kasta waa in uu hubiyaa in tubooyinka (qasabadaha) qaada biyaha wasaqda ah, una gudbinaya bullaacadaha dhulka hoostiisa maraya, kuwaas oo loo baahanyahy in aaney yeelan wax qoyaan ah oo uu shaqaaluhu ku sibxan karaan.

6. Mas'uul kasta waa in uu u dhigaa qalab ku habboon oo qashinka looga qaado goobta shaqada.

7. Mas'uul kasta waa inuu goobta shaqada u yeelaa musqulo ku habboon shaqaalaha naafada ah, lana sameeyo musqulo u kala soocan lab iyo dheddig iyo qeybo wax lagu dhaqdo, shaqaalahana ay ka heli karaan, nadiifna ah, aadna u habeysan.

8. Mas'uulkii u hoggaansami waaya qodobkan, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 38aad
Badqabka Goobaha Shaqada

1. Dhammaan warshadaha, mashiinnada waaweyn iyo qalabka kale ba:

b) Haddii uu yahay mid rakiban ama mid guurguura, waa in loo adeegsadaa oo kaliya shaqadii loogu tala galay, kuna shaqeeyo shaqaale aqoon iyo karti u leh isticmaalkiisa;

t) Waa in si xilliyeysan u baaraa qof karti iyo takhasus u leh qalab kaas, si looogaado in xaaladdoodu wanaagsan tahay oo aanay khatar gelineyn badqabka iyo caafimaadka shaqaalaha iyo qofkasta oo soo booqda goobta shaqada.

2. Qof kasta oo si toos ah uga shaqeeya ama isticmaala warshadaha, mashiinnada waaweyn iyo qalabka kale, kaasina waa in uu leeyahay aqoon ku filan, si loo hubiyo in shaqada ama howlgalka, isticmaalkuna aaney wax halis ah u keeneynin badqabka iyo caafimaadka qofkaas, shaqaalaha kale ama cid kasta ee soo gasha goobta shaqada.

3. looma oggola qof kasta oo farsamo-barad ah in uu u dhawaado mashiinnada culus, agabka iyo qalabka kale ilaa uu la joogo kormeerihiisa tababarka, lana helo wax ka difaaca khataraha iyo halista ka imaaneysa shaqada adag, bey'ada ama loo diyaariyo jawi ammaan ah.

4. Qofna lagama shaqasiin karo mashiin ama shaqo kale oo sababi karta caafimaad xumo ama dhaawac jireed, iyada oo aan si buuxda loogu sheegin khatarta uga imaan karta shaqadaas iyo waxyaabaha loo baahan yahay inuu ka feejignaado, lana hubiyo in:

b) Shaqaaluhu uu helo tababar ku filan oo ku saabsan shaqada mashiinka ama hawsha kale;

t) Shaqaaluhu uu markasta kormeer ku sameeyo qof aqoon iyo waayo-aragnimo u leh mashiinka ama shaqada.

5. Tababarka lagu soo sheegay farqadda (4) ٧ ٠taa markii:

b) Shaqaale cusub la qoray

t) Qof la beddelayo ama shaqo kale loo dhiibayo;
j) Mashiinno iyo qalab cusub soo baxaan ama mashiinnada iyo qalabka shaqada oo la beddelayo;
x) Tiknoolojiyad cusub la soo bandhigaayo ama la adeegsanayo.

6. Tababarka waa in uu ahaadaa:
b) Mid la socda isbeddelka cusub iyo khataraha imaan kara;
t) Mid si joogto ah loo qabto xilliyo kala duwan oo muddeysan;
j) Mid shaqaalaha aan wax u dhibeynin, lana qabtaa saacadaha shaqada gudahooda.

7. Mas'uul kasta waa in uu hubiyaa in shaqaalaha kale iyo qandaraas la yaasha ka howlgala goobta shaqadu ay heleen tilmaamo ku habboon oo la xiriira halista badqabka mihnadda iyo caafimaadka, loona sheegaa nidaamka gargaarka degdegga ah ee laga helayo goobta shaqada inta howshu socoto iyo tallaabooyinka la qaadayo haddii ay timaaddo xaalad degdeg ah.

8. Mas'uul kasta waa in uu u sameeyaa shaqaalaha qalab gaar ah oo ay ku jiraan qalabka ka hortaga khataraha, iyo kuwa loogu tala galay shaqaalaha naafada ah ee ku sugan goobta shaqada iyo deegaanka, lana qaadaa tallaabooyin munaasab ah, si looga hortago in uu yimaado dhaawacyo iyo shilal ka dhaca goobta shaqada.

9. Wasiirka wuxuu soo saari kara tilmaamo ka dib markii uu la tashado ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyayaasha oo ku aaddan si baaris caafimaad oo ku habboon lagu sameeyo shaqaale ama kooxo shaqaale ah oo ka howlgala goob ay ku sugan yihiin, una baahan in loo sameeyo qorshe maangal ah si loo ilaaliyo badqabka iyo caafimaadka ee heerar kala duwan ee goobta shaqada oo leh:

b) Cudurro lagu arkay goobta shaqada oo uu hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in uu ka dhashay nooca shaqada ama xaaladda goobta shaqada;
t) In ay sabab u tahay isbeddelka ku dhacay qaabka shaqada, walxo loo isticmaalay hab cusub ee shaqada ama maaddooyin kale oo lagu soo kordhiyay qaabka shaqada, kuwaas oo keeni kara in ay timaado khatar dhaawac soo gaari kara caafimaadka qofka ka hawlgala goobta shaqada;
j) Ay jiri karto halis dhaawac ku ah caafimaadka qofka shaqaalaha, kana soo gaari karta maaddooyin ama walxa cusub oo la keenay warshadda si loogu shaqeeyo, halisna ka imaan karta isbeddel kasta ee ku yimaada xaaladda guud ee warshadda.

10. Xeer-nidaamiyeyaasha khuseeya qeybtan ayaa waajibinaya in kormeer caafimaad ay ku sameeyaan shaqaale aqoon iyo khibrad u leh, kana diiwaangashan agaasinka, kuwaas oo soo buuxiyey shuruudaha looga baahan yahay in la diiwaangeliyo si waafaqsan ujeeddooyinka xeerkan.

11. Haddii Wasiirku ay u caddaato in goobta shaqada ay ka jirto arrimo halis caafimaad ku keeni karta Shaqaalaha, wuxuu soo saarayaa amarro iyo haggeyaal lagama maarmaan ka dhigaya in la sameeyo arrimahan soo socda:

b) In baaris caafimaad lagu sameeyo shaqaalaha ka hor inta aan la shaqaalaysiin, inta ay ku guda jiraan shaqada, iyo marka ay shaqada ka baxaan ama laga joojiyo kadibba;

t) In la sameeyo baaritaan caa[illegible] iid gaar ahaaneed ama in daraasad ca

lagu sameeyo daawada iyo nadaafadda warshadda guud ahaan.

12. Kharashka ku baxaya baaritaannada lagu sheegay farqadda (11) waxaa bixinaya loo-shaqeeyaha.

13. Loo-shaqeeyuhu waa inuu hubiyaa in baaritaanka lagu sheegay qaybtani la qabanayo, iyada oo qofka shaqaalaha ahi aanu lumineyn wax xuquuq ah oo uu shaqeysan lahaa iyo in haddii ay suurtogal tahay in baaritaanka la sameeyo inta lagu guda jiro saacadaha shaqada ee caadiga ah.

14. Shaqaalaha cusub iyo kuwii hore u shaqeynayey, waxaa waajib ku ah in ay maraan baaritaan caafimaad, si waafaqsan xeerkan.

15. Loo-shaqeeye kasta, waxaa waajib ku ah in shaqaalaha ka shaqeeya goobaha shaqada ama shaqo kasta oo halis ah, uu siiyaa qalab ilaalin ama ka hortag tayo leh oo ku habboon kana mid yihiin dhar, gacma-gashiyo, kabo, ookiyaalo iyo koofiyado ay isaga difaacaan khataraha ka jira goobaha ay yaalliin waxyaabaha qoyan iyo maaddooyinka halista ah.

16. Loo-shaqeeye kasta waa waajib inuu bixiyaa ookiyaalo ama shaashado ku habboon oo waxtar leh si loo ilaaliyo indhaha shaqaalaha ku hawlan shaqo halis gelin karta ama dhaawici karta indhaha shaqaalaha.

17. loo-shaqeeye kasta oo leh goob shaqo, waa inuu sameeyaa qeyb u gaar ah oo u xiran alxanka, si looga ilaaliyo shaqaalaha aan aheyn kuwa alxanka in hillaaca alxanku uu Indhaha ka saameeya ama ka rido.

18. Qof kasta oo ku xadgudba qodobkan ama xeer-nidaamiyayaashiisa, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 39aad
Diiwaan Gelinta Tababar-xilliyeed ama Mid Billaw ah

1. Looshaqeeye kasta ee goob shaqo waxaa waajib ku ah in uu u diyaariyo diiwaan oo lagu qorayo faahfaahinta tababarrada billowga ah iyo tababar xilliyeedka la siiyo shaqaalaha ka shaqeeya goobta shaqada.

2. Faafaahinta lagu qorayo diiwaanka waxaa ka mid ah:

b) Taariikhda, muddada, habka iyo nooca tababarka;
t) Heerka aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin dadka tababarka bixinaya ee la xiriira maaddooyinka iyo habka tababarku uu ku saabsan yahay;
j) Shaqaalaha la tababarayo iyo xilalka ay ka hayaan goobta shaqada;
x) Nooca qiimeynta iyo wax-ku-oolnimada tababarka.

Qodobka 40aad
Wargelinta Cudurrada Mihnadda iyo Shilalka Ka Dhaca Goobaha Shaqada

1. Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ‹ › wargeliyo agaasimaha ama sarkaalk badqabka mihnadda iyo caafimaadka ee aag ›aan shilalka, naafonimada joogtada a

ama tan aan aheyn, dhimasho, dhawaac iyo cudurrada mihnadda ee ka dhasha goobta shaqada, uuna ku keydiyo diiwaan u gaar ah.

2. Faahfaahinnada ay tahay in diiwaankaas lagu qoro waxaa ka mid ah:

b) Taariikhda iyo nooca shilka;

t) Shaqaalaha dhaawacmay iyo nooca dhaawacooda, kuwa ka bogsooday,kuwa si joogta ah u naafoobay iyo kuwa dhaawaca dartiis u dhintay;

j) Nooca cudurka ka dillaacay goobta shaqada, shaqaalaha uu ku dhacay, goortii la diiwaan geliyay iyo qofkii diiwaan geliyay;

x) Loo-sheeqeeyaha taallaabooyinkii uu qaaday markii uu ogaaday shilka dhacay ama cudurka ka dillaacay goobta shaqada.

Qodobka 41aad
Wargelinta Xogta Shillalka iyo Cudurrada Mihnadda ee Goobaha Shaqada

1. Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah in uu si dhakhso ah ugu gudbiyo agaasimaha ama sarkaalka badqabka mihnadda iyo caafimaadka aaggiisa dhammaan wixii keenay shillalka dhacay, kuwa si joogta ah u naafoobay ama sababay dhimasho iyo dhaawac bogsaday iyo kiisaska cudurrada mihnadda ee laga helay goobta shaqada.

2. Warbixintu waa in ay ahaataa mid qoraal ah, waana in ay ku jiraan faafaahinada lagu caddeeyay Qodabka 40aad faqraddiisa 2aad.

3. Warbixinta waa in ay la socoto nuqul ka mid ah kormeerkii iyo baaristii la sameeyay ama warbixintii caafimaadka ee la diyaariyey.

Qodobka 42aad
Xarumaha Caafimaadka

1. Goob kasta oo shaqo ee sida caadiga ah ay ka shaqeeyaan in ka badan toban (10) shaqaale ah, waa in laga helaa sanduuqa gargaarka degdegga ah, uuna joogaa qof u tababaran gargaarka dagdaga ah.

2. Goob kasta oo shaqo ama xarun kasta gaar ahaanteeda oo sida caadiga ah ay ka shaqeeyaan in ka badan 100 shaqaale ah, waa in ay yeelataa goob bukaan-eegto ah iyo shaqaale caafimaad oo tababaran kuna filan.

Qodobka 43aad
Gurmadka Shaqaalaha Dhaawacma iyo kuwa Xanuunsada

Loo-shaqeeyaha waa in uu leeyahay nidaam uu sida ugu degdegga badan ugu gaarsiin karo goob caafimaad shaqaalaha ku xunuunsada ama ku dhaawacma goobta shaqada, kuwaas oo ay xaaladdooda caafimaad aan wax looga qaban karin xarumaha shaqada, wixii kharash ah ee ku baxa gurmadkaas loo-shaqeeyaha ayaa bixinaya.

Qodobka 44aad
Dhejinta Habraaca Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Shaqaalaha

1. Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah in uu habraaca iyo qodobada khuseeya badqabka mihnadda iyo caafimaadka uu gaarsiiyo dhammaan shaqaalaha ku sugan goobta shaqada, kuna dhejiyo habraacaas meel ku habboon oo shaqaale kasta uu ka arki karo.

2. Habraacyada iyo qodobada badqabka mihnadda iyo caafimaadka waa inay ku qoran yihiin af ay shaqaaluhu fahmi karaan.

Qodobka 45aad
Meel Marinta Hannaanka iyo habraacyada Badqabka Mihnadda iyo Caafimaadka Goobaha Shaqada

1. Wasiirka wuxuu soo saarayaa hannaan iyo habraacyo ka dib markii uu la tashado wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyaha, khuseeya nabad qabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, heerka badqabka mihnadda iyo caafimaadka guud ama mid gaar u ah goobo shaqo ama hey'ado oo ay ka mid yihiin shaqooyin kooda ee la xiriira:
   b) Warshadaha, Mishiinnada iyo Qalabka, oo ay ka mid yihiin:
      i. Dhaqaajiyayaasha kowaad (Prime Movers);
      ii. Gudbinta Mashiinnada kale;
      iii. Qalabka korontada ku shaqeeya ee gacanta lagu qaadan karo;
      iv. Dhismaha iyo dayactirka xayndaabka ama dayrka la adeegsano;
      v. Beddelidda iyo Rakibidda Mashiinno cusub;
      vi. Mashiinnada iswada (Self Acting);
      vii. Mashiinnada wax qaada iyo wiishashka;
      viii. Silsiladaha, xargaha iyo kuwa dallaca ama qaada qalabka loo baahan yahay
      ix. Wiishashka waaweyn iyo qalabka kale ee wax lagu qaado;
      x. Makiinnadaha sameeya uumiga haamaha iyo kunteenarrada;
      xi. Haamaha iyo Tubbooyinka dhaliya cadaadiska, dareeraha iyo gaasas kala nadiifiyey;
      xii. Warshadda Qaboojiyaasha waaweyn.

   t) Qalabka iyo dharka badqabka;
   j) Ka hortagga iyo xakameynta dabka;
   x) Kiimikooyinka halista ah;
   kh) Sii deynta qaaca khatarta ah;
   d) Dikhowga hawada, buuqa iyo gariirka;
   r) U carbinta badbaadada iyo habraaca daadgureynta.

QEYBTA IV:
SHAQO SIIN

CUTUBKA 8AAD:
ADEEGGA HESHIISKA CAADIGA AH

Qodobka 46aad
Qaabka Heshiiska

1. Heshiiska shaqo siinta waxa uu noqon karaa qaab af ah ama qoraal ah.

2. Caddaynta ama burrinta eedeymaha shuruudaha shaqo siinta ee lagu qeexay heshiis af ah, qeyb af ah iyo qeyb qoraal ah, waa mas'uuliyadda loo-shaqeeyaha.

3. Heshiis shaqo siin kasta waa in uu ahaadaa qoraal, haddii muddadiisa shaqo ay tahay seddax (3) bilood oo xiriir ah.

4. Ka hor inta aan la dhaqangelin shaqo siinta, sarkaalka shaqada ee awoodda u leh waa in uu hubiyaa heshiiska in uu waafaqsan yahay qodobada xeerkan, xeer nidaamiyayaasha ama sharciyada kale ee khuseeya shaqada.

5. Sarkaalka shaqada ee awoodda u leh haddii ay u caddaato inay jiraan wax ka soo horjeeda qodobada xeerkan, xeer nidaamiyaasha ama sharciyada kale ee shaqosiinta, sarkaalku waxaa uu:

b) Farayaa dhinacyada in ay dib u sixid ku sameeyaan heshiiska, si loo hubiyo in uu heshiisku waafaqsan yahay qodobada xeerkan;

t) Farayaa dhinacyada haddii ay u hoggaansami waayaan muddo soddan (30) Maalmo shaqo gudahood ee taariikhda heshiiska la galay, dib u sixidda heshiiska lagu sameeyey waxaa loo qaadanayaa in uu buray, waana waxba kama jiraan, hasa yeeshee, xuquuqda dhinacyada ee xeerkani lagu qeexay waa in la dhawraa, muddadii uu shaqaaluhu shaqeynayay xuquuqdiisa shaqaalinnimo waa u ansax.

Qodobka 47aad
Faahfaahinta Shaqo siinta

1. Iyada oo la raacayo qodobbada xeerkan ama xeer-nidaamiyaashiisa, heshiiska qoraalka ah ee shaqo siinta waa in lagu caddeeyaa tilmaamaha soo socda:

b) Magaca, da'da, jinsiga (lab iyo dheddig) cinwaanka iyo mihnadda shaqaalaha

t) Haddii qofku yahay naafo iyo nooca naafanimadiisa;

j)Magaca loo-shaqeeyaha cinwaankiisa iyo mihniddiisa;

x)Shaqa qeexidda shaqosiinta;

kh) Taariikhda shaqada la billaabayo;

d)Muddada heshiiska;

r)Saacadaha iyo goobta shaqada;

s)Xuquuqda la siinayo qofka shaqaalaha ah iyo muddada lagu bixinaayo, heerka kororka, habka xisaabinta xuquuqda iyo faahfaahinta dheefaha kale;

sh) Qodobada iyo Shuruudaha la

i. Fasax sanadeedka iy[illegible]kale; iyo fasaxa loo lacageynayo;

ii. Shaqo gudasho la'aan ka dhalatay xanuun ama dhaawac, oo ay ka mid tahay wixii dhaqaale ah ee la siinayo qofka xanuunsan;
iii. Hawlgabka, qorshaha hawlgabka iyo liiltirka shaqaalaha;

dh) Muddada qofka shaqaalaha waajib ku ah in uu kusoo gudbiyo codsigiisa ogeysiiska shaqo-ka-tegista, si loo soo afjaro heshiiska shaqosiinta;

c) Wixii heshiisyo wadareed ah ee si toos ah u saameynaya qodobada heshiiska iyo shuruudaha shaqosiinta;

g) Haddii shaqaalaha looga baahan yahay inuu ka shaqeeyo dalka dibadiisa muddo ka badan hal bil:

i. Muddada ay tahay qofkaas shaqaalaha ahi in uu shaqeeyo;
ii. Nooca lacagta uu xuquuq ahaan ku qaadanayo;
iii. Wixii xuquuq dheeraad ah oo la siinayo qofka shaqaalaha ah, iyo wixii dheef ah oo uu qofka ku helayo inuu dalka dibaddiisa ka shaqeynayo darteed;
iv. Wixii heshiis iyo shuruudo ah ee la xiriira dib u soo celinta shaqaalaha.

f) Habraaca hakinta ama dhammaadka heshiiska;

q) Xeerarka iyo qodobada kale ee la xiriira qaabka anshax-marinta.

2. Waa in helitaanka qoraalka faahfaahinta shaqosiinta, tixraacyadiisa oo dhan iyo dukumintiyada kale ee la cuskaday qaarkood loo fududeeyaa shaqaalaha.

3. Mar kasta oo faahfaahinta heshiiska wax iska bedelaan, loo-shaqeeyuhu isagoo la tashanaya shaqaalihiisa, waa in uu ku sameeyaa dib u eegis lagu saxayo is-bedelkaas, waana in shaqaalaha uu ku wargeliyaa si qoraalah oo ku saabsan wax ka beddelka ku yimid heshiiska.

Qodobka 48aad
Waajibaadka Loo-shaqeeyaha

1. Loo-shaqeeyaha waxaa waajib ku ah arrimaha soo socda:

b) In uu bixiyo ujuurada lagu heshiiyay, isaga oo raacaya shuruudihii, goortii iyo meeshii la isku raacay bixinta ujuurada sida heshiiska ku cad ee waafaqsan xeerkan, xeer-nidaamiyayaashiisa ama heshiisyo wadareedkii jiray;

t) In uu qaado, si waafaqsan xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaashiisa tallaabooyinku habboon oo uu ku wanaajinayo xaaladaha badqabka mihnadda iyo caafimaadka goobta shaqada, oo ay ku jirto ka hortagidda dhaawacyada shaqada.

j) In shaqaalaha si lacag la'aan ah loogu sameeyo marag-furka iyo caddeynta waayo aragnimada shaqada marka ay codsadaan;

x) Inuu tixgelin buuxda siiyo cabashooyinka dhabta ah ee shaqaalaha;

kh) In uu fuliyo waajibaadyada kale ee ku xusan xeerkan, xeer- nidaamiyayaashiisa ama shuruucda kale ee shaqada;

d) In aanu wax ka goyn karin ama ka hakin karin qeyb ka mid ah lacagaha shaqaalaha iyo lacagta kale ee uu muteystay, marka laga reebo meelaha uu banneeyey xeerkani;

r) In aanu weydiinsan karin, kar karin shaqaalaha lacag caddaan am haddiyado nooc kasta oo ay yi o uga beddelanaya shaqosiin ama wa

la xiriira qodobada heshiiskii iyo shuruudihii lagu shaqaaleysiiyay shaqaalaha;

s) In aan lagu qasbin ama lagu boorrin shaqaalaha inay badeecadaha ka iibsadaan dukaammada ama goobo cayiman;

sh) In aanay saameyn ku yeelan shaqaalaha aragtidiisa siyaasadeed ama ururrada shaqaale ee uu daacadda u yahay darteed.

Qodobka 49aad
Waajibaadka Shaqaalaha

1. Shaqaalaha waxaa waajib ku ah arrimaha soo socda:

b) In uu ka shaqeeyo ilaalinta danta shirkadda iyo danta guud ee wax soo saarka Qaranka isaga oo markasta maanka ku haya nooca shaqo ee laga doonayo;

t) Inuu dhawro tilmaamaha ku saabsan qaabka fulinta iyo nidaamka shaqada ee uu soo saaro loo-shaqeeyaha ama ciddii kale ee uu u wakiisho si waafaqsan xeerkan;

j) In uu si weyn u ilaaliyo hantida shirkadda ee lagu aaminay.

CUTUBKA 9AAD:
HESHIISKA FARSAMO BARADKA

Qodobka 50aad
Qeexid, Ujeedooyin iyo Wax-ka-dhaafid

1. Heshiis farsamo-barad waa xiriir shaqosiin gaar ah oo qoraal ah, loo-shaqeeyuhuna uu ballan qaadayo in uu qofka farsamo-baradka ah siinayo ama uu u keenayo cid siisa tilmaamo tababar, si uu u noqdo shaqaale xirfadle ah oo tababaran.

2. Tababar xirfadeedka farsamo-baradku wuxuu ka kooban yahay tababar farsamo oo gacanta laga qabanayo iyo mid qoraal iyo akhris ah.

3. Ujeeddada tababar howleedku waa in la siiyo qofka farsamo-baradka ah xirfadaha lagama maarmaan ka u ah shaqada lagu qori doono, ka dib markii uu si tartiibtartiib ula soo qabsado hawsha.

4. Ujeeddada laga leeyahay tilmaamaha waxbarasho waxa ay tahay in qofka farsamo-baradka ah la siiyo aqoon farsamo ee uu u baahan yahay si uu u noqdo shaqaale leh xirfad dhammeystiran.

5. Wixii kharashka wax lagu baranayo waxaa bixinaya loo-shaqeeyaha.

6. Heshiiska farsamo-baradka waxaa laga dhaafayaa dhammaan wixii kharashaad ah iyo lacagta diiwaangelinta.

Qodobka 51aad
Faahfaahin

1. Heshiis kasta oo farsamo-barad waa in uu ka koobnaadaa arrimaha soosocda:

b) Magaca, Nooca Ganac iqada iyo Cinwaanka loo-shaqeeyaha;

t)Magaca,Da'da, Xaaladda Qoysnimo, Dhalashada iyo Cinwaanka farsamo-baradka;

j)Shaqo, Farshaxan ama Ganacsi wax kasta oo ay tahay ujeeddada farsamo-baradka;

x)Adeegyada farsamo-baradka uu ballan qaaday in uu fulinaayo;

kh) Muddada farsamo-baradka iyo goobta uu ka shaqo geli doono;

d)Lacagta la siinaayo farsamo-baradka oo ah ujuurada iyo daryeel kale muddada lagu jiro farsamo-baradnimada;

r) Xaaladaha cuntada, jiifka iyo waxbarashada ee farsamo-baradka.

Qodobka 52aad
Muddada iyo Xaaladda Farasamo-baradka

1. Dhalinyarada ay da'doodu u dhaxeysa 15 ilaa 30 Sano ayaa loo qaadan karaa farsamo-baradnimo, iyada oo ku xiran markasta xaddidaadda dhanka da'da iyo shuruudaha kale ee shaqo siinta ee uu dhigayo xeerkan iyo xeer-nidaamyeyaashiisa ama shuruucda kale ee dalka.

2. Muddada heshiiska farsamo-baradnimada waa in aanay ka badnaan Saddex (3) Sano.

3. Muddada farsamo-baradku uu u shaqeeyey labo (2) loo-shaqeeye ama in ka badan oo kala duwan in la isu geeyaa markii la xisaabinayo muddada ugu badan ee qof ka loo oggol yahay in uu farsamo-baradnimo ku shaqeeyo, waxaase shardi ah in muddada labada (2) farsamo-barasho u dhexeysaa aanay ka badneyn hal (1) sano, sidoo kale, labada (2)xirfadood ee uu baranayey waa in ay isku nooc yihiin.

4. Saacadaha shaqada ee farsamo-baradku waa in aanay ka badnaan Todoba (7) Saacadood Maalintii iyo 42 Saacadood Toddobaadkiiba.

5. Waqtiga ku baxay tababar qoraalka waxaa lagu tirinayaa saacadaha farsamo-baradka ee caadiga ah.

6. Hawlaha farsamo-baradka, nooc kasta oo ay yihiin waxaa ka mamnuuc ah in la qabto inta u dhaxaysa 10:00 PM ilaa iyo 6:00 AM.

Qodobka 53aad
Baaris Caafimaad

Ka hor inta aan la qaadan qofka farsamo-baradka ah, loo-shaqeeyuhu waa in uu marsiiyaa baaris caafimaad si loo hubiyo in uu ku habboon yahay mihnadda loo tababaraayo.

Qodobka 54aad
Shaqo Sii wadasho

Haddii ay dhammaato muddada farsamo-baradka, heshiiskiina aan la joojin, Farsamo-baradku wuxuu sii wadi doonaa inuu ku shaqeeyo howl u dhiganta shahaadada uu ku helay imtixaankii laga qaaday, muddada farsamo-baradkauu ku [illegible]a loogu xisaabinayaa muddadii uu tababartay.

Qodobka 55aad
Waajibaadka Loo-shaqeeyaha

1. Waajibaadka loo-shaqeeyaha ka saaran farsamo-baradka waa:

b)In uu siiyo ama uu keeno cid siisa farsamo-baradka tilmaamaha tababarrada ee u suurta gelinaya in uu yeesho aqoonta uu u baahan yahay si uu u noqdo shaqaale xirfadle ah oo tababaran;

t)Inuu iskaashi la yeesho hay'adaha dawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ka mas'uulka ah abaabulidda koorsooyinka tilmaamaya ee lagu kaabayo tababarka gacanta.

j)In xuquuqda la siinayo farsamo-baradka ay noqotaa mid ku filan oo u qalanta;

x)In uu hubiyo in farsamo-baradka aan loo dhiibin howl ka baxsan awooddiisa jireed ama howl aan xiriir la laheyn mihnadda loo tababaraayey;

kh) In uu siiyo farsamo-baradka dhammaan xuquuqdiisa oo aan waxba laga jarin, uuna siiyo waqti ku filan ee uga qeyb qaadan karo koorsooyinka lagama maarmaanka ah ee la xiriira tababarkiisa, uuna hubiyo in farsamo-baradku uu ka qeyb qaatay koorsooyinkaas;

d)In uu siiyo farsamo-baradka waqtiga uu u baahan yahay in uu uga qeyb qaato imtixaannada uu ku heli lahaa shahaadada uu mudan yahay;

r) In uu ku wargeliyo qofka farsamo-baradka mas'uulka ka ah horumarka uutababartuhu ka sameeyay tababarradii la siiyay;

s) In uu hubiyo in farsamo-baradka aan loogu shaqeyn sidii shaqaalaha joogtadaah, loona dirin shaqooyin xamaali ah;

Qodobka 56aad
Waajibaadka Farsamo-baradka (Apprentice)

1. Waajibaadka saaran farsamo-baradka waa:

b) In uu u hoggaansamo loo-shaqeeyaha ama ciddii uu u wakiisho howsha tababarka, waana in uu raaco timaamaha la siinayo;

t) In uu u guto shaqadiisa si ay ku dheehan tahay mas'uuliyad;

j) In uu si joogta ah u xaadiro qaadasha koorsooyinka waxbarasho ee mihnidaha tababbarka la xiriirta;

x) In uu ilaaliyo shuruudaha heshiiska tababbarka.

Qodobka 57aad
Imtixaanka Qiimeynta

1. Marka uu farsamo-baradku dhammeysto tababbarrada gacanta iyo kuwa koorsooyinka ee uu soo qaatay, waxa uu geleyaa imtixaanno lagu hubinayo aqoonta uu u leeyahay xirfadda la baray.

2. Shahaadooyinka la siiyey dhammaadka xilliga tababarka waa in lagu qoraa, laguna keydiyaa diiwaanka shaqada.

Qodobka 58aad
Shaqosiin Waajib ah

Loo-shaqeeye kasta oo ay u shaqeeyaan labaatan (20) shaqaale ama in ka badan, waa in uu qaataa ugu yaraan hal qof oo farsamo-barad ah.

CUTUBKA 10AAD:
QANDARAASYO HOOSAAD

Qodobka 59aad
Ogeysiiska iyo Soo Gudbinta Nuqullada

1. Qandaraas-hoosaad-qaatuhu waa in uu goob kasta oo shirkaddiisa shaqo uga socoto ama goobo qandaraas-hoosaad isaga laga qaatey leeyahay si joogta ah oo muuqata loogu soo bandhigaa ogeysiisyada, laguna faafiyaa in uu yahay qandaraas-hoosaad-qaate, kuna qoraa Magaca, Shaqada iyo Cinwaanka qandaraas bixiyaha uu qandaraas-hoosaadka ka haysto.

2. Marka uu jiro heshiis qoraal ah oo u dhexeeya qandaraas-hoosaad-qaataha iyo qandaraas bixiye kasta, qandaraas-bixiyaha waxaa waajib ku ah inuu laba nuqul oo qandaraaska ah u gudbiyo sarkaalka shaqada ee awoodda u leh, isaga oo tilmaamaya meesha ay ku taal goobta shaqada laga fulinayo.

Qodobka 60aad
Mas'uuliyadda

1. Haddii goob shaqo lagu qabanayo ay tahay hooso Shaqo (Garaash) ama goobo ganacsi kale oo uu leeyahay qandaraasluhu ama goobo kale oo aanu laheyn, qandaraasluhu wuxuu shaqada iyo mas'uuliyadda shaqaalaha kala wareegayaa qandaraas-hoosaad-qaataha, haddii qandaraas-hoosaad-qaatuhu uu kaco ama musallafo oo uu iska bixin waayo deyntii lagu lahaa. Heshiiskan u dhexeeya qandaraaslaha iyo qandaraas-hoosaad-qaataha wuxuu ansax noqonayaa haddii aanu sidaas si ka duwan u qoraynin.

2. Haddii ay dhacaan xaaladaha noocaas oo kale ah ee uu Shaqaalaha xuquuqdiisa waayo, qofka Shaqaalaha ahi wuxuu xaqiisasi toos ah uu ugu yeelanyaa qandaraaslaha.

3. Haddii heshiiskii hore oo ay wadagaleen shaqaalaha uu qandaraas-qaataha siineyn xuquuq dheeraad ah, shaqaalaha qandaraas-hoose-qaatuhu waxay xaq u leeyihiin inay helaan xuquuq dhaqaale iyo daryeel la mid ah kan ay qaataan shaqaalaha qandaraaslaha ee heshiiska qandaraas kula jira qandaraas-hoosaad- qaataha.

CUTUBKA 11AAD
XAALADAHA IYO SHURUUDAHA

Qodobka 61aad
Xaaladaha Ugu Yar ee Aasaasiga u ah Shaqosiinta

1. Qodobbada cutubkan waxa ay tilmaamayaan xaaladaha ugu yar iyo shuruudaha aasaasiga u ah heshiiska shaqosiinta.

2. Haddii xaaladaha iyo shuruudaha heshiiska shaqosiinta la waafajiyey xeer- hoosaadyo waafaqsan heshiis wadareed laba dhinac ay isla ogolaadeen ama lagu xusay sharci qoran ama xukun Maxkamadda khuseyso ay soo saartay ama amar kale oo Maxkamadeed, ay shaqaalaha u dhaamaan xaaladaha ku xusan qodobbada cutubkani waxaa la qaadanayaa xaaladaha iyo shuruudaha shaqaalaaha ay dantoodu ku jirto.

Qodobka 62aad
Saacadaha Shaqada

1. Saacadaha shaqada waxaa loola jeedaa muddada uu qofka shaqaalaha ahi xaadirka ku yahay goobta shaqada, oo aanay ku jirin saacadaha nasashada eeqoran ama loogu heshiiyay si waafaqasan xeerkan iyo xeer hoosaadyada ama shuruucda kale ee dalka.

2. Saacadaha shaqada caadiga ah ee shaqaaluhu, haddii ay tahay mid ku xaddidan Waqti, gabal shaqo, ama shaqo go'an si kastoo loo xisaabiyo, waa in aanay ka badan siddeed (8) saac maalintiiba ama 48 saac toddobaadkiiba.

3. Saacadaha la shaqeeyey ee dheeraadka ku ah saacadaha caadiga ah ee shaqada waa:

b) In aanay ka badnaanin laba (2) saac maalintiiba oo ah 12 saac toddobaadkiiba;

t) Saacadaha dheeraadka ah ee uu shaqaale shaqeeyey wuxuu ku kasbanayaa xuquuq ka badan saacadihii caadiga ahaa ee shaqada, waana in aysan ka yaraan 50% saacaddiiba.

Qodobka 63aad
Shaqooyinka aan Xiriirka Aheyn

Mihnadaha aan shaqadooda xiriir aheyn ama joogitaan shaqaale looga baahanayn ama hawlo daryeel ah, saacadahooda shaqada ee caadiga ahi waa toban (10) saacadood maalintii ama 60 saacadood todobaadkii.

Qodobka 64aad
Fasaxyada Nasashada ee Todobaadka

1. Shaqaale kasta wuxuu xaq u leeyahay hal maalin oo nasasho ah toddobaadkiiba, kaas oo sida caadiga ah noqonaysa maalinta Jimcaha.

2. Marka laga reebo awoodaha gaarka u ah wasiirka ee ku xusan faqradda shanaad ee isla qodobkan, maalinta nasashada waxay ka kooban tahay ugu yaraan 24saac oo xiriir ah toddobaadkiiba.

3. Ilaa iyo intii suurtagal ah, nasashada t ı ah waa in waqti isku mid ah la ş

dhammaan shaqaalaha ku shaqeeya halgoob.

4. Shaqaaluhu waxa ay sidoo kale xaq u leeyihiin in ay helaan nasasho maalmaha munaasabadaha qaranka ee dawladdu aqoonsan tahay.

5. Wasiirka marka uu la tashado wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa looshaqeeyayaasha, wuxuu tilmaamo ka soo saarayaa mihnadaha u baahan fasaxyo gaar ah sida:

b)Fasaxyada u baahan kara si kaltan ah;

t)Wax-ka-beddelista fasax dhaqameedyada iyada oo la tixgelinayo duruufaha gaarka ah;

j)In uu soo rogo fasaxyo ka badan hal (1) toddobaad, iyada oo la tixgelinayo daruufaha gaarka ah.

Qodobka 65aad
Fasaxyada Qaranka

1. Qofka shaqaalaha ah wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xuquuqdiisa oo buuxda maalmaha uu ku jiro fasaxyada Qaran ama fasaxyada guud.

2. Qofkii shaqaale ah ee shaqeeya maalin fasax ah, wuxuu xaq u leeyahay in mushaarkiisa loogu kordhiyo xuquuq aan ka yareyn boqolkiiba konton (50%) saacaddiiba.

3. Haddii shaqaale uu shaqeeyo maalmaha Munaasabadaha Qaranka iyo fasaxyada guud wuxuu muteysanayaa boqolkiiba konton (50%) ee mushaarka asaasiga ah Saacaddiiba.

4. Fasaxyada Qaranku waa sidan:

b) Maalinta Shaqaalaha ee 1da May (Hal Maalin)

t) Maalinta Midowga ee 1da Luulyo (Hal Maalin)

j) Maalinta qorista Afka Soomaaliga 21^{ka} Jannaayo (Hal Maalin)

x) Maalinta Ciidul-Fitri (Laba Maalmo shaqo)

kh) Maalinta Ciidul-Adxaa (Seddex Maalmo Shaqo)

d) Maalinta Xuriyadda ee 26^{ka} Juun (Hal Maalin)

r) Maalinta Dhalashada Nabi Muxamed (N.N.K.H) ee 12^{ka} Rabiicul-Awal (Hal Maalin)

s) Fasaxyada kale ee caadiga ah ee Dowladdu ogolaato kuna soo saarto faafinta rasmiga ah.

Qodobka 66aad
Biyaha

Loo-shaqeeye kasta waxaa waajib ku ah in ı o nadiif ah oo ku filan, kuna habbo isticmaalka shaqaalaha ka shaqeeya goobta .doo kale waa in uu deegaanka shaq siiyaa biyo nadiif ah.

Qodobka 67aad
Cuntada

1. Loo-shaqeeyaha waxaa waajib ku ah in uu siiyo cunto shaqaalihiisa marka si cad loogu heshiiyo oo kaliya, ama ay ku qoran tahay waqtiga la gelayo heshiiska shaqosiinta.

2. Loo-shaqeeyuhu waa in uu hubiyaa in shaqaalaha si habboon loo quudiyo, uuna u keeno maacuun ku filan iyo qalabka waxkarinta, uuna u diyaariyaa cunto kariye, kharashkana waxaa bixinaya looshaqeeyaha.

3. Qodobbada ku xusan faqradda (1 iyo 2) ee qaybtan, looshaqeeyaha mas'uuliyadi kama saarna qofka shaqaalaha ah muddada uu ka maqan yahay goobtiisa shaqada.

Qodobka 68aad
Daryeelka Caafimaadka

1. Loo-shaqeeyuhu wuxuu mas'uul ka yahay daryeelka caafimaadka shaqaalaha haddii ay ku caddahay heshiiska shaqada ama siyaasadda loo-shaqeeyaha haddii aanay ka hor imaaneynin qodobada xeerkan.

2. Loo-shaqeeyuhu waa in uu hubiyaa in shaqaalaha naafada ah ay helaan daryeel caafimaad oo munaasab ah marka ay ku sugan yihiin goobta shaqada.

3. Loo-shaqeeyuhu waa inuu si deg deg ah u qaadaa talaabo kasta oo ku habboon sidii lagu soo ogeysiin lahaa jirrada qofka shaqaalaha ah, marka ugu horreysa ee lagu arko xanuunka.

4. Loo-shaqeeyaha waxaa laga dhaafayaa mas'uuliyadda haddii:

   b) Uu caddayn karo in uusan ogeyn in shaqaaluhu uu xanuunsan yahay;
   t) Uu qaaday dhammaan tallaabooyinkii lagama maarmaanka u ahaa in la soo ogeysiiyo;
   j) Ay jirto duruuf awooddiisa ka baxsan in uu ogaan waayo in qof shaqaalaha ka mid ahi jirran yahay.

5. Qodobkani ma khuseeyo xaaladaha soo socdo:

   b) Haddii qofka shaqaalaha ahi uu jirraday ama uu dhaawac soo gaaray, isaga oo shaqada uga maqan si sharci darro ah ama cudurdaar la'aan.
   t) Haddii la caddeeyo in qofka shaqaalaha ah sabab uu u yahay xanuunkiisa ama isagu dhawaac is-gaarsiiyay;
   j) Haddii daaweynta caafimaad ee shaqaalahaasi si lacag la'aan ah ay ku bixineyso dawladda ama laga bixinayo qorshe ceymis oo loogu talo galay in shaqaalaha laga kaabo, kaasoo ku saleysan sharci qoran.

Qodobka 69aad
Fasax Sannadeedka

1. Qof kasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay 30 maalmo shaqo oo fasax ah sanadkasta, iyada oo xuquuqdiisiina ay u socoto, ka dib markii uu shaqeeyay hal sano oo buuxda oo xiriir ah.

2. Marka shaqada laga joojiyo shaqaalaha sannado xiriir ah ka dib oo uu shaqeeyay, wuxuu xaq u yeelanayaa in loo qoondeeyo hal bil oo fasax ah laba iyo toban (12) biloodkii kasta ee uu shaqeynayay, dhinaca kale haddii shaqaalaha shaqada laga joojiyey sannadkii oo aan u buuxsamin, waxaa loo xisaabinayaa jajabka bilihii sannadkaas oo ay ku jirto bisha ugu dambeysay ee uu shaqeeyay haddii ay ka badan tahay shan iyo toban (15) cisho.

3. Marka xiriirka shaqada ka istaago shaqaalaha ka hor inta aanu qaadan fasaxyadii uu xaqa u lahaa, waxaa la siinayaa xuquuqdii bil kasta oo aanu fasaxeeda qaadan.

4. Fasax sanadeed kasta oo sida joogtada ah loo qaato, waxaa la bixinayaa waqti uu gooyay loo-shaqeeyuhu, isaga oo la tashanaya shaqaalaha ama wakiilkooda, isla markaasna tixgelinaya baahida goobta shaqada iyo danta shaqaalaha labadaba.

5. Loo-shaqeeyuhu waa in uu qofka shaqaalaha ah ugu yaraan toddobo (7) cisho ka hor ku sii wargeliyaa xilliga uu u qoondeeyay in uu fasax sanadeedkiisa qaato.

6. Muddo gaaban oo aan ka yareyn lix (6) maalmo-shaqo oo xiriir ah wuxuu shaqaaluhu ka hormarsan karaa ama ka qaadan karaa fasaxiisii sannadlaha ahaa haddii baahida shaqadu sidaas ku jirto.

7. Waqtiga la bixiyay ogaysiiska joojinta shaqada ee labada dhinac waa in aanay ku jirin fasax sanadeedka.

8. Dhammaan xuquuqda la siinayo qofka shaqaalaha ah bilawga fasaxa sanadlaha ah waa in la siiyaa xuquuqdiisa marka uu qaadanayo fasaxa.

Qodobka 70aad
Fasax Xanuun

1. Qof kasta oo shaqaale ah oo ka baxay muddadii tijaabada, kuna xanuunsada shaqada gudaheeda, waxaa waajib ku ah:

b) In uu la yimaado warqad caafimaad oo caddeyneysa in uusan shaqeyn karin xanuunka dartiis, taas oo uu soo qoray dhakhtar rasmi ah oo leh aqoonta cudurka uu sheeganayo;

t) In sida ugu dhakhsaha badan oo suurtagal ah loogu wargeliyo loos-haqeeyaha, loo-shaqeeyuhuna waa inuu tixgeliyaa xanuunka shaqaalaha u shaqeeya;

j) Muddada xanuunka shaqaalaha haddii:

i. Uu yahay (3 ilaa 7) maalmo-shaqo, wuxuu xaq uyeelanayaa 100% mushaarkii heshiisl

ii. Uu yahay (8 ilaa1· ;haqo, wuxuu xaq u yeelanayaa 75%

mushaarkii heshiisku ahaa;

iii. Muddada xanuunka uu yahay bil (30) maalmo-shaqo, wuxuu xaq u yeelanayaa 50% mushaarkii heshiisku ahaa;

iv. Mar walba wixii ka badan (30) maalmo-shaqo waxa ay ku xirnaan doonaan nooca heshiiska dhinacyada ay wada galaan;

v. Qof kasta oo shaqaale ah oo aan ka bixin muddadii tijaabada, kuna xanuunsada shaqada gudaheeda, waxaa la raacayaa waxa ku qoran heshiiska ay wadagaleen labada dhinac, hase yeeshee, haddii aanu jirin wax ku tilmaaman heshiiskooda, waxaa la tixgelinayaa wixii labada dhinac ay markaas ku heshiiyaan.

Qodobka 71aad
Fasax Gaar ah

1. Loo-shaqeeyuhu waa in uu siiyaa shaqaalaha fasax gaar ah, oo mushaarkiisa u dhammeystiran yahay, kuwaas oo noqon karan sida:

i. Fasax guur, kaas oo noqonaya (3 ilaa 7) maalmo-shaqo;

ii. Fasax Xaj ama Cimro, kuwaasoo noqonaya muddada arrimaha Xajka ama Cimrada ay socdaan;

iii. Xaaladda ku xusan faqradda (ii) waxay ku xiran tahay la imaanshaha fiisaha (Visa) Xajka ama Cimrada;

2. Loo-shaqeeyuhu markii uu doono wuxuu siin karaa qofka shaqaalaha ah fasax uu isagu u gartay ama danqasho, si uu shaqaaluhu ugu soo qabsado hawl isaga u gaar ah, una noqota dhiirrigelin.

Qodobka 72aad
Diiwaanka Fasaxa

1. Loo-shaqeeyuhu waa inuu hayaa diiwaanka guud ee muujinaya macluumaadka fasaxyada:

b) Taariikhda shaqosiinta qof kasta oo ka mid ah shaqaalaha;
t) Taariikhda uu qaatay fasaxa;
j) Muddada fasaxyada;
x) Nooca fasaxyada;
kh) Xuquuqda shaqaalaha.

CUTUBKA 12AAD:
GO'AAMINTA IYO ILAALINTA XUQUUQDA

Qodobka 73aad
Xuquuq

1. Xuquuq (Remuneration) waa caddadda lacageed ee loo-shaqeeyuhu uu ku siiyo qofka shaqaalaha ah in u dhiganta shaqadii uu qabtay, iyada oo aan laga iarin wax lacag ah, marka laga reebo lacag loo jarayo sifo sharciga waafaqsan oo loogu talagalay arrimahar

b) In lacagta loo jarayo ceymis lgabka qofka shaqaalaha ah;

t) In lacagta lagu darayo raashinka lagu cuno goobta shaqada, taas oo loo oggolaaday loo-shaqeeyuhu in uu ka bixiyo ujuurada shaqaalaha;

j) Lacag jaris kasta oo waafaqsan sifo sharci ah oo markaas dhaqangal ah oo loo-shaqeeyaha u oggolaanaya in uu lacag ka jaro ujuurada shaqaalaha;

x) Lacag lagu jarayo Codsiga uu soo qortay qofka shaqaalaha ah, taas oo aanay jirin wax dan ah, toos ah ama dadban oo ugu jiri karta loo-shaqeeyaha.

Qodobka 74 aad
Ku Filnaasho iyo U Sinnaansho

1. Qofkasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay in uu helo xuquuq ku filan oo u dhiganta Shaqada uu qabtay, xuquuqdaas oo dammaanad qaadaysa nolol ku habboon sharafta iyo karaamada aadanaha.

2. Marka la go'aaminayo saamiga xuquuqda, waa in aanay jirin kala-takoorid ku saleysan lab iyo dheddig, midab, isir, da', jinsiyadda dhalashada, af guri, diinta, asal, naafanimo, uur, fayriska yareeya difaaca jirka (HIV/Aids), aragtida ra'yi siyaadeed ama ka tirsanaan urur siyaasadeed ama mid shaqaale, xuquuqda iyo waajibaadka shaqaalaha oo dhan waa u siman yihiin xeerkan shaqada.

3. Xuquuq isku mid ah waa in la siiyaa dadka qabanaya shaqo isku mid ah, oo kuna salaysan nooca shaqada, hufnaanta, qiimaha shaqada iyo muddada intaba.

4. Qiimeyn kasta oo lagu sameynayo sinnaanta xuquuqaha waa in markasta loo adeegsado ujeeddooyin iyo heerar wax-ku-ool u ah shaqada.

Qodobka 75aad
Qaababka Bixinta Xuquuqda

1. Bixinta xuquuqda waxaa lagu saleyn karaa halbeeg waqti sida bil, shan iyo toban (15) maalmo-shaqo, toddobaad, maalin ama saacad ama halbeeg shaqo (sida gabal-shaqo ama shaqo-go'an).

2. Loo-shaqeeyuhu waa inuu hore ugu sii sheego qofka shaqaalaha ah:

b) Qeybaha uu ka kooban yahay sheyga uu ka shaqeynayo, shaqada la qabanayo iyo qiimaha lagu bixinayo midkiiba;

t) Tirada shaqada la qabanayo iyo waqtiga ay qaadaneyso in lagu dhammeeyo.

3. Loo-shaqeeyaha iyo shaqaaluhu waxa ay ku heshiin karaan in qayb ka mid ah xuquuqda ay noqoto mid ah faa'iido-wadaag saamiyada, khidmad ku xiran wax-soo-saarka ama adeegga la qabtay ama gunnooyin lagu bixiyo wax u dhigma lacag (in kind), si kastaba ahaatee:

b) Gunnooyinkaas waa in ay munaasab ay u yihiin adeegsiga qofeed iyo dheefta ay helayaan shaqaalaha iyo qoysaskooda;

t) Qiimaha ku xiran gunnooyinka noocan ah waa in ay noqdaan kuwa daahfuran, maangalna ah;

4. Haddii aanu jirin heshiis wadareed shaqo oo si kale u sheegaya ama heshiis si gaar ah loola
galay qofka shaqaalaha, saamiga uu qofka sh ku leeyahay faa'iidada shirkaddu wax
ay ku xiran tahay faa'iidada saafiga ah (Net I ɔo harta loo-shaqeeyaha.

5. Markii aanu jirin heshiis wadareed shaqo oo dhigaya ama wax kale oo ay ku heshiiyeen dhinacyadu, khilaafyada soo kala dhexgala labada dhinac, waxaa lagu xallinayaa si waafaqsan Caadooyinka iyo Dhaqammada Degaankaas ka jira, hase yeeshee, haddii aanay jirin caadooyin iyo dhaqamo deegaankaas ka jira waxaa khilaafka lagu xallinayaa si waafaqsan nidaamka u sinnaanshaha Caddaaladda.

Qodobka 76aad
Ujuurada ugu yar

Iyada oo la tixgelinaayo xaaladda dhaqaale iyo kuwo bulsho ee Dalka ku sugan yahay, Wasiirka ayaa go'aamin kara ujuurada ugu yar oo ay qaadanayaan heerarka kala duwan ee shaqaaluhu, ka dib markii uu la tashado Golaha Jaan-goynta Xuquuqda, uuna dhegeysto talooyinka Guddiga Shaqada Federaalka.

Qodobka 77aad
Dheef Kale oo Dheeraad ah

1. Loo-shaqeeye waa in uu:

b) Siiyaa shaqaalaha degaan marka uu u shaqo tegayo meel ka fog degaankiisa caadiga ah;

t) Siiyaa shaqaalaha cunto lacag la'aan ah, ama lacag cunto ugu filan, marka qofka shaqaalaha ah uu ka shaqeeyo meel ka baxsan degaankiisa caadiga ah, isla markaana aanay jirin goob shaqaaluhu ku wada cunteeyaan;

j) Siiyaa shaqaalaha Gaadiid shaqada geeya kana soo celiya, marka shaqaaluhu uu ka shaqeeyo magaalo ama degmo ka fog degaankiisa caadiga ah;

2. Wasiirku marka uu wadatashi la sameeyo inta ay khuseyso wuxuu go'aamin karaa:

b) Marka ay jiraan xaalado kale oo ah in shaqaalaha la siiyo degaan, Gaadiid ama Goobo ay ka wada Cunteeyaan; Iyo

u) Dheefaha kale ee dheeraadka ah oo ay tahay in loo-shaqeeyuhu siiyo shaqaalaha.

Qodobka 78aad
Gunnooyinka Ciidaha

1. Qof kasta oo shaqaale ah wuxuu xaq u leeyahay gunno Ciideed.

2. Shaqaalaha aanan shaqeyn hal (1) sano oo dhammeystiran waxay xaq u leeyiihiin Liiltir/Xuquuq ku qiimeysan intii bilood oo ay ka shaqeeyeen laba iyo tobankii (12) biloodba oo ay ku jiraan bilihii ay ka shaqeeyeen wax ka badan shan iyo toban (15) beri, kuwaas oo laga soo qaadayo bil buuxda.

3. Marka shaqaalaha laga joojiyo shaqada, wuxuu xaq u leeyahay in la siiyo Liiltir/Xuquuq ku qiyaasan bilihii uu sanadka ka shaqeeyay ama jajabka bishii ugu dambeysay ee uu ka shaqeeyay in ka badan shan iyo toban (15) cisho, Liiltirkaas/ Xuquuqdaas oo la siinayo ka dib markii xisaabtiisa la xiro.

4. Marka xuquuqda shaqaaluhu ku saleysan yahay inta shey ee qofku soo saaray ama khidmad boqolley ah oo loogu dhuft -saarkiisa guud, gunnada shaqaalah waxaa lagu cabbirayaa celceliska lacagt lay intii shey ee uu soo saaray am

celceliska wixii uga soo baxay khidmadda boqolleyda ee loogu dhuftay wax-soo-saarkiisa guud seddaxdii (3) billood ee ugu dambeysay ama bilo kayar, markii laga jaro wixii kharash ah ee lagu leeyahay qofka, haddii ay khidmadaasi tahay mid hal mar la wada bixinayo iyo haddii kaleba.

Qodobka 79aad
Nooca iyo Muddada Lacag Bixinta

1. Iyada oo la raacayo qodobbada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa, Xuquuqda shaqaalaha waa in lagu bixiyaa lacagta sharciga ah.

2. Bixinta ujuurada ee qaab ballanqaad ah, qaansheegato, boonooyin ama qaab kale oo loo ekeysiiyey mid sharci ah waa reeban tahay.

3. Lacagta waa in lagu bixiyaa goobta shaqada iyo maalinta ugu dambeysa ee muddada mushaar bixinta.

4. Marka dhaqan sidaas ahi goobta shaqada aanu ka jirin, xuquuqda waa in lagu bixiyaa waqti joogta ah oo aan ka badneyn shan iyo toban(15) cisho marka shaqaaluhu aanu joogto aheyn, hasa yeeshee, shaqaalaha rasmiga ah waa in bixinta xuquuqdooda aanu ka badnaanin muddo bil ah.

5. Marka laga hadlayo gabal shaqo oo socotay in ka badan shan iyo toban (15) cisho, qofka shaqaalaha ahi wuxuu dalban karaa in lasii siiyo xuquuqdiisa shan iyo toban maalmo shaqo oo u dhiganta shaqadii la qabtay, oo aan ka yareyn boqolkiiba **80%.**

6 Marka aanu jirin heshiis qoraal ah oo si kale sheegaya, xubnaha shaqaalaha ee mushaharkoodu ku saleysan yahay saami boqolley oo loogu dhuftay wax-soo-saarkooda guud, wuxuu xaq u leeyahay in loogu dhufto khidmadda loogu dhufto shaqaalaha ka howlgala laamaha la midka ah laantiisa shaqo.

7. Khidmadda gunno ee shaqo ganacsi la sameeyay saddexda (3) bilood waa in la bixiyaa dhammaadka rubuca ku xiga.

8. Saamiga faa'idooyinka lagu yeesho faa'iidada guud ee shirkaddu hesho sanad miisaaniyadeed kasta, waa in la dhiibaa horraanta sanad miisaaniyadeedka ku xiga.

Qodobka 80aad
Warqadaha Lacag Bixinta

1. Bixinta xuquuqda waxaa lagu caddeeyaa warqad lacag bixineed oo uu saxiixay qofka shaqaalaha ah ama uu suulka saaray haddii uu yahay mid aan wax qorin.

2. Warqadaha lacag bixinta waa in uu keydiyaa loo-shaqeeyuhu oo dhigaa Meesha ay yaallaan Dokumiintiyada kale ee muhiimka ah, waana in uu soo saaraa markii uu ka dalbado Sarkaalka Shaqada.

Qodobka 81aad
Dhisidda Golayaasha Xuquuqda

1. Wasiirku wuxuu Dhisayaa Guddiga Xuquuqda ee heer Federaal si ay u go'aamiyaan xuquuqda, muddada iyo shuruudaha shaqada ugu yar ee heer Federaal.

2. Wasiirka wuxuu ansixinayaa Guddiyada Xuquuqda oo ay soo dhisteen Wasiirrada Shaqada ee heer Maamul Goboleed, Guddigaas oo go'aaminaya xuquuqda, muddada iyo shuruudaha shaqada ee heer Maamul Goboleed iyo wixii ka sii hooseeya.

3.Magacaabista Guddiyada, waxa ay ku soo baxaysaa wareegto lagu baahiyay faafinta Rasmiga ah ee Dowladda, taas oo laga doonayo in:

b) Ay caddeyso:
   i. Waajibaadkooda shaqo, oo ay ku jirto muddada shaqadu;
   ii. Magacyada xubnaha la magacaabay;

t) Ay cayinto muddada uu Guddigu u baahan yahay si baaritaan uu ku sameeyo, warbixinna ugu diyaariyo Wasiirka;

j) Ay u yeerto wakiillada ka socda dhinacyada danaynaya.

4. Guddiga Xuquuqda ee heer Federaal ee uu magacaabayo Wasiirku, waxa uu ka kooban yahay xubnaha soo socda, kuwaas oo lagadoonayo in ay leeyihiin aqoon iyo waayo-aragnimo ay ku go'aamin karaan muddada iyo shuruudaha ugu yar ee shaqosiinta, waxa ayna ka kooban yihiin:

b)Guddoomiye;

t)Xubno ka kooban saddex (3) oo ay soo magacaabeen wakiilladaururrada shaqaalaha;

j) Xubno aan ka kooban saddex (3) oo ay soo magacaabeen wakiillada ururrada loo shaqeeyayaasha;

x)Xubno madaxbannaan oo ka kooban seddax (3).

Qodobka 82aad
Waajibaadka iyo Awoodaha

1. Shaqooyinka Guddigu waa in:

b) Ay baaraan Xuquuqda iyo xaaladaha shaqada;

t) U yeero, soona dhoweeyo xubnaha ay wakiillada daneeyayaasha ahi si af ama qoraal ahay kusoo magacaabeen;

j) Ay Wasiirka u soo jeediyaan talooyin ku saabsan Xuquuqda iyo xaaladaha shaqada ee ugu yar.

2. Guddigu marka uu howshiisa gudanayo waa in uu tixgelin weyn siiyaa arrimahasoo socda:

b) Baahida shaqaalaha iyo qoysaskooda, iyaga oo tixgelin siinaya heerka guud ee ujuurada dalka, heer nololeedka maciishadda, xuquuqda la siiyo howlgabka iyo heerarka noloshaee kooxaha kale ee bulshada;

t) Isirrada dhaqaalaha, oo ay ku jiraan shuruudaha looga baahan yahay horumarka dhaqaale, heerarka wax-so aanka joogteynta iyo sare u-qaadista heerka shaqosiinta iyo baahida lo rigelinta maalgashiga.

j) Awoodda loo-shaqeeyayaasha ay u leeyihiin in ay shaqadooda ku guuleystaan;
x) Howlaha ganacsatada yaryar, kuwa dhexe iyo kuwa aadka u sii yaryar;
kh) Qiimaha heerka maciishadda ee nololeed;
d) Yareynta heerka saboolnimada;
r) Heerka ugu hooseeya ee nolosha;
s) Saamaynta ay suurtagal tahay ee in shuruudo la soo jeediyay ee shaqo siinta ee hadda jirta ama shaqo abuuristaba; iyo
sh) Wixii arrimo kale ee la xiriira.

3. Marka Guddigu gudanayo shaqadiisa, wuxuu:
b) Su'aalo waydiin karaa qof kasta oo bixin kara macluumaad la xiriira baaritaanka;
t) Si qoraal ah, uga codsan karaa qof kasta inuu siiyo wixii macluumaad, buug, dukuminti ama sheykale ah oo la xiriira baaritaanka; iyo
j) Qaban karaa doodo dadweyne.

4. Qof kasta oo isaga oo sabab sharci ah haysan diida ama ka gaabsada:
b) In uu ka jawaabo su'aal kasta oo la xariirta baaritaanka; ama
t) In uu dhiibo macluumaad, buug ama dukumenti kasta oo uu ka codsaday Guddigu, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 83aad
Dalabka Xuquuqaha

1. Talooyinka Guddiga Xuquuqda Shaqada uu usoo gudbiyo Wasiirka, waxaa marka la faafinayo loo isticmaalayaa magaca ah "Dalabka Xuquuqaha".

2. Ka hor inta aan la faafin Dalabka Xuquuqaha, Wasiirku waa in uu soo saaraa ogeysiis, kaas oo:
b) Caddaynaya in la soo jeediyey in uu soo saaro dalab ujuuro;
t) Caddaynaya goobta laga heli karo nuqullada qabya-qoraalka dalabka;
j) Soo dhoweynayaa talooyinka laga dhiibanayo qabya-qoraalka dalabka, muddo ku habboon oo aan ka yareyn Soddon (30) Cisho laga soo billaabo markii ogeysiiska la daabacay.

3. Qof kasta oo daneynaya waxna ka qaba dalabka qabya-qoraalka wuxuu muddadala cayimay dhexdeeda kusoo gudbin karaa ra'yigiisa, kaas oo haddii uu diidan yahay qabya-qoraalka aragtidiisa ku billaabaya:
b) Waxyaabaha uu ku sababeeyay diidmadiisa; iyo
t) Waxyaabaha uu soo jeediyay in dalabka qabya-qoraalka laga tiro, lagu daro ama si kale loo qoro.

4. Wasiirku:
*b)*Waa in uu u gudbiyaa Dalabka Ujuurada diidmada laga keenay,iyo tixgelinta talooyinka kaleba; iyo
*t)*Wuxuu ka codsan karaa Guddiga Xuquuqda Shaqada in ay ka baraan degaan arrinta oo ay talo ka bixiyaa[illegible] a soo jeediyay.

5. Haddii Wasiirka ay soo garaan diidmooyi[illegible]ma uu sidaas ku aqbalo; iyo haddii

aanay wax diidmo ah soo gaarinba, Wasiirku wuxuu qabyo qoraalka Dalabka Xuquuqaha u gudbinayaa Golaha Wasiirrada muddo kow iyo labaatan (21) maalmo shaqo gudahood si waafaqsan xeerkan, Go'aanka Golaha Wasiirradu ka soo saaraan dalabka xuquuqaha waxaa lagu daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda;

6. Dalabka Xuquuqda:

b) Wuxuu dejiyaa heerka ugu hooseeya ee xuquuqda;

t) Wuxuu caddeeyaa arrimaha keeni kara in loo-shaqeeyuhu lacag ka gooyo xuquuqda shaqaalaha iyo inta ugu badan ee laga jari karo;

j) Wuxuu sheegayaa xadka ugu badan ee loo-shaqeeyuhu lacag ahaan u goosan karo raashinkii uu shaqaalaha siiyay kadib markii shaqaalaha iyo loo- shaqeeyuhu isla oggolaadaan tayada cuntada iyo qiimaha lacageed ee ay ku kaceyso lana helo oggolaanshaha sarkaalka shaqada;

x) Wuxuu kala caddeynayaa shaqada ku saleysan hawl-qabad (task-based) iyo midda gabal shaqo ah (Piece Work);

kh) Wuxuu kala caddeynayaa shaqada dibadda lagu soo qabtay, shaqada aan joogtada aheyn iyo heshiis shaqo;

d) Wuxuu dejiyaa heerarka ugu hooseeya fayadhowrka shaqaalaha deggan dhismaha loo-shaqeeyaha;

r) Waxaa kala caddeynayaa wax kasta oo ku saabsan xuquuq bixin ama xaaladaha shaqada;

s) Wuxuu qodobbo kala duwan ku tilmaami karaa heerarka shaqaale ee kala duwan; qodobbada qaarkood wax buu ka beddeli karaa, dalab xuquuq hore u jirayna wuu baabi'in karaa.

7. Markii la dajiyo Amarka Xuquuqda:

b) Wuxuu ka koobnaanayaa shuruudaha iyo xaaladaha shaqada ee ugu yar;

t) Wuxuu qeybka mid noqonayaa heshiis kasta oo qofeed ama mid wadareed, markalaga reebo haddii heshiiskaay ku jiraan qodobbo dan u ah shaqaale ama dhammaan shaqaalaha.

8. Loo-shaqeeyaha ku guuldarreysta inuu:

b) Siiyo shaqaalaha dalabkani khuseeyo xuquuqda ugu yar ee ku qeexan dalabkan;

t) Ku dhaqo shaqaalaha xaaladaha shaqo ee lagu qeexay dalabka, wuxuu galayaa dambi, waxayna Maxkamadda awoodda u leh amri kartaa, iyada oo ay wehliyaan ciqaab, iyo in uu bixiyo lacag la'eg farqiga u dhaxeeya lacagtii ku qorneyd amarkii ujuurada iyo qaddarka lacagtii uu isagu si dhab ah u bixiyay

9. Sarkaalka shaqada ayaa isaga oo ka wakiil ah shaqaalaha, wuxuu furi karaa dacwad ka dhan ah loo-shaqeeyaha si uu usoo celiyo lacagta ay shaqaaluhu ku leeyihiin, sababtuna ay tahay loo-shaqeeyaha oo ku guuldarreystay in uu:

b) Siiyo shaqaalaha xuquuqda ugu yar ee dalabka oggol yahay;

t) Ku dhaqo shaqaalaha xaaladaha shaqo ee ku qeexan dalabkan.

Qodobka 84aad
Ilaalinta

1. Ujuurada Shaqaalaha ka maqan waxay mudnaan wayn ka tahay qaansheegadka

   hantida guud ee looshaqeeyaha marka loo eego dhammaan deymaha kale ee shirkadda lagu leeyahay.

2. Xuquuqda qofka shaqaalaha ah marna lagama jari karo, loomana qoondeyn karo, wax kalena luguma xiri karo, marka laga reebo qaddar aan ka badneyn afar meelood meel (1/4) ka mid ah xuquuqda.

3. Lacagaha lagu leeyahay Dawladda ama hay'ad Dawladeed oo kale shaqo loo qabtay darteed ma qaadan karo dhinac saddexaad, mar haddii ay tahay lacagtaas mid la xiriirta xuquuqdii looshaqeeyaha siin lahaa shaqaalaha.

4. Dhammaan xuquuqda uu shaqaaluhu xaqa u yeeshay waa in la siiyo, si waafaqsan xiriirka shaqada, waxaana ku imaaneysa xayiraad xaddidan, haddii aan lagu bixin muddo saddex (3) sano gudahood ah oo kasoo billaabata maalintii uu qofka shaqaalaha ahi xaqa u yeeshay lacagtaas.

5. Wasiirku wuxuu soo saarayaa wareegto uu ku war gelinayo looshaqeeyaha aan diiwaan gashaneyn ama aan degganeyn Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya inuu bixiyo lacag rahan ahoo u dhiganta xuquuqda ay bishii qaataan dhammaan shaqaalaha u shaqeeya ama uu ku talo jiro in uu shaqaaleeyo mustaqbalka.

6. Rahanta laga qaadayo loo-shaqeeyaha wuxuu dhigayaa Akoon gaar ah oo Wasaaraddu uga furan Bankiga dhexe, caddeynta lacag bixinta ayuu keenayaa xafiiska Wasaaradda, Lacagtaas looma isticmaali karo wax aan ka aheyn in lagu bixiyo ujuurada iyo xuquuqda kale ee uu muteysto shaqaalaha u shaqeeya loo-shaqeeyahaas. Haddii loo-shaqeeyuhu uu iska bixin waayo xuquuqdii lagu lahaa,waxaa lacagtaas lagu soo saari karaa saxiixyada loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda, waxaana faahfaahin doona habraac gaar ah uu soo saarayo Wasiirka oo arrintaas khuseeya.

7. Marka uu geeriyoodo qof shaqaale ah, sabab kasta ha ku timaadee, laguna soo wargeliyo ama uu ogaado loo-shaqeeyihiisu, loo-shaqeeyuhu waa in uu sida ugu dhaqsaha badan ee suuragalka ah markaa ka dib ogeysiiska geerida ugu diraa sarkaalka shaqada isaga oo ku qoraya foomka cayiman ee loogu talagalay, haddii aanu jirin sarkaalka shaqada, waa in uu ogeysiiska geerida u diraa Guddoomiyaha Degmada ama Saldhigga Booliska Degmadii uu shaqaalaha dhintay ka shaqeynayay.

8. Haddii qofka shaqaalaha ahi ee geeriyooda inta uu socdo heshiiskiisa shaqo, wakiillada sharciga ah ee qofka shaqaalaha ahi waa in ay keenaan Warqadda Caddeynta Geerida, waxayna xaq u yeelanayaan ujuuradii iyo xuquuqihii kale ee shaqaalaha iyo hantiidiisiiba in lagu bixiyo muddo Soddon (30) maalmo-shaqo gudahood laga billaabo maalintii uu geeriyooday.

9. Loo-shaqeeyaha qofka geeriyooday waxaa waajib ku ah in uu toddoba (7) maalmo-shaqo gudahooda laga billaabo maalintii uu la[illegible], uu u soo gudbiyo sarkaalka shaqad[illegible] dokuumiintiyadii caddeynta lacag bixint[illegible]

10. Haddii muddo seddex(3) bilood ahi ay kasoo wareegto geeridii shaqaalaha.

b) Oo la waayo wax wakiillo sharciyeysan ah oo soo dalbada mushaarkii iyo hantidii shaqaalaha geeriyooday; ama

t) Uu loo-shaqeeyuhu ka shakiyo ama uu diido dalabka looga soo codsaday mushaarka iyo hantida shaqaalaha geeriyooday, looshaqeeyuhu waa in uu sarkaalka shaqada ku wargeliyaa dhammaan mushaarkii iyo hantidii qofka dhintay ku lahaa, intaa ka dib si loo maamula xaaladdaas, waxaa faahfaahin doona habraac gaar ah oo uu soo saarayo Wasiirka, oo waafaqsan sharciga la xiriira dhaxalka ama sharciyada kale ee qoran ee ku saabsan bixinta hantida dadka geeriyooday.

11. Haddii qof shaqaale ahi, isaga oo shaqadiisa gudanaya la dilo ama uu soo gaaro dhaawac keenay in uu shaqadiisa gudan kari waayo muddo Saddex (3) maalmo shaqo gudahood, loo-shaqeeyuhuwaa in uu sida ugu dhaqsiyaha badan Sarkaalka shaqada ugu gudbiyaa warbixin faahfaahsan oo la xiriirta xaaladda shaqaalahaas.

Qodobka 85aad
Lacag Ka Jarista iyo Ganaaxyada Anshax Marinta

1. Ma jirto wax laga jari karo qofka shaqaale ah oo aan ka aheyn kuwa uu qorayo xeerkan iyo xeerhoosaad yadiisa iyo shuruucda kale ee dalka ama uu dhigayo heshiis wadareed shaqo, oo aan ka aheyn lacag dib u celin ah oo caddeyn qoraal wadata oo loo-shaqeeyuhu uu u hormariyay shaqaalaha.

2. Qof kasta oo shaqaale ah ee iskiisa shaqada fasax la'aan uga maqnaada, waxa uu weynayaa dhamman xuquuqdii uu heli lahaa muddadii uu maqnaa.

3. Qof kasta oo shaqada cudurdaar la'aan ka maqnaada saddax todobaad (21) maalmo-shaqo oo xiriir ah ama inka badan, waxaa loo qaadanayaa in uu shaqada si rabitaan kiisa ah iskaga tagay.

4. Qof kasta oo shaqaale ah haddii uu gudan waayo waajibaadkii shaqo ee lagula heshiiyay, iyada oo aan isla markiiba la soo saarin amar lagu joojinayo heshiiskii sii shaqo siinta, waxaa lagu anshaxmarinayaa sidan:
   b) Waxaa la siinayaa digniin qoraal ah;
   t) Waxaa shaqada laga joojinayaa muddo aan ka badneyn toddoba (7) maalmo-shaqo oo lacag la'aan ah.
5. Loo-shaqeeye kasta waa inuu si deg deg ah shaqaalaha ugu wargeliyaa tallaabooyinka ka dhanka ah ee laga qaadayo kuna xusan faqrada 4aad, Xarfaha (b iyo t) ee sare.

CUTUBKA 13AAD
DIIWAANNADA SHAQO SIINTA

Qodobka 86aad
Diiwaannada Laga Rabo in uu Keydiyo Loo-shaqeeyuhu

1. Loo-shaqeeyaha waxaa waajib ku ah inuu hayo diiwaannada soo socda:

b) Liiska dhammaan shaqaalaha uu shaqaaleeyay ee uu la galay heshiis qoraal ama Af ah (Written or Oral);

t) Faahfaahinta ku saabsan carruurta uu shaqaaleeyay;

j) Wixii la xiriira habdhaqan siyaasadeed (Policy) ama xeer-dhaqan shaqo ah oo xeerkani waajibiyay, oo ay ka mid yihiin kuwa la xiriira Xadgudub Damac Galmo iyo Faduullin (Sexual Harassment);

x) Heshiisyada qoran iyo heshiis wadareedyada;

kh) Faahfaahin kasta oo waajib ku ah in uu hayo loo-shaqeeyuhu;

d) Diiwaan kasta ee loo-shaqeeyaha looga baahan yahay inuu abuuro,heysto kuna shaqeeyo;

r) Qoraallada caddeynaya lacag ka jarista shaqaalaha ee la oggolyahay;

s) Rahanta loo dhigayo ujuurada shaqaalaha;

sh) Qoraallada digniinta;

dh) Ogeysiiska joojinta heshiiskii shaqada ee kasoo baxday shaqaalaha ama loo-shaqeeyaha;

c) Waraaqaha shaqo ka saarista;

g) Faahfaahinta fasaxa dhalmada;

f) Faahfaahinta fasaxa jirrada;

q) Faahfaahinta la xiriirta deegaanka marka loo-shaqeeyuhu uu shaqaalaha dejiyo deegaan;

k) Faahfaahinta ku saabsan inta ujuurada shaqaalaha kaga soo aadeyso gunnada guriga la dejiyey;

l) Faahfaahinta ku saabsan garaamka raashinka, haddii ay munaasab tahay.

2. Loo-shaqeeye kasta waa in uu u oggolaadaa sarkaalka idman, haddii uu ka dalbado in uu soo gudbiyo qoraalladii la keydiyay muddo kasta oo ka mid ah lix iyo soddonkii (36) bilood ee la soo dhaafay, si loo baaro.

Qodobka 87aad
Qoraal Been-Abuur ah

Qof kasta oo sameeya, sababa in la falo ama oggolaada in xog been abuur ah la geliyo diiwaan ama dukuminti kale oo uu xeeriyey xeerkan in la abuuro, la keydiyo, lana ilaaliyo isaga oo og in xogta la gelinaayo diiwaan kaas ama duku u yahay mid la soo been abuuray ama isaguba ka qeyb noqday been abuurkaas, k soo gudbiyey sarkaalka idman, waxa

lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee Dalka.

CUTUBKA 14AAD:
CEYMISKA IYO ILAALINTA SHAQAALAHA

Qodobka 88aad
Ceymiska iyo Ilaalinta Shaqaalaha

Wasiirka waxaa waajib ku ah, isaga oo la tashanaayo ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyaha in uu abuuro siyaasado, dhaqan geliyo shuruuc gaar ah uuna dejiyo xeerar iyo xeer-nidaamiye la xiriira nidaaminta iyo istaraatiijiyado lagu ilaalinayo shaqaalaha, oo ay ka mid yihiin kaalmeynta shaqaalaha, caymiska shaqaalaha iyo hannaanka sinnaanta shaqaalaha iyo la socodka isbeddalka iyo wax ka qabadka suuqa shaqada.

CUTUBKA 15AAD:
HESHIISKA SHAQOSIINTA DIBEDDA

Qodobka 89aad
Awoodda Gelidda Heshiiska

1. Heshiiska shaqo siinta dibeddu waa heshiis lagu galay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya gudaheeda, hase yeeshee shaqada gebi ahaanteed ama qeyb ka mid ah lagu qabanayo Jamhuuriyada Federaalka Soomaaliya bannaankeeda, taas oo shaqaalahana looga baahan yahay in ay muddada heshiiska inteeda badan ku qaataan meel Jamhuuriyadda FS ka baxsan, si waafaqsan xeerkan, shuruucda kale ee qoran, siyaasadaha iyo Habraaca Shaqosiinta Dibadda ee shaqaalaha Soomaaliyeed.

2. Heshiiska shaqo siinta dibedda waa in lagu qoraa foom cayiman oo dhinacyadusaxiixeen, ayna xaqiijisay Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda.

3. Qofna looma oggola in uu galo heshiis shaqo siin Dibedeed oo aysan oggolaan Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda.

4. Inta aan oggolaanshaha la siinin, Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda waa inay ku qanacdaa marka hore in heshiiku ka maran yahay khiyaano, jajuub, saameyn khaldan, ka been sheegid iyo marin habaabin keeni karta in qofka shaqaalaha ahi uu ku khaldamo (Sirmo) gelidda heshiiskaas oo ah:

b) In la helo raalli ahaanshaha shaqaalaha heshiiska lala galay;
t) Heshiisku waa inuu ku saleysnaadaa Foomka cayiman ee sare ku xusan;
j) In xaaladda iyo shuruudaha shaqo siinta ee heshiisku qorayo ay waafaqsan yihiin qodobbada xeerkan, uuna hubiyo in qofka shaqaalaha ah uu si sax ah u fahmo;
x) In qofka Shaqaalaha ah caafimaadkiisu taam yahay, uuna fulin karo waxqabadka shaqada ee uu ›rayo; iyo
kh) Qofka Shaqaalaha ah looma aro in uu qabto shaqo kale muddad

lagu jiro heshiiska shaqada ilaa uu ka dhamaanayo heshiiska dibedda.

Qodobka 90aad
Dammaanad

1. Marka ay Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda ula muuqato in loo-shaqeeyaha gelaya heshiis shaqo siin dibadeed oo aan degganayn ama aan ku laheyn ganacsi Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya gudaheeda, loo-shaqeeyuhu waa inuu dhigaa lacag rahan ah si waafaqsan foomka cayiman, iyo laba dammiin oo deggan JFS gudaheeda oo ay oggolaatay Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda.

2. Haddii loo-shaqeeyaha uu u joogo wakiil sharciyeysan, degganna dalka, Waaxda ku shaqada leh ee Wasaaradda waxay dalban kartaa in wakiilku uu bixiyo rahanta,wakiilkuna uu qof ahaan tiisana u ballanqaado in uu ku dhaqmayo shuruudaha heshiiska rahanta, kumana xirnaan doonto arrintani in uu la socod siiyo ciddii wakiilatay.

Qodobka 91aad
Ku Qalqaalinta ama ku Khasbidda Shaqo Dibadeed Heshiis La'aan

1. Qof ama shirkad kasta oo:

b) Shaqo siiya, ka shaqeeya ama isaga oo og gacan ka geysta shaqo siintiisa ama hawlgaliya qof ujeeddada laga leeyahay shaqo siintaas ay tahay in loo diri doono shaqo dibadda ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

t) Ku qalqaaliya, isku daya in uu tashkiiliyo, ku khasba ama isku daya in uu ku khasba qof shaqaale ah in uu u safro meel ka baxsan JFS si aan waafaqsaneyn xeerkan, qofkaasi waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

CUTUBKA 16AAD:
MAAREYNTA SHAQADA

Qodobka 92aad
Agaasime ama Sarkaal Idman

1. Cutubkan:

b) "Agaasimaha" waxaa loola jeedaa Agaasimaha Waaxda Shaqada,
t) Meeshii lagu xuso "Sarkaalka Idman" waxaa loola jeedaa Agaasimaha Shaqada iyo Sarkaalka Shaqada.

2. Iyadoo aan laga leexaneynin hawlahooda iyo waajibaadkooda guud, Agaasimaha Shaqada iyo Sarkaalka idman, waa in ay u fududeeyaan hubinta iyo horumarinta:

b) Baxnaaninta, dhaqan-celinta iyo adeegyada dadka lixaadkoodu dhimman yahay oo ay ku jiraan barnaamijyada tababarka Shaqaalaha ka howlgala Adeegyadaas.
t) Barnaamijyada ku saabsan tababarka xirfadaha iyo adeegyada shaqada dadka lixaadkoodu dhimman yah

Qodobka 93aad
Ogeysiisyada

1. Loo-shaqeeyaha ayaa laga doonayaa inuu ku wargeliyo Agaasimaha markii jago ka bannaanaato shirkaddiisa ama goobtiisa shaqo, waana inuu kusoo qoraa foomka cayiman, kaasoo ay ku qoran yihiin macluumaadka soo socda:

b) Magaca looshaqeeyaha iyo cinwaankiisa oo buuxa;
t) Faahfaahinta booska bannaan;
j) Shahaadada ugu hooseysa ee looga baahan yahay qofkii jagadan soo dalbanaya;
x) Goobta iyo nooca shaqada, ha ahaato shaqo joogto ah, mid ku-meel-gaarah ama heshiis muddo cayiman leh, iyo
kh) Macluumaadka kale ee Agaasimuhu uu u baahan karo.

2. Jago waxay bannaanaataa markii:

b) Loo-shaqeeyuhu uu abuuro jago u baahan shaqaale buuxiya ama uu go'aansado in uu buuxiyo jago bannaanaatay;
t) Loo-shaqeeyuhu ka joojiyo shaqaale shaqada ama loo-shaqeeyuhu uu baabi'iyo jagadaas.

3. Marka shaqo la oggeysiiyey Agaasimaha in ay bannaan tahay la buuxiyo ama la baabi'iyo, loo-shaqeeyuhu waa inuu qoraal ahaan ugu wargeliyaa Agaasimaha muddo laba toddobaad gudahood ah.

4. Loo-shaqeeye waxaa looga baahan yahay inuu shan (5) maalmo shaqo gudahood ugu gudbiyo sarkaalka Idman magaca iyo xirfadaha shaqaale kasta oo u shaqeynayay, shaqadana laga joojiyay sabab kasta ha ahaatee.

5. Qofka shaqaalaha ah ee ku jira diiwaanka guud ee liiska keydka shaqadoonka, waxaa looga baahan yahay in uu shaqo billaabiddiisa ku ogeysiiyo sarkaalka idman toddoba (7) maalmo shaqo gudahood, haddii loo shaqaaleeyay siwaafaqsan qodobada cutubkan.

6. Qofka ku jira liiska keydka shaqadoonka, haddii uu shaqo la'aan sii ahaado, waa in uu isdiiwangelintiisa ka cusbooneysiistaa sarkaalka idman seddexdii biloodba mar, laga soo billaabo maalintii uu isdiiwaangeliyay.

Qodobka 94aad
Diiwaangelinta Shaqaalaha

1. Qof kasta oo doonaya in uu shaqo helo, waxaa looga baahan yahay in uu iska diiwaangeliyo Diiwaanka Guud ee keydka shaqadoonka ee uu hayo sarkaalka idmani.

2. Qofna looma oggola inuu iska diiwaangeliyo wax ka badan hal sarkaal idman oo kaliya.

3. Qofna looma oggola in lagu qoro diiwaanka guud ee shaqadoonka, haddii aanu weli gaarin da'da ugu yar ee shaqada loo oggol yahay sida xeerkani qabo ama xeer-nidaamiye ama sharciyada kale ee dalka ee la xiriira oggolaanshada shaqo siinta.

4. Diiwaangelinta ka dib, sarkaalka idmani [illegible] shaqa doonka ah u soo saarayaa kaarka diiwaangelinta, kaas oo u sameysan qaabka [illegible] xeer- nidaamiyayaasha.

5. Dadka soo codsanaya diiwaangelinta, waa in diiwaangelinta shaqa doonka loo geliyaa sida ay usoo kala horreeyaan.

6. Haddii qof diiwaangashanaa ee mar intuu shaqo helay haddana, shaqadii laga saaray, uu doonayo in mar kale liiska shaqa doonka lagu daro, wuxuu diiwaanka ka gelayaa halka uu marayo marka uu codsiga dambe keensado.

7. Sarkaalka idman waa in uu qof kasta oo la diiwaangelinayo ku diiwaangeliyaa liiska u gaarka ah mihnadiisa shaqo, shaqo walbana waa in ay leedahay diiwaan u gooni ah.

Qodobka 95aad
Meeleynta Shaqaalaha

Meeleyntu waa adeeg bulsho, waana in loo fuliyaa si waafaqsan qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyayaashiisa.

Qodobka 96aad
Shaqo siinta Shaqo-doonka

1. Loo-shaqeeyaha wuxuu u madax bannaan yahay in uu ciddii ku habboon dalabkiisa shaqo fulisana shuruudaha shaqada, ka qaadan karo dadka ku jira diiwaanka guudee shaqadoonka.

2. Shaqo siintaasi ma khusayso:

b) Loo-shaqeeyaha xaaskiisa ama eheladiisa isaga la nool ee uu dhaqaaleeyo;

t) Qofka xil Agaasime ama Maamule ka haya hay'ad;

j) Shaqaalaha ka shaqeeya adeeggyada guryaha;

x) Shaqaalaha loogu talagalay shaqooyinka warshadaha, ganacsiga ama beeraha ee ay ka shaqeeyaan afar (4) qof;

kh) Shaqaalaha ka shaqeynaya shaqooyinka ku meelgaarka ah ee aan soconeyn wax ka badan toddoba (7) maalmo shaqo.

3. Shaqaalaha laga shaqo siiyey Adeegga hay'adaha gaarka ah heer Federaal iyo Maamul Goboleedyada Dalka, wakaaladaha madaxabannaan iyo hay'adaha ay dawladdu qeyb ka tahay, waxaa shaqo siintooda la ogeysiinayaa saraakiisha idman ee goobahooda jooga, iyada oo shaqaaluhu ay gelayaan imtixaan la baahiyay oo tartan furan loo galay oo ay goobjoog ka yihiin wakiillo ka socda Guddiga Sare Shaqo siinta Federaalka (GSShF).

Qodobka 97aad
Araajida Shaqo siinta Shaqaalaha

1. Marka laga reebo arrimaha ku xusan farqadaha qodobka 96aad, loo-shaqeeye kasta oo doonaya in uu dadka shaqosiiyo, waxaa looga baahan yahay in uu soo ogeysiiyo Sarkaalka Idman ee jooga degaanka laga shaqosiinayo.

2. Sarkaal idmani wuxuu diiwangelinayaa ogeysiiska uu soo gudbiyey looshaqeeyuhu si hadhaw diiwaanka shaqada looga saaro ciddii shaqada la siiyey.

3. Araajida lagu codsanaya shaqaalaha waa in ay ku cad yihiin:

b) Tirada looga baahan yahay oo shaqo ah iyo shaqada laga rabo;

t) Aqoonta looga baahan yah

j) Xaaladaha iyo shuruudaha shaqo siinta, iyo
x) Muddada suurto-galka ah ee ay shaqadu soconeyso.

4. Araajida shaqada waa in lagu soo dalbadaa Magaca shaqadoonka haddii:
   b) Shaqaalaha looga baahan yahay shaqo ku dhisan ammaano oo qofka loo dhiibanayo goobaha tababbarada lagu qabto, xarumaha shaqada ama hantida kale ee shirkadda.
   j) Qof shirkadda tababbar farsamo barad ah ku dhammeystay;
   x) Uu yahay Shaqaale horey goobtaas uga soo shaqeeyay.

5. Sarkaalka idmani, marka uu helo ogeysiiska loo-shaqeeyaha, waa in uu ku qancaa in xaaladaha iyo shuruudaha loo soo bandhigayo qofka shaqa doonka ah ay waafaqsan yihiin qodobbada xeerkan, xeer-nidaamiyayaashiisa ama heshiis wadareedkii shaqo ee la wada galay haddii uu jiray.

Qodobka 98aad
Mudnaanta iyo Tixraaca Shaqo siinta

1. Marka laga reebo xaalado gaar ah, shaqadoonka waxaa loo oggol yahay in ay magacyadooda ku soo dalbadaan shaqada, shaqaaluhu waa in ay shaqada u helaan sida ay uga kala sarreeyaan natiijada imtixaanka. Waxaana diiwaanka guud loogu qorayaa sida ay u kala sarreeyaan.

2. Shaqadoon ka ku nool degmada ay ku taallo goobta shaqada ayaa xaq u leh mudnaanta koowaad, haddii uu soo buuxiyo shuruudaha shaqada.

3. Shaqaale shaqadiisa ku waayay shaqaale dhimis guud oo la sameeyey ayaa ugu mudan in dib loogu bandhigo ku soo noqoshada shaqada muddo hal sano gudaheed ah laga soo billaabo maalintii shaqada laga saaray.

4. Marka shaqaale la siiyo warqad tixraac shaqo wanaag ah, sarkaalka idmani wuxuu raacinayaa warqad ku socota loo-shaqeeyaha isaga oo tixraacaya warqaddii loo soo qoray.

Qodobka 99aad
Loo-shaqeeyeyaashu Waa Ay Diidi Karaan In Ay Aqbalaan Shaqaalaha Qaarkood

1. Loo-shaqeeyaha wuxuu xaq u leeyahay in uu imtixaano, xusho shaqaalaha uu qaadanayo, si uu u xaqiijiyo kartidooda farsamo ama ku habboonaanta shaqada loo dhiibayo.

2. Loo-shaqeeyuhu waa uu diidi karaa shaqaale uu hore shaqada uga ceyriyay sababo macquul ah oo jiray dartood.

3. Marka loo-shaqeeyuhu qaadanaayo shaqaale, sarkaalka idman ee degmadaas waa in uu goobjoog ahaadaa.

Qodobka 100aad
Howlgelinta Tooska ah ee Shaqaalaha

1. Loo-shaqeeyuhu wuxuu si toos ah u howlgelin karaa shaqaale, haddii howlgelintaas lagu sababeyn karo baahi degdeg ah oo jirta si looga fogaado dhibaato nafeed iyo mid agabeed oo la filan karo.

2. Mar kasta oo shaqaale si toos ah loo howlgeliyo muddo ka badan hal (1) toddobaad, loo-shaqeeyuhu waa in uu u diraa sarkaalka idman magaca shaqaalaha, nooca shaqada uu qabanayo, baahida keentay in toos loo howlgeliyo iyo xaaladaha shaqada.

Qodobka 101aad
Ka Dhaafid

Wasiirka oo la tashanayaa hay'adaha ay khuseyso ee dawladda, ururrada loo- shaqeeyaha iyo kuwa shaqaalaha, wuxuu ka dhaafi karaa ama ka dabcin karaa qodobbada cutubkan muddo cayiman oo si toos ah u taabanaya xaaladaha nolosha shaqaalaha, shaqada, qeybaha wax-soo-saarka iyo dhaqan-dhaqaale.

Qodobka 102aad
Dembiyada ka Dhalan kara Jebinta Qoddobada Cutubkan

Loo-shaqeeye kasta oo jebiya mid ka mid ah qoddabada cutubkan ku jira, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

CUTUBKA 17AAD
SHAQO KA SAARIS

Qodobka 103aad
Shaqo Ka Saaris Ogeysiis Leh

1. Mid kasta oo ka mid ah dhinacyada heshiiska wada galay, waa uu ka bixi karaa heshiiska, isaga oo bixinaya ogeysiis qoraal ah oo:

b) Aan muddadiisu ka yareyn toban (10) maalmo shaqo shaqaalaha muruqmaalka ah;

t) Aan Muddadiisu ka yareyn Soddon (30) maalmo shaqo, shaqaale aan muruqmaalka aheyn.

2. Looma baahna in wax ogeysiis ah la bixiyo marka muddada heshiiska shaqadu aanay ka badneyn hal (1) bil.

3. Inta lagu jiro muddada ogeysiiska, xiriirka shaqadu waxa uu ku sii soconayaa qaabkii asalka ahaa, wuxuuna haysanayaa dhammaan awooddiisa asaasiga ah, marka laga reebo haddii cidda ogeysiiska loo diray ay dalbato in lagu joojiyo markii ogeysiisku soo gaaray.

Qodobka 104aad
Magdhawga Beddalka Shaqo Ka Saaris Ogeysiis La'aan

Mid kasta oo ka mid ah dhinacyada heshiiska wada galay, wuu ka bixi karaa heshiiska ogeysiis la'aan, Dhinaca heshiiska ka baxay, wuxuu bixinayaa beddalka xuquuqdii uu lahaan lahaa muddadii ogeysiiska, haddii uu shaqeyn lahaa, sida uu qabo xeerkan iyo xeerarka hoos yimaada.

Qodobka 105aad
Habka u Beddelidda Shaqo siin Shaqaale Ku-Meel-Gaar ah Heshiis Shaqo

1. Shaqaale ku-meel-gaarka ahi haddii:

b) Uu shaqeeyo dhowr maalmo shaqo oo xiriir ah, kuwaas oo isugeyn toodu aanayka yareyn hal (1) bil;

t) uu qabanayo shaqo ayna suuragal aheyn in lagu dhammeystiro, ama uu shaqeeyo maalmo shaqo oo xiriirah oo isugeyn toodu ay u dhiganto seddex (3) bilood ama ka badan, heshiiska shaqo siinta ee shaqaale ku-meel-gaar ah, wuxuu noqonayaa mid mushaarkiisu bille yahay, wuxuuna yeelanayaa shuruudaha heshiiska shaqo ee shaqaalaha joogtada ah.

2. Marka la xisaabinayo mushaarka iyo maalmaha shaqo ee xiriirka ah ee ku xusan farqadda (1), shaqaalaha ku-meel-gaarka ahi wuxuu xaq u leeyahay in mushaarkiisa loogu daro hal (1) maalin nasasho oo lacag ah, lixdii (6) maalmo shaqo ee uu shaqeeyaba iyo maalmaha nasashada ama wixii fasax qaran ah ee soo dhexgala maalmahaas uu shaqeynayey oo loo xisaabinayo xuquuq la mid ah tan maalmaha caadiga ah ee shaqada.

3. Shaqaalaha ku-meel-gaarka ah ee heshiiskiisa shaqo siin loo beddelay siwaafaqsan farqada (1), kaas oo si joogto ah u shaqeynayey laba (2) bilood ama ka badan, laga billaabo taariikhdii laga dhigay shaqaale ku meel-gaar ah, wuxuu xaq u yeelanayaa qodobbada iyo shuruudaha heshiiska shaqo siin ee lala galo shaqaalaha joogtada ah.

Qodobka 106aad
MuddadaTijaabada ah

1. Muddada heshiiska tijaabadu kama badan karto seddax (3) bilood, balse waxaa lagu kordhin karaa muddo dheeraad ah oo aan ka badneyn seddax (3) bilood kale, haddii lagala heshiiyo qofka shaqaalaha ah.

2. Loo-shaqeeyaha looma oggola inuu qofna ku shaqo siiyo muddo tijaabo ka badan inta lagu jideeyay farqada (1) ee qodobkan.

3. Dhinac ka mid ah dhinacyada wada galay muddada tijaabada waa uu ka bixi karaa,haddii uu bixiyo ugu yaraan toddoba (7) maalmo shaqo oo ogeysiis ah, ama haddii loo-shaqeeyuhu ka baxayo muddada ogeysiis la'aan, wuxuu bixinayaa xuquuqdii toddoba (7) maalmo shaqo oo shaqo ah.

4. Haddii loo-shaqeeyuhu uusan si cad u joojin muddada tijaabada ah oo muddadiisu dhammaato iyada oo aan wax ogeysiis ah laga helin labada dhinac, muddada tijaabada ah waxaa loo qaadanayaa in shaqaaluhu noqday shaqaale joogto ah.

5. Marka muddada tijaabada loo beddalo mi muddadii uu shaqeeyey ee tijaabada

ahayd ka hor inta aan la joogtayn, waxaa loo tixgalinayaa muddada heshiiska adeegga shaqadiisa.

6. Inta lagu guda jiro muddada tijaabada ah, haddii ay timaado jirro, shil, gudasho shaqo qaran, waajibaad madani ah ama masiibo dabiici ah, haddii aan heshiiska si kale loo joojin, waxaa loo arkaa in la kordhiyey muddada tijaabada si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 107aad
Shaqaale Dhimis

1. Loo-shaqeeyaha looma oggola in uu ka baxo heshiiska shaqada, isaga oo ku sababeynaya in uu shaqaalihii ka maarmay, ilaa uu:

b) Loo-shaqeeyuhu wargeliyo urur shaqaale oo shaqaaluhu xubin ka yahay;

t) Loo-shaqeeyuhu ku wargeliyo sarkaalka shaqada ee mas'uulka ka ah goobta shaqaaluhu uu ka shaqeeyo sababta shaqaale ka maarmidda keentay, wargelin taasina waa in ay dhacdaa bil ka hor taariikhda la qorsheeyay shaqo dhimista la xiriirta shaqaalaha laga maarmay;

j) Haddii shaqaaluhu aanu xubin ka aheyn urur shaqaale, waa in loo-shaqeeyuhu uu qoraal ku ogeysiiyo qofka shaqaalaha ah naf ahaantiisa iyo sarkaalka shaqadaba;

x) Marka la doonayo in la dhimo shaqaale ama laga maarmo shaqaalaha qaar kood, waxaa lagu kala saarayaa waayo-aragnimadooda, sidii ay shaqada ugu soo kala horreeyeen, xirfaddooda, kartidooda iyo kalsoonida lagu qabi karo shaqaale kasta ama waxaa la eegayaa qeybaha shaqada (Category) gaarka ah oo ay saamaysey shaqaale dhimistu;

kh) Marka uu jiro heshiis wadareed shaqo oo u dhexeeya loo-shaqeeye iyo urur shaqaale ee qeexaya xuquuqda la bixinayo, haddii ay dhacdo in la eryo shaqaale shaqadiisii laga maarmay, xuquuqdaas oo kale ayuu helayaa shaqaalihii aan xubin ka aheyn urur shaqada laga saaro;

d) Haddii shaqaale la gaaray xilligii fasaxiisa,shaqo dhimisna shaqada looga saaray, wuxuu xaq u helayaa in la siiyo lacagtii fasaxa oo gacansaar ah;

r) Haddii shaqaale shaqo dhimis shaqada looga saaro, iyadoo aan la siin bil ogeysiis ah, waa in loogu beddelaa bil mushaar ah beddalka ogeysiiska; iyo

s) Shaqaalaha laga maarmay shaqaalanimadooda uu siiyo magdhaw u dhigma sanadkiiba bil mushaarkeed intii sanadood ee uu soo shaqeeyay, kaas oo lagu saleynaayo bishii ugu dambeysay mushaarkeeda.

2. Farqada 1aad ee qodobkani ma khuseeyo marka sababta shaqaale dhimistu ay ku timid shirkadda oo musalaftay ama ay kacday darteed.

3. Wasiirku wuxuu soo saari karaa nidaam looga dalbanayo in loo-shaqeeye kasta oo heysta tirada ugu yar ee shaqaale ah in ay shaqaalaha ka badbaadiyaan khatarta shaqo dhimista iyaga oo raacaya nidaamka ceymiska shaqo la'aanta oo waafaqsan Xeerka Ceymiska qaran, kaas oo heysta dammaanad sharci ah ama shirkad kasta ee ceymis oo ay dawladdu aqoonsan tahay.

Qodobka 108aad
Dhaqan Xumo

1. Loo-shaqeeyaha marka uu qofka shaqaalaha ah shaqada uga saarayo arrimo la xiriira anshax xumo, waxqabad yari ama karti-darro jireed, waa in uu qofka shaqaalaha ah af uu garanayo ugu sheegaa sababta shaqada looga saarayo,uuna sababeeyaa anshax xumada, waxqabad la'aanta ama karti-darrada jireed ee uu qabo shaqaaluhu, uguna sharxo luuqadda qofka shaqaalaha ahi uu fahmi karo, sababta uu loo-shaqeeyuhu shaqada uga joojinayo, sidoo kale, qofka shaqaalaha ahi wuxuu xaq u yeelanayaa inuu u yeerto qof shaqaalaha ka mid ah ama xubin matesha urur shaqaale oo uu isagu doorto, kaas oo goobjoog ka noqda dhegeysiga sharraxaadda.

2. Ka hor inta aan shaqada laga joojin qofka shaqaalaha ah ogeysiin la'aan, waa in loo-shaqeeyaha uu dhagaystaa, uuna tixgeliyaa wixii caddeymo ah ee uu isku difaacayo shaqaaluhu, oo ay ku jiraan dukumiinti ama marqaatiyaal. Shaqaaluhu wuxuu keensan karaa qof difaaca oo isaga matela.

3. Haddii la isku fahmi waayo in lagu xalliyo khilaafkaas goobta shaqada, waxaa loo tixraacayaa nidaamka xallinta khilaafaadka ee ku xusan qodabada xeerkan.

Qodobka 109aad
Caddeynta Sababta Shaqo ka Saarista

1. Eedayn kasta oo sababi karta in laga baxo heshiiska shaqada, loo-shaqeeyaha waxaa looga baahan yahay inuu caddeeyo sababta ama sababaha heshiis ka baxa ah, haddii uu ku guul darraysto loo-shaqeeyuhu in uu caddeeyo sababahaas, heshiis ka baxaas waxaa loo aqoonsanayaa waxba kama jiraan iyo caddaalad darro xagga xeerkan.

2. Sababta ama sababaha heshiis ka baxa waa waxyaalaha loo-shaqeeyuhu uu adeegsado waqtiga heshiis ka baxa, taasoo sababtay in loo-shaqeeyaha uu joojiyo adeeggii qofka shaqaalaha ah. Waxyaalahaas lama qaadanayo haddii aysan maangal ahayn si waafaqsan xeerkan.

Qodobka 110aad
Shaqo Ka Saaris Degdeg ah

1. Shaqo ka saarista degdegga ahi waxay dhacdaa marka loo-shaqeeyuhu uu joojiyo shaqaalanimadii shaqaalaha ogeysiis la'aan ama uu soo ogeysiiyo muddo ka yar waqtigii uu shaqaaluhu xaqa u lahaa ama waqti ka yar muddadii uu xeerkani dejiyay ama heshiiska shaqo siinta qorayey.

2. Iyadoo la tixraacayo qodobbada xeerkan, waxaa reeban shaqo ka saaris degdeg ah.

3. Loo-shaqeeyaha wuxuu shaqo ka saaris degdeg ah sameyn karaa oo kaliya, marka qofka shaqaalaha ahi uu si ula kac ah u jebiyo waajibaadkii shaqo, kaas oo heshiiska shaqo siinta dhexdiisa lagu yiraahdo "dhaqan xumo culus".

4. Mid kasta oo ka mid ah arrimaha soo socd tilmaami karaa anshax xumo culus, waxaana ka mid ah, haddii:

b) Shaqaaluhu fasax ama sabab sharci la'aantood uu ka maqnaado goobtii shaqo ee loo cayimay;

t) inta lagu jiro saacadaha shaqada, uu qofka shaqaalaha ahi noqdo saqraan, taasina ay keento in uusan diyaar u aheyn ama uuna awood u laheyn in uu shaqadiisa si qumman u guto;

j) Shaqaaluhu si u lakac ah u dayaco shaqo ay waajibkiisa aheyd in uu qabto; ama haddii uu si xun oo xilkas darro ah u sameeyo shaqo laga rabay in uu si qumman u qabto;

x) Shaqaaluhu ku hadlo ereyo gef ama aflagaado ah, ama uu u dhaqmo qaab aflagaado ku ah loo-shaqeeyihiisa ama ciddii kale ee uu shaqada u wakiisho;

kh) Shaqaaluhu si u lakac ah u buriyo ama u diido in uu qaato amar sharci ah oo uu siiyey loo-shaqeeyihiisu ama ciddii kale ee uu shaqada u wakiisho;

d) Iyadoo la isticmaalayo awood sharci oo wax lagu xiro taas oo waafaqsan xeerkan, haddii qofka shaqaalaha ah loo xiro fal-dambiyeed keeni kara ciqaab xabsi oo aan ka yareyn muddo bil ah, haddaan qofkii shaqaalaha ahaa lagu sii deyn dammaanad ama si kale oo sharci ah; ama

r) Shaqaaluhu galo fal-dambiyeed waxyeello ku ah loo-shaqeeyaha ama hantidiisa; ama uu jiro tuhun leh aasaas macquul ah oo loogu maleyn karo in shaqaaluhu uu galay fal-dambiyeed.

s) Shaqaalihii looga cabsado qatar amni ama amni daro (fal-argagixiso) waxaa laga saari karaa shaqadda.

5. Arrimaha noocaas ah ama go'aanka uu loo-shaqeeyuhu ku gaaro in uu shaqo ka saaris degdeg ah sameeyo si waafaqsan farqadda (4) ee qodobkan kama hor istaagayso loo-shaqeeyaha ama shaqaalaha, sida ay u kala horreeyaan, in ay ka doodaan eedaha lasoo jeediyay sida ay u waafaqsan yihiin xaqiiqada dhabta ah; ama jiritaanka arrimo aan halkan lagu xusin oo loo cuskan karo shaqo ka saarista degdeg ah ee shaqaalaha.

Qodobka 111aad
Shaqo Ka Saaris Caddaalad Darro ah

1. Shaqo ka saarista uu sameeyo loo-shaqeeyuhu, waxaa loo arkayaa caddalad darro, haddii:

b) Loo-shaqeeyuhu uu ku guuldarraysto in uu caddeeyo:

i. In sababta shaqo ka saaristu ay sax tahay;

ii. In sababta shaqo ka saaristu ay tahay sabab gaar ah oo la xiriirta anshaxa, mas'uuliyadda iyo kartida shaqaalaha, ama ay ku saleysan tahay howlgalka shaqada ee loo-shaqeeyaha; iyo

iii. In shaqo ka saarista loo marin habraacii loo baahnaa.

t) Haddii la caddeeyay in loo-shaqeeyuhu uusan u dhaqmin si waafaqsan caddaalad iyo sinnaanta marka uu sameynayay shaqo ka saarista shaqaalaha, iyadoo la tixgelinayo:

i. Nidaamka loo-shaqeeyuhu uu u maray go'aanka shaqo ka saarista qofka shaqaalaha ah, sidii in qofka lala wadaagay go'aankii shaqo ka saarista iyo sida loo maareeyay racfaankii uu shaqaaluhu ka qaatay go'aankaas;

ii. Hab-dhaqanka iyo kartida shaqaalaha ee ilaa taariikhdii shaqo ka saarista;

iii. Ilaa iyo inta uu loo ı u hoggaansamay shuruudaha sharciga ee la xiriira sha a, oo ay ku jirto soo saarista

shahaadada shaqada iyo shuruudaha habraaca ee lagu xusay qodobka 122aad ee xeerkan;

iv. Tillaabooyinkii hore ee loo-shaqeeyaha ee la xiriira nooca xaaladaha keenay shaqo ka saarista; iyo

v. jiritaanka waraaqo digniin hore ah oo la siiyay shaqaalaha.

2. Shaqo ka saarista cadaalad darrada ah ee shaqaaluhu waa ay reeban tahay;

3. Shaqaalihii si joogto ah ugu shaqeynayay loo-shaqeeyahiisa muddo aan ka yareyn seddex iyo toban (13) bilood inta aan shaqada laga saarin, wuxuu xaq u leeyahay in uu ka dacwoodo in si xaq darro ah shaqada looga saaray.

Qodobka 112aad
Ka Cabasho Caddaalad Darro iyo Shaqo Ka Saaris Degdeg ah

1. Qofkii shaqaale ah oo si degdeg ah shaqada looga saaro ama heshiskiisii shaqo si caddaalad darro ah looga baxo, wuxuu seddex (3) bilood gudahood cabasho ugu gudbin karaa Sarkaalka Shaqada, kaas oo marka uu labada dhinac si fiican u dhegeysto ka dib, dhinacyada u gudbin doona go'aan uu u arko xalka ugu fiican ee khilaafka labada (2) dhinac.

2. Xaqa uu shaqaaluhu u leeyahay in uu cabasho usoo guddbiyo si waafaqsan farqadaha qodobkan, waxaa u dheer xaqa uu siinayo heshiis wadareedka shaqada iyo Maxkamadda awooda u leh.

Qodobka 113aad
Magdhawga Shaqo ka Saarid Khaldan ama Heshiis ka Bixid Caddaalad Darro ah

1. Haddii hal dhinac uu kaligii ka baxo heshiiska shaqada ama uu sameeyo shaqo ka saaris sharci darro ah ama aan wadan sabab macquul ah, dhinaca kale wuxuu xaq u yeelanayaa in uu dalbado magdhaw.

2. Marka sarkaalka shaqada uu u arko in shaqo ka saarista degdegga ah ama heshiis ka bixiddu ay tahay caddaalad darro, sarkaalka shaqadu wuxuu kula talin karaa, ama maxkamadda ku amri kartaa, loo-shaqeeyaha in:

   b) Uu dib u soo celiyo shaqaalaha, u lana dhaqmo si xushmad leh, taas oo ah in aan marna shaqadiisa la joojin; ama

   t) Uu dib u siiyo shaqaalaha shaqo la mid ah shaqadii uu qaban jiray intii aan shaqada laga saarin; ama uu geeyo shaqo kale oo macquul ah, lana mushaar eg tii hore;

3. Inta Sarkaalka shaqadu aanu ku talin, ama Maxkamadda awoodda u leh aanay amrin, dib u soo celinta ama dib-u-hawl gelinta shaqaalaha, waa in la tixgeliyaa mid ka mid ah ama dhammaan arrimaha soo socda:

   b) Rabitaanka shaqaalaha;

   t) sida xaaladaha shaqo ka saaristu ay ku dhacday, ilaa iyo xadka ay gaarsiisan tahay, haddii ay jirto, in uu shaqaalul [illegible] haa ama uu gacan ka geystay shaqo ka saariddiisa iyo sida dhaqangal [illegible] arto talada dib- u-soo- celinta ama dib

u hawl gelinta;

j) Mabda'a guud ee xeerkan waa in aanay jirin hab gaar ah oo ay isugu xigaan qabashada waajibaadka heshiiska shaqo, marka laga reebo xaalado gaar ah oo aad dhif iyo naadir u ah;

x) Dheeraanta muddada uu shaqaaluhu la shaqeynayey loo-shaqeeyaha;

kh) Rajada uu qofka shaqaalaha ahi ka qabo muddada ay sii socon doonto shaqo siinta uu kula jiro loo-shaqeeyaha, marka laga reebo taariikhda uu heshiiskoodu ku eg yahay;

d) Fursadaha uu shaqaaluhu u heysto sida uu loo-shaqeeye kale uga heli karo shaqo la mid ah ama ku habboon shaqadii laga saaray;

r) Qiimaha magdhaw kasta oo uu sharcigu jideeyay;

s) Xaqa uu u leeyahay in uu u dacwoodo xuquuqdiisa ama ujuuradiisa aan lasiin, kharashaadka kale iyo xuquuqaha uu leeyahay shaqaaluhu;

sh) Kharashka qofka shaqaalaha ahi uu galay sababo la xiriira shaqo ka saaristiisii;

dh) Dabeecadaha qofka shaqaalaha ahi uu la yimid, taas oo ay keentay ama ka qeyb qaadatay shaqa ka saaristiisa;

c) Shaqaale kasta oo ku guul darraysta in uu si maangal ah u yareeyo khasaarooyinka ka dhashay shaqo ka saaristii xaqdarrada aheyd; iyo

h) Magdhaw kasta, oo ay ku jiraan lacagaha xaqsiinta ah, iyada oo la xushmeynayo heshiishka dhammaaday, taas oo uu dhiibay loo-shaqeeyuhu, uuna guddoomay shaqaaluhu.

Qodobka 114 aad
Hakinta Xiriirka Shaqo Siinta

1. Xiriirka shaqada waa in la hakiyo haddii hawsha shaqadu ay si ku-meel-gaar ah u joogsato ama loo-shaqeeyuhu uu ogeysiis u soo diro shaqaalaha toddoba (7) maalin ka hor ama uu boorka shaqada kusoo dhejiyo;

2. Ogeysiiskan waa in muddadaas oo kale lagu gaarsiiyaa sarkaalka idman ee ku shaqada leh, iyada oo la raacinayo sababta keentay shaqo hakinta ku-meel-gaarka ah iyo muddada ay sii soconeyso shaqa hakintaas;

3. Hakinta xiriirka shaqadu waa in aanay ka badnaan 30 maalmo shaqo, iyada oo uu sarkaalka shaqadu awood u leeyahay in uu muddada kordhiyo oo uu ka dhigo ilaa 90 maalmo shaqo ka dib markii uu la tashado loo-shaqeeyaha, haddii xaaladaha jira iyo duruufaha xilliyada degaanku ay sidaas kallifayaan;

4. Xiriirka shaqada waa in sidoo kale la joojiyaa haddii:
   b) Shaqaalaha loogu yeero shaqo millatari;
   t) Shaqaalaha la xanibo muddo aan ka badneyn seddex (3)bilood arrin la xiriirta xeerka nidaamka degganaanshaha iyo xasiloonida guud, ka dibna uu shaqada kusoo laabto markii la soo daayey;
   j) Haddii qofka shaqaalah o dambi kale, laakiin ugu dambeyntii

daayo oo uu ku noqdo shaqada;

5. Marka loo eego faqradda 4aad Xarfaha (t) iyo (j) ee qodobkan, shaqaaluhu wuxuu xaq u leeyahay in lagu celiyo shaqadiisa, muddada shaqa hakintana, waxaa loo xisaaabinaya maalmo uu shaqeystay;

6. Haddii qof shaqaale ah lagu xiro dembi ku lug leh shaqo siintiisa, shaqaalahaas wuxuu xaq u leeyahay in uu ka helo loo-shaqeeyaha seddex-meelood meel (**1/3**) ka mid ah mushaarkiisa aasaasiga ah ilaa inta lagu xukumayo, haddii dambiga lagu waayo ee lasoo daayo, wuxuu xaq u yeelanayaa inuu dib u helo xuquuqihii u uruuray ee mushaarka ka haray, haddii xukun ku dhacana wuxuu weynayaa dhammaan xuquuqiihi mushaarka ka dheeraadka ahaa ee xeerkani siinayay.

Qodobka 115aad
Musallafidda Loo-shaqeeyaha

1. Loo-shaqeeyaha musallafay (kacay) waxaa loola jeedaa xeerkan gudahiisa waa haddii:
   - **b)** Loo-shaqeeyuhu uu yahay qof, kaas oo:
     - i. Lagu dhawaaqay ama lagu xukumay in uu musallafay, wada-hadal ama wadaxaajood la galay dadkii deynta ku lahaa;
     - ii. Geeriyooday, hantidiisana ay tahay in loo maamulo hab waafaqsan sharciga dhaxalka Islaamka.
   - **t)** Loo-shaqeeyuhu yahay shirkad:
     - i. Amar xiritaan ama xukun maamul oo ka soo baxay Maxkamad ama iyaga si iskood ah u go'aansadeen in ay shirkadda xiraan, iyada oo la xushmeynayo shirkadda;
     - ii. Maxkamadi ay u magacaawday wakiil lagu aaminay hantidii iyo milkiyaddii shirkaddii musallaftay (kacday), si uu ula wareego mas'uuliyadda bixinta deymaha iyo dhammaan wixii shirkadda lagu lahaa.

2. Marka shaqaale loo-shaqeeyahooda musalafay ay codsi qoraal ah u soo dirsadaan ama qof wakiil u ah Wasiirka, uuna ku qanco in:
   - **b)** Shaqaalaha loo-shaqeeyahooda uu musalafay ama kacay;
   - **t)** Shaqo siinta shaqaalaha ay dhammaatay;
   - **j)** Waqtiga ku habboon in shaqaalaha ay xaqooda helayaan in la siiyo
   - **x)** Wasiirka waxaa uu tixgelinayaa xaquuqda ka maqan shaqaalaha, sidaas darteed loo- shaqeeyaha waxaa waajib ku ah in uu shaqaalaha siiyo xuquuqdoodii deynta ku aheyd. dhammaan ama qeyb ka mid ah deyntii xuquuqdooda;

3. Waxaa muhiim ah in la magacaabo guddi la aaminay oo ku-meel-gaar ah (Interim Trustees) ama xaraashaha musallafka (Liquidator) iyada oo la tixigelinayo heshiis hoosaad dhexmaray loo-shaqeeyaha iyo ciddii deynta ku laheyd ama guddi la aaminay oo lagu wareejiyey hantidii loo-shaqeeyaha kacay, ayagoo u furayo koonto u gaar ah sidaas awgeed Wasiirka waa in aanu amrin bixinta wax lacag ah ilaa uu ka helo waraaq qoraal ah guddiga loo magacaabay maamulidda qaddarka deynta ee aan la bixin, lana helayaan shaqaalihii kadibna ciddii deynta lahayd.

4. Guddiga la aaminey la aaminay, isaga oo fulinaya codsiga Wasiirka, waa inuu usoo diyaariyaan warbixin dhan oo tifaftiran sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagalka ah.

5. Marka gudddiga wakiilka la aaminay uu bixiyo dhammaan wixii deymo ah ee lagu lahaa musallafaha, wasiirku wuxuu amrayaa dhammaan haraaga hantida in ay ku siijirto Sanduuqa kor ku xusan, taas oo loo adeegsan karo oo kaliya xaalad tan la mid ah ee lagu soo tilmaamay Qodobka 115^{aad}faqradihiisa 2^{aad} ee xeerkan.

Qodobka 116aad
La Kala Wareegid Goob Shaqo

Haddii laba loo-shaqeeye oo nool ay si sharci ah ugu kala wareegaan mas'uuliyadda goob shaqo; ama qof dhintay mas'uuliyaddiisii lagu wareejiyo ama laga kireeyo qof seddexaad, heshiiskii shaqo ee jiray wax waa laga badali karaa.

Qodobka 117aad
Arrimaha Mamnuuca ka ah ee Qof Shaqada Looga Saari Karin

1. Arrimaha soo socda ma'ahan sababo banneyn kara in qof shaqaale ah shaqada laga saaro ama tallaabo anshaxmarin ah looga qaado:

b) Haweenka uurka leh, ama sabab kasta oo la xiriirta uurkooda;

t) Fasax qof shaqaale ah oo socda, ama in loo soo jeediyo fasax qofka shaqaalaha ah inuu qaato fasax uu xaq u lahaa ee lagu xusay heshiiska shaqo siinta, kaas oo waafaqsan xeerka shaqada;

j) Xubinnimo urur shaqaale darteed ama in loo soo jeediyo shaqaalaha xubin ka noqosho urur shaqaale;

x) ka qaybgalka ama in loo soo jeediyo shaqaale in uu ka qayb galo dhaqdhaqaaqa iyo hawlaha urur shaqaale waqti ka baxsan saacadaha shaqada ama, oggolaanshaha loo-shaqeeyaha, saacadaha shaqada dhexdooda;

kh) Shaqaalaha oo raadsada in uu qabto xafiiska urur shaqaale ama ku shaqeeyo sarkaal urur shaqaale ama wakiil shaqaale;

d) Shaqaalaha oo diida ku biirista urur shaqaale ama ka baxa urur shaqaale oo uu horey uga tirsanaa;

r) Wax la xiriira sinjiga shaqaale, midabkiisa, qabiilkiisa, ahaanshihiisa lab iyo dheddig, fikirkiisa siyaasadeed ama ku-xirnaanshihiisa koox siyaasadeed, dalka uu kasoo jeedo, jinsiyaddiisa, asalkiisa bulsho, xaaladda xaas ahaaneed, xaaladda HIVAIDS iyo naafanimadiisa;

s) Cabashada shaqaalaha, soo jeedinta cabasho ama dacwado kale oo sharci ah oo ka dhan ah loo-shaqeeyihiisa, marka laga reebo cabashada loo arkay inay tahay mid mas'uuliyad darro aan sal laheyn; ama

sh) ka qaybgalka shaqo joojin sharci ah.

Qodobka 118aad
Dheefta Duugta (Geerida)

Haddii uu dhinto qof shaqaale ahi isagoo shaqeynayo, loo-shaqeeyuhu waa inuu siiyaa cidda dhaxalka shaqaalaha iska leh lacag duug ah oo ah kaalmada kharashka aaska.

Qodobka 119aad
Shahaadada Adeegga

1. Loo-shaqeeyuhu waa in uu siiyaa shaqaalaha shahaadada caddeynta adeegga marka ay dhammaato shaqada, haddii shaqada aanay ka yareyn afar (4) toddobaad oo xiriir ah.

2. Shahaadada adeegga ee lagu bixinayo si waafaqsan faqraddan, waa in ay ku jiraan arrimaha soo socda:

b) Magaca loo-shaqeeyaha iyo Cinwaankiisa Boostada;
t) Magaca shaqaalaha;
j) Jagada, shaqada shaqaalaha uu hayey;
x)Taariikhda ay billaabatay shaqo siinta shaqaalaha;
kh) Dabeecadda iyo goobta caadiga ah ee shaqadiisa;
d) Taariikhda ay joogsatay shaqada; iyo
r) Faahfaahintii kale ee lagu dari karo.

3. Si waafaqsan farqadda (1) ee sare ku xusan, loo-shaqeeyuhu kuma khasbana in uu shaqaalaha siiyo maragfur, tixraac ama shahaado ku saabsan dabeecadda iyo waxqabadka shaqaalaha

4. Loo-shaqeeyihii si ula kac ah ugu guuldarraysta in shaqaalaha uu siiyo shahaadada adeegga si waafaqsan farqadda (1) ee sare ku xusan, ama loo-shaqeeyihii ku qora shahaadada adeegga qoraal uu ogyahay in ay been tahay; loo-shaqeeyahaasi waxaa loo gudbinayaa hayadaha cadaallada.

QEYBTA V
DARYEEL GAAR AH

CUTUBKA 18AAD
QODOBBADA GUUD

Qodobka 120aad
Qeexidda "Shaqada Habeenkii"

Ujeeddada qaybtan, 'Shaqada Habeenkii' waxaa loolaa jeedaa shaqo kasta oo la qabto inta u dhaxaysa saacadaha 10:00 (Habeennimo) ilaa 6:00 (Subaxnimo.

Qodobka 121aad
Shaqo Reebban (Mamnuuc)

1. Waa sharci-darro in carruurta laga shaqeysiiyo habeenkii goobaha warshadaha, ganacsiga, beeraha iyo qeybaha kale oo kuwaas ku xiran, marka laga reebo meelaha ay xubnaha isku qoyska ah oo keliya ka shaqeeyaan.

2. Mamnuucidani ma khuseyso shaqaalaha ay da'doodu gaartay 16 sano:

b) Haddii ay ka shaqeeyaan shaqo nooceedu yahay in habeen iyo maalinba la shaqeyn karo;

t) Haddii uu jiro heshiis ka reebaya in ay ka shaqeeyaan Hawlaha Caadiga ah ee la qabanayo.

3. Kiisas ka hoos yimaada Farqada 2aad (t) ee kor ku xusan loo-shaqeeyuhu waa inuu si dhakhso ah u wargeliyaa sarkaalka idman, isaga oo u sheegaya xaaladaha in lagu shaqeeyo ayna lama huraanka tahay, tirada carruurta shaqeysa, saacadaha la shaqeynayo iyo inta habeenkii shaqada lagu jiri karo;

4. Shaqada habeenkii waxa lagu xaqsiinayaa kororsiimo aan ka yareyn Shan iyo labaatan boqolkiiba 25% xuquuqda caadiga ah marka laga reebo shaqada caadiga ah ee kaltanka.

Qodobka 122aad
Awoodaha Wasiirka ee la Xiriira Shaqada Habeenkii

1. Iyada oo aan loo eegin faqradaha hoos yimaada qodobka 122, Wasiirka oo la tashanaya wakiilada ururrada shaqaalaha iyo looshaqeeyeyaasha waxa uu:

b) Yareyn karaa waqtiga habeenkii la shaqeeyo gaar ahaan meelaha cimiladooda laga digo;

t) Fasaxayaa oo sheegayaa xaaladaha shaqosiinta carruurta ee habeenkii shaqaynaysa inta lagu gudo jiro xilliyada iyo xaaladaha marka ay shaqadu tahay mid ku xiran alaabooyinka ceeyriin oo howshooda socoto ama xaalado la mid ah, lana filan karo haddii la hakiyo in ay dhaqso u hallowdo, haddii tallaabadani ay lagama maarmaan u tahay badbaadinta hanti khasaaraysa.

CUTUBKA 19AAD
CARRUURTA

Qodobka 123aad
Macnaha "Shaqosiin"

1. Cutubkan erayga "Shaqosiin" waxaa loola jeedaa shaqo siinta carruurta oo ay ku jirto xaaladaha:

b) Carruurta la siinayo shaqo uu ku caawinayo qof kale kaaliye ahaan, shaqadaa soo ay ujeeddadeedu tahay in carruurtu lacag ku helaan;

t) Uu jiro adeeg heshiis shaqo bixin, adeeg bixiyahana uu yahay curruur, iyada oo caruurtana la siinayo shaqo sharciga waafaqsan, waana in uu jiraa qadar lacageed oo la isku afgarto inta ay doonto ha la ekaato.

Qodobka 124aad
Carruur

1. Wasaaradda oo la tashaneysa ururrad[illegible]a iyo loo-shaqeeyeyaasha ayaa soo [illegible] siyaasad iyo xeer-nidaamiyeyaal lagu [illegible]ya noocyada shaqo ee khatarta [illegible]

caafimaadka carruurta u daran ama shaqooyinka u baahan xoog ama feejignaan dheeraad ah, qeybtani waxaa looga baahan yahay in isbeddal lagu sameeyo, lana tilmaamo da'da ugu yar ee carruuri shaqeyn karto

2. Marka aan la hubin da'da Carruurta, waa in lagala tashadaa dhaqtar oo aqoon gaar ah u leh arrimaha da'da.

Qodobka 125aad
Shaqosiinta Carruurta

1. Carruurta da'doodu u dhaxayso 13 ilaa 15 sano oo aan weli dhammeystirin waxbarashadooda waajibka ah, waxaa loo oggolaan karaa in ay qabtaan shaqooyin fudud.

2. Shaqo siinta carruur da'doodu ka yartahay 18 sano, waa in uu lahaadaa awood jireed iyo mid maskaxeed.

3. Da'da ugu yar ee loo oggolaan karo nooc kasta oo shaqo siin ah ama shaqo nooceeda, duruufaha iyo xaaladaha lagu fulinayo, laga yaabo haddii lagu shaqeeyo inay halis galiyaan caafimaadka, badqabka ama qiyamka carruurta waa 17 sano.

4. Sida ku xusan faqrada (3) ee qodobkan, laga bilaabo da'da 16 sano, iyada oo shuruud looga dhigayo dhismaha jirka, caafimaadka, badqabka iyo niyadda carruurta si buuxdana loo ilaaliyo ayna helaan casharro ku filan ama tababar ku saabsan hawsha ay qabanayaan.

5. Qodobbada qaybtaani ma khuseeyaan shaqada ay qabtaan guud ahaan carruurta dugsiyada caadiga ah, barashada mihnadaha, xirfadaha iyo farsamooyinka, xarumaha kale ee tababarrada, ama hay'adaha ay ka shaqeeyaan carruurta ay da'doodu ka yartahay 15 jir, waana in la fuliyaa hawshaas si waafaqsan xeerkan, siyaasadaha iyo xeer-nidaamiyeyaasha shaqada, waxaana xuddun u ah in la helo:

b) Koorso waxbarasho ama tababar uu marka hore mas'uul ka yahay dugsi ama hay'ad tababar;

t) Barnaamij tababareed oo inta badan ama gebi ahaan ba la qabanayo, barnaamijkaas oo leh manhaj la aqoonsan yahay; ama

j) Barnaamij hagitaan ama hanuunin ah, kaas oo loogu talagalay in lagu fududeeyo xulashada mihnadda ama qaab kale oo tababar.

6. Xaddidaadda la xiriirta da'da oggolaashaha shaqada ma khuseeyaan qoysaska iyo meheradahooda yaryar ee soo saara waxyaalaha laga isticmaalo dalka, kuwaas oo aan si joogto ah u shaqo siinin shaqaale toos u shaqeeya.

7. Marka laga soo tago qodob kasta oo sharci qoran ah, qofna looma oggola inuu shaqo siiyo, isticmaalo, qoro, ama u bandhigo carruur hawl shaqo oo ay ka dhalaneyso si xun ugu shaqeysiga carruurta, ama shaqo ka soo horjeedda da'da ugu yar ee qawaaniinta shaqadu oggoshahay.

8. Wasaaradda oo la tashaneysa ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyeyaasha waxay soo saareysaa xeer-nidaamiye faahfaahinaya shaqo kasta, hawlaha ama heshiis kasta oo waxyeello u geysanaya caafimaadka, badqabka iyo qiyamka carruurta.

9. Qof kasta oo lagu eedeeyey in uu galay ıo siin carruureed sida ku xusan xee

waqtiga uu dembiga ka galayeyna carruurta la isku khilaafay da'da uu markaas jiray, maxkamadda awoodda u leh dhegeysiga dacwadda oo tixgelineysa xaaladahaas oo la xiriirta da'da carruurta. Maxkamadda ayaa mas'uul ka ah caddeynta da'da.

10. Sida ku cad xeerkan, xukun, go'aan ama amar maxkamadeed laguma burin karo caddeymo da'da qofka oo dib laga keenay kuwaas oo aan hore maxkamadi u caddeynin ama aan si sax loo sheegin.

11. Mar kasta oo ay su'aal ka timaaddo da' shaqaale carruur ah, caddeyn ku filanna loo heli kari waayo, sarkaal caafimaad ayaa go'aaminaya da'da shaqaalahaas carruurta, isaga oo adeegsanaya muuqaalkiisa/keeda, baaris caafimaad ama wixii macluumaad ah ee la heli karo, da'daas la go'aamiyey ayaana loo adeegsan doonaa ujeeddooyinka xeerkan, ilaa iyo inta laga soo caddeynayo wax taa ka duwan, go'aamintaas la sameeyey ayaana ahaan doonta da'da runta ah ee shaqaalaha carruurta ah.

12. Qofka shaqo siiya, ku lug yeesha, ama adeegsada carruur, si aan waafaqsaneyn xeerkan (qodobbada cutubkan), waxa uu galay dembi.

13. Qofkii u adeegsada carruur hawl kasta oo ka mid ah ku shaqeysashada ama si xun u shaqo siinta carruurta, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

14. Qofka la soo eedeeyay waxaa u furan in uu is difaaco haddii uu hayo sabab maangal ah oo uu ku rumeysto in carruurta la sheegayo ay da'doodu ka weyn tahay xadka da'da dacwada ku xusan.

15. Haddii carruurtu ku naafowdo, geeriyoodo ama uu la il darnaado dhaawac jireed oo soo gaaray sababo la xiriira loo-shaqeeyaha oo si xun ugu shaqeystay carruurta, kuna xadgudbay qodob ka mid ah cutubkan, marka lala akhriyo ciqaabo kale, waxaana la hor geynayaa maxkamadda awoodda u leh.

16. Loo-shaqeeye mas'uul kama aha ciqaabaha faqradda (15^{aad}):

b) Haddii uu dhaco dhaawac caafimaad, kaas oo si toos ah ama si dadban aanu sababin ku xadgudubyo shaqo oo loo-shaqeeyuhu sameeyey;

t) Haddii dacwada lagu soo oogo sida xeerkan ku xusan, iyada oo ficilka ama dayaca sababay dhimashada ama dhaawaca, la caddeeyey in shaqaaluhu shaqada ka baxay ka hor inta aanu dhibku gaarin.

Qodobka 126aad
Diiwaanka Shaqo siinta Carruurta

1. Loo-shaqeeyahii shaqo siiya carruur waa in uu hayaa diiwaan ay ku jiraan xogta carruur kasta oo u shaqeeya, xogtaas oo ay ka mid tahay:

b) Da'da iyo goobta dhalashada;

t) Waqtiga soo gelidda iyo ka bixidda shaqada;

j) Xogihii kale ee faahfaahinaya [illegible] carruurta ee la heli karo.

Qodobka 127aad
Baaris Caafimaad

1. Carruurta waa in aan la shaqo siin in ilaa loo-shaqeeyaha uu mariyo baaritaan caafimaad si loo xaqiijiyo in ay ku habboon yihiin dhammaan ama qaar ka mid ah waajibaadka loo-shaqaaleynayo.

2. Baaritaanka hore ee caafimaadka ka dib, loo-shaqeeyuhu waa inuu carruurta mariyaa baaritaan caafimaad sanadkiiba mar ilaa ay ka gaaraan 18 sano.

3. Saraakiisha adeegyada caafimaadka waa in ay sameeyaan baaritaan caafimaad oo kale, waana in ay bixiyaan caddaymaha baaritaankaas oo munaasab ah.

4. Marka la ogaado in carruurta caafimaad ahaan aanu awoodin in uu shaqadiisa sii wato, isla markaasba heshiiska shaqo siinta si toos ah ayuu uburayaa.

CUTUBKA 20AAD
HAWEENKA

Qodobka 128aad
Shaqosiinta Haweenka

1. Xaaladaha shaqosiinta haweenka waxaa lagu soo saarayaa siyaasado iyo xeer-nidaamiyeyaal faahfaahinaya, hase yeeshee, Wasiirka oo la tashanaya wakiillada urrurada shaqaalaha iyo wakiillada loo-shaqeeyayaasha, wuxuu marka uu tixgeliyo xaalado gaarka ah iyo kuwa deg degga ah soo saari karaa:

b) Amarro ama habraacyo qeexaya nooca shaqooyinka ka reebban haweenka uurka leh iyo hooyooyinka nuujinaya;
t) Waxa uu nidaaminayaa xaaladaha goobta shaqada si loo ilaaliyo caafimaadka iyo fayoqab ka haweenka uurka leh iyo hooyooyinka nuujinaya iyo carruurtooda;
j) Waxa uu sheegayaa shuruudo gaar ah iyo xaalado ay haweenku ku shaqeyn karaan, iyada oo loo eegayo nooca dabeecaddooda, laakiin shuruudahan waa in aanay keeneyn takoor.

Qodobka 129aad
Fasax Dhalmo

1. Waxaa reeban in haweeney shaqaale ah shaqada looga saaro muddada ay uurka leedahay, ka dib markaay soo caddeeyaan dhaqaatiirtu, ayna la timaaddo warqadda caddeynta uurkeeda, marka laga reebo xaaladaha soo socda:

b) Haddii la xiro ama ay kacdo (Musallafto) goobta ay ka shaqeyneysay haweeneyda;
t) Haddii uu Dhammaado muddada heshiiskeedii shaqada.

2. Haweeney shaqaale ah waxaa ay xaq u leedahay marka ay la timaado warqad dhaqtareed oo caddeyneysa taariikhda la filayo in ay umush xaq uyeelaneysaa 14 toddobaad oo ah fasax dhalmo, iyadoo leh mushaarkeeda oo xaa soo ugu yaraan 6 todobaad oo ka

mid ah fasaxa dhalmada, ayna qaadanayso dhalmada ka hor, iyadoo ay u shaqeyneysay shaqo-bixiyaha ugu yaraan lix bilood oo xiriir ah, marka laga reebo jirro dhab ah oo dhaqaatiirtu xaqiijisay.

3. Marka uu dhammaado fasaxa dhalmada, haweenka shaqaalaha ah waxaa xaq loogu leeyahay in ay si dhaqso ah ugu soo noqdaan shaqadii ay hayeen markii ay qaadanayeen fasaxa dhalmada ka hor.

4. Haweeney Shaqaale ah waxa ay xaq u leedahay fasaxa dhalmo oo keliya iyadoo si qoraal ah ku soo wargelinaysa loo-shaqeeyaha muddo toddobo (7) maalmo shaqo gudahood, ka hor ama ka dib waqti laga yaabo inay macquul tahay xaaladaha ay rabto inay isku diyaariso fasaxa dhalmada waqti cayimaniyo muddada ay ku soo noqoneyso shaqada markaas kadib.

5. Haweeney Shaqaale ah waxa ay xaq u leedahay fasaxeeda sanadlaha ah oo ka baxsan fasaxa dhalmada

6. Shaqaalaha lab ka ah oo loo dhalay wuxuu xaq u leeyahay fasax muddo labo (2) toddobaad ah, oo mushaar buuxa ah, marka uu soo caddeeyo dhalmada xaaskiisa.

Qodobka 130aad
Naas-Nuujinta

Haweeney shaqaale ah oo ilma nuujinaysa waxa ay xaq u leedahay ugu badnaan hal sano oo ka dambaysa marka ay dhasho in labo waqti nuujiso maalintiiba (min hal saac). Nuujintana waxaa lagu tirinayaa saacadaha shaqada oo kale, xuquuqdeedana waa caadi.

CUTUBKA 21AAD
DADKA NAAFADA AH

Qodobka 131aad
Xaqa Shaqada iyo Takoor La'aanta Shaqo siinta

1. Dadka naafada ah waxay xaq u leeyihiin in ay shaqeystaan, iyadoo dadka kale si siman ula shaqeystaan, waxaana ka mid ah sidan; in fursadaha shaqada ay ula siman yihiin dadka kale, waxayna xaq u leeyihiin in ay si xor ah u doortaan xirfadooda shaqo oo ku habboon suuqa shaqada iyo bii'ada, waana in aan lagu takoorin shaqada naafonimadooda awgeed, ha ahaato waqtiga shaqo xayeysiinta, shaqo qoridda, inta ay socoto shaqadu ama marka ay dhamaato intaba.

2. Wasiirka, Guddomiyaha Guddiga sare Shaqada ee Federaalka, Agaasimaha Shaqo siinta, Agaasimaha Badqabaka iyo Caafimaadka iyo Diiwaanhayaha Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada loo-shaqeeyayaasha iyadoo la tixgelinaayo mid kasta awooddiisa shaqo ee xeerkan, waxaa waajib ku ah in ay ilaaliyaan, horumariyaan, xaqiijiyaan xaq u yeelashada shaqo siinta dadka naafada ah, iyaga oo qaadaya tallaaboovin munaasib ah sida:

b) In la ilaaliyo xuquuqda [illegible] da ah, iyagoo lala simayo dadka kale xagga shaqo siinta, duru[illegible] oo ku habboon, fursado loo simar

yahay, xuquuq siman oo u dhiganta shaqada, badqabka iyo caafimaadka goobaha shaqada, in laga ilaaliyo xadgudubka iyo in si deg deg ah loo abaaro cabashadooda;

t) In la xaqiijiyo in dadka naafada ah ay awood u yeeshaan shaqo gudashadooda, xaqa ka mid noqoshada ururro shaqaale iyagoo dadka kale ula siman;

j) In ay awood u yeeshaan dadka naafada ah helitaanka tababbarrada guud ee farsamada gacanta, barnaamijyada hanuuninta farsamadaha, xirfadaha gaar ka ah, adeegga meelaynta shaqosiinta, iyo tababbarxirfad kobcin joogta ah si aqoontooda iyo xirfadahooda sare loo qaado;

x)In kor looqaado fursadaha shaqosiinta dadka naafada ah iyo hormarinta aqoontooda ku habboon suuqada shaqada iyo sidoo kale, in laga caawiyo, laguna ilaaliyo shaqada ay haystaan, loona sameeyo shaqo kucelin kuwooda shaqada laga saaray sababo aan macquul aheyn;

kh) In loo abuuro fursado ay iskood ugu shaqeysan karaan dadka naafada ah, loona diyaariyo jawi u suurtagalin kara abuurid aragti ganacsi cusub, sidoo kale in la hormariyo awoodda iskaashatooyinka jira, iyo ugu dambeyn in la gaarsiiyo in ay bilaabaan shaqo ganacsi oo iyaga u gaar ah;

d)In sare loo qaado fursadaha shaqosiinta ee dadka naafada ah hay'adahadawliga ah iyo kuwa gaarka loo leeyahay intaba, iyada oo loo marayosiyaasado iyo halbeegyo u adeegaya barnaamijyo si gaar ah loogu dhiiragaliyo dadka naafada ah;

r) In la xaqiijiyo in dadka naafada ahi ka helaan goobaha shaqada soo dhaweyn, dhiirigelin macquul ah iyo jawi shaqo oo ku habboon duruufahooda gaarka ah;

s) In kor loo qaado in dadka naafada ahi ay helaan waaya-aragnimo shaqo oo ku habboon suuqa shaqada furan;

sh) In kor loo qaado xirfadaha dadka naafada ah, mihnadaha dib u dhaqan celintooda, ku nagaashadooda shaqada iyo in ay dib ugu noqdaan barnaamijyada shaqo abuurka ee khuseeya dadka naafada ah;

dh) In la xaqiijiyo in dadkaas naafada ahi aan shaqada lagu bahdilin, laguna dhibin, laguna khasbin ama aan lagu waajib yeelin shaqo aysan qaban Karin duruufahooda gaarka ah darteed, ayna helaan xuquuq la mid ah sida shaqaalaha kale;

3. Qof kasta oo shaqaale naafo ah waa in aan lagu takoorin shaqada naafanimadiisa darteed, ha ahaato, xilliga xayeysiinta ama inta lagu guda jiro habraaca shaqo qorista,shaqo siinta, iyadoo la tixgelinaayo noocyada shaqo siinta, shaqo ka saarista iyo arrimo kasta oo khuseeya kobcinta xirfaddooda, badqabka iyo caafimaadka goobahooda shaqada.

Qodobka 132aad
Hawlgelin Shaqo oo ku Habboon

Loo-shaqeeye kasta waa inuu xaqiijiyaa in shaqaalaha naafada ah ee u shaqeeya in uu u dejiyo nooca iyo xaddiga shaqada naafonimadooda ivo in aan lagu meeleyn shaqo khatar ama halis ku ah nabadgelyadooda iyo caafimaadkooda in oo loo eegayo awooddooda wax qab iyo xadka naafonimadooda.

Qodobka 133aad
Bixinta Taageerada Lagama Maarmaanka ah

Loo-shaqeeye kasta waa inuu hubiyaa in shaqaalaha naafada ah la siiyo taageerada lagama maarmaanka u ah inuu waajibaadkiisa shaqo u guto si kalsooni oo degganaan leh.

QEYBTA VI:
CUDURRADA, DHAAWACYADA IYO SHILALKA MIHNADDA

CUTUBKA 22AAD:
MAAMULKA

Qodobka 134aad
Agaasimaha

1. Ujeeddooyinka qaybtan, "Agaasime" waxaa loola jeedaa Agaasimaha badqabka mihnadda iyo caafimaadka.

2. Awoodaha iyo howlaha soo socoda ayaa Agaasimahu leeyahay iyada oo la tixgelinayo arrimaha ku xusan qaybtan:

b) In uu diiwaangeliyo loo-shaqeeyayaasha;

t) Inuu kormeero hirgelinta qaybtan ee xeerkan;

j) In uu xaqiijiyo in dhammaan loo-shaqeeyayaashu ay hubiyaan shaqaalahooda ay ku jiraan ceymis;

x) In uu xaqiijiyo si munaasab ahna uu u ilaaliyo dadka naafada ah, loogana hortago shilalka mihnadda, dhaawacyada iyo cudurada si aanay u imaan wax sababaya naafanimo dheeri ah;

kh) In uu helo warbixinnada shilalka iyo in uu sameeyo baaritaanno iyo wareysiyo la xiriira qaabka shilalkaas;

d) In uu hubiyo shaqaalaha dhaawacmay in ay heleen magdhow si waafaqsan qodobbada xeerkan iyo xeer hoosaadyadiisa.

3. Agaasimaha waxaa ka caawinaya hirgelinta awooddiisa iyo fulinta waajibaadkiisa shaqo cid kasta oo loo arko in ay muhiim u tahay meelmarinta maamulka qodobada qaybtan ee ku xusan xeerkan.

Qodobka 135aad
Diidmooyinka iyo Cabashooyinka Laga Qaato Go'aanada Agaasimaha

1. Qofkasta oo ka cabanaya go'aanka Agaasimaha ee ku aaddan arrin kasta oo hoos timaada qeybtaan,waa in muddo lixdan (60) maalmo shaqo gudahooda uu ku soo gudbiyaa qoraal diidmo ah oo uu uga soo horjeedo go'aanka agaasimaha, diidmadaas oo faahfaahsanna uu u soo gudbiyaa Agaasimaha.

2. Agaasimaha waxaa looga baahan yahay, muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah marka ay diidmada soo gaarto ka dib:

b) In uu bixiyo qoraal jawaab u ı, isaga oo go'aankiisii hore beddelaya ama ku adkeysanaya, soo a sababaha uu u qaatay go'aanka

diidmada laga keenay;

t) In uu u diro nuqul ka mid ah warbixinta qof kasta oo uu saameeyey go'aanka.

3. Marka qof uu ka cawdo jawaabta Agaasimaha, waxa uu cabasho u qaadan karaan maxkamadda awoodda u leh muddo soddon (30) maalmo shaqo gudahood ah ka dib marka uu helo jawaabta Agaasimaha.

CUTUBKA 23AAD
WAAJIBAADKA AGAASIMAHA, LOO-SHAQEEYAHA, SHAQAALAHA EE KU AADDAN SHILALKA MIHNADDA, DHAAWACYADA IYO CUDURRADA SHAQADA

Qodobka 136aad
Waajibaadka Guud ee Loo-Shaqeeyaha

1. Marka la eego qeybtan arrimaha soo socda waa waajibaadka loo-shaqeeyaha:

b) In uu xaqiijiyo oo si munaasab u ilaaliyo dadka naafada ah, iyadoo laga hortagayo shilalka mihnadda, dhaawacyada iyo cudurrada shaqada si aanay u imaanin wax sababaya naafanimo dheeri ah;

t) Loo-shaqeeyayaasha wa in ay yeeshaan siyaasad caymis oo u gaar ah taas oo waafaqsan siyaasadda caymiska qaranka;

j) In uu iska diiwaangeliyo, uuna muddada Agaasimuhu u cayimay kusoo gudbiyo dhammaan faahfaahinta iyo macluumaadka la xiriira shaqadiisa, iyo wixii kale oo xog ah oo uu Agaasimuhu ka dalbado;

x) Muddo soddon (30) maalmo shaqo gudahood, haddii uu isbeddel ku yimaado macluumaadka iyo faahfaahintii la soo gudbiyey, waa in lagu soo wargeliyaa Agaasimaha;

kh) In la keydiyo dhammaaan xasuus reebka diiwaannada, qoraallada kale ee dakhliga iyo xogaha shaqaalaha ugu yaraan muddo lix (6) sano oo ka bilaabaneysa taariikhdii la diiwaangeliyey xogtii ugu dambeysay, waxaana loogu soo saari karaa dukumintiyada kor ku xusan dalabka Agaasimaha si loo baaro, loona diiwaangeliyo ama dib loogu soo saaro waqti dambe, haddii loo baahdo;

d) Waa in Agaasimaha lagu wargeliyo sida ugu dhaqsiyaha badan muddo toddoba (7) maalmo shaqo gudahood ka dib shil dhaco ama cudurro shaqo la ogaado in qof shaqaale ah uu ku dhaawacmay shil ama ka dhashay goobta cudurro mihnadeed;

r) Waa in la siiyaa shaqaalaha iyo ku tiirsanayaasha la nool nuqul ka mid ah ogeysiiska shilka ee loo-shaqeeyuhu u soo gudbiyey Agaasimaha, haddii ay dalbadaan, iyada oo loo eegayo dalabka magdhawga shaqaalaha ama ku tiirsanayaashooda;

s) Muddo toddoba (7) maalmo shaqo gudahood ka dib marka ay timaado warbixinta caafimaad ama dukuminti kale ama macluumaad la xiriira sheegashada magdhawga, warbixinta, ama macluumaadka waa in loo gudbiyaa Agaasimaha;

sh) Waa in la xalliyo magdhow sheegasho kasta oo uu ku soo oogo agaasimuhu.

2. Loo-shaqeeyihii ku guuldarreysta ama dayaca inuu fuliyo mid ka mid ah waajibaadyada, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 137aad
Waajibaadka Guud ee Shaqaalaha

1. Qeybtan soo socota waxa ay tilmaamaysaa waajibaadka shaqaalaha:

b) In si taxadir iyo feejignaan leh looga shaqeeyo goobta shaqada, iyo in la hubiyo in aanu qofna sameyn habdhaqan naftiisa ama qof kale oo jooga goobta shaqada u keeni kara halis dhaawac ama mid dhimasho;

t) In shil kasta oo dhacaya inta lagu jiro shaqada loogu sheego loo-shaqeeyaha si af iyo qoraalba ah, iyo in Agaasimaha, saldhiga booliska degmada loo diro nuqul qoraal ah iyo af lagu wargaliyo muddo afar iyo labaatan (24) saac gudahood ah marka uu shilku yahay dhimasho;

j) Marka shil, dhaawaca ama xanuun dhacay looga warbixinayo loo-shaqeeyaha ama Agaasimaha, waa in warbixinta lagu daraa macluumaadka iyo dukumintiyada lagama-maarmaanka u ah ama ay dalbadaan loo-shaqeeyaha ama Agaasimaha;

x) Marka uu qofku dalbado ama helo magdhow, haddii Agaasimaha ama loo-shaqeeyuhu uu codsado, waa in qofkaasi laftiisu tagaa goorta iyo goobta caafimaad ee ku cayiman warqadda ogeysiiska, si loogu sameeyo baaris caafimaad, taas oo uu sameynayo xeeldheere caafimaad oo uu tilmaamay Agaasimuhu ama loo-shaqeeyuhu, sidoo kale uu oggolaaday shaqaaluhu ama wakiilkiisa; iyo

kh) Waa in shaqaaluhu uu soo codsado magdhow si waafaqsan xeerkan muddo 12 bilood gudahood ah taariikhda shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay ka dib; haddii uu shaqaaluhu geeriyoodo, mas'uuliyaddu waxa ay ku wareegaysaa qofka wakiilka u ah shaqaalaha.

2. Sida uu dhigayo xeerkan xuquuqaha waa ay laalmayaan, haddii shil, dhaawaca ama xanuun aan lagu wargelin loo-shaqeeyaha 12 bilood gudahood taariikhda shilka, dhaawaca ama xanuunku dhacay ka dib.

3. Ku soo wargelin la'aanta loo-shaqeeyaha shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay, ma baabi'ineyso magdhawga laga rabo loo-shaqeeyaha haddii ay caddaato in loo-shaqeeyuhu uu ogaaday dhacdadaas, muddo 12 bilood ka hor si kastaba ha ku soo gaartee.

4. Ku wargelin la'aanta loo-shaqeeyaha shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay, si kasta oo khaldan oo wax loogu soo sheego ma baabi'ineyso magdhawga laga rabo mar:

b) Haddii loo-shaqeeyaha aanu dembi weyn ku laheyn wargelin la'aanta, khaladka ama saxnaan la'aanta wargelinta, haddiiba uun loo sheegay, sax iyo khalad wax ay doontaba ha ahaatee ama dib laga saxay;

t) Haddii wargelin la'aanta, khaladka ama saxnaan la'aanta warbixintu ay aheyd mid lama filaan ah ama ay sabab u aheyd maqnaasho shaqaaluhu ka maqnaa dalka.

Qodobka 138aad
Waajibaadka Agaasimaha

1. Haddii loo-shaqeeyuhu uu ku guul darraysto inuu soo sheego shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay ama macluumaadkii uu Agaasimuhu ka codsaday, markaa Agaasimuhu wuxuu:

b) Sameynayaa baaritaan, waxana bixinaya kharashka baaritaanka loo- shaqeeyaha, taas oo ah qaan lagu lahaa;

t) Loo-shaqeeyaha waxaa lagu soo rogayaa ganaax.

2. Ka dib markii ay soo gaartay wargelinta shil ama dhaawac dhacay ama xanuun shaqadu keentay ama uu ogaado in qof shaqaale ah shil ku dhaawacmay ama cudurrada mihnadda, Agaasimaha waxaa looga baahan yahay inuu sameeyo baaritaannada lagama maarmaanka ah si uu u go'aamiyo wixii sheegasho ama mas'uuliyad ah ee waafaqsan xeerkan.

3. Marka uu Agaasimuhu ansixiyo wixii sheegasho ah ee laga rabo loo-shaqeeyaha ama caymiyaha, waa in sheegashadaas uu ku soo oogo loo-shaqeeyaha ama caymiyaha, si ay u xalliyaan muddo 90 maalmo shaqo gudahood ah.

4. Agaasimaha ayey waajib ku tahay, in muddo soddon (30) maalmo shaqo gudahood uu lacagta u qabto, kuna siiyo lacagtiisa shaqaalahii soo sheegtay ama ehelkiisa.

5. Loo-shaqeeyihii ama caymiyihii bixin waaya magdhowga laga dalbaday waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 139aad
Daryeel Caafimaad

1. Loo-shaqeeyaha waxa waajib ku ah in uu keeno, hagaajiyo qalabka iyo adeegyada loogu talagalay gargaarka deg degga ah ee shaqaalihiisa, si loo adeegsado haddii uu dhaco shil.

2. Loo-shaqeeye kasta oo ku guuldareysta in uu u hogaansamo faqradda 1[aad]ee qodobkan waxa uu galay dembi.

3. Wasiirka marka uu la tashado Agaasimaha, wuxuu ogeysiis ku soo gudbinayaa faafinta rasmiga ah, marka laga reebo in loo-shaqeeyaha ama koox loo-shaqeeyayaal ahi ay qeybtan nidaamyo kale oo ay u sameysteen xallinta shilalka si waafaqsan xeerkan.

4. Haddii shaqaale uu ku dhaawacmo shil ama xanuunka ku sii siyaado, uuna u baahan yahay in la geeyo isbitaal uu ka helo adeeg caafimaad ama laga wareejinayo isbitaal oo la geynayo xarun caafimaad oo ku taal deegaanka shaqaalaha, loo-shaqeeyuhu waa inuu keenaa gaadiidkii lagu geyn lahaa.

5. Loo-shaqeeyaha waa inuu bixiyaa dhammaan kharashaadka lagu soo dallaco shaqaalaha shil ama dhaawac ku dhacay ama xanuun shaqadu keentay, kharashaadkaas oo ay ka mid noqon karaan:

b) Daawaynta ilkaha, caafimaadka, qalliinka ama daawada isbitaalka;

t) Adeegyada kalkaaliyaha xirfadlaha ah;

j) Daawada iyo dharka qal

x) Socdaalka, nolol maalmeedka iyo waxyaabaha la xiriira safarka caafimaad ee shaqaalaha, safarkaas oo loo aadayo meel ka mid ah dalka, halkaas oo dhaqtarkiisu kula taliyey in uu isku soo daweeyo ayna joogaan xeeldheerayaal caafimaad;

kh) Keenidda, Hagaajinta, dayactirka iyo beddelidda agabka macmalka ah, ulaha cuuryaamiinta, iyo qalabka kale ee ay isticmaalaan dadka jir ahaan naafada ah.

6. Waxyeello kasta oo soo gaarta qalabka ama aaladaha ku qeexan faqrada 5aad ee xarafka (*kh*) waxaa loo tixgelinayaa inuu yahay dhaawac.

6. Xeeldheere caafimaad ee baaraya Shaqaalaha Dhaawacmay, waa in muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah baaritaanka koowaad lagu sameeyo shaqaalaha shil ku dhaawacmay. Haddii la ogaado in cudur ka dhashay shaqada Muddo (14) afar iyo toban maalmo shaqo gudahood, waa in xeeldheere caafimaad warbixin caafimaad u soo gudbiyaa caymiskiisa, loo-shaqeeyaha iyo Agaasimaha.

CUTUBKA 24AAD
MAGDHAWGA, DEMBIYADA, SHURUUCDA GAARKA AH IYO XEER-NIDAAMIYEYAASHA

Qodobka 140aad
Xaqa Magdhowga

1. Loo-shaqeeye kasta waa inuu bixiyaa magdhow si waafaqsan qodobbada xeerkan, haddii shaqaale uu ku dhaawacmo ama uu cudur shaqada ka dhashay waxyeelo ka soo gaartay inta uu shaqada ku jiray.

2. Shaqaale xaq uma laha magdhow, haddii shil, dhaawac ku dhacay, ama cudur shaqadu keentay aanay ka dhalaneyn naafanimo halis ah ama dhimasho, shilkaas oo ku yimid dhaqan xumo iyo ula kac iyo bareer qofka shaqaalaha ahi uu sameeyey.

3. Shil mihnadeed ama cudur ka dhasha shaqo, kaas oo keena naafanimo halis ah ama dhimasho ku timaadda shaqaalaha, waxaa loo qaadanayaa mid ka dhashay shaqada, haddii shilku yahay mid ka yimid ficil uu sameeyay qofka shaqaalaha ah, isaga oo ku dadaalaya danta shaqada ee loo-shaqeeyaha, iyada oo aan loo eegeyn xaaladda uu ku sugnaa, waqtigii uu shilku dhacayey sida:

b) Ku xadgudbid sharci ama wacyigelin uu bixiyey loo-shaqeeyaha ama wakiilkiisa;

t) Isaga oo aan ku socon tilmaamaha loo-shaqeeyaha.

4. Muddada qofka shaqaalaha ah loo sii wado ama laga soo wado goobta shaqada,iyada oo lagu qaadayo gaadiid shirkaddu leedahay oo uu amray loo-shaqeeyuhu, wixii shil ah ee yimaada waa kuwa la mid ah kuwa ka dhaca goobta shaqada.

5. Dhaawac kasta oo natiijadiisu noqoto naafonimo daran, haddii ay ku keeneyso shaqaalaha naafanimo joogta ah oo gaareysa boqolkiiba afartan (40%) ama kabadan.

6. Agaasimuhu wuxuu diidi karaa in magdhc ıaqaale isagoo cuskanaya xeerkan hadı

b) Waqti kasta oo Shaqaale laga ogaaday in uu si bareer ah ama been abuurah ugu soo bandhigo loo-shaqeeyaha in uu ku dhacay dhaawac halis ah ama cudur shaqada ka soo gaaray ama cudurro kale oo halis ah;

t) Ay u caddaatay Agaasimaha, in shaqaale uu qarsado cudur ama uu diido in gargaar caafimaad uu soo dalbado ama loo fidiyo dhaawac ama cudur daba dheeraaday awgiis, xaalkana uu gaaray heer dhimasho ama in la gooyo xubin ka mid ah jirkiisa oo ay keentay diidmada ama dayacaadda shaqaalaha, dhaawacaas ama cudurkaasi ha ahaado mid shilka shaqada sababay ama mid ka hor jiray.

7. Haddii, la soo sheegto magdhow si waafaqsan xeerkan, ayna muuqato in heshiiska shaqada ama farsamo baradku uu yahay mid aan ansax aheyn, waxaa suurtagal ah in Agaasimuhu uu ansixiyo sheegashada magdhowga sida haddii heshiisku uu ansax ahaa goortii shilka dhacay

8. Iyada oo loo eegin qodobada ka soo horjeeda ama xeer kasta oo jira, magdhowgu waa inaanu noqon:

b) Mid la qoondeeyay ama la ballan qaaday;

t) Mid awood loo adeegsado ama nooc kasta oo fulin ah iyada oo la raacayo xukun ama amar maxkamadeed;

j) Mid looga bixinayodeyn lagu lahaa qofka xaqa u leh magdhowga.

9. Qodob kasta oo heshiis ka mid ah, kaas oo dhigaya in shaqaale lagu magacaabo, ama u muuqda in lagu magacaabo, lagu ruqseeyo ama u muuqda in la ruqseenayo ama la doonayo in uu ka tanaasulo xaq uu lahaa marka loo eego xeerkan waa mid aan ansax aheyn.

10. Magdhaw dhimasho shaqaale oo lagu muteystay si waafaqsan xeerkan, looma siin karo u-hare (survivor) qeyb ka mid ah xuquuq mushaar ama hanti uu ku lahaa shirkadda.

Qodobka 141aad
Xad-Gudubyada iyo Ciqaabaha

1. Si waafaqsan xeerkan, qof kasta oo abaabula sheegasho magdhow, ama jawaab celin, ogeysiis, warbixin ama qoraal kasta oo lagu soo gudbiyey ama lagu soo bandhigay iyadoo la adeegsanayo xeerkan oo si ula-kac ah u sameeya ama sababa in la sameeyo qoraal been abuur ah iyadoo loola jeedo in dhaqaale lagu helo, waxa uu galay dembi.

2. Qofkii lagu helo dembiga ku xusan faqradda 1[aad] ee qodobkan, iyada oo loo cuskanayo xeerkan oo aan loo heyn ciqaab kale,waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarka kale ee Dalka.

3. Qof kasta oo laga doonayo in uu soo gudbiyo macluumaad looga dalbaday si waafaqsan faqradda 1[aad] ee qodobkan ama xeer-nidaamiyaashiisa qofkaas oo:

b) Ku guuldarreysta in uu ku soo gudbiyo waqtiga loo cayimay dhexdiisa;

t) Dalbada ama sababa in loo dalbo xog, taas oo uu og yahay in ay been tahay;

j) ku guuldarreysta markii laga dalbo in uu bixiyo macluumaad ama sharaxaad la xiriirta xuquuqda uu dalbanayo, waxaa lagu ciqaabayaa habraacyada ku xusan xeerka ciqaabta Soomaaliyeed iyo xeerarl [illegible] ka.

x) haddii sharci-jebin qofka lag [illegible] uu ku sii socdo waxa uu noqonayaa

dembi kale oo lagu ciqaabayo iyada oo lagu ridayo ganaax lacageed oo aan ka badneyn US$ 25 maalin kasta oo xadgudubku sii socdaba

3. Haddii fal dembiyeedka lagu xukumay qodobkan ay tahay Shirkad ama Guddoomiye, Agaasime kasta ama Sarkaal kasta oo ka tirsan shirkadda, waxay galayaan dembi la mid ah kii uu galay qofkii la xukumay, ilaa inta uu Qofkaasi soo caddeeyo in falka ama ficilka sababay dembiga uu ku dhacay ogaal ama oggolaansho la'aan haysata qofka.

Qodobka 142aad
Ansixinta Shuruucda Gaarka ah, Xeer-nidaamiyayaasha La-xiriira Magdhawga Shilalka Mihnadaha, Dhaawacyada iyo Cudurrada Shaqada

1. Wasaaradda oo la tashanayso wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyayaasha waxa ay sameyneysaa siyaasado, xeer-nidaamiyeyaal iyo qawaaniin kale oo lagu dhaqayo shilalka mihnadaha, dhaawacyada dhaca, cudurrada shaqadu keentay oo ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

b) Go'aaminta heerka dhaawaca;

t) Shilalka mihnadaha ee dhaca inta uu shaqaaluhu ku jiro tababarka ama adeegyada gurmadka degdegga ah;

j) Shilalka mihnadaha, dhaawacyada dhaca, cudurrada shaqadu keentay marka shaqaale loo diro meel dalka ka baxsan;

x) Habka xisaabinta dakhliga shaqaalaha;

kh) Go'aaminta nooca ama xaddiga magdhowga, oo ay ka mid yihiin:

i. Magdhawga shaqaale u baahan gargaar joogto ah;
ii. Magdhawga ama magdhaw waqti ku eg oo la siinayo qof naafo buuxa ama bar naafo ah;
iii. Magdhawga naafanimada joogtada ah;
iv. Magdhawga shaqaale kal hore qaatay magdhaw, iyo
v. Xaddiga magdhawga haddii dhimasho dhacdo;

d) Habka bixinta magdhowga; iyo

r) Sheegashooyin la xiriira dhinaca saddexaad.

2. Wasiirku, isagoo la tashanaayo wakiillada ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyayaasha waxa uu abuuri karaa habraacyo ujeeddadeedu tahay in ay si wanaagsan u dhaqan galaan qodobbada xeerkan, iyada oo aan wax u dhimeyn guud ahaan awoodda kor ku xusan, wasiirku waxa uu abuuri doonaa habraacyo:

b) Jideynayaa hannaan, qaabab iyo khidmado;

t) Jideynayaa wax kasta oo ay tahay in lagu qoro xeerkan;

j) Laga rabo loo-shaqeeyayaasha iyo ceymisyada dalka ka howlgala gaar ahaan kuwa loo-shaqeeyayaasha ka ceymiya qaamaha uu xeerkani tilmaamayo in ay si xilliyeysan u bixiyaan qaamaha iyo wixii kale ee daryeel ah ee Wasiirku u arko lama huraan, waana in ay muddo go'an u yeelaan bixinta qaamahaas.

QEYBTA VII
XIRIIRKA SHAQO WADAREEDKA

CUTUBKA 25AAD
XORRIYADDA KU BIIRISTA

Qodobka 143aad
Xaqa iyo Xorriyadda ku Biirista Urrurada Shaqaalaha

1. Waa sharci darro in laga qayb qaato fal kasta oo midab takoor ah ama ficil kasta oo xakameynaya xuquuqda xorriyadda ku biirista, gaar ahaan:

b) Shaqosiin shaqaale oo shuruud looga dhigayo in shaqaalahaasi aanu ku biiri karin urur shaqaale ama aanu ka tegi karin xubinnimada urur shaqaale;

t) Shaqa ka saaris ama si kale u dhibaateyn shaqaale, iyada oo sabab u tahayin uu xubin ka yahay urur shaqaale ama sababo la xiriira ka qaybgalka hawlaha urur shaqaale.

2. Waa sharci darro in loo-shaqeeye uu ku lug yeesho ficil kasta oo faragelin ah, oo ay ka mid tahay faragelin maaliyadeed ee abuurid ama hawlgelin urur shaqaale.

3. Shaqaale kasta waxa uu xaq u leeyahay:

b) Ka qayb qaadashada sameynta urur shaqaale ama xiriirka ururrada shaqaalaha;

t) Ku biirid urur shaqaale;

j) Ka tegid urur shaqaale.

4. Xubin kasta oo ka tirsan urur shaqaale waxay xaq u leedahay iyadoo laga duulayo dastuurka ururka:

b) Ka qayb qaadashada hawlaha sharciga ah;

t) Ka qayb-galka doorashooyinka mas'uuliyiinta iyo wakiilladooda;

j) Isu soo taagid doorasho iyo magacaabid uu u qalmo sida sarkaal, haddii la doorto ama la magacaabana uu xafiiska qabto;

x) Isu soo taagid doorasho ama raadin magacaabid in uu wakiilka noqdo urur shaqaale iyo, haddii la doorto ama la magacaabana, uu fuliyo shaqooyinka wakiil urur shaqaale si waafaqsan qodobbada xeerkan ama qodobbada heshiis wadareedka.

5. Xubin kasta oo ka tirsan urur shaqaale oo xubin ka ah xiriirka ururradashaqaalaha oo ku xiran si waafaqasan dastuurka xiriirka guud wuxuu xaq u leeyahay:

b) In uu ka qayb qaato hawlo sharci ah;

t) In uu ka qayb-galo doorashooyin ka saraakiisha ama wakiilladooda;

j) In uu isu soo taago doorasho ama uu raadiyo magacaabis xafiis ama sarkaal, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa xafiiska;

x) In uu isu soo taago doorasho ama uu raadiyo magacaabis isagoo wakiil ka ah xiriirka, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa hawlaha wakiilnimada si waafaqsan qodobada xeerkan ama heshiis wadareedka.

Qodobka 144aad
Ilaalinta Xuquuqda Shaqaalaha

1. Dowladda waa in ay ilaaliso dhammaan shaqaalaha noocyadooda kala duwan iyo dabaqaadda xeerkan haday yihiin ururada, kuwa fulinta, aqoonyahanada ama caaqilada, lataliyaasha iyo dadka muruq maalka ah, sidoo kale waa in ay sare u qaado xaaladaha shaqaalaha u ogolaanaya in ay si wax ku ool ah u raadsadaan xuquuqdooda iyo in ay fuliyaan waajibaadka lagu sheegay Xeerkan.

2. Xuquuqda shaqaalaha ee hoos imaanaysa qodobada sharcigan lama inkiri karo, lama beenin karo, lagumana xadidi karo heshiis. Heshiis kasta oo ka hor imaanaya sharcigan waa waxba kama jiraan(null and void), marka loo eego faa'iido kasta oo la siiyo shaqaalaha ama heshiis uu ku qaato taas oo aad u anfacaysa ama faa'iido u leh shaqaalaha waxay mudnaan ka yeelanaysaa sharcigan.

3. Faqradda 2aad ee qodobkan kama hor istaagayso dhinacyada in ay ka doodaan oo ay heshiis ka gaaraan sidii loo xallin lahaa dooddaas. Waxaana lagu go'aaminayaa iyada oo loo eegayo mabaadi'ida sinnaanta, mabda'a guud ee sharciga shaqaalaha caalamiga, mabaadi'ida caadiga ah ee aan ka hor imaanaynin xeerkan, kiis hore loo xaliyay iyo dhaqanka iyo caadada.

Qodobka 145aad
Xaqa iyo Xorriyadda ku Biirista Urrurada loo-shaqeeyeyaasha

1. Loo-shaqeeye kasta waxa uu xaq u leeyahay:
   - **b)** In uu ka qayb qaato sameynta urur loo-shaqeeye ama xiriirka guud ee loo-shaqeeyeyaasha;
   - **t)** Sida uu qabo dastuurkoodu, in uu ku biiro ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka guud loo-shaqeeyaayaasha.

2. Xubin kasta oo ka mid ah ururrada loo-shaqeeyeyaasha waxa uu xaq u leeyahay sida uu qabo dastuurka ururka, in:
   - **b)** Uu ka qayb qaato hawlahooda sharciga ah;
   - **t)** Uu Kaqayb qaaato doorashada mid ka mid ah xubnaha ururka ama mas'uuliintiisa sar sare;
   - **j)** Uu u istaagto doorashada ama uu raadsado magacaabis sida xafiis ama sarkaal, haddii la doorto ama loo magacaabana, uu qabto xafiiska;
   - **x)** In uu isu soo taago doorasho ama uu raadiyo magacaabis isagoo wakiil ka ah xiriirka loo-shaqeeyaha, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa hawlaha wakiilnimada si waafaqsan qodobada xeerkan ama heshiis wadareedka.

3. Loo-shaqeeye kasta, xubin haka ahaado ama aanu ka ahaanin ururrada loo-shaqeeyeyaasha, kaas oo isna xubin ka ah xiriirka guud ee loo-shaqeeyeyaasha, waxa uu xaq u leeyahay sida uu qabo dastuurka xiriirka guud in:
   - **b)** Uu ka qayb qaato hawlahooda sharciga ah;
   - **t)** Uu ka qayb qaaato doorashada mid ka mid ah shaqaalihiisa ama mas'uuliintiisa sar sare;
   - **j)** In uu isu taago doorasl :aadiyo in loo magacaabo sida xafiis

mas'uuliintiisa sar sare ee ururka;

x) In uu isu soo taago doorasho ama uu u qalmo magacaabis isagoo wakiil ka ah xiriirka loo-shaqeeyaha, haddii loo doorto ama loo magacaabo, wuxuu qabanayaa hawlaha wakiilnimada si waafaqsan qodobada xeerkan ama heshiis wadareedka.

4. Loo-shaqeeye ka shaqeeya adeeg sharci ayaa laga yaabaa inuu adeegsado xaqa uu u leeyahay inuu u istaago doorasho oo uu xil ka qabto urur loo-shaqeeye ama xiriirka guud ee loo-shaqeeyeyaasha isaga oo wakiil ka ah.

Qodobka 146aad
Ilaalinta Xuquuqda Loo-shaqeeyeyaasha

1. Loo-shaqeeye kasta, waa sharci darro in lagu takooro isagoo adeegsanaya xuquuq kasta oo uu siinayo xeerkan

2. Waxaa sharci darro ah in lagu kaco fal ama lagu handado in uu sameeyo mid kamid ah arrimahan soo socda:

b) In laga dalbado, lagu amro loo-shaqeeye in aanu xubin ka noqon ama uu ka tanaasulo xubinimada urur loo-shaqeeye;

t) Ka horistaagid loo-shaqeeye adeegsiga xaquuqdiisa ama dacwo khuseysa in uuisticmaalo xuquuqdiisa si waafaqsan xeerkan;

j) Si kastaba in lagu duudsiiyo loo-shaqeeye:

i. Sababo la xiriira xubinnimada urur loo-shaqeeye ee mar hore, hadda, ama la filayo in uu ku biiro;

ii. In uu ka qayb qaato sameynta ama hawlaha sharciga ah ee urur loo-shaqeeye;

iii. In uu adeegsado xuquuq kasta oo la siiyey, ama ka qayb qaadashada dacwo ku xusan xeerkan;

iv. In uu ku guul darreysto ama diido wax loo-shaqeeyuhu aanu sharci u laheyn in uu sameeyo.

3. Waa sharci darro in wax la siiyo ama loo ballan qaado dan gaar ah si looga faa'iideysto (Sandareerto) loo-shaqeeye, iyada oo looga beddelanayo in uu ka tanaasulo xuquuq uu leeyahay ama in aanu ka qayb qaadan dacwooyinka xeerkan loogu oggolaaday

4. Faqradda 3aad ee qodobkan kama hor istaagayso dhinacyada in ay ka doodaan oo ay heshiis ka gaaraan sidii loo xallin lahaa dooddaas.

Qodobka 147aad
Xuquuqda Guud iyo Waajibaadka Ururrada Shaqaalaha, Ururrada Loo-shaqeeyeyaasha iyo Xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha

1. Ururka shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyuhu waxa ay leeyihiin xuquuqahaan soo socda:

b) In la galo heshiis sha[illegible]id wadareed, iyada oo loo raacayo xaaladaha shaqada, [illegible]elaan, una xoojiyaan xuquuqaha ku ji

heshiiska iyo in ay qaadaan ficil kasta oo sharci ah oo ka dhasha heshiisyadaas si waafaqsan xeerkan;

t) In lagu wargeliyo hay'adaha awoodda u leh dhammaan ficillada keeni kara nacaybka danaha guud ee mihnadaha shaqaalaha uu matalo;

j) In la helo xuquuqda lahaanshaha hantida guurtada iyo ma guurtada ah si loogu isticmaalo oo kaliya ujeeddooyinka loo aasaasay ururrada shaqaalaha ama loo-shaqeeyeyaasha;

x) In la saameeyo tallaabo kasta oo sharci ah oo lagu gaarayo himilooyinka iyo ujeeddooyinka loo aasaasay.

2. Ururrada shaqaalaha, iyo ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo Xirirka Ururada Shaqaalaha/ loo-shaqeeyaha waxa ay leeyihiin waajibaadyada soo socda:

b) In lagu wargeliyo Diiwaanhayaha Shaqaalaha iyo Ururrada loo-shaqeeyayaasha muddo toban (10) maalmo shaqo gudahood dhammaan isbeddelada xubinnimada guddiga maamulka iyo wixii wax-ka-beddel ah ee dastuurkooda ama xeer-hoosaadkooda oo leh nuqullo rasmi ah oo caddaynaya dukumeentiga khuseeya;

t) In lagu wargeliyo Diiwaanhayaha la soo sheegay sanad kasta tirada xubnaha cusub ee ku soo biiray iyo kuwa ka baxay;

j) In la fuliyo waajibaad kasta ee uu soo rogay xeerkan, xeer-nidaamiyayaasha xeerkan ama qaanuun kale, kuwaas oo waajibaadkooduaanu faragelineyn maamulka gudaha iyo hawlaha ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha iyo xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha

Qodobka 148aad
Madax Bannaani

1. Urur kasta oo shaqaale, loo-shaqeeye iyo xiriirka ururka shaqaalaha/loo-shaqeeye waxa ay xaq ugu leeyihiin xeerkan gudihiisa:

b) In uu sameysto dastuurkiisa iyo xeerarkiisa,

t) In uu wakiiladiisa si xorriyad buuxda ku doorto;

j) Inay nidaamiyaan maamulkooda iyo hawlahooda iyada oo la raacayo mabaadi'ida guud ee xeerkan;

x) Dejinta barnaamijyadooda;

kh) Ka qayb qaadashada sameynta xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha ama xiriirka guud ururrada loo-shaqeeyeyaasha;

d) In uu ku biiro xiriirka guud ee ururrada shaqaalaha ama xiriirka guud ururrada loo-shaqeeyaasha sida uu qabo dastuurkooda, iyo in ay ka qayb qaataan hawlaha sharciga ah;

r) Ku biirista, iyo ka qaybgalka arrimaha urur shaqaale heer gobaleed iyo kuwa caalami ah, urur loo-shaqeeyeyaal kasta oo caalami ah, ururrada shaqaalaha adduunka sida ugu habboon, iyo in gacan laga geysto ama laga helo kaalmo dhaqaale oo ka timaadda ama la siiyo ururradan.

2. Heshiis kasta oo shaqo siineed ama wadareed, haddii uu dhammaado ka hor ama ka dib dhaqangalka xeerkan, kaas oo ka hor imaana lidaya qodob ka mid ah qaybtan, waa mid aan sharci aheyn, ilaa iyo inta qodobada si muuqata uu u oggol yahay mooyee.

Qodobka 149aad
Khilaafaadka Ka Dhalan Kara Cutubka

1. Haddii uu jiro muran ku saabsan fasiraadda ama ku dhaqmidda qodob kasta oo ku xusan cutubkan, dhinac kasta dooddooda oo qoraal ah waxa uu ula laaban karaan:

b) Guddiga Sare Xallinta Khilaafaadka heer Federaal si uu u magacaabo dhexdhexaadiye sida ku xusan xeerkan;

t) Haddii muranka aan lagu xallin dhexdhexadinta, waxaa loo gudbin doonaa maxkamadda awoodda u leh.

2. Dacwo kasta oo ku xusan xeerkan:

b) Dhinacii ku andacooda in la xadgudbay xaq ama ilaalin uu xeerkani siinayay, waxaa waajib ku ah in uu caddeeyo dhabnimada eeddiisa;

t) Dhinacii lagu eedeeyeyin uu ku lug leeyahay xadgudub kaas, waxaa waajib ku ah inuu caddeeyo in habdhaqan koodu aanu ku xadgudbin wax kasta oo kamid ah cutubkan.

Qodobka 150aad
Xayiraadda Ururrada, Mas'uuliyadda Dembiyada Ciqaabta Iyo kuwa Madaniga ah

1. Abuurid ururro shaqaale oo ujeeddooyin koodu yihiin in lagu xayiro ururro kale oo kaliya waa sharci darro,waana in la joojiyo xubin ka noqoshadooda, waxaa ka dhalan kara dacwad ciqaabeed.

2. Heshiis kasta oo lagu galay magaca ururradaas waa in la joojiyaa, lana baabi'yaa.

Qodobka 151aad
Nuxurka Dastuurka iyo Qawaaniinta

1. Dastuurka ama xeerarka urur kasta oo ka mid ah ururrada shaqaalaha iyo loo-shaqeeyeyaasha waa inay ku jiraan qodobbo ku saabsan arrimaha soo socda:

b) Magaca iyo cinwaanka;

t) Goobta xafiiskooda;

j) Wadarta tirada xubnaha;

x) Waxyaabaha loo aasaasay, ujeeddooyinka ay ku habboon tahay in loo isticmaali kara dakhligooda ama hantidooda;

kh) Habka loo sameeyo wax looga beddelo, dib u eegis, burinta dastuurka iyo qawaaniinta;

d) Magacaabista, doorashada, ka saarista xubinnimada hawlwadeenada iyo saraakiisha sar sare;

r) Nidaamka keydinta iyo heynta xisaabaadka ee khasnajiga;

s) Nidaamka Maalgelinta raasamaalka iyo hantidhawrka sanadlaha ah ama xiliyeysan;

sh) Nidaamka baarista buugaagt :yada xubnaha taas oo uu sameynayo qof kasta oo daneynaya dakh hantidooda;

dh) Nidaamka qabashada go'aannada dooroshooyinka mas'uuliyiinta iyo saraakiisha sar sare, wax-ka-beddelka dastuurka, bannaanbaxyada, baabi'iniyo arrimaha kale ee saameynta ku leh guud ahaan xubnaha ururrada shaqaalaha;

c) Xuquuqda xubin kasta ay u leedahay in ay fursad u hesho in ay codeyso;

g) Nidaamka qaddarka diiwaangelinta iyo khidmadda laga rabo in ay bixiyaan xubnaha;

f) Nidaamka kala diridda ururka.

Qodobka 152aad
Soo Gudbinta Nuqullada Dastuurka iyo Qawaaniinta

Laba nuqul oo dastuurka iyo qawaaniinta ururka shaqaalaha ama ururka loo-shaqeeyeyaasha iyo wax-ka-beddel kasta waa in loo soo gudbiyaa Diiwaanhayaha Ururrada Shaqaalaha iyo Ururrada Loo-shaqeeyeyaasha wakhtiga dhisidda ama wax-ka-beddelka ururka, hadba xaaladda sida ay tahay.

CUTUBKA 26AAD
SAMEYNTA IYO DIIWAANGELINTA URURRADA SHAQAALAHA IYO URURRADA LOO-SHAQEEYAYAASHA

Qodobka 153aad
Ururrada iyo Ujeeddooyinka

Urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye waa in hadafkooda koowaad uu ahaadaa ilaalinta, dabagalka, dhowrista danaha shaqaalaha, loo-shaqeeyaha iyo hormarinta wax-soo-saarka dalka, haddii ay tahay ururka shaqaalaha ama loo-shaqayeeyeyaasha.

Qodobka 154aad
Hawlaha Ururrada Shaqaalaha

1. Hawlaha ururrada shaqaalaha waxaa ka mid ah:

b) Wakiilnimada iyo ilaalinta danaha shaqaalaha, danahaas oo la xiriira xaaladdooda shaqo iyo xiriirka ay la leeyihiin maamulka;

t) Fududeynta ka qaybgelinta shaqaalaha qorsheynta iyo maareynta hay'adda ay ka shaqeeyaan;

j) In la hubiyo in maamulku si adag u ilaaliyo xeer-nidaamiyeyaasha ku saleysan shaqada, daryeelka bulshada, bixinta ujuurada, hagaajinta nadaafadda iyo ka badqabka shilalka;

x) La socod siinta mas'uuliyiinta dawladda ee awoodda u leh sida loogu takrifalo looguna danaysto shaqaalaha.

Qodobka 155aad
Asaasid Urur

1. Qof kasta oo ku hawlan shaqo, isaga iyo dad kaleba, waxay abuuri karaan urur shaqaale, waxayna xor u yihiin in ay ku biiraan urur shaqaale oo ka shaqeeya mihnaddiisa.

2. Loo-shaqeeye kasta wuxuu ka qeyb qaadaurista urur loo-shaqeeye ama ku biiri

karaa mid hore.

3. Iyada oo la tixraacayo qodobbada xeerkan, xubin kasta waxay waqti kasta ka bixi kartaa urur shaqaale, si kasta oo ay u jiraan shuruudo lid ku ah.

4. Iyada oo la tixraacayo qodobbada xeerkan, loo-shaqeeye kasta wuxuu waqti kasta ka bixi karaa urur loo-shaqeeye, si kasta oo ay u jiraan shuruudo lid ku ah.

5. Si xor ah ayey isugu biiri karaan Ururrada shaqaaluhu si ay u sameystaan xiriir guud oo danahooda caadiga ah ilaaliya.

6. Si xor ah ayey isugu biiri karaan ururrada loo-shaqeeyeyaashu si ay u sameystaan xiriir guud oo danahooda caadiga ah ilaaliya

7. Farac kasta oo ay leeyihiin ururro shaqaale ama ururro loo-shaqeeye waxay ka bixi karaan ururradooda, iyada oo aan wax shuruud ah lagu xirin, waxayna ku xiran tahay oo keliya dastuurka xiriirka guud waxa uu qabo.

8. Ururrada shaqaalaha iyo ururrada loo-shaqeeyaha, waxay dhammaan qodobbada xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaashooda ugu adeegsanayaan xiriirradooda guud sida ugu habboon.

Qodobka 156aad
Arjiga Diiwaangelinta Urur Shaqaale ama Urur Loo-shaqeeye

Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama Xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waa inay diiwaan hayaha kacodsadaan diiwaangelintooda.

Qodobka 157aad
Shuruudaha Diiwaangelinta Urur Shaqaale

1. Urur shaqaale ayaa dalban kara diiwaangelin haddii:
   - **b)** Uu dalbado diiwaangelin si waafaqsan xeerkan;
   - **t)** Uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;
   - **j)** Uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;
   - **x)** Uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box);
   - **kh)** Magaciisu aanu la mid ahayn mid ka mid ah urur shaqaale ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer;
   - **d)** Shirka lagu gaaray go'aanka diiwaangelinta ay ka soo qeybgaleen ugu yaraan afartan (40) xubnood;
   - **r)** Uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeyeyaal;
   - **s)** Ujeeddada kaliya ee urur shaqaale ay tahay fulinta hawlaha iyo danaha ururka shaqaalaha.

Qodobka 158aad
Shuruudaha Diiwaangelinta Urur Loo-Shaqeeye

1. Urur loo-shaqeeye ayaa codsan kara diiwaangelin haddii:

b) Uu dalbaday diiwaangelin si waafaqsan xeerkan;

t) Uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;

j) Uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;

x) Uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box);

kh) Magaciisu aanu la mid ahayn mid ka mid ah urur loo-shaqeeye ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer;

d) Shirka lagu gaaray go'aanka diiwaangelinta ay ka soo qeyb galeen ugu yaraan toban (10) loo-shaqeeye ;

r) Uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee urur loo-shaqeeye;

s) Ujeeddada kaliya ee urur loo-shaqeeye ay tahay fulinta hawlaha iyo danaha ururka loo-shaqeeyaha.

Qodobka 159aad
Shuruudaha Diiwaangelinta Xiriirka Guud ee Ururro Shaqaale

1. Shuruudaha diiwaangelinta xiriirka guud ee ururro shaqaale ee la aasaasi doono ama la diiwaan gelin doono sharcigan marka uu soo baxo kadib waa in:

b) Uu dalbado diiwaangelin si waafaqsan xeerkan;

t) Uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;

j) Uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;

x) Uu leeyahay cinwaan boosto (P.O. Box);

kh) Dastuurkoodu uu caddaynayaa in xubnahoodu ay ka diiwaan gashan yihiin urur shaqaale oo kaliya;

d) Lagu aasaasay shir ay ka soo qaybgaleen wakiillada ugu yaraan saddex (3) urur shaqaale oo diiwaangashan oo ay la socdaan guddiyadooda fulinta ee idman;

r) Magaciisu aanu la mid aheyn mid ka mid ah urur shaqaale ama xiriir guud ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer.

s) Uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee loo-shaqeeyeyaal;

Qodobka 160aad
Shuruudaha Diiwaangelinta Xiriirrada Guud eeUrurrada Loo-shaqeeyeyaasha

1. Shuruudaha diiwaangelinta xiriirrada guud ee ururrada loo-shaqeeyeyaasha waa in:

b) Uu dalbado diiwaangelin si waafaqsan xeerkan;

t) Uu ku dhaqmay dastuur waafaqsan shuruudaha xeerkan;

j) Uu xafiis, iyo cinwaan ku leeyahay JFS;

x) Uu leeyahay cinwaan boosto (P.C

kh) Uu xiriirka guud caddeeyo in a du ka diiwaangashan yihiin ururrada

loo-shaqeeyeyaasha oo kaliya;

d) Lagu aasaasay shir ay ka soo qaybgaleen wakiillada ugu yaraan saddex (3) urur loo-shaqeeye oo diiwaangashan oo ay la socdaan guddiyadooda fulinta ee idman;

r) Magaciisu aanu la mid ahayn mid ka mid ah urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer;

s) Uu ka madax bannaan yahay si toos ah ama si dadbanba gacan urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee urur loo-shaqeeye;

Qodobka 161aad
Arjiga Diiwaangelinta

1. Codsi ku saabsan diiwaangelinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waa in la adeegsadaa foomka diiwaangelinta ee xafiiska diiwaanhayaha oo ay ku lifaaqanyihiin:

b) Lacagta loo qoondeeyay diiwaangelinta;

t) Nuqul rasmi ah oo caddeynaya dastuurka ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka ururada shaqaalaha/loos-haqeeyeyaasha;

j) Nuqul rasmi ah oo cadddeynaya diiwaanka xaadiriska iyo kulan-qorka (meeting minutes) kulamada, lagu aasaasay ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha

2. Arjiga diiwaangelinta urur shaqaale waa in ay saxiixaan shan (5) xubnood oo katirsan ururka shaqaalaha.

3. Codsiga diiwaangelinta urur loo-shaqeeye waa in ay saxiixaan saddex (3)xubnood oo ka mid ah ururka loo-shaqeeyeyaasha.

4. Codsiga diiwaangelinta xiriirka guud waa in ay saxiixaan saddex (3) xubnood oo ka tirsan xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha

5. Diiwaangeliyuhu wuxuu:

b) U baahan karaa macluumaad dheeraad ah iyada oo ujeeddadu tahay qiimeynta arjiga diiwaangelinta;

t) Codsadaha diiwaangelinta siin karaa fursad uu ku saxo codsiga muddada uu u cayimay diiwaangeliyuhu.

6. Haddii magaca la soo bandhigay ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ay isku mid yihiin ama ay isku dhow yihiin mid ka mid ah urur hadda jira, kaas oo keeni kara marin habaabin iyo jahwareer, diiwaanhayuhu waa inuu:

b) Ka dalbadaa codsadaha diiwaangelinta in uu beddelo magaca ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud ee uu soo codsaday;

t) Aanu diiwaangelin ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud ilaa uu isbeddel ku habboon sameeyo.

Qodobka 162aad
Diiwaangelinta Ururrada Shaqaalaha, Ururrada Loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha

1. Haddii Diiwaangeliyuhu uu ku qanco, in urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha ee codsaday diiwaangelinta uu waafaqo shuruudaha xeerkan, Diiwaanhayuhu waa inuu diiwaangeliyaa ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama Xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha, uuna:

b) Soo saaraa shahaadada diiwaangelinta rasmiga ah (foomka cayiman);

t) Geliyaa magaca iyo macluumaadka ururka shaqaalaha, ururka loo- shaqeeyaha ama xiriirka guud diiwaanka ku habboon.

2. Shahaadada diiwaangelinta ee lagu soo saaray faqrada 1[aad] ee qodobkan waa caddeyn rasmi ah in ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama Xiriirka ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha si sax ah loo diiwaangeliyey sida ku cad xeerkan, ilaa laga xaqiijiyo in shahaadada lagala noqday ama laga hakiyey.

Qodobka 163aad
Diidista Diiwaangelinta Ururro Shaqaale, Ururro Loo-shaqeeyeyal ama Xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha

1. Haddii diiwaangeliye aanu ku qancin in urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha in uusan buuxin shuruudaha diiwaangelinta, uuna diido codsiga diiwaangelinta, diiwaangeliyuhu waa inuu qaab rasmi ah (Foomka Cayiman) ugu wargeliyaa sababaha diidmada.

2. Diiwaangeliyuhu waa inuu siiyaa ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha fursad ay kaga jawaabaan sababahaas, afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood.

3. Haddii ay dhacdo in Diiwaangeliyuhu aanu ka noqon go'aanka ah in aanu diiwaangelin, urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, waxaa cabasho loo qaadan karaa Wasaaradda. Cabashada waa in lagu soo gudbiyaa muddo labaatan iyo siddeed (28) maalmo shaqo gudahood ah oo ka bilaabata maalinta go'aanka diidmada la gaaray.

4. Wasaaraddu waa in ay go'aamisaa cabashada kuna wargelisaa go'aanka ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka ururada Shaqaalaha loo-shaqeeyeyaasha iyo sababaha uu go'aankaas ay u qaadatay mudddo 28 maalmo shaqo gudahood ah oo laga billaabo marka ay hesho cabashada.

5. Ururrada shaqaalaha, ururrada loo-shaqeeyeyaasha ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha ee aan ku qanacsaneyn go'aanka Wasaaradda waxa ay cabasho u qaadan karaan maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 164aad
Waxyaabaha Sharci Ahaanka Dhalan karaDiiwaangelinta

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeye ama xir ı Shaqaalaha/loo-shqeeyaasha waxaa diiwaangeliyaa sida hay'ad sharci ah oo leh:

b) Jiritaan waara iyo astaan guud ee lagu garto;

t) Awoodda, iyadoo magaceeda adeegsaneysa, in ay:

i. Dacwooto ama la dacweeyo;

ii. Gasho heshiisyo;

iii. Yeelato, Iibsato, la soo wareegto ama iska wareejiso hanti guurto ama maguurto ah;

iv. Sameyso dhammaan waxyaabaha kale ee muhiimka u ah danaha jiritaanka hay'adda.

2. Laguma soo oogi karo dacwad magdhow urur shaqaale, urur loo-shaqeeye xiriir guud, saraakiishooda sare ama xubnahooda in ay qabsadeen ama ay ka baaqsadeen hormarinta hawlahoodii gaarka u ahaa ee sharcigooda u oggolyahay;

3. Iyadoo la tixgelinayo qodobbada xeerkan, ururka, maamulka, baabi'inta iyo kala diridda urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, waxaa marka koowaad xukuma dastuurkooda, marka labaadna xeerarka guud ee ay leeyihiin ururrada sharciyeysan ee xafiisyadoodu ku yaallaan dalka.

Qodobka 165aad
Waxyaabahaka Dhalan Kara Is-Diiwaangelin La'aanta

1. Qofna ma sii wadi karo wax ficil ah oo ku saabsan abuurista urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha ilaa:

b) Laga diiwaangeliyo sida ku xusan xeerkan; ama

t) Inta laga tixgelinayo arjigiisa diiwaangelinta.

2. Marka laga soo tago qodobka ku xusan faqradda 1[aad], urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shaqeeyeyaasha waxa ay qaban karaan hawlaha looga baahan yahay xaqiijinta fulinta shuruudaha diiwaangelinta.

3. Qodobbada qaybtan ma khuseeyaan hawl kasta oo la fuliyey iyada oo ay ujeeddadu tahay:

b) Difaacidda dacwadaha ka dhan ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha;

t) Kala dirista urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha iyo xaraashidda hantidooda si waafaqsan qawaaniintooda.

4. Marka laga soo tago sida ku qeexan xeerkan, qofna looma oggola inuu u sheegto ama u dhaqmo sidii sarkaal ama mas'uul ka tirsan urur shaqaale, urur loo-shaqeeyee ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha oo aan diiwaangashaneyn ama diiwaangelintiisa la baabi'iyey.

Qodobka 166aad
Xafiis Diiwaangashan

1. Urur kasta oo shaqaale, loo-shaqeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shaqeeyasha waa in:

b) Uu leeyahay xafiis rasmi ah, cinwaan guud iyo cinwaan boosto oo dhammaan xiriirrada iyo ogeysiisya[illegible] hagaajin karo;

t) Ay u soo sheegaan [illegible]aha wixii isbeddel ah ee lagu sam

xafiiskooda rasmiga ah cinwaan guud iyo cinwaan boosto, si diiwaangeliyuhu ugu geliyo macluumaad kooda diiwaanka ku habboon.

2. Waa sharci darro in urur shaqaale, urur loos-haqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/ loo-shqeeyeyaasha in:

b) Ay shaqeeyaan iyaga oo aan laheyn xafiis rasmi ah oo diiwaangashan;

t) Ay ku guuldareystaan in ay soo ogeysiin waayaan xafiiskooda iyo cinwaankooda ama isbeddel kasta ee xafiiska ama cinwaanka lagu sameeyey sida ku xusan faqrada 1aad.

Qodobka 167aad
Laamaha

1. Urur shaqaale, loo-shaqeeye ama xiriir guud waa inay ka codsadaan Diiwaanhayaha foomka cayiman si uu ugu diiwaangeliyo laamahooda.

2. Shuruudaha arjiga diiwaangelinta laanta ee uu sameeyo diiwaanhayuhu, waxaa laga rabaa sharuudo la mid ah midda diiwaangelinta xarunta dhexe ee ururka, haddii aanay jirin shuruudo kale.

Qodobka 168aad
Midoobid

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyaasha ee diiwaangashan, waa ay la midoobi karaan mid ama dhawr urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha, hadba xaaladdu sida ay tahay.

2. Waxaa midoobi kara ururro shaqaale, ururro loo-shaqeeye ama xiriirro guudiyada oo aan la baabi'in jirtaan kooda, sidoo kalena aan la kala qaybin miisaaniyadda ururrada midoobaya.

3. Sida qeybtan ku xusan, midoobidda ururro shaqaale, ururro loo-shaqeeye ama xiriirro guud waxay dhici kartaa oo keliya haddii:

b) Mid kasta oo ka mid ah ururrada midoobaya uu sameeyey cod bixin qarsoodi ah oo waafaqsan shuruudaha u cayiman;

t) Ugu yaraan boqolkiiba konton (50%) xubnaha mid kasta oo ka mid ah ururada midoobaya ee xaqa u leh in ay codeeyaan, waa in ay codeeyeen;

j) Si midowgu ansax u noqodo, tirada xubnaha u codeeynaya midowga lasoo jeediyey waa in ay ka badataa ugu yaraan (2/3) tirada xubnaha guud ee u codeeyey.

4. Ogeysiiska soo jeedinta midowga ururro shaqaale, ururro loo-shaqeeye ama xiriirro guud waa in loo adeegsadaa foomka cayiman, waana in ay saxiixaan wakiilka idman ee qeyb kasta oo ka mid ah ururrada midoobaya;

5. Marka ururrada midoobay isku diiwaangeliyo sida ku cad xeerkan, Diiwaangeliyuhu waa in uu:

b)Ku soo saaro shahaadada mideynta foomka cayiman ee horay loo dejiyey;

t) Ka saaraa ururrada midoobay diiwaannadii hore.

6. Diiwaangeliyuhu ma diiwaangelin karo ururro midoobay, haddii magacooda la mid yahay ama uu u eg yahay mid ka mid ah midowyo ama xiriirro guud ee jira, taas oo laga

yaabo in ay keento marin habaabin ama jahwareer.

7. Marka uu Diiwaanhayuhu diiwaangeliyo ururro midoobay:

b)Dhammaan hantida, xuquuqda, waajibaadka iyo mas'uuliyadaha ururrada midoobay waxa ay ku wareegaysaa Ururka lagu midoobay;

t) Ururka lagu middoobay waxa uu la wareegayaa ururradii midoobay iyada oo loo eegayo:

i. Xuquuq kasta oo lagu midoobay;

ii. Dhaqaale kasta oo lagu aasaasay qaanuunkooda ama sharuuckasta oo kale;

iii. Dacwad kasta, amar maxkamadeed, abaalmarin dhexdhexaadiye, heshiis wadareed ama heshiis kale ah waa in aanay ka hor istaagin dhinacyada in ay dib-uga-gorgortamaan heshiisyadii horeyu jirey;

iv. wax kasta oo xubin ka mid ah ururrada midoobay ay ku oggolaatay qoraal oo ay horey u bixin jirtay ama la joogo xilligii ay bixin jirtay, ha ahaato qaaraan ama tabaruc looga qaadi jiray si xilliyeysan.

Qodobka 169aad
WargelintaWax Ka Beddelka Magaca ama Dastuurka

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha ayaa waxa uu go'aansan karaa:

b) In uu wax ka beddelo Dastuurkiisa;

t) In uu wax-ka-beddelo Magaciisa.

2. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha oo diiwangashan ayaa waxa ay ka codsan karaan Diiwaanhayaha in uu u ansixiyo wax-ka-beddel ka magaca ama dib u eegista dastuurka iyo qawaaniinta ururka iyada oo loo soo gudbinayo Diiwaanhayaha:

b) Lagu soo ogeysiiyo foomka cayiman oo si dhammaystiran loo soo buuxiyey, uuna soo saxiixay Xoghayuhu;

t) Nuqul ka mid ah go'aanka wax-ka-beddel ka oo faahfaahsan;

j) Shahaaddo uu saxiixay xoghayaha oo sheegaysa in go'aanka loo ansixiyey si waafaqsan dastuurka iyo qawaaniinta.

3. Ogeysiiska wax-ka-beddelka ku xusan faqrada 2^{aad} waa in loo gudbiyaa Diiwaanhayaha muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah wixii go'aan ah ee lagu beddelay magaca ama dastuurka.

4. Marka la helo ogeysiiska wax-ka-beddelka magaca ama dastuurka, Diiwaanhayuhu waa inuu ku soo wargeliyaa ugu yaraan kow iyo labaatan (21) maalmo shaqo gudahood wargeyska maalinlaha ah ama Warbaahinta Dowladda ee dalka ka soo baxa iyo faafinta rasmiga ah ee dawladda, iyadoo lagu muujinayo wixii diidmo ah oo ku saabsan wax-ka-beddelka ay xubnaha ururku ku sameeyeen magaca ama dastuurka ururka iyo, marka diidmo noocaas ah ay timaaddo, Diiwaanhayuhu waa inuu baaraa cabashada [illegible]axyaabaha ay ku salaysan tahay waxa uuna:

b) Arrintan u gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh;
t) Diidi karaa in uu aqbalo wax-ka-beddelka la soo jeediyey;
j) Sameeyn karaa amar kasta oo diiwaanhayuhu u arko in ay ku habboon tahay duruufaha jira.

5. Diiwaangeliyuhu waxa uu oggolaan karaa wax-ka-beddelka magaca ama dastuurka, haddii uu waafaqsan yahay nidaamka iyo shuruudaha diiwaangelinta ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud.
6. Diiwaanhayuhu waa inuu ku soo saaraa foomka cayiman shahaadada wax-ka-beddelka magaca ama dastuurka

7. Wax-ka-beddel kasta oo lagu sameeyo magaca ama dastuurka iyo qawaaniinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud oo diiwaangashan, waxa ay dhaqangeli kartaa oo kaliya marka diiwaanhayuhu uu oggolaado sida ku xusan qodobada qeybtan.

8. Wax-ka-beddelka magaca urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ma:

b) Saameynayso xuquuqdiisa ama waajibaadkiisa;
t) Cilladeyn karto dacwo kasta oo sharci ah oo laga keeno ama ka soo horjeedda. dacwo kasta oo lagu soo oogayna intii uu jiray magacii hore waa la sii wadi karaa ama la billaabi karaa kadib marka magaca cusub loo bixiyey.

9. Haddii Diiwaanhayuhu uu diido inuu oggolaado wax-ka-beddelka qodobada qeybtan, diiwaanhayuhu waxa uu soo saarayaa war qoraal ah oo ku saabsan go'aankaas iyo sababaha uu ku diiday.

10. Urur shaqaale, urur loo-shaqeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyasha kasta oo aan ku qanacsaneyn go'aanka diiwaanhayaha, waxa uu adeegsan karaa si waafaqsan qodobka 165[aad].

Qodobka 170aad
Baabi'in ama Hakin Diiwaangelin

1. Diiwaanhayuhu waa inuu baabi'iyaa ama hakiyaa diiwaangelinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha haddii:

b) Ururka la kala diray;
t) Diiwaanhayuhu uu ku qanco in ururku uu jiritaankiisa dhammaaday.

2. Diiwaanhayuhu waxa uu baabi'in karaa ama uu hakin karaa diiwaangelinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud haddii Diiwaanhayuhu uu ku qanco in ururka:

b) Lagu diiwaangeliyey musuqmaasuq, matalaad been-abuurah ama khalad;
t) Uu ku shaqaynayo si aan waafaqsaneyn qodobada xeerkan;
j) Loo isticmaalayo ujeeddo aan sharci aheyn;
x) Uu ku guul darreystay inuu u qabto doorasho si waafaqsan shuruudaha xeerkan;
kh) Aanu madaxbannaaneyn.

3. Diiwaanhayuhu waa in aanu baabi'in ama hakin diiwaanka urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeye ku xusan faqrada 2[aad] ee qodobkan ila laga siiyo:

b) Ogeysiis ugu yaraan laba (2) bilood ah, iyada oo ujeeddadu tahay in la baabi'inayo ama la hakinayo diiwaankiisa iyada oo la isticmaalayo foomka cayiman;

t) Tixgelin matalaadda ay ururradu sameysteen muddo laba bilood (2) gudahood ah.

4. Haddii Diiwaanhayuhu uu baabi'iyo ama hakiyo diiwaangelinta urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha, Diiwaanhayuhu waa inuu:

b) Ku wargeliyaa ururrada go'aankaas isagoo adeegsanaya foomka cayiman;

t) Caddeyaa sababaha go'aankaas loo qaatay.

5. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeyeyasha, waxa ay maxkamadda awoodda u leh cabasho uga qaadan karaan go'aanka Diiwaanhayaha.

6. Maxkamadda awoodda u leh ayaa go'aan kagaareysa, marka laga reebo cabashooyinka Dastuurka Soomaaliya ee la xiriira xad-gudubyada xuquuqda aasaasiga ah.

Qodobka 171aad
Kala Dirid

1. Iyada oo loo eegayo qodobada xeerkan ama sharci kale, diiwaanhayuhu wuxuu ka codsan karaa maxkamadda awoodda u leh in ay kala dirto urur kasta oo shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha, kaas oo loo arko in hawlahoodu ay khatar ku yihiin danaha xubnaha ururrada.

2. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shqeeyeyasha waxaa kala diri kara xubnahooda iyada oo la raacayo qodobbada dastuurkooda.

3. Marka urur shaqaale, urur loo-shaqeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha xubnahoodu kala diraan iyagoo adeegsanaya foomka cayiman, ogeysiiska kala diristana waa in:

b) Loo gudbiyaa Diiwaanhayaha muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah laga billaabo taariikhda go'aanka kala dirista;

t) Ay saxiixaan:

i. Wakiilka idman;

ii. Shan (5)xubnood oo ka mid ah urur shaqaale ama saddex (3) xubnood oo ka mid ah urur loo-shaqeeye ama saddex (3) xubnood oo xiriir guud ah.

4. Diiwaanhayaha waxaa looga baahan yahay:

b) In uu qoraal ku soo saaro shahaadada kala dirista isagoo adeegsanaya foomka cayiman;

t) In uu diiwaangeliyo kala dirista, haddii uu ku qanco in ay waafaqsan tahay dastuurka ururrada.

5. Kala dirid urur shaqaale, urur loo-shaqaaeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha wuxuu dhaqangelayaa taariikhda kala dirista la diiwaangeliyo.

Qodobka 172aad
Cabasho ka Qaadashada Go'aanka Diiwaanhayaha

1. Qof kasta oo aan ku qanacsaneyn go'aanka Diiwaanhayaha sida ku cad qodobka 172[aad] ee xeerkan wuxuu cabasho u qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh muddo soddon (30)maalmo shaqo gudahood ah laga billaabo taariikhda go'aanka la diiwaangeliyey.

2. Maxkamadda awoodda u leh ayaa go'aan ka gaareysa, marka laga reebo cabashooyinka Dastuurka Soomaaliya ee la xiriira xad-gudubyada xuquuqda aasaasiga ah.

CUTUBKA 27AAD
XUBINNIMADA IYO MAAREYNTA

Qodobka 173aad
Xubinnimada Urur Shaqaale

1. Iyadoo la raacayo qodobbada xeerkan:

b) Qof kasta oo da'diisu tahay 18 sano ama ka weyn wuxuu ku biiri karaa urur shaqaale;

t) Qof kasta oo da'diisu u dhaxeysa 15-17 sano ayaa ku biiri kara urur shaqaale, balse looma magacaabi karo, loomana dooran karo xil fulineed ee ururrada;

Qodobka 174aad
Xubnaha Cod-bixinta ee Urur Shaqaale

Ma noqon karo xubin cod bixiye urur shaqaale ilaa ururkaasi uu ka yeesho cinwaan rasmi ah ama xafiis uu ku leeyahay JFS gudaheeda.

Qodobka 175aad
Saraakiil Sar-sare

1. Saraakiisha sar-sare ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha ayaa la dooran karaa ama la magacaabi karaa, hase yeeshee, waa inay:

b) Deggan yihiingudaha JFS;

t) Haystaan Warqadda Dhalasho, Kaarka Aqoonsiga Qaranka ama Baasaboor;

j) Hore u jirin xukun maxkamadeed oo ka hor istaagaya qabasho xil xafiis dadweyne ama aanu hore looga hor istaagin xafiis dadweyne.

2. Qofna looma oggola inuu ka noqdo sarkaal sare in ka badan hal urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha.

3. Sarkaal xil sare ka haya urur shaqaale, waxaa uu sidoo kale xil sare ka qaban karaa xiriirka guud ee ururkiisa shaqaale ee uu ka mid yahay.

4. Sarkaal sare oo ka tirsan urur loo-shaqeeye waxaa uu sidoo kale xil sare ka qabankaraa xiriirka guud ee ururrada loo-shaqeeyeyaasha ee uu ka midvahav.

5. Qofkii lagu helay fal-dembiyeedyo, khiyaa ı-abuur, looma oggola inuu xil sare ka

qabto urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye.

6. Waa sharci darro in loo-shaqeeye uu u wareejiyo shaqo kale ama uu ka saaro shaqada uu hayey, xubin kasta oo ka tirsan urur shaqaale kaasoo ah sarkaal sare,isaga oo aan marka hore oggolaansho ka helin ururka shaqaalaha ee ay khusayso.

Qodobka 176aad
Doorashada Saraakiisha Sare

1. Saraakiisha sare urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waxaa loo dooranayaa si waafaqsan dastuurkooda diiwaangashan

2. Dastuurka urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waa in:

b) Aanay ku jirin qodob si aan caddaalad aheyn u kala soocaya xubnaha xafiisyada hayo iyo musharrixiinta kale ee doorashooyinka u sharxan;

t) Doorashooyinku noqdaan codbixin qarsoodi ah, oo ay ka qeyb qaataan dhammaan xubnaha ururka, ugu yaraan shantii (5) sano mar.

3. Sida qodobkan ku xusan ,doorashada saraakiisha sare waa in diiwaan hayaha lagu wargeliyaa iyadoo la adeegsanayo foomka cayiman, muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood marka ay doorashadu dhacdo ama wax isbeddal ah ku yimaado.

4. Xubin aan loo dooran ama loo magacaabin si waafaqsan dastuurka u yaala urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud, looma oggolo in ay u dhaqanto ama sheegato sarkaal sare ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama laan urur.

b) Khilaafaadka ka dhasha doorashooyinka la qabtay, khilaafaadkaas oo ah mid toos ah ama mid dadban ee qeybtan, waxaa loo gudbin karaa Maxkamadda awoodda u leh.

t) Diiwaanhayuhu waxa uu soo saari karaa tilmaamo ku socda urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud si loo xaqiijiyo in doorashooyinka loo qabtay si waafaqsan qeybtan, dastuurkoodana waafaqsan.

Qodobka 177aad
Wargelinta Saraakiisha Sare

1. Urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama Xirirrka Ururada Shaqaalaha/ loo-shaqeeyaasha waa inay si cad u muujiyaan in:

b) Xafiiskooda diiwaangashan, iyaga oo soo sheegaya dhammaan magacyada iyo xilalkooda;

t) Xafiiska laan kasta sida lagu sheegay faqrada 1aad (b), waxaana intaa dheer magacyada iyo xilalka saraakiisha laanta.

Qodobka 178aad
Waajibaadka Saraakiisha Sar-sare

Waajibaadka saraakiisha sar-sare ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha waa inay matalaan oo ilaaliyaan danaha xubnahooda, iyaga oo aan wax u dhimeyn xuquuqda xubnaha u [illegible] ay si toos ah ula xiriiraan sarkaalka idman ama maxkamadda awoodda u leh.

CUTUBKA 28AAD:
LACAGAHA, HANTIDA, XISAABAADKA IYO DHEEFAHA

Qodobka 179aad
Saraakiisha Sare oo ah Guddiga Sare ee Maamulka

1. Dastuurka urur Shaqaale, urur loo-shaqeeye iyo Xirirrka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waa inuu siiyaa:

b) Dhammaan saraakiisha sare ee ururka lagu aaminay ilaalinta, dhawridda iyo in ay si mas'uuliyad ku dheehan tahay u isticmaalaan una adeegsadaan ururka guud ahaan, waxaana loo arkaa inay u yihiin ilaaliyaasha hantida ururka;

t) Saraakiisha Sar-sare waxaa lagu dhaqayaa xeerka iyo xeer-nidaamiyaasha Guddiga Sare, iyadoo kalsoonida iyo aaminaadda lagu qabo lamid tahay tan Guddiga Sare haddii loo magacaabi lahaa maamulka hantida guurtada iyo maguurtada ee ururka.

2. Iyada oo loo eegayo qodobbada faqradda 1[aad] iyo 3[aad], Guddiga Sare waxa ay magacaabi karaan ama dooran karaan saddex (3) ka mid ah saraakiisha sare ee ururka iyagoo si gaar ah ugu xil saaran hawl gaar ah.

3. Qof kasta oo aan lagu xukumin dembi ah khiyaano, been-abuur ama musuq maasuq iyo wax is dabamarin, waxaa loo oggol yahay inuu ka mid noqdo Guddiga Sare.

4. Qof kasta oo loo magacaabay Guddiga Sare waa inuu u hoggaansamaa xilka iyo waajibaadka Guddiga Sare sida ku xusan shuruucda ama xeer-nidaamiyaasha Guddiga Sare u degsan.

5. Hantida urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ee diiwangashan, haddii ay tahay guurto ama ma guurto, Guddiga Sare waxa lagu aaminay adeegsiga iyo uga faa'iideynta ururka iyo xubnahiisa.

6. Haddii isbeddel ku yimaado mid ka mid ah xafiiska Guddiga Sare, ma saameynayso hantida urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud oo diiwaangashan, muddada ku meel gaarka ah waxa ay mas'uuliyaddu ku wareegeysaa Guddiga Sare iyada oo ay hantidii ay sideedii tahay oo waxba laga wareejinin, cid kalena loo xilsaarin, ilaa ay qofkii xafiiska qabta ammaanadu ugu wareegeyso.

Qodobka 180aad
Qaaraanka Xubnaha

1. Xubin ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama Xirirrka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyaasha ayaa laga yaabaa inay bixiyaan qaaraan ku waajibay, kaas oo noqon kara qaaraan, khidmad bille ah iyo wixii kale ee dastuurkoodu jideeyey.

2. Loo-shaqeeye lacag kama jari karo shaqaale u soo gudbiyey loo-shaqeeyahiisa ogeysiis qoraal ah oo uu ku caddeynayo in uu iska casilay xubinnimada ururka

3. Ogeysiiska is casilaadda ah ee ku xusan faqrada2[aad] waxa uu hirgalayaa bisha ogeysiiska la keenay midda ku xigta.

4. Loo-shaqeeyuhu waa inuu u gudbiyaa nuqulka ogeysiiska is casilaadda ah ururka shaqaalaha.

Qodobka 181aad
Lacag ka Jarista Shaqaale la Ururreyn karo oo ku Jira Heshiis Wadareed

Ma jiro urur shaqaale oo loo oggolyahay in uu ku amro shaqaale aan xubin ka aheyn inuu bixiyo qaaraanka ururka shaqaalaha, ama uu ku wargeliyo loo-shaqeeye in shaqaale aan xubin ka aheyn ururka uu loo-shaqeeyuhu lacag ka jaro una soo gudbiyo ururka shaqaalaha iyada oo sababta dhabta ah ay tahay keliya in qofku yahay mid ka mid noqon kara ururka, iyo in jagada shaqaaluhu ku shaqeeyo lagu dabaqayo nidaamka heshiis wadareedka dhex maray ururka shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha.

Qodobka 182aad
Qodobbo Guud ee Lacag Ka-Jarista

1. Lacag kasta oo laga jaro shaqaalaha si waafaqsan qodobbada qeybtan, waa in lagu shubaa xisaabta ururka shaqaalaha ee loo qoondeeyey muddo (10) maalmo shaqo gudahood ah ka dib maalintii la jaro.

2. Ururka Shaqaalaha ayaa ka codsan kara Wasiirka inuu soo saaro amar ku wajahan loo-shaqeeyaha ay u shaqeeyaan in ka badan Shan (5) Shaqaale oo xubin ka ah Ururka Shaqaalaha, si looga jaro Mushaharka Shaqaalaha lacagta ujuurada ee Xubinimada Ururka Shaqaaalaha, laguna shubo xisaabta Ururka Shaqaale.

3. Urur shaqaale wuu ka noqon karaa, joojin karaa ama wax ka beddali karaa heshiis ay isla gaareen loo-shaqeeye iyo urur shaqaale haddii uu ogaado ururku in:

b) Xogtii iyo macluumaadkii ku jiray heshiiska la galay la khiyaanay ama Lacagtii loo isticmaalay ujeeddo aan wafaqsaneyn heshiiska;

t) Lacagta aan lagu shubin xisaabta loo qoondeeyey;

4. Lacag kasta oo laga jaro ujuurada xubin ka mid ah urur shaqaale si waafaqsan qodobkan,waa in xubintu ay ka soo baxdaa mas'uuliyadda ka saaran bixinta khidmadda ururka u waajibtay.

5. Ma jiro loo-shaqeeye loo oggol yahay inuu lacag ka jaro ujuurada shaqaale iyada oo ay ujeeddadu tahay in lacag la siiyo urur kasta, haddii aanay waafqsaneyn qodobada xeerkan.

6. Ururka shaqaaluhu marka uu lacagta helo, waa in uu afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ku soo qoro warqad uu ku sheegayo in uu lacagtii helay.

7. Loo-shaqeeyuhu waa inuu u hoggaansamaa heshiiska ay isla gaareen urur shaqaale, isaga oo bixinaya lacagta qaaraanka kuna shubaya xisaabta ama xisaabaha kale ee loo qoondeeyey.

8. Wasiirka oo la tashanayo wakiillada ururro shaqaale iyo ururro loo-shaqeeye waxa uu soo saari karaa in shaqaalaha laga jari karo qadar aan ka badneyn 5% qaaraan loogu adeegayo gurmad iyo dan guud oo qaran si wafaqsan sharciga.

9. Urur loo-shaqeeye ama xiriir guud wa[illegible] uri ka dhigi karaa in xubnahiisu ay bixiyaan lacagaha qaaraanka ama khidmad i[illegible] ruuddu tahay xubinimada ururka.

Qodobka 183aad
Isticmaalka Lacagaha

1. Iyada oo la raacayo qawaaniintooda iyo qodobada xeerkan, ujeeddooyin kaan soo socda oo keliya ayaa urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha u isticmaali karaan lacagahooda:

b) Bixinta mushaarka, gunnooyinka iyo kharashaadka guud ee ururka;

t) Bixinta kharashka maamulka ururka shaqaalaha, ururka loo-shaqeeyaha ama xiriirka guud oo ay ku jiraan baarista xisaabaadkooda;

j) Dacwad oogis ama difaaca wax kasta oo sharci ah oo urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama xubin kasta oo ka tirsan ururradaas, marka la soo dacweeyo ama la difaacayo si loo xaqiijiyo ama loo ilaaliyo xuquuqdooda ama xuquuqda xubin kasta oo ka mid ah ururka, arrin kasta oo khuseysa shaqo siin ama meelmarinta sharci kasta oo ku saabsan shaqada;

x) Sameynta doodo lagu difaacayo khilaafaadka ganacsiga isaga oo matalaya ama ka wakiil ah xubin kasta oo ka mid ah ururka;

kh) Magdhowga xubnaha khasaaraha ka dhasha khilaafaadka shaqada;

d) Bixinta gunnooyinka xubnaha ama qofka ku tiirsan haddii ay ku timaaddo dhimasho, hawlgab, xanuun ama shil shaqo;

r) Bixinta qaaraanka iyo khidmada xiriir guud kasta oo diiwaangashan, kaas oo lagu biiray;

Qodobka 184aad
Mamnuucidda Bixinta Ganaaxyada ama Lacagaha Ciqaabta

Lacagaha urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha, waa in aan loogu bixin si toos ah ama si dadban intaba, dhammaan ama qeyb ka mid ganaax ama ciqaab lagu soo rogo qof ay maxkamad xukuntay, marka laga reebo ganaaxa ama ciqaabta lagu soo rogey ururka ama xiriir guud sida ku cad xeerkan ama Xeer-nidaamiyeyaashiisa.

Qodobka 185aad
Ku Takrifalka Lacagta iyo Hantida Kale

Markuu dhaco ku Takrifalka Lacagta iyo Hantida; Diiwaanhayaha ama saddex (3) qof ama in ka badan waxay ka codsan karaan maxkamadda awoodda u leh in ay xannibto bixinta lacagaha urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha oo loo isticmaalo si sharci-darro ah ama kharashaad aan loo fasaxin.

Qodobka 186aad
Diyaarinta iyo Awoodda Xisaabaad Faahfaahsan

1. Qeybtan, "Sarkaal" waxaa loola jeedaa mas'uul kasta oo u xilsaaran ururinta, bixinta, keydinta, ilaalinta miisaaniyadda, lacagaha iyo xisaabaadka urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shqeeyeyaasha.

2. Sarkaal kasta waxaa looga baahan yahay in higo xisaab celin sax ah oo ku saabsan dhammaan lacagaha uu ka qabtay ama uu ku

b) Urur shaqaale, urur loo-shaqeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shaqeyeyaasha iyo xubnahooda:

i. Marka uu iscasilayo ama ka tagayo xafiiska;

ii. Ugu yaraan hal-mar sannad kasta waqtigaas oo ay dhici karto in lagu caddeeyo sharciyadda urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud;

iii. waqti kasta oo ay ka dalbadaan xubnaha urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama sharciga ururka ku qoran.

t) Diiwaanhayaha, marka uu ka codsado Diiwaanhaye urur shaqaale ama urur loo-shaqeeye

j) Isaga oo Caddeynaya:

i. Dhammaan lacagaha uu qabtay ama uu bixiyey Sarkaalku tan iyo markii uu xafiiska la wareegayama haddii Sarkaalku uu horay u soo gudbiyey xisaab iyo taariikhda xisaabtii ugu dambeysay;

ii. Lacagta haraaga aheyd marka Sarkaalku uu la wareegay xisaabta;

iii. dhammaan xisaabaadka la gudbiyey, rahanta, amaahda ama hantida kale ee ururka ee loo xilsaaray Sarkaalka in uu hayo, ama ilaaliyo.

3. Xisaabta waa in ay baaraan dad aqoon fiican u leh xisaab-xirka ama dad uu ururku u magacaabay, nuqul ka mid ah xisaab-xirkana waa in loo gudbiyaa diiwaanhayaha muddo soddon (30) maalmo shaqo gudahood ah.

4. Sarkaal kasta oo ka tirsan urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud ama qof kasta oo:

b) Dayaca ama ku guuldarraysata in uu u hoggaansamo mid ka mid ah qodobada qeybtan;

t) Si ula kac ah u sameeya, amra, sababa, dalbo ama qalqaaliyo iib, in lagu daro qoraal been ah, la geliyo ama laga saaro xisaab-xirkii, waxa uu galay dembi si waafaqsan qeybtan.

Qodobka 187aad
Baarista Xisaabaadka iyo Xasuus Reebka

1. Xisaabaadka urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalah/loo-shaqeeyeyaasha iyo liiska xubnahoodu waa inay u furan yihiin in uu baaro:

b) Sarkaal Sare ama xubin ka mid ah ururka waqtiga lagu qeexay dastuurkooda;

t) Diiwaanhayaha ururka, ama qof kasta oo qoraal diiwanhayahu ugu idmaday in uu baaro, waqti kasta oo munaasab ah.

2. Waa dembi qof kasta oo xanniba ama is-hortaaga diiwaanhayaha, ama qofkasta oo uu u idmaday diiwaanhayuhu baarista xisaabaadka ururka.

3. Diiwaanhayuhu, waqti kasta, waxa u yeeri karaa sarkaal sare oo ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriir guud in uu soo gudbiyo xisaabaad faahfaahsan ama lacagaha laan kasta xilliga uu dalbado iyo hadba macluumaadka Diiwaanhayuhu dalbado.

4. Waa dembi qofkii ku guuldarreysta inuu u hoggaansamo codsiga Diiwaanhayaha sida ku xusan faqradda 3[aad] ee qodobkan.

Qodobka 188aad
Ku Takrifal Hanti

1. Maxkamadda awoodda u leh waxay:

b) Ku amri kartaa qof kasta oo mas'uul ka ah ama u xilsaaran in uu maamulo hanti kasta oo uu leeyahay urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha ee ku xadgudba qawaaniinta ama si sharci darro ah u isticmaala ama lacag u xayiro si uu u gaarsiiyo hantidaas ama siiyo lacagtaas Guddiga Sare;

t) ka hakin kartaa shaqada sarkaal kasta oo ku xadgudba faqrada 1aad (b).

2. Cabashada la xiriirta qeybtan, waxaa soo gudbin kara;

b) Diiwaanhayaha;

t) Xubin ka mid ah urur shaqaale, ururka loo-shaqeeye ama xiriirka Ururada Shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha.

Qodobka 189aad
Xisaab-xirka Sannadlaha ah

1. Wakiilka idman ee urur shaqaale, urur loo-shaqeeye, ama xiriir guud ee diiwaangashan waxaa laga rabaa in uu si sannadle ah ugu soo gudbiyo Diiwaanhayaha waqtiga loo cayimay:

b) Warbixinta guud ee ku saabsan dhammaan lacagaha la qabtay iyo kharashaadka baxay inta lagu guda jiray sanadka dhammaanaya:

i. Dhammaan lacagaha la helay deeq ama tabarucaad;
ii. Wixii kaalmo caawinaad ah ee laga helay ilo kala duwan;
iii. Liiska hantida iyo deymaha ee sannad maaliyadeed.

t) Nuqul ka mid ah warbixinta hantidhowrka oo ay ku jiraan macluumaad gaar ah oo faahfaahsan loona diyaariyey hannaan cayiman;

j) Liiska tirada hantida guud;

x) Nuqulka mid ah qawaaniintooda la dhaqangaliyey, kuwa wax laga bedelay iyo dhammaan qawaaniintooda cusub;

kh) Liiska dhammaan isbeddellada saraakiisha sar-sare ee sanadkii hore.

2. Xubin kasta oo ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalaha/loo-shaqeeyeyaasha waxa ay xaq u leeyihiin in marka ay codsadaan ay lacag la'aan ku helaan, nuqulka mid ah warbixinta guud ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan.

3. Waa dembi in wakiil idman oo ka mid ah urur shaqaale, urur loo-shaqeeye ama xiriirka ururada shaqaalah/loo-shqeeyeyaasha in uu:

b) Ku guul darraysto inuu u hoggaansami waayo shuruudaha qeybtan;

t) Si ula kac ah u sameeyo, amro, sababo, dalbo ama qalqaaliyo iib, in lagu daro qoraal been ah, la geliyo ama laga saaro dukumintiyada, waxa uu galay dembi si waafaqsan qeybtan.

CUTUBKA 29AAD:
AQOONSASHADA URURRADA SHAQAALAHA

Qodobka 190aad
Aqoonsasho

1. Loo-shaqeeye, ay ku jiraan loo-shaqeeye dawladeed, waa in uu aqoonsadaa urur shaqaale iyada oo ay ujeeddadu tahay in uu galo heshiis wadareed haddii ururka shaqaalaha uu si rasmi ah u diiwaangashan yahay.

2. Koox ka mid ah loo-shaqeeyeyaasha, ama ururro loo-shaqeeye, oo ay ka mid yihiin urur loo-shaqeeye dawladeed, waa inay aqoonsadaan urur shaqaale iyada oo ay ujeeddadu tahay in uu gali karo heshiis wadareed, haddii ururka shaqaaluhu inta badan uu matalo shaqaale la ururreyn karo oo u shaqeeya koox loo-shaqeeye ah ama ururro loo-shaqeeye xubno ka ah.

3. Meesha aanu jirin urur shaqaale oo inta badan matalaya shaqaalaha, ururrada shaqaalaha ee matalaya xubnaha, waa in ugu yaraan loo suurtogeliyaa wadaxaajood ka, si wadajir ah ama si goonni gooni ah, iyaga oo wakiil ka ah xubnahooda.

4. Loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeye ah ama urur loo-shaqeeye sida ku xusan faqradda 2^{aad} iyo ururro shaqaale ee ku xusan faqradda 3^{aad}, waxaa looga baahan yahay inay soo gaaraan heshiis aqoonsi oo qoraal ah oo muujinaya shuruudaha loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeye ay ku aqoonsadeen urur shaqaale ama ururro shaqaale.

5. Haddii uu jiro khilaaf ku aaddan dhinaca xuquuqda ee urur-shaqaale lagu aqoonsanayo kuna saabsan heshiis wadareed si waafaqsan qeybtan, baabi'inta heshiiska aqoonsiga, ururka shaqaaluhu waxaa uu khilaafkaas u gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh, iyada oo ay mudnaan gaar ah siinaysa dacwaddaas in si degdeg ah loo galo.

6. Heshiiska aqoonsi waa in ay ku jirtaa xubnaha ururka shaqaalaha ee goobta shaqada ku sugan in ay soo doortaan wakiillada ururka shaqaalaha iyaga oo raacaya dastuurka ururka shaqaalaha, marka laga reebo arrimo kale oo laga yaabo in ay ku jiraan.

7. Wakiilka urur shaqaale ee lagu soo doortay faqradda 6^{aad} wuxuu xaq u yeelanayaa:
   - **b)** In uu ku matalo xubnaha arrimaha cabashada iyo dhegeysiga anshax- marinta goobta shaqada;
   - **t)** Qabashada wixii howla kale ah ee lagu sheegay heshiiska aqoonsiga ama dastuurka urur shaqaale.

8. Marka laga reebo arrimo kale oo laga yaabo in ay ku jiraan, heshiiska aqoonsiga waa in uu dhigaa in loo-shaqeeye uu awood u siiyo saraakiisha ama wakiillada idman ee ururka shaqaale in uu geli karo goobaha ama dhismayaasha shaqada ee loo-shaqeeyaha si ay ula socdaan hawlaha sharciga ah ee ururka shaqaalaha oo ay ku jiraan:
   - **b)** Qorista xubnaha urur shaqaale;
   - **t)** Kulamada lala yeesho xubnaha urur shaqaale iyo loo-shaqeeye kale waqti ka baxsan saacadaha shaqada;
   - **j)** Matalaadda xubnaha urur shaqaale si ay ula macaamilaan loo-shaqeeyaha;
   - **x)** Qabashada codbixinta iyada c dastuurka ururka shaqaalaha

9. Loo-shaqeeye waxa uu:

b) Soo rogi karaa shuruudo maangal ah oo ku aaddan goobta iyo goorta xuquuq kasta lagu xusay qeybtan, si looga feejignaado carqaladaha aan munaasabka aheyn ee ku imaan kara hawlaha iyo badqabka goobta shaqada;

t) Ka dalban karaa saraakiisha ama wakiillada urur shaqaale ee soo codsanaya oggolaansho-siin gelid, lana yimaadaan caddeymo aqoonsi oo muujinaya xilalkooda.

10. Khilaaf kasta oo ka dhasha oggolaansho-siin gelid, ama shuruudaha lagu bixinayo oggolaanshaha, waxaa si degdeg ah loogu gudbin karaa Maxkamadda awoodda u leh.

CUTUBKA 30AAD
HESHIIS WADAREEDYO

Qodobka 191aad
Dhinacyada Heshiisku Khuseeyo

1. Ujeeddooyinka qeybtan, heshiis wadareed waa heshiis la xiriira shuruudaha iyo xaaladaha shaqada ee ay gaareen wakiillada hal ama dhowr urur shaqaale oo dhinac ah, iyo wakiillada hal ama dhowr loo-shaqeeye oo dhinaca kale ah.

2. Heshiiska wadareed waa inuu ahaadaa mid qoraal ah oo ay saxiixaan:

b) Sarkaalka madaxa fulinta ee loo-shaqeeyaha, madaxa fulinta ama xoghayaha guud ee urur loo-shaqeeye kaas oo qayb ka ah heshiiska ama wakiil uu u xilsaaray qofkaas;

t) Xoghayaha guud ee urur kasta oo ka mid ah urur shaqaale oo qayb ka ah heshiiska ama wakiil uu u xilsaaray xoghayaha guud.

Qodobka 192aad
Habraaca Diyaarinta Heshiiska

1. Heshiis wadareed Shaqaale waa inuu ku salaysnaado mabaadii'da guud ee xeerarka shaqada, waa in si xor ah dhinacyadu uga wada xaajoodaan, heshiisyadaas oo u dhaxeeya loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeye, ururro loo-shaqeeye oo dhinac ah iyo hal iyo wixii ka badan ururo shaqaale oo dhinac kale ah.

2. Nuxurka heshiisku waa in uu tixgeliyaa siyaasadda qaran ee ku aaddan bulshada.

3. Heshiis wadareedka shaqaale waa in ay ahaadaan qaab qoraal ah, waa in loo gudbiyaa nuqul ka mid ah: Diiwaanhayaha, urur shaqaale, urur loo-shaqeeye iyo Guddiga Sare Shaqada ee federaalka.

4. Marka laga wadaxaajoonayo heshiis wadareedka, loo-shaqeeye kasta waxaa looga baahan yahay in uu soo bandhigo dhammaan macluumaadka laga wadaxaajoonayo kaas oo u oggolaanaya urur shaqaale in uu si wax-ku-ool ah ugala xaajoodo loo-shaqeeye, isaga oo matalaya shaqaalaha. Macluumaadkaas waa in ay qarsoodi ahaadaan loona shaacin cid aan shaqo ku lahayn wadaxaajoodkaas.

5. khilaaf kasta oo khuseeya shaacinta macluumaadka si waafaqsan qodobada qeybtan, waa in qoraal ahaan loogu gudbiyaa dhinacyada ay khuseyso sida; Guddiga Sare Federaalka ee Xallinta Khilaafaadka Shaqada, si ay u xalliyaan, haddii ay xallin waayaan, waxaa si degdeg ah loogu gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 193aad
Dulucda Heshiis Wadareedka

1. Iyadoo la raacayo qodobbada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa, heshiis wadareedku oo ay isku waafaqsan yihiin dhinacyadu waa in lagu qeexaa arrimaha soo socda:

b) Dhinacyada heshiiska galaya;
t)Qeybaha shaqaalaha ee ay khuseyso;
j)Muddada uu jirayo heshiiska;
x)Habraaca heshiisiinta ama dhaxdhaxaadinta haddii uu khilaaf yimaado; iyo
kh) Habraaca iyo shuruudaha lagu baabi'in karo, lagu cusbooneysiin karo ama dib lagu eegi karo.

Qodobka 194aad
Diiwaangelin Heshiiska

1. Heshiis wadareed kasta waa in loo gudbiyaa Wasaaradda muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood ah marka la soo gabagabeeyo.

2. Waxaa waajib ku ah loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeye ee dhinac ka ah heshiiska in ay u gudbiyaan Wasaaradda si loo diiwaangeliyo.

3. Haddii loo-shaqeeye ama urur loo-shaqeeye ku guul darraysto inay u soo gudbiyaan heshiiska wadareedka Wasaaradda sida ku xusan faqradda 1aad iyo 2aad ee qeybtan, ururka shaqaalaha ayaa soo gudbin kara.

4. Wasaaradda waxa ay dib u eegis ku sameyn kartaa heshiis wadareedyada si ay u xaqiijiso in ay waafaqsan yihiin qodobada xeerkan iyo sharci kale oo xiriir la leh.

5. Wasaaradda waa in ay ku diiwaangelisaa heshiiska muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood, marka ay xaqiijiso in heshiisku uu buuxiyey shuruudaha sharciga ah iyo habraacyada looga baahan yahay.

6. Marka ay Wasaaradddu go'aansato in heshiisku aanu buuxin shuruudaha, waa in ay ku wargelisaa muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood dhinacyada ay khuseyso ee looga baahan yahay in ay saxaan, kuwaas oo looga baahan yahay in ay ku soo jawaabaan muddo afar iyo toban (14) maalmo shaqo gudahood, markaa waa in Wasaaraddu sii waddaa shuruudaha lagu xusay faqradda 5aad ama faqraddan ee qodobkan hadba tii ku habboon.

Qodobka 195aad
Saameynta Sharciga ee Heshiis Wadareedka

1. Muddada Heshiis wadareedku wuxuu dabrayaa:

b) Dhinacyada heshiiska galay;
t) Dhammaan xubnaha urur s u shaqeeya loo-shaqeeye, koox loo-

shaqeeye ah ama xubnaha ka mid ah ururrada loo-shaqeeyayaasha ee heshiiska dhinac ka ah;

j) Loo-shaqeeyayaasha xubinta ka ah ama ka noqday urur loo-shaqeeye, kaas oo ilaa xad heshiiska qayb ka ah, ilaa iyo inta heshiisku la xiriiro shaqaalahooda.

2. Shuruudaha heshiis wadareedka waxaa loo arkaa in uu ku jiro heshiiska shaqo siinta ee shaqaale kasta oo daboolayo heshiis wadareedka.

3. Heshiis wadareed wuxuu noqonayaa:

b)Mid la meelmarin karo oo la hirgeliyo marka ay diiwaangeliso Wasaaradda;
t) Mid dhaqangal ah laga billaabo taariikhda ay isku afgarteen dhinacyadu

Qodobka 196aad
Qodobbo U Roon Shaqaalaha

Heshiis wadareed waxaa ku jiri kara qodobbo ay shaqaaluhu u roon kuwa ku jira xeerkan iyo xeer-nidaamiyeyaashiisa ama sharci kale, laakiin waa in aaney khilaafin qodobbada waajibka ah ee xeerkan.

Qodobka 197aad
Ka Dhaafidda Khidmada Shaabadda iyo Diiwaangelinta

Heshiis wadareedka waa laga dhaafayaa dhammaan khidmadda shaabadda, daabacaadda iyo khidmadda diiwaangelinta.

Qodobka 198aad
Xudduudaha iyo Muddada uu Ansax Yahay Heshiisku

1. Heshiis wadareedka shaqaale:

b) Waxaa loo gali karaa heer Qaran, Gobol, Degmo ama Deegaan maxalli ah, Warshad ama heer Shirkadeed;

t) Muddada uu shaqaynayo waa in aanay ka badneyn saddex sano, waana in aanay ka yareyn hal sano;

j) Wuxuu shaqeynayaa muddada uu ansaxa yahay, marka laga reebo haddii ay dhacdo xaalad isbeddel weyn oo saameyn toos ah ku leh fulinta heshiiska.

2. Marka uu waqtigiisu dhaco heshiiska haddii aanay diidmo ka imaanin dhinacyada midkood, waa sii soconayaa muddo la mid ah kii hore.

3. Haddii laga baxayo heshiiska waa in la keenaa wargelin ugu yaraan saddex (3) bilood ka hor taariikhda uu dhacayo.

Qodobka 199aad
Ka Qeyb Noqosho Heshiiska Xiga

Urur kasta oo shaqaale ama loo-shaqaaye oo aan ku jirin sameynta heshiis wadareed shaqaale wuxuu qeyb noqon kara heshiiska xiga.

Qodobka 200aad
Dhaqangal

1. Si looga fogaado shakiga, xaaladaha iyo shuruudaha shaqada ee ku jira heshiis wadareedka, saameynaya dhamman shaqaalaha ay khuseyso haddii ay xubin ka yihiin urur shaqaale ama aynay ku jirin, haddiiba ilaa xad ay ku jiraan shuruudo iyo xaalado u roon shaqaalaha.

2. Haddii loo-shaqeeye uu qabto hawlo ganacsi oo kala duwan, kalana madaxbannaan, heshiis wadareedka lagu maamulayo mid kasta oo ganacsiga goonida ah, waxaa lagu dhaqayaa xiriirka shaqo ee mid kasta khuseeya.

3. Heshiiska shaqo siinta shakhsiga ah waa in aanu ka hor imaan heshiis wadareedyada, marka laga reebo qodobbo u roon oo ay dani ugu jirto shaqaalaha.

Qodobka 201aad
Baabi'in Heshiis Wadareed

1. Iyada oo la raacayo qodobbada xeerkan, heshiis wadareed waxa lagu baabi'in karaa:

b) Marka dhinacyadu ay isla oggolaadaan ama sababo la isla oggolaaday oo ku jira heshiiska, dhinacyada waa in ay ogeysiiyaan Waaxda Shaqada ee Wasaaradda xaaladahaas;

t) Marka lagu beddelo heshiis midkan ka dambeeya;

j) Marka ay jiraan xaalado lama filaan ah ama duruufo aan laga waaban karin (Force Majeure), oo ay ansaxiso maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 202aad
Heshiisyo Shaqo oo Dheeraad ah

Iyadoo lagu dhaqayo qodobbada heshiis wadareedyada xaalado gaar ah oo la qabanayo, heshiisyo dheeraad ah ayey geli karaan dhinacyada oo u dhaxeeya loo-shaqeeyaha iyo ururka shaqaalaha ee ay khusayso.

Qodobka 203aad
Xiriirrada Shaqo siinta ee Aan ku Xirneen Xeer-nidaamiyeyaal Wadareed

Shaqaalaha rayidka ah ee ku jira maamulka Dawladda waxaa laga reebay qodobbada qeybtan, iyagoo ku xiran in Dawladdu u dejiso nidaam gaar ah oo haga gorgortanka guud ee la xiriira qeybaha shaqaalaha dawladda.

Qodobka 204aad
Xallinta Khilaafaadka

1. Loo-shaqeeye, koox loo-shaqeeyeyaal ah ama ururro loo-shaqeeye iyo urur shaqaale ayaa gaari kara heshiis wadareed dhigaya in:

b) Heshiis laga gaaro nooc kasta oo khilaafaad ganacsi ama hawl ah, kaas oo lagu tilmaamay dhexdhexaadiye madaxbannaan oo dhexdhexaad ah, isagoo lagu magacaabay heshiis ay dhinacyadu wada gaareen;

t) Ka garnaqidda nooc kasta o[illegible] ganacsi ama hawl ah ee ku qeexan heshiis wadareedka oo uu q[illegible] de madaxbannaan oo dhexdhexaad

ah oo lagu magacaabay heshiis wadareed ay dhinacyadu wada gaareen.

2. Dhinacii u soo gudbiyey dhexdhexaadiye khilaaf uu doonayo in lagu xalliyo qodobbada heshiis wadareed lagu gaaray si waafaqsan faqradda 1aad ee xeerkan, looma baahna in loo sii gudbiyo Guddiga Sare Xallinta Khilaafaadka ee heer Federaal, hase yeeshee, wuxuu Guddiga Sare ka dalban karaa in ay ka caawiyaan raadinta dhexdhexaadiye ku habboon.

3. Go'aanka uu gaaray garqaade ama dhexdhexaadiye marka loo eego heshiis wadareedka ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan waa kama dambeys, waana mid aan laga bixi karin:

b) Waxaana cabasho looga qaadan karaa maxkmadda awoodda u leh;

t) Maxkamadda awoodda u leh waxay dhinac iska dhigi kartaa marka ay hesho sabab kale oo Sharcigu aqoonsan yahay; ama

j) Maxkamadda awoodda u leh waa ay dhaqan gelin kartaa go'aanka uu gaaray garqaade ama dhexdhexaadiye.

4. Codsiga dib u eegista go'aanka garqaadista ama dhexdhexadinta waa in loogu soo gudbiyaa Maxkamadda awoodda u leh muddo soddon (30) maalmo shaqo gudahood ah laga billaabo maalinta go'aanku soo baxay.

CUTUBKA 31AAD:
GUDDIGA BAARISTA

Qodobka 205aad
Magacaabista iyo Waajibaadka

1. Wasiirku, wuxuu wareegto ku soo saarayaa magacaabista guddi baaris, guddigaas oo baraaya arrin kasta oo wasiirku u arko in ay la xiriirto, khuseeyso khilaaf kasta oo shaqo ama guud ahaan khilaafaadka shaqada, ama khilaaf nooc kasta ama heer kasta ee khilaaf shaqo ah, khilaafkaasi ha ahaado mid lagu soo wargeliyey Wasiirka ama yaanu ahaanin sida ku xusan xeerkan.

2. Marka wasiirku uu arrin u gudbiyo Guddiga Baarista ee ku xusan faqradda 1aad, waxaa wasiirku uu Guddiga Baarista u gudbin karaa wixii kale ee arrin ah ee uu u arko in loo baahan yahay in Guddiga loo gudbiyo.

3. Guddiga Baaristu waxa uu ka kooban yahay saddex (3) xubnood ama ka badan, oo guddoomiye huna uu ku jiro, ama hadba tiradii wasiirku u arko in loo baahan yahay, Wasiirkuna waxa uu sarkaal ka tirsan u magacaabi karaa inuu noqdo Xoghayaha Guddiga Baarista.

4. Wasiirku ayaa si degdeg ah u buuxin kara jago kasta ee ka bannaanaato Guddiga Baarista.

Qodobka 206aad
Warbixinnada

Guddiga Baaristu waa in ay baaraan oo warbixin ka diyaariyaan arrin kasta oo loo soo gudbiyo, warbixintana u gudbiyaan wasiirka, iyaga [illegible]inaya talooyin ku habboon, kolkaas [illegible] wasiirkuna uu go'aamiyo sidii wax looga qab[illegible]inta arrintaas.

CUTUBKA 32AAD
XALLINTA KHILAAFAADKA SHAQADA

Qodobka 207aad
Khilaafaadka Shaqada ee Dhinacyada

1. Dhinac kasta waxaa uu u soo gudbinayaa Baaraha Shaqada Degmada (District labour Inspector) Khilaafaadka xudduuddiisa ka jira ee shaqada si loo dhexdhexaadiyo, kaasoo isku deyaya inuu ku xalliyo khilaafka mudo 14 maalmo shaqo gudahood ah laga billaabo taariikhda loo soo gudbiyay.

2. Dhinacii aan ku qancin go'aanka Baaraha Shaqada Degmada, waxaa uu muddo 14 maalmo shaqo gudahood ah oo ka billaabata taariikhda go'aanku soo baxay u gudbinayaa Baaraha Shaqada Gobolka, si uu u xalliyo khilaafka muddo 14 maalmo shaqo gudahood ah, laga billaabo maalinta uu qabto.

3. Dhinacii aan ku qancin go'aanka Baaraha Shaqada Gobolka waxaa uu muddo 14 maalmo shaqo gudahood ah oo ka billaabata taariikhda go'aanku soo baxay u gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

4. Qofka Shaqaalaha ah oo u shaqeeya ama horey ugu shaqeyn jiray shirkad ama hay'ad xarunteedu ku taalo dibaddda, balse ka howlgasha JFS, wuxuu si toos ah dacwad ugu gudbin karaa maxkamad ku taala dalka dibadiisa oo uu rumeysan yahay inay awood u leedahay qaadidda dacawada.

4. Qofka Shaqaalaha ah wuxuu si toos ah Dacawad ugu gudbisan karaa Maxkamadda awoodda u leh, isaga oo aan marin baarayaasha shaqada.

Qodobka 208aad
Baaraha Shaqada Gobolka

1. Wasiirka oo tixraacaya qodobada xeerkan waxa uu magacaabayaa Baaraha Shaqada Gobolka iyo Kaaliyaashiisa iyo waajibaadkooda shaqo.

2. Baaraha Shaqada Gobolka iyo Kaaliyaashiisa waxa ay ka koobnaanayaan afar (4) Baare iyo Xogheyn oo kala ah sidan:

b) Baaraha shaqada gobolka (Guddoomiye);
t) Seddex (3) kaaliye baare shaqo (Xubno);
j) Xoghaye-Baare (Xubin).

Qodobka 209aad
Khilaafaad Wadareed Shaqo

1. Khilaafaad Wadareedka Shaqo waxaa marka hore lagu xallinayaa heshiis laba (2) geesood (Urur Shaqaale iyo Urur Loo-shaqeeye), haddii lagu guul darreysto xallinta khilaafkaas waxaa loo gudbinayaa Baaraha Shaqada Gobolka.

2. Haddii Baaraha Shaqada Gobolka ku guuldarreysto xallinta khilaaf wadareedka shaqo waxaasi toos ah loogu gudbinayaa maxkamadda awo

Qodobka 210aad
Cabashada Laga Qaato Go'aannada Maxkamadda Gobolka

Cabashada laga qaato go'aannada Maxkamadda Gobolka waxaa loo gudbinayaa maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 211aad
Xuquuqda Shaqo joojin iyo Xirasho Goob Shaqo (Lockouts)

1. Xuquuqda Shaqo joojinta waxaa loo adeegsanayaa si waafaqsan xeerarka laga dejiyey.

2. Shaqo joojinta waa xaquuq aasaasi ah oo uu leeyahay shaqaale kasta si waafaqsan xeerkan, xuquuqahaas waxaa adeegsan kara shaqaalaha, ururrada shaqaalaha iyo xiriirrada guud ee ururrada shaqaalaha.

3. Shaqaalaha dawladda iyo kuwa hay'adaha gaarka ah waxay si siman u adeegsan karaan xuquuqda shaqo joojinta, marka laga reebo:

b) Shaqaalaha adeegga rayidka ee joogtada ah oo ku hawlgala magaca Qaranka;

t) Shaqaalaha ka shaqeeya adeegyada guud ee aasaasiga ah si waafaqsan xeerkan, waa kuwa khatar gelin kara guud ahaan nolosha, badqabka iyo caafimaadka ama qeyb ka mid ah dadweynaha, adeegyada lagama maarmaanka u ah xaaladaha degdega ah ama musiibo qaran.

4. Xaqa shaqo joojin shaqaalaha waa waajib, hase yeeshee, waa in loo adeegsadaa si nabadgelyo ah

5. Cidna looma ogola in uu qeyb ka noqdo shaqo joojin ama in uu u hawl galo abaabullidda shaqo joojin muddo dheer, haddii:

b)Sharci kasta, xukun maxkamadeed, heshiis wadareed, heshiis wadaxaajood la isku raacay, heshiisyadaas oo reebaya in la sameeyo shaqo joojin iyada oo la xushmeenayo arrimihii la isku khilaafay;

t)Arrimaha shaqo joojin keenaya lagu nidaamiyey heshiis wadareed iyo heshiis wadaxaajood oo ay isku raaceen dhinacyada is khilaafsan;

j) Dhinacyada heshiiyey ay isku khilaafaan, wuxuu dacwaddiisa u gudbin karaa Baaraha Shaqada Gobolka ee ku xusan Qodobka 209aad ee xeerkan;

x)Khilaafka khuseeyo aqoonsiga urur shaqaale, ururkaas wuxuu dacwaddiisa u gudbin karaa Baaraha Shaqada Gobolka ee ku xusan Qodobka 209aad ee xeerkan;

kh) Dacwad urur shaqaale aan loo xallin hab garnaqid oo waafaqasan xeerkan, ama qodobbo heshiis wadareed lagu gaaray garnaqid;

d)Shaqaalaha iyo loo-shaqeeyaha ku hawlan adeegyada aasaasiga ah ee bulshada;

r)Shaqo joojin aan sii hurinayn ama uga dareyn khilaafka shaqada, mid leh dabeecad siyaasadeysan, ama marka laga reebo shaqo joojin lagu raadinayo xaalado taabanaya siyaasadda dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada.

6. Urur kasta oo shaqaale ama koox shaqaale oo dooneysa in ay sameyso shaqo joojin shaqo, waxaa looga baahan yahay in ay ku soo wargeliyaan loo-shaqeeyaha ama koox loo-shaqeeyeyaal ah iyo wasiirka muddo 14 maa ;udahood oo ka bilaabata maalinta uu dhacaaayo bannaanbax shaqo.

7. Wargelintu waa in ay tilmaantaa:

b)Arrimaha saldhig u ah shaqo joojinta;

t)Arrimaha khuseeya loo-shaqeeye ama koox loo-shaqeeyeyaal ah iyada oo aan loo raaceynin cid gaar ah;

j)Waqtiga shaqo joojinta shaqo, haddii aan la xallinin arrimaha keenay shaqo joojin keenay, shaqo joojintu waa uu dhacaysa;

x)Haddii la isku dayey in laga heshiiyo arrimaha shaqo joojinta keenay ama qaabab kale oo xallin khilaafaad ah (QXKH) iyo in isku dayadaas lagu guul dareystay;

kh) Haddii inta badan shaqaalaha ay si qarsoodi ah ugu codeyaan sameynta shaqo joojin.

8. Waxaa mamnuuc ah shaqo joojin laab-lakaca ah, marka laga reebo kuwa sharciga waafaqsan.

9. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin in ay si nabad ah u sameeyaan shaqo joojin shaqo, kaas oo aan ku lug yeelaneyn wax keeni kara fal-dambiyeed, isla markaana aan faragelineyn xuriyadda shaqo ee kuwa aan qeybta ka aheyn shaqo joojinta.

10. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu go'aan ka gaaro adeegyada gaarka ah ee aasaasiga ah isaga oo latashanaya ururrada shaqaalaha iyo kuwa loo-shaqeeyayaasha ah.

11.Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu ku soo rogo goobaha shaqo joojin ugu yaraan adeegyada badqabka xaalad kasta oo shaqo joojin ah iyada oo danta laga leeyahay xaqiijinta badqabka dadka, ka hortagga shilalka iyo ilaalinta mishiinada iyo qalabka.

12. Wasiirku wuxuu awood u leeyahay in uu dejiyo nidaamka adeegga ugu yar ee ay ku hawlgeli karaan hay'adaha ama ururrada ee uu saameynayo shaqo joojin gaar ahaan adeegyada guud iyo adeegyada kale ee aasaasiga ah oo muhiimka ah.

13.Wasiirka waa in uu xaqiijiyaa in ururrada shaqaalaha, loo-shaqeeyayaasha iyo hay'adaha dawladda ee wadashaqeynta la leh in ay si wadajir ah u go'aamiyaan sida ugu yar ee shaqada loo qaban karo iyo badqabka lagama maarmaanka u ah shaqada.

14.Loo-shaqeeye kasta waxaa ka reeban in uu qorto shaqaale badala shaqaalaha shaqo joojinta ku jira, marka laga reebo shaqo joojin ku aaddan adeegyada aasaasiga ah ama duruufaha culus ee gaarka ah iyo xaaladaha la xiriira musiibo qaran oo aad u daran.

15. Waa sharci daro in loo-shaqeeye eryo, ka qaado tallaabo anshax marin ama si kale u xaddido xuquuqda saraakiisha urur shaqaale ama shaqaale in ay abaabulaan ama ka qeyb galaan dhaqdhaqaaq kasta oo la xiriira tallaabo lagu qorsheynayo qabashada shaqo joojin sharci ah.

16. Dacwad madani ah laguma soo oogi karo qof kasta oo ka qeyb qaata ama ku dhaqma talaabo hore loogu qaadayo shaqo joojin sharci ah.

17. Shaqaale kasta oo ka qeybqaata, u yeero, kiciya ama abaabula dadka kale in ay ka qeyb qaataan shaqo joojin aan waafaqsaneyn xeerkan, waxaa loo qaadanayaa in uu jibiyay heshiiskii sii shaqo iyo:

b)In uu muteysanaya anshax ma[illegible]

t)Wax xaq ah uma yeelanayo ir[illegible] ıshaarkiisa iyo xuquuqaha kale ee ku

xusan xeerkan muddadii uu ka qeybqaadanyey shaqo joojinta.

18.Qof kasta oo diida in uu ka qeyb qaato ama ku adkeysta in aanu ka qeyb qaadan shaqo joojin sharci darra ah:

b) Lagama saari karo urur shaqaale ama urur kale, kumana waayi karo diidmadaas awgeed xuquuq kasta ama wixii dheef ah ee uu xaq u lahaa;

19. Marka ay shaqaaluhu sameeyaan shaqo joojin sharci darro ah, loo-shaqeeyuhu wuxuu xaq u leeyahay in uu dhaqangeliyo ujuuro jaris maalmaha shaqo joojinta.

20.Arrimo kasta oo khuseeya shaqo joojin ama hanjabaad shaqo joojin oo la isku khilaafay waafaqsanaantiisa xeerkan, waxaa loo gudbin karaa maxkamadda awoodda u leh

21. Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin in ay u sameeyaan shaqo joojin si waafaqsan xeerkan.

22. Waxaa reeban in loo-shaqeeyuhu ku dhaqaaqo xirasho goob shaqo (Lockouts) isaga oo ku cadaadinaya shaqaalihiisa dalabkiisa marka ay jirto shaqo joojin.

QEYBTA IX
QODOBBO GUUD

CUTUBKA 33AAD:
CIQAABAHA

Qodobka 212aad
Is-hortaagista Baarayaasha Shaqada

Qof kasta oo si bareer ah isu hortaaga baare shaqo isaga oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 213aad
Xadgudubyada Kale

Qof kasta oo jebiya qodobada xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa oo aan ciqaabtiisa la xusin, waxaa lagu ciqaabayaa habraacayada ku xusan Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed iyo Xeerarka kale ee Dalka.

Qodobka 214aad
Lacagta Ganaaxyada

Lacagta ganaaxyada ee ku xusan xeerkan, waa in lagu shubaa khasnada dhexe ee dowlada.

Qodobka 215aad
Dembi ku Soo Noqnoqosho

Haddii dembi ku xusun xeerkan uu soo noqnoqdo, ciqaabta halkan lagu sheegay waa ay labalaabmi kartaa.

Qodobka 216aad
Gal Furid Cabasho

Haddii loo baahdo ka dib marka uu siiyo digniin dhinicii laga soo dacwooday, Baaraha Shaqada Degmada ama kan gobolka, wuxuu furayaa gal warbixineed oo la xiriira jebinta qodobbo ku aaddan xeerkan ama xeer-nidaamiyeyaashiisa, wuxuuna u gudbinayaa Maxkamadda awoodda u leh isaga oo nuqul u soo diraya Wasaaradda.

Qodobka 217aad
Xeer-Nidaamiye

Wasaaradda waxa ay soo saaraysaa xeer-nidaamiye lagu faahfaahinaayo dhaqan gelinta xeerkan.

Qodobka 218aad
Baabi'in

Waxaa la baabi'iyey Xeerka Shaqada ee Lam. **65** soo baxay **18kii Oktoobar** ee 1972.

s

Qodobka 219aad
Dhaqangal

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JFS, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

XEER MADAXWEYNE LR.317 **TAARIIKH: 02-DA NOFEEMBAR 2024**

MAGACAABIS TALIYAHA CIIDAMADA GAARKA AH EE C.X.D.S.

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: **Sharci Lr.15** ee **6/4/1960**, kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga warqadda summadeedu tahay **WG/XW/0421/10/24**, ee soo baxday 3**0/10/2024,** Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabis Taliye.

FR

Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa G/Dhexe Xasan Saalax Cabdi loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Gaarka ah ee C.X.D.S.

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRAHA GUUD
DIWAAN NO: HAW-02
TAARIIKH 10-03-2025
SAXIIX
AVV Ahmed Jibe
Hantidhowraha Guu

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
21 MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Sheikh
SAACAD SAXIIX

XEER MADAXWEYNE LR.320 **TAARIIKH: 02-DA NOFEEMBAR 2024**

MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA DHULKA C.X.D.S.

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: **Sharci Lr.15** ee **6/4/1960**, kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga warqadda summadeedu tahay **WG/XW/0415/10/24**, ee soo baxday **29/10/2024,** Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabis.

FR

Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa **S/Guuto Sahal Cabdullaahi Cumar** loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Dhulka ee C.X.D.S.

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIWAAN NO: HAN-026-2025
TAARIIKH: 19-12-2025
SAXIIX:
AVV Ahmed Hantidhowraha

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Faduma Mohamed Osoble
SAACAD _____ SAXIIX _____

XEER MADAXWEYNE LR.325 **TAARIIKH: 18-KA NOFEEMBAR 2024**

XILKA-QAADIS TALIYIHII HORE EE TALIYAHA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED IYO MAGACAABIS TALIYAHA CIIDANKA XOOGGA DALKA SOOMAALIYEED

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad, Xarafka 'B' ee Dastuurka KMG ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: **Sharci Lr.15** ee **6/4/1960**, kuna saabsan Dhismaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYAY: Soo jeedinta Golaha Wasiirradda warqadda summadeedu tahay **XRW/347/11/2024**, ee soo baxday 1**2/11/2024,** Ujeeddaduna tahay Soo jeedin Magacaabid Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

FR

Waxa uu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa **S/Gaas Ibraahim Sheekh Muxudiin** laga qaaday xilkii Taliyaha Ciidaanka Xoogga Dalka, waxaana loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Xoogga **S/Gaas Odawaa Yuusuf Raage**.

Qodobka 2aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla marka uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA QUUD
DIWAAN NO: HAN-025-2025
TAARIIKH: 29/3/2025
SAXIIX:

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Faduma Mohamed Omar Sheikh
SAACAD _____ SAXIIX _____

XEER MADAXWEYNE LR.354 **TAARIIKH:01-DA DISEEMBER, 2024**

MAGACAABIS XUBNAHA GUDDIGA MADAXA BANNAAN EE DOORASHOOYINKA QARANKA & SOOHDIMAHA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobada 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobada 47aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Sharci **Lr.26,** ee soo baxay **21/11/2024**, ee ku saabsan Sharciga dhisidda guddiga madaxa bannaan ee doorashooyinka Qaranka iyo soohdimaha.

MARKUU ARKAY: Sharci **Lr.28,** ee soo baxay **23/11/2024**, ee ku saabsan Sharciga doorashooyinka Qaranka ee J.F.S.

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka ee summaddeedu tahay **XGGSH/639/B11/24**, ku taariikheysan **27/11/2024**, ujeeddaduna tahay Soo Gudbin Ansixinta Xubanaha Guddiga Madaxa-Bannaan ee Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha.

MARKA UU TIXGELIYAY: Taariikh nololeedka musharixiinta loo soo jeediyay in ay kamid noqdaan Guddiga Madaxa bannaan ee dooroshooyinka Qaranka iyo soohdimaha.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu u magacaabay Guddiga Madaxa-Bannaan **ee** Doorashooyinka Qaranka iyo Soohdimaha, magacyadooduna waa sida hoos ku xusan:

Lr.	Magaca
1.	Cabdikariim Axmed Xasan
2.	Saadiq Abshir Garaad

3.	Avv. Maxamed Cabdiraxmaan Aadan
4.	Yuusuf Cabdiqaadir Maxamed-Baafo
5.	Cumar Abuukar Cumar
6.	Farxiya Maxamed Yuusuf
7.	Dr. Cumar Jaamac Maxamed
8.	Faarax Cabdi Xasan
9.	Sahro Diiriye Muuse
10.	Cabdullaahi Salaad Yaroow
11.	Maxamed Amiin Xasan Cabdullaahi
12.	Cabdi Cadow Maxamed
13.	Cabdishakuur Abiib Haayir
14.	Khaalid Ibraahim Ismaaciil
15.	Aamina Sheekh Cismaan Maxamed
16.	Naasir Maxamed Shire
17.	Cabdiraxmaan Cabdullaahi Shaafici
18.	Maxamed Cumar Ismaaciil

FR

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

Madaxweynaha J.F.S
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxamuud

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Omar Salihi
SAACAD SAXIIX

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
IIWAAN NO: HAN-024-2025
AARIIKH : 10-04-2025
AXIIX :
AVV. Ahmed Isse Guhale
Hantidhowraha Guud Ee J.F.S

XEER MADAXWEYNE LR. 357 **TAARIIKH:10-KA DISEEMBER, 2024**

XILKA-QAADIS GUDDOOMIYIHII HORE EE GOBOLKA BENAADIR AHAANA DUQA MAGAALADA MUQDISHO & MAGACAABIS GUDDOOMIYAHA CUSUB EE GOBALKA BENAADIR AHNA DUQA MAGAALADA MUQDISHO

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 8aad, Faqradda 4aad ee Xeer Lr. 6 ee soo baxay 12/02/1980, kuna saabsan in G/Banadir iyo Dowladda Hoose ay hoos yimadaan Madaxtooyada J.F.S.

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **WAGF&D/XW/2810/2024**, ku taariikheysan **10/12/2024**, kasoo baxday Xafiiska Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka & Dib-U-Heshiisiinta, ujeeddaduna tahay soo jeedinta Magacaabista Guddoomiyaha Gobolka Benaadir,ahna Duqa Magaalada Muqdisho.

FR

MARKUU TIXGELIYAY: Waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKUU GARWAAQSADAY: In ay jirto baahi loo qabo in loo magacaabo G/Benaadir Guddoomiye Cusub.

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Yuusuf Xuseen Jimcaale** laga qaaday xilkii guddoomiyaha Gobolka Benaadir, ahna Duqa magaalada Muqdisho.
2. Waxaa **Mudane Maxamed Axmed Amiir** loo magacaabay in uu noqdo **Guddoomiyaha Gobolka Benaadir ahna Duqa Magaalada Muqdisho**.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA QUUL
DIIWAAN NO:
TAARIIKH
SAXIIX

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JF
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Faduma Mohamed Dhoorsaqih
SAACAD SAXIIX

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxa

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA MADAXWEYNAHA

جمهورية الصومال الفيدرالية
مكتب الرئيس

FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

XEER MADAXWEYNE LR. 358 **TAARIIKH:14-KA DISEEMBER, 2024**

XILKA-QAADIS AGAASIMIHII GUUD EE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA & MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE HAY'ADDA ISTAATISTIKADA QARANKA

MADAXWEYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka J.F.S.

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 21aad, faqaradaha 1aad iyo 2aad ee sharciga Istaatistikada Qaranka **(Sharci Lr. 24**, ee soo baxay **24/02/2020**).

MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **XRW/352/11/2024**, ku taariikheysan **21/11/2024**, kasoo baxday Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, ujeeddaduna tahay soo jeedinta Magacaabista Agaasimaha Guud ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka.

MARKUU TIXGELIYAY: Waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan.

MARKUU GARWAAQSADAY: In ay jirto baahi loo qabo dardargalinta howlaha Hay'adda Istaatistikada Qaranka

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray xeerkan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxwaynuhu saxiixo xeerkaan;

1. Waxaa **Mudane Sharmaake Maxamed Faarax** laga qaaday xilkii **Agaasimaha Guud ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka**.
2. Waxaa **Mudane Cabdisalaan Cabdiraxmaan Maxamed** loo magacaabay in uu noqdo **Agaasimaha Guud ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka**.

Qodobka 2aad

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-022-2025
TAARIIKH: 10-12-2025
SAXIIX:

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Dayaadih
SAACAD _____ SAXIIX _____

Madaxweynaha J.F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxa

XEER MADAXWEYNE LR.359 **TAARIIKH: 17-DA DISEEMBAR 2024**

XILKA QAADIS AGAASIMIHII GUUD EE HEY'ADDA SOCDAALKA & JINSIYADDA IYO MAGACAABID AGAASIMAHA GUUD EE HEY'ADDA SOCDAALKA & JINSIYADDA

MADAXWAYNAHA J.F.S.,

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, xarafka 'k'ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad ee Dastuurka J.F.S.
MARKUU ARKAY: Qodobka 15aad ee **Sharciga Hey'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha** (Sharci Lr.**12** ee soo baxay **20/03/2023**).
MARKUU ARKAY: Warqadda summadeedu tahay **XRW/361/12/2024**, ku taariikheysan **12/12/2024**, kuna saabsan Go'aan Gole Ansixinta Magacaabidda Agaasimaha Guud ee Hey'adda Socdaalka & Jinsiyadaha Soomaaliyeed.
MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay Agaasimaha Guud ee loo magacaabayo xilkan.

FR

Waxa uu Madaxwaynuhu soo saaray xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo xeerkaan, waxa uu **Mudane Axmed Saciid Maxamed** ka qaaday xilkii Agaasimaha Guud ee Hey'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha.

Qodobka 2aad

Madaxweynaha J.F.S waxa uu u magacaabay **Mudane Mustafa Sheekh Cali Dhuxuloow** Agaasimaha Guud ee Hey'adda Socdaalka iyo Jinsiyadaha.

Qodobka 3aad

Waxa uu xeerkaan dhaqan gelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHOWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HAN-021-2025
TAARIIKH 10 01 2025
SAXIIX

XAFIISKA MADAXWEYNAHA JFS
BIXID / SENT
29 MAR 2025
BY: Fadumo Mohamed Omer Sahib
SAACAD SAXIIX

Madaxweynaha J. F.S.
Mudane Dr. Xasan Sheekh Maxa